



وَبِهَا مِسْهَةٌ  
تَقْسِيرٌ مُّيسِرٌ وَمُوجِزٌ لِّعَائِنَيْهِ  
بِالْلُّغَةِ الْصُّومَالِيَّةِ

Waxaa Tarjumay

C. Xasan Yacquub

**Saad Suubban**

*Waxaa laga dalban karaa manshuuraadkeenna:*

P.O. Box 33049 Riyadh 11448 Saudi Arabia

Tel No. (00966) 504443610


E.mail: ***saadsuubban@hotmail.com***

# J U S K A (1)

## Suuradda A1-Faatixah (Furitaanka)

Waa 7 Aayadood Makkiyah 1

*Bismillaahir Raxmaanir Raxiium*



1. Ku Billaabasho Magaca Allaah, ee Naxariis guud, iyo mid gaar ahba Naxariista
2. Ammaan idilkeed waxaa iska leh Allaah, Rabbiga Caalamka.
3. Naxariis guud, iyo mid gaar ahba Naxariista<sup>(1)</sup>.
4. Boqorka Maalinta Abaal Marinta.
5. Adiga oo keliyaan ku caabudnaa, oo Adiga oo keliyaan ku warsannaa kaalmo.
6. Nagu Sug Tubta Toosan.
7. Tubta kuwa aad u Niemaysay<sup>(2)</sup>, aan aheyn kuwa galabsaday caro (daada)<sup>(3)</sup>, iyo kuwa iyagu lunsan.

1. Ar-Raxmaan iyo Ar-Raxiium waa labo magac uu leeyahay Allaah ee ka soo jeeda kelmedda Raxmah. Xagga naxwaha afka carabiga labada magacbe waa ku xeel dheeraansho naxarisashada. Waa deeq ballaaran iyo naxarisasho guud ahaaneed labaduba. Raxmaan waxaa lagu tilmaamaa Allaah oo keliya oo waa sifad aan eid kale la wadaagin, halka Raxiium lagu tilmaami karo qaf gaar ah. Nabiga s.c.w. waxaa uu Qur'aanku ku tilmaamay inuu yahay Raxiium. Raxmaan se waa wax ka sarreeya heerka Aadniga (wan naxariisasho durba ah oo guud ahaaneed) oo waqtii ku kooban oo wunka idil gaadha, caddaalaaddu waa qayb ka mid ah naxariistan... Allaah wuxuu isku tilaamamay sidoo kale Raxiium oo ah naxarisasho joogto ah oo gaar ahaaneed oo u naxariisto mu'miniinta, dambi dhaafka iyo ceeb asturidda waa qayb ka mid ah naxariistan.

2. Caaqil waa qofkii naftiisa xisaabiya oo u siidhormarsada camal wanaagsan geerida kaddib.

3. Kuwa ay Carada Ilaahay ku dhacday waa kuwo iyagooy cilmi leh aan ku camal falin diinta ee diida xaga, sida Yuhuudda iyo wixii la mid ah, lunsanayashuna waa kuwo cilmi la'aan cibaadeysta iyagooy niyad san sida Kirishtaanka iyo wixii la mid ah.

# J U S K A (1)

## Suuradda 2 Al-Baqarah<sup>(1)</sup> (Saca)

Waa 286 Aaayadood Madaniyyah

*Bismillaahir Raxmaanir Raxiim*


1. Alif laam miim<sup>(2)</sup>.

2. Kitaabkani, shaki kuma jiro, waa u hanuun kuwa iska jira (xumaha).

3. Kuwa rumeysan waxa aan muuqan ee qarsoon, oo hagaajiyaa salaadda, oo wax ka bixiya waxa aanu siinnay.

4. Oo (ah) kuwa rumeysan waxa laguu soo waxyooday (Muxammadow), iyo waxa la soo waxyoodayba adiga hortaa<sup>(3)</sup>, ee Aakhiro iyagu yaqiinsan.

5. Kuwaa baa ku sugar hanuun (toosan) xagga Rabbigood ah, oo waa kuwaa liibaanayasha.



1. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: *Ha ka yeelina guryahiinna Qubuuro ee ku akhriya Qur'aanka, ogaadana gurigii lagu akhriyo suuradda Al-Baqarah ma soo galoo shaydaan.*" W.w. Muslim iyo Axmad.

2. Suuradaha Qur'aanka qaarkood waxay ku billowdaan xarfaha alifbeetada, sida alif laam miim, alif laam raa, iwm waxay ka mid yihiin afar iyo toban xaraf oo ku billaabasho iyo furitaan ahaan ku soo arooray sagaal iyo tabaatan suuradood oo ku jira Qur'aanka. Inkastoo siyaabo kala duwan loo fasiray. Waxaa la yiri xuruufas waa magacyada suuradaha, waxaa sidoo kale la yiri waa baraarijin iyo soo jeedin ahaan daafka, waxaa kaloo la yiri, waa tilmaan in Qur'aanka uu ku soo degay afka Carabiga ee ka kooban xarfaha alifbeetada sidaas oy tahay ma jiro cilid la imaan kartaa isagoo kale oo keeni karta oo waa kitaab muujiz ah. Inkastoo siyaabahaas kala duwan loo fasiray, laakiinse dhabta waxaa weeye Allaah keliya baan u cilim u leh oo ogsoon macaanidooda, oo og muraadka uu ka leeyahay iyo waxa uu ula jeedo.

3. Kutuba la soo dejiivey Nabi Muxammad s.c.w hortiis waa Towraadda, Injiiylka, Zabuurka iyo Suxustii Iibraahium (oo aan ahayn qaab kitaab).

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا سَوَاءٌ عَلَيْهِمْ أَنذَرْتَهُمْ أَمْ لَمْ تُنذِرْهُمْ  
 لَا يُؤْمِنُونَ ٦ حَمَّ اللَّهُ عَلَى قُلُوبِهِمْ وَعَلَى سَمْعِهِمْ وَعَلَى  
 إِنْصَرِهِمْ غَشَّوْهُ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ٧ وَمِنَ النَّاسِ  
 مَنْ يَقُولُ إِنَّمَا يَبْلُوغُهُ الْأَخْرَى وَمَا هُمْ بِمُؤْمِنِينَ  
 يُحَلِّعُونَ اللَّهَ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَمَا يَحْكُمُونَ إِلَّا نَفْسُهُمْ  
 وَمَا يَسْعُرُونَ ٨ فِي قُلُوبِهِمْ مَرْضٌ فَرَآهُمُ اللَّهُ مَرْضًا  
 وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ بِمَا كَانُوا يَكْرِهُونَ ٩ وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ  
 لَا تُقْسِدُوا فِي الْأَرْضِ قَالُوا إِنَّمَا نَحْنُ مُصْلِحُونَ ١٠ أَلَا إِنَّهُمْ  
 هُمُ الْفَقِيدُونَ وَلَكِنَ لَا يَشْعُرُونَ ١١ وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ  
 إِنَّمُوا كَمَاءً مِنَ النَّاسِ قَالُوا إِنَّمَا نَعْمَلُ كَمَاءً مِنَ السُّفَاهَاءِ  
 أَلَا إِنَّهُمْ هُمُ السُّفَاهَاءُ وَلَكِنَ لَا يَعْلَمُونَ ١٢ وَإِذَا قَوَا  
 الَّذِينَ آمَنُوا قَاتَلُوهُمْ أَتَأْنَا بِذَلِكُو إِلَى شَيْطَنِيهِمْ قَاتَلُوهُمْ  
 مَعَكُمْ إِنَّمَا يَحْكُمُ مُسْتَهْرِئُونَ ١٣ اللَّهُ يَسْتَهْرِئُ بِهِمْ وَيَمْهُرُ  
 فِي طَغْيَانِهِمْ يَعْمَلُونَ ١٤ أَوْلَئِكَ الَّذِينَ أَشْرَقُوا الْأَضْلَالَ  
 بِالْهُدَى فَمَا رَبَحَتْ تَجْدَرُهُمْ وَمَا كَانُوا مُهْتَدِينَ ١٥

6. Hubaal Kuwa rumeyn diida, waa isugu mid haddaad u digto iyo haddaan u diginba, ma rumeyn doonaan.

7. Wuxuu Allaah daboolay quluubtooda iyo maqalkooda, oo araggooda waxaa ku rogan dabool<sup>(4)</sup>. Oo waxay mudan doonaan cadaab aad u weyn.

8. Oo dadka waxaa ka mid ah kuwo yiraahda: Waxaanu rumeynsannahay Allaah<sup>(5)</sup> iyo Maalinta dambeysa oo aan ahaynba mu'miniin.

9. Waxay (rabaan inay) dagaan Allaah iyo kuwa rumeysan, mase dagaan waxaan ahayn nafahooda, mase dareensana.

10. Quluubtooda waxaa ah cudur (shaki, nifaqaq, kibir, iwm), markaasuu Allaah u kordhiyey cudur. Oo waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuun badan waxay been sheegi jireen darteed.

11. Oo marka lagu yiraahdo: Ha ku falina fasahaad arlada, Waxay yiraahdaan: Waxaanu nahay uun sama doon.

12. Haddaba hubaal Waa iyaga kuwa wax bi'iska ahi, laakiinse ma ay dareensana.

13. Oo marka lagu yiraahdo: Rumeeya sida ay dadku u rumeeyeen, waxay yiraahdaan: Oo ma waxaan u rumeynaynaa sida ay maangaabku u rumeeyeen? Haddaba hubaal waa iyaga kuwa maan gaabka ahi, laakiinse waanay garaneyn.

14. Oo markay la kulmaan kuwa rumeysan, waxay yiraahdaan: Waanu rumaysannahay. Markase ay isla keli noqdaan shaydaamadooda, waxay yiraahdaan: hubaal innagu idinkaynu idinla jirnaa; waa uun iska jeesjeesennay.

15. Allaah baa se ku jees-jeesi doona, oo wuxuu kaga tagi doonaa keligood xadgudubkooda banbaxsan ee ay ku jaha wareersan yihii indha la'aan.

16. Kuwani waa kuwa iyagu iibsaday habowga halkii hanuunka, sidaas awgeed ganacdooda ma keento wax faa'ido ah, Mana aha kuwo hanuunsan.

**4. Dabool u diida qaadashada hanuunka. Arrintannina waxaa u sabab ah kibirkooda iyo ku madax adeyggooda dambiyada.**

**5. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Waxaa lay amray inaan la dagaallamo dadka intay ka qiraan oo yiraahdaan ma jiro ilaah xaq lagu caabudo aan ahayn Allaah, iyo in Muhammed yahay Rasuulkiil Ilaahay, hadday siduus yiraahdaan way iga ilashaadeen dhiggooda iyo maalkoodaba, waxaan xaqeeda ahayn, xisaabintoodana waxaa leh Allaah Kor ahaaye.” W.W. Al-Bukhaari iyo Muslim.**

**17.** Mataalkooda, wuxuu ka dhigan yahay sida mid shitay dab; markiise uu u ifiyey waxa hareerihiisa ah oo dhan, Allaah ka qaaday iftiinkii, oo uga tegay gudcurro mugdi daran ah oo aanay waxba arkeyn.

**18.** Waa dhego la' yihii, af la' yihii, (oo) indho la' yihii, marka dib uguma soo laabtaan (waddada toosan).

**19.** Ama (waa) sida roob darar ah ka yimaada daruurga oo wata gudcur madow, onkod, iyo hillaac: waxay geliyaan farahooda xagga dhegahooda biriqyada dartood baqe ay ka qabaan mowdka. Oo Allaah waa ku hareersan yahay gaalada.

**20.** Hillaacu wuxuu sigaa inuu indho tiro, mar kastoo u ifiyo (jidka) way ku socdaan, markase mugdi ku yimaada dushooda way joogsadaan. Oo hadduu Allaah doono, wuxuu xaqiil tiri lahaa maqalkooda iyo araggooda. Hubaal Allaah wax walba Wuu Karaa.

**21.** Dadow! Caabuda Rabbigiiin, ee idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyayba, bal inaad u hoggaansantaan.

**22.** (Isaga weeye) Kan idiinka dhigay dhulka gogol (fidsan), cirkana saqaf, oo ka soo shuba daruurga biyo, markaas ku soo saara miraha risiqa idii ah. Ee ha u yeelina Allaah shariikyo aad la mid dhigtaan idinkoo ogsoon(inaysan jirin cid la mid ah).

**23.** Oo haddaad ka shakisan tiihin waxa aan u soo waxyoonnay addoonkayaga (Nabi Muxammad), haddaba keena Suurad la mid ah, oo u yeerta taageerayaashiinna Allaah ka sokow, haddaad tiihin run sheegayaal.

**24.** Haddii se aydaan falin, marnabana ma fali doontaane, haddaba iska jira Naarta shidaalkeedu yahay dad iyo dhagaxaan, taasoo loo diyaarshay gaalada.

وَيَشِّرُّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أَنَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ  
تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ كُلُّ مَارِزٍ فَوْلَانِهَا مِنْ شَمْرَةٍ  
رِزْقًا قَالُوا هَذَا الَّذِي رُزِقْنَا مِنْ قَبْلِ وَأَتُوَابِهِ مُتَشَبِّهًّا  
وَلَهُمْ فِيهَا أَنْرَجٌ مُطْهَرَةٌ وَهُمْ فِيهَا خَلِيلُونَ ﴿٦﴾ إِنَّ  
اللَّهَ لَا يَسْتَخِنُ أَنْ يَضْرِبَ مَثَلًا مَّا بَعْدَ عَوْضَةٍ فَمَا قَوْفَهَا فَإِنَّمَا  
الَّذِينَ ءَامَنُوا فَيَعْلَمُونَ أَنَّهُ الْحُقْقُ مِنْ رَبِّهِمْ وَأَمَّا  
الَّذِينَ كَفَرُوا فَأَقْتُلُونَ مَاذَا أَرَادَ اللَّهُ بِهِ كَذَّالِكًا  
يُضْلِلُ بِهِ كَثِيرًا وَيَهْدِي بِهِ كَثِيرًا وَمَا يُضْلِلُ بِهِ  
إِلَّا الْفَسِيقِينَ ﴿٧﴾ الَّذِينَ يَقْضُوْنَ عَهْدَ اللَّهِ مِنْ بَعْدِ  
مِيشَقَهُ وَيَقْطَعُوْنَ مَا أَمَرَ اللَّهُ بِهِ أَنْ يُوَصَّلَ وَيَقْسِدُوْنَ  
فِي الْأَرْضِ أُولَئِكَ هُمُ الْخَاسِرُوْنَ ﴿٨﴾ كَيْفَ  
تَكْفُرُوْنَ بِاللَّهِ وَكُنْتُمْ أَمْوَاتًا فَأَحْيَكُمْ ثُمَّ بَيْتُكُمْ  
ثُمَّ يُحْيِي كُمْرَنَّهُ إِلَيْهِ تُرْجَعُوْنَ ﴿٩﴾ هُوَ الَّذِي خَلَقَ  
كُمْمَافِ الْأَرْضِ جَيْعَانَهُ أَسْتَوَى إِلَى السَّمَاءِ  
فَسَوَّهُمْ سَبْعَ سَمَوَاتٍ وَهُوَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ ﴿١٠﴾

25. Oo ugu bishaaree kuwa rumeysan oo sama fala, inay mudan doonaan beero ay hoostoodu webiyo qulqlaan. Mar kasta oo laga siiyo miro, Waxay oran doonaan: Kani waa wixii hore naloo siiyey oo kale, oo waxaa la siiyey kuwo kale oo u eg, oo waxay ku yeelan doonaan dhexdeeda afooyin la daahiriyyey, oo waa ay ku dhex waari doonaan.

26. Hubaal Allaah kama xishoodo inuu u soo qaato tusaale- kaneeco ama wax ka sii yarba<sup>(6)</sup>. Ma xagga kuwa rumeysan, way og yihiin inuu yahay xaq ka yimid Rabbigood, ma kuwase rumeysan waaya, waxay yiraahdaan: Muxuu ugula jeedaa Allaah tusaalaha kani? Wuxuu ku habaabiyya in badan, oo ku hanuuniyya in badan. Oo kuma habaabiyo waxaan ahayn caasiyaasha.

27. Kuwa ka baxa ballanka Ilahay kaddib sugiddiisa, oo gooya waxa Allaah uu amray in la xiriiryo, ee ku fala fasahaad arlada, kuwan weeye kuwa iyagu ku sugaran khasaaraa weyni<sup>(7)</sup>.

28. Sidee baad ugu gaaloobeysaan Allaah idinkoo ahaa mood, buu markaa idin soo nooleeyey, haddana sababi doonaa inaad dhimataan, haddana dib idin soo nooleyn doonaa, haddana xaggiisa baa la idiin soo celin doonaa.

29. Waa Isaga Kan idiin abuuray waxa dhulka korkiisa ah oo dhan. markaas wuxuu abbaaray xagga samada, markaas ka dhigay toddobo samood, oo Isagu wax waliba Ogssoon.

6. *Markay gaaladu yiraahdeen: Maxaa looga jeedaa caarada iyo duqsiga lagu sheegay Qur'aanka buu Allaah Kor ahaaye soo waxyooday Aayyaddan.*

7. *Khasaaro ama fisiq (caasiyoobid) ama dulmi (gef - gardarro) ama kufri (gaalnimo) oo lagu sheego cidaan muslim ahayn waxaa loola jeedaa heer gaalnimo weyn ee diinta bannaanka lagaga yahay, wixii se khasaaro ama fisiq ama dulmi ama gaalnimo ah oo Allaah ku sheego qof Muslim ah waxaa loola jeedaa inuu ku jiro dambi aan diinta looga bixin.*

**30.** Oo (xus) markuu Rabbigaa ku yiri malaa'igta: Wuxaan dhigayaas dhulka facyo is xigsada oo maamula. Waxay yiraahdeen: Ma waxaad dhigi doontaa gudaheeda kuwo fasahaadsha oo dhiig daadsha, innagoo ku tasbiisanna xamdigaga, oo ku xurmo weyneyna. Wuxuu yiri: hubaal Wuxaan Anigu ogahay wax aydaan ogeyn.

**31.** Oo wuxuu baray Aadam magacyada oo idil, markaas buu u soo bandhigay malaa'igta oo yiri: Ii sheega magacayda kuwani, haddaad tiihin run sheegayaal.

**32.** Wuxuu yiraahdeen: Xurmo oo dhan Adigaa baa iska leh! Ma lihin cilmi aan aheyn waxa aad na bartay. Hubaal waa Adiga wax kasta Ogssoonaha, Xakiimka ah.

**33.** Wuxuu yiri: Aadamow! U sheeg magacyadooda. Markaasuu markuu u sheegay magacyadooda, Wuxuu yiri: Miyaanan idinku oran waxaan anigu hubaal ogahay waxa aan muuqan ee jira samooyinka iyo arladaba, oo waxaan ogahay waxa aad muujisaan iyo waxa aad idinku karinayseenba?

**34.** Oo (xus) markaan ku niri malaa'igta: U sujuuda Aadam, markaas bay sujuudeen Iblis mooyee, waa uu diiday oo isla weynaaday, oo ka mid ahaaday gaalada.

**35.** Oo Wuxaanu niri: Aadamow! Dega adiga iyo afadaaduba Jannada, oo ku cuna baraare iyo bashbash meeshaad ka doontaanba, hase u dhowaannina geedkan haddii kale waxaad ka mid noqon doontaan geflowyda.

**36.** Shaydaanka baase ka yeelay labloodabaa inay ka soo dhaadhacaan oo sababay inay ka soo baxaan (xaaladdaa) ay ku jireen; oo Wuxaanu niri: Ka dega, (dhammaantiin) iyagoo qaarkiinba qaar u yahay cadow. Oo waxaad ku leedihiin arlada degaan iyo sahay muddo go'an leh.

**37.** Markaas buu Aadam ka helay Rabbigii ereyo uu ku ilhaamiyey<sup>(8)</sup>, oo wuxuu ka aqbalay towbadiisa. hubaal Waa Isaga (Allaah) Towbad Aqbalaha, Naxariista Badan.

<sup>8</sup>. Allaah wuxuu baray Aadam kelmedo lagu toobad dalbo uu ka aqbalayo, waana kelmedaha ku soo arooray Suuradda Al- Acraaf Ayadda: 23.

فَلَمَّا أَهْمَلُوا مِنْهَا جِيئَعًا فَإِمَامًا يَأْتِيَكُمْ مَنْ هُدَى فَمَنْ تَبَعَ  
هُدَى فَلَا يَخْوِفُ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَخْزَنُونَ **٢٨** وَالَّذِينَ كَفَرُوا  
وَكَذَبُوا بِعِيَادَتِنَا أَوْ لَكِنْ أَصَحَّ الْتَّارِخَ فِيمَا خَلَدُونَ **٢٩**  
يَبْيَسِ إِسْرَائِيلَ أَذْكُرُوا لِعْنَمَقَ الَّتِي أَعْمَتْ عَلَيْهِمْ وَأَوْفُوا لِعَهْدِي  
أَوْفُ بِعَهْدِكُمْ وَلَا يَنْهَا فَارِهُبُونَ **٣٠** وَأَمْنُوا بِمَا أَنْزَلْتُ مُصْرِفًا  
لِمَاعِمَكُمْ وَلَا تَكُونُوا أَوْلَى كَافِرَ بِهِ وَلَا تَشْرُوْبُ بِعِيَادَتِي  
شَمَنَ قَلِيلًا وَلَاتَّقُونَ **٣١** وَلَا تَلِسُوا الْحَقَّ بِالْبَطْلِ وَتَحْكُمُوا  
الْحَقَّ وَانْشُرْ تَعْلِمُونَ **٣٢** وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَأَثُوْرَ الزَّكُوْةَ  
وَأَذْكُرْ عَوْمَاجَ الْرَّكِعِينَ **٣٣** \* أَتَأْمُرُونَ النَّاسَ بِالْإِيمَانِ  
وَتَسْوِيُنَفْسَكُمْ وَأَسْدِرُونَ الْكِتَابَ أَفَلَا يَعْقُلُونَ **٣٤**  
وَأَسْتَعِنُوْبِالصَّابِرِ وَالصَّالِحَةِ وَإِنَّهَا الْكِبِيرَةُ إِلَّا عَلَى الْخَشِينَ  
الَّذِينَ يَظْهُونَ أَنَّهُمْ مُلْقُوا بِهِمْ وَأَنَّهُمْ إِلَيْهِ رَجِعُونَ **٣٥**  
يَبْيَسِ إِسْرَائِيلَ أَذْكُرُوا لِعْنَمَقَ الَّتِي أَعْمَتْ عَلَيْهِمْ وَأَنِّي فَضَلَّتُكُمْ  
عَلَى الْعَالَمَيْنَ **٣٦** وَأَتَقْوِيْمَا لَأَجْزِيَ نَفْسَ عَنْ نَفْسِ شَيْئًا  
وَلَا يَقْبِلُ مِنْهَا سُفْعَةً وَلَا يُؤْخَذُ مِنْهَا عَدْلٌ وَلَا هُمْ يَصْرُونَ **٣٧**

- 38.** Waxaaan niri: Ka degta xaggeeda dhammaantin, oo markuu xaggayga idiinka yimaado hanuun, haddaba qofkii raaca Hanuunkayga, ma cabsi qabi doonaan, mana murugoon doonaan.

**39.** Kuwa se rumeyn diida oo beeniya Aayadahayaga, waa iyaga ehl-Naarka, gudaheeda bay ku dhex waari doonaan weligood.

**40.** I1mahii Israa'iilow! Xusuusta Nicmaddayda aan idiinku nicmeeeyey, oo oofiya ballanteyda (idin saaran), waxaan ofin doonaa ballantaan idinka qaaday, oo Anigoo Keliya iga cabsada.

**41.** Oo Rumeeya waxa aan soo waxyooday oo xaqijinaya waxa aad haysataan, oo ha noqonnina kuwa u horreeya ee dafira, oo ha siisannina aayadahayga qiimo yar, oo Anigoo Keliya iga cabsada.

**42.** Oo ha ku dheehina xaqa waxaan jirin oo been ah, oo ha qarinnina xaqa idinkoo ogsoon.

**43.** Oo hagaajiya salaadda, oo bixiya Sakada, oo la rukuuca jamaca Rukuucayaasha.

9. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Waxaa Maalinta Qiyaame la keeni doonaa nin oo lagu tuuri doonaa Naarta, markaasuu wuxuu ku dhex wareegsan doonaa ehlü Naarka sida dameerka ugu wareegsaso shüdküsa, markaasay isugu soo ururi doonaa ehlü Naarka oo weydin doonaa: Hebelow, ma waadan fari jirin samaanta oo reebi jirin xumaanta, markaasuu wuxuu oran doonaa: Waxaan fari iirev samaanta mana fali iirin oo reebi iirev xumaanta anjeegaana fali iirev."

**49.** Oo (xusuusta) markaan aan idinka badbaadinnay qolodii Fircoon<sup>(10)</sup>, ee idin dhadhanshiyey cadaab tan u daran, iyagoo dilayey wiilashiinna, oo deysanayey haweenkiinna, oo waxaa taas ku sugnaa imtixaan weyn oo xagga Rabbigiin ah.

**50.** Oo (xusuusta) markaan idii dhanballay badda, oo idin badbaadinnay, oo qarqinnay dadkii Fircoon idinkoo arkayey.

**51.** Oo (xusuusta) markaan la sameennay ballan Muuse muddo afartan habeen ah, markaas Aad sameysateen dibi (aad caabuddaan) kaddib (markuu tagey), oo waxaad ahaydeen gar ma qaatayaal.

**52.** Markaasaan idin cafinnay intaas oo dhan kaddib bal inaad mahad naqdaan.

**53.** Oo (xusuusta) markaan siinnay Muuse Kitaabka iyo kala saaraha, bal inaad hanuuntaan.

**54.** Oo (xusuusta) markuu Muuse ku yiri dadkiisii: Dadkaygiiyow! Xaqiqiit Waaqaa u gefteen nafahiinna ka dhigashadiinna dibiga (ilaah) darteed. Ee u towbad keena Uumihiinna oo dila nafahiinna<sup>(11)</sup>, Sidaas baa idin khayr badan (dhammaantiin) Uumihiinna xaggiisa, markaasuu idinka aqbalay towbaddiinnii, waa Isaga towbad aqbalaha, Naxariista badan.

**55.** Oo (xusuusta) markaad tiraahdeen: Muusow! Kuma rumeysan doonno marnaba jeer aan u aragno Allaah si caddaan ah. markaasaa biriq idinku dhacday idinkoo arkayey.

**56.** Haddana waan idin soo nooleynay dhimashadiinnii kaddib, bal inaad mahad naqdaan.

**57.** Oo Waaan har idiinka yeellay daruuraha, oo idin soo dejinnay Manna (macaan malab sidi ah) iyo Salwaa (hilibr shimbir sida Samaanka): Wax ka cuna waxyaalaha wanaagsan aanu idin siinnay; oo Annaga waxba nooma ay dhimine, laakiinse waxay (uun) gef ka galeen nafahooda.

**10.** Fircoon waa nayaas lagu magacabi jirey bogorradii Masar ee waa' hore jirey, waxaa ku soo arooray taariikhda in Fircooniik xukumayey Masar waaggi Muuse uu ahaa Menephthan ina Ramsiis kaasoo xukumayey sannadkii 1224 - 1232 dhalashadii Ciise ka hor.

**11.** "Ee dila nafahiinna". waxaa lagu fasiray kuwii aanan caabudin dibiga inay dilaan oo laayaan kuwii caabuday dibiga, qolo kale waxay ku fasirtay inay kuwii caabuday dibiga iyagu is dileen dhexdooda, waxaa jira golo ku fasirtay in la amray inay dilaan kuwaasi towbad keen ahaan.

وَإِذْ قَاتَ الْجُحُولُ هَذِهِ الْقَرْزَةَ فَكَلَّا مِنْهَا حَيْثُ شِئْتُمْ  
رَغْدًا وَأَدْخُلُوا الْبَابَ سُجَّدًا وَتُولُوا حَجَّةً تَغْفِرُ لَكُمْ  
خَطَاكُمْ وَسَزَّيْدُ الْمُخْسِنِينَ <sup>٦٤</sup> فَبَدَلَ الَّذِينَ  
ظَلَمُوكُمْ فَوْلًا عَيْرُ الدَّى قِيلَ لَهُمْ فَأَنْزَلْنَا عَلَى الَّذِينَ ظَلَمُوكُمْ  
رِجَارًا مِنَ الْسَّمَاءِ إِمَاكًا أَوْ يُفْسُدُونَ <sup>٦٥</sup>\* وَإِذْ أَسْتَقَنَ  
مُوسَى لِقَوْمِهِ فَقَاتَ أَضْرِبْ بِعَصَابَ الْحَرَقَ فَنَفَرَ جَرَّتْ  
مِنْهُ أَشْتَأْنَعَرَةً عَيْنَاقَدْ عَمَرْ كُلُّ أَنْابِسْ مَشَرْبَهُمْ كَلُوا  
وَأَشَرْبُوا مِنْ رِزْقِ اللَّهِ وَلَا تَعْشُوا فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ <sup>٦٦</sup>  
وَإِذْ قَاتَ مُوسَى لَنْ نَصِيرِ عَلَى طَعَامِ وَحْدَيْ قَادِعَ لَنَّا  
رَبَّكَ يُخْرِجُ لَنَّا مَائِنَيْتُ الْأَرْضَ مِنْ بَقِيرَهَا وَقَاتَاهَا  
وَفُؤُمَهَا وَعَدَسَهَا وَبِصَالَهَا قَالَ أَتَسْتَبِدُونَ الَّذِي هُوَ  
أَذْنَى بِالَّذِي هُوَ خَيْرٌ أَهْيَطُوا مِصْرَافَنَ لَكُمْ مَا سَأَلْتُمْ  
وَصَرَبَتْ عَلَيْهِمُ الْدَّلَلَةُ وَالْمَسْكَنَهُ وَبَاءَ وَيَعْضَبُ مِنْ  
اللَّهِ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَأَوْيَانَ كَفَرُونَ يَعَايِثُ اللَّهُ وَيَقْتَلُونَ  
الَّذِينَ يَغْرِي لِحَقَّ ذَلِكَ بِمَا عَصَمُوا وَكَأَوْيَانَ عَيْتَدُونَ <sup>٦٧</sup>

58. Oo (xusuusta) markaan niri: Gala magaaladan (Qudus), oo wax ka cuna meeshaad doontaanba bashbash iyo barwaqaqo, oo gala alaabka idinkoo hoggaansan oo dhaha: Naga rid culeysyadayada (dambiyada), Waanu idiin dhaafi doonaa (markaa) gafafkiinna, oo waxaan u kordhin doonaa sama falayaasha (ajar).

59. Kuwaasi se ahaa gar ma qaataayaasha waxay ku beddeleen (ereyadaa) weedh aan ahayn taasi lagu yiri, markaasaan waxaan ku soo dejinnay kuwii gefka galay cadaab (daacuun) kaga yimid samada caasintoodii darteed.

60. Oo (xusuusta) markuu Muuse u biyo doonay dadkiisii, markaas baan ku niri: Ku dhufo ushaada dhagaxa, waxaa kolkiiba ka soo burqaday labo iyo tobantilood. Waxay (qolo) walbaa ogaadeen halka ay ka cabbayaan biyaha. Cuna oo wax ka cabba risiqa Ilaahey oo ha ugu dhaqmina si foolxun arlada idinkoo ku faafinaya fasahaad.

61. Oo (xusuusta) markaad tiraahdeen: Muusow! Kuma samri karno hal

nooc oo cunto ah. Ee noo bari Rabbigaa ha noo soo saaro'e waxa dhulka ka soo baxa, oo bagalkiisa leh iyo qiyaarkiisa iyo sareenkiisa iyo toonstiisa iyo digirtiisa iyo basashisaba. (Muuse) wuxuu yiri: Ma waxaad ku beddelaneyasan waxa khayr roon wax ka hooseeya? Dega magaalo uun, waxaad hubaal ka heli doontaan waxa aad dalabteen. Oo dulli iyo darxumo baa lagu daboolay, oo la laabteen Caro xagga Ilaahey (oo dushooda ah). Arrinkaa waxaa ugu wacnaa waxay (marar badan) diideen Aayadaha Ilaahey, oo ku dileen Nabiyada gar darro. Arrinkaa waxaa ugu wacnaa inay caasiyoobeen oo xadgdubhi jireen.

**62.** Hubaal kuwa rumeyey iyo kuwa ahaa Yuhuudda ama Kirishtaanka ama Saabbi'iinta (ka hor Nabi Muxammad s.c.w), kuwaa ka midka ahaa ee rumeyey Allaah iyo Maalinta dambeysa oo samaha falay, waxay ka heli doonaan abaalkooda xagga Rabbigood, cabsi ma qabi doonaan, mana murugoon doonaan.

**63.** Oo (xusuusta) markaan idinka qaadnay ballan adag, oo kor u soo qaadnay Buurta dushiinna (Annagoo leh): Ku qaata waxa aan idin siinnay (Towraadda) go'aan adag, oo xusa waxa ku yaal, si aad isaga jirtaan (xumaha).

**64.** Markaas baad intaas kaddib jeesateen. Oo haddaanu Fadliga Ilahay iyo Naxariistiisu korkiinna ahaateen, waxaad hubaal ka mid ahaan laheydeen kuwa khasaara.

**65.** Oo xaqiq waxaad ogaateen kuwas idinka mid ah ee ku xadgudbay arrinkii Sabtida, oo Wuxaanu ku niri: Noqda (sida) daayeerro dulleysan oo deyro ah.

**66.** Oo waxaan uga dhignay ciqaab celisa kuwaah ahaa goob joogga iyo kuwa ka dambeeyeyba iyo waano ay ku cbirad qaataan kuwa iska jira (xumaha).

**67.** Oo (xusuusta) markuu Muuse ku yiri dadkiisii: hubaal Allaah wuxuu idin amrayaa inaad gawracdaan sac<sup>(12)</sup>. Waxay yiraahdeen: Miyaad nagu ciyaareysaa. Wuxuu yiri: Waxaan ka magan galayaa Allaah inaan ka mid noqdo jaahiliinta.

**68.** Waxay yiraahdeen: Noo bari Rabbigaa; inuu noo caddeeyo waxa ay tahay. (Muuse) wuxuu yiri: (Allaah) Wuxuu leeyahay, waa sac aan duq ahayn iyo ugub midna, oo u dhexeysa labadaa xaaladood; ee fala waxa la idin amray.

**69.** Waxay yiraahdeen: Noo bari Rabbigaa inuu noo caddeeyo waa maxay midabkeedu. Wuxuu yiri: Wuxuu leeyahay, Waa sac huruud ah oo midabkeedu huruud aad ah yahay, ay u bogayaan arkayaasha.

<sup>12.</sup> Xikmadda gowricidda saca waa si looga gooyo qalbiyadooda xurmeynta dibigii ay horay u caabudeen. Markii qayb ka mid ah saca la gowracay lagu dhuftay ninkii la dilay. Wuxuu Allaah u soo celiyey nafta ninkii, kaasoo u sheegay ninkii dilay.

فَالْوَاعِنُ لَتَارِبَكَ يَيْمِنَ لَتَامَاهِ إِنَّ الْبَقَرَ تَسْدِيهَ عَلَيْتَنَا وَلَنَا  
إِنْ شَاءَ اللَّهُ لَمْ يَهْتَدُونَ ﴿٧٦﴾ قَالَ إِنَّمَا يَقُولُ إِنَّهَا بَقَرَةٌ لَّا ذُولٌ  
تُشَيْرُ إِلَّا أَرْضٌ وَلَا سَقِيَ الْحَرَثَ مُسَلَّمَةٌ لَا شَيْئَةَ فِيهَا قَلَوْا  
أَقْنَجَتْ بِالْحَقِّ فَذَبَحُوهَا وَمَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ﴿٧٧﴾ وَإِذَ  
قَاتَلَهُمْ نَفَّاسًا فَادْرَأُتُمْ فِيهَا وَلَهُ مُخْرِجٌ مَا كَذَّبُتُمْ تَكْهُومُونَ  
فَقَتَلْتُمُ الظَّرْبُوْهُ بِعِصْمَهَا كَذَلِكَ يُمْلِيُ اللَّهُ الْمُؤْمِنَ وَبِرِّيْكُمْ  
أَبِيَّتِهِ لَعَلَّكُمْ تَعْقُلُونَ ﴿٧٨﴾ ثُمَّ قَسْتُ قُلُوبَكُمْ كَمِنْ بَعْدِ ذَلِكَ  
فَهِيَ كَالْحِجَارَةِ أَوْ أَشَدُّ قُسْنَةً وَلَنَّ مِنَ الْحِجَارَةِ لَمَّا يَنْفَجِرَ  
مِنْهُ الْأَنْهَرُ وَلَنَّ مِنْهَا الْمَايِشَقُ فَيَخْرُجُ مِنْهُ الْمَاءُ وَلَنَّ  
مِنْهَا الْمَايِطُ مِنْ حَشِيشَةِ اللَّهِ وَمَا اللَّهُ يَعْلَمُ عَمَّا تَعْمَلُونَ  
﴿٧٩﴾ أَفَقْتَمُوْنُ أَنْ يُؤْمِنُوا كُمْ وَقَدْ كَانَ فِرِيقٌ مِنْهُمْ  
يَسْمَعُونَ كَلْمَانَ اللَّهِ شَمِيْزِيْرُونَهُ وَمِنْ بَعْدِ مَا عَصَمُوْهُ هُنْ  
يَعْلَمُوْنَ ﴿٨٠﴾ وَإِذَا قَوَّا الْدِيْرَ بَعْضَهُمُ اتَّهَمُوا قَلْوَأَهُمْ وَلَدَا  
خَلَّ بَعْضُهُمُ اتَّهَمُوا قَلْوَأَهُمْ وَلَدَا مِنْهُمْ بِمَا فَاتَّهَ اللَّهُ  
عَلَيْكُمْ لِيَحْجُّوْكُمْ بِهِ عِنْ دَرَيْكُمْ فَلَا تَعْقُلُونَ ﴿٨١﴾

١١

70. Waxay yiraahdeen: Noo bari Rabbigaa inuu noo caddeeyo waxa ay tahay. Hubaal lo'dii (oo dhan) baa isaga kaaya ekaatay, oo haddii Allaah idmo waxaan hubaal ahaan doonnaa kuwo hanuunsan.

71. Wuxuu yiri: Wuxuu leeyahay, waa sac aan loo tababarin inay fasho arlada ama inay waraabiso beeraha, ka maran ceeb, oo aan lahayn wax bar ah. Waxay yiraahdeen: Haatan baad la timid xaqa. Markaasay gawraceen, inkastoo ay niyad u heyn inay sameeyaanba.

72. Oo (xusuusta) markaad disheen nin, oo isku qabateen (cidda dishay), Allaah se wuxuu ahaa mid u soo saaraya debedda waxa aad qarineyseen.

73. Markaasaanu niri: Ku dhufta (ninka la dilay) waax ka mid ah (sacaa la gowracay). Sidaas buu Allaah u soo nooleeyaa meytida, oo wuxuu idin tusaa calaamooyinkiisa si aad u garowsataan.

74. Markaas quluubiinnu way qallashay intaa kaddib, oo waa sida dhagaxda oo kale, ama ka adayg badanba. waayo hubaal waxaa jira dhagaxyo qaar ay ka soo burqadaan wabiyo, oo waxaa jira qaar ka mid ah oo dildillaaca markaas biyo ka soo shubmaan, oo waxaa jira qaar ka mid ah oo la soo dhaca cabsi Ilaahay darteed<sup>(13)</sup>. Oo Allaah ma mooga waxa aad fashaan.

75. Ee ma waxaad damac ka qabtaan (Mu'miniintow) inay wax idinka rumeystaan<sup>(14)</sup> iyagoo koox ka mid ah ay dhageysan jireen Hadalka Ilaahay, oo markaas beddelaan (Towraadda)<sup>(15)</sup> intay fahmeen kaddib iyagoo ogsoon?

76. Oo markay la kulmaan kuwa rumeysan, waxay yiraahdaan: Waan rumaysannahay, markase ay keli isla noqdaan qaarkoodba qaar, waxay yiraahdaan: Ma waxaad idinku uga warrameysaan waxa Allaah idhiin caddeeyey, si ay iyagu idinkula doodaan arrinkaa Rabbigiin horti? Ma waydaan haddaba garasho lahayn?

<sup>13.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Waxaan garan dhagax ku yiil Makka oo I salaami jirey intaan lay soo dirin Nabi ahaan."w.w. Muslim  
<sup>14.</sup> waxaa loolaa jeedaa Yuhuuddii ku nooleyd Madiina ee beddelay Towraadda gaar ahaan wixii ku saabsanaa oo la xirriy Nabi Muhammed s.c.w.

<sup>15.</sup> Towraadda waxaa ku yiil caddeyn in Nabi Muxammad s.c.w. yahay kan lagu khatimayo anbiyada ilaahay, ha yeeshiye Yuhuuddii way qariyeen iyagoo ka cabsaday inay ku dheef waayaan oo ka soo gaaro dhib iyo waxyeello.

**77.** Mawaysan se ogayn in Allaah ogsoon yahay waxa ay qariyaan iyo waxa ay muujiyaaanba?

**78.** Oo waxaa ka mid ah caamo aan aqoon Kitaabka, hase yeeshiis isku maaweeliya hidddiilooyin been ah, wax se iska maleeya uun.

**79.** Ee hoog waxaa leh kuwa ku qora Kitaabka isla gacmahooda, markaas yiraahda: Kani wuxuu ka yimid xagga Ilaahay, si ay u siistaan qiimo yar. Hoog bay leeyihii waxa ay gacmahooda qoreen darteed, oo hoog bay leeyihii waxa ay kasbadaan darteed.

**80.** Oo waxay yiraahdaan: Marnaba Naari nama taaban doonto waxaan aheyn ayaamo tirsan. Dheh: Ma waxaad ka heysataan ballan xagga Ilaahay, marka Allaah ma ka bixi doono ballankiisa? Mise waxaad ka sheegtaan Allaah wax aydaan ogeyn?

**81.** Haayoo, Qofkii kasbadaa xume ee uu gefkiisu hareereeyo, kuwaasu waa ehl Naar, way ku dhex waari doonaan.

**82.** (Ma) kuwa se rumeysan oo sama fala<sup>(16)</sup>, kuwaasu waa ehl Jannada, way ku dhex waari doonaan weligood.

**83.** Oo (xusuusta) markaan la galnay ballan Ilmahii Isara'iil (innagoo ku faral yeeleyna): Ha caabudina waxaan ahayn Allaah, oo waalidka u sama fala, iyo qaraabada iyo agoomaha iyo masaakiinta, oo kula hadla dadka hadallo wanaagsan, oo hagaajiya salaadda, oo bixiya Zakada, markaas baad jeesateen in yar oo idinka mid ah maahee oo (imminkana sidoo kale) dhinac baad u jeesataan.

أَوْلَا يَعْلَمُونَ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا يُبَرِّزُونَ وَمَا يَعْلَمُونَ  
وَمِنْهُمْ رَمِيُونَ لَا يَعْلَمُونَ الْكِتَابَ إِلَّا أَمَانَ وَإِنْ هُوَ  
إِلَّا يَظْهُرُونَ <sup>٦٧</sup> فَوَيْلٌ لِلَّذِينَ يَكْتُبُونَ الْكِتَابَ بِأَيْدِيهِمْ  
شَرَّيْقُولُونَ هَذَا مِنْ عِنْدَ اللَّهِ لِيَسْتَرُوا بِهِ ثُمَّ قَلِيلًا  
فَوَيْلٌ لِلَّهِمَّ مَا كَتَبْتَ أَيْدِيهِمْ وَفَوَيْلٌ لِلَّهِمَّ مَا كَسْبُوكُونَ  
وَقَاتُولُنَّ تَمَسَّنَ النَّارَ إِلَّا أَيْمَانًا مَعْدُودَةَ قُلْ  
أَتَخَذَنَا عَنَّ اللَّهِ عَهْدًا فَنَّ يُخْلِفُ اللَّهُ عَهْدَ دَادَرَ  
تَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ <sup>٦٨</sup> بِلَىٰ مَنْ كَسَبَ سَيِّئَةً  
وَلَا حَطَّتْ بِهِ حَطَّيْعَةٌ فَأَوْلَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ  
فِيهَا خَلِيدُونَ <sup>٦٩</sup> وَالَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ  
أُولَئِكَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ هُمْ فِيهَا خَلِيدُونَ <sup>٧٠</sup> وَإِذَا أَخْدَنَا  
مِيقَاتَ بَيْتِ إِسْرَائِيلَ لَا نَغْبُدُونَ إِلَّا اللَّهُ وَيَأْلُو الْيَنِينَ  
إِحْسَانًا وَذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسَاكِينَ وَقُولُوا  
لِلنَّاسِ حُسْنًا وَلَا قُوْلُوا الصَّلَاةَ وَإِنَّمَا الزَّكُوْنَ شُرَّ  
تَوَلَّيْسُمْ إِلَّا قَلِيلًا مَنْ كُمْ وَإِنْتُمْ مُغْرِضُونَ <sup>٧١</sup>

١٢

<sup>16.</sup> Cabdullaah bin Maseeuud a.k.r. Waxaa laga soo weriyeen inuu yiri: Rasul Allow camal kee baa u fican? Wuxuu yiri: Salaadda oo waqtigeeda la tukado, wuxuu weydiiyey: Maxaa xiga? Wuxuu yiri: Labada waalid oo la wanaajiyoo. Wuxuu weydiiyey: Haddana maxaa xiga? Wuxuu yiri: Arrinka Ilaahay oo lagu dadaalo. W.w. Al-Bukhaari iyo Muslim

وَإِذْ أَخْدَنَا مِيشَقُمْ لَا تَسْفِكُونَ دَمَاءَ كُمْ وَلَا تُخْرِجُونَ  
أَنْفُسَكُمْ مِنْ دِيْرِكُمْ ثُمَّ أَفْرَرْتُمْ وَأَنْشَرْتُمْ تَشَهُّدَوْنَ  
<sup>٨٣</sup>  
ثُمَّ أَنْشَرْتُهُؤُلَاءِ تَقْتُلُونَ أَنْفُسَكُمْ وَمُخْرِجُونَ فِرِيقًا  
مِنْكُمْ مِنْ دِيْرِهِمْ ظَاهِرُونَ عَلَيْهِمْ بِالْإِثْمِ وَالْعَدْوَنِ  
وَإِنْ يَأْتُوكُمْ سُرَى نَفْدُوهُمْ وَهُوَ مُحَرَّمٌ عَلَيْكُمْ  
إِخْرَاجُهُمْ فَأَتُؤْمِنُونَ بِبَعْضِ الْكِتَابِ وَنَكْرُونَ بِبَعْضِ  
فَمَا جَزَاءُهُمْ مِنْ يَفْعَلُ ذَلِكَ مِنْكُمُ الْأَخْرَى فِي الْحَيَاةِ  
الَّذِيَا وَيَوْمَ الْقِيَمَةِ يُرَدُّونَ إِلَى أَشَدِ الْعَذَابِ وَمَا اللَّهُ  
يُغْنِي عَمَّا تَعْمَلُونَ<sup>٨٤</sup> أُولَئِكَ الَّذِينَ أَشْتَرُوا الْحَيَاةَ  
الَّذِيَا بِالْآخِرَةِ فَلَا يُحَقِّفُ عَنْهُمُ الْعَذَابُ وَلَا هُمْ يُنْصَرُونَ  
<sup>٨٥</sup>  
وَلَقَدْ أَتَيْنَا مُوسَى الْكِتَابَ وَفِيهِ تَাْمِنٌ بِعِدَّهِ  
يَا رَسُولُنَا وَأَتَيْنَا عِيسَى أَنْ مَرِيمَ الْكَتِيْبَ وَلَدَنَّهُ بِرُوحِ  
الْقُدُّسِ فَكُلَّمَاهُ كُمْ كَلَمَاهَ كُمْ رَسُولُ بِسْمِ الْأَنْهَوْيِ أَنْفُسَكُمْ  
أَسْتَكِبْرُتُمْ فَغَرَّبَكَذَبْرُمْ وَفَرِيقًا تَقْتُلُونَ<sup>٨٦</sup> وَقَاتُلُوْبِتُمْ  
<sup>٨٧</sup>  
غَلَفَ كُلَّعَنْهُمُ اللَّهُ يَكُفُّرُهُمْ فَقَلِيلًا مَا يُؤْمِنُونَ<sup>٨٨</sup>

84. Oo (xusuusta) markaan idinla gallay ballan (leh): Ha daadinnina dhiiggiinna (midkiinba midka kale), ama ha iska qaxinnina guryahiinna, markaas aad qirteen (tani) idinkoo ka marag kacayey.

85. Haddana, waa isla idinka kuwa is-dila oo ka qaxinaya qaar idinka mid ah guryahooda, idinkoo isugu kaalmeyn dambi iyo colaad. Oo hadday idii yimaadaan iyagoo qafaal ah oo xiran, waad madax furataan, iyadoo qaxintooda ay xaaraan idinka ahayd. Ee ma waxaad haddaba rumeyasan qaar ka mid ah Kitaabka oo diiddaan in kale oo ka mid ah<sup>(17)</sup>? Oo muxuu yahay haddaba abaalka kuwa idinka mid ah ee sidaa sameeya waxaan aheyn dulli nolosha adduunkan ah, oo Maalinta Qiyaamaha waxaa loo celin doonaa cadaab tan ugu daran. Oo Allaah ma mooga waxa aad fashaan.

86. Kuwaanu waa kuwa gata nolosha adduunkan halkii aakhirada, sidaas awgeed cadaabka lagama khafiifin doono loomana gargaari doono.

87. Oo xaqiq Wuxaanu siinnay Muuse Kitaabka, oo waxaan soo dirnay Rusul isaga kaddib midba mid kale xigsaday. Oo Wuxaanu siinnay Ciise ina Maryam, xujoooyin cad oo ku xoojinnay Ruuxda daahirka ah (Jabriil). Mar walba uu Rasuul idiniila yimaado wuxaanay nafahiiinu rabin, baad is kibrisaan markaas qaar beenisaan, qaarna disheen.

88. Oo waxay yiraahdaan: Quluubtayada waa qufulan yihii. Mayee, Allaah baa ku nacladay gaalnimadooda darteed, marka waa wax yar intay rumeeyaan.

<sup>17</sup>. Dhammaan heshiiyadii iyo ballamahii ay galeen ilmo israa'iil ee ku xusan Aayadaha 83 iyo 84 waa ka baxeen oo khilaafeen. Waxaa taariikhda ku xusan in labadii qabiilood ee Yuhuudda ee ku nooleyd Madina ee ahaa Banuu Quraydah iyo Banuu Nadir uu ka dhhexeyey dagaal joogto ah., laakiinse haddi Yuhuudda ka tirsan labadan qabiilood ay qafaashaan qabiilo kale, sida qabiilada Aws oo xulufo la ahaa Banuu Quraydah, ama Khazraj oo xulufo la ahaa Banuu Nadir waxay labada qabiiloba u kulmi jireen soo furashadiisa, waxay ahaayeen Yuhuuddu is eegato aan is oggoleyn.

89. Oo markuu u yimid Kitaab ka yimid xagga Ilaahay xaqiijinaya waxa ay haystaan, iyagoo ka hor ay baryi jireen guul laga siiyo gaalada mushrikiinta ah, markiise uu halkaa u yimid (Nabi) ay qoonsadeen bay rumayn diideen. Ee nacladda Ilaahay dushooda ha ahaato gaalada.

90. Xumaa waxa ay ku gateen nafahooda, inay diidaan waxa Allaah soo waxyooday xasad darti in Allaah uu siiyo Fadligiisa cidduu doono oo ka mid ah addoomahiisa. Marka waxay muteysteen caro loo geeyey caro<sup>(18)</sup>. Oo gaaladu waxay mudan doonanan cadaab aad u dulleysa.

91. Oo marka lagu yiraahdo, Rumeeya waxa Allaah soo waxyooday, waxay yiraahdaan: Waxaanu rumeysannahay waxa naloo soo waxyooday. Oo waxay beeniyaan waxa la barbar ah, isagoo xaq ah xaqiijinaya waxa ay haystaan. Dheh: Maxaad haddaba u disheen Anbiyadii Ilaahay kal hore, haddaad aheydeen run ahaan mu'miniin?

92. Oo xaqiq Muuse wuxuu idiin la yimid xujooyin cad, markaas baad ka dhigateen dibi (ilaah ahaan) maqnaashahiisii oo waxaad aheydeen gar ma qaatayaal.

93. Oo (xusuusta) markaan idinla galnay ballan, oo kor u qaadnay Buurta dushiinna: Xagsada waxaanu idin siinnay (Towraadda) si sugnaan leh oo ahaada daacad wax maqla. Waxay yiraahdeen: Waanu maqallaa oo caasinnaa. Oo waxaa la waraabiyey Quluubtooda (jaceylka) dibiga (ay caabudeen) gaalnimadooda darteed. Dheh: Xumaa wuxuu iimaankiinnu idinku amro haddaad tiihin mu'miniin.

وَلَتَجَاهَهُمْ كِتَابٌ مِّنْ عِنْدِ اللَّهِ مُصَدِّقٌ لِّمَا مَعَهُمْ  
وَكَانُوا مِنْ قَبْلٍ يَسْقِطُونَ عَلَى الَّذِينَ كَفَرُوا فَإِنَّ  
جَاهَهُمْ مَاعَرَفُوا كَفَرُوا بِهِ فَأَغْنَاهُ اللَّهُ عَلَى الْكَافِرِينَ  
۝ بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ أَنَّ يَكُفُرُوا بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ  
بَعْدِ إِنْ يُنَزِّلَ اللَّهُ مِنْ قَضَائِهِ عَلَى مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ  
فَبَعْدَهُ وَيَعْصِيُّ عَلَى عَصْبَى وَلِلْكَافِرِينَ عَذَابٌ مُّهِينٌ  
۝ وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ إِنَّمَا يُمْنَعُكُمْ أَنْزَلَ اللَّهُ قَالُوا تُؤْمِنُ بِمَا أَنْزَلَ  
عَلَيْنَا وَيَكُفُرُونَ بِمَا وَرَأَوْا هُوَ أَحَقُّ مُصَدِّقًا لِمَا  
مَعَهُمْ قُلْ فَلَمَّا نَقْتُلُوكُمْ أَثْيَاءُ اللَّهِ مِنْ قَبْلِ إِنْ كُنْتُمْ  
مُّؤْمِنِينَ ۝ وَلَقَدْ جَاءَكُمْ مُوسَى بِالْبَيِّنَاتِ شَرِ  
۝ أَنَّهُنَّ دُنْجَنَ الْعِجْلَ مِنْ بَعْدِهِ وَأَنْتُمْ طَالِمُورُتُ ۝ وَإِذَا  
أَخْذَنَا مِثْقَلَكُمْ وَرَفَقَنَا فِي قُمُّ الْأَطْوَرِ حُدُودًا  
مَا آتَيْنَاكُمْ بِقُوَّةٍ وَأَسْمَعْنَاكُمْ سَعْيَنَا وَعَصَيْنَا  
وَأَشْرَبْوْا فِي قُلُوبِهِمُ الْعِجْلَ بِكُفْرِهِمْ قُلْ بِئْسَمَا  
يَأْمُرُكُمْ بِهِ إِيمَانُكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُّؤْمِنِينَ ۝

18. Caro loo geeyey caro, carada hore waa khilaafidooddii Nabi Muuse s.c.w iyo diiddadooda Nabi Ciise c.s. , tan labaadna waa diiddadooda Nabi muxammad s.c.w.

فَلِإِنْ كَانَتْ لَكُمُ الدَّارُ الْآخِرَةُ عِنْدَ اللَّهِ حَالَصَةً مِنْ  
دُوبِ النَّاسِ فَتَمَنُوا الْمَوْتَ إِنْ كَنْتُمْ صَادِقِينَ ٤٥  
يَسْتَحْيُونَ أَبْدًا مَا قَدَّمْتُ إِيَّاهُمْ وَاللَّهُ عَلَيْمٌ بِأَظْلَالِهِنَّ  
وَلَيَحِدَّنَّهُمْ أَحْرَصَ النَّاسَ عَلَى حَيَاةٍ وَمِنَ الَّذِينَ أَشْرَكُوا  
يُودُّ أَحَدُهُمْ لَوْلَمْ يَعْمَلْ أَلْفَ سَنَةٍ وَمَا هُوَ بِمُزَخرٍ جَهَنَّمَ  
الْعَذَابِ أَنْ يُعْمَرَ وَاللَّهُ بَصِيرٌ بِمَا يَعْمَلُونَ ٤٦ قُلْ مَنْ  
كَانَ عَدُوًّا لِجَهَنَّمَ فَإِنَّهُ مُنْتَهٌ إِلَيْهِ عَلَىٰ قَلْبِكَ بِإِذْنِ  
اللَّهِ مُصْدِقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ وَهُدُىٰ وَبُشْرَىٰ لِلْمُؤْمِنِينَ  
مَنْ كَانَ عَدُوًّا لِلَّهِ وَمَلَكَتِهِ وَرُسُلِهِ وَجَهَنَّمَ  
وَمِنْ كُلِّ فِيَنَّ اللَّهَ عَدُوٌّ لِكُفَّارِنَّ ٤٧ وَلَقَدْ أَنْزَلْنَا  
إِلَيْكَ مَا يَتَبَيَّنُتْ وَمَا يَكُفُّرُ بِهَا إِلَّا الْفَاسِقُونَ ٤٨  
أَوْ كُلَّمَا عَاهَدُوا عَهْدَنَّ بَذَنَّهُ فَرَيْقٌ مِنْهُمْ بِلَامَ كَفَرُهُمْ  
لَا يُؤْمِنُونَ ٤٩ وَلَمَّا جَاءَهُمْ رَسُولٌ مِنْ عِنْدَ اللَّهِ مُصَدِّقٌ  
لِمَا أَعْهَمُهُمْ بِنَكَذَبَرِيقٍ مِنَ الَّذِينَ أَنْوَا الْكِتَابَ  
كِتَابَ اللَّهِ وَرَأَهُ ظُهُورُهُمْ كَأَنَّهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ٥٠

١٥

Malaa'igtiisa iyo Rusushiisa iyo Jabriil iyo Miikaal, haddaba hubaal Allaah waa u cadow gaalada.

**99.** Oo xaqiij Waxaan kuu soo waxyoonnay xujoooyin cad, oo ma beeniyaan waxaan ahayn caasiyaasha.

**100.** Mar kasta oo ay ballan galaan, waxaa ka baxa koox ka mid ah? Mayee, badankoodu maba ay rumeynsna.

**101.** Oo markuu halkaa ugu yimid Rasuul ka yimid xagga Ilaahey oo xaqiijinaya waxa ay haystaan, aaya koox ka mid ahi kuwii la siiyey Kitaabka ka tuureen Kitaabka Ilaahey dhabarradooda gadaashood,sidii oo ayna waxba garaneyn.

**94.** Dheh: Haddii daarta Aakhilo Allaah agtii ah ay tahay mid idiin gaar ah oo ayan wax ku laheyin cid kale oo dadka ka mid ah, bal janta dhimasho haddaad tiihin run sheegayaal.

**95.** Mase jaman doonaan waligood, waxa ay geysteen gacmahoodu awgii. Oo Allaah waa ogsoon yahay gar ma qaatayaasha.

**96.** Oo hubaal waxaad heli doontaa inay yihiiin kuwa dadka ugu damcid badan noolaansho, (oo waxay ka sii damac badan yihiiin) weliba kuwaah ah mushrikiinta. Midkood walbaa oo ka mid ah wuxuu jecel yahay in la siyo cimri dherer gaara kun sano. Oo cimir dherer kama riixi doono in yarna ha ahaatee cadaabka uu mudan yahay. Oo Allaah wuuarkaa waxa ay falaan.

**97.** Dheh: Qofkii u ah cadow Jabriil-hubaal wuxuu ugu soo waxyooday qalbigaaga Idanka Ilaahey, isagoo xaqiijinaya wixii ka horreeyey, oo hanuun iyo war san u sida mu'miniinta.

**98.** Qofkii cadow u ah Allaah iyo

**102.** Oo waxay raaceen waxay shayaadiintu sixir shubayeen<sup>(19)</sup> waqtiga xukunkii Sulaymaan. Oo Sulaymaan ma ahayn gaal, laakiinse shayaadiinta baa gaalowday, waxay bareen dadka sixir iyo wixii lagu soo dejiyey labadii Malag ee Baabil, Haaruut iyo Maaruut, waliba labadaa cidna ma barin sixirka iyagoo horta ku yiraahdaa maahee, hubaal innagu waxaanu nahay imtixaan, sidaa awgeed ha gaaloobin. Waliba markaa dadku waxay ka barteen labadaa wax ay ku kala furi kareen nin iyo afadiis, oo kuma waxyeelleyn karaan cidna Isagoo Allaah idmo ma'ahee. Oo waxay barteen wax waxyeelleeyey oo aan wax tarin. Oo xaqiq waxay og yihiin kan iibsaday inaanu ku lahaan doonin wax saami wanaagsan ah Aakhirada. Oo xumaa qimahii ay ku iibiyeen nafahooda, haddii ay ogaan lahaayeen.

**103.** Oo hadday rumeyyaan, oo ka joogaan xumaha, abaalgudka Ilaahey baa u khayr badan, hadday ogaan lahaayeen.

**104.** Mu'miniintow! Ha orannina Raacinaa (na dhowr, macno kale oo xun se leh sida kii noogu xumaayow) ee waxaad tiraahdaan, «undurnaa (na sug oo aan macno kale lahayn) oo ahaada daacad wax maqla. Oo gaaladu waxay mudan cadaab xanuun badan

**105.** Kuwa rumeyn diida ee ka mid ah ehlu-Kitaabka iyo mushrikiintaba ma jecla in wax khayr ahi idiinkaga yimaado xagga Rabbigii. Oo Allaah wuxuu ugu doortaa si gaar ah Naxariistiisa kuu doono. Oo Allaah waa Rabbiga leh fadliga weyn.

وَاتَّبَعُوا مَا تَنَاهُواٰ الشَّيْطَنُ عَلَىٰ مُلَكِ سُلَيْمَانَ وَمَا كَفَرَ سُلَيْمَانُ وَلَكِنَّ الشَّيْطَنَ كَفَرَ وَأَعْلَمُوْتُ النَّاسَ أَسْحَرَ وَمَا أَنْزَلَ عَلَى الْمَلَكَيْنِ بِسَابِيلَ هَرُوتَ وَمَرْوَتَ وَمَا يَعْلَمُ لَهُمَا مِنْ أَحَدٍ حَقًّا يَقُولُ إِنَّمَا تَخْنُونَ فِتْنَةً قَلَّا تَكُفُّرُ فَيَعْلَمُوْتُ مِنْهُمَا مَا يُفْرِقُوْتُ بِهِ بَيْنَ الْمَرْءَ وَزَوْجِهِ وَمَا هُمْ بِصَارِئِنِ بِهِ مِنْ أَحَدٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ وَيَعْلَمُوْتُ مَا يَضْرُهُمْ وَلَا يَنْفَعُهُمْ وَلَقَدْ عَلِمْوُا لَهُنَّ أَشَرَّهُمْ مَالَهُ وَفِي الْآخِرَةِ مِنْ حَلْقَ وَلَيْسَ مَا شَرَّفُوهُ أَفَفَسَهُمْ لَوْكَأَوْلَأَعْلَمُوْتُ وَلَوْأَنَّهُمْ ءامَنُوا وَأَقْفَوُا لَمْ شُوْبَهُ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ خَيْرٌ لَوْكَأَوْلَأَعْلَمُوْتُ بِيَنِّيهَا الَّذِينَ ءامَنُوا لَا تَقُولُوا رَعْنَىٰ وَقُولُوا أَنْظَرْنَا وَأَسْمَعْوُا لِلْكَافِرِينَ عَذَابَ أَلِيمٍ مَّا يَوْدُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ وَلَا الْمُشْرِكِينَ أَنْ يُسْرَلَ عَلَيْكُمْ مِنْ خَيْرٍ مِنْ رَبِّكُمْ وَاللَّهُ يَعْلَمُ بِرَحْمَتِهِ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ دُوْلَفُضْلُ الْعَظِيمِ

<sup>19.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii u taga faal dhige wax sheega ama saaxir oo rumeysta waxa uu sheego waa qof ku gaaloobay waxa (Qur'aanka) lagu soo dejiyey Nabi Muxammad s.c.w." w.w. An-Nisaa'i

\* مَا نَسَخَ مِنْ ءَايَةٍ أُوْنِسَهَا إِنَّ يُخَيِّرُ مِنْهَا أَوْ مُشَاهِدًا  
 الْعَقْلَمَارَاتُ اللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٦﴾ إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى عَنِّ  
 اللَّهَ لَمَّا وَمَلَكَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ وَمَا لَكُمْ فِنْ دُونَ  
 اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ ﴿٧﴾ أَمَّرْتُ رِبِّيْدُونَ أَنْ تَسْكُنُ لَوْرَسُوْلَكُمْ  
 كَمَا سَلَّمَ مُوسَىٰ مِنْ قَبْلُ وَمَنْ يَتَبَدَّلُ إِلَّا كُفُّارٌ بِالْإِيمَانِ  
 فَقَدْ ضَلَّ سَوْأَةُ السَّبِيلِ ﴿٨﴾ وَدَكَبِيرٌ مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ  
 لَوَيْدُونَكُمْ مِنْ بَعْدِ إِيمَانِكُمْ كَفَارًا حَسَدًا  
 مِنْ عِنْدِ أَنفُسِهِمْ مِنْ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ الْحَقُّ فَاعْفُوا  
 وَاصْفُحُوا حَتَّىٰ يَأْتِيَ اللَّهُ بِالْمَفْرُوهَةِ إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ  
 قَدِيرٌ ﴿٩﴾ وَأَقِيمُوا الْأَصْلَوَةَ وَأَلْوَأُوا لِلرَّكُوعَ وَمَا نَقِمُوا  
 لِأَنفُسِكُمْ مِنْ خَيْرٍ يَحْدُوُهُ عِنْدَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ بِمَا عَمَلُونَ  
 بَصِيرٌ ﴿١٠﴾ وَقَاتُلُوا إِنْ يَتَحْلُلَ الْجَنَّةُ إِلَّا مَنْ كَانَ هُوَ  
 أَوْ صَدِرَ بِتَلَاقِ أَمَانَتِهِمْ قُلْ هَاتُوا بِرْهَنَتُكُمْ إِنْ كُنْتُمْ  
 صَدِيقِنَ ﴿١١﴾ بَلِّيْ مِنْ أَنْ شَرَعْتُ وَجْهَهُ لِلَّهِ وَهُوَ مُحِسِّنٌ فَلَهُ  
 أَجْرٌ، عِنْدَ رَبِّهِ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُرِيجٌ نُونٌ ﴿١٢﴾

**106.** Aayad kastoo aan nasakhno ama aan sababno in la illaabo, waxaanu keennaa mid ka khayr badan ama la mid ah. Miyaadan ogeyn inuu Allaah wax walba Karo?

**107.** Oo miyaadan ogeyn in Allaah leeyahay boqortooyada (runta ah ee) samooyinka iyo arlada, oo aydaan Lahayn Allaah sokoadi gacal iyo gargaare midna.

**108.** Mise ma waxaad rabtaan inaad su'aalo hor dhigtaan(20) Rasuulkiinna sidi Muuse horey loogu su'aalay. Oo qofkii qaataa iimaan darro halkii limaanka, wuxuu xaqqiil ka lumay jidka toosan.

**109.** In badan oo ka mid ah ehlul Kitaabka waxay jecel yihiin inay dib idiiinku soo ceshaan gaalnimo limaankiinna kaddib, xasad ay idiiin qabaan darteed, kaddib markuu u caddaaday Xaqa. Ee iska caifiya oo iska dhaafa, ilaa inta Allaah uu ka keeno Amarkiisa. Hubaal Allaah wax walba wuu Karaa.

**110.** Oo hagaajiya salaadda, oo bixiya Zakada, oo wax waliboo khayr ah aad u hormarisaan nafahiinna, Waxaad ka heli doontaan Allaah agtii. Hubaal Allaah waa Arkaa waxa aad fashaan.

**111.** Oo waxay yiraahdaan: Qofna ma geli doono Jannada aan aheyn mid ah Yuhuud ama Kirishtaan. taasi waa hididdiiladooda maran(21). Dheh: Keena caddayntiinna haddii aad tiihin run sheegayaal.

**112.** Haayoo! Qofkii isu dhiiba isagoo wada dhan Allaah oo isagu sama fale ah, wuxuu ka heleyaa abaalgudkiisa xagga Rabbigiis, oo cabsi ma qabi doonaan, mana murugoon doonaan.

**20.** Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Allaah wuu xaaraanshay muranka, maalka oo lagu baxsho wax xun oo reebban iyo su'aasha badan." W.w. Al-Bukhaari iyo Muslim.

**21.** Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Qofkii fala camal cibaado ah aan waafagsaney amarkayaga lagama aqbalayo." W.w. Al-Bukhaari.

**113.** Oo Yuhuudi waxay yiraahdaan: Kirishtaanku ma raacaan waxba wanaagsan; oo Kirishtaanku waxay yiraahdaan: Yuhuudi ma raacaan waxba wanaagsan; iyagoo akhriya isku hal kitaab. weliba sidaas oo kale bay yiraahdaan kuwaasi aan cilmiga lahayn, sida waxa ay yiraahdaan oo kale. Ee Allaah baa kala xukumi doona dheddooda Maalinta Qiyaamaha waxa ay isku khilaafsan yihiin.

**114.** Oo yaa ka gef badan kan u diida (dadka) Masaajidda Ilaahay, in lagu xuso Magaciisa, oo ku dadaala inuu kharaabiyo? Kuwani kuma habbooneyn inay soo galaan iyagoo cabsanaya ma'ahee. waxay la kulmi doonaan dulli adduunkan, oo waxay mudan doonaan cadaab weyn Aakhirada.

**115.** Oo Allaah baa iska leh bariga iyo galbeedkaba, sidaas awgeed meel kastoo Aad u jeedsataan waxaa jira Wejiga Ilaahay. Hubaal, Allaah waa deeq ballaarane, wax kasta Ogsoon.

**116.** Oo waxay yiraahdaan: Allaah wuxuu leeyahay wiil. Xurmo oo dhan Isaga baa iska leh. bal wuxuu leeyahay wax walba oo jira samooyinka iyo arlada, dhammaan Isaga bay adeecsan yihiin.

**117.** Waa unkaha samooyinka iyo arlada. Oo marka uu arrin gooyo, Wuxuu uun ku yiraahdaa, Ahow, markaa wuuba yayah.

**118.** Oo kuwa aan waxba ogeyni waxay yiraahdaan: Oo muxuu Allaah noola hadli waayey si toos ah ama calaamo ay noogu iman weydey? Weliba sidaas oo kale bay yiraahdeen kuwii ka horreeyay, wax la mid ah hadalkooda oo kale, Quluubtooda baa dhammaan ah kuwa isa shabbaha. Xaqiq Waxaan uga dhignay Aayadaha caddaan dad iyagu yaqiinsan.

**119.** Hubaal Wuxaan Annagu kula soo dirnay Xaqa, war san side iyo dige ahaan, oo waxna lagaama weydiin doono asxaabta dabka ololaya.

وَلَنْ تَرْضَى عَنْكَ أَلَيْهِمْ وَلَا الْأَنْصَارَى حَتَّى تَتَّبَعَ مِنْهُمْ قُلْ  
 إِنَّ هُدًى اللَّهِ هُوَ الْهُدَىٰ وَلِنَّ أَبْعَثَ أَهْوَاءَهُمْ بَعْدَ الَّذِي  
 جَاءَكُمْ مِنَ الْأَوْلَىٰ مَالَكَ مِنَ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ<sup>(١)</sup> الَّذِينَ  
 أَتَيْتُهُمُ الْكِتَابَ يَسْتَوْنَهُ حَقًّا تَلَاقِهِ فَوْلَيْكَ يُؤْمِنُونَ بِهِ وَمَنْ  
 يَكْفُرُ بِهِ فَأَوْلَيْكَ هُوَ لَخَسِرُونَ<sup>(٢)</sup> يَكْتُبُ إِسْرَئِيلَ أَذْكُرُ لِأَعْتَقْتَ  
 أَلَّىٰ أَنْعَمْتُ عَلَيْكُمْ وَأَنِّي فَضَلَّلْتُكُمْ عَلَى الْعَلَمَيْنَ<sup>(٣)</sup> وَاتَّقُوا رُومًا  
 لَا تَجْزِي نَفْسٌ عَنْ نَفْسٍ شَيْءًا وَلَا يُقْبَلُ مِنْهَا عَدْلٌ لَا تَنْعَمُ  
 شَفْعَةً وَلَا هُمْ يُنْصَرُونَ<sup>(٤)</sup> وَإِذْ أَبْتَلَى إِبْرَاهِيمَ رَبِّهِ بِكَمَتِ  
 فَأَتَمَّهُنْ قَالَ إِنِّي جَاعِلُكَ لِلنَّاسِ إِمَامًا قَالَ وَمَنْ ذُرِّيَّتِي قَالَ  
 لَا يَأْتِي عَهْدَى الظَّالَمِينَ<sup>(٥)</sup> وَإِذْ جَعَلْنَا الْبَيْتَ مَبَةً لِلنَّاسِ  
 وَأَمْنًا وَلَخِذْدُولًا مِنْ مَقْعَمِ إِبْرَاهِيمَ مَصْلَىٰ وَعَهْدَنَا إِلَى إِبْرَاهِيمَ  
 وَسَعْيَنَا إِنْ طَهَرَ أَيْقَنَنَا لِطَاطَافِينَ وَالْمُكَفِّفِينَ وَالْأَكْبَرُ  
 وَإِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمَ رَبِّي أَجْعَلْ هَذَا بَدْءًا إِمَانًا وَأَرْزُقْ أَهْلَهُ<sup>(٦)</sup>  
 مِنَ الشَّمْرَاتِ مَنْ ظَاهَرَ مِنْهُمْ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ قَالَ وَمَنْ كَفَرَ  
 فَأَمْرَعْهُ قَلِيلًا ثُمَّ أَصْطَرْهُ إِلَى عَذَابِ النَّارِ وَيَسِّعَ الْمُصِيرُ<sup>(٧)</sup>

١٩

120. Marnaba kaama raalli noqon doonaan Yuhuudda iyo Kirishtaankuba jeer aad raacdoo diintooda. Dheh: hubaal Hanuunka Ilahay, kaas baa ah hanuunka (xaqa ah). Oo haddaad raacdoo rabitaannadooda kaddib cilmiga kuu yimid, kuma lahaaan doontid xagga Ilahay gacal iyo gargaare midna.

121. Kuwa aanu siinnay Kitaabka baa u akhriya sida ay tahay in loo akhriyo<sup>(22)</sup>, kuwaan baa rumeysan. Oo qofkii rumeysan diida kuwan weeye kuwa ku sugan khasaaraha dhabti ahi.

122. Ilmahii Israa'iilow! Xusuusta Niemaddeydaan idiinku nicmeeyey iyo inaan idinka kor marshay ummadahii (jiray waqtigiiinni).

123. Oo iska jira Maalin nafi aanay wax u tarj doonin naf kale, oo madax furasho aan laga yeeli doonin, oo shafeeco aanay wax u tarj doonin oo aan loo gargaari doonin.

124. Oo (xusuusta) markuu Rabbigi ku imtixaanay Ibraahiim ereyo cayiman, markaasuu wada oofiyey. Wuxuu yiri: Hubaal Waxaan kaaga dhigayaay

Imaan dadka. (Ibraahiim) wuxuu yiri: Iyo qaar ka mid durriyadeyada Wuxuu yiri: Axdigeyga kuma jiraan gar ma qaataayaasha.

125. Oo (xusuusta) markaan ka dhignay Beydka rug ay dadku ugu soo qasdaan (xaj iyo cumro) iyo meel aamin ah. Oo ka dhigta meel lagu tukado maqaamkii Ibraahiim. Oo Waxaan xil saarnay Ibraahiim iyo Ismaaciil Annagoo leh: U daahiriya Beydkayga kuwa soo siyaarta, iyo kuwa ku ictikaafa, iyo kuwa rukuuca (oo) sujuuda.

126. Oo (xusuusta) markuu Ibraahiim yiri: Rabbiyow, ka dhig halkani maagalo nabad ah, oo ku galladeysa dadkeeda miro, kuwooda rumeysan Allaah iyo Maalinta dambeysa. Wuxuu yiri: oo qofkii rumeyn diida, waxaan u raaxeyn doonaa in yar, markaas kaddib waxaan ku dirqin doonaa cadaabka Naarta, oo ugu xun meel la ahaado.

22. Kuwa u akhriya Qur'aanka si xaq ah waa kuwa ku dhaqma waxa uu Qur'aanku faray, oo ka jooga waxa uu ka reebay oo u akhriya sida uu Allaah u soo dejiiyey."

**127.** Oo (xusuusta) markuu Ibraahim kor u qaadayey aasaaska Beydka iyo Ismaaciilba (iyagoo leh): Rabbiyow! Naga aqbal, hubaal Wuxaan Adigu tahay maqlaha wax kasta ee wax kasta Ogsoon.

**128.** Rabbiyow! Oo naga yeel labadayaba kuwo kuu hoggaansan, oo (ka soo saar) durriyaddayada ummad kuu hoggaansan, oo na tus habakayaga cibaadeysiga, oo noogu soo noqo (si naxariis leh). Hubaal Wuxaan Adigu tahay Kan u soo noqoshada badan (Naxariista), aad u Naxariista Badan.

**129.** Rabbiyow! Oo ka soo dhix bixi Rasuul ka mid ah oo u akhriya Aayadahaaga oo bara Kitaabka iyo Xikmadda oo daahiriya. Hubaal Wuxaan Adigu tahay Adkaadaha, Xakiimka ah.

**130.** Oo yaa isaga taga diinta Ibraahim, mid is caqli tira maahee? Oo hubaal Wuxaan ku dooranay adduunkan, oo hubaal Aakhirada wuxuu ka mid yahay kuwa wanaagsan.

**131.** (Xusuusta) markuu Rabbigii ku yiri: Hoggaansan, wuxuu yiri: Wuxaan u hoggaansanahay Rabbiga caalamka.

**132.** Oo isla arrinkaa buu Ibraahim ku faral yeelay ilmahiisi, oo (sidaa buu yeelay) Yacquub: Wiilashaydow! Hubaal Allaah wuxuu idin doortay diintan (Islaamka) ee ha dhimannina idinkoo aan Muslim ahayn.

**133.** Mise wuxaan aheydeen goob joog markay geeridu u timid Yacquub? Markuu ku yiri wiilashiisi: Maxaad caabudi doontaan aniga kaddib? Waxay yiraahdeen: Wuxaan caabudeynaa Ilahaahaaga iyo Ilahaabbayaashaa Ibraahim iyo Ismaaciil iyo Isxaaq, oo ilaha keliya ah, oo Isaga baanu u hoggaansanahay Muslimiin ahaan.

**134.** Tani waa ummad tagtagtay: Waxay heli doonaan waxay kasbadeen, oo idinkuna wuxaad heli doontaan wuxaad kasbataan. oo ma la idin weydiin doono inaad ka jawaab bixisaan waxay faleen.

وَقَالُوا كُوْنُوا هُوَدًا أَوْ نَصَارَىٰ تَهَتَّدُو وَقُلْ بَلْ مَلَّةٌ إِنَّ رَّهْبَعَمَ حَيْنِفَا وَمَا كَانَ مِنَ النَّاسِ كَيْنَ<sup>١٧٥</sup> قُولُوا إِمَّا بِاللهِ وَمَا أَنْزَلَ إِلَيْنَا وَمَا أَنْزَلَ إِلَيْنَاهُمْ وَأَسْعِيلَ وَاسْحَقَ وَعَقُوبَ وَالْأَسْبَاطَ وَمَا أَوْفَى مُوسَىٰ وَعِيسَىٰ وَمَا أَوْفَى النَّبِيُّونَ مِنْ رَّهِيمَ لَا فَرْقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِنْهُمْ وَخَنَّ لَهُ مُسْلِمُونَ<sup>١٧٦</sup> فَإِنَّ إِمَّا مَنْوَأٰ يُشَلِّ مَا مَاءَ أَمْتَشَ بِهِ فَقَدْ أَهْتَدَ وَإِنْ تَوَلَّ فَإِنَّمَا هُمْ فِي شَقَاقٍ فَسَيَكُهِي كَهُرَّ اللهُ وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ صَبْعَةُ اللهُ وَمَنْ أَحْسَنَ مِنْ اللهُ صَبْعَةُ وَخَنَّ لَهُ عَيْدُونَ<sup>١٧٧</sup> قُلْ لَمَّا خَاجُونَ فِي اللهِ وَهُوَ بَيْنَ أَرْبَكُمْ وَلَنَا أَعْمَدْنَا وَلَكُمْ أَعْمَدْكُمْ وَخَنَّ لَهُ مُحَلِّصُونَ<sup>١٧٨</sup> أَفَرَتَقُولُوتْ إِنَّ رَّهْبَعَمَ وَاسْعِيلَ وَاسْحَقَ وَعَقُوبَ وَالْأَسْبَاطَ كَانُوا هُوَدًا أَوْ نَصَارَىٰ قُلْ مَآئِشُمْ أَعْلَمُ لَهُ اللهُ وَمَنْ أَطْلَمُ مِنْ كَمْ شَهَدَهُ عِنْدَهُ مِنَ اللهِ وَمَا اللهُ يُغْفِل عَنِّا تَعْمَلُونَ<sup>١٧٩</sup> تِلْكَ أَمْتَهَ قَدْ دَخَلَتْ لَهَا مَا كَسَبَتْ وَلَكُمْ مَا كَسَبْتُمْ وَلَا تُسْلُمُونَ عَمَّا كَافَرُ يَعْمَلُونَ<sup>١٨٠</sup>

٢١

ahaan (diintiisa). Oo Isaga baanu caabudnaa.

**139.** Dheh: Ma waxaad nagala dooddan arrinka Ilahay Isagoo ah Rabbigayo iyo Rabbiginba? Oo waxaanu mudan doonaa acmaashayada, idinkuna waxaad mudan doontaan acmaashiinna. Oo innagu Isagaan daacad u nahay.

**140.** Mise waxaad leediihiin in Ibraahim iyo Ismaaciil iyo Isxaaq iyo Yacquub iyo Al-Asbaad (awlaaddii Yacquub ee Anbiyada noqday) ahaayeen Yuhuud ama Kirishtaan? Dheh: Ma idinka baa ogsoon mise Allaah? Oo yaa ka gef badan kan qariya marag uu ka heysto xagga Ilahay? Oo Allaah ma mooga waxa aad fashaan.

**141.** Tani waa ummad tagtay. Waxay mudan doonaan (abaalka) waxay kasabtay, idinkuna waxaad mudan doontaan waxa aad kasbataan. Oo la idinma weydiin doono inaad ka jawaab bixisaan waxay faleen.

**135.** Oo waxay yiraahdaan: Noqda Yuhuud ama Kirishtaan, waad hanuuni doontaane. Dheh: Mayee, (waxaanu raaceynaa) diinta Ibraahim, toosnähii, oo kama aanu mid aheyn mushrikiinta.

**136.** Dhaha: Waxaanu rumaysannahay Allaah iyo waxa naloo soo waxyooday iyo wixii loo soo waxyooday Ibraahim iyo Ismaaciil iyo Isxaaq iyo Yacquub iyo Al-Asbaad (awlaaddii Yacquub ee Anbiyada noqday), iyo wixii la siiyey Muuse iyo Ciise, iyo wixii laga siiyey Nabiyada xagga Rabbigood. Oo ma kala sooceyno axad ka mid ah, oo Isaga baan u hoggaansannahay Muslimiin ahaan.

**137.** Haddii haddaba ay rumeeyaan sida aad u rumaysan tiihin oo kale, xaqiiq waa kuwo hanuunsan, haddiise ay jeestaan haddaba waxay uun ku sugaran yihiin cinaad fog-marka Allaah baa kaaga filnaan doona. Oo Waa Isaga wax kasta Maqlaha, wax kasta Ogsoonaha ah.

**138.** Qaata Aslidda (diinta) Ilahay, oo yaa ka wanaagsan Allaah aslid

## J U S K A (2)

### Suuradda 2 Al-Baqarah

**142.** Maangaabyada ku dhex jira dadka waxay oran doonaan: Maxaa ka duway qibladdooda ay lahaaseen<sup>(23)</sup>? Dheh: Bariga iyo galbeedkaba waxaa iska leh oo keliya Allaah; Wuxuu ku hanuuniyaa qofkuu doono Jidka Toosan.

**143.** Oo sidaas baan idiinka dhignay ummad dhexdhexaad ah, si aad marag uga ahaataan dadka<sup>(24)</sup>, iyo (si) uu Rasuulku marag idiinka ahaado. Oo kama aanaan dhigin qiblad tan aad lahayd, waxaan ahayn inaan ku kala muujinno kan raaca Rasuulka iyo kan ciribiiisa rogta. Oo tani waxay aheyd hubaal wax ku adag marka laga reebo kuwa uu hanuuniyey Allaah. Oo Allaah ma aha mid ajar tiraya iimaankiinnii (salaadahiinnii hore). hubaal, Allaah dadka waa u Turid, iyo Naxariis Badan yahay.

**144.** Xaqiqi waan aragnaa ku gedgeddinta wejigaaga xagga samada. Ee Waxaan kuu jeedin dooonnaa Qiblad aad jecleysan doonto, ee u jeedi wajigaaga dhanka Masjidka xurmadda gaarka ah lihi (Kacbada), oo meel kastoo aad joogtaanba, u jeedsha wejiyadiinna xaggiisa. Oo kuwa la siiyey Kitaabka hubaal way og yihiin inuu yahay xaq ka yimid xagga Rabbigood. Oo Allaah ma mooga waxa aad fashaan.

**145.** Oo weliba haddaad u keento kuwa la siiyey kitaabka calaamo kasta ma ay raacayaan Qibladdaada, Adiguna ma ahid mid raacaya qibladdooda. Iyaguna ma aha kuwo raacaya Qibladda mid walbaa midka kale. Oo haddaad raacdoo rabitaannadooda liita kaddib cilmiga kuu yimid, markaa waxaad hubaal ka mid noqon doontaa geflowyada.

<sup>23.</sup> *Ka hor amarka ku soo arooray Ayadda 144 in Nabiga s.c.w. iyo asxaabitisa u feedsadaan Kacbada Makkah ku taal marka ay tukanayaan, waxay u jeedsan jireen Muslimiinta Qudus oo xagga waqooyiga ah. Hirgelinta beddelidda waxaa lagu xusay Ayadaha xiga.*

<sup>24.</sup> *Nabiga s.c.w. wuxuu yiri waxaa loo yeeri doonaa Niix c.s. Maalinta Qiyaamaha oo oran doona: Waa I kan oo adeeggaga ahay, khayr oo dhanna waa xaggaaga Rabbiyow. Allaah wuxuu oran doona : Ma gaarsiiyey Fartiinteydi? ummaddaadii? Wuxuu oran doona: Haah. Waxaa la weydii doonaa ummaddaadii: Miyu idin soob gaarsiiyey Fartiinteydi? Waxay ku jawaabi doonaan: myeem, noona iman wax dige ah. Allaah wuxuu ku oran doona Niix: Yaa haddaba kuu markhaati ah? Niix wuxuu oran doona: Muxammad iyo ummadiisa, markasay uga marag kacayaan inuu gaarsiiyey Fartiintii Ilaahey, Rasuulkuna s.c.w. idinku marag furi doonaa idinka, waana sidaas Qowlka Ilaahey : Waa si aad ugu ahaataan marag dadka, Rasuulkuna (Muxammad s.c.w.) ugu ahaado marag korkiinna. W.w. Al-Bukhaari*

الَّذِينَ أَتَيْنَاهُمُ الْكِتَابَ يَعْرُفُونَهُ كَمَا يَعْرُفُونَ أَنْتَ هُنَّ  
وَإِنَّ فِي قَاتِلِهِمْ لَيَكُنُونَ الْحَقَّ وَهُمْ يَعْلَمُونَ<sup>(١٤٣)</sup> الْحَقُّ  
مِنْ رَبِّكَ فَلَا تَكُونُنَّ مِنَ الْمُمْتَرِينَ<sup>(١٤٤)</sup> وَلِكُلِّ وِجْهَةٍ  
هُوَ مُولِيهَا فَاسْتَقِوْلُوا لِخَيْرِتِ أَيْنَ مَا تَكُونُوا يَاتِيْكُمْ مِنْ<sup>(١٤٥)</sup> اللَّهِ  
جَمِيعًا إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ<sup>(١٤٦)</sup> وَمِنْ حَيْثُ خَرَجْتَ  
فَوْلَ وَجْهَكَ شَطَرَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَإِنَّهُ لِلَّهِ<sup>(١٤٧)</sup> مِنْ رَبِّكَ  
وَمَا اللَّهُ يَعْلَمُ عَمَالَتَعْلَمُونَ<sup>(١٤٨)</sup> وَمِنْ حَيْثُ خَرَجْتَ فَوْلَ  
وَجْهَكَ شَطَرَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ وَحِيثُ مَا كُنْتُمْ فَوْلَوْا  
وُجُوهُكُمْ شَطَرَهُ وَلَعَلَّكُمْ لِلنَّاسِ عِلْمٌ كُمْ جُنْحَةٌ إِلَّا الَّذِينَ  
ظَلَمُوكُمْ ثُمَّ فَلَأَخْشُوْهُ وَأَخْشُوْنِي وَلَا تَرَأَيْتَ بِعَمَّيْكُمْ  
وَلَعَلَّكُمْ تَهَدُونَ<sup>(١٤٩)</sup> كَمَا أَرَسْلَنَا فِيْكُمْ رَسُولًا مِنْكُمْ يَتَّلَوْ  
عَيْنَكُمْ إِنَّنَا وَرِبَّكُمْ كَيْفَ يَعْلَمُ كُمْ الْكِتَابَ وَلِكُمْ  
وَيَعْلَمُكُمْ مَا تَمْرَكُونَ تَعْلَمُونَ<sup>(١٥٠)</sup> فَادْكُرُوهُ فِي آذِنَكُمْ  
وَأَشْكُرُوا لِي وَلَا تَكُنْ فُرُونَ<sup>(١٥١)</sup> يَا إِيْهَا الَّذِينَ آمَنُوا  
أَسْتَعِنُوْلَا بِصَبَرٍ وَالصَّلَاوَةِ إِنَّ اللَّهَ مَعَ الصَّابِرِينَ<sup>(١٥٢)</sup>

٢٣

**146.** Kuwa aanu siinnay Kitaabka waxay u gartaaan sida ay u gartaan wiilashooda. Oo hubaal koox ka mid ahi waxay xaqiq qariyaan xaga iyagoo ogsoon.

**147.** Xaqu wuxuu ka yimid Rabbigaa. Ee ha ka mid noqon shaki qabayaasha.

148. Oo mid walba wuxuu leeyahay jihio ay tahay inuu u jeesto. Ee u tartama sama falka. Meel kastoo aad joogtaan, Allaah wuu idin wada keeni doonaa idinkoo dhan. Hubaal Allaah wax walba wuu Karaa.

**149.** Oo meel kastoo aad ka soo baxdo, u jeedi wejigaaga xagga Masjidka xurmadda lihi (Kacbadha Makkah ku taal); oo hubaal waa xaq kaaga yimid xagga Rabbigaa, Oo Allaah ma mooga waxa aad fashaan.

**150.** Oo meel kasta aad ka soo baxdo, u jeedi wejigaaga jihada Masjidka Xurmadda gaarka ah lihi, oo meel kastoo aad joogtaan u jeediya wejijadiinna jihadiisa, si aanay dadku idiinku helin wax xujo ah kuwaa ka midka ah ee gar diidka ah moyee, ee ha ka baqina, ee iga baqa, waa si aan idiinku dhammeystiro Niemaddayda korkiinna, iyo si aad u hanuuntaan.

**151.** Waliba sida aan u soo dirnay dhexdiinna Rasuul idinka mid ah oo idii akhriya Aayadahayaga oo idin daahiriya, oo idin bara Kitaabka iyo Xikmadda, oo idin bara wax aydaan hore u aqoon.

**152.** Ee i xusa, waan idin xusi doonaaye<sup>(25)</sup>, oo ii mahad naqa oo ha iga abaal dhicina<sup>(26)</sup>.

**153.** Mu'miniintow! Kaalmaysta sabarka iyo salaadda. Hubaal! Allaah wuxuu la jiraa kuwa samir yeeshaa.

<sup>25.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Allaah kor ahaaye wuxuu yiri: Haddaad keli igu xusto, waan ku xusi si keli ah Nafsteeda, haddaad I xusto adigoo dad la joogana waxaan kugu xusi doonaan kulan ka khayr badan kiinna."

<sup>26.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Allaah wuxuu jecel yahay inay niemadda raadkeeda ka muuqato addoomahiisa."

**154.** Oo ha ka orannina kuwa lagu dilo jidka Ilaahey waa meyd; mayee way nool yihiin, laakiinse waydaan dareemeyn.

**155.** Oo waxaan hubaal idinku imtixaani doonaa wax xoogay cabsi ah iyo gaajo iyo nusqaamin maalka iyo nafaha iyo mirahaba ah, ee u bishaaree kuwa samir yeeshaa.

**156.** Kuwa marka ay ku dhacdo musiiboo, yiraahda: Hubaal Allaah baa na leh<sup>(27)</sup> oo innagu hubaal xaggiisaan u noqon doonaa.

**157.** Kuwaasi weeye kuwa ay korkooda yihiin barakoojin xagga Rabbigood iyo naxariis, oo kuwaas weeye kuwa hanuunsan.

**158.** Hubaal Saffaa iyo Marwa waxay ka mid yihiin calaamooyinka uu cayimay Allaah. Ee qofkii u soo Xajiyaa Beydka ama soo siyarta, ma jiro wax eed ah oo ka saarani inuu ku dawaafaa labadaa dhexdood<sup>(28)</sup>, oo qofkii iskiis u fala khayr badan, haddaba hubaal Allaah waa mahad naqe, wax kasta Ogsoon.

**159.** Hubaal kuwa qariya<sup>(29)</sup> xujoojinka cad iyo hanuunka aan soo waxyoonnay, kaddib markaan ugu caddeynay dadka Kitaabka, kuwani weeye kuwa uu Allaah nacladi doono, oo kuwaa wax naclada ay nacladi doonaan (sidoo kale).

**160.** Kuwa toobad keena maahee ee wanaagsanaada, oo si cad u muujiya (xaqa). Kuwani weeye kuwa aan ugu soo noqdo (si naxariis leh). Oo Anigu waxaan ahay midka u soo noqoshoda badan (naxariista), aadku u Naxariista Badan.

**161.** Hubaal kuwa rumeyn diida oo dhinti iyagoo gaalo ah, kuwan weeye kuwa ay korkooda tahay Nacaladda Ilaahey, iyo malaa'iga iyo dadka oo dhan.

**162.** Iyagoo ku dhix waaraaya, cadaabka lagama khafiifin doono, mana la siiin doono nafis.

**163.** Oo Ilaaхиинн waa Ilaaх keliya, ma jiro Ilaaх aan Isaga ahayn, waa Naxariista, Naxariista Badan.

<sup>27.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Waxaa la yaab leh xaalka mu'minka, hadduu kheyr helo wuu mahdiyyaa, waana u kheyr, haddii dhib ku dhacana wuu ku sabraa, waxayna u noqtootaa khayr. W.w. Al-Bukhaari

<sup>28.</sup> Mu'miniinta qaar waxay ka baqeenn inay arritani talay was ka mid ah dhaqankii jaahiliyyadda, markaasuu Allaah sheegay in sacyigu ka mid yahay acmaasha diinta, socodka iyo rucleynta toobbod jeer Safa iyo Marwa dhuxooda marka la xajinayo ama la cumrasyanayo, wuxuu ilaahay u sheegay inaysan dambi lahayn dawaafka labadaas buurood dhexdooda, waayo saxaabadaa qaarkood waxay ka dareemeen culays inay ku sacyiyan halkaas, waayo waxay ahayd meel uu ka taagnaa sanam, oo waagiijaa jaahiliyyadda lagu sacyin jirey, si looga suuliyoo dareenkaas buu ilaahay u soo dejiyey Aayaddaas.

<sup>29.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii la warsado cilmi oo qariya isagoo yaqaan, waxaa lagu xakamayn qiyamaha xakama dab ah".

إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَآخِذِ الْأَيَلِ وَالنَّهَارِ  
وَالْفَلَكِ أُتْمَى تَجْرِي فِي الْبَحْرِ يَمْاينَفُّ النَّاسُ وَمَا نَزَّلَ اللَّهُ  
مِنَ السَّمَاءِ مِنْ مَاءٍ فَلَاحِيَاهُ الْأَرْضُ بَعْدَ مَوْتِهَا وَبَثَّ فِيهَا  
مِنْ كُلِّ دَابَّةٍ وَصَرِيفِ الرِّيحِ وَأَسْحَابِ الْمُسْحَرِينَ  
الْسَّمَاءُ وَالْأَرْضُ لَا يَكُنْ لِقَوْنِي وَيَقْعُلُونَ<sup>١54</sup> وَمِنَ النَّاسِ  
مَنْ يَتَخَذُ مِنْ دُونِ اللَّهِ أَنَّهُ أَدَدٌ يُجْوِنُهُمْ كَحُبُّ اللَّهِ وَالَّذِينَ  
أَمْنَوْا شَدْحَنَةً لِلَّهِ وَلَوْيَكِ الْيَنِيْنَ ظَلَمُوا إِذْ رَوَنَ  
الْعَذَابَ أَنَّ الْقَوْنَةَ لِلَّهِ جَيْعَانَ أَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعَذَابِ<sup>١55</sup>  
إِذْ تَبَرَّ الْيَنِيْنَ أَتَبْعُوْمَ اِنَّ الْيَنِيْنَ أَتَبْعُوْمَ وَرَأَوْا الْعَذَابَ  
وَنَقَطَعَتْ بِهِمُ الْأَسْبَابُ<sup>١56</sup> وَقَالَ الْيَنِيْنَ أَتَبْعُوْمَ أَنَّ  
لَانَكَرَةً فَتَبَرَّمُهُمْ كَمَابَرَهُ وَلَمْنَاكَرَهُ كَرَهُهُمُ اللَّهُ  
أَعْمَلَهُمْ حَسَرَتْ عَلَيْهِمْ وَمَا هُمْ بِمُجْرِيْنَ مِنَ الْمَارِ<sup>١57</sup>  
يَتَأَيَّهَا النَّاسُ كَمُؤْمَنَّا فِي الْأَرْضِ حَلَلَأَ طَيْبَيَا وَلَا تَأَيُّهَا  
خُطُوبُ الشَّيْطَنِ إِنَّهُ لَكُمْ عَذَوْمَيْنِ<sup>١58</sup> إِنَّمَا يَأْمُرُكُمْ  
بِإِسْرَوْهُ وَلَفْحَتَهُ وَأَنْ تَقُولُوا عَلَى اللَّهِ مَا لَأَعْلَمُونَ<sup>١59</sup>

٢٥

**164.** Hubaal Abuurista samooyinka iyo arlada iyo is dhaafka habeenka iyo maalinta iyo doonyaha kula dhex maaxa badda wax anfaca dadka, iyo waxa uu Allaah ka soo shubo daruurga oo biyo ah ee uu ku nooleeyo arlada dhimashadeeda kaddib, oo uu ku fidsho gudaheeda (nooc) kasta ee nafleyda ah, iyo isbeddelka dabaylaho iyo daruuraha la sakhiray samooyinka iyo arlada dhexdooda, waxaa hubaal ugu sugan calaamooyin dad garasho leh.

**165.** Oo waxaa ka mid ah dadka kuwo yeesa Allaah sokadi wax ay la mid dhigaan ay u jecel yihiin sida ay u jecel yihiin Allaah. Kuwaase rumeysan ayaa ka daran oo xooggan jaceylka ay u hayaan Allaah. Oo hadday arki lahaayeen kuwaas gar ma qaataayaasha ahi, marka ay arkaan cadaabka, in xoog oo dhan uu leeyahay Allaah, iyo in Allaah ay Daran tahay Cadaabtiisu.

**166.** Marka kuwa la raacay ay dhaleecceyn doonaan kuwii raacay, oo ay arkaan cadaabka, oo uu kala go'o xiriirkoodii.

**167.** Oo kuwii raacay waxay oran doonaan: Haddii oo keliya aan lahaan laheyin dib u laabasho, markaa waxaan u dhaleeceyn lahayn sida ay noo dhaleeceeyeenba. Sidaas buu Allaah u tusi doonaan acmaashooda oo qoomammo daran ku ah. Oo iyagu kama soo bixi doonaan Naarta.

**168.** Dadow! Ka cuna xalaasha wanaagsan<sup>(30)</sup> waxa laga helo dhulka, oo ha raacina tallaabooyinka Shaydaanka. hubaal wuxuu idhiin yahay cadow iska cad.

**169.** Wuxuu uun idinku amraa xume iyo anshax darro, iyo inaad ka sheegtaan Allaah wax aydaan u lahayn aqoon.

**30.** Waxaa soo arooray in Sacad bin Abii Waqqas a.k.r. ku yiri Nabiga s.c.w.: Allaah ii bari inuu ducadayda aqbalo. Markaasuu Nabigu s.c.w. ku yiri: Ahow xalaal quute, markaas ducadaada waa la aqbalii.

**170.** Oo marka lagu yiraahdo, Raaca waxa uu Allaah soo waxyooday, waxay yiraahdaan: Mayee! Wuxaan raacnaa waxa aan ka hellay Aabbayaashayo. ma walow aanay aabbayaashood waxba garaneyn, oo ayan hanuunsanayn.

**171.** Oo mataalka gaalada waa sida mataalka mid u dhawaqaqaa waxaa aan maqlayn waxaan ahayn qaylo iyo dhawaaq. Dhego la', af la', oo indho la'. Marka wax ma fahmaan.

**172.** Mu'miniintow! Wax ka cuna waxyalaaha wanaagsan<sup>(31)</sup> oo aan idinku galladeysannay, oo u mahad naqa Allaah, hadduu Isagu yahay Kan aad caabuddaan.

**173.** Wuxuu uun idinka xaaraameeyay xoolaha iskood u dhinta, iyo dhiig, iyo hilib doofaar, iyo waxaa dushooda lagu xusay magac kale aan ahayn kaa Allaah. Qofkiise ay dani ku qabato isagoo aanan dooneyn oo aan xad gudbeyn, ma jiro wax dambi ah oo saaran korkiis. Hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**174.** Hubaal kuwa qariya wax ka mid ah Kitaabka uu Allaah soo waxyooday oo ku qaata qiiimo yar, kuwaas ma cunaan oo geliyaaan caloolahooda waxaan dab ahayn. Oo Allaah lama hadli doono Maalinta Qiyaamaha, mana daahirin doono, oo waxay mudan cadaab aad u xanuun badan.

**175.** Kuwan weeye kuwa iibsada habowga halkii Hanuunka, iyo cadaab halkii Dambi Dhaafka. Ee intee buu yahay adkeysigoodu ay ku qaabilaan Naar.

**176.** Kani waa inuu Allaah ku soo waxyooday Kitaabka xaq. Oo hubaal kuwa isku khilaafa Kitaabka waxay ku sugar yihiin cinaad aad u fog.

<sup>31</sup>. Xadiis wuxuu leeyahay: "Allaah wuu wanaagsan yahay, oo ma aqbalo waxaan ahayn wax xalaal lagu shaqeystey oo wanaagsan".

\* لَيْسَ الَّذِي أَنْ تُولُوا وَجُوهَكُمْ قِبْلَ الْمَسْرِقِ وَالْمَعْرِيبِ  
 وَلَكِنَّ الَّذِي مَنْ أَمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَكَةَ  
 وَالْكِتَابِ وَالْتَّبِيَّنِ وَعَاقِ الْمَالَ عَلَى حُبِّهِ دُوَيْ الْقَرْنَى وَالْبَشْرَى  
 وَالْمَسْكِينَ وَأَنْ السَّبِيلَ وَالسَّابِينَ وَفِي الرِّقَابِ وَأَقْامَ  
 الْصَّلَاةَ وَعَاقِ الرِّكْوَةَ وَالْمَلْوُفُونَ بِعَهْدِهِمْ إِذَا عَاهَدُوا  
 وَالصَّابِرِينَ فِي الْبُلْسَاءِ وَالضَّرَاءِ وَجِئَنَ أَبْلَاسٌ وَلَكِنَ الَّذِينَ  
 صَدَقُوا وَلَكِنَ هُمُ الْمُتَقْنَونَ <sup>(٤٤)</sup> وَإِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ  
 عَلَيْكُمُ الْيُقْصَاصُ فِي الْقَتْلِ لَكُمُ الْخَرْجُ وَالْعَبْدُ يَأْلَمُ وَالْأَنْتِي  
 يَا الْأَنْتِي فَمَنْ عَفَ لَهُ مِنْ أَخِيهِ شَيْءٍ فَاقْتَلْعَبْ يَا الْعَرْوَفَ وَادْعُهُ  
 إِلَيْهِ يَا حَسْنَ ذَلِكَ تَحْكِيفٌ مِنْ رَبِّكَ وَرَحْمَةً فَمَنْ إِنْ دَعَ  
 بَعْدَ ذَلِكَ فَلَهُ عَذَابُ الْيَمِّ <sup>(٤٥)</sup> وَلَكُمْ فِي الْفُصَاصِ حَيَاةٌ يَأْتُونَ  
 الْأَكْبَرَ لَعَلَّكُمْ تَسْقُوتُ <sup>(٤٦)</sup> كُتِبَ عَلَيْكُمْ إِذَا حَاضَرَ  
 أَحَدُكُمُ الْمَوْتُ إِنْ تَرَكَ خِيرًا الْوَصِيَّةُ لِوَلِيِّ الْيَمِّ وَالْأَقْرَبَينَ  
 يَا الْمَعْرُوفَ حَقًا عَلَى الْمُتَّقِينَ <sup>(٤٧)</sup> فَنَّ بَدَلَهُ بَعْدَ مَا سَمِعَهُ  
 فَإِنَّمَا إِنْتُمْ عَلَى الَّذِينَ يُبَدِّلُونَهُ وَإِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ عَلَيْهِ <sup>(٤٨)</sup>

٢٧

**177.** Ma aha samahu inaad u jeedisaan wejyadiinna bariga iyo galbeedka; laakiinse waxaa sama ah inuu qofku rumeysan yahay Allaah iyo Maalinta dambeysa iyo Malaa'igta iyo Kitaabka iyo Nabiyada, oo siiya maalka isagoo jecel<sup>(32)</sup> kuwa qaraabada ah iyo agoomaha iyo masaakiinta iyo musaafirka (go'doonsan), iyo kuwa wax weydiista, iyo ku xoreynta addoomaha, oo hagaajiya salaadda, oo bixiya Sakada, oo oofiya ballantooda marka ay ballan galaan, oo samir yeeshaa waqtiga dhibka iyo qaxarka iyo waqtiga dagaalka Kuwan weeye kuwa ay runta ka tahay, oo kuwan weeye kuwa Alle ka cabsada ee iska jira (xumaha).

**178.** Mu'miniintow! Waxaa la idhiin qoray Qisaas xagga dilalka, xorka xor, addoonkana addoon, dheddigtana dheddig. Qofkiise laga siiyo cafis xagga walaalki (lagu tacaddiyey) markaa waa u raacasho (diyo) si gar ah, oo waa in qimaha magta loogu gudo si wanaagsan. Kani waa fududeyn iyo naxariis xagga Rabbigii ah. Ee qofkii xadgudbaa intaas kaddib, wuxuu mudan doonaa cadaab aad u xanuun badan.

**179.** Oo waxaa idiinku sugan nolol xeerka dhaawac simidda dadka wax garadkow, si aad isu ilaalisaan.

**180.** Dardaaran baa la idinku waajibiyey<sup>(33)</sup> markay geeri ku soo dhowaato midkiin hadduu ka tagayo maal uu u dardaraamo labada waalid iyo qaraabada xigta si la yaqaan ah. Waa xil saaran kuwa Alle ka cabsada ee iska jira<sup>(34)</sup>.

**181.** Ee Qofkii beddela inta uu maqlay kaddib, dambigeedu markaa wuxuu saaran yahay oo keliya kuwa beddela. hubaal Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogssoon.

<sup>32.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Sadaqo waxaa u fiican taad bixiso adigoo fayow, xoolo yar, rajeyn hodantinnimo, ka cabsan faqri". W.W. Al-Xaakim.

<sup>33.</sup> Dardaaran kaa waa inaysan dhaafin seddex maaleedoo meel maalka,

<sup>34.</sup> Aayaddanna lama xirrito warasada, waayo waxaa lagu nasakhay Aayadda dhaxalka ee Suuradda An-Nisaa Aayadaha 11-12.

**182.** Qofkiise uga cabsada eex ama dambi dardaaramaha ee ka sameeyaa heshii<sup>(35)</sup> qolooyinkaa dheddooda oo wax hagaajiya, ma saarna dambi korkiisa. hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**183.** Mu'miniintow! Waxaa la idinku faral yeelay soon<sup>(36)</sup>, sidii loogu faral yeelayba kuwii idinka horreeyay, si aad isaga jirtaan (xumaha).

184. Maalmo tirsan, ee qofkii idinka mid ah ee buka ama safar ah, markaa waxaa saaran (inuu soomo) isla tiradii (maalmahii uusan soomin oo uu gudo) maalmo kale. oo kuwaa aan awoodin<sup>(37)</sup> waxaa saaran fidyo ah inay quudiyaan miskiin<sup>(38)</sup>. Ee qofkii iskii u falaa khayr si wanaagsan, isaga bay u roon tahay. Oo inaad soontaan baa idiin khayr badan haddaad og tiihiin.

**185.** Bisha Ramadaan waa kaasi dhexdiisa Qur'aanka la soo waxyooday, hanuun u ah dadka iyo xujoojinka cad ee leh hanuunka iyo kala saaridda. ee qofkii idinka mid ah ee jooga bisha waa inuu soomo inta lagu jiro, oo qofkii buka ama safar ah waxaa saaran isla tiradii (maalmahii uusan soomin oo uu gudo) maalmo kale. Allaah wuxuu idin la rabaa fudayd, oo idinlama rabo culays, oo (wuxuu rabaa) inaad dhammeystirtaan tirada (maalmaha) iyo inaad xurmo weyneysaan Allaah inuu idin hanuuniyey darteed, iyo inaad mahad naqdaan.

**186.** Oo markay addoomahaygu i kaa weydiyaan, haddaba Waxaan hubaal Anigu ahay mid aad u dhow, waxaan ajiibaa baryada baryootamaha markuu i baryo. Marka waa inay ajiibaan baaqeyga oo i rumeyyaan, si ay u hanuunaan.

فَمَنْ خَافَ مِنْ مُّوْصِيْجَنَّا قَاتِلَهَا فَاصْلَحَ بَيْنَهُمْ فَلَا إِشْعَرَ  
عَلَيْهِ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٧﴾ يَتَأْلِمُهَا الَّذِينَ مَا مُؤْكِتُبَ  
عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ  
لَعَلَّكُمْ تَتَعَوَّنُتَ ﴿١٨﴾ أَيَّامًا مَعْدُودَاتٍ فَمَنْ كَانَ  
مِنْكُمْ مُّرِضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَيَعْدُهُ مِنْ أَيَّامٍ أُخْرَ وَعَلَى  
الَّذِينَ بُطِّيقُونَهُ فِي دِيَّةٍ طَعَامٌ مُسْكِنٌ فَمَنْ تَطَعَّنَعِيرًا  
فَهُوَ خَبَرٌ لَّهُ وَإِنَّ تَصُومُوا خَيْرٌ لَّكُمْ إِنْ كَثُرْتُمْ تَعْلَمُونَ  
شَهْرُ رَمَضَانَ الَّذِي أُنْزِلَ فِيهِ الْقُرْآنُ هُدًى لِلنَّاسِ  
وَبِيَتَتِ مِنَ الْهَدَىٰ وَالْفُرْقَانِ فَمَنْ شَهَدَ مِنْكُمْ  
الشَّهْرَ فَلَيُصْمِمَهُ وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعَدَهُ  
مِنْ أَيَّامٍ أُخْرَ بِرِيدُ اللَّهِ بِكُمُ الْيُسُرُ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ  
الْعُسُرَ وَلَكُمُ الْأَعْدَةُ وَلَا تُكَبِّرُوا اللَّهَ عَلَى مَا  
هَدَدَكُمْ وَلَا عَلَيْكُمْ شَكَرُونَ ﴿١٩﴾ وَإِذَا سَأَلَكُ  
عَبْدَهُ عَنِّي فَإِنِّي قَرِيبٌ أَحِبُّ دَعْوَةَ الْدَّاعِ إِذَا دَعَنِي  
فَلَيُسْتَحِبُّوْلِي وَلَيُؤْمِنُوا بِلَعْنَاهُمْ يَرْسُدُونَ

٢٨

<sup>35.</sup> Hagaajinta iyo sama ka talinta Aayaddu xustay waa amar in dardaarmaha uu ku caddaalad falo dardaarkiisa si waafaqsan xuduudda sharciga.

<sup>36.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii u sooma bisha Ramadaan iimaan qab iyo ajar dalab, waxaa loo dhaafaa wixii horay uga dhacay oo dambivo (yar yar) ah".

<sup>37.</sup> Sida qofka buka ama kuwa da'a ah iyo haweeda uurka leh iyo tan ilmo nuujineysa.

<sup>38.</sup> Inuu quudiyo miskiin maalin walba uu afuro.

أَجْلَ لَكُمْ نَيْلَةَ الصِّيَامِ الرَّفِثُ إِلَى سَاءِ كُمْ هُنَّ  
 لِبَاسٌ لَكُمْ وَأَنْتُمْ لِبَاسٌ لَهُنَّ عِلْمَ اللَّهِ أَنَّكُمْ كُنْتُمْ  
 تَخْتَافُونَ أَنْفُسَكُمْ فَتَابَ عَلَيْكُمْ وَعَفَانَعْنَمْ فَاقْنَعَ  
 بَشِّرُوهُنَّ وَأَتَبْعَوْمَاكَنَتَ اللَّهُ كُمْ وَكَلَوْا وَأَشَرَوْا  
 حَقَّيَّبَنَ لَكُمُ الْحَيْطُ الْأَبْيَضُ مِنَ الْمَجِيطِ الْأَسْوَدِ مِنَ  
 الْفَجَرِ شَمَّتَمُوا الصِّيَامَ إِلَى الْيَلَّ وَلَا تُبَشِّرُوهُنَّ وَأَنْتُمْ  
 عَكْفُونَ فِي الْمَسَجِدِ تَلْكَ حُدُودُ اللَّهِ فَلَا تَقْرَبُوهَا ذَلِكَ  
 يَبْيَنَ اللَّهُ عَلَيْتُهُ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَفَوَّتُونَ ﴿١٨﴾ وَلَا تَأْكُلُوا  
 أَمْوَالَكُمْ بَيْسِكُمْ بِالْبَطْلِ رَشَدُ لَوْبَاهَا إِلَى الْحَكَامِ  
 لِتَأْكُلُوهُ فِي قَامَنْ أَمْوَالَ النَّاسِ بِالْإِثْمِ وَأَنْتُمْ تَعْلَمُونَ  
 ﴿١٩﴾ \* يَسْتَأْنُوكُمْ عَنِ الْأَهْلَةِ قُلْ هُنْ مَوْقِيْتُ لِلنَّاسِ وَلِلْجَنَّ  
 وَلَيْسَ الْإِرْبَانَ تَأْوِلُ الْبَيُوتِ مِنْ ظُهُورِهَا وَلَيْسَ الْإِرْبَانَ  
 مِنْ آتَقَنْ وَلَوْا الْبَيُوتِ مِنْ أَبُوبِهَا وَآتَقَنْ اللَّهَ  
 لَعَلَّكُمْ تُشْلُحُونَ ﴿٢٠﴾ وَقَنْتَلُونَ فِي سَيْلِ اللَّهِ الْذَّبَانِ  
 يُقْنَتُلُونَ كُمْ وَلَا تَعْتَدُ دُقَانْ اللَّهَ لَا يُجْبِي الْمُعْتَدِينَ  
 ﴿٢١﴾ \*

٢٩

loo cayimay dadka iyo xajka. Oo ma aha samahu inaad guryaha ka soo gashaan duleedkooda<sup>40</sup>, waxaase sama ah in qofku iska jiro (xumaha), oo ka gala guryaha albaabbadooda, oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah si aad u liibaantaan.

**190.** Oo kula dagaallama Jidka Ilaahey kuwa idinla dagaallama, oo ha xad- gudbina. Hubaal Allaah ma jecla xad gudbayaasha.

**187.** Waxaa la idiin banneeyay inaad u galmootaan xaasakiinna habeenka soonka. Waxay idin yihii hu', oo idinkuna hu' baad u tiihin. Allaah waa uu ogaa inaad khiyaamayseen<sup>(39)</sup> nafahiinna, marka wuu idin soo noqday (si naxariis leh) oo idinka cafiyey (oo qaaday culeyskan). Ee haatan la xiriira iyaga oo doona waxa Allaah idiin qaddaray, oo cuna oo cabba ilaa caddaanka maalintu ka soocmo madowga habeenka waabbarkii, markaas dhammeystira soonka ilaa habeenka. Oo ha u tegina idinkoo ku jira Ictikaaf masaajidda gudahooda. Kuwani waa xudduudaha (uu dhigay) Allaah ee ha u dhowaanina. Sidaas buu Allaah ugu cadddeeyaa Aayadihiisa dadka si ay isaga jiraan (xumaha).

**188.** Oo ha ku cunina maalkiinna dhexdiinna si xaq darro ah, hana ku doonina inaad ugu dhowaataan xukaamta si aad ugu cuntaan qayb ka mid ah maalka dadka dambi idinkoo ogsoon.

**189.** Waxay wax kaa weydiyaan Bilaha dhasha. Dheh: Waa waqtio

39. Intayan soo degin Aayaddan, galmeda ninka iyo naagtiiisa ma bannaaneyn habeenada ka horreeya maalinta la soomayo. Qaarkood way ku adkaatay inay ka joogaan xaasakioda oo si qarsoodi ah u caasiyen, mase khyiamayn Allaah.

40. Waagii jaahiliyadda qofka u xarman xajka wuxuu ka soo galii jirey guriga duleedka iyo halka dambe, oo kama soo geli jirin horay, markaaasay asxaabtii wax ka weydiyeen taasi Rasuulkii Ilaahey, markaaasay soo degtay Aayaddan.

191. Oo ku dila meeshaad ka heshaanba, oo ka saara meeshay idinka saareenba. Oo fidnada baa ka daran dilka Oo ha kula dagaal gelina Masjidka Xurmadda gaarka ah lihi agtiisa in maahee ay iyugu (marka hore) idinkula dagaalaan. Haddiise ay idinkula dagaallamaan la dagaallama. Waa sidaas abaal marinta gaaladuye.

192. Haddiise ay ka joogsadaan, haddaba hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis badan.

193. Oo la dagaallama si ayna u jirin wax dambe oo fidmo ahi, oo Diintu u ahaato tan Allaah oo keliya. Oo hadday ka joogsadaan, markaa waa inaan colaad loo qaadin waxaan ahayn gardaroolayaasha.

194. Bisha xurmadda gaarka ahi leh waxay u go'daa bisha xurmadda gaarka ah leh, oo dhammaan waxyalahu xurmadda gaarka ahi lihina waxaa jira qaunuunka dhaawac simidda, ee qofkii idiin ku soo xadgudba, idinkuna ku xadgudba in la mid ah intii uu idinku xadgudbay<sup>(41)</sup>. Oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah, oo ogaada inuu Allaah la jiro kuwa iska jira (xumaha).

195. Oo wax ku bixiya jidka Ilaahay, oo ha isugu tuurina gacamahiinna tahluko, oo u sama fala (dadka); hubaal Allaah wuu jecel yahay sama falayaasha.

196. Oo u dhammeystira Xajka<sup>(42)</sup> iyo Cumrada Allaah darti. Haddiise la idinka xannibo (dhammeystirkooda), gowraca Hadyi<sup>(43)</sup> waxaa heli kartaan ah, oo ha xiirina madaxyadiinna jeer hadyigu gaaro meesha gowraciisa. Qofkiise idinka mid ah ee buka ama ka qaba cudur ooqada madaxiisa (oo xiira timahiisa isagoo xarman), waxaa saaran fidyo ah soomid<sup>(44)</sup> ama bixin sadaqo<sup>(45)</sup> ama neef gowracid<sup>(46)</sup>, markaadse nabad tagtaan, Qofkii ka faa'ideysta inuu ku =

41. Haddii la soo wareero muslimiinta bilaha leh xurmadda gaarka ah ee dagaalku caaggan yahay markaas waxaa u bannaan inay ka hortagaan weeraarka isla bishaa.

42. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii xajya isagoo aan xajkiisa kula iman galmo iyo fusug, wuxuu noqdaa isagoo dambi ka ah sida maalintii ay hooyadi dhashay." W.W. Al-Bukhaari iyo Muslim

43. Hadyi waxaa la yiraahdaa waxa la gowraco si loogu kabو ka tegista waajib ka mid ah waajibyada xajka, ama bixin kaffaaraad haddii aad fasho mid ka mid ah waxyalahu ku caaggan xajka.

44. Soomid seddex maal mood

45. Quodin lix miskuu,

46. Gowrac neef ari ah ama ido.

الْحَجَّ أَشْهُرٌ تَعْلُومُكُمْ فَمَنْ فَرَضَ فِيهِنَّ الْحَجَّ فَلَا  
رَفَثٌ وَلَا فُسُوقٌ وَلَا جِدَالٌ فِي الْحَجَّ وَمَا تَعْلَمُوا مِنْ  
خَيْرٍ يَعْلَمُهُ اللَّهُ وَمَا تَرَدُوا فَإِنَّ خَيْرَ الرِّزْقِ الْتَّقْوَى  
وَأَتَّقُونَ يَأْتُ أُولَئِكُمْ لِيَسْ عَلَيْهِمْ حُمْجَاحٌ  
أَنْ تَبْتَغُوا قَصْلَانِ مِنْ رَبِّكُمْ فَإِذَا أَفْضَلْتُمْ مِنْ  
عَرْفَاتٍ فَأَذْكُرُوا اللَّهَ عِنْدَ الْمَسْعَرِ الْحَرَامِ  
وَأَذْكُرُوهُ كَمَا هَدَنَاكُمْ وَإِنْ كَثُرْتُمْ مِنْ قَبْلِهِ  
لَمْ يَنْأِ الظَّالِمُونَ لِمَرْأِيَفِهِمُونَ مِنْ حَيْثُ أَفَاضُ  
النَّاسُ وَأَسْتَعْفِرُ اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَّحِيمٌ  
فَإِذَا أَقْضَيْتُمْ مَنِسَكَكُمْ فَذَكُرُوا اللَّهَ كَذَكْرَكُمْ  
عَابِرَاتُكُمْ أَوْ شَدَّذُكُرْرَافِينَ النَّاسُ مَنْ يَقُولُ  
رَبِّنَا إِنَّا إِنَّا فِي الدُّنْيَا وَمَا لَهُ فِي الْآخِرَةِ مِنْ حَلَقَى  
وَمَنْ هُمْ مَنْ يَقُولُ رَبِّنَا إِنَّا إِنَّا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةٌ  
وَفِي الْآخِرَةِ حَسَنَةٌ وَقَنَا عَادَابَ النَّارِ أُولَئِكَ  
لَهُمْ نَصِيبٌ وَمَمَّا كَسَبُوا وَاللَّهُ سَرِيعُ الْحِسَابِ

٢١

= daraa cumrada xaj, waa inuu gowraco hadyi wixii uu heli karo ah, qofkiise aan heli karin (hadyi), waa inuu soomo seddex maalmood inta lagu jiro Xajka iyo toddobo maalmood marka aad laabataan, intani waa toban buuxda. Arrinkani wuxuu ku gaar yahay midka isagu aanay reerkiisu deggeneyn Masjidka Xaramka. Oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah. oo ogaada in Allaah ciqaabitii daran tahay.

**197.** Xajka (waxaa la gutaa) bilaha la yaqaan<sup>(47)</sup>. Ee qofki goosta inuu guto Xaj dhexdooda markaa waa inaysan ka dhicin galmoode<sup>(48)</sup> iyo macsi iyo muran midna Xajka gudahiisa. Oo wax kastoo khayr ah oo aad fashaan, Allaah wuu ogsoon yahay, ee sahay qaata, hubaal sahyada ugu wanaagsan waa qofka oo iska ilasha (xumaha). Oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah, dadka wax garadka ahow!

**198.** Ma aha korkiinna wax eed ah inaad doonataan Deeqda Rabbigii<sup>(49)</sup>. Ee markaad ka soo dareertaan Carafaat, markaa ku xusa Allaah Mashcaril-Xaramka (Muzdalifa) agtiisa. Oo xusa sidii uu idii hanuuniyeba, inkastoo tan ka hor ah eydeen kuwo ka mid ah kuwa lunsan.

**199.** Markaas ka dareera meesha uu dadku ka dareero, oo weydiista dambi dhaaf Ilaahey, hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**200.** Oo markaad dhammeysataan cibaadooyinkiinna, misna Xusa Allaah sida aad u xustaan aabbayaashiin<sup>(50)</sup> bal xusid ka badan<sup>(51)</sup>. Dadkase waxaa ka mid ah kuwo yiraahda: Rabbiyow! Wax nagu sii adduunka oo aan ku lahaan doonin Aakhirada qaybna.

**201.** Oo waxaa ka mid ah kuwo yiraahda: Rabbiyow! Nagu sii wanaag adduunka , iyo wanaag Aakhirada, oo naga badbaadi cadaabka Naarta.

**202.** Kuwaasi waxay mudan qayb (tooda) ka mid ah waxay kasbadeen. Oo Allaah wuu ku Dhakhso Badan yahay xisaabta.

47. Bilaha xajka waa bisha Shawwaal, Dul Qadah iyo Xajka.

48. Ar-Rafath waxaa loola jeedaa hadalka dareenka shahwada kiciya ama af lagaaddada ah ama galmaada.

49. Ku sameynta ganacsi xajka.

50. Waxaa caado u ahayd Carabta kaddib gudashada Xajka xuska awoowooyinkood, markii ay soo degtay Aayaddan waxaa lagu beddelay caadadan xusidda Ilaahey.

51. Waxaa loola jeedaa dikirga halkan qowlka Allaahu akbar, iyo qowlka Subxaanallaah iyo qowlka Al-Xamdu Lillaah, iwm

**203.** Oo xusa Allaah inta lagu jiro maalmaha tirsan<sup>(52)</sup>; marka qofkii degdega si uu u tago labo maalmoood gudahood, ma jiro wax dambi ah oo saaran, oo qofkii dib u hara ma jiro wax dambi ah oo saaran, (tani) waxaa iska leh kan isagu iska jira (xumaha), oo dhowra (xiilka uu idin saaray) Allaah, oo ogaada in idinku xaggiisa la idiin soo wada kulmin doono.

**204.** Oo waxaa ka mid ah dadka mid uu ku cajab gelin hadalkisu noloshan adduunka, oo u marag gashada Allaah waxa ku jira qalbigiisa, isagoo waliba ah kan u muranka badan colka<sup>(53)</sup>.

**205.** Oo markuu dhabarka jeediyo, wuxuu ku socdaa arlada si uu u fasaahadiyo oo u baabbi'yo tallaalka iyo taranka, Oo Allaah ma jecla fasahaadka.

**206.** Oo marka lagu yiraahdo, iska jir (Ciqaabka) Ilaahey; qabweyni u geysa dambi. Ee Naar baa ku filan isaga oo iyadaa ugu xun gogol la dhinac dhigo.

**207.** Oo waxaa ka mid ah dadka mid iibsha naftiisa isagoo doonaya Raalli gelinta Ilaahey<sup>(54)</sup>, Oo Allaah wuu u Turid Badan yahay addoomaha.

**208.** Mu'miniintow! U soo gala Islaamka waaxid iyo wadarba oo ha raacina tallaabooyinka Shadyaanka. Hubaal! Wuxuu idiin yahay cadow iska cad.

**209.** Haddiise aad sid-bataan kaddib iyadoo ay xujooyin cad idiin yimaadeen, markaa ogaada inuu Allaah yahay Adkaade, xakiim ah.

**210.** Ma waxay suaan waxaan ahayn inuu Allaah ugu yimaado daruuro hogol ah iyo malaa'igntuba? oo arrinka (horey) baa loo gooyey. Oo xagga Allaah baa loo celiyaa umuraha oo idil.

\* وَادْكُرُو اللَّهَ فِي أَيَّامٍ مَعْدُودَاتٍ فَمَنْ تَعَجَّلَ فِي  
يَوْمَيْنِ فَلَا إِشْرَاعَ لِهِ وَمَنْ تَأَخَّرَ فَلَا إِشْرَاعَ لِهِ لِمَنْ  
أَتَقَىٰ وَاتَّقُوا اللَّهَ وَاعْلَمُوا أَنَّكُمْ إِلَيْهِ تُحْشَرُونَ  
وَمَنْ مِنَ النَّاسِ مَنْ يُعْجِزُكَ فَوْلَهُ فِي الْحَيَاةِ الْدُّنْيَا  
وَيُشَهِّدُ اللَّهُ عَلَىٰ مَا فِي قَلْبِهِ وَهُوَ أَلَّا يُخْسِرُ  
وَإِذَا تَوَلَّ مَنْ سَعَ فِي الْأَرْضِ لِيُفْسِدَ فِيهَا وَمُهَاجِرَةً  
وَالنَّسْلُ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ الْفَسَادَ وَإِذَا قِيلَ لَهُ أَنْقَلَهُ  
أَخْدَنَةَ الْعَرَةِ بِالْإِثْمِ فَحَسِبَهُ بِجَهَنَّمْ وَلَيَسْ  
الْمَهَادُ وَمِنَ النَّاسِ مَنْ يَتَّسِرُّ بِنَفْسِهِ أَبْتَغِيَ  
مَرْضَاتِ اللَّهِ وَأَنَّ اللَّهَ رَءُوفٌ بِالْعَبْدِ يَتَّابِعُهَا الظَّنِينَ  
إِمَسْوَادًا دُخُولُ فَالسَّلَمِ كَافَّةً وَلَا تَتَّبِعُوا حَطَوْتَ  
أَلَّا شَيْطَلَنَ إِلَّاهٌ لَكُمْ عَدُوٌّ مُّنِينٌ فَإِنَّ رَلَّتُمْ مِنْ بَعْدِ  
مَاجَاءَكُمُ الْبَيِّنَاتِ فَأَعْلَمُو أَنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ  
هُلْ يَظْرُونَ إِلَّا أَنْ يَأْتِيَهُمُ اللَّهُ فِي ظُلْلٍ مِنَ الْعَمَامِ  
وَالْمَلَائِكَةُ وَقِصَّى الْأَمْرِ وَلِلَّهِ تُرْجَعُ الْأُمُورُ

٢٢

<sup>52.</sup> *Maalmo tirsan waa seddexda maalmoood ee xiga maalinta Ciidda Adxada waana maalinta kow iyo tobnaad iyo maalinta labo iyo tobnaad iyo maalinta seddex iyo tobnaad, waxaana loo yaqaan ayamu tashriiq maalmaha hilba waradka.*

<sup>53.</sup> *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Allaah wuxuu dadka u neebka yahay qofka qallafsan ee muranka badan".* w.w. Al-Bukhaari.

<sup>54.</sup> *Rasuulkii Alle s.c.w. wuxuu yiri: Waaan u ballan qaadaya guri ooaggaga jannada ah qofkii iska daaya doodaha gartaba ha lahaadee, iyo guri jannada dhexdeeda ah qofkii iska daaya beenta kaftanha ba ula jeedee, iyo guri halka jannada u sarreysa ah qofkii dabciiga iyo dhqankiisa wanaagsan yahay... Abuu Daawuud*

سَلَّمَ بَنِي إِسْرَائِيلَ كُمَّا لَيْتَهُمْ مِنْ أَيْمَنَتِهِ وَمِنْ يُبَدِّلُ نِعْمَةَ  
 اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مَاجَاهَتِهِ فَإِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ ۝ رَبِّنَا  
 لِلَّذِينَ كَفَرُوا بِالْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيَسْخَرُونَ مِنَ الَّذِينَ آمَنُوا وَالَّذِينَ  
 أَنْقَوْفَاقُهُمْ بِمَوْمَقِ الْقِيمَةِ وَاللَّهُ يَرْفُقُ مَنْ يَشَاءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ  
 كَانَ النَّاسُ أُمَّةً وَجَدَهُ بَعْثَ اللَّهِ الْيَسِينَ مُشَرِّبِينَ  
 وَمُنْذِرِينَ وَأَنْزَلَ مَعَهُمُ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ لِيَحْكُمُوا بَيْنَ النَّاسِ  
 فِيمَا آخْتَفَوْفِيهِ وَمَا اخْتَفَفَ فِي إِلَّا لِلَّذِينَ أَوْهَدُوا مِنْ بَعْدِ  
 مَاجَاهَتِهِمْ بَعْيَادِنَهُمْ فَهَدَى اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا  
 لِمَا آخْتَلَفُوا فِيهِ مِنَ الْحَقِّ بِإِذْنِهِ وَاللَّهُ يَهْدِي مَنْ يَشَاءُ  
 إِلَى صَرْطَ مُسْتَقِيمٍ ۝ أَمْ حَسِّيْرُهُ أَنْ تَدْخُلُوا الْجَنَّةَ وَلَا  
 يَأْتِكُمْ مَثْلُ الَّذِينَ حَلَوْا مِنْ قَبْلِكُمْ مَسْتَهُمُ الْأَبْسَاءُ وَالصَّرَاءُ  
 وَرَلِزُوا حَقَّيْقَيْلَهُمُ الْأَسْوَلُ وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُمْ مَنْ تَضَرَّ  
 اللَّهُ أَلَا إِنَّ ضَرَّاللَهِ قَرِيبٌ ۝ يَسْتَلُونَكَ مَاذَا يُنْفِقُونَ قُلْ  
 مَا أَنْفَقْتُ مِنْ خَيْرٍ فِي الْأَوَّلِيَّنَ وَالآخِرِيَّنَ وَلَيَسْتَهِنَّ الْمَسْكِينُونَ  
 وَإِنَّ السَّيْلَ وَمَا قَاعَلُو مِنْ خَيْرٍ فِي أَرْتَ اللَّهُ بِهِ عَلِيْمٌ ۝

۳۳

211. Weydii ilmahii Israa'iil intee baan calaamo cad siinnay. Oo qofkii beddela Nicmadda Ilahay kaddib markay u timid, haddaba hubaal Allaah ciqaabtiisu way daran tahay.

212. Nolsoha adduunkan baa loo qurxiyey kuwa (xaqa) aan rumeynayn, oo waxay ku jeesjeesaan kuwa rumeysan, kuwase iska jira (xumaha), iyaga baa ka sarreyn doona oo ka kor ah Maalinta Qiyaamaha. Oo Allaah wuxuu arzaaqaa qofkuu doono xisaab la'aan.

213. Dadku (dhammaan) wuxuu aaha ummad keliya (ka hor weecashadooda), markaasuu Allaah soo diray Nabiyada war san sidayaal iyo digayaal ahaan, oo Wuxuu u soo waxyooday Kitaabka oo xaq ah si uu ugu kala xukumo dadka dhexdooda arrimaha ay isku khilaafeen, oo iskuma khilaafin waxaan ahayn isla kuwii (Kitaabka) la siiyey kaddib markay u yimaadeen xujoooyin cad xasad dhexdooda ah dartiis. Markaasuu Allaah Idankiisa ugu hanuuniyey xaqa kuwaa rumeysan wixii ay gudahooda isku khilaafeen. Oo Allaah wuxuu ku hanuuniyaa qofkuu doono Jidka Toosan.

214. Mise waxaad mooddaan inaad gelaysaan Jannada iyadoo aanay waliba idiin iman wax la mid ahi wixii u yimid kuwii tegay ee idinka horreeyey? Waxaa taabtay dhib iyo dhakafaar oo la gilgilay jeer uu Rasuulku iyo kuwii rumeyyay la jirki ay yiraahdeen: Goormuu iman doonaa Gargaarka Ilahay? Haddaba hubaal Gargaarka Ilahay wuu dhow yahay.

215. Waxay ku weydiyaan waxa ay tahay inay bixiyaan. Dheh: Wax kastoo aad bixisaan oo maal ah waxaa u mudan waalidiinta iyo qaraabada iyo agoomaha, iyo masaakiinta iyo musaafirka (go'doonsan), Oo wax kasta oo khayr ah aad fashaan, hubaal Allaah wuu Ogsoon yahay.

**216.** Dagaallan baa la idinku farad yeelay oo waa wax aad neceb tiihiin, oo waxaa laga yaabaa inaad wax naacdaan isagoo khayr idiin ah, oo waxaa laga yaabaa inaad wax jeclaaataan isagoo shar idiin ah, Oo Allaah baa Ogsoon, idinkuse ma ogidin.

**217.** Waxay wax kaa weydiyaan bisha xurmadda gaarka ahi lihi gudahood in la dagaallamo. Dheh: In dagaal la galo waa (xad gudub) weyn, oo ka hor istaagidda dadka Jidka Ilahay iyo beeninti, iyo ka hor istaagidda dadka Masjidka Xaramka, iyo ka saaridda dadkeeda, baa waliba ka sii daran Allaah agti, oo fidnadaa<sup>(55)</sup> ka daran dilka. Oo ma dayn doonaan la dagaallankiinna jeer ay dib idiinka celiyaan diintiinna, hadday awoodaan. Oo qofkii idinka mid ah ee ka noqda diintiisa oo dhinta isagoo gaal ah, kuwani weeye kuwa ay buri doonaan camalladooda adduunka iyo aakhiradaba, oo waa iyaga ehl Naarka; gudaheeda bayna ku waari doonaan.

**218.** Hubaal kuwa rumeyay iyo kuwa ka soo haajiray (guryahooda Allaah darti) oo dadaal ku bixiyey Jidka Ilahay, kuwani waxay ka rajo qabaan Naxariista Ilahay. Oo Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**219.** Waxay wax kaa weydiyaan Khamriga<sup>(56)</sup> iyo Qamaarka<sup>(57)</sup>. Dheh: Waxaa labadaba ku jira dambi weyn iyo wax tar ay dadka u leeyihii, oo dambigooda baa ka weyn waxtarkooda. Oo waxay ku weydiyaan maxay tahay inay bixiyaan. Dheh: Wixii dheeraad idinku ah. Sidaas buu Allaah idiin ka dhigaa wax cad Aayadaha si aad uga fakartaan.

كُتُبَ عَلَيْكُمُ الْقَتَالُ وَهُوَ كُرْهٌ لَّكُمْ وَعَسَى أَن تَكُرُّهُوا  
شَيْئاً وَهُوَ خَيْرٌ لَّكُمْ وَعَسَى أَن تُحْبُوْشَيْئاً وَهُوَ شَرٌّ  
لَّكُمْ وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَإِنْ شَاءَ لَا تَعْمَلُونَ ﴿٣﴾ يَسْلُوْنَكُمْ عَنِ اللَّهِ  
الْحَرَامِ قَتَالٌ فِيْهِ كَبِيرٌ وَصَدْعَنْ سَيِّلٌ  
اللَّهُ وَكُفُرُهُ وَالْمَسِيْدَ الْحَرَامِ وَالْأَخْرَاجُ أَهْلُهُ مُنْهَى  
أَكْبَرُ عِنْدَ اللَّهِ وَالْفِتْنَةُ أَكْبَرُ مِنَ الْقَتْلِ وَلَا يَرَوْنَ  
يُقْتَلُوْنَ كُلُّ حَقِيقَةٍ وَكُلُّمُ عَنْ دِيْنِكُمْ إِنْ أَسْطَلْعُوا مِنْ  
يَرْتَدِدُ مِنْ كُلِّمُ عَنْ دِيْنِهِ فَيُمْتَلِّهُ وَهُوَ كَافِرٌ فَأَوْلَيْكُمْ  
جَحَّذَتْ أَعْمَالُهُمْ فِي الدُّنْيَا وَالآخِرَةِ وَأَوْلَيْكُمْ أَصْحَابُ  
أَنْتَارَهُمْ فِيهَا خَلِدُوْنَ ﴿٤﴾ إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَالَّذِينَ  
هَاجَرُوا وَأَجْهَدُوا فِي سَيِّلِ اللَّهِ أَوْلَيْكُمْ بَرِّحُونَ رَحْمَةَ  
اللَّهِ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٥﴾ يَسْلُوْنَكُمْ عَنِ الْخَمْرِ وَالْمَيْسِرِ  
قُلْ فِيهِمَا إِنَّمَا أَكْبَرُ كَيْرٌ وَمَنْقَعٌ لِلنَّاسِ وَأَنْهُمْ أَكْبَرُ  
مِنْ نَفْعِهِمْ وَيَسْلُوْنَكُمْ مَاذَا يُنْفِقُوْنَ قُلْ الْعَفْوُ كَيْلَكُمْ  
يُؤْنِيْلَهُ لَكُمُ الْأَيْكَتْ لَعَلَّكُمْ تَفَكَّرُوْنَ ﴿٦﴾

٣٤

<sup>55.</sup> *Fidno waxaa soo galaya macnooyinkeeda gaalnimo, khilaaf, kala tag, dagaal sokeeye, dulmiga, caddibaadda, caddaalad darrada, isku dirka, iwm.*

<sup>56.</sup> *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Ma zineysto zaaniga isagoo mu'min ah, mana cabbo qof khamri isagoo mu'min ah, qofna wax ma xado marka uu wax xadayo isagoo mu'min ah. Mana booboo oo ma wax dhaco isagoo mu'min ah".*

<sup>57.</sup> *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Qofkii dhaarta oo ku yiraahdo dhaartiis waa igu Allaat iyo Al-Cuzzaa ha yiraahdo Laa ilaha illal Laah, qofkii ku yiraahdana saaxiibki kaalay aan qamaarnee, ha ka joogo (qamaarka) oo ha la baxo sadaqo. Al-Bukhaari*

فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَيَسِّرْنَاكَ عَنِ الْيَتَمَّ قُلْ إِصْلَاحٌ لَهُمْ  
 حَيْثُّ وَنَحْنُ نَخْلُطُهُمْ فَإِخْرُجْنُكُمْ وَاللَّهُ يَعْلَمُ الْمُفْسِدِينَ  
 الْمُصْلِحِ وَتَوْسِيَّةُ اللَّهِ لَأَعْتَدْنَا لِكَمْ لِنَالَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ  
 ۖ وَلَا تَنْكِحُ الْمُسْرِكَاتِ حَتَّىٰ يُؤْمِنَ وَلَمَّا مُؤْمِنَةٍ  
 حَيْثُ قَنْ سُرِّيَّةٍ وَلَوْ أَعْجَبَنَّكُمْ وَلَا تَنْكِحُ الْمُنْسِكَاتِ  
 حَتَّىٰ يُؤْمِنُوا وَلَعْدٌ مُؤْمِنٌ حَيْثُ مِنْ مُسْنِرِكَ وَلَوْ أَعْجَبَكُمْ  
 أُولَئِكَ يَدْعُونَ إِلَى الْتَّارِيخِ وَاللَّهُ يَدْعُونَ إِلَى الْجَنَاحِ وَالْعَفْرَةِ  
 بِيَادِهِ وَبَيْنَ أَيْمَانِهِ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ  
 وَيَسِّرْنَاكَ عَنِ الْمَحِيطِ قُلْ هُوَ ذَيْ فَاعْتَزَلَ الْأَيْسَاءَ فِي  
 الْمَحِيطِ وَلَا تَنْقُضُوهُنَّ حَتَّىٰ يَطْهُرُنَّ فَإِذَا نَطَّهُرُنَّ فَاقُوهُنَّ  
 مِنْ حَيْثُ أَمْرَكُمُ اللَّهُ أَنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْوَقِيبِ وَيُحِبُّ الْمُنْتَهِيِّنَ  
 بِنَسَأَكُمْ حَرْثَ لَكُمْ فَأَلْوَحْرَثَ لَقَى شِنْسِنَمْ وَقَمْرَا  
 لِأَنْفُسِكُمْ وَأَنْقُوا اللَّهَ وَأَعْلَمُوا أَنَّكُمْ مُلْقُوهُ وَبِشَرِّ  
 الْمُؤْمِنِينَ ۖ وَلَا جَعَلُوا اللَّهَ عُرْصَةً لَأَيْمَنِكُمْ أَنْ تَبْرُوا  
 وَتَسْقُوا وَتُصْلِحُوا بَيْنَ النَّاسِ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلَيْهِ  
 ۖ

٣٥

220. Noloshatan adduunka iyo Aakhiradaba. Oo waxay wax kaa weydiyaan agoomaha. Dheh: Inaad u hagaajiso (arrimahooda) baa khayr badan, oo haddaad shuruko la noqotaan, waa walaaliihiin. Oo Allaah wuu Og yahay kan wax bi'iyaha ah iyo kan wax hagaajiyaha ah. Oo hadduu Allaah doono, wuxuu xaqqiil idin hor dhigi lahaa dhibaatooyin; hubaal Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

221. Oo ha guursannina haweenka mushrikadaha ah jeer ay rumeeyaan, oo xaqqiil addoonad mu'minad ah baa ka khayr badan mushrikad haba idin cajabisee. Oo ha u guurinnina (gabdihiiinna mu'mindaha ah) ragga mushrikiinta ah jeer ay rumeeyaan. Oo xaqqiil addoon mu'min ah baa ka khayr badan Mushrik haba idin cajabiye. Kuwani waxay ku baaqaan Naar, Oo Allaah wuxuu ku baaqaan Janno iyo dambi dhaaf si idankiisa ah, oo uga dhigaa caddaan Aayadahiisa dadka si ay u xusuustaan.

222. Oo waxay wax kaa weydiyaan xaylka. Dheh: Waxaa weeye waxyello, ee ka fogaada dumarka waqtiga xaylka, oo ha u dhowaanina inta ay ka daahir noqdaan. Haddaba markay daahir noqdaan uga taga meesha Allaah idinku amray; Hubaal Allaah wuxuu jecel yahay kuwa in badan u soo noqda, oo wuxuu jecel yahay kuwa isdaahiriya.

223. Xaasakiinna waxay iduin yihii beer, ee u taga beertiinna markaad doontaanba, oo u hormrsada (khayr) nafahiinna. Oo Alle ka cabsada (oo dhowra xilka uu idin saaray), oo ogaada inaad la kulmi doontaan, oo u bishaaree mu'miniinta.

224. Oo ha ka dhigina Allaah ku dhaarashadiina awgeed waxa idinka xanniba inaad sama fashaan oo ka joogtaan (xumaha), iyo inaad kala maslaxdaan dadka. Oo Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

**225.** Allaah Idiin ma qabanayo waxa aydaan ula kac iyo qasad ugu dhaaran, laakiinse wuxuu idiin qabanayaa waxa ay quluubiinna goostaan oo u bareeraan. Oo Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Dulqaad Badan.

**226.** Kuwa ka dhaarta xaasaskooda (in muddo ah inaysan u galmooneyn), waxaa la sugayaa afar bilood<sup>(58)</sup>, Hadday ka soo noqdaan (Muddadaa ka hor), haddaba hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**227.** Haddayse goostaan furid, haddaba Allaah hubaal waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

**228.** Oo haweenka la furay waa inay u sugaan (guursigooda) saddex xayl (ama ka daahirobid dhiigga caadada), oo uma bannaanaa inay qariyaan waxa uu Allaah ku abuuray riximyadooda, hadday rumeysan yihiin Allaah iyo Maalinta dambeysa. Oo nimankooda baa u xaq leh inay soo ceshadaan muddadaas dhexdeeda, hadday rabaan heshiis; oo waxay (haweenku) u xaq leeyihiin xuquuq inta lagu leeyahay oo kale oo gar ah, nimankuse waxay dheer yihiin darajo. Oo Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

**229.** Furitaan waxaa (lagu dhawaqaqi karaa) labo goor, intaas kaddib, ama u haysta si wanaagsan, ama u sii daaya si wanaagsan. Oo idiinma bannaana (raggow) inaad dib uga qaadataan wax ka mid ah waxaad siiseen, in maahee ay labada dhinac ka cabsadaan inay oogi waayaan xuduudaha (uu dhigay) Allaah, haddaba haddaad ka cabsataan inay dhowri waayaan xuduudaha (uu dhigay) Allaah, markaa ma saarna wax eed ah korkooda waxa ay isku furato si ay u madax bannaanaato. Kuwakani waa xuduudaha (uu dhigay) Allaah, ee ha ku xadgudbina. Oo qofkii ku xadgudbaa xuduudaha (uu dhigay) Allaah, waa kuwan kuwa ah gar ma qaatayaasha.

**230.** Haddiise uu furo (mar seddexaad) uma bannaana wixii taa ka dambeeeyaa jeer ay soo guursato nin kale, hadduu (ninkaasi dambe) furo (ama dhinto), ma saarna wax eed ah dushhooda (haweencaa iyo ninkeedii hore) inay isku noqdaan, hadday dareemaan inay dhowri karaan xuduudaha (uu dhigay) Allaah. Oo kuwakani waa xuduudaha (uu dhigay) Allaah, uu uga dhigo caddaan dad garasho leh.

<sup>58.</sup> Marka ay dhammaato muddada afarta bilood ah uu ka dhaartay xaaskiisa, waa in la joojiyo ilaa uu ka furo. Mana dhacayo furrinka jeer uu furo.

وَإِذَا طَلَقَتِ النِّسَاءَ فَلَا يَعْنَفُ أَجَاهِنْ فَأَمْسِكُوهُنْ بِمَعْرُوفٍ  
أَوْ سِرِّهُوْهُنْ بِمَعْرُوفٍ وَلَا تُنْسِكُوهُنْ ضَرِّاً لَا تَعْتَدُوا مِنْ وَمَنْ  
يَعْلَمُ ذَلِكَ فَقَدْ ظَمَّ نَفْسَهُ وَلَا تَشْخُذُوا مِنْ أَيْمَانِ اللَّهِ هُنْ وَأَنْ  
وَأَذْكُرُ وَغَمَتَ اللَّهُ عَلَيْكُمْ كُوْمَا أَنْزَلْ عَلَيْكُمْ مِنَ الْكِتَابِ وَالْحِكْمَةِ  
يَعْلَمُكُمْ بِهِ وَلَا تَعْنَوْهُنَّ وَأَعْمَوْهُنَّ أَنَّ اللَّهَ يُكَبِّرُ شَيْئَ عَلَيْهِمْ وَلَا إِذَا  
طَلَقَهُنَّ النِّسَاءَ فَلَا يَعْنَفُوهُنَّ فَلَا تَعْصُلُوهُنَّ أَنْ يَتَكَبَّرُونَ  
أَوْ رَجَهُنَّ إِذَا تَرَضُوا بِهِمْ بِالْعِرْفِ ذَلِكَ يُوَظِّعُهُمْ مِنْ كَانَ  
مِنْ كُوْمُونَ مِنَ اللَّهِ وَأَيَوْمَ الْحِجَّةِ ذَلِكَ حَمْزَى لَكُمْ وَأَطْهَرُ وَاللهُ  
يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ <sup>وَ</sup> وَأَوْلَادُهُنْ يُرْضِعُنَّ أَوْلَادَهُنْ حَوْلَيْنَ  
كَمْ لِيْلَيْنَ لَمَنْ إِرَادَ أَنْ يُسْمِيَ الرَّبِيعَةَ وَعَلَى الْمُؤْلُودِ لَهُ رَدْرَقُهُنَّ  
وَكَسْكُونَ بِالْعِرْفِ لَا تُكَلِّفُ نَفْسًا لَا وَسْعَهَا لِأَضْرَارٍ  
وَالْمَوْلَهُ بِوَلُولَهَا وَلَا مُلْوَدَهُهُ بِوَلُولَهُ وَعَلَى الْوَارِثِ مِثْلُ ذَلِكَ فَإِنْ  
إِرَادَ أَفْسَالَ أَنْ تَرَاضِيْنَ مِنْهُمَا وَتَشَأُرِيْنَ فَلَا جَنَاحَ عَلَيْهِمَا وَإِنْ  
أَرْدَتُمْ أَنْ تَسْتَرَّهُمُوا فَلَا جَنَاحَ عَلَيْكُمَا إِذَا سَلَمْتُمُهُمَا  
يَا أَيُّهُمَا بِالْعِرْفِ وَلَا تَعْنَوْهُنَّ وَأَعْمَوْهُنَّ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا يَعْمَلُونَ <sup>وَ</sup> صَيْرُ

- 231.** Oo markaad furtaan haweenka, oo ay gaaraan muddadda loo qabtay, markaa ama u heysta si wanaagsan ama u sii daaya si wanaagsan. Oo ha u heysannina dhibaateyn si aad u xadgudubtaan, oo qofkii sidaas fala, wuxuu xaqiij gef ka galay naftiisa. Oo ha ka dhigannina Aayadaha Ilaalay dheel-dHEEL, oo xusuusta Nicmadda Ilaalay korkiinna, iyo waxa uu idiiN soo waxyooday oo ka mid ah Kitaabka iyo Xikmadda oo uu idinku waaninayo, oo dhowra (xilkii uu idin saaray) Allaah, oo ogagaad in Allaah wax walba Ogsoon yahay.

- 323.** Oo markaa dhaawaa haweenka oo ay dhammeystaan muddadooda sugitaanka-(ciddada), markaa ha ka hor istaagina guursiga nimankooda, markay ka heshiiyaan dhexdooda si la yaqaan. (Arrinkan) waa mid lagu waaniyo qofkii idinka mid ah ee rumeyasan Allaah iyo Maalinta dambeysa. Tan baa idii wanaagsan oo idii daahirsan. Oo Allaah baa Ogsoon oo idinku ma ogidin.

- 233.** Oo hooyoo yinku waa inay nuujiyaan ilmahooda labo sano oo nuddada nuujinta, oo masruufkooda si la yaqaan. Ma saarno nafna waxay y u dhibtooto ilmaheeda dartood iyo uu saaran yahay) warasada (aabbaaha). Saalli iyagoo ku ah wada tashi kaddib, hooyo nuujiso ah oo kale ilmahiinna, (oyoda) waxaad ku heshiisaan (inaad Allaah, oo ogaada in Allaah uu Arko

**234.** Oo (ma xagga) kuwiinna idinka mid ah oo dhinta oo ka taga afooyin gadaashood, waa inay sugaan afar bilood iyo tobant maal mood, haddaba markay gaaraan muddadooda ma jiro wax eed ahi oo idin saaran waxa ay ku falaan nafahooda oo si la yaqaan ah. Oo Allaah waa u Xog ogaal waxa aad fashaan.

**235.** Oo ma jiro wax eed ahi oo idin saaran waxa aad sarbeebtaan<sup>(59)</sup> ee la xiriira u doonashada guur haweenkaa ama aad ku qarsataan (doonistaa) nafahiinna, Allaah wuxuu Og yahay inaad xusi doontaan, laakiinse ha ugu ballan qaadina si qarsoodi ah guur in aad ku dhaadaan maahee hadal gar ah, oo ha tala goosannina inaad guur gashaan jeer ay dhammaato (ciddada) muddada la qabtay ee qoran. Oo ogaada inuu Allaah ogsoon yahay waxa ku jira nafahiinna, ee ka digtoonaada. Oo ogaada inuu Allaah yahay Dambi Dhaaf Badane, Dulqaad Badan.

**236.** Ma jiro wax eed ahi oo idin saaran, haddaad furtaan haweenka idinkoo aan weli taaban, ama aydaan u goyn wax meher ah, oo siyya sahay, kan ladan tabarti, faqiirkuna tabarti, sahay la yaqaan, (kani) waa waajib saaran sama falayaasha.

**237.** Oo haddaad furtaan haweenka ka hor inta aydaan taaban, aadna u goyseen Meher, markaa siyya meherka aad u goyseen barki, inay iyagu cafiyaan maahee, ama uu cafiyo (ninka-waliga) uu ku jiro gacantiisa xarigga niikaaxa. Oo inaad cafidaan baa u dhow samaha. Oo halimma mina wanaaggaa dhexdiinna. Hubaal Allaah wuu Arkaa waxaad fashaan.

وَالَّذِينَ يَتَوَقَّنُونَ مِنْ كُوْرُ وَيَدْرُونَ أَرْوَاحَ أَيَّادِ رَبِّصَنْ بِأَنْفُسِهِنَّ  
أَرْبَعَةَ شَهْرٍ وَعَشْرًا فَإِذَا بَلَغَنَ أَجَاهِنَّ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ  
فِيمَا فَعَلْنَ فِي الْفُسْحَىٰ بِمَا تَعْرُوفُ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا لَمْ تَعْمَلُنَ حَتَّىٰ  
وَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِيمَا عَرَضْتُمْ بِهِ مِنْ خُطْبَةِ الْإِسْمَاءِ  
أَوَّلَكَنْمَ فِي الْفُسْحَىٰ عِلْمَ اللَّهِ أَنَّكُمْ سَتَدْكُرُوهُنَّ  
وَلَكِنَ لَا تُؤْعِدُوهُنَّ سِرًا إِلَّا أَنْ تَقُولُوا قَوْلًا مَعْرُوفًا  
وَلَا تَعْرِمُوا عَقْدَةَ الْتِكَاجِ حَتَّىٰ يَتَلَعَّ الْكِتَابُ أَجَاهِهِ  
وَاعْلَمُو أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي الْفُسْحَىٰ كُمْ فَاحْذَرُوهُ وَاعْمَلُو  
أَنَّ اللَّهَ غَفُورٌ حَلِيمٌ<sup>٦٠</sup> لَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ إِنْ طَلَقْمَ الْإِشَائَةَ  
مَا لَمْ تَمْسُهُنَّ أَوْ قَرِصُوْهُنَّ فِي رِضَةٍ وَمَمْتَعُوهُنَّ عَلَىٰ  
الْمُوْسَعِ قَدْرَهُ وَعَلَى الْمُقْتَرِ قَدْرَهُ دَمْتَعًا الْمَعْرُوفَ حَقَّا عَلَىٰ  
الْمُحْسِنِينَ<sup>٦١</sup> وَلَنْ طَلَقْمُهُنَّ مِنْ قَبْلِ أَنْ تَمْسُهُنَّ وَقَدْ  
فَرَضْتُمْ لَهُنَّ فِي رِضَةٍ فَنَصَصْتُ مَا فَرَضْتُمْ إِلَّا أَنْ يَعْلَمُونَ  
أَوْ يَعْفُوُ اللَّهُ يَعْلَمُ عَقْدَةَ الْتِكَاجِ وَلَنْ تَعْفُوَ أَقْبَلُ الْتَّسْعَىٰ  
وَلَا تَنْسُوَ الْقَضَىٰ بَيْنَكُمْ إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا لَمْ تَصِيرُ<sup>٦٢</sup>

٣٨

59. Waa haweenka ay ka dhinteen raggiib qabay ama kuwo la furay furriin kama dambays ah, kuwase la furay furriin la soo ceshan karo ma aha in la doono ama xitaa si aan toos aheyn oo sarbeeb ah loogu muujiyo doonis guur.

حَفِظُوا عَلَى الصَّلَوَاتِ وَالصَّلَاةَ الْوُسْطَى وَقَوْمُوا لِهِ  
قَلْتَنِينَ ﴿٢٣﴾ فَإِنْ خَفِثَ فِرْجًا أَوْ كَبَّا فَإِذَا أَمْسَمَ  
فَادْكُرْ وَاللَّهُ كَعَمَمَكُمْ مَا لَمْ تَكُونُوا تَعْلَمُونَ  
وَالَّذِينَ تُوقَنُ مِنْكُمْ وَيَدْرُوْتُ ازْوَاجًا  
وَصَيْهَ لِأَزْوَاجِهِمْ مَتَعًا إِلَى الْحَوْلِ غَيْرَ أَخْرَاجٍ فَإِنْ  
خَرَجْنَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْكُمْ فِي مَا فَعَلْنَ فِي أَنْفُسِهِنَّ  
مِنْ مَعْرُوفٍ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ﴿٢٤﴾ وَالْمُطَّلَّقَاتِ مَتَعْ  
بِالْمَعْرُوفِ حَقًّا عَلَى الْمُتَّقِينَ ﴿٢٥﴾ كَذَلِكَ يُبَيِّنُ  
اللَّهُ أَكْعُمَهُ أَيْتَهُ لَعْلَكُمْ تَعْقُلُونَ ﴿٢٦﴾ أَلَمْ تَرَ  
إِلَى الَّذِينَ خَرَجُوْمُنِ دِيْرَهُمْ وَهُمْ أَوْفُ حَذَرَ الْمُوْمَوتَ  
فَقَالَ لَهُمُ اللَّهُ مُؤْمِنُوْا شَمَّا حَيْهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَذُو فَضْلٍ  
عَلَى النَّاسِ وَلَكُنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَشْكُوْنَ  
وَقَتَلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَأَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ عَلَيْهِمْ ﴿٢٧﴾ مَنْ  
ذَا الَّذِي يُقْرِضُ اللَّهَ قَرْضًا حَسَنًا فَيُضْعِفُهُ اللَّهُ أَضْعَافًا  
كَثِيرَةٌ وَاللَّهُ يَقْبِضُ وَيَضْطُطُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ

٢٩

**238.** Uga qayb gala si joogto ah salaadaha iyo salaadda dhexe<sup>(60)</sup> oo kaca idinkoo si run ah u adeecsan Allaah.

**239.** Haddiise aad ka cabsataan (cadow, markaa tukada) idinkoo lug ku socda ama fuushan gaadiid. Markase aad nabab tiihin, markaa (ku) xusa Allaah (salaadda) sida uu idiin baray waxaydaan (horay) u aqoonin.

**240.** Oo kuwaa dhinta ee idinka mid ah oo ka taga afooyin gadaashood, waa inay u dardaarmaan afooyinkooda masruuf sannad ah iyo guri ay degaan oo aan laga saareyn<sup>(61)</sup>, haddayse iskood u baxaan, ma jiro wax eed ah oo idin saaran waxay ku falaan nafahooda oo gar ah. Oo Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

**241.** Oo haweenka la furo, (waa in la siiyo) sahay la yaqaan. Kani waa xil saaran kuwa iska jira xumaha.

**242.** Sidaas buu Allaah idiinku caddeeyaa Aayadahiisa, si aad u fahantaan.

**243.** Miyaadan u fiirsan kuwii ka

soo baxay guryahooda iyagoo kumanyaal ah iyagoo ka baqaya geeri? Markaasuu Allaah ku yiri: Dhinta misna soo nooleeyey. Hubaal Allaah xaqiqiit waa u Roon yahay dadka, laakiinse dadku badankiisu ma mahad naqaan.

**244.** Oo ku dagaallama Jidka Ilaahey, oo ogaaada inuu Allaah yahay wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

**245.** Kee baa amaahin doona Allaah amaah wanaagsan oo uu u labo laabaa laban laab badan? Oo Allaah waa ciririyyaa oo ballaariyyaa. Oo Xaggiisa baa la idiin soo celin doonaa.

**60.** Salaadda dhexe sida ku cad xadiis saxiix ah waa salaadda Casarka. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii ay si ula kac ah u dhaafsto salaadda Casar ilaa uu waqtigeedu baxo waa sida inuu waayey oo dhaafeen ehelkiisa tyo maalkiisa". Werin kale waxay leedaday: "waxaa qofkaasi bura camalkiisa oo dhan".

**61.** Arrinkan waxaa lagu nasakhay Aayadaha dib laga soo dejiyey ee ku soo arooray 2: 234 iyo 4: 12

**246.** Miyaadan ogaan (arrinka) xildhibaannadii ilmahii Israa'iil ee ka dambeeyey (waqtigii) Muuse? Markay ku yiraahdeen Nabi loo soo diray: Noo magacow boqor, waxaa nu u dagaallami doonaa Jidka Ilahay. Wuxuu yiri: Ma laga yaabaa inaad dagaallami weydaan, haddii la idinku waajibyo dagaal gal? Waxay yiraahdeen: Oo maxaan leennahay ee aanan ugu dagaalamayn Jidka Ilahay innagoo xaqiqi qalaka soo saaray guryahayagi iyo carruurtayadii. Markiise lagu waajibiyey dagaalka dhabarkay jeediyeen, in yar oo ka mid ah maahee. Oo Allaah wuu yaqaanaa gar ma qaatayaasha.

**247.** Oo Nabigoodii wuxuu ku yiri: hubaal Allaah wuxuu idiin soo baxshay Daaluut boqor ahaan. Waxay yiraahdeen: Oo sidee buu noogu noqon karaa boqor iyada oo aanu isaga uga xaq leennahay boqortooayda, oo aan la siin hayd iyo hanti ballaaran? Wuxuu yiri: Hubaal Allaah baa idinka xushay, oo wuxuu siiyey kororsiin cilmi iyo jirba ah. Oo Allaah wuxuu siiyaa boqortooaydiisa qofkuu doono. Oo Allaah waa Deeq Ballaarane, wax kasta Ogsoon.

**248.** Oo Nabigoodii wuxuu ku yiri: Hubaal astaanta boqortooaydiisa waxaa weeye inuu idiin yimaado taabuut (santuukh) ay ku jirto xasilooni ka timid Rabbigiin iyo haraa ah waxay ka tageen reer Muuse iyo reer Haaruun oo ay siddo malaa'ig. Hubaal arrinkaa waxaa idiinku sugar calaamo haddaad tiihiin mu'miniin.

فَلَمَّا فَصَلَ طَلْوُتٌ يَالْجُنُودِ قَالَ إِنَّ اللَّهَ مُبْتَلِيكُ  
يَنْهَا فَمَنْ شَرَبَ مِنْهُ فَلَيَسْ مِنِّي وَمَنْ لَمْ يَطْعَمْهُ  
فَإِنَّهُ مِنِّي إِلَّا مَنْ أَغْتَرَ فُرْقَةً بِيَدِهِ فَشَرَبُوا مِنْهُ  
إِلَّا قَيْلَأَ مِنْهُمْ فَلَمَّا جَاءَهُوَ وَالَّذِينَ عَامَنُوا  
مَعَهُ قَالُوا لَآتِقَةَ لَكَ الْيَوْمَ بِجَاهِ الْوَتْرِ وَجُنُودِهِ  
قَالَ الَّذِينَ يَطْبُونَ أَنَّهُمْ مُلْكُو اللَّهِ كَمَنْ فَعَاهُ  
قَلِيلٌ غَيْبَتْ فَعَاهُ كَثِيرٌ قَدِيمَنَ اللَّهُ وَاللَّهُ مَعَ  
الْصَّدِيرِينَ وَلَمَّا بَرَرُوا الْجَاهِلَوْتَ وَجُنُودَهُ قَالُوا  
رَبَّنَا أَفْرِعُ عَيْنَانَا صَبَرَا وَتَبَتَّ أَقْدَامَنَا وَانْصَرَنَا  
عَلَى الْقَوْمِ الْكَافِرِينَ فَهَرَبُوهُمْ بِإِذْنِ اللَّهِ  
وَقَاتَلَ دَاؤُدُّ الْجَاهِلَوْتَ وَأَتَسْلَهُ اللَّهُ الْمُلْكَ  
وَالْحِكْمَةَ وَعَلَمَهُ مَمَا يَنْهَا وَلَوْلَا دُفَعَ اللَّهُ أَنَا سَ  
بَعْضَهُمْ بِعَجْزٍ لَفَسَدَتِ الْأَرْضُ وَلَكِنَّ اللَّهَ ذُو  
فَضْلِّ الْعَلَمَمِينَ تَلَكَّ إِيَّتُ اللَّهَ نَسْلُوهَا  
عَيْنَكَ يَالْحَقِّ وَإِنَّكَ لِمِنَ الْمُرْسَلِينَ

٤١

**249.** Haddaba markuu Daaluud la baxay ciidammadii, wuxuu yiri: Hubaal Allaah wuxuu idinku imtixaani doonaa webi. Haddaba qofkii ka cabbaa, iga mid ma aha, qofkiise aan dhadhamin hubaal waa iga mid, mid isagu mar ku darsada gacantiisa ma’ah ee; markaas bay ka cabbeen geddigood in yar maahee. Markaasuu markuu ka gudbay (webigii) isaga iyo kuwii rumeeey ee la jiray, waxay yiraahdeen: Ma lihin maanta awood aan kaga hor tagno Jaaluut iyo ciidammadiisa. Kuwiise yaqiinsanaa inay la kulmayaan Rabbigood, waxay yiraahdeen: Badanaa inta ay koox yari ay kaga adkaatay koox badan Idanka Ilaahey, Oo Allaah wuxuu la jiraa kuwa samir yeeshaa.

**250.** Oo markay u baxeen Jaaluut iyo ciidamadiisii, waxay yiraahdeen: Rabbiyow! Nagu shub samir oo noo sug cagahayaga, oo guul na sii dushooda dadka gaalada ah.

**251.** Markaas bay ku jabiyeen Idanka Ilaahey, Oo Daawuud wuxuu dilay Jaaluut, oo Allaah uu siiyey

boqortooyo iyo Xikmad, oo uu baray wax ka mid ah wuxuu doono. Oo haddaanu Allaah ku celin lahayn dadka qaarba qaar kale, waxaa xaqqiil fasaadi lahaa arlada. Laakiinse Allaah waa u Roonaan badan yahay caalamka.

**252.** Kuwani waa aayadaha Ilaahey, oo aanu kuugu akhrinno si xaq ah. Oo hubaal waxaad adigu xaqqiil ka mid tahay Rususha (Ilaahey).

## J U S K A (3)

### Suuradda Al-Baqara (Saca) 2

**253.** Waxaan ka yeelnay qaar ka mid ah Rusushan inay dheer yihiin fadli qaar kale oo iyaga ah; waxaa ka mid ah kuwo uu Allaah la hadlay; oo Wuxuu kor u qaaday qaarkood darajooyin; oo Waxaanu siinnay Ciise, ina Maryam xujoooyin cad, oo waxaanu ku xoojinay Ruuxa Daahirka ah (Jabriil). Oo hadduu Allaah doono, facyadaas xigsaday ma ay is dagaaleen, kaddib markay xujoooyin cad u yimaadeen, laakiinse way iskhilaafeen–marka waxaa jiray qaar ka mid ahaa ee rumeeey, iyo kuwo (xaqa) diiday. Oo hadduu Allaah doono, ma ay is dagaaleen, laakiinse Allaah wuxuu falaa wuxuu rabo.

**254.** Mu'miniintow! Wax ka bixiya wawaan idinku arsaqnay ka hor inta aanay imaan Maalin aanay jiri doonin beecshuro, saaxiibtinimo iyo garab isa siin midna, oo gaaladu waa iyaga kuwa ah gar ma qaataayaasha.

**255.** Allaah! Ma jiro Ilaah aan Isaga ahayn, waa Weligi Noolaha, daryeelaha waxa uunka jira, ma qabato lulmo iyo hurdo midna. Wuxuu leeyahay wax walba oo jira samooyinka iyo arlada. Waa kuma kan agtiis cid garab siin kara Isagoo idmo maahee? Wuxuu ogsoon yahay waxa hortooda ah iyo waxa gadaashood ah. Oo ma koobi karaan (uunankisa) wax ka mid ah Cilmigiisa wuxuu Isagu doono ma'ahee. Kursigisiis<sup>(62)</sup> wuxuu ku fidsan yahay samooyinka iyo arlada, oo ma cusleeyaan ilaalintoodu<sup>(63)</sup>, oo waa Isaga Sarreeyaha weyn<sup>(64)</sup>.

**256.** Ma jirto wax isku khasbid ah (aqbalaadda) diinta. Runtii hanuunka wuxuu noqday mid si cad uga muuqda habowga. Ee qofkii rumeyn diida Daaquudka<sup>(65)</sup> (shaydaanka) oo rumeeya Allaah, wuxuu run ahaan ku dhagey siddada aad u adag ee aan go'i doonin. Oo Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

**62.** Kursiga waa halka cago saarashada ilaahay Cazza Wajalla, mana jiro cid og sida uu yahay, waana inaan la isku khaldin Kursiga iyo Carshiga, Carshiga waa ka weyn yahay Kursiga oo wuxuu yahay sida farraaati yar ee lagu tuuray dhul hayjad ah. waxaa sidoo kale lagu fasiray Kursiga Cilmiga Ilaahay.

**63.** Nabigu s.c.w. wuxuu mar weydiyyey Ubay bin Kabac: Ayaddee baa u weyn Qur'aank? Ubay wuxuu ku jawaabay: Allaah iyo Rasulkuusaa baat iyo sii ogsoon. Markaasuu Nabigu s.c.w. mar kale weydiyyey: Ubay wuxuu yiri: Ayatul Kursi. Markaasuu Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Ha ku shifsoobo cilmiiga Abuu Mundirrow.

**64.** Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii khrista Ayatul Kursi habeeka marka uu seexanayo wuxuu Ilaahay u yeelaa malag waariidiya ah oo ilaaliya, oo umasoo dhowaado shayaan ilaa waagu baryo".

**65.** Daaqquud waa shayaan iyo wax kastoo la caabudo Allaah sokodo oo ku raallii ah. Waxaa soo galaya sidoo kale sanammada, qorraxda, dayaxa, xiddigaha iyo walxaha samada, arwaaxda, dadka ee la caabudo, iwm

\* تَأْكُلُ الرَّسُولُ فَضَلْنَا بَعْضَهُ عَلَىٰ بَعْضٍ مِّنْهُمْ مِّنْ كُلِّهِ  
 وَرَفَعَ بَعْضَهُمْ دَرَجَاتٍ وَّإِتَيْنَا عِيسَىً أَبْنَ مَرْيَمَ الْبَيْتَ  
 وَأَيَّدْنَاهُ بِرُوحِ الْقُدْسِ وَلَوْسَاءَ اللَّهِ مَا أَفْتَنَ الَّذِينَ مِنْ  
 بَعْدِهِ مِنْ نَعْدِمَاجَاهَنَّمَ الْبَيْتَ وَلَكِنَّ أَخْتَافُوا  
 هَمْنَهُمْ مِّنْهُمْ أَمَّا وَمِنْهُمْ مِّنْ كُلِّهِ لَوْسَاءَ اللَّهِ مَا أَفْتَنَ  
 وَلَكِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا يُرِيدُ ﴿١٢﴾ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ إِمَّا مُؤْمِنُونَ فَقَوْ  
 مِتَارَقَنْكَرُونَ قَبْلَ أَنْ يَأْتِيَ يَوْمُ الْآبِيعِ فِيهِ وَلَا خَلَةٌ وَلَا  
 شَفَعَةٌ وَالْكَفَرُونَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿١٣﴾ اللَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ  
 الْحَقُّ الْقَيُّومُ لَا تَأْخُذُوهُ سِتَّةٌ وَلَا تُؤْمِنُوهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ  
 وَمَا فِي الْأَرْضِ مِنْ ذَا الَّذِي يَشْفَعُ عَنْهُ وَلَا يَأْدِنَهُ يَعْلَمُ  
 مَا يَبْيَانُ إِيَّاهُمْ وَمَا خَلَقُهُمْ وَلَا يُحِيطُونَ بِسَيِّئَاتِهِ إِلَّا  
 بِمَا شَاءَ وَسِعَ كُرْسِيُّهُ السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ وَلَا يُغُورُهُ حَفْظُهُمَا  
 وَهُوَ عَلَىٰ الْعَظِيمِ ﴿١٤﴾ لَا إِكْرَاهٌ فِي الدِّينِ قَدْ تَبَيَّنَ الرَّشْدُ مِنَ  
 الْأَعْيُقَنِ فَمَنْ يَكْفُرُ بِالظَّغُورِ وَيُؤْمِنُ بِاللَّهِ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ  
 بِالْعَرْوَةِ الْوُتْقَنِ لَا أَنْفَصَاهُ لَهَا وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلَيْهِ

اللَّهُ وَيَنْهَا الَّذِينَ إِمَّا يُنْجِحُهُمْ مِنَ الظَّالِمِينَ إِلَى النُّورِ  
وَإِنَّمَا يُنْكِحُهُمْ مِنَ الظَّالِمِينَ كَفَرُوا أَوْ لِيَأْتُهُمُ الظُّلْمُوْتُ يُنْجِحُهُمْ مِنَ  
النُّورِ إِلَى الظُّلْمَكَتْ أَوْ لِيَكُنْ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا  
خَلِدُونَ بْنَ الْمَرْئَلِ الَّذِي حَاجَ إِنْرَهُمْ فِي رَيْهَةِ  
أَنَّهُ أَنَّهُ اللَّهُ الْمَلِكُ إِذْ قَالَ إِنْرَهُمْ فِي الَّذِي يُحْمِي  
وَيُبَيِّنُ فَقَالَ أَنَا أَخْيَ وَأَمْبَيْتُ فَقَالَ إِنْرَهُمْ فِي إِنَّ اللَّهَ يَأْتِي  
بِالشَّمْسِ مِنَ السَّمَرِقِ فَأَتَ بِهَا مِنَ الْمَغْرِبِ فَهُمْ الَّذِي  
كَفَرُوا اللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ أَوْ كَالَّذِي  
مَرَ عَلَى قَرْبَيْهِ وَهِيَ خَاوِيَةٌ عَلَى عُرُوشَهَا قَالَ أَنِّي يُحْمِي  
هَذِهِ اللَّهُ بَعْدَ مَوْتِهَا فَأَمَاتُهُ اللَّهُ مَا تَهْ عَامِ شَمْ بَعْثَهُ وَ  
قَالَ كَمْ لَيْتَ قَالَ لَيْتُ يَوْمًا أَوْ بَعْضَ يَوْمٍ قَالَ بَلْ  
لَيْتَ مَا تَهْ عَامِ فَأَنْظُرْ إِلَى طَعَامِكَ وَشَرِيكَ لَمَرْ يَسْتَهِنَّ  
وَأَنْظُرْ إِلَى حِمَارِكَ وَلَنْجَعَلَكَ إِيَّاهُ لِلنَّاسِ وَانْظُرْ إِلَى  
الْعَظَمِ كَيْفَ نُشِرُهَا ثُمَّ نَكْسُوهَا حَمَافَتِنَا  
تَبَيَّنَ لَهُ قَالَ أَعْمَلُ أَنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ

٤٣

257. Allaah waa waliga<sup>(66)</sup> (gargaaraha) kuwa rumeysan. Wuxuu kaga saaraa mugdiyada xagga Nuurka<sup>(67)</sup>. Kuwase aan rumeysneyn xulafadooda waa shaydaammada Waxay kaga saaraan Nuurka xagga mugdiyada. Kuwani weeye ehu naarka, gudaheeda bay ku waari doonaan.

258. Ma waadan ogaan kaa (Namruud) ee kala dooday Ibraahim arrinka Rabbigi, inuu Allaah siiyey boqortooyo darteed? markuu Ibraahim yiri: Rabbigay waa Kan bixiya nolol ee sabab dhimasho. wuxuu yiri: Aniguba waxaan bixiyya nolol oo sababaa dhimasho<sup>(68)</sup>. Ibraahim wuxuu yiri: Haddaba hubaal Allaah wuxuu qorraxda ka soo saaraa xagga bariga ee adigu ka soo saar xagga galbeedka. Markaasuu kaa isagu gaaloobay amakaag aamusay. Oo Allaah ma hanuuniyo dadka gar maqaatayasha ah

259. Ama sida kaa (Cuzayr) ee soo ag maray magaalo, oo iyadu iskula soo kor duntau saqfyadeedii; wuxuu yiri: Goorma buu Allaah nooleyn doonaa tani dhimashadeeda kaddib? Markaas buu Allaah sababay inuu mowtanaado boqol sano, markaas soo nooleeyey.

Wuxuu yiri: Intee baad negaatay? wuxuu yiri: Wuxaan negaaday maalin ama maalin gelinkeed. Wuxuu yiri: Mayee, waxaad negaatay boqol sano, ee eeg cuntadaadi iyo cabbitaankaagii, waayuhu ma doorin; oo eeg dameerkaagii oo waxaanu kaaga dhigaynaa calaamo dadka. Oo dhugo lafaha, sida aan isugu soo ururinno, markaas aan u huwinno hilib; haddaba markay u caddaatay wuxuu yiri: Wuxaan ogayah (haatan) inuu Allaah wax walba Karo.

66. Wali waxaa halkan loola jeedaa difaace, taageere, iwm

67. Nuurka waa mid oo waa xaga, halka mugdiyada badan yihii sida gaalnimada, shakiga, nifaqa, iyo macaasida, iwm.

68. Nooleyn isagoo midna sii daayey midna dilay, wuxuuna sidaas u yiri oo u yeelay ku jeesjees Ibraahim c.s.

**260.** Oo (xus) markuu Ibraahiim yiri: Rabbiyow! I tus sida aad u nooleyso meytida. Wuxuu yiri: Miyaadan rumaysnayn? Wuxuu yiri: haayoo, laakiinse, inuu ku sii dego qalbigeyga. Wuxuu yiri: Haddaba soo qaado afar shimbirood, oo u layli inay ku soo raacaan, markaaas dhig buur walba korkeeda qayb ka mid ah (googga'a) shimbiraha, markaaas u yeer, waxay kuu imaan doonaan iyagoo duulaya. Oo ogow in Allaah yahay Adkaade, Xakiim ah.

**261.** Mataalka kuwa ku bixiya maalkooda Jidka Ilahay, wa sida mataalka inii bixisa toddobo madax, oo madax walba bixiyo boqol xabbo. Oo Allaah wuxuu u labo laabaa (ajarka) qofkuu doono<sup>(69)</sup>. Oo Allaah waa deeq ballaaranee, wax kasta Ogssoon.

**262.** Kuwa ku bixiya maalkooda Jidka Ilahay, markaaas aan raacinin waxa ay bixiyeen waxtar sheegasho<sup>(70)</sup> iyo waxyeello midna, waxay abaalgudkooda ka heli doonaan Rabbigood agti, ma cabsi qabi doonaan, mana murugoon doonaan.

**263.** Hadal san iyo saamaxaad baa ka roon sadaqo ay raacdwo waxyeello. Oo Allaah waa Deeqtoone, Dulqaad Badan.

**264.** Mu'miniintow! Ha ku burinnina sadaqooyinkiinna waxtar sheegasho iyo waxyeello, sida kan u bixiya maalkiisa istuska dadka, oo aan rumeynsnayn Allaah iyo maalinta dambeysa. marka mataalkiisu wuxuu ka dhigan yahay sida sallax ciidi kor saaran tahay, oo uu helo mahiigaan roob ah oo markuu qaado soo baxo meel maran. Ma kari doonaan in waxba ay ku helaan waxay kasbadeen, Oo Allaah ma hanuuniyo dadka gaalada ah.

<sup>69.</sup> Waxaa ku soo arooray xadiis in Nabigu s.c.w. yiri: Qofkuu ku bixiya maal jidka Ilahay waxaa loo laba laabi doonaan toddobo boqol oo jeer.

<sup>70.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Ma gali doono janno caasi waalidka, kan ugu faana dadka waxtar uu u sameeyey iyo abaal uu u galay ee sheegsheega, iyo khamriya cabka iyo beeniyaha qaddarka. W.w. Axmad

وَمِثْلُ الَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ أَبْتِغَاءَ مَرْضَاتِ اللَّهِ  
وَتَنْسِيَاتِهِنَّ أَنْفُسُهُمْ كَشَلٌ جَنَّةٌ بِرْ يَوْمٌ أَصَابَهَا وَإِلَيْهِ  
فَأَتَتْ أَكْلُهَا ضَعْفَيْنِ فَإِنَّ اللَّهَ يُصْبِهَا وَإِلَيْهِ فَطَلَّ  
وَاللَّهُ يُمَانَعُهُمُ الْبَصِيرَةِ<sup>(١)</sup> إِلَوْدَ أَحَدَكُمْ أَنْ تَكُونَ لَهُ  
جَنَّةٌ مِّنْ تَحْيِلٍ وَأَعْنَابٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَارُ  
فِيهَا مِنْ كُلِّ الشَّمَرَاتِ وَأَصَابَهَا الْكَبَرَوْلَهُ دُرْبَهُ  
ضَعْفَاءُ فَأَصَابَهَا إِعْصَارٌ فِيهِ تَارٌ فَاحْرَقَتْ كَذَلِكَ  
يُبَيِّنُ اللَّهُ لَكُمُ الْآيَاتِ لَعَلَّكُمْ تَتَفَكَّرُونَ<sup>(٢)</sup> يَا إِيَّاهَا  
الَّذِينَ إِمْمَوْا أَنْفَقُوا مِنْ طِبَّتِ مَا كَسَبُوا وَمِمَّا أَخْرَجُوا  
لَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ هُنَّ لَا يَتَمَمُوا الْحَيَاةَ مُهَنَّدُ شَفَقُونَ  
وَلَشَّمُرٌ يَأْخُذُهُ إِلَّا أَنْ تَعْوِضُوهُ فِيهِ وَأَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ عَنِّي  
حَمِيدٌ<sup>(٣)</sup> أَشَيْطِلُنَّ يَعْدُمُ الْفَقْرُ وَيَأْمُرُكُمْ بِالْمُحْسَنَهُ  
وَاللَّهُ يُعَذِّبُكُمْ مَغْفِرَهُ مِنْهُ وَفَضْلًا وَاللَّهُ وَسِعٌ عَلَيْهِ  
يُؤْتِي الْحِكْمَةَ مَنْ يَشَاءُ وَمَنْ يُؤْتَ الْحِكْمَةَ فَقَدْ  
أُوْقِنَ خَيْرًا كَيْشِيرًا وَمَا يَذَكَّرُ إِلَّا أَفْوَلُ الْأَبْيَبِ<sup>(٤)</sup>

٤٥

Allaah yahay Deeqtoone, la ammaano.

**268.** Shaydaan wuxuu idinku gooddiyaa faqri, oo wuxuu idin amraa inaad ahaataan bakhayllo masuug badan; oo Allaah wuxuu idii ballan qaadaa dambi dhaaf xaggiisa ah iyo deeq badan, Oo Allaah waa Deeq Ballaaraane, wax kasta Ogsoon.

**269.** Wuxuu siyyaa Xikmad qofkuu doono, oo qofkii la siyyo Xikmad, xaqiq waxaa la siiyey khayr badan. oo ma garowsadaan wuxaan aheyn wax garadka.

**265.** Oo mataalka kuwa u bixiya maalkooda doonista Raalli gelinta Ilahay iyo sugitaanka nafahooda darteed, waa sida beer ku taal meel taag ah oo uu helo mahiigaan roob ah oo soo saarta miraheeda labolaab, haddiise aanu helin mahiigaan roob weyn ah uu ku fillaado roob yar. Oo Allaah wuu Arkaa waxa aad fashaan.

**266.** Miyuu midkiin jecel yahay inuu lahaado beer timir iyo canab leh, oo ay hoostoodu qulqulayaan webiyo, oo ay ugu yaallaan miro kasta, oo da'i hesho, oo uu leeyahay ilmo tabar yar, markaas ay ku dhacdoo beertii xiisad dabeyl ah oo dab wadata, oo ay gubato? Sidaas buu Allaah idiinka dhigaa Aayadaha caddaan, bal inaad u fikir yeelataan?

**267.** Mu'miniintow! Wax uga bixiya (si fiican) waxyaalaha wanaagsan aad kasbataan iyo waxaanu idiinka soo saarnay arlada, oo ha u kas bixinninga kiisa xun<sup>(71)</sup>, oo idinkuba aydaan ku qaadateen indho isku qabsasho maahee. Oo ogaada inuu

<sup>71.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii sadageysta maal xaaraan ah lagama aqbaloo, hadduu ka tagana maal xaaraan ah wuxuu ku noqon dab naareed".

**270.** Oo wax kastoo sadaqo ah ee aad bixisaan ama (wax kastoo) nadar ah ee aad nadartaan, hubaal Allaah wuu Ogsoon yahay. Oo gar ma qaatayaashu ma heli doonaan wax u soo gargaara.

**271.** Haddaad u bixisaan sadaqooyinka si caddaan ah, waa hagaag, oo haddaad qarisaaan, oo aad siisaan fuqurada, waa sida idiin khayr badan. Oo tani waxaa la idiinku dhaafi doonaa wax ka mid ah camalladiinna xun. Oo Allaah waxa aad fashaan waa u Xog Ogaal.

**272.** Hanuunkoodu ma aha xil ku saaran, laakiinse Allaah baa hanuuniya qofkuu doono. Oo wax kastoo khayr ah aad bixisaan, idinka naf ahaantiinna bay u roon tahay, oo idinku wax ha u bixinnina aan ahayn doonista Wajiga Ilaahey. Oo wax kastoo khayr ah aad bixisaan dib baa la idiinku oofin doonaa si dhan, idinkoo aan waxba la idinka dhimi doonin.

**273.** (Sadaqada) waxaa ugu mudan in la siyo Fuqarada u heegan xayirmay Jidka Ilaahey, ee aan kareyn dhoof iyo dhaqdhaqaaq dhulka (ay xoogsi ku raadsadaan) midka aan aqooni uu moodayo inay hodan yihii naf samaantooda awgeed iyo ka dhowrsigooda (baryada), waxaad ku garan kartaan astaamahooda, ma ay baryaan dadka sideedaba. Oo wax kastoo khayr ah ee aad bixisaan, hubaal Allaah wuu Ogsoon yahay.

**274.** (Ma xagga) kuwa bixiya maalkooda habeen iyo maalinba, qarsoodi iyo caddaanba, waxay ka heli doonaan abaalgudkooda Rabbigood agti. Cabsi ma qabi doonaan, mana murugoon doonaan.

الَّذِينَ يَأْكُلُونَ الرِّبَا لَا يَقُولُونَ إِلَّا كَمَا يَفْعُمُ الَّذِي  
يَتَخْبِطُهُ الشَّيْطَنُ مِنَ الْمَسِّ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْلًا إِنَّمَا الْبَيْعُ  
مِثْلُ الرِّبَا وَحْلُ اللَّهِ الْبَيْعُ وَحْرَمَ الرِّبَا فَمَنْ جَاءَهُ  
مَوْعِظَةٌ مِنْ رَبِّهِ فَأَنْتَهُ عَلَىٰ مَآسِلَفَ وَمَرْءَةٍ إِلَىٰ اللَّهِ وَمَنْ  
عَادَ فَأُولَئِكَ أَصْحَابُ أَنْتَرَاهُمْ فِيهَا خَلِيلُونَ <sup>وَ</sup> يَمْحَقُ  
الَّهُ الرِّبَا وَيُرِيدُ الصَّدَقَاتِ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ كُلَّ كُفَّارٍ أَشَدُّ  
إِنَّ الَّذِينَ عَامَلُوا الصَّالِحَاتِ وَقَاتَلُوا الْمُصْلَوَةَ  
وَعَانُوا الرَّزْكَوَةَ لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْ دُرَبِهِمْ وَلَا حُوقُّ عَلَيْهِمْ  
وَلَا هُمْ يَحْرُوتُ <sup>وَ</sup> يَتَأَبَّهُ الَّذِينَ أَمْنَوْا تَقْوَةَ اللَّهِ  
وَرَدُّوا مِائِيقَ مِنَ الرِّبَا وَإِنْ كُنْمُمُؤْمِنِينَ <sup>وَ</sup> فَإِنْ لَمْ تَقْعُلُوا  
فَإِذُوْنَبِحَرِبٍ مِنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ وَإِنْ تُبْشِّرُ فَلَكُمْ رُؤُسُ  
أَنْوَاعِكُمْ لَا تَقْتَلُمُونَ وَلَا تُظْلَمُونَ <sup>وَ</sup> إِنْ كَانَ  
دُوْسُرَةً فَنَظَرَةٌ إِلَىٰ مَيْسَرَةٍ وَإِنْ تَصْدَقُوا خَيْرُكُمْ  
إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ <sup>وَ</sup> وَلَقَوْلَوْمَاتُرَجُونَ فِيهِ إِلَىٰ  
اللَّهِ شُمُرُوفٌ كُلُّ نَفْسٍ مَا كَسْبَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ <sup>وَ</sup>

٤٧

275. Kuwa cuna Ribada uma kici karaan waxaan aheyn sida mid uu sheydaan ku daandaanshay taabasha (diisa) u kaco<sup>(72)</sup>. Sidaasi waxaa ugu wacan inay yiraahdaan: Beecshurada wax kale maahee waxay uun la mid tahay ribada; oo Allaah wuu xalaaleeyey beecshurada oo xaaraameeyey Ribada. Ee qofkii haddaba waano uga yimaado Rabbigi markaa iska daaya, wuxuu leeyayah wixii horey u tagey<sup>(73)</sup>; oo arrkiisa Allaah buu la jiraa; qofkiise u noqda, waa kuwaah ehl Naarka, way ku dhex waari doonaan.

276. Allaah ma barakeeyo Ribo, oo sababaa Sadaqooyinka inay bataan. Oo Allaah ma jecla abaal laawe, dambile oo dhan.

277. Hubaal kuwa rumeysan oo sama fala oo ooga salaadda oo bixiya Zakada, waxay ka heli doonaan abaaalgudkooda Rabbigood agti. Cabsi ma qabi doonaan, mana murugoon doonaan.

278. Mu'miniintow! Dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah oo iskaga taga waxa ka baaqi ah (faa'ido laga helay) ribo, haddaad thihiin mu'miniin.

279. Haddiise aydaan falin sidaa, markaa ku tala gala dagaal uu idinku qaado Allaah iyo Rasuulkiisu, oo haddaad toobad keentaan, haddaba waxaad mudan doontaan raasumaalkiinna, waa inaydaan wax u dhimin (deyn qabaha) oo kor saar ka qaadan, idinkana waa inaan waxba la idinka dhimin (raasumaalkiinna ka mid ah)<sup>(74)</sup>.

280. Oo haddii (deymeysanahu) daneysan yahay waa in laga sugo (deynta) intay uga fududaato (bixinteeda), oo inaad u dhaafaaan baa idii khayr badan, haddaad ogaan lahaydeen<sup>(75)</sup>.

281. Oo iska jira Maalin la idii soob celin doono xagga Allaah. markaas naf walba loogu oofin doono si dhan waxay kasabtay iyagoo aan lagu gardarroon doonin.

72. *Riba qaataha ma xasilo, ma deggana, oo waa sida qof waalan oo dhacdhadcaya.*

73. *Ribadii la qaatak ka hor soo degidda Aayaddan way bannaan tahay inaan la soo celin.*

74. *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Waxaan ku imid habeenkii lay dhheelmay dad aad u caloolo waaweyn oo xaalad xun ku jira, waxaan iri waa kuwamaa kuwaani? Wuxuu yiri: waa kuwa cuna ribada.*

75. *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Waxaa jirey nin ganacsade ah oo dadka wax amaa hin jirey, markiina uu arko nin daneysan wuxuu oran jirey: "U dhaafa oo iska cafiya si Allaah noo cafiya oo noogu dambi dhaafa, markaasuu Allaah u dambi dhaafay." Al-Bukhaari.*

282. Mu'miniintow! Marka aad kala deysanaysaan deyn ilaa muddo magacaaban ah, haddaba qora. Oo ha idinku kala qoro dhexdiinna qore si caddaalad ah. Oo yaanu qorahu diidin inuu u qoro sida uu Allaah u baray, ee ha qoro, oo ha yeeriyo (waxa la qorayo) kan xaqa (deynta) qaadan, oo ha dhowro (xilka uu saaray) Allaah, Rabbigi, oo yaanu ka dhimin wax ka mid ah waxa lagu yeesho. Haddiise kan xaqa lagu leeyayah uu yahay mid makas ama dacif ah ama aanu awoodin inuu wax yeeriyo, kan ugu dhow xigaalo ahaan ha u yeeriyo si caddaalad ah, oo marag gashada labo markhaati oo Raggiinna ka mid ah. Haddaanay joogin labo nin, marag gashada nin iyo labo haweenood oo aad ku raalli tiihi marag ahaan, si hadday middood u hilmaanto, ay u xusuusiso tan kale. Oo waa inaysan diidin markhaatiyadu haddii loogu yeero (markhaati). Oo ha ka caajisina inaad qortaan (deynta aad kala qaadataan) ha yaraado ama ha badnaado ilaa muddadiisa la qabtay, Arrinkaa baa caddaaladsan Allaah agtiis oo toosan markhaati ahaan, oo ugu dhow si loo reebo shakiyo dhexdiinna gala, inay tahay maahee ganacsii joogta ah oo aad isku dhaafsataan isla meeshaa dhexdiinna, markaa ma jiro wax eed ahi korkiinna haddii aydaan qorin. Ee marag u yeela markaad wax kala gadanaysaan. Oo yaan loo geysan wax dhibaato ah qore ama markhaati midkoodna, oo haddaad fashaan (dhibaato) haddaba hubaal waa caasinimo idinku jirta. Oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah; oo Allaah wuxuu idin baraa cilmi, Oo Allaah wax waliba wuu Ogsoon yahay.

يَأَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا دَأَدْيَنْتُم بِدِينِنَ إِلَى الْجَلِيلِ مُسْكَنَ  
فَأَكَتُبُ تِبْوَهُ وَيُكَتَبُ بِيَدِنَ كَاتِبٌ بِالْعَدْلِ وَلَا يَأْبَ  
كَاتِبٌ أَنْ يَكْتُبَ كَمَا عَلَمَ اللَّهُ فَلَيَكُتُبْ وَلَيُعْلَمْ  
الَّذِي عَلَيْهِ الْحُقْقُ وَلَيُسْتَقِدَ اللَّهُ رَبُّهُ وَلَا يَحْسَنْ مَنْ شَيْءَ  
فَإِنْ كَانَ الَّذِي عَلَيْهِ لَفْقٌ سَفِينَاهُ أَوْ ضَعِيفًا أَوْ لَا يَسْطِيعُ  
أَنْ يُعْلَمْ هُوَ فَلَيُعْلَمْ وَلِيُعْلَمْ بِالْعَدْلِ وَاسْتَشَهِدُ وَأَشْهِدُ  
مِنْ رَجَالِ الْكُمَرِ فَإِنْ لَرَبَ كُونَارَ جَلَانَ فَرَجُلٌ وَأَمْرَانَ  
مَمَنْ تَرْضَوْنَ مِنْ الشُّهَدَاءِ أَنْ تَضْلِلَ إِلَيْهِمَا فَلَدَكَرَ  
إِلَيْهِمَا الْأُخْرَى وَلَا يَأْبَ الشُّهَدَاءِ إِذَا مَادُعُوا لِلَّاعْنَوْ  
أَنْ تَكْتُمُوهُ صَعِيدًا وَكَبِيرًا إِلَى أَنْ أَجْلَهُ ذَلِكَمْ أَقْسَطُ  
عِنْدَ اللَّهِ وَأَقْوَمُ لِلشَّهَدَةِ وَأَدْنَى الْأَتْرَابُ بِالْأَلَا أَنْ تَكُونَ  
تِجَرَّةً حَاضِرَةً تُرْبِرُ وَذَهَابَتْ لِمَ فَلَيَسْ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ  
الَّذَا تَكْبُحُوهَا وَشَهِدُوا إِذَا أَبَأْتُمْهُ وَلَا يُضَارَ كَاتِبٌ  
وَلَا شَهِيدٌ وَإِنْ تَقْعُلُوْ فَإِنَّهُ فُسُوفٌ يَكُلُ شَيْئًا وَتَقْوَى  
اللَّهُ وَيَعْلَمُ كُلَّ مَا لِلَّهِ وَاللَّهُ يَكُلُ شَيْئًا عَلَيْهِ

\* إِنْ كَتَمْتُ عَلَى سَفَرٍ وَلَعَزِيدُوا كَيْتَأْفِرَهُنَّ مَعْبُوْضَةً  
فَإِنْ أَمْنَ بَعْضُكُمْ بَعْضًا فَلَيُؤْذَنُ لِلَّهِ أَوْتُنَّ أَمْنَتَهُ وَلَيُقْتَلَ  
اللَّهُ رَبُّهُ وَلَا تَكُنْ شَهِدَةً وَمَنْ يَكْتُمْهَا فَإِنَّهُ  
أَشَدُّ قَبَّةً وَاللَّهُ يَمْأَعِلُونَ عَلَيْهِ ﴿٦﴾ اللَّهُ مَا فِي السَّمَوَاتِ  
وَمَا فِي الْأَرْضِ وَلَنْ يُبْدُ دُوَّامًا فَأَنْفُسُكُمْ أَوْلَى بِفَوْهَةِ  
يُحَاسِبُكُمْ بِهِ اللَّهُ فَيُغَرِّرُ لَمَنْ يَشَاءُ وَيَعْدِبُ مَنْ يَشَاءُ  
وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ بِقَدِيرٍ ﴿٧﴾ إِنَّمَا مَنَّ الرَّسُولُ بِمَا نَزَّلَ اللَّهُ  
مِنْ رَبِّهِ وَالْمُؤْمِنُونَ كُلُّهُمْ أَمْنٌ بِاللَّهِ وَمَنْ لَمْ يَكُنْ  
وَكُنْتُهُ وَرَسُولُهُ لَا نَفْرُقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِنْ رَسُولٍ وَقَالُوا  
سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا عَفْرَانَكَ رَبِّنَا وَأَيْكَ الْمَصِيرُ لَا يَكُلُّ  
اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا وَسَعَهَا الْهَامَ كَسِبَتْ وَعَلَيْهَا مَا أَكْتَسَبَتْ  
رَبِّنَا لَا تُؤْخِذْنَا إِنْ سَيِّئَاتُنَا وَلَا خَطَايَا نَارَتْنَا وَلَا تَحْمِلْ  
عَيْنَنَا إِصْرًا كَمَا حَمَمْتَنَا وَعَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِنَا رَبَّنَا  
وَلَا تَحْمِلْنَا مَا لَا طَاقَةَ لَنَا بِهِ وَأَعْفُ عَنَّا وَأَغْفِرْنَا  
وَأَرْحَمْنَا أَنْتَ مَوْلَانَا فَانْصُرْنَا عَلَى الْقَوْمِ الْكُفَّارِينَ ﴿٨﴾

٤٩

midkoodna ka mid ah Rusushiisa dhexdooda, oo waxay yiraahdaan: Waanu maqlaynaa oo adeeceynaa. Rabbiyow! Dambi Dhaafiddaada (yaanu kaa barinnaa), oo waa Xaggaaga meel noqodka dambe.

**286.** Allaah ma saaro nafna wax dhaafsiisan karaankeeda. Waxay leedahay (khayrka) waxay kasabtay, oo ka go'an tahay dusheeda waxay (dambi) kasabtay Rabbiyow! Ha noo qaban haddii aanu illowno ama gefno (ula kac la'aan). Rabbiyow! Oo ha na saarin culays sida aad u saartay kuwii naga horreeyey. Rabbiyow! Ha na saarin wax tabar aanaan u lahayn qaadistooda. Oo na cafi, oo noo ceeb astur, oo noo naxariiso<sup>(76)</sup>. Adigaa ah Gacalkayaga na xafida, ee nooga gargaar dadka gaalada ah<sup>(77)</sup>.

<sup>76.</sup> Wuxuu Allaah swt ku soo gunaanuday Suuraddan u tilmaamidda addoomahiisa sida loo baryo iyo waxyaalo uu fiican inay ka baryaan, sida uu ugu barayba suuradda Faatixada sida loo ammaano oo looga dalbo hanuun.

<sup>77.</sup> Nabagu s.c.w. wuxuu yiri: "Waa ay ku filan tahay qofkii akhirsta habeenki labada Aayadood ee u dambeeya Suuradda Al-Baqara". Waxaa la yiri waxay ugu filan tahay dhowris iyo xafidid, ama ka kaafisaa Salaatu Leylka.

# J U S K A (3)

## Suuradda Aal-Cimraan (Reer Cimraan) 3

Waa 200 Aayadood Madanniyah

**Bismillaahir Raxmaanir Raxiim**

1. Alif-Laam-Miim.

2. Allaah, Ma jiro Ilaaah aan Isaga ahayn, waa weligii Noolaha, iski u jira, walax kastaana ku jirto oo ku ahaato Amarkiisa.

3. Wuxuu kuugu soo waxyooday Kitaabka si xaq ah, isagoo xaqijinaya wixii ka horreeyey, oo Wuxuu soo waxyooday Towaadda iyo Injiilka...

4. Kal hore, hanuu ahaan dadka, oo wuxuu soo waxyooday Furqaanka, hubaal kuwa aan rumeyasnayn Aayadaha Ilahay, waxay mudan doonaan cadaab daran; oo Allaah waa Adkaade, Aargoosi leh.

5. Allaah-hubaal waxba kama qarsoona ku sugar arlada ama samada.

6. Isaga weeye Kan idiinku sawira ilma galeennada sida uu doono. Ma jiro ilahaan Isaga ahayn, Adkaadaha, Xakiimka ah.

7. Isaga weeye Kan kuu soo waxyooday Kitaabka, qaar ka mid ah aayadahiisa xukunkoodu cad yihiin, waa iyaga aasaaska Kitaabka, qaar kalena waa kuwo isu eg. Marka ma kuwa ay quluubtoodu ku jirto weecashada, waxay raacraacaan kuwa isu eg iyagoo doonaya inay wax ku habaabiyaan oo doonaya inay ka bixiyaan fasir (iskood ah)<sup>(1)</sup>, umase cilmi laha fasirkiiisa waxaan aheyn Allaah. Oo kuwa ku xeel dheer cilmiga waxay yiraahdaan: Waanu rumeyssannahay; dhammaantood iyagu waa xagga Rabbigayo. Oo ma garowsadaan cid aan aheyn wax garadka.

8. Rabbiyow! Ha weecin quluubtayada kaddib markaad na hanuunisay<sup>(2)</sup>, oo nooga hibee xaggaaga Naxariis. Hubaal waxaad Adigu tahay kan deeqda baxsha.

9. Rabbiyow! Adigaa isu soo ururin doonaa dadka Maalin aan shaki lahayn; hubaal Allaah ma ka baxo Ballankiisa.

1. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Haddaad aragtaan dad ku murmaya Qur'aanka, ka digtoonaada waa kuwa u Alle magacaabaye.

2. Nabigu s.c.w. wuxuu wax badan ku dueysan jirey: Allow gedgeddiyyaha quluubtow, ku sug qalbigeya diintaada.



إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا لَنْ يُغْنِيَنَّ عَنْهُمْ أَمْوَالُهُمْ وَلَا أَوْلَادُهُمْ  
مِّنَ اللَّهِ شَيْئًا وَأُولَئِكَ هُمُ وَقُودُ النَّارِ ١٥ كَدَابُ إِلَى  
فِرْعَوْنَ وَاللَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ كَذَّلِكَ يَأْتِنَا فَأَخْذَهُمُ اللَّهُ  
يَدُوِّيَهُمْ وَاللَّهُ سَدِيدُ الْعِقَابِ ١٦ قُلْ لِلَّذِينَ كَفَرُوا  
سَعْلَبُوكُوتْ وَمُخْشِرُوكُوتْ إِلَى جَهَنَّمْ وَنِسْ أَمْهَادُ ١٧  
فَقَدْ كَانَ لَكُمْ إِيمَانٌ فِي فَتَنَتِنَ الْقَاتِفَةِ تُقْتَلُونَ فِي  
سَبِيلِ اللَّهِ وَأُخْرَى كَفَرَةٍ بَرَّ وَنَهْمٌ مُغْلَقُهُمْ رَأْيُ  
الْعَيْنِ وَاللَّهُ يُؤْمِنُ بِتَصْرِهِ مَنْ يَشَاءُ إِنَّ فِي ذَلِكَ  
لَعْنَةً لِأُولَئِكَ الْأَنْصَارِ ١٨ زُنْنَ لِلنَّاسِ حُبُّ الشَّهَوَاتِ  
مِنَ الْإِنْسَانِ وَالْبَنِينَ وَالْقَنْطَرِيَّةِ الْمُقْنَظَرَةِ مِنَ الْدَّهَبِ  
وَالْفَضَّةِ وَالْحَيْلِ الْمُسَوَّقَةِ وَالْأَنْعَمِ وَالْحَرْثَ دَلَّاك  
مَسْتَحَ الْحَيْوَةِ وَالدُّنْيَا وَاللَّهُ عَنْهُ دَهْرٌ حُسْنُ الْمَعَابِ ١٩ قُلْ  
أَوْنِيْكُمْ بِحِيرَى مِنْ ذَلِكُمْ لِلَّذِينَ أَغْنَوْتُمْ رَبَّهُمْ  
جَنَّتٌ تَجْرِي مِنْ نَحْتِهَا الْأَنْهَارُ خَلِيلُوكُوتْ فِيهَا وَأَرْجُوكُوتْ  
مُطْهَرَةٌ وَرَضْوَانٌ مِنْ اللَّهِ وَاللَّهُ بَصِيرٌ بِالْعَبَادِ ٢٠

10. (Ma) kuwa gaalada ah hubaal waxba ugama tari doonaan maalkoodu iyo ilmahooda Allaah agtiisa; oo kuwan weeyaan kuwa ah shidaalka Naarta.

11. Waa shaqadii reer Fircoo oo kale iyo kuwii ka horreeyay; waxay beeniyeen Aayadahayagi, markaasuu Allaah u halligay dunuubtoodii darteed. Oo Allaah ciqaabkiisu wuu daran yahay.

12. Ku dheh gaalada: Waa la idinka adkaan doonaa, oo la idinku soo ururin doonaa wada jir Naar, oo ah tan ugu xun gogol la dhinac dhigo.

13. Xaqiq waxaa idiinku sugar calaamo idinka (Yuhuudday) labada ciidammoode ee ku kulantay (dagaalkii Badar): Koox waxay u dagaallameysay Jidka Ilaahey dartii, halka tan kale ay aheyd gaal, waxay (mu'iminiinta) ugu arkeen (gaalada) labo jibbaarkood tiro ahaan xagga aragtida isha (inkastoo ay ahaayeen seddex jibbaarka tiradooda). Oo Allaah wuxuu ku xoojiyaa taageeradiisa qofkuu doono. hubaal arrinkan waxaa ugu

jira cibrad kuwa aragtida dheer leh.

14. Jaceylka waxyaalaha naftu rabto, oo leh haween, wiilal, iyo kayd badan oo dahab iyo qalin ah iyo fardo laylan oo qurxoon iyo xoolo iyo dhul si fiican u beeran baa loo qurxiyey dadka. Kani waa sahayda nolosha adduunkan; oo Allaah agtiisa baa noqosho wanaagsan leh.

15. Dheh: Ma idiin sheegaa waxa ka fiican waxyaalahani? Waxay leeyhiin kuwa iska jira (xumaha)-beero Rabbigood agtiis ah ay hoostoodu qulqulaan wabiyo, iyagoo ku dhex waaraaya, iyo afooyin daahir ah iyo raalli ahaansho xag Ilaahey ah. Oo Allaah wuu Arkaa Addoomihiisa.

### 16. Kuwaa yiraahda: Rabbiyow!

Hubaal innagu waanurumeysannahay, ee noo dhaaf dunuubtayada, oo naga dhawr cadaabka Naarta.

### 17. (Kuwaasu waa) kuwa sabra iyo run sheegga, iyo daacadda iyo kuwa si fican (oo deeqsinnimo leh) wax u bixiya, iyo kuwa weydiista dambi dhaaf waqtiyada aroorta hore ah.

### 18. Allaah wuxuu marag ka yahay inuusan jirin ilaahe aan Isaga ahayn, oo malaa'igtu (sidoo kale bay yeelaan) iyo kuwa cilmiga lehba; (Allaah) Wuxuu ku dhaqaa uunkiisa si caddaalad ah. Ma jiro Ilaah aan Isaga ahayn, Adkaadaha, Xakiimka ah.

### 19. Hubaal, diinta xaqa ahi Allaah agtiisa waa Islaamka. Oo kuwii la siiyey Kitaabka isma ay khilaafin waxaan ahayn intii uu u yimid cilmiga xasad dhexdooda ah darti. Oo qofkii rumeysan diida Aayadaha Ilahay, haddaba hubaal Allaah wuu ku dhaqsi badan yahay xisaabta.

### 20. Haddiise ay kula doodaan dheh: Waxaan anigu isugu dhiibay si dhan Allaah, oo waa sidaas qofkii I raaca.

Oo ku dheh kuwa la siiyey Kitaabka iyo kuwa aan wax baran: Miyaad isdhiibeysaan? <sup>(3)</sup> Haddaba hadday is dhiibaan, markaa runtii waa hanuunsan yihiin; haddiise ay dhabarka jeediyaan, haddaba waxaa ku saaran uun gaarsiinta Risaalada; oo Allaah wuu arkaa addoomahiisa.

### 21. Hubaal (ma) kuwa rumeysan diida Aayadaha Ilahay, oo ku dila Nabiyada xaq darro, oo dila kuwa amra caddaaladda ee dadka ka mid ah <sup>(4)</sup>. Ugu bishaaree kuwaa cadaab aad u xanuun badan.

### 22. Kuwaas weeye kuwa ay acmaashoodu ku noqon doonaan baabba'a adduunkan iyo Aakhiradaba, oo ma heli doonaan wax u soo gargaara.

<sup>3</sup>. Marba haddii ay is dhiibaan, dadka elhu kitaabka waxaa loo dhowraa xuquuqdooda iyo sharaflooda inkastoo ay jirto diiddoododa islaamka, waase inay bixiyaa jizo halkii sakada iyo difaaca laga rabo muslimiinta. Kaddib waxaa mas'uul ka ah ilaalintooda dawladda Islaamka.

<sup>4</sup>. Waxaa la weydiiyey Nabiga s.c.w. yaa dadka ugu cadaab daran Maalinta Qiyaamaha. Wuxuu yiri: Qof dilay Nabi ama dilay qof faraya wanaag oo ka reebaya xumaanta. W.w. Ibnu Abii Xaatim.

أَتَرَ إِلَى الَّذِينَ أَتُوا نَصْبِيَّا مِنَ الْكِتَابِ يُدْعَوْنَ إِلَى كِتَابٍ  
 اللَّهُ لِيَحْكُمُ عَنْهُمْ فَرُبَّمَا يَوْمُهُمْ وَهُمْ مُغَرَّضُونَ<sup>(٣)</sup>  
 ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَاتُلُوا إِنَّمَا تَحْسَنُ النَّاسُ إِلَّا أَنَّمَا مَعْدُودٌ مَا  
 وَغَرَّهُمْ فِي دِينِهِمْ مَا كَانُوا يَفْتَرُونَ<sup>(٤)</sup> فَيَكِيدُ إِذَا جَعَنَاهُمْ  
 لَيَوْمٍ لَرِبَّ فِيهِ وَقُوَّفَتْ كُلُّ نَفْسٍ مَا كَسَبَتْ وَهُنَّ  
 لَا يُظْلَمُونَ<sup>(٥)</sup> قُلْ لَلَّهُمَّ مِلَكُ الْمُلَائِكَةِ تُوفِّيْ الْمُلَائِكَةَ مِنْ  
 تَشَاءِ وَتَنْزِعُ الْمُلَائِكَةَ مِنْ تَشَاءِ وَتُعَزِّزُ مِنْ تَشَاءِ وَتُذَلِّ مِنْ  
 تَشَاءِ يَدِكَ الْخَيْرِ إِنَّكَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ وَقَدِيرٌ<sup>(٦)</sup> تُولِّي الْأَيْلَلَ  
 فِي الْأَنَّهَارِ وَتُولِّي الْأَنْهَارَ فِي الظَّلَلِ وَتُخْبِجُ الْأَجَى مِنَ الْأَيْمَنِ  
 وَتُخْبِجُ الْأَمْيَنِ مِنَ الْأَجَى وَتَرْزُقُ مِنْ تَشَاءِ يَعِزِّيزِ حَسَابٍ<sup>(٧)</sup>  
 لَا يَتَّخِذُ الْمُؤْمِنُونَ الْكَافِرِينَ أَوْ لِيَاءً مِنْ دُونِ الْمُؤْمِنِينَ  
 وَمَنْ يَقْعُلْ دَلِكَ فَإِنَّمَا مِنَ اللَّهِ فِي شَيْءٍ إِلَّا نَسْقَوْا مِنْهُمْ  
 تُقْدَنَةٌ وَيُحَدِّرُ كُمُّ اللَّهِ نَفْسَهُ وَإِلَى اللَّهِ الْمُصِيرُ<sup>(٨)</sup> قُلْ  
 إِنْ تُخْفُوا مَا فِي صُدُورِكُمْ أَفَتُبَدِّوْهُ يَعْلَمُ اللَّهُ وَيَعْلَمُ  
 مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ وَقَدِيرٌ

23. Miyaadan arag kuwaa (Yuhuudda) ee la siiyey qayb ka mid ah Kitaabka? waxaa loogu baaqaa Kitaabka Ilaahay si uu u kala xukumo dhexdooda, markaas bay qaar ka mid ah dhabarka jeediyaan, oo siibtaan.

24. Waxaa arrinkan ugu wacan inay yiraahdaan: Naarta nama taaban doonto waxaan aheyn maalmo tirsan. Oo waxaa ku hoda diintooda waxay been abuurteen.

25. Ee sidee buu ahaan doonaa (xaalkooda) marka aan isugu soo kulminno dhammaantood Maalin aan shaki ku jirin, oo naf walba loogu oofyo si dhan waxay kasbatay iyagoor aan lagu gardarroon doonin?

26. Dheh: Allahayow! Kan Boqortooyada (runta ah) iska lahow, Wuxaad siisa boqortooyada qofkii aad doonto, oo ka qaaddaa boqortooyada qofkii aad doonto, oo waxaad kor yeeshaa qofkii aad doonto, oo hoos yeeshaa qofkii aad doonto. Gacantaada buu ku jiraa khayrku. Hubaal Adiga baa wax kasta Kara oo awood ku dul leh.

27. Wuxaad ka yeeshaa habeenka inuu dhex gasho habeenka, oo ka soo saartaa wax nool wax dhintay, oo ka soo saartaa wax dhintay wax nool<sup>(5)</sup>. Oo Wuxaad arzaaqdaa kan aad doonto xisaab la'aan.

28. Yeysan mu'miniintu ka dhigan gaalada xulufo halkii mu'miniinta, oo qofkii arrinkan fala, kama heli doono wax (gargaar ah) xagga Ilaahay, waase inaad iska ilalaasaan xaggooda iska ilaalin dhan<sup>(6)</sup>. Oo Allaah wuxuu idiinka digaa Naftiisa<sup>(7)</sup>, oo waa xagga Allaah meel noqodka dambe.

29. Dheh: Haddaad qarisana waxa ku jira laabahiinna ama muujisaan, Allaah wuu ogsoon yahay, oo wuxuu ogsoon yahay waxa jira samooiyinka iyo waxa jira arlada. Oo Allaah wax walba wuu Karaa.

5. *Mufasirinta qaarkood waxay tusaale ugu soo qaateen Aayaddan ka soo bixidda shimbirka yar ukunta, iyo ukunta oo ka soo baxdo digaagadda.*

6. *Haddii uu mu'minku ka baqo dhibaato ka soo gaarta cadow, waxaa u bannaan inuu iska yeelo inuu ku waafaqsan yahay cadowga waxa ay ku qasbayaan maadaama qalbigiisa iyo niyaddiisa ku lahayn wax saameyn ah.*

7. *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Ma jiro axad ka qüro badan Allaah, sidaas daraadeed buu u xaaraanshay zinada, mana jiro axad ka jecel Allaah in la ammaano oo loo xamdi iyo mahad naqo".*

**30.** Maalinta naf waliba heli doonto waxa khayr ay fashay oo la hor keeno iyo waxa xume ay fashay, waxay jeelaan doontaa in dheddooda iyada iyo xumahaay ay ahaan lahayd geeddi aad iyo aad u fog. Oo Allaah wuxuu idiinka digaa Naftisa. Oo Allaah waa u Turid iyo Naxariis Badan yahay addoomaha.

**31.** Dheh: Haddaad Allaah jeceshiihi, haddaba i soo raaca, Allaah baa idin jeelaan oo idiin dhaafi dunuubiinna. Oo Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**32.** Dheh: Adeeca Allaah iyo Rasulka. Haddiise ay dhabarka jeediyaan, hubaal Allaah ma jecla gaalada.

**33.** Hubaal Allaah wuxuu ka doortay Aadam iyo Nuux iyo reer Ibraahiim iyo reer Cimraanba ummadahoo dhan dushood.

**34.** Durriyat qaarkoodba ka yimid qaar, oo Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta og.

**35.** (Xus) markay xaaskii Cimraan tiri: Rabbiyow! Waxaan anigu hubaal kuu nadar galay in waxa ku jira uurkayga uu u madax barnaanaado (cibaadadaada) ee iga aqbal. Hubaal waxaad Adigu tahay wax kasta Maqlaha, wax kasta Ogsoonaha ah.

**36.** Markiise ay dhashay waxay tiri: Rabbiyow! Hubaal waxaan dhalay ilmo dheddig ah, oo Allaah wuu ka ogaa (cid kale oo dhan) waxa ay dhashay – oo labku ma aha la mid dheddiga, oo waxaan u bixiyey Maryam<sup>(8)</sup>, oo waxaan kaa magan gelinayaay iyada iyo surriyaddeedaba Shaydaanka la fogeyay.

**37.** Markaasuu Rabbigeed ka aqbalay aqbal wanaagsan, oo ka yeelay inay korto koritaan wanaagsan, oo u dhiiibay xilka daryeelkeeda Zakariya. Mar kasta oo uu Zakariya ugu soo galo qolka salaadda (si uu u arko) wuxuu ka helaa agteeda riziq. Wuxuu yiri: Maryameey: Xaggee bay waxakani kaaga yimaadaan? Waxay tiri: Waa xag Ilaahey. Hubaal Allaah wuxuu uarsaqa qofkuu doono xisaab la'aan.

<sup>8</sup>. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Waxaa u khayr badan haweenka caalamka afar: Maryama binti Cimraan, Aasiya marwadii Fircoon, Khadiija binti Khuwaylid, iyo Faadimah binti Rasuulilaah.

هُنَالِكَ دَعَارَكَ رَيَارَبَهُ، قَالَ رَبٌّ هَبْ لِي مِنْ لَدُنْكَ ذُرْيَةً  
 طَيْبَةً إِنَّكَ سَمِيعُ الدُّعَاءِ ﴿٢٨﴾ فَنَادَهُ الْمَلِكَةُ وَهُوَ قَائِمٌ  
 بِصَلَوةٍ فِي الْمَحَرَابِ أَنَّ اللَّهَ يَبْشِرُكَ بِيَحِينِ مُصْدِقَةٍ كَلِمَتَهُ  
 مِنَ اللَّهِ وَسِيدِ الْأَوْحَادِ وَبِتَامَنِ الصَّلَاحِينَ ﴿٢٩﴾ قَالَ رَبٌّ  
 أَنِّي كَوْنُ لِي عَلَدْ وَقْدَ بَلَغَيِ الْكِبْرِ وَأَمْرَأَتِي عَاقِرَ قَالَ  
 كَذَلِكَ اللَّهُ يَفْعُلُ مَا يَشَاءُ ﴿٣٠﴾ قَالَ رَبٌّ أَجْعَلْ لِي آيَةً  
 قَالَ إِيَّاكَ الْأَتَكُمْ أَنَّا سَنَلْكَةَ آيَاتِ الْأَدْرَنَى وَذَكْرَ  
 رَبِّكَ كَشِيرًا وَسَيِّعَ بِالْأَعْشَى وَالْإِبْكَارِ ﴿٣١﴾ وَأَذْقَالَتِ  
 الْمَلِكَةُ يَتَرَيمَ إِنَّ اللَّهَ أَضْطَفَنِكَ وَطَهَرَكَ وَاضْطَفَنِكَ  
 عَلَى نِسَاءِ الْعَالَمِينَ ﴿٣٢﴾ يَتَرَيمُ مُؤْتَقْتَى لِرَبِّكَ وَاسْجُودِي  
 وَأَرْكَحِي مَعَ الْرَّكِعَيْنِ ﴿٣٣﴾ ذَلِكَ مِنْ أَنْبَاءِ الْعَيْنِ تُوجِهُ إِلَيْكَ  
 وَمَا كُنْتَ لَدَنَاهُمْ إِذْ يَلْقَوْنَ أَقْلَمَهُ زَهْمَهُ يَكْفُلُ مَرِيمَ  
 وَمَا كُنْتَ لَدَنَاهُمْ إِذْ يَخْتَصِمُونَ ﴿٣٤﴾ إِذْ قَالَتِ الْمَلِكَةُ  
 يَتَرَيمَ إِنَّ اللَّهَ يَبْشِرُكَ بِكَلِمَةٍ مِنْهُ أَسْمُهُ الْمَسِيحُ عِيسَى  
 أَبْنُ مَرِيمَ وَجِيهَافِ الْدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَمِنَ الْمُقْرَبِينَ ﴿٣٥﴾

38. Halkaas buu Zakariya ku baryey Rabbigii, wuxuu yiri: Rabbiyow! Iga sii xaggaaga ubad wanaagsan. Hubaal Waxaad tahay Maqlaha baryada.

39. Markaas bay malaa'igtu u dhawaaqday isagoo taagan oo ku tukanaya qolka: in Allaah uu kuugu bishaaraynayo Yaxyaa oo rumeynaya eray xagga Ilahay ah oo sharaf leh oo dhowrsoon oo Nabi ah ka mid ah kuwa wanaagsan.

40. Wuxuu yiri: Rabbiyow! Sidee baan u lahaan doonaa wiil (ii dhasha), anigoo da' noqday, oo haweentaydu waa ma dhasho? Wuxuu yiri: Sidaas buu Allaah u falaa wuxuu doono.

41. Wuxuu yiri: Rabbiyow! Ii yeel calaamo. Wuxuu yiri: Calaamaddaadu waa inaadan la hadlin dadka saddex maalmoood tilmaamo ma'ahee. Oo xus Rabbigaa wax badan oo xurmo weynee oo huf galab iyo subaxba.

42. Oo (xus) markay malaa'igtu tiri: Maryameey! Hubaal Allaah wuu ku doortay oo ku daahiriyey, oo kaa doortay dumarka caalamka.

43. Maryameey! U joogtee daacadda Rabbigaa, oo sujuud, oo la rukuuc kuwa rakuuca.

44. Kani waa wax ka mid ah wararka waxa aan muuqan ee Ghaybka ah ee aanu kuu waxyoonno, oo lama aadan joogin markay qallamadooda tuuranayeen (si ay go'aan uga gaaraan) kooda kafaala qaadaya Maryam; oo adigu lama aadan joogin markay isla doodayeen.

45. (Xus) markay malaa'igtu tiri: Maryameey! Allaah wuxuu kuugu bishaaraynayaa erey ka yimid xaggiisa, oo magaciisu yahay Al-Masiix Ciisaa, ibnu Maryam, oo ku leh sharaf adduunkan iyo aakhiradaba, oo ka mid ah kuwaa la soo dhoweeyo.

**46.** Oo wuxuu la hadli doonaa dadka isagoo ilmo dhashay naas nuug ah oo gogol saaran iyo isagoo gar madoobe ah, oo (ahaan doonaa) mid ka mid ah kuwa wanaagsan.

**47.** Waxay tiri: Rabbiyow! Sidee baan u lahaan doonaa wiil (ii dhasha) isagoo aanu nin i taaban? Wuxuu yiri: Sidaas oy tahay, Allaah wuxuu abuuraa wuxuu doono. Marka uu arrin gooyo wuxuu oo keliya ku yiraahdaa Ahow, markaa waaba yayay.

**48.** Oo Wuxuu bari doonaa qoraalka iyo Xikmadda iyo Towraadda iyo Injilka.

**49.** Oo (ka dhigi doonaa) Rasuul loo diro ilmaha Israa'iil: Inaan idii la imid Calaamo xagga Rabbigii ah, inaan idinka gooyo dhoobada wax sida muuqaal shimbir leh, markaasaan afuufaa oo wuxuu noqdaa shimbir Idanka Ilaahey. Oo waxaan bogsiyya indhoolaha iyo baraslahaa, oo soo nooleeyaa meytida Idanka Ilaahey, oo waxaan wax idinka sheegaa waxaad cunaysaan iyo waxaad ku kaydsanaysaan guryihiienna. Hubaal arrinkan waxaa idiinku sugar calaamo, haddaad tiihin mu'miniin.

**50.** Oo waxaan u imid inaan idii xaqijiyo waxa hortyada ah ee Towraadda, iyo inaan idii xalaaleeyo qaar ka mid ah waxa la idinka xaaraameeyey, oo waxaan idii la imid calaamo xagga Rabbigii ah. Ee Alle ka cabsada (oo dhowra xilka uu idin saaray) oo i Adeeca.

**51.** Hubaal Allaah waa Rabbigii iyo Rabbigii ba, ee caabuda, kani waa Jidka Toosan.

**52.** Markiise uu Ciise ka dareemay gaalnimo xaggooda, wuxuu yiri: Yaa iigu gargaari xagga (Jidka) Ilaahey? Xertii waxay yiraahdeen: Annagaa ah gargaarayaasha (Jidka) Ilaahey; waxaanu rumeyssannahay Allaah, oo marag ka ahow inaanu nahay Muslimiin.

رَبَّنَا إِنَّا مُتَابِعُكَ أَنْزَلْتَ وَأَنْتَ بِنَا الرَّسُولَ فَأَنْتَ شَيْءًا مَعَ  
 الشَّهِيدَيْنَ ٥٣ وَمَعَكُوْنَا وَمَكَرُ اللَّهُ وَاللَّهُ خَيْرُ الْمَكَرِيْنَ  
 إِذْ قَالَ اللَّهُ يَعْلَمُ عَسَى إِنِّي مُتَوَكِّلٌ وَرَافِعُكَ إِلَى وَمَطْهَرِكَ  
 مِنَ الَّذِينَ كَفَرُوا وَجَاءُكَ الَّذِينَ أَتَيْتَهُمْ هُنَّ الظَّالِمُونَ ٥٤  
 كَفَرُوا إِلَيْكُمْ الْقِيمَةُ ثُمَّ إِنَّمَا مَرْجِعُكُمْ فَاحْكُمُوا  
 بَيْنَكُمْ فِيمَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ ٥٥ فَإِنَّمَا الَّذِينَ كَفَرُوا  
 فَاعْذُبُهُمْ عَذَابَ شَدِيدٍ فِي الدُّنْيَا وَالآخِرَةِ وَمَا لَهُمْ  
 مِنْ نَصْرٍ ٥٦ وَإِنَّ الَّذِينَ مَأْمُونُوْا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ  
 فَيُوَفَّهُمْ جَوْرَهُمْ وَاللَّهُ لَا يَحِبُّ الظَّالِمِينَ ٥٧ ذَلِكَ تَنْتُوهُ  
 عَيْنَكَ مِنَ الْأَيْكَتِ وَالْأَنْكَتِ ٥٨ إِنَّمَا  
 عَسَى عِنْدَ اللَّهِ كَمْثَلِ إِدَمَ حَقَّهُ وَمِنْ تُرْكِيْرُ قَالَ اللَّهُ  
 كُنْ فَيَكُونُ ٥٩ الْحَقُّ مِنْ رَبِّكَ فَلَا تَكُونُ مِنَ الْمُمْدُرِيْتِ  
 فَمَنْ حَاجَكَ فِيهِ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَكَ مِنَ الْحِلْمِ فَقُلْ تَعَالَوْ ٦٠  
 نَدْعُ أَنْتَ نَأْوِيْنَاهُ كُمْ وَرِسَاءَ كُمْ وَنَسَاءَ كُمْ وَأَنْفَسَنا  
 وَنَفْسَكُمْ نَبْتَهِلْ فَجَعَلَ لَعْنَتَ اللَّهِ عَلَى الْكَذِيْبِيْنَ ٦١

53. Rabbiyow! Waxaan ruumeysannahay waxa aad soo waxyootay, oo raacnaa Rasuulka, ee nagu qor la jirka markhaatiyada.

54. Oo tab ayey dhigreen, oo Allaah (sido kale) tab ayuu dhigay. Oo Allaah baa ah Kan ugu wanaagsan inta wax tabeysa.

55. Oo (xus) markuu Allaah yiri: Ciisow! Waan ku oofsanayaa oo kuu soo kor yeelaya xaggeyga, oo kaa daahirin gaalada, oo ka yeeli kuwa ku raaca (Musliminta) kuwa ka sarreeya gaalada tan iyo Maalinta Qiyaamaha. Markaas waa xaggeyga meel noqodkiinna, oo waan idiin kala garsoori doonaa dhexdiinna waxaad isku khilaafteen.

56. Markaa ma kuwa gaalada ah, waxaan cadaabi doonaa cadaab daran adduunkan iyo Aakhiradaba, oo ma heli doonaan wax u soo gargaara.

57. Ma kuwase rumeysan ee sama fala, wuxuu u oofin doonaa abaalgudyadooda oo dhan. Oo Allaah ma jecla gar maqaatayaasha.

58. Kan baan kuu akhrinnaa ee ka mid ah Aayadaha iyo waanada xikmadda ah.

59. Hubaal mataalka Ciise xagga Ilaahey waa sida mataalka Aadam. Wuxuu ka abuuray ciid, markaasuu ku yiri: Ahow, oo wuu ahaaday.

60. (Kani) waa Xaq ka yimid Rabbigaa, ee ha ka mid noqon shaki qabeenka.

61. Qofkii se kaala dooda arrinkan kaddib waxa kuu yimid oo cilmi ah, kolkaa dheh: Kaalaya, aan u yeerno wiilasheenna iyo wiilashiinna, iyo dumarkayaga iyo dumarkiinna iyo kuwa dad noo xiga iyo kuwa dad idiin xiga, markaas aan baryootanno, inay Nacaladda Ilaahey ku dhacdo kuwa ah beenalayaasha.

**62.** Hubaal kani xaqqiil waa faallada runta ah, oo ma jiro ilaah aan ahayn Allaah. Oo Allaah waa Adkaadaha, Xakiimka ah.

**63.** Haddiise ay dhabarka jeediyaaan, haddaba hubaal Allaah wuu Ogsoon yahay kuwa wax fasahaadiya.

**64.** Dheh: ehlul Kitaabow! U kaalaya Kelmed aan u simannahay ee noo dhaxeysa innaga iyo idinkaba, inaynaan caabudin axadna Allaah maahee, iyo inaynaan la wadaajin (cibaadada) waxba, iyo (inaan) qaarkeen ka dhigan qaar kale rabbiyo ay la barbar caabudaan Allaah. Haddiise ay dhabarka jeediyaaan, markaa dhaha: Ka markhaati ahaada inaan innagu nahay Muslimiin.

**65.** Ehlul Kitaabow! Maxaad uga doodeysaan arrinka Ibraahiim, oo lamaba soo dejin Towraadda iyo Injiiika isaga kaddib maahee<sup>(9)</sup>? Ee miyeedaan haddaba wax fahmeyn?

**66.** Bal eega! Idinka weeye kuwa ku dooday waxa aad aqoon u lahaydeen, Ee maxaad haddaba uga doodaysaan wax aydaan aqoon u lahayn? Oo Allaah baa ogsoon, idinkuse ma ogidin.

**67.** Ma uu ahayn Ibraahiim Yuhuudi ama Kirishtaan midkoodna, laakiinse wuxuu ahaa toosane, Muslim, oo kama uu mid ahayn mushrikiinta.

**68.** Hubaal kuwa u xiga Ibraahiim dadka waa kuwaa raacay, iyo Nabigaan iyo kuwa rumeysan. Oo Allaah waa Gargaaraha mu'miniinta.

**69.** Qayb ka mid ah Ehlul Kitaabka waxay jecel yihiin inay idin lumiyaan. Mase lumiyaan waxaan ahayn nafahooda, oo ma dareensana.

**70.** Ehlul Kitaabow! Maxaad u dafirtaan Aayadaha Ilaahey idinkoo markhaati ka ah?

إِنَّ هَذَا أَهْوَى الْقَصْصُ لِتَحْقِيقٍ وَمَامِنْ إِلَهٍ إِلَّا اللَّهُ وَإِنَّ اللَّهَ لَهُوَ أَعْزَى الرَّحْمَنِ الْكَيْمَمِ ﴿٣﴾ قَدْ نَرَأَوْلَاهُ فَإِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ بِالْمُقْسِدِينَ قُلْ يَأَهْلَ الْكِتَبِ شَعَالَوْلَاهُ الْكَيْمَمَةُ سَوَاعِ بَيْتَنَا وَبَيْتَنَا كُمَّ لَا تَعْبُدُ إِلَّا اللَّهُ وَلَا نُشْرِكُ بِهِ شَيْئًا وَلَا يَتَخَذُ بَعْضُنَا بَعْضًا أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ فَإِنَّ تَوْلَاهُ قُوَّلَاهُ أَشَهَدُوا بِأَنَّا مُسْلِمُونَ ﴿٤﴾ يَأَهْلَ الْكِتَبِ لَمْ يَنْجَاهُنَّ فِي إِبْرَاهِيمَ وَمَا أَنْزَلَتِ التَّقْرِيرَةُ وَالْإِنْجِيلُ إِلَّا مِنْ بَعْدِهِ فَلَا تَقْعُلُونَ ﴿٥﴾ هَاتُنْ هَوْلَاهُ حَجَاجُمُرْ فِيمَا لَكُمْ بِهِ عِلْمٌ فَلَمْ يُنْجَاهُنَّ فِيمَا لَيْسَ لَكُمْ بِهِ عِلْمٌ وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ لَأَقْلَمُونَ ﴿٦﴾ مَا كَانَ إِبْرَاهِيمَ يَهُودِيًّا وَلَا قَرْنَيْتُنَا وَلَكِنْ كَانَ حَنِيفًا مُسْلِمًا وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ ﴿٧﴾ إِنَّ أَوَّلَ الَّتَّائِسِ يَأْتِي إِبْرَاهِيمَ لِلَّذِينَ تَأْتُهُمْ وَهَذَا الْكَيْمَيْ وَالَّذِينَ آمَنُوا وَاللَّهُ وَلِلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨﴾ وَدَّتْ طَالِفَةً مِنْ أَهْلِ الْكِتَبِ لَوْصِلُونَهُ وَمَا يُصْلِوْنَ إِلَّا نَفْسُهُ وَمَا يَمْسِعُونَ ﴿٩﴾ يَأَهْلَ الْكِتَبِ لَمْ يَكُفُّوْنَ بِيَأْيَتِ اللَّهِ وَأَنْشَرْتَهُمْ دُونَ

<sup>9.</sup> Labada goloba ee Yuhuudda iyo Kirishtanka waxay sheegteen in Ibraahiim uu ka mid yahay xisbigooda, markaasuu Ilaahey ugu jawaab celiyey in Ibraahiim uu ahaa iyaga hortood.

يَأَهْلَ الْكِتَابِ لَمْ تَلِسُونَ الْحَقَّ يَا بَلْطِيلَ وَتَحْكُمُونَ الْحَقَّ  
وَإِنْتُمْ تَعَالَمُونَ <sup>٦١</sup> وَقَاتَ طَالِيفَةً مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ إِذَا مُؤْمِنًا  
بِاللَّهِ أَنْزَلْنَا عَلَى الَّذِينَ آمَنُوا وَجْهَ النَّهَارِ وَأَكْفَرُوا إِخْرَاجُهُ  
لَعَاهُمْ يَرْجِعُونَ <sup>٦٢</sup> وَلَا تُؤْمِنُوا إِلَّا مَنْ تَبَعَّدَ دِينَكُمْ قُلْ إِنَّ  
الْهُدَى هُدَى اللَّهِ أَنَّ يُؤْتَ أَحَدًا مِثْلَ مَا أَوْتَتُمْ فَإِنْ حَاجُوكُمْ  
عِنْ دِينِكُمْ قُلْ إِنَّ الْفَضْلَ بِيَدِ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ  
وَاسْعَ عَلَيْهِ <sup>٦٣</sup> يَخْصُّ بِرَحْمَتِهِ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ  
الْعَظِيمِ <sup>٦٤</sup> وَمَنْ أَهْلَ الْكِتَابَ مَنْ إِنْ تَأْمَنَهُ يُقْنَطُ بِإِيمَانِ  
بُودَةِ إِيَّاكَ وَمَنْ هُمْ مِنْ إِنْ تَأْمَنَهُ يُدْبَرُ لَا يُبَدَّهُ إِيَّاكَ  
إِلَامَادَمَتْ عَلَيْهِ قَائِمًا دَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْلُ الْيَسْ عَيَّنَافِ  
الْأَقْمَشَ سَبِيلٌ وَيَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبُ وَهُمْ يَعْلَمُونَ  
كُلُّ مَنْ أَرَقَ بِعَهْدِهِ وَلَاقَنِي فَإِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْتَدِينَ <sup>٦٥</sup>  
إِنَّ الَّذِينَ يَشْرُوتُونَ بِعَهْدِ اللَّهِ وَآتَيْنَاهُمْ ثَمَنًا قَلِيلًا  
أُولَئِكَ لَا خَلَقَ لَهُمْ فِي الْأَخْرَى وَلَا يَكُنُّهُمُ اللَّهُ وَلَا يَنْظُرُ  
إِلَيْهِمْ يَوْمَ الْقِسْمَةِ وَلَا يَرْكَبُهُمْ وَلَا هُمْ عَذَابُ اللَّهِ <sup>٦٦</sup>

71. Ehlul-Kitaabow! Maxaad ugu dheeheysaan xaqa baadilka, oo u qarisaan xaqa idinkoo ogsoon?

72. Oo koox ka mid ah ehlul-Kitaabka waxay yiraahdaan: Rumeeya waxa loo soo waxyooday kuwaa rumeysan gelinka hore ee maalinta, oo diida aakhireeda, bal in ay ka soo noqdaan (diintooda)<sup>(10)</sup>.

73. Oo ha aaminina cid aan aheyn kan isagu raaca diintiinna. Dheh: Hubaal hanuunka (xaqa ah) waa hanuunka Ilaahey, (oo ma xasdeysan) si aan cidna loo siin (cilm) la mid ah kan la idin siiyey, ama si ayan idinkula doodin Rabbigii horti. Dheh: Hubaal fadli oo dhan wuxuu ku jiraa Gacanta Ilaahey; Wuxuu siyyaa kuu doono. Oo Allaah waa Deeq Ballaarane, wax kasta Ogsoon.

74. Wuxuu u doortaa Naxariistiisa kuu doono. Oo Allaah waa Rabbiga Fadliga Weyn.

75. Oo waxaa ka mid ah ehlul-Kitaabka mid haddaad ku aaminto maal tuuran kuu oofin doona isagii oo dhan; oo waxaa ka mid ah mid haddaad ku aaminto hal Diinnaar aan

dib kuugu gudi doonin inaad kor joogto ma’hee adigoo dalbaya, waxaa arrinkan ugu wacan inay yiraahdaan: Ma jирто korkeenna xagga kuwa aan aqoonata lahayn wax jid ah (nalagu eedeyeo<sup>(11)</sup>; oo waxay Allaah ka sheegaan been iyagoo ogsoon.

76. Haayoo, qofkii oofiya ballankiisa oo iska jira (xumaha) haddaba hubaal Allaah wuu jecel yayah kuwa iska jira xumaha.

77. Hubaal kuwa ku iibsada Axdigaa Ilaahey<sup>(12)</sup> iyo dhaarahooda qjimo yar, kuwaas kuma lahaan doonaan wax saami ah Aakhirada. Oo Allaah lama hadli doono, mana eegi doono Maalinta Qiyaamaha, mana daahirin doono, oo waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuun badan.

10. Xagga kuwa idin la diinta ah (Yuhuudda iyo Kirishtaanka) si ayan u gelin diinta islaamka, xagga muslmiintana horay idinla diinta ahaa si uu dacijo iimaankooda oo ugu soo laabtaan gaalnimada.

11. Yuhuudda uma arkaan dambi inay khiyaameeyaan ama been u shegaan dadka aan iyaga ahayn ama mushrik.

12. Waxaa loola jeedaa cahidga Allaah ama Qur'aanka...Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Qofkii ku goosta maal qof Muslim ah xaq darro isagoo dhaar ku mari, wuxuu la kulmi doonaa Allaah oo u careysan” w.w. Axmad

78. Oo hubaal waxaa ka mid ah qaar ku weecsha carriyadooda Kitaabka si aad u mooddaan inuu ka mid yahay Kitaabka, isagoo ka mid ahayn Kitaabka, oo waxay yiraahdaan: wuxuu ka yimid Xagga Ilaahay; isagoo aan ka iman xagga Ilaahay, oo waxay ka sheegaan Allaah been iyagoo ogsoon.

79. Kuma habboona qof inuu Allaah siiyo Kitaab iyo Xukun iyo Nabinimo, markaas uu ku yiraahda dadka: Ii noqda addoommo halkii Allaah; Laakiinse (halkii taa wuxuu yiraahdaa): Ahaada caabudayaal Rabbi, Kitaabka aad bareysaan dartiis, iyo waxaad akhrinaysaan.

80. Oo idinma amrayo inaad ka dhigataan malaa'iga iyo Nabiyada rabbivo, ma wuxuu idin amrayaa gaalnimo intaad Muslimiin noqoteen kaddib?

81. Oo (xusuusta) markuu Allaah ka qaaday Nabiyada ballan adag isagoo leh<sup>(13)</sup>: waxaan idin siyoba ee Kitaab iyo Xikmad ah, oo markaas idiin yimaado Rasuul xaqiijinaya waxaad haysataan, waa inaad rumeyaan oo waa inaad u gargaartaan; Wuxuu yiri: Ma qireysaan oo ma qaadaneyaan wacadkay (arrinkan)? Waxay yiraahdeen: Waanu qirsannahay. Wuxuu yiri: Haddaba markhaati ka ahaada; Aniguna (sidoo kale) waxaan ahay la jirkiin mid ka mid ah markhaatiyada.

82. Ee qofkii dhabarka jeediya (arrin) kani kaddib, waa kuwaa caasiyaasha.

83. Oo haddaba ma waxaan ahayn diinta Ilaahay bay rabaan (inay raacaan), Isagoo ay u hogaansan yihii waxa jira oo dhan samooyinka iyo arlada, oggolaan ama sandulleba, oo xaggiisa baa loo soo celin doonaa.

وَإِنْ مِنْهُمْ لَفَرِيقٌ يَأْتُونَ السِّتَّةِ هُمْ بِالْكِتَابِ لِتَحْسِبُوهُ  
مِنَ الْكِتَابِ وَمَا هُوَ مِنَ الْكِتَابِ وَيَقُولُونَ هُوَ مِنْ  
عِنْدَ اللَّهِ وَمَا هُوَ مِنْ عِنْدَ اللَّهِ وَيَقُولُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبُ  
وَهُمْ يَعْلَمُونَ ﴿٦﴾ مَا كَانَ لِشَرِيكَ اللَّهِ أَنْ يُوَظِّفَ اللَّهُ أَنَّ الْكِتَابَ  
وَلَلْحُكْمَ وَالْبِرْهَةَ هُمْ يَقُولُونَ لِلَّاتِي سَمِعُواْ عَبَادًا لِّي مِنْ  
دُونِ اللَّهِ وَلَكِنْ كُوْثَارَتِيَّنَ بِمَا كَانُتُمْ تَعْلَمُونَ  
الْكِتَابَ وَبِمَا كَانُتُمْ شُعُورًا تُرْسُونَ ﴿٧﴾ وَلَا يَأْمُرُكُمْ أَنْ  
تَتَخَذُوا الْمَلَائِكَةَ وَالنَّبِيِّنَ أَرْبَابًا أَيَّاً مُرْسِلُكُمْ بِالْكُفْرِ عَدَّ  
إِذَا نَسِيْتُمُ الْمُسَلِّمُونَ ﴿٨﴾ وَإِذَا أَخْذَ اللَّهُ مِيقَاتَ النَّبِيِّنَ لِمَآءَةِ أَيْتَكُمْ  
مِنْ كِتَابٍ وَجَحْمَةً شَعَاجَاءَ كُمْرَسُولُ مُصْدِقٍ لِمَا  
عَاهَمُكُمْ لَتَؤْمِنُ بِهِ وَلَتَنْصُرَنَّ بِهِ وَقَالَ أَفَرَرَبُّكُمْ لَأَخْذَنُ  
عَلَى ذَلِكُمْ صِرَاطٌ قَالُواْ أَفَرَبَّنَا قَالَ فَأَسْهَدُوا وَأَنَّ مَعَكُمْ  
قَنْ أَشَاهِدُهُنَّ ﴿٩﴾ فَنَّ تَوَلَّ بَعْدَ دَلِيلٍ فَأُولَئِكَ هُمُ  
الْفَاسِقُونَ ﴿١٠﴾ أَفَغَيَرَ دِينَ اللَّهِ يَبْغُونَ وَلَهُ أَسْلَمَ مَنْ فِي  
السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوْعًا وَكَرْهًا وَإِلَيْهِ يُرْجَعُونَ

٦٠

<sup>13.</sup> Anbiyadii Ilaahay waxay ballan kula galeen Ilaahay in haddii uu yimaado Rasuul magaciisu yahay Muxammad ay rumeyn doonaan oo u gargaari doonaan., ballantoodaasina waxay sidoo kale saaran tahay ummadahooda.

فُلْ أَمَّا بِاللَّهِ وَمَا أُنْزِلَ عَلَيْنَا وَمَا أُنْزِلَ عَلَى إِنْرَهِيمَ  
وَإِسْمَاعِيلَ وَاسْحَقَ وَيَعْقُوبَ وَالْأَسْبَاطِ وَمَا أُوتِيَ مُوسَى  
وَعِيسَى وَالْتَّيْمُونُ مِنْ رَبِّهِمْ لَانْفَرَقُ بَيْنَ أَحَدِهِمْ  
وَخَنَّ اللَّهُ وَمُسْلِمُونَ <sup>٤٥</sup> وَمَنْ يَبْتَغِ عَيْرَ الْإِسْلَامِ دِينًا فَأَنَّ  
يُقْبَلَ مِنْهُ وَهُوَ فِي الْأَكْرَمِ مِنَ الْخَيْرِينَ <sup>٤٦</sup> كَيْفَ  
يَهْدِي اللَّهُ قَوْمًا كَفَرُوا بَعْدَ إِيمَانِهِمْ وَشَهَدُوا أَنَّ  
الرَّسُولَ حَقٌّ وَجَاءُهُمْ أَبْيَاتٌ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ  
الظَّالِمِينَ <sup>٤٧</sup> أُولَئِكَ جَرَأُوهُمْ أَنَّ عَلَيْهِمْ لَعْنَةُ اللَّهِ  
وَالْمُلْكَيَّةُ وَالنَّاسُ أَجْمَعُونَ <sup>٤٨</sup> خَلِيلِنِيهَا الْيَخْفَفُ  
عَنْهُمْ عَذَابُ وَلَا هُمْ يُظْرَفُونَ <sup>٤٩</sup> إِلَّا الَّذِينَ تَبَوَّأُوا مِنْ  
بَعْدِ ذَرَكَ وَأَصْلَحُوا فَإِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَّحِيمٌ <sup>٥٠</sup> إِنَّ الَّذِينَ  
كَفَرُوا بَعْدَ إِيمَانِهِمْ مُّنَزَّهُونَ دُوَّا كُفَّارًا نُقْبَلُ تَوْبَهُمْ  
وَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ <sup>٥١</sup> إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا وَمَا لَوْا هُمْ  
كُفَّارٌ فَإِنْ يُقْبَلُ مِنْ أَحَدِهِمْ مِّلءُ الْأَرْضِ ذَهَبَ أَلَوْ  
أَفْتَدَ يِهَ <sup>٥٢</sup> أُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ وَمَا لَهُمْ مِّنْ نَصِيرٍ <sup>٥٣</sup>

٦١

84. Dheh: Wuxuu Isaga ayaan isu dhibnaa.

Allaah, iyo waxa naloo soo waxyooday, iyo waxa loo soo waxyooday Ibraahiim iyo Ismaaciil iyo Isxaaq iyo Yacquub iyo Al-Asbaad iyo waxa laga siiyey Muuse iyo Ciise iyo Nabiyada xagga Rabbigood. Ma kala soocno midkoodna. Oo innaguna Isaga ayaan isu dhibnaa.

85. Oo qofkii doona waxaan aheyn Islaamka diin ahaan, marnaba lagama aqbalii doono, oo wuxuu Aakhirada ka mid ahaan doonaa kuwa ku sugan khasaaraada.

86. Sidee buu Allaah u hanuunin doonaa qolo diidday (xaqa) rumayntooda kaddib, iyo (kaddib) markay qireen in Rasuulku xaq yahay oo xujooyin cad ay u yimaadeen? Oo Allaah ma hanuuniyo dadka gar ma qaataayaasha ah.

87. (Ma xagga) kuwani, abaalkoodu waa inay korkooda ku dhacdo Nacladda Ilaahey, iyo malaa`igta iyo dadka oo dhan.

88. Iyagoo ku dhix waaraaya, cadaabka lagama khafiifin doono, oo lama siin doono nafis.

89. Kuwa maahee toobad keena kaasi (xumo falkooda) kaddib oo wanaagsanaada. haddaba hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

90. Hubaal, kuwa xaga diida rumayntoodii kaddib, haddana kororsada iimaan darro, lagama aqbalii doono toobadooda (ay sheegtaan), oo waa kuwan kuwa lunsan.

91. Hubaal, kuwa (xaqa) diida oo dhinta iyagoo gaalo ah, lagama aqbalii doono midkoodna dhulka muggi oo dahab ah walow uu isku furto. Kuwan waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuun badan, oo ma heli doonaan wax u soo gargaara.

## J U S K A (4)

### Suuradda 3 Aal-Cimraan

**92.** Marnaba ma haleeli doontaan ajarka wanaagsan (Jannada) jeer aad bixisaan wax ka mid ah waxaad jeceshihiin; oo wax kastoo aad bixisaan, hubaal Allaah waa uu ogsoon yahay.

**93.** Cunto oo dhan xalaal bay u ahayd Ilmahii Israa'iil, wixii uu Israa'iil ka xaaraameeyay naftisa maahee intii aan la soo waxyoon Towraadda<sup>(14)</sup>. Dheh: Keena haddaba Tawraadda oo Akhriya, haddaad tiihiin run sheegayaal.

**94.** Haddaba qofkii ka been sheega Allaah kani kaddib, waa kuwaa gar ma qaatayaasha.

**95.** Dheh: Run buu sheegay Allaah; ee raaca diinta Ibraahiim, toosniihi, oo kama mid aheyn mushrikiinta.

**96.** Hubaal gurigii ugu horreeyay ee loogu cayyimay dadka (cibaado) xaqiqi waamidka ku yaal Bakka<sup>(15)</sup>, barakaysan, ee u ah hanuun ummadaha<sup>(16)</sup>.

**97.** Waxaa ku dhex yaaal calaamooyin cad, (sida) Maqaamkii Ibraahiim; oo qofkii soo gala wuxuu ahaan aamin. Oo u xajinta beydka waa xil saaran dadka dar Ilaahay, (waa xil saaran) qof kasta oo kara inuu u socdaalo xaggeeda<sup>(17)</sup>, oo qofkii beeniya, haddaba hubaal Allaah wuu ka kaaftoon yahay Caalamka.

**98.** Dheh: ehlul Kitaabow! Maxaad u diiddaan Aayadaha Ilaahay? Oo Allaah wuu u jeedaa waxa aad fashaan?

**99.** Dheh: Ehlul-Kitaabow! Maxaad uga hor istaagtaan Jidka Ilaahay kan rumeysan? Waxaad rabtaan (inaad ka dhigtaan) mid qalloocan, idinkoo marag ka ah? Oo Allaah ma mooga waxa aad fashaan.

**100.** Mu'miniintow! Haddaad adeecdaan qaar ka mid ah kuwa la siiyay Kitaabka, Waxay dib idiinku celin doonaan gaalo ahaan iimankiinna kaddib.

**14.** *Kaddib sood degitaanka Towraadda waxaa laga xaaraanshay cuntaanka qaar ka mid ah noocyada cuntada, cigaab ahaan dambiyadoodii, magacyada waxaasi laga xaaraanshayna waxay ku qoran yihiin towraadda eeg suuradda An-Nisaa Aayadda 160 iyo Suuradda Al-Ancaam Aayadda 146.*

**15.** *Ehlul kitaabka waxay yiraahdeen Beydkii ugu horreeyey ee loo cayimay cibaadada waa kan ku yaal Baytul Maqdas, markaasuu Ilaahay jaawaabay.*

*Abuu Dar a.k.r. waxaa laga soo werihey inuu yiri: Waxaan iri: Rasuul Allow, Masjidkee u horreeyey masaaijiidda? Wuxuu yiri: Masjidka xurmadda badaa ee Makkah, waxaan iri: Yaa ku xiga? Wuxuu yiri: Masjidka Al-Aqsaa ee Qudus. Waxaan iri: Yaa ku xiga? Wuxuu yiri: Meeshii salaad kugu haleeshaba ku tuko dhammaan dhulka waa masaajide. W.w. Axmad*

**16.** *Eeg suuradda Al-Baqara Aayadda 125.*

**17.** *Qofkii awooda ee haysta sahay iyo gaadiid uu ku tago xajka, ee isagu caafimaad qaba oo safarku aamin yahay ugana soo tagay masaarifku filan reekyiisa.*

وَكَفَرُوا وَأَنْتَ شُتَّلَ عَلَيْكُمْ إِنَّ اللَّهَ وَفِيمْكُمْ  
 رَسُولُهُ وَمَنْ يَعْصِمْ بِاللَّهِ فَقَدْ هُدِيَ إِلَى صَرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ  
 يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ حَقَّ تُقَاتِلَهُ وَلَا تَمُوتُنَّ إِلَّا وَأَنْتُمْ  
 مُسْمَوْنَ ۝ رَاعُوا نَصْحَمُوا بِحِلِّ اللَّهِ جَمِيعًا لَا يَنْفَرُوا وَإِذْ كُرِبُوا  
 بَعْثَتِ اللَّهُ عَلَيْكُمْ إِذْ كُرِبُوا عَدَاءً فَالْقَبْرَ بَيْنَ قُلُوبِكُمْ  
 فَاصْبِرْتُمْ بِعِنْتَهِ إِلَّا خَوْنَاقُكُمْ عَلَى شَفَاعَ حَفْرَةٍ وَمَنْ  
 أَنْتَرَ فَأَنْقَذَكُمْ مِنْهَا كُلَّكُمْ يُبَشِّرُنَّ اللَّهُ لَكُمْ إِيمَانُهُ لَعَلَّكُمْ  
 تَهْتَدُونَ ۝ وَلَتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ  
 بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَا عَنِ الْمُنْكَرِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ  
 وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِينَ تَفَرَّقُوا وَخَاتَلُوهُ أَمْنًا بَعْدَ مَا جَاءَهُمُ الْهُدَى  
 وَأُولَئِكَ لَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ ۝ يَوْمَ تَبَيَّضُ وُجُوهُ  
 وَتَسْوُدُ فَمَآمَا الَّذِينَ أَسْوَدَتْ وُجُوهُهُمْ كَفَرُوا بَعْدَ إِيمَانِهِمْ  
 ذَلِيقُ الْعَذَابِ ۝ مَا كَذَّبُوكُمْ تَكْفُرُونَ ۝ وَمَآمَا الَّذِينَ آتَيْتَ  
 وَجْهُهُمْ فِي رَحْمَةِ اللَّهِ فِيهَا خَلِيلُونَ ۝ تِلْكَ إِيمَانُ  
 اللَّهِ تَسْتَوْهُ عَلَيْكَ بِالْحَقِّ وَمَمَا اللَّهُ يُرِيدُ طَلْمَانَ الْعَامِلِينَ ۝

٦٣

**101.** Sidee baa se u gaaloobeysaan idinkoo ah kuwa loo akhriyo Aayadaha Ilahay, oo uu idinku jiro Rasuuliisa? Oo qofkii si sugar u qabsada Allaah, waxaa run ahaan lagu hanuumiyey Jidka Toosan.

**102.** Mu'miniintow! Dhowra (xilku uu idin saaray) Allaah, ka dhowrsiga uu mudan yahay, oo ha dhimannina idinkoo aan ahayn Muslimiin.

**103.** Oo si sugar u qabsada Axdiya Ilahay dhammaantiin, oo ha qaybsmina, oo xusuusta Nicmadda Ilahay dushiinna, waa tii idinkoo col isu ah, markaa isu furay quluubiinna, ee aad Nicamaddiisa darteed ku noqoteen walaalo; oo waxaad qarka u saarnaydeen bohol Naar ah, markaasuu idinka badbaashay. Sidaas buu Allaah idiinku caddeeyaa Aayadihiisa, bal inaad hanuuntaan.

**104.** Oo ha idinka mid ahaato koox ku baaqda khayrka, oo amarta samaha oo reeba xumaha. Oo kuwan weeye kuwa liibaani doona.

**105.** Oo ha noqonnina sida kuwa kala qaybsamay oo iskhilaafay kaddib marka xujoojinka cad ay u yimaadeen. Oo kuwan weeye kuwa mudan doonaa cadaab aad u duran.

**106.** Maalinta marka wajjiyo (qaar) ay caddaan doonaan, oo wejiyo (qaarna) ay madoobaan doonaan; marka ma kuwa ay wajiyadoodu madoobaadaan: Ma waxaad gaalowdeen Iimaankiinnii kaddib? Ee dhadhamiya cadaabka gaalnimadiinnii darteed.

**107.** Kuwase ay wajiyadoodu caddaadaan, waxay dhex ahaan doonaan Naxariista Ilahay, iyagoo ku dhex waari doono.

**108.** Kuwani waa Aayadaha Ilahay ee aan kuugu akhrinno xaq, oo Allaah lama doono wax gardarro ah caalamka.

**109.** Oo Allaah baa leh waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada. Oo xagga Allaah bay umuurahoo dhan u noqdaan.

**110.** Waxedaad tiihin tan u khayr badan ummadaha ee loo soo saaray (danaha) dadka; Waxedaad amartaan samaha, oo aad reebtaan xumaha, oo rumeysan tiihin Allaah. oo hadday ehlul Kitaabku rumeyyaan, waxay u ahaan laheyd wax u khayr badan iyaga; waxaa ka mid ah qaar mu'miniin ah, oo badankoodu waa caasiyaal.

**111.** Idiinma geysan doonaan sinnaba wax waxyeello ah, dhib yar maahee; oo hadday idin la dagaallamaan dhabarkay idin jeedin doonaan, markaas looma gargaari doono.

**112.** Dulli baa la raacshay dushooda meel kastoo laga helo, waxaan aheyn marka ay ku hoos jiraan axdi xagga Ilaahey ah, iyo axdi xagga dadka ah; oo waxay noqdeen kuwo mudan Caro xag Ilaahey ah, oo dar xumo baa la saaraay korkooda. Arrinkaa waxaa ugu wakan inay dafireen Aayadaha Ilaahey oo ku dileen Nabiyadii xaq darro. Arrinkaa waxaa ugu wakan inay caasiyeen oo xadgudbeen.

**113.** Ma aha isku wada mid; waxaa ka mid ah ehlul Kitaabka koox toosan<sup>(18)</sup>; waxay akhiyaan Aayadaha Ilaahey waqtiyada habeenka, oo way u sujuudaan.

**114.** Waxay rumeysan yihiin Allaah iyo Maalinta dambeysa; oo waxay amraan samaha oo reebaan xumaha<sup>(19)</sup>; oo waxay iskula tartamaan u degdegidda camallada khayrka, oo kuwaasi waxay ka mid yihiin kuwa wanaagsan.

**115.** Oo wax waliba oo khayr ah ay falaan lagama dayrin doono abaalkooda; oo Allaah wuu Og Yahay kuwa iska jira (xumaha).

<sup>18</sup>. Ehlul kitaabkii islaamay.  
<sup>19</sup>. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Allaah baan ku dhaartee wanaaggaa amreysaan oo xumaantaad reebeysaan, ama wuxuu Allaah idin soo diri ciqaab xagguisa ah, markaas baad baryeysaan mase idinka aqbalayo baryada.”

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا لَنْ تُغْنِيَ عَنْهُمْ أَمْوَالُهُمْ وَلَا أَوْدَدُهُمْ مِنَ  
اللَّهِ شَيْئًا وَأَوْلَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا حَلَّادُونَ<sup>١٦٣</sup>

مَثْلَ مَا يُنْفِقُونَ فِي هَذِهِ الْحُجَّةِ الَّتِي أَكْشَلَ رِيحَ فِيهَا  
صَرَّاصَاتْ حَرَثَ قَوْمٌ طَلَمُوا أَنْفُسَهُمْ فَهَلْ كَيْنَةٌ وَمَا  
ظَلَمُهُمُ اللَّهُ وَلَكِنَّ أَنْفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ<sup>١٦٤</sup> يَا أَيُّهَا الَّذِينَ  
عَامَنُوا أَتَتَّخِذُو بِطَانَةً مِنْ دُونِكُمْ لَا يَأْتُوكُمْ خَيْرٌ  
وَدُولَامَاعْنَتْ قَدْ دَيَّتِ الْبَعْضَاءَ مِنْ فَوْهِمْ وَمَا تَخْفِي  
صُدُورُهُمْ أَكَبْرُ قَدْ بَيَّنَ لَكُمُ الْآيَتِنَ إِنْ كُنْتُمْ تَقْلُوْنَ<sup>١٦٥</sup>

هَنَّا شُرُّ أَوْلَاءِ حَمْوَنَهُمْ وَلَا يُحِبُّونَ كُوْرُونَ يَا الْكَيْتِ  
كُلُّكُمْ وَإِذَا الْقُوَّمُ قَاتُلُوا أَمَّا وَإِذَا حَلَّوْ عَصْوَاعِيْكُمْ  
الْأَنَّا مَلَّ مِنَ الْعَيْطَ قُلْ مُؤْمِنُوْيَعْيِنَكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيْمٌ بِذَاتِ  
أَصْدُورِكُمْ<sup>١٦٦</sup> إِنْ تَمْسَكُ كُحْسَنَةً تَسْوُهُمْ وَإِنْ تُصْبِكُ  
سَيْتَهُ يَقْرَبُوا إِلَيْهَا وَإِنْ تَصْبِرُوْا وَتَسْقُوا لَا يَضْرُكُ كَيْدُهُمْ  
شَيْئًا إِنَّ اللَّهَ بِمَا يَعْمَلُونَ مُحِيطٌ<sup>١٦٧</sup> وَإِذْ غَنَوْتُ مِنْ أَهْلَكَ  
تُبُوْتُ الْمُؤْمِنِينَ مَقْعِدَ لِلْقِتَالِ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلَيْهِ<sup>١٦٨</sup>

116. (Ma xagga) kuwa rumeyasan diida, hubaal wax ugama tari doonaan maalkooda iyo awlaaddoodu midna xagga Ilaahay. Oo waa kuwan ehl Naarka, iyagoo ay ku dhex waari doonaan.

117. Mataalka waxa ay ku bixiyaan nolosha adduunkan waa sida dabayl aad u qabow oo ku dhacda aburuka beer qolo gef ka gala nafahooda, oo baabbi'isa. Oo Allaah ma uusan ku gardarroon, laakiinse iyagaa nafahooda gef ka galay.

118. Mu'miniintow! Ha ka dhigannina saaxiibbo hoose kuwo kale aan idinka idin ka mid ahayn, oo aan ka gaabsanayn inay dhibaato idiiin geystaan. Waxay jecel yihiin waxa idin dhiba. Necbaan cad waxay horayba uga soo muuq baxday afakkooda, oo waxay laabahoodu qarsadaan baa weliba ka sii weyn. Xaqiij waxaan idiu caddeynay Aayadaha haddaad garowsan doontaan.

119. Eeg! Idinka baa jeclaada iyaga, halka ay iyagu idin jeclayn, oo waxaad rumeyasan tiihin Kitaabka (waxa ku yaal) oo dhan. Oo markay

idinla kulmaan waxay yiraahdaan: Waanu rumeyasnannahay. Markase ay yihiin keligood, waxay qaniinaan foodaha farahooda ciil ay idii qabaan awgii. Dheh: U dhinta ciilkiinna. Hubaal, Allaah waa Ogsoon yahay waxa ku jira laabaha.

120. Hadday idin haleesho wanaag, waa ay murugo gelisaa, oo hadday idinku dhacdoo xumaan way ku farxaan. Haddiise aad samir yeelataan oo aad iska jirtaan (xumaha), tabtooda wax dhib ah haba yaraatee idii ma geysan doonto. hubaal Allaah wuu koobaa waxay falaan.

121. Oo (xusuuso) markaad ka jarmaadday goor aroor hore ah elhelkaaga si aad u dejiso mu'miniinta fariisimo si ay u dagaal galaan<sup>(20)</sup> Oo Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

<sup>20</sup>. Dhacdadan waxay dhacday duullaankii Uxud sannadkii seddexaad ee hijrada sida ay sheegeen taariikhyaannada.

**122.** Markii labo kooxood oo idinka mid ah goosteen inay cabsi muujjiyaan<sup>(21)</sup>, oo Allaah baa ahaa Gargaaraha labadoodaba.oo waa inay Allaah ku kasloonadaan mu'miniintu.

**123.** Oo wuxuu xaqiqi Allaah idiinku gargaaray dagaalkii Badar idinkoo ahaa kuwo tabar yar. Ee Alle ka cabsada si aad u mahad naqdaan.

**124.** (Xus) markaad ku lahayd mu'miniinta: Oo miyaanay idinku fillayn inuu Rabbigii idinku taageero sadex kun oo ka mid ah malaa'gta oo la soo diray?

**125.** Haayoo, haddaad samir yeelataan oo aad iska ilalaasaan (xumaha), oo idinku yimaadaan iyagoo rooraya si degdeg ah, wuxuu Rabbigii idinku taageeri doonaa shan kun oo malaa'ig ah, oo calaamadeysan.

**126.** Oo Allaah kama uu dhigin (arrintaas) waxaan ahayn war san oo la idin siiyo, iyo inay ku degto quluubiinna. Oo guushu kama timaaddo waxaan aheyn xagga Ilaahay Adkaadaha, Xakiimka ah.

**127.** Si uu u baal gooyo qaar ka mid ah gaalada ama uu u dulleeyo, oo ay noqdaan iyagoo hundo ah<sup>(22)</sup>.

**128.** Waxba kaama gelin arrinka<sup>(23)</sup>, hadduu ugu soo noqonayo (si naxariis leh) ama ciqaabayo, hubaal iyagu waa gardaroolayaal.

**129.** Oo Allaah baa iska leh waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada. Wuxuu u dambi dhaafaa qofkuu doono, oo cadaabaa qofkuu doono. Oo Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**130.** Mu'miniintow! Ha cunina Ribada idinkoo ka yeelaya labo laabyo la sii laab laabay, oo Alle ka cabsada (oo dhowra xilka uu idin saaray) aad liibaantaane.

**131.** Oo iska jira Naarta loo diyaariyey gaalada.

**132.** Oo adeeca Allaah iyo Rasuulka, si la idiinku naxariisto.

**21.** Waxay ahaayeen Banuu Salama oo gabiiinka Khazraj ah, iyo Banuu Saaritha oo gabiiinka Aws ah, oo labada ka tirsanaa muslimiinta.

**22.** Kaddib markii laga dilay gaalada toddobaatan ka mid ah madaxdooda, oo laga soo qafaashay toddobataan kale.

**23.** Wuxuu Al Iimaam Al-Bukhaari ku xusay kitaabkiisa sababta soo degitaanka Aayaddan in Rasuulkii ilaahay uu Ilaahay ka baryey inuu badbaadiyo mushrikiinta qaarkood oo halaago inta kale.

\* وَسَارَ عَوْلَىٰ مَعْفَرَةٍ مِنْ رَبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْصَهَا  
 السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ أَعْدَتَا لِلْمُتَّقِينَ <sup>(١٣٣)</sup> الَّذِيْنَ يُنْفِقُونَ  
 فِي السَّرَّاءِ وَالظَّرَاءِ وَالْكَاظِمِينَ الْعَيْظَ وَالْعَافِينَ  
 عَنِ النَّاسِ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ <sup>(١٣٤)</sup> وَالَّذِيْنَ إِذَا فَعَلُوا  
 فَحْشَةً أَوْ طَلَمُوا أَنْفُسَهُمْ دَكَرُوا لِلَّهِ قَاتِعَةَ قُرْبَةَ  
 لِذُنُوبِهِمْ وَمَنْ يَعْفُرُ الذُّنُوبَ إِلَّا اللَّهُ وَلَمْ يُصْرُّ وَاعِلَىٰ ما  
 فَعَلَوْا وَهُمْ بَعْدُ مُنْكَرٌ <sup>(١٣٥)</sup> أُولَئِكَ جَنَاحُهُمْ مَعْفَرَةٌ مِنْ  
 رَبِّهِمْ وَجَنَّتْ تَحْمِي مِنْ تَحْتِهِمَا الْأَنْهَرُ خَلِيلِينَ وَهَا وَقَمَ  
 أَجْرُ الْعَدِيلِينَ <sup>(١٣٦)</sup> قَدْ خَاتَ مِنْ قَبْلِكُمْ سَنَنٌ فَإِرْوَاهُ  
 فِي الْأَرْضِ فَأَنْظُرْ وَأَكِيفْ كَانَ عَنْقَبَةُ الْمُكَذِّبِينَ  
 هَذَا يَبَانُ لِلنَّاسِ وَهُدَىٰ وَمَوْعِظَةٌ لِلْمُنْتَقِيَّينَ <sup>(١٣٧)</sup>  
 وَلَا يَنْهُوُ أَلَا تَخْرُجُوا وَأَنْ شُرُّ الْأَغْلُونَ إِنْ كُنْتُمُ مُؤْمِنِينَ  
 إِنْ يَمْسِكُ فَرَحَ فَقَدْ مَسَ الْقَوْمُ فَرَحٌ مِثْلُهُ وَتَلَكَ <sup>(١٣٨)</sup>  
 الْأَيَّمُرُدُوا لَهَا يَتَمَّنُ النَّاسُ وَلِيَعْلَمَ اللَّهُ الَّذِيْنَ آمَنُوا  
 وَيَتَخَذَ مِنْ كُمْ شَهَادَةَ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ الظَّالِمِينَ

٦٧

133. Oo u degdega dambi dhaaf xagga Rabbigii ah, iyo Beer, ballaceedu le'eg yahay samooyinka iyo arlada, waxaa loo diyaariyey kuwa iska ilaasha (xumaha).

134. Kuwa wax u bixiya (si wanaagsan) waqtiga ladnaanta iyo lurnaantaba, iyo kuwa liqa cara(dooda) oo iska cafiya dadka. Oo Allaah wuxuu jecel yahay sama falayaasha.

135. Iyo kuwa markay falaan anshax xumo ama u gefaan nafahooda<sup>(24)</sup>, xusuusta Allaah, oo weydiista in laga dhaafodambyadooda; oo yaa dhaafa dambiyada aan aheyn Allaah, oo aan kas iyo ogaal ugu adkeysan waxa ay faleen.

136. (Ma xagga) kuwan-abalgudkoodu waa dambi dhaaf xagga Rabbigood, iyo beero ay hoostoodu qulqluaan wabiyo, oo ay ku dhex waarayaan, oo wanaagsanaa abaalka kuwa camal fasha.

137. Xaqiiq waxaa jiray tusalooyin idinka hortiin, ee ku socdaala dhulka oo fiirsha sida ay ku dambeysey ciribta beeniyayaasha.

138. Kanu waa hadal u cad dadka, waana u hanuu iyo waano ku socota kuwa iska ilaasha xumaha.

139. Oo ha ahaannina kuwo aan sugnaan, oo ha murugoonnina, oo idinkaa sarreyn doono haddaad tiihiin mu'miniin.

140. Hadduu idinku soo gaaray dhaawac (Uxud), waxaa xaqiiq soo gaaray dhaawac la mid ah dadkaa (gaalada) ah; oo waxaan ugu keennaa maalmaha dadka dhexdood si moogaaleysi ah, oo waa si uu Allaah u muujiyo kuwa rumeysan, oo idiinka sameysto shuhado. Oo Allaah ma jecla gar ma qaatayaasha.

24. Waxaa loo jeedaa faaxishada dambiga weyn ee ciribta xun, cirib xumadiisana ku koobaney falaha oo keliya bal saameeyasa dadka kale, sida zinada, xatooyada, ribada, waxaa se loola jeedaa dulmum nafta inaad fasho dunuuuf gef ah uu qofku ka galu naaf ahaantiisa ha ahaado dambi weyn ama mid yar sida cabbitaanka khamriga, iwm.

**141.** Oo waa si uu u daahiriyo kuwa rumeysan oo u beelaan gaalada barakooyinka.

**142.** Ma waxaad mooddaan inaad gali doontaan jannada isagoon Allaah aan welii muujin kuwiinnaa aad u jijaada<sup>(25)</sup> oo idinka mid ah, oo (sidoo kale) muujin kuwa samrayaasha ah?

**143.** Oo xaqiq waxaad rabteen dhimashada ka hor intaydaan la kulmin. Oo xaqiq waad aragteen idinkoo eegaya.

**144.** Oo Muxammad ma aha waxaan ahayn Rasuul, Waxaa xaqiq tagay hortiis Rusul (badan). Ee hadduu dhinto<sup>(26)</sup> ama la dilo ma waxaad dib ugu gaddoomi lahaydeen cirbihiinna? Oo qofkii dib ugu gaddoomaa cirbihiisa, waxba uma dhimi doono Allaah, Oo Allaah waa u abaal gudi doonaa mahad naqayaasha.

**145.** Oo nafi ma dhiman doonto Idanka Ilaahey ma`ahee waqtiga waa la gooyey. Oo qofkii raba abaalka adduunyadan, Waxbaan ka siin doonaa, oo qofkii raba abaalka Aakhirada, waxbaan ka siin doonaa. Oo Waanu u abaal gudi doonaa mahad naqayaasha.

**146.** Oo badanaa inta Nabi ee ay la dagaal galeen Rabbi yaqaanno tiro badan. Ee marnaba kuma ay qalbi jabin waxa ku soo gaaray jidka Ilaahey, kumana ay jilcin, ismana ay liidin. Oo Allaah wuu jecel yahay kuwa samir yeeshaa.

**147.** Oo ma ahayn qowlkoodu waxaan ahayn inay yiraahdeen: Rabbiyyow! Noo dhaaf dambiyadayada, iyo ku xadgudubka arrinkayaga, oo noo sug cagahayaga, oo nooga gargaar dadka gaalada ah.

**148.** Markaasuu Allaah siiyey abaalka Adduunyadan iyo abaalka wanaagsan ee Akhirada. Oo Allaah wuxuu jecel yahay sama falayaasha.

<sup>25.</sup> Jihaaduk wuxuu leeyah macnooyin badan b. Jihaadkaa waa dadaal lala yimaado oo kor loogu qaadayo islaamka ee lagu difaacayo muslimiinta t. La jihaadku nafja j. Ku bixinta maalika danaha islaamka iyo muslimiinta x. Jihaadkaa tiridha fasahaadka iyo oogidaa xaga. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Hu jeclaannina la kulanke cadowga, ee weydista Allaah caafimaad, markaadse dagaal kula kulantaa cadowgiinna adkeysto oo ogadaa in Jannah taahay hooska seefaha.

<sup>26.</sup> Rasuulka ilaahey waa qof Aadmi ah uu soor diray Ilaahey Rusul hortiis. Qaarkood la dilay, qaarna u dhinteen jirrooyin, sidaas oo kale Nabigu s.c.w. wuu dhinan doonaa sida Rusushii horeba. Dagaalkii Uxud waxaa faafay warka dilidda Nabiga s.c.w. warkaasoo qas iyo qalalaase geliyet muslimiinta, heer muslimiinta gaarkood ay magan weydista Abuu Sufyaan oo ahaa markaa odaga Quraysh. Munaafiqiintuun waxay yiraahdeen haddii uu Muxammad ahoota lahaba Nabi lama dileen. Markaasuu Ilaahey soo deejiyey Ayaddaan si uu dejiyo quluubta muslimiinta iyo jawaab celin ahoota wixii ay yiraahdeen munaafiqiinta. (Saxiix Al-Bukhaari Baabka Jihaadk) Abuu Bakar a.k.r. wuxuu soor daliilsadaay Ayaddaan maalintii uu geeriyooday Nabigu s.c.w. si uu dejiyo Cumar bin Al-Khaddaab iyo saxaabada qaarkood ee rumeysan waayey dhimashada Nabiga s.c.w. (Saxiix Al-Bukhaari qaybta Taqwada Saxaabada).

يَتَأَلَّهُ الَّذِينَ أَمْوَانٍ تُطْبِعُوا لِلَّذِينَ كَفَرُوا  
 يَرْدُو كُمْ عَلَىٰ أَعْقَبِكُمْ فَتَنَقِلُوا خَسِيرٍ  
 كَلِّ اللَّهِ مَوْلَكُمْ وَهُوَ خَيْرُ التَّصْرِيفِ<sup>(27)</sup> سَلْقَى  
 فِي قُلُوبِ الظَّالِمِينَ كَفَرُوا الرُّغْبَ بِمَا أَشَرَّكُوا لِلَّهِ  
 مَا لَمْ يُنْزِلْ لَهُ سُلْطَنًا وَمَا وَهُمْ آتَانُ وَيُنَسِّ  
 مَشْوِي الظَّالِمِينَ<sup>(28)</sup> وَلَقَدْ صَدَقُوكُمُ اللَّهُ  
 وَعْدَهُ إِذَا تَحْسُنُوهُمْ بِإِذْنِنِهِ حَقًّا إِذَا فَشَلْتُمْ  
 وَتَنْزَعُتُمْ فِي الْأَمْرِ وَعَصَيْتُمْ مِنْ بَعْدِ مَا أَرَكُمْ  
 مَا يُحِبُّونَ مِنْ كُمْ مَنْ يُرِيدُ الْأَذْيَا وَمِنْ كُمْ مَنْ  
 يُرِيدُ الْآخِرَةَ ثُمَّ صَرَفَكُمْ عَنْهُمْ لِيَتَبَلَّكُمْ  
 وَلَقَدْ عَفَعْنَكُمْ وَاللَّهُ ذُو فَضْلٍ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ  
 إِذَا تُصْعِدُونَ وَلَا تُؤْنَتْ عَلَىٰ أَحَدٍ  
 وَالرَّسُولُ يَدْعُوكُمْ فَأَخْرِكُمْ فَأَثْبَكُمْ  
 غَمَّا بَعْمَلْتُمْ لَكُمْ يَلَامِحُونَ عَلَىٰ مَا فَاتَكُمْ وَلَا  
 مَا أَصَبَّكُمْ فِي وَاللَّهِ خَيْرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ<sup>(29)</sup>

**149.** Mu'miniintow! Haddaad adeecdaan gaalada, waxay dib idiinku celin doonaan cirbihiinna, markaa waxaa sooguddoomi doontaan idinkoo khasaaro ku sugan<sup>(27)</sup>.

**150.** Mayee! Allaah baa ah Gargaarihiin, Isaga baana u wanaagsan gargaarayaasha.

**151.** Waxaan ku tuuri doonaa argagax quluubta kuwa rumeysan diida, sababta la wadaajintooda Allaah waxaa ussan u soo dejin wax xujo ah; oo hoygood waa Naarta. Oo wax xun oo baas waa hoyga gar ma qaatayaasha.

**152.** Oo xaqiqi Allaah wuxuu idiin oofiyey Ballankisi, markaad ku leyseen (cadawgiinna) Idankiisa, ilaa markaad qalbi jabteen oo aad isku qabsateen arrinka, oo aad caasideen<sup>(28)</sup> kaddib markuu idin tusiyey waxa aad jeceshiihiin. Waxaa idinka mid ahaa qaar rabay adduunyadan, oo waxaa idinka mid ahaa qaar rabay Aakhirada. Markaas buu idinka jeediyyey xaggeeda, si uu idiin imtixaano. Oo xaqiqi wuu idiin cifiyey. Oo Allaah wuu u Roon yahay mu'miniinta.

**153.** (Xusuusta) markaad cararteen idinkoo xiimaya aan cidna dhowreyn, oo Rasuulku uu idiinka dhawaqaqey gadaashiinna<sup>(29)</sup>, markaasuu Wuxuu idinku abaal mariyey hammi kale halkii hammigiiinna<sup>(30)</sup>, si aydaan uga murugoon waxa idin dhaafay, iyo waxa idinku dhacay midna. Oo Allaah waa u Xog Ogaal waxa aad fashaan.

<sup>27.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Anigu barii baan ka ahay muslim kasta oo ku nool gaalo dhexdood. Waxay yiraahdeen: Rasuul Allow? Sidee? Wuxuu yiri: Waa inay is arkin labadooda dab. W.w. Abuu Daawuud

<sup>28.</sup> Ganayaashii wixii uu amray Nabiga s.c.w oo ah inay ku suggaadaan meeshooda la amray wax kastoo dhaca.

<sup>29.</sup> Muslimiinta kuma ayan guuleysan inay ka adkaadaan.

<sup>30.</sup> Waxay muslimiinti ka xumaadeen inayan adeecin amarka Rasuulka s.c.w. taasoo ahayd sababta jabkooda.

**154.** Markaas hammi kaddib wuxuu idinku soo dejiyey nabdooni, xasiloomni u imaneysa koox idinka mid ah<sup>(31)</sup>, halka koox kale ay nafahooda walaaciyeen<sup>(32)</sup>, oo waxay ku maleeyeen Allaah male xun aan xaq ahayn oo malihii jahiliyadda ah. Waxay lahaayeen: Ma aynu ku lihin wax talo ah arrinka. Dheh: Hubaal arrinka oo dhan waxay ku jiraan (Gacmaha) Ilaahey. Waxay ku qarsadaan nafahooda wax aysan kuu muujinayn<sup>(33)</sup>, iyagoo leh: Haddaan wax talo ah ku lahaan lahayn arrinka, nalguma dileen halkan<sup>(34)</sup>. Dheh: Xitaa haddaad joogi laheydeen guryiihinna, kuwa dilka loo qoray waxay shaki li' i soo bixi lahaayeen halka lagu dili lahaa, oo waa si uu Allaah u imtixaano waxa ku jira laabiihinna, oo u daahiriyo waxa ku jira quluubiinna, oo Allaah wuu ogsoon yahay waxa ku jira laabaha.

**155.** (Ma) kuwii idinka midka ahaa ee dhabarka jeediyey maalintii labada col is-heleen (dagaalkii Uxud), Shaydaan uun baa doonay inuu sababo inay simbirriixdaan waxoogay (eed) ah oo ya kasbadeen awgeed. Oo xaqiqi Allaah wuu iska cafiyey. Hubaal, Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Dulqaad Badan.

**156.** Mu'miniintow! Ha noqonnina sida kuwa gaalada ah, oo ka yiraahda walaalahood marka ay ku socdaalaan dhulka ama duullaan qaadaan: Hadday nalaa joogi lahaayeen ma dhiman lahayn lamana dili lahayn, waa si uu Allaah uga dhigo arrinkaa wax u keena qoomamo daran quluubtooda. Oo Allaah baa bixiy nolol oo sababa dhimasho. Oo Allaah wuu arkaa waxa aad fashaan.

**157.** Oo haddii la idinku dilo Jidka Ilaahey ama aad dhimataan, xaqiqi dambi dhaaf xaggaa Ilaahey ah iyo naxariis baa ka khayr badan waxa ay urursadaan.

31. Muslimiinta lahaa yaqiinta xoogga leh.

32. Muslimiinta shakiday.

33. Ictiqaadka in Muxammad haddii uu yahay Nabi iyo Rasuul Ilaahey aan looga adkaadeen dagaalka.

34. Hadalkan wuxuu u jeedaa Nabiga s.c.w. iyo saxaabada jees ahaan, waayo waxay munaafiqiinta qabeen in Nabigu s.c.w. uusan aqoon u lahayn siyaasadda dagaalka, waayo wuxuu u baxay dagaal iyagoo muslimiinta tiro yar yihiin . markaasaa loogu jawaabay hadalkan.

وَلَيْنٌ مُّتَّهِّنٌ وَقُلْتُمْ لِأَلِي اللَّهِ تُخْشِرُونَ ﴿٣٥﴾ قِيمَارَحَمَةٌ مِّنَ اللَّهِ  
 لِيَنْتَ لَهُمْ وَلَوْكَنْتَ فَطَّاغِلِيظَ الْقُلْبِ لَأَنْقُضُوا مِنْ حَوَالَتَ  
 فَاعْفُ عَنْهُمْ وَاسْتَغْفِرْ لَهُمْ شَاوِرُهُمْ فِي الْأَمْرِ فَإِذَا عَرَمْتَ  
 فَوَتَّكَلْ عَلَى اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَوَكِّلِينَ ﴿٣٦﴾ إِنْ يَصْرُكُ اللَّهُ  
 فَلَا عَالَبَ لَكُمْ وَلَنْ يَخْذُلَكُمْ فَمَنْ ذَا الَّذِي يَصْرُكُ مِنْ  
 بَعْدِهِ وَعَلَى اللَّهِ فَيُتَوَكَّلُ الْمُؤْمِنُونَ ﴿٣٧﴾ وَمَا كَانَ لِتَيْنِي أَنْ  
 يَعْلُمَ وَمَنْ يَغْلُلْ بِأَيْتَ بِمَا عَالَغَ يَوْمَ الْقِيَمَةِ ثُمَّ تَوَقَّيْ كُلُّ  
 نَفِيسٍ مَا كَسَبْتَ وَهُمْ لَا يُطَامُونَ ﴿٣٨﴾ أَفَمَنْ أَتَبَعَ رِضْوَانَ  
 اللَّهِ كَمْ بِأَدَمَ سَخَطْتَهُ مِنَ اللَّهِ وَمَا وَلَهُ جَهَمَّمَ وَبِنَسْ الْمَصِيرُ  
 مُمْ دَرَجْتَ عَنْدَ اللَّهِ وَلَهُ بَصِيرٌ بِمَا يَعْمَلُونَ ﴿٣٩﴾ لَقَدْ  
 مَنْ اللَّهُ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ إِذَا بَعَثَ فِيهِمْ رَسُولًا مِّنْ أَنفُسِهِمْ  
 يَتَّلَوَ عَلَيْهِمْ عَاتِيَّهُ وَيَرْكِبُهُمْ وَيَعْلَمُهُ الْكِتَابَ  
 وَالْحِكْمَةَ وَإِنْ كَانُوا مِنْ قَبْلِ لَفِي ضَالَّلٍ مُّبِينٍ ﴿٤٠﴾ أَوْلَمَّا  
 أَصْبَتْكُمْ مُّصِيرَةً قَدْ أَصْبَتْمُ شَائِهَا قَلْسَمَ أَنَّ هَذَا  
 قُلْ هُوَ مِنْ عِنْدِ أَنفُسِكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ﴿٤١﴾

٧١

158. Oo haddii xaqqiig aad dhimataan ama la idin dilo, hubaal Ilaaahay xaggiisa baa la idinku soo kulmin doonaa idinkoo dhan.

159. Sidaas waa Naxariista Ilaaahay darteed inaad ula dhaqanto si nugul, oo haddaad ahaan laheyd mid qallafsan, qalbi adag, waxay xaqqiig ka kala yaaci lahaahey hareerahaaga; ee iska cafi oo u dambi dhaaf dalab oo kala tasho arrinka, ee marka aad goosato arrin isku halleey Allaah, hubaal Allaah wuu jecel hayah kuwa isku halleeya.

160. Hadduu Allaah idii gargaaro, markaa ma jiraan wax idinka adkaan kara; oo hadduu idinka goosto, waa kuma haddaba kan idii gargaari kara Isaga ka dambow? Oo Allaah (Keliya) ha isku halleeyaan mu'miniintu.

161. Oo ma aha wax ka suurooba Nabi inuu wax khiyaano, oo qofkii wax khiyaanaa wuxuu keeni doonaa waxa uu khiyaanay Maalinta Qiyaamaha<sup>(35)</sup>. Markaas baa naf walba waxaa loogu ofin doonaa si dhan waxa ay kasbatay iyagoo aan lagu gardaroon doonin.

162. Ee ma mid raaca Raalli gelinta Ilaaahay baa la mid ah kan isagu mutaysta Carada Ilaaahay, oo hoygiisu yahay Naar, oo waa meel baas oo aayo xun.

163. Waxaa jira darajooyin (kala duwan) Allaah agti, Oo Allaah wuu arkaa waxa ay falaan.

164. Xaqqiig Allaah Wuxuu ku galladeystay (Nicmo Weyn) mu'miniinta markuu ka soo saaray dhexdooda Rasuul nafahooda ka mid ah, u akhriyaya Aayadihiisa, oo daahirinaya, oo baraya Kitaabka iyo Xikmadda inkastoo taa ka hor hubaal ay ku sugnaayeen habow caddaan ah.

165. Ma markay idinku dhacday dhibaato, iyadoo idinkuba xaqqiig aad ku dhigteen (gaalada) labo laabkeed ayaad billowdeen inaad tiraahdaan: Xaggee buu nooga yimid kani? Dheh: Waa xagga nafahiinna. Hubaal Allaah wax walba wuxuu ku dul leeyayah awood buuxda.

<sup>35.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Yaan garan midkiin oo imaan Qiyaamadaa isagoo xambaarsan riti ciyi (xoolo ama maal booli ah) markaasuu oran: Muxammadow, Muxammadow, waxaan ku oran: Waxba kuuma qaban karo waa ku soo gaarsiyyey inaad iska ilaaliso maal xaq darro iyo xoolo booli ah.

**166.** Oo wixii idinku dhacay maalinkii markay labada col isku heleen (Uxud), waxay ku dhacday Idanka Ilahay, oo waa si uu u muujiyo mu'miniinta.

**167.** Iyo si uu u muujiyo munaafiqiinta oo lagu yiri: Kaalaya, U dagaallama Arrinka Ilahay ama difaaca nafahiinna. Waxay yiraahdeen: Haddaanu ognahay dagaal, xaqiq waa idin raaci lahayn. Waxay ahaayeen maalintaas, kuwa uga dhow gaalnimo iimaanka. Waxay ka yiraahdaan afakkooda waxaan ku jirin quluubtooda. Oo Allaah wuu Og hayah waxa ay qarsadaan.

**168.** Kuwaa ka yiri walaalahood iyagoo iyagu dib jiray: Hadday na maqli lahaayeen lama dileen. Dheh: Haddaba ka caabbiya nafahiinna dhimashada, haddaad tiihiin run sheegayaal.

**169.** Oo ha moodina kuwa lagu dilay Arrinka Ilahay meyti, Mayee, way nool yihiin,(oo) Rabbigood agtiis lagu arzaaqaa.

**170.** Iyagoo ku faraxsan waxa uu Allaah ka siiyey Fadligiisa, oo u faraxsan dartood kuwaa ay kaga soo tageen gadaashood, oo aan weli ku soo biirin<sup>(36)</sup>, inaanay cabsi qabi doonin oo aanay murugoon doonin.

**171.** Waxay ku faraxsan yihiin baraare ka yimid Allaah iyo Fadli(giisa) darteed, iyo inaanu Allaah dayaci doonin ajarka mu'miniinta.

**172.** (Ma xagga) kuwa (ku) ajiibay (Uxud) Allaah iyo Rasuulka kaddib inta uu soo gaaray dhaawacu; kuwooda ka mid ah ee fala samaha oo iska ilaasha (xumaha), waxay mudan doonaan ajar aad u weyn.

**173.** Kuwaa ay dadku ku yiraahdeen: Hubaal dadkii baa isu soo kiin biirsaday, ee ka baqa. Waxayse tani kordhisay Iimaankooda, oo waxay yiraahdeen: Allaah baa nagu filan, oo Isagaa u fiican cid wax xafidda.

<sup>36</sup>. Asxaabtooda nool ee weli u jihaadayey jidka ilahay.

فَلَقَبَوْا بِنَعْمَةِ مِنَ اللَّهِ وَفَضْلِ لَمْ يَمْسَسْهُ سُوءٌ وَاتَّبَعُوا  
رِضْوَانَ اللَّهِ وَاللَّهُ دُوْ فَضْلٌ عَظِيمٌ ﴿٦١﴾ إِنَّمَا ذَلِكُمْ أَشَيْطَنُ  
يُحُّوفُ أُولَئِكَ هُمْ وَخَافُونَ إِنْ كُثُرَ مُؤْمِنِينَ  
وَلَا يَحْزُنْكَ الَّذِينَ يُسْرِعُونَ فِي الْكُفَّارِ إِنَّهُمْ لَنَ يَصْرُوُنَّ إِلَى اللَّهِ  
شَيْئًا يُرِيدُ اللَّهُ أَلَا يَجْعَلَ لَهُمْ حَطَّافِ الْآخِرَةِ وَلَهُمْ عَذَابٌ  
عَظِيمٌ ﴿٦٢﴾ إِنَّ الَّذِينَ آشَرُوا وَالْكُفَّارُ بِالْأَيْمَنِ لَنَ يَصْرُوُنَّ إِلَى اللَّهِ  
شَيْئًا وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٦٣﴾ وَلَا يَحْسَبُنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا أَنَّمَا  
نُتَّلِي لَهُمْ خَيْرٌ لِأَنْفُسِهِمْ إِنَّمَا نَلِي لَهُمْ لِيَذَّادُوا إِلَيْهِمْ  
عَذَابٌ مُهِمِّنٌ ﴿٦٤﴾ مَا كَانَ اللَّهُ لِيَدْرِي الْمُؤْمِنُونَ عَلَى مَا أَنْتُمْ  
عَلَيْهِ حَقًّا يَمِيزُ الْحَقِيقَةَ مِنَ الْأَطْيَبِ وَمَا كَانَ اللَّهُ يُطَاعُكُمْ  
عَلَى الْغَيْبِ وَلَكُنَّ اللَّهُ يَعْلَمُ مِنْ رُسُلِهِ مَنْ شَاءَ فَقَاتِلُنَّا إِنَّ اللَّهَ  
وَرَسُولُهُ وَإِنْ تُؤْمِنُوا وَتَتَقَوَّلُ فَلَكُمْ أَجْرٌ عَظِيمٌ ﴿٦٥﴾ وَلَا يَحْسَبُنَّ  
الَّذِينَ يَتَحَلَّوْنَ بِمَا أَتَاهُمُ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ هُوَ خَيْرٌ لَهُمْ  
بَلْ هُوَ سَرُّ لَهُمْ سَيِطُونُ مَا بَخَلُوا بِهِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَلَهُ  
مِيرَاثُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا تَعَمَّلُونَ حَيْرٌ  
﴿٦٦﴾

174. Markaas bay la noqdeen bareere uga yimid Allaah iyo Fadli(giisa), oo maanay taaban xumaato oo waxay raaceen Raalli gelinta Ilaahey. Oo Allaah waa Rabbiga leh Fadli weyn.

175. Waa uun Shaydaanka kan idinku bajiya xulafadiisa ee ha ka cabsannina, ee Anigoo Keliya iga cabsada, haddaad tiihiin mu'miniin.

176. Oo yey ku murugo gelin kuwa uga dhaca gaalnimada si degdeg ah<sup>(37)</sup>; hubaal iyagu waxba ma yeeli karaan Allaah marnaba. Allaah Wuxuu rabaa in aanay ku yeelan wax qayb ah Aakhirada, oo waxay mudan doonaan cadaab aad u weyn.

177. Hubaal, Kuwa siistay gaalnimo qiiimaha Iimaanka, waxba kama dhimi doonaan Allaah marnaba, oo waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuun badan.

178. Oo yey gaalada moodin in u dib dhigideydu ay u khayr roon tahay nafahooda. Wuxaan ugu dib dhignaa oo keliya si ay u kororsadaan dambiyio, oo waxay mudan doonaan cadaab aad u dulleysa.

179. Sinnaba Allaah uguma tagi doono mu'miniinta xaaladdaad ku jirtaan, jeer uu kala sooco kan xun iyo kan wanaagsan. Oo ma aha Allaah mid idin tusaya waxa aan muuqan ee qarsoon, laakiinse Allaah wuxuu ka doortaa Rusushiisa midkii uu doono. Ee rumeeya Allaah iyo Rusushiisa. Oo haddaad rumeysaan oo aad iska ilaalisaan xume waxaad mudan doontaan abaalgud aad u weyn.

180. Oo yey moodin, kuwa ku bakhayla bixinta waxa uu siiyey Allaah oo Deeqdiisa ka mid ah inay khayr u tahay. mayee waa u shar; Waxaa luqunta loo suri doonaa waxay ku bakhayleen oo mareegyo (naar) ah Maalinta Qiyaamaha<sup>(38)</sup>. Oo Allaah baa iska leh dhaxalka samooyinka iyo arlada; oo Allaah waa u Xog Ogaal waxa aad fashaan.

37. Xaalka muslimiinta ku milman munaafiqiinta.

38. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Addoonkaan bixin sakada xoolahiisa waxaa laga dhigi Qiyaamada mas bara leh oo raacaaya, markaasuu ka carari oo raacayaan isagoo leh: Waxaan ahay kaidkaagi, markaasuu Ayaddan akhriyey. W.w. Axmad

**181.** Allaah xaqiq wuu maqlay oraahda kuwii yiri: Hubaal Allaah waa faqir oo innagaan hodan ah. Waanu qori doonaa waxay yiraahdeen iyo ku dilkooda anbiyada gar darro, oo waxaanu oran doonaa: Dhadhamiya Cadaabka Gubashada.

**182.** Waxakani waa waxa ay gacmihii nu horay u geysteen iyo sababta inaanu Allaah ahayn mid ku gardarrooda addoomaha.

**183.** (Kuwaas weeye) kuwii yiri, hubaal Allaah wuxuu na xilsaary inaanaan rumeyn Rasulnal jeer uu noo keeno qurbaan uu dab (cirka ka yimaada) cuno. Dheh: Xaqiq waxay idinla yimaadeen Rusullo iga horreeyey xujooyin cad iyo waxaa aad dalabteen, ee maxaad u disheen haddaad tiihiin run sheegayaal?

**184.** Haddiise ay ku beeniyaan sidaa oo kale baa xaqiq loo beeniyey Rusul kaa horraysay, oo la yimid xujooyin cad, Qoraallo iyo kitaab iftiimaya.

**185.** Naf walba way dhadhamin doontaa dhimasho, oo waxaa uun la idiinku oofin doonaa si dhan ajarkiinna Maalinta Qiyaamaha. Ee qofkii laga fogeeyo Naarta ee la geliyo jannada baa xaqiqi liibaanaya. Oo ma aha nolosha adduunka waxaan ahayn sahay lagu dagan yahay.

**186.** Waxaa xaqiq la idinku imtixaami doonaa xagga maalkiinna iyo nafahiinnaba, oo waxaad xaqiq ka maqli doontaan kuwa la siiyey Kitaabka ee idinka horreeyey iyo xagga kuwaa ah mushrikiinta hadal badan oo idin dhiba, oo haddaad samir yeelataan oo iska ilalaasaan (xume), hubaal, arrinkaas waa ka mid umuuraha la go'aansado.

لَقَدْ سَمِعَ اللَّهُ تَوْلِيْدَ الَّذِيْنَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ فَقِيرٌ وَنَحْنُ أَغْنِيْنَا  
سَنَكِبُ مَا كُلُّ اُوْلَئِكُمْ هُمُ الْآتِيْسَاءِ بِعَيْرَ حَقٍّ وَنَقُولُ  
دُوْفُرْ اعْدَابَ الْحَرِيقِ ﴿٦﴾ ذَلِكَ بِمَا فَدَمْتَ أَيْدِيْكُمْ  
وَأَنَّ اللَّهَ لَيْسَ بِظَلَامٍ لِتَعْبِيدِ ﴿٧﴾ الَّذِيْنَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ  
عَهِدَ إِلَيْنَا أَلَا يُؤْمِنُ بِرَسُولِنَا حَتَّىٰ يَأْتِيَنَا بِفُرْقَانٍ  
تَأْكُلُهُ الْأَنْتَارُ قُلْ قَدْ جَاءَكُمْ رُسُلٌ مِّنْ قَبْلِيْ بِالْبَيْنَاتِ  
وَبِالَّذِيْ قَلَّ شُمُرُهُ فَلَمْ قَاتَلُمُوهُمْ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ  
فَإِنْ كَذَّبُوكُمْ فَقَدْ كَذَّبَ رُسُلٌ مِّنْ قَبْلِكُمْ جَاهَدُ  
بِالْبَيْنَاتِ وَالْأَثْرِ وَالْكِتَابِ أَكْتَبَنَا مِنْ  
دَائِقَةِ الْمَوْتِ وَإِنَّمَا تَوَهَّمُ أَجْوَرَكُمْ يَوْمَ الْقِيَمَةِ  
فَمَنْ رُحْيَ عَنِ النَّارِ وَأَدْخَلَ الْجَنَّةَ فَقَدْ فَازَ وَمَا  
الْحَيَاةُ الدُّنْيَا إِلَّا مَتَّعٌ الْفُرُورِ ﴿٨﴾ لَشَلُوْرُونَ فِي  
أَمْوَالِكُمْ وَأَنْسِيْكُمْ وَلَشَمَعُونَ مِنَ الْأَذِيْنَ أُوْلَئِ  
الْكِتَابَ مِنْ قَبْلِكُمْ وَمِنَ الَّذِيْنَ أَشْرَكُوا أَذِيْنَ كَثِيرًا  
وَلَمْ يَصِرُّوْا وَتَسْقُوا إِلَيْكَ مِنْ عَزَمِ الْأَمْوَالِ

وَإِذَا حَدَّ اللَّهُ مِيقَاتَ الْأَيَّنِ أُوتُوا الْكِتَابَ لَتُبَيَّنَ لَهُنَّا  
وَلَا تَكُونُونَهُ فَنَبَذُوهُ وَرَأَهُ طُهُورُهُمْ وَأَشْتَرَوْا بِهِ ثُمَّا  
قَلِيلًا فِي سَمَاءِ شَرَوْنَ<sup>١٨٧</sup> لَا تَحْسِنَ النِّسَنَ يَغْرِبُونَ بِمَا  
أَتَوْا بِهِمُونَ أَنْ يُخْمَدُوا فَيَقُولُوا فَلَا تَحْسِبُهُمْ  
يُمْقَازُونَ مِنَ الْعَذَابِ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ<sup>١٨٨</sup> وَلِلَّهِ مُلْكُ  
السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ<sup>١٨٩</sup> إِنَّ فِي  
خَلْقِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَآخْلَافِ الْأَيَّلِ وَالنَّهَارِ لَآيَاتٍ  
لِّأُولَئِكَ<sup>١٩٠</sup> الَّذِينَ يَذْكُرُونَ اللَّهَ فِي مَا وَعُودُهُ  
وَعَلَى جُنُوْنِهِمْ وَيَتَفَكَّرُونَ فِي خَلْقِ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ  
رَبَّنَا مَا حَلَقْتَ هَذَا بِطْلَاسَ سُبْحَانَكَ قَنَاعَ عَذَابَ الْتَّارِ<sup>١٩١</sup>  
رَبَّنَا إِنَّكَ مَنْ تُنْهِي خَلِيلَ الْأَنَارِ فَقَدْ أَخْرَيْتَهُ وَمَا الظَّالِمِينَ مِنْ  
أَنْصَارِ<sup>١٩٢</sup> رَبَّنَا إِنَّا سَمِعْنَا مُنَادِيًّا يَنْدِي لِلْأَيْمَنِ أَنْ  
إِمْوَأْلَيْتَ كُمْ قَمَانَارِيًّا فَأَغْفِرْنَا ذَنْوَنَارًا كَفِرْنَا عَنَّا  
سَيِّعَاتِنَا وَقَنَاعَ الْأَبَرِارِ<sup>١٩٣</sup> رَبَّنَا وَأَتَنَا مَا وَعَدْنَا عَلَى  
رُسُلِكَ وَلَا نُخْزِنَنَا يَوْمَ الْقِيَمَةِ إِنَّكَ لَا تَخْفِي الْمِيعَادَ<sup>١٩٤</sup>

٧٥

cadaabka Naarta.

**192.** Rabbiyow! Hubaal qofkii Aad geliso Naarta, xaqiiq waa dulleysay, oo gar ma qaatayaasha ma yeelan doonaan gargaarayala.

**193.** Rabbiyow! Hubaal waxaanu innagu maqallay baaqe ku baaqaya Iimaanka (oo leh): Rumeeya Rabbigiin, markaasaan Rumaynay. Rabbiyow! Ee noo dhaaf dunuubtayada, oo noo astur xumayaalkeenna, oo na oofso la jirka baarriyiinta.

**194.** Rabbiyow! Oo na sii waxa aad noo ballan qaadday ee Rusushaadu na soo gaarsisay oo hana dulleyn Maalinta Qiyaamaha, Adigu ballanka kama baxdide.

**187.** Oo (xus) markuu Allaah la galay axdi kuwii la siiyey Kitaabka, waa inaad run ahaan u caddeysaan dadka oo aydaan ka qarinnin<sup>(39)</sup>, waxayse ka tuureen dhabarradooda gadaashood, oo ay ku iibsadeen qiimo yar. ee xumaa waxaa ay gataan.

**188.** Ha moodina in kuwa ku farxa waxa ay faleen, oo jecel in lagu ammaano wax aysan falin, \_ha moodina inay ka badbaadayaan cadaabka, oo waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuu badan.

**189.** Oo Allaah baa iska leh boqortooyada (runta ah ee) samooyinka iyo arladaba, Oo Allaah wax walba wuu Karaa.

**190.** Hubaal abuurista samooyinka iyo arlada iyo isbeddelka habeenka iyo maalinta, waxaa ugu sugar xaqiq calaamooyin wax garadka.

**191.** Kuwa xusa Allaah joog iyo fadhi iyo iyagoo u jiifa dhinacyadoodaba, oo ka fekera abuurista samooyinka iyo arlada: Rabbiyow! Uma aadan abuurin kani baadil, Adigaa nazahan oo xurmoo dhan leh, ee naga badbaadi cadaabka Naarta.

<sup>39.</sup> Waxaa ka mid ah waxyaalaha ay qariyeen wixii ku tacalluqay imaanshaha Nabi Muxammad s.c.w

**195.** Markaasuu Rabbigood ka aqbalay (ducadoodii): Inaan Anigu dayaci doonin camalka uu mid idinka mid ah falo, ha ahaado lab ama dheddig, midkiin walbaa uu ka ahaaday midka kale, ee kuwa iyagu soo haajiray, ee looga soo saaray guryahooda debedda, ee loogu dhib geystey Arrinkayaga, ee dagaallmay ee loo dilay Dartay, Waxaan xaqiiq asturi doonaa xumayaalkooda oo waxaan xaqiiq gelin doonaa beero ay qul-qulaan hoostoodu webiyo; Abaalgud xagga Ilaahay, oo Allaah baa haya oo weliba baxsha abaalgud aad u wanaagsan.

**196.** Yaanay ku dagin galoo baxa kuwaa gaalada ah magaaloo yinka cabsi la'aan.

**197.** Waa raaxo yar; kaddibna hoygoodu waa Naar; oo ugu xun gogol la yeesho.

**198.** Laakiinse, kuwa dhowra (xilka uu saaray) Rabbigood, waxay mudan doonaan beero ay qul-qulaan hoostooda webiyo, oo ay ku dhex waaraayaan, marti qaad uu u fidhiyey Allaah; oo Allaah wuxuu hayaa u khayr badan kuwa baarriga ah.

**199.** Oo hubaal ehlul Kitaabka waxaa ka mid ah kuwo rumeysan Allaah, iyo waxa la idiin soo waxyooday, iyo waxa iyaga loo soo waxyooday, oo u khushuuc Allaah, oo aan ku iiabsan Aayadaha Ilaahay qimo yar. Kuwan weeye kuwa ku leh ajarkooda Rabbigood agtii; hubaal Allaah wuu ku Dhaqso Badan yahay xisaabinta.

**200.** Mu'miniintow! Samir yeesha oo ku sarreeya samir yeelashada, oo heegan ahaada sugaran<sup>(40)</sup>, oo Alle ka cabsada (oo dhowra xilka uu idin saaray) aad liibaantaane

فَأَسْتَجَابَ لَهُمْ رَبُّهُمْ أَنَّ لَا يَضِيقُ عَمَلُ عَبْدٍ مِنْكُمْ  
ذَكَرٌ إِنَّمَا يَعْصُمُ كُمْ مِنْ بَعْضٍ قَالَنِيَنَّ هَا جَرَوْا وَلَحْجَوْا  
مِنْ دِيْرِهِمْ وَأَوْدُوا فِي سَيِّلٍ وَقَتَّلُوا وَقَتْلُوا لِأَكْفَارَ  
عَنْهُمْ سَيَّاتِهِمْ وَلَأَدْخَلَنَّهُمْ جَنَّتَ تَبَرِّي مِنْ تَحْتِهَا  
الْأَنْهَرُ قَوْبَائِنَ عَنْدَ اللَّهِ وَاللَّهُ عَنْهُمْ حُسْنٌ أَلْقَابٌ  
لَا يَعْرِنَكَ تَقْلُبُ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي الْأَيَّامِ مَتَعْ قَلِيلٌ  
ثُمَّ مَا وَلَهُمْ جَهَنَّمُ وَبِئْسَ الْمِهَادُ<sup>(41)</sup> لَكِنَّ الَّذِينَ آتَقُوا  
رَبَّهُمْ لَهُمْ جَنَّتٌ تَبَرِّي مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَرُ خَلَدِينَ فِيهَا  
نُرُّلَانَ مِنْ عَنْدَ اللَّهِ وَمَا عَنْدَ اللَّهِ خَيْرٌ لِلْأَبْرَارِ<sup>(42)</sup> وَإِنَّمَنْ  
أَهْلَ الْكَتَبِ لَمَنْ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَمَا أُنْزَلَ إِلَيْكُمْ  
وَمَا أُنْزَلَ إِلَيْهِمْ خَشِعِينَ لِلَّهِ لَا يَشَرُّونَ<sup>(43)</sup> بِمَا يَنْتَدِيَنَّ اللَّهُ  
شَنَآنًا قَلَّا وَلَتَكَلَّ لَهُمْ أَبْخَرُهُمْ عَنْدَ رَبِّهِمْ إِنَّ اللَّهَ  
سَرِيعُ الْحِسَابِ<sup>(44)</sup> يَتَآمِنُهَا الَّذِينَ ظَاهَرُوا أَصْرِيفُوا  
وَصَاهِرُوا وَرَأَبُطُوا وَأَنْقُوا اللَّهُ لَعَلَّكُمْ تَفْلِحُونَ

شُورَةُ النَّسَاءِ

٧٦

<sup>40.</sup> Adigoo ku sugaran rugahiinna oo ka ilaalinaya cadowga, ama masajidda idinkoo sugaya salaadaha. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Naari ma taabado labo indhood, il u oyday cabsi Ilaahay iyo il u soo jeedday ilaalinta xuduudaha Muslimka.

## Suuradda 4 An-Nisaa

Waa 176 Aayadood Madaniyyah  
Bismillaahir Raxmaanir Raxiim

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
 يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُم مِّنْ تَقْسٍ وَجِهَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجًا وَبَثَّ مِنْهُمَا بِحَالٍ لَّا يَرَوْنَهُ وَأَنْقَوْلَهُ اللَّهُ الَّذِي تَسَاءَلُونَ يَهُ وَالْأَرْضَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ كُفُورٌ قَيْمَاتٍ ۖ وَإِنَّمَا أَيْمَنَ أَمْوَالَهُمْ وَلَا تَبْدِلُوا الْحَقِيقَةَ بِالظَّلَّمِ وَلَا تَأْتِيَ الْأُمُورُ إِلَيْهِمْ إِلَّا مَوْلَدُكُمْ إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ كَانَ حُوَّا كَبِيرًا ۖ وَإِنْ خَفْتُمُ الْأَنْقُسْطُوْفَ فِي أَيْمَنِكُمْ فَإِنَّكُمْ مَاطَابَ لِكُمْ مِّنَ النَّاسِ مَشْئَى وَقْلَثَ وَرَبْعَ فَإِنْ خَفْتُمُ الْأَنْقُدُلُوا فَوْجَدَهُ أَوْمَالَكُمْ أَيْمَنَكُمْ ذَلِكَ أَذْنَ الْأَتْقَوْلُ ۚ وَإِنَّمَا أَنْسَأَهُ اللَّهُ الْأَسَاءَ صَدْقَتِهِنَّ بِحَلَةٍ فَإِنْ طَنَ لَكُمْ شَيْءٌ وَمَنْهُ نَفْسَأَهُ فَكُوْهُ هِنَّيَا مَارِيَتَ ۖ وَلَا تُؤْتُوا السُّفَهَاءَ أَمْوَالَكُمُ الَّتِي جَعَلَ اللَّهُ لَكُمْ قِيمًا وَأَرْزُقُوهُ فِيهَا وَأَكْسُوْهُ وَقُولُوا لَهُمْ قَوْلَ الْمَعْرُوفَ ۖ وَبَتَلُوا الْيَسْتَمِعَ حَتَّىٰ إِذَا بَلَغُوا أَنْتَكَاحَ فَإِنْ أَنْسَمْتُمْ أَمْوَالَهُمْ رُشْدًا فَادْعُوا إِلَيْهِمْ أَمْوَالَهُمْ وَلَا تَأْكُلُوهَا إِنْ سَرَافُوا دَارًا أَنْ يَكْبُرُوا وَمَنْ كَانَ غَيْرَهُ فَإِلَيْهِ سَقِيفٌ وَمَنْ كَانَ فَقِيرًا فَإِلَيْهِ كُلُّ الْمَعْرُوفِ فَإِذَا دَعَتُمُ الْيَهُمَّ أَمْوَالَهُمْ فَأَشْهُدُهُ وَأَعْيَهُمْ وَكَفَىٰ بِاللَّهِ حَسِيبًا ۖ

1. Dadoow! Dhowna (xilka uu idin saaray) Rabbigii, Ee idinka abuuray naf keliya, ee ka abuuray lammaankeeda la (nooca) ah, oo ka baahshay labadani rag tiro badan iyo haweenba; oo dhowna (xilka uu idin saaray) Allaah ee ah Kan aad isku weydiisataan (xuquuqdiinna), oo (dhowna xaqqa) qaraabada<sup>(1)</sup>. Hubaal Allaah waa idin dhugtaa dhugasho joogto ah.

2. Oo siiya agoomaha maalkooda, oo ha kaga beddelannina (waxyaaloo) aan qiimo lahayn waxooda wanaagsan; oo ha ka hunguriyeynina maalkooda (idinkoo ku darsanaya) maalkiinna. Arrinkaa hubaal waa dambi aad u weyn.

3. Oo haddaad ka cabsataan inaydaan ula dhaqmi karin si caddaalad ah agoomaha, marka guursada haweenkaa wixii idinhabboonaada, labo iyo saddex iyo afarba haddiise aad ka cabsataan inaydaan ula dhaqmi doonin si caddaalad ah<sup>(2)</sup> markaa (guursada) mid keliya<sup>(3)</sup> ama waxay gacmahiinuu midig hantaan<sup>(4)</sup>. Arrinkan baa u dhow, inaydaan gardarro falin.

4. Oo siiya haweenka meherradaado siismo ay u xor yihiin, hadday se iyaga naf ahaantooda idinka raalli noqdaan inay idiin daayaan wax ka mid ah (meherkaa), markaa ku qaata si raalli ah iyo dhib la'aan.

5. Oo ha siinnina maalkiinna uu Allaah idiinka dhigay wax aad ku dhaqan tiihiin makasta<sup>(5)</sup>, kase quudiya (faa'idooyinka ka soo baxa) oo uga arrad tira, oo kula hadla hadal wanaagsan oo daacad ah.
عَلِيمًا حَكِيمًا<sup>١٥٥</sup> إِنَّا أَنْزَلْنَا إِلَيْكُمُ الْكِتَابَ بِالْحَقِّ لِتَعْكِمُ  
بَيْنَ النَّاسِ بِمَا أَرَنَا اللَّهُ وَلَا تَكُونُ لِلْخَابِنَ حَصِيمًا<sup>١٥٦</sup>

٩٥

102. Oo markaad dhex joogto, oo aad u oogto salaadda, ha kula istaago koox ka mid ah, oo ha qaataan hubabkooda, oo markay sujuudaan ha aadaan gadaashiinna, oo koox kale oo aan weli tukan ha timaaddo horay oo ha kula tukadaan, oo ha qaataan digtoonidooda iyo hubabkooda. Waxay doonayaan kuwa gaalada ahi inaad moogaataan hubabkiinna iyo qalabkiinna oo ay markaas idiin soo weeraraan mar keliya (si kedo ah), oo ma aha korkiinna wax eed ah hadday idin haysato dhib roob ama aad tiihin kuwa buka inaad dhigtaan hubabkiinna, oo qaata digtooniidiinna. Hubaal, Allaah wuxuu u diyaariyey gaalada cadaab dulleysa.

103. Haddaba marka aad bogtaan salaadda, xusa Allaah joog iyo fadhi iyo idinkoo u jiifaba dhinacyadiinna, Markase aad nabad degtaan, u ooga salaadda si wanaagsan. Hubaal, salaadda waxay ku tahay mu'miniinta faral leh waqtio go'an.

104. Oo ha ka qalbi dabcin a dabagalka qoloda (cadowga ah); haddaad idinku dareentaan xanuun, hubaal iyaguba (sido kale) waxay dareemaan xanuun sidaadba u dareentaan xanuun, oo waxaad ka rajaysaan Allaah wax aanay rajaynin, oo Allaah waa wax kasta Ogsoone, Xakiim ah.

105. Hubaal Wuxaan kuugu soo waxyoonnay Kitaabka si xaq ah, si aad ugu kala xukunto dadka dhexdooda waxa uu Allaah ku baray, ee ha noqon qareen u doda khaa'iniinta.

**106.** Oo weydiiso Dambi Dhaafka Ilahay, Hubaal, Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan<sup>(41)</sup>.

**107.** Oo ha u doodin kuwa khyaameeya nafahooda. Hubaal, Allaah ma jecla mid kastoo khaa'in, dambiiile ah.

**108.** Waxay ka qariyan (niyooyinkooda iyo camalladooda xun) dadka, kamase qarin karaan Allaah, wuuna la socdaa markay ku caweeyaan habeenkii hadal uusan raalli ka ahayn, oo Allaah waa uu koobaa waxa ay falaan.

**109.** Eega! Idinka weeye kuwa (ay dhici karto) inay u doodaan noloshan adduunka, ee yaa uga doodi doona Allaah agti Maalinta Qiyaamaha, ama u noqon doona wakiil difaaca?

**110.** Oo qofkii fala xumaan ama gef ka gala naftiisa, markaas weydiista Dambi Dhaaf Ilahay, wuxuu heli doonaa Allaah oo ah Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**111.** Oo qofkii kasbada dambi, wuxuu u kasbadaa oo keliya dhibaateynta naftiisa. Oo Allaah waa wax kasta Oge, Xakiim ah.

**112.** Oo qofkii kasbada gef ama dambi, markaas ku eeddeeya mid aan waxba galabsan<sup>(42)</sup>, wuxuu xaqiq xambaartaa been abuurasho iyo dambi iska cad.

**113.** Oo hadduusan jirin Fadliga Ilahay korkaaga iyo Naxariistiisa, waxay xaqiq ku hammin lahayd koox ka mid ah inay ku marin hababiyaan, mase marin hababiyaan waxaan aheyn nafahooda, waxnana kuma yeeli karaan.. oo Wuxuu Allaah kuu soo waxyooday Kitaabka iyo Xikmadda oo ku baray wax aadan horay u aqoon. Oo fadliga uu Allaah ku siiyey waa mid aad u weyn.

وَأَسْتَغْفِرُ اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٤١﴾ وَلَا يُحِدُّ  
عَنِ الَّذِينَ يَخْتَالُونَ أَنفُسَهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَحِبُّ مَنْ كَانَ  
خَوَّاً أَيْشِمًا ﴿٤٢﴾ يَسْتَخْفُونَ مِنَ النَّاسِ وَلَا يَسْتَخْفُونَ  
مِنَ اللَّهِ وَهُوَ عَمَّا يَعْمَلُونَ إِذْ يُبَيِّنُونَ مَا لَا يَرَضِي مِنَ الْقُولُ  
وَكَانَ اللَّهُ يَعْلَمُ مَا يَعْمَلُونَ مُجِيبًا هَاتَّا مِنْ هُوَ لَاءُ  
جَدَلَتْهُ عَنْهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا فَإِنْ يُجِدُّ اللَّهُ عَنْهُمْ  
بِوَرَقِ الْقِيمَةِ أَمْ مَنْ يَكُونُ عَلَيْهِمْ وَكِيلًا ﴿٤٣﴾ وَمَنْ يَعْمَلْ  
سُوءًا أُوْزِيْلُهُ نَفْسَهُ وَمَنْ يَسْتَغْفِرُ اللَّهَ يَجِدُ اللَّهَ غَفُورًا  
رَّحِيمًا ﴿٤٤﴾ وَمَنْ يَكْسِبْ إِيمَانًا فَإِنَّمَا يَكْسِبُهُ وَعَلَى نَفْسِهِ  
وَكَانَ اللَّهُ عَلَيْمًا حَكِيمًا ﴿٤٥﴾ وَمَنْ يَكْسِبْ خَطِيئَةً  
أَوْ شَمَائِلَ مِنْهُ بِرِيَّةً أَفَقَدَ أَحْتَلَ مُهْتَنَةً وَأَشْمَاءً مُبَيِّنًا  
وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكَ وَرَحْمَتُهُ لَهُمْ طَالِبَةٌ مُهْتَمِّمَةٌ  
أَنْ يُضْلُّوكُ وَمَا يُضْلُّونَ إِلَّا أَنفُسُهُمْ وَمَا يَضُرُّونَكَ  
مَنْ شَرِّعَ وَأَنْزَلَ اللَّهُ عَلَيْكَ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَعَلِمَكَ  
مَا لَمْ تَكُنْ تَعْلَمُ وَكَانَ فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكَ عَظِيمًا ﴿٤٦﴾

41. Abuu Hurayra a.k.r. waxaa laga soo weriyey inuu yiri: *Waxaan maqlay Rasuulkiil Alle s.c.w. oo leh: Wallaahi, Waxaan dambi dhaaf weydiistaalle oo u toobad keenaan wax ka badan toddobaatan jeer maalintii.*» (Al-Bukhaari)

42. Aayaddan iyo aayadaha ka dambeeyaa waxay ku soo deegen waxaa uu falay ducmah ee inta wax xaday ku qarshay guri nin Yuhuud ah uu leeyahay, markaasuu inkiray oo yiri waxaa xaday Yuhuudiga , markaasay xigtaadii ducmah u sheegeen Nabiga s.c.w. oo ka dalbeen Nabiga s.c.w. inuu difaaco ducmah, oo xukumo Yuhuudiga, iyagoo ku qiray inuu kan wax xaday yahay Yuhuudiga, wuxuu Nabigu s.c.w. ku sigtay inuu rumeysto hadalka ducmah qaraabadi iyo masabbishadoodii Yuhuudiga.

\* لَآخِرٍ فِي كَثِيرٍ مِنْ تَجْوِهِمُ الْأَمَّ مِنْ أَمْرَ صَدَقَةٍ  
 أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ اصْلَاجٍ بَيْنَ النَّاسِ وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ  
 أَبْيَاعَاءَ مَرْضَاتُ اللَّهِ فَسُوقَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا <sup>(٤٣)</sup> وَمَنْ  
 يُشَاقِّ الْرَّسُولَ مِنْ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُ الْهُدَى وَيُتَّسِعَ عَيْنُ  
 سَيِّلِ الْمُؤْمِنِينَ نُولَّهُ مَا تَوَلَّ وَنَصِّلُهُ جَهَنَّمَ وَسَاءَتْ  
 مَصِيرًا <sup>(٤٤)</sup> إِنَّ اللَّهَ لَا يَعْفُرُ أَنْ يُشَرِّكَ بِهِ وَيَعْفُرُ مَادُونَ  
 ذَلِكَ لَمْ يَشَأْ وَمَنْ يُشَرِّكَ بِاللَّهِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا  
 بَعِيدًا <sup>(٤٥)</sup> إِنْ يَدْعُونَ مَنْ دُونَهُ إِلَّا إِنْتَ وَإِنْ يَدْعُونَ  
 إِلَّا شَيْئًا لَمْ يَرِدَا <sup>(٤٦)</sup> لَعْنَهُ اللَّهُ وَقَالَ لَآتَيْخَذَ مِنْ  
 عِبَادَكَ تَصْبِيَّاً مَفْرُوضًا <sup>(٤٧)</sup> وَلَا أَضْلَلَنَّهُمْ وَلَا مُنْهِنَّهُمْ  
 وَلَا نَرْهَمُهُمْ فَلَيَبْتَكِنْ إِذَا نَأْتَنَّ أَنْعَمَ وَلَا نَرْهَمُهُمْ  
 فَلَيُغَيِّرَنَّ خَلْقَ اللَّهِ وَمَنْ يَتَّخِذُ الشَّيْطَنَ لَيْلَى إِنْ  
 دُونَ اللَّهِ فَقَدْ خَسِرَ خُسْرَانًا مُمِيتًا <sup>(٤٨)</sup> يَعْدُهُمْ  
 وَيُمْسِيَهُمْ وَمَا يَعْدُهُمُ الشَّيْطَنُ إِلَّا غُرُورًا <sup>(٤٩)</sup> أَوْ لَيَكَ  
 مَا وَنَاهُمْ جَهَنَّمُ وَلَا يَجِدُونَ عَنْهَا مَحِيصًا <sup>(٥٠)</sup>

**114.** Kuma jiro wax khayr ahi wax badan oo faqooda ah marka laga reebo mid amra sadaqo ama wanaag, ama kala maslaxaad dadka, oo qofkii fala sidaas isagoo doonaya Raalli gelinta Ilaahay, Wawaanu siin doonaa abaalgud aad u weyn.

**115.** Oo qofkii colaadiya Rasuulka kaddib inta uu u caddaaday hanuuunka oo raaca waxaan ahayn jidka mu'miniinta. Waxaan u jeedin doonaa waaas u isagu (naf ahaantiisa) u jeestay, oo ka yeeli doonaa inuu galo Naar, oo waa u xun tahay meel la ahaado iyo aaye.

**116.** Hubaal! Allaah ma dhaafo in wax uun lala wadaajijo Isaga, wuxuuse u dhaafaa waxa intaa aan ahayn qofkuu doono. Oo qofkii la wadaajija cibaadada wax uun Allaah, wuxuu xaqiq lumaa lumid fog.

**117.** Ma la barbar caabudaan Isaga waxaan ahayn sanamyo magacyo dheddigood leh, oo ma caabudaan waxaan ahayn Shaydaan fallaago ah.

**118.** Oo Allaah uu Nacladay. Oo wuxuu yiri: Wawaan ku yeelan doonaa addoomahaaga qayb go'an.

**119.** oo hubaal waan habaabin doonaa, oo gelin doonaa hidddiillooyin been ah; oo amri doonaa (xumaanta) sidaas darteed waxay jeexjeexi doonaan dhegaha xoolaha<sup>(43)</sup>, oo hubaal waan amri doonaa sidaas darteed waxay doorin doonaan abuurka Ilaahay<sup>(44)</sup>. Oo qofkii ka dhigta shaydaan gacal halkii Allaah, wuxuu xaqiq khasaari doonaa khasaare caddaan ah.

**120.** Wuxuu u ballan qaadaa oo gelyiaa hidddiillooyin been ah, oo ma u ballan qaado shaydaan waxaan inuu khiyaano ahayn.

**121.** Kuwan hoygoodu wuxuu ahaan doonaa Naar, oo kama heli doonaan xaggeeda meel ay ka hirgalaa.

**43.** Carabtii jaahiliga ahayd waxay qabeen in xoolaha loo hibeynaya asnaamta, la gooyo dhegahooda, xoolahaana ma bannaana in la fuulo ama la isticmaalo oo waa in la iska daayo oo la xarig furo.

**44.** Waxaa suura gal ah in loola jeedo beddelidda abuurka ilaahay calaamadaha jirka lagu qoro, washamka, in xoolaha la dhuufaano ama waxaa la yiri wasxaa loola jeedaa beddelidda diinta ilaahay.

**122.** Oo (ma xagga) kuwa rumeysan oo sama fala, waxaan ka yeeli doonaa inay galaan Beero ay hoostoodu webiyo qul-qulaan iyagoo ku dhex waari weligood. Waa Ballan Ilaahay oo Xaq ah, Oo yaa ka run badan Allaah Hadalkiisa.

**123.** (Tani jannada) ma ahaan doonto mid ku xiran (helitaankeeda) hididdiillooyinkiinna<sup>(45)</sup> aad iska rajeyaan iyo hididdiillooyinka ehl Kitaabka midna, qofkii falaa xumaan, waa laga abaal marin doonaa, oo ma u heli doono naftiisa Allaah ka sokow gacal iyo gargaare midna.

**124.** Oo qofkii fala camallo wanaagsan lab ahaayaa ama dheddig, isagoo (ama iyadoo) mu'min ah, waxay kuwan geli doonaan Jannada, oo laguma gardarroon doono xuub laf timireed wax le'eg.

**125.** Oo yaa ka diin fiican mid isu wada dhiiba Allaah isagoo sama fale ah. Oo raaca diinta Ibraahiim, toosnihii. Oo Allaah wuxuu ka dhigtay Ibraahiim gacal u gaar ah.

**126.** Oo Allaah baa iska leh waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada. Oo Allaah waa koobaa wax walba.

**127.** Oo waxay ku weydiyaan xukun ku saabsan haweenka, dheh: Allaah baa idiinka sheegaya Xukunkaa arrinkooda<sup>(46)</sup>, iyo arrinka waxa la idiinku akhriyo Kitaabka oo ku saabsan gabdhaha agoomaha ah oo aydaan siin saamiyadii loo gooyey idinkoo doonaya inaad guursataan<sup>(47)</sup>, iyo arrinka kuwa tabarta yar ee ka mid ah carruurta, iyo inaad ku dhaqdaan caddaalad agoomaha. Oo Wax kastoo aad fashaan oo khayr ah, hubaal Allaah wuu Ogsoon yahay.

<sup>45.</sup> "Kum" halkn waxaa la yiri waxaa loola jeedaa muslimiinta sidoo kale waxaa la yiri waxaa loola jeedaa gaalada mushrikiinta ah, gunta ayddana waxaa weeye in abaalgudka aakhiro aan lagu helin ididdilo iyo iska rajeyn, laakiinse lagu helo iimaanka iyo sama falka.

<sup>46.</sup> Eeg Suuradda An: Nisaa Aayadda :3.

<sup>47.</sup> Caadada carabta waagii jaahiliyyadda waxay ahayd in waliga uu xaq ku leeyahay inuu guursado gabdhaha agoomaha ee mas'uulka uu ka yahay, iyo inuu xaq ku leeyahay maalkooda. Haddii ay qurxoon tahay wuu guursanayey, oo wax ka qaato maalkeeda , oo haddii ay fool xun tahay waa uu diidaa inay guursato nin kale si uu u hanto maalkeeda. Aayaddani waxay reebtay arrintaas.

وَإِنْ أَمْرَأً حَافَتْ مِنْ بَعْلَهَا نُشُورًا أَوْ إِعْرَاضًا فَلَا جُنَاحَ  
عَلَيْهِمَا أَنْ يُصْلِحَا بَيْنَهُمَا صُلْحًا وَالصُّلْحُ خَيْرٌ  
وَالْخَضْرَى لِأَنَّ النَّفْسَ الشَّرِّ وَإِنْ تُخْسِنُوا وَرَتَّسُوا فَإِنَّ اللَّهَ  
كَانَ بِمَا يَعْمَلُونَ حَيْرًا وَلَنْ تَسْطِعُوا أَنْ تَعْدُوا  
بَيْنَ الْإِسْلَامَ وَلَا حِرْصًا فَلَا تَشْيُلُوا كُلَّ أَمْلَى فَتَدْرُوْهُمَا  
كَالْمُعَلَّقَةِ وَإِنْ تُصْلِحُوا وَرَتَّسُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ  
غَفُورًا رَّحِيمًا وَلَنْ يَتَقْرَأْ قَاتِعُنَّ اللَّهَ كُلَّ مِنْ سَعَيْتَهُ  
وَكَانَ اللَّهُ وَسِعًا حَكِيمًا وَلَلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ  
وَمَا فِي الْأَرْضِ وَلَقَدْ وَصَيَّنَا الَّذِينَ أَوْتُوا الْكِتَابَ مِنْ  
قَبْلِكُمْ وَإِنَّا كُمْ أَنْ أَتْقُولُهُمْ وَإِنَّمَا تَكْفُرُوا فِي أَنَّ اللَّهَ  
مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَكَانَ اللَّهُ عَنِّيْنَا حَمِيدًا  
وَلَلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَكَفَ بِاللَّهِ وَيَكِيلًا  
إِنْ يَشَاءْ يُذْهِبُكُمْ إِنَّهَا النَّاسُ وَيَأْتُ بِعَاقِبَتِنَّ وَكَانَ  
اللَّهُ عَلَى ذَلِكَ قَدِيرًا مَنْ كَانَ يُرِيدُ ثَوَابَ الدِّينِ فَعَنْدَ اللَّهِ  
ثَوَابُ الدِّينِ وَالآخِرَةِ وَكَانَ اللَّهُ سَمِيعًا بَصِيرًا

١٩

**128.** Oo hadday haweeney ka cabsato dhaqan xumi<sup>(48)</sup> ama jeedsasho Xagga ninkeeda ah, ma jiro eed korkooda ah, hadday ka heshiiyaan dhexdooda heshiis, oo heshiiska baa khayr badan, oo nafaha Aadmiga waxaa lagu laray masuugnimo. Oo haddaad samo fashaan oo iska ilaalsaan (xumaha), haddaba hubaal, Allaah waa u Xog oogaal waxa aad fashaan.

**129.** Oo ma kari doontaan inaad sameysaan caddaalad dhan xaasaska dhexdooda si kasta oo aad u dadaashaan ee ha ka iilannina (middood) ilasho dhan, oo aad markaas ka tagtaan sidii yoo ay tahay mid lalmata. Oo haddaad heshiisaan, oo iska ilaalsaan (xumaha), haddaba hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**130.** Haddiise ay kala tagaan, wuxuu Allaah ku kaafin doonaa mid walba wax ka mid ah Deeqliisa. Oo Allaah waa Waasac (Fadligisu) ballaaran yahay, Xakiim ah.

**131.** Oo Allaah baa iska leh waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada. Oo xaqiq waxaan xil saarnay kuwii la siiyey Kitaabka ee idinka horreeyey (oo xil idin saaran ah) idinkana (sidoo kale) inaad dhowrtaan (xilalka uu idin saaray) Allaah, oo haddaad rumeysan diiddaan, haddaba hubaal waxa jira samooyinka iyo waxa jira arladaba waxaa iska leh Allaah, oo Allaah waa Hodan deeqtoon, la Ammaano.

**132.** Oo waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada waxaa iska leh Allaah. Oo ku filan Allaah inuu ahaado Ilaaliye.

**133.** Hadduu doono, Waa uu idin tagsiin karaa, dadow, oo keeni karaa qaar kale. Oo Allaah waa mid Kara inuu sidaa yeelo.

**134.** Qofkii raba abaalka adduunyadan, haddaba Allaah baa haya abaalka adduunyadan iyo Aakhiradaba. Oo Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Arka.

**48.** Eeg macnaha nushuush ee xagga afada sharaxa suuradda An-Nisaa Aayadda 34. Nushuushka ninka waa inuu si qallafsan ula dhaqmo xaaska oo ku adadkaado, iyo inuu diido inuu u tago oo u galmoodo, oo uusan siin masruuf iyo marasho.

**135.** Mu'miniintow! Ahaada kuwo dhowra caddaaladda oo u marag fura Ilahay darti uun, nafahiinnaba lidkeed ha ahaatee ama waalidkiin ama qaraabada, hadduu yahay hodan ama faqirba, Allaah baa ka mudnaansho badan oo dantooda yaqaan. Ee ha raacina waxa liita ay naftu rabto si aydaan uga ilan (xaqa), oo haddaad iilataan ama jeesataan<sup>(49)</sup>, haddaba hubaal, Allaah waa u Xog ogaal waxa aad fashaan.

**136.** Mu'miniintow! Rumeeyaa Allaah iyo Rasuulkiisa iyo Kitaabka uu u soo waxyooday Rasuulkiisa, iyo Kitaabka uu hore u soo waxooday, oo qofkii rumeyn diida Allaah iyo Ma'laa'igtiisa iyo Kutubtiisa iyo Rusushiisa, iyo Maalinta dambeysa, wuxuu xaqiq lumaa lumid aad u fog.

**137.** Hubaal, (ma xagga) kuwa rumeeya, haddana iimaanka beela, haddana rumeeya (mar kale), oo haddana (mar kale) iimaanka beela, markaas sii kororsada iimaan darro; Allaah ma cafin doono, oo kuma hanuunin doona Jidka (Toosan).

**138.** Ugu bishaaree munaafiqinta inay mudan doonaan cadaab xanuun badan.

**139.** Kuwa ka dhigta gaalada gacallo sokeeye ah<sup>(50)</sup> halkii mu'miniinta, ma waxay ka doonayaan ciso (iyo sharaf) xaggooda? Haddaba hubaal, Allaah baa iska leh ciso oo dhan.

**140.** Oo xaqiq wuxuu horay idiinkugu soo waxyooday Kitaabka in markaad maqashaan Aayadaha Ilahay oo la beeninayo ama lagu jeesjesayo, ha la fariisannina iyaga, ilaa ay ka galaan hadal kale aan kaa aheyn, haddii kale waxaad noqoneysaan iyagoo kale; hubaal Allaah wuxuu ku soo kulmin doonaa munaafiqinta iyo gaalada oo dhan Naar gudaheed.

\* يَأَيُّهَا الَّذِينَ أَمْنُوا كُلُّوْفَوْمَينَ بِالْقُسْطِ شَهَدَ عَلَيْهِ وَلَوْ  
عَلَى أَنفُسِكُمْ أَوْ أَلْوَلِيْنَ وَالْأَقْرَبِينَ إِنْ يَكُنْ غَنِيًّا وَفَيْدِرًا  
فَاللَّهُ أَوْلَى بِهِمَا فَلَا تَتَبَيَّنُ الْهُوَى أَنْ تَعْدُ لَوْلَاتَنْ تَلَوْا  
أَوْ عُصُوضُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ حَسِيرًا <sup>١٤٣</sup> يَأَيُّهَا  
الَّذِينَ أَمْنُوا إِذَا مَنَّا اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَالْكِتَابُ الَّذِي نَزَّلَ  
عَلَى رَسُولِهِ وَالْكِتَابِ الَّذِي أَنْزَلَ مِنْ قَبْلِهِ وَمَنْ يَكُفِرُ  
بِاللَّهِ وَمَلَكَيْكِهِ وَكُنْيَهِ وَرَسُولِهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَقَدْ ضَلَّ  
ضَلَالًا بَعِيدًا <sup>١٤٤</sup> إِنَّ الَّذِينَ أَمْنُوا ثُمَّ كَفَرُوا ثُمَّ أَمْنُوا ثُمَّ  
كَفَرُوا ثُمَّ زَادُوا كُفْرَهُمْ كَمَنْ اللَّهُ يُعْلِمُ لِغَيْرِهِمْ وَلَا يَهِيْئُهُمْ  
سِيَّلًا <sup>١٤٥</sup> بَشِّرِ الْمُنْتَقِيْنَ بِأَنَّهُمْ عَذَابَ الْيَمَنِ <sup>١٤٦</sup> الَّذِينَ  
يَعْجِذُونَ الْكَافِرِينَ أَوْ لِيَاءَ مِنْ دُونِ الْمُؤْمِنِينَ أَيْنَ يَعْنُونَ  
عَنْهُمْ الْعَرَةَ فَإِنَّ الْعَرَةَ لِلَّهِ جَمِيعًا <sup>١٤٧</sup> وَقَدْ نَزَّلَ عَلَيْكُمْ  
الْكِتَابِ أَنِّيْذَا سَعَيْتُمْ إِيمَانَ اللَّهِ يُكْثِرُ بِهَا وَيُسْهِلُ زَانِهَا فَلَا  
تَقْعُدُوا مَعَ هُرْحَقَتِيْ مَوْضُوْفِيْ حَدِيثِ عَيْنِهِ إِنْ كُوْذَأَتْ لَهُمْ  
إِنَّ اللَّهَ جَامِعُ الْمُنْتَقِيْنَ وَالْكَافِرِينَ فِي جَهَنَّمَ جَمِيعًا <sup>١٤٨</sup>

١٠٠

<sup>49.</sup> Waxaa Nabiga s.c.w.la weydiiyey dunuuuba waaweyn ee lagu halaagsamo. Wuxuu yiru: waa Shirkiga, ku caasinta waalidka, dilka xaq darrada ah iyo markhaati beenaadka." W.W. Al-Bukhaari

<sup>50.</sup> Sida faafinta asraarta mu'miniinta iyo gaarsinta arrimhoodaa gaalada ama inay marka ay ka bar bar jihaadayaan mu'miniinta inay hagradaan, iwm

الَّذِينَ يَرْتَصُونَ بِكُمْ فَإِنْ كَانَ لَكُمْ فَتْحٌ مِّنْ اللَّهِ قَاتُوا  
الَّأُولَئِنَّكُنَّ مَعَكُمْ وَإِنْ كَانَ لِلْكَافِرِ يَنْصِبُّ قَاتُوا  
الَّمَنْسَحُودُ عَلَيْكُمْ وَنَمْنَعُكُمْ مِّنَ الْمُؤْمِنِينَ فَإِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ  
بِيَنَكُمْ كُوْمَ الْقِيمَةِ وَلَنَ يَجْعَلَ اللَّهُ لِلْكَافِرِ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ  
سَيِّلًا إِنَّ الْمُنْتَقِيقِينَ يَحْكُمُونَ عَوْنَتِ اللَّهِ وَهُوَ خَدُوْعُهُمْ وَإِذَا  
فَأَمْوَالُ إِلَى الصَّلَاةِ قَامُوا كُسَالَى بِرِءَاهُ وَنَّ الْأَنْسَ وَلَذِكْرُونَ  
اللَّهَ إِلَّا قَلِيلًا مُذَدَّبِينَ بَيْنَ ذَلِكَ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ إِلَهُ  
هُوَ لَهُ وَمَنْ يُضْلِلِ اللَّهُ فَإِنَّ يَحْدَهُ مُسِيِّلًا يَتَابُهُ إِلَيْهِ  
إِمَّوْا لَا تَخْدُنَ الْكَافِرِينَ أَوْلَاهُمْ مِّنْ دُونِ الْمُؤْمِنِينَ  
أَتَرْبِدُونَ أَنْ تَجْعَلُوا اللَّهَ عَلَيْكُمْ سُلْطَانًا مُّبِينًا إِنَّ  
الْمُنْهَقِيقِينَ فِي الدَّرَكِ الْأَسْفَلِ مِنَ النَّارِ وَلَنْ يَجْدِنُهُمْ نَصِيرًا  
إِلَّا الَّذِي رَبَّ تَابُوا وَأَضْلَلُوا عَتَصَمُوا بِاللَّهِ وَلَا خَاصُوا  
دِيَنَهُمْ لِلَّهِ فَأَوْلَاهُمْ مَعَ الْمُؤْمِنِينَ وَسَوْقَ يُوتَ اللَّهُ  
الْمُؤْمِنِينَ أَجْرًا عَظِيمًا مَا يَفْعَلُ اللَّهُ بِعَدَّ إِيمَّمًا  
إِنْ شَكَرُوكُمْ أَمْنَشَ وَكَانَ اللَّهُ شَاكِرًا عَلَيْمًا

١٤١

**141.** Kuwa idin la suga (dhibaato idinku dhacda) idinka; oo markaad guul ka heshaan xagga Ilaahay, waxay yiraahdaan: Oo miyaanaan idin la jirin? Oo hadday gaaladu lib yeelato, waxay yiraahdaan, Ma waanaan idin adkeyn oo aan idinka celin mu'miniinta? Marka Allaah baa idin kala xukumi doona dhexdiinna Maalinta Qiyaamaha. Oo marnaba Allaah kama siin doona gaalada jid mu'miniinta.

**142.** Hubaal, Munaafiqiintu<sup>(51)</sup> waxay (u heystaan inay) dagaan Allaah, Isaga baase daga. Oo markay u kacaan salaadda, waxay kacaan iyagoo wahsi ku jiro, waxay istusaan oo keliya dadka, oo ma xusaan Allaah wax yar ma'hee.

**143.** Waxay kala dhex wareegaan kuwaas (iyu kuwan), oo kama tirsana kuwan, iyo kuwaa midna, oo qofkii uu Allaah lumiyo, uma heli doontid jid isaga.

**144.** Mu'miniintow! Ha ka yeelannina gaalada xulufo halkii mu'miniinta. Ma waxaad dooneysaan inaad iskaga yeeshaan Allaah xujo cad?

**145.** Hubaal, Munaafiqiintu<sup>(52)</sup> waxay ahaan doonaan dabaqa u hooseeya ee Naarta; oo uma heli doontid gargaare.

**146.** Kuwa toobad keena maahee oo wanaagsanaada, oo cuskada Allaah, oo u keli yeela cibaadadooda Allaah, Kuwan waa la jirka mu'miniinta. Oo wuxuu Allaah siin doonaa mu'miniinta Ajar aad u weyni.

**147.** Muxuu Allaah ku falayaa caddibaadiinna haddaad tiihiin kuwa mahad naqa oo rumeysan? Oo Allaah waa tixgeliye camalkii darti loo qabtaa, abaal gud fiican ka bixiya, Wax kasta Ogssoon.

<sup>51.</sup> Allaah wuxuu u daayey sheegashadooda inay yihiin mu'miniin, sidaa darteed baa loola dhaqmay dhaqanka ehlhu iimaanka adduunyada, wuxusne Allaah u diyaariyey naar kхиyaanada iyo mukurgooda awgi. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Waxaad arki doontaa kuwa ugu xun dadka dhexdooda inay yihiin labo wejji layasha ee ula taga kuwaasi weji, kuwaas kalena weji kale." W.W. Al-Bukhaari

<sup>52.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii kastoo leh tilmaamahan afarta ah waa munaafaq dhan: Markii la aamino, kхиyaanaa ku soo baxda, markii uu warramo wuxuu sheegaa been, markuu ballan gala, wuu ka baxa ballanka, markii ay ciid doodaanna wuu caytama."

## J U S K A (6)

## Suuradda 4 An-Nisaa

**148.** Allaah ma jecla ku dhawaaqa hadalka kiisa xun, mid maahee uu yiraahdo qof lagu gardarrooday. Oo Allaah waa wax kasta Maqle,wax kasta Ogsoon.

**149.** Haddaad u fashaan khayr si caddaan ah ama qarsoodi, ama aad iska cafidaan xume,... haddaba hubaal, Allaah waa cafis Badane, awood Badan.

**150.** Hubaal, kuwa rumeyn diida Allaah iyo Rusushiisa (iyo kuwa) raba inay kala geeyaan Allaah iyo Rusushiisa oo yiraahda, Waxaan rumaysannahay qaarkood, oo rumeysan diidnaa qaar kale, oo raba inay qaadaan jid u dhexeeya (arrinkan iyo) kaasi.

**151.** Kuwan weeye kuwa run ahaan ah gaalo. Oo Wuxaan u diyaarinnay gaalada cadaab dulleysa.

**152.** Kuwase rumeysan Allaah iyo Rusushiisa oo aan ka dhex saarin midkoodna ka mid ah, kuwaas buu Allaah siin doonaa ajarradooda, oo Allaah waa Dambe Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**153.** Ehlul Kitaabku waxay ku weydiistaan inaad kaga soo dejiso Kitaab xagga samada. Waxayba horay kaga dalbeen Muuse (arrin) kaa mid ka weyn, oo waxay yiraahdeen: Noo tus Allaah si caddaan ah, markaas baa waxaa qabtay qarax daran gardarradoodii darteed. haddana waxay samaysteen dibi (ilaah ahaan) kaddib markay xujooyin cad u yimaadeen Waanu se ka cafinnay arrinkani. Oo waxaan siinnay Muuse Xujo Cad.

**154.** Oo Wuxaan kor u soo qaadnay Buurta (Siinaay) oo dul keennay (goortii aan ka qaadeynay) axdigoodii. oo Wuxaan ku niri: Gala Albaabka idinkoo sujuudsan. Oo Wuxaan ku niri: Ha ku xadgudbinnana arrinka Sabtida. Oo Wuxaan la sameynay axdi adag.

\* لَا يُحِبُّ اللَّهُ أَجْهَرَ بِالسُّوءِ مِنَ الْقَوْلِ إِلَّا مِنْ ظُلْمٍ وَكَانَ  
اللَّهُ سَيِّمًا عَلَيْهِما [١٤] إِنْ تُبْدِلُ خَيْرًا وَتُخْفِهُ أَوْ تَعْفُوْعَنَ  
سُوءٍ فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ عَفْوًا قَدِيرًا [١٥] إِنَّ الَّذِينَ يَكْفُرُونَ  
بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَيُرِيدُونَ أَنْ يُفَرِّقُوا بَيْنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ وَيَقُولُونَ  
نُؤْمِنُ بِعَيْنِ وَنَكْفُرُ بِعَيْنِ وَيُرِيدُونَ أَنْ يَتَّخِذُوا  
بَيْنَ ذَلِكَ سَيِّلًا [١٦] أَوْ لَيْكَ هُمُ الْكُفَّارُ حَقًا وَأَعْتَدْنَا  
لِلْكُفَّارِ فِيْنَ عَذَابًا مُهِينًا [١٧] وَالَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ  
وَلَمْ يُفَرِّقُوا بَيْنَ أَحَدٍ مِّنْهُمْ أَوْ لَيْكَ سَوْفَ يُوتِّهِمْ  
أَجُورُهُمْ وَكَانَ اللَّهُ عَفُورًا رَّحِيمًا [١٨] يَسْعَلُكَ أَهْلُ الْكِتَابِ  
أَنْ تُتَزَّلَّ عَلَيْهِمْ كَيْبَابَنِ السَّمَاءِ فَقَدْ سَأَلَ الْمُوسَى أَكَبَرَ  
مِنْ ذَلِكَ فَقَالُوا رَّبُّنَا اللَّهُ جَهَرَةً فَأَخْذَهُمْ أَصْعِقَةٌ طَلَّهُمْ  
شَمْ أَخْذَهُ وَالْأَعْجَلَ مِنْ بَعْدِ مَا جَاءَهُمْ أَبْيَتَ  
عَنْ ذَلِكَ وَأَءَاتَيْنَا مُوسَى سُلْطَانًا مُّبِينًا [١٩] وَرَفَقَنَا فَوْهَمُ  
الْأَطْوَرَ بِمِثْقَلِهِ وَقُلْنَا أَهْمَأْ دَخْلُوا بَابًا سُجَّدًا وَقُلْنَا  
لَهُمْ لَا تَعْدُوا فِي السَّبَبَتِ وَلَخَذْنَا مِنْهُمْ مِّيقَاتًا غَلِظًا

١٠٢

فِيمَا نَقْضُهُمْ مِّيقَاتُهُمْ وَكُفَّرُهُمْ بِمَا يَأْتِيَتِ اللَّهُ وَقَاتِلُهُمُ الْأَنْيَةُ  
يُغَيِّرُ حَقًّا وَّقُولُهُمْ قُلُونَاعْفُ لِلْطَّبَعِ اللَّهُ عَلَيْهِمْ إِيْكُفُرُهُمْ  
فَلَا يُؤْمِنُونَ إِلَّا قَلِيلًا <sup>(١)</sup> وَكُفَّرُهُمْ وَقُولُهُمْ عَلَى مَرِيمَ بَهْتَنَا  
عَظِيمًا <sup>(٢)</sup> وَقُولُهُمْ إِنَّا قَلَّا مُسِيحًا عِيسَى ابْنُ مُرَيْمَ رَسُولًا  
اللَّهُ وَمَا قَاتَلُوهُ وَمَا صَابُوهُ وَلَكِنْ شُتِّهُ لَهُمْ وَإِنَّ الَّذِينَ  
أَخْلَقُوا فِيهِ لِي شَرِيكَةَ مَا لَهُمْ بِهِ مِنْ عِلْمٍ إِلَّا تَبَاعُ الظُّنُونُ  
وَمَا قَاتَلُوهُ بِئْتَنَا <sup>(٣)</sup> بَلْ رَفَعَهُ اللَّهُ إِلَيْهِ وَكَانَ اللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا  
وَإِنْ مَنْ أَهْلَ الْكِتَابُ إِلَّا يُؤْمِنُ بِهِ قَبْلَ مُؤْمِنَةٍ وَّيَوْمَ <sup>(٤)</sup>  
الْقِسْمَةِ يَكُونُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا <sup>(٥)</sup> فَيُظْلَمُ مِنَ الَّذِينَ هَادُوا  
حَرَمَنَاعِيَهُمْ طَبَبَتْ أَحَدَتْ لَهُمْ وَصَدَهُمْ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ  
كَثِيرًا <sup>(٦)</sup> وَأَخْذَهُمْ أَرْبَوًا وَذَهَبُوا عَنْهُ وَأَكَلُهُمْ أَمْوَالَ  
النَّاسِ بِالْبَطْلَلِ وَأَعْتَدَنَا لِلْكُفَّارِ مِنْهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا <sup>(٧)</sup> لَكِنْ  
أَلْرِسُحُونَ فِي الْعُلُومِ مِنْهُمْ وَالْمُؤْمِنُونَ يُؤْمِنُونَ بِمَا أَنْزَلَ إِلَيْكُمْ  
وَمَا أَنْزَلَ مِنْ قَبْلِكُمْ وَالْمُقْرِيْمِينَ الصَّلَاةَ وَالْمُؤْمِنُونَ الرَّكْوَةَ <sup>(٨)</sup>  
وَالْمُؤْمِنُونَ يَأْتُوْنَ إِلَيْكُمْ وَالْأُخْرُونَ لِيَقْسِمُوا هُنَّ أَجْرًا عَظِيمًا <sup>(٩)</sup>

١٠٣

ah Yuhuudda awgii, ayaan uga xaraameennay waxyaalaha wanaagsan ee horay ugu ahaa xalaasha, iyo sababta ka weecintooda (dad) badan Jidka Ilaahay.

**161.** Iyo qaadashadooda Ribada iyagoo xaqiiq laga reebay inay qaataan, iyo ku cunistooda maalka dadka been. Oo waxaan u diyaarinnay kuwooda gaalada ah ee ka mid ah cadaab aad u xanuu badan.

**162.** Laakiinse kuwooda ku xidideystey cilmiga oo ka mid ah iyo mu'miniintuba, waxay rumeysan yihiin waxa laguu soo waxyooday iyo wixii la soo waxyooday hortaa, iyo kuwa u ooga salaadda si wanaagsan ee bixiya Sakada ee rumeysan Allaah iyo Maalinta Dambaysa, kuwan waa kuwa aan siin doonnaa Abaalqud aad u Weyn.

53. Waxay u yiraahdeen Ciise Rasuulkii Ilaahay jeesjees ahaan, waayo ma rumeysneen Risaaladii Ciise c.s.

54. Aayaddan waxay burinesaa sheegashada Yuhuudda inay dileen Ciise c.s.:

Allaah wuxuu leeyahay ma ay diilin iyagoo huba inuu shaksi ahaan isaga yahay, taasi macnaheedu waxaa weeye waxay dileen qof kale iyagoo moodayat Ciise c.s.

55. In Yuhuudi iyo Kirishtaan kasta ka hor dhimashadiisa isaga (Ciise) waxay aamini doonaa inuu Ciise yahay Rasuul Ilaahay, iyo inuusan ahayn wiiliik Ilaahay. Mufasiriinta qaarkood waxay yiraahdeen: Mid walba oo ka mid ah Yuhuudda iyo Kirishtaanka wuxuu aamini doonaa sidaa ka hor dhimashadiisa (waqtiga geeridiisa).

**155.** Sidaas awgeed, axdigooda ay ka baxeen darteed, iyo rumeyn la'aantooda Aayadaha Ilaahay iyo ku diliddooda Anbiyada gar darro, iyo qawlkooda ah: Quluubtayada way daboolan yihiin. mayee, Allaah baa daboolay gaalnimadooda darteed marka ma rumeyn doonaan in yar ma'ahee.

**156.** Iyo rumeyn la'aantooda darteed iyo oraahdooda ay ka sheegaan Maryam ee been abuur aad u weyn ah.

**157.** Iyo oraahdooda: hubaal waxaan innagu dilnay Masiixa Ciisaa ibnu Maryam, Rasuulkii Ilaahay <sup>(53)</sup>, mase ay dilin <sup>(54)</sup> mana ay daldalin, laakiinse waa loo arag ekeysiyye. Oo hubaal kuwa isku khilaafa arrinkiisa waxaa xaqiiq kaga jira shaki arrinkaa. Uma heystaan wax cilmi (la hubo oo run ah), waxa ay raacaan wax kale maahee was male awaal. Oo ma ay dilin oo la hubo.

**158.** Mayee! Allaah baa kor u qaaday Xaggiisa, oo Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

**159.** Oo ma jiro mid ka mid ah ehlul-Kitaabka aan hubaal rumeyn doonin xaqiiq tani, ka hor inta aanu dhiman <sup>(55)</sup>. Oo Maalinta Qiyaamaha wuxuu isagu ku marag furi doonaa iyaga lidkood.

**160.** Gefska badan ay geysteen kuwaa

**163.** Hubaal Waxaan kuugu waxyoonnay sidii aan ugu waxyoonnayba Nuux iyo Nabiyadii ka dambeeyay; oo Waxaanu (sido kale) u waxyoonnay Ibraahim iyo Ismaaciil iyo Isxaaq iyo Yacquub iyo Al-Asbaad (anbiyadii reer banii Israa'iil) iyo Ciise iyo Ayyuub iyo Yuunus iyo Haaruun iyo Sulaymaan, oo Daawuud Waxaanu siinnay Zabuur.

**164.** Oo (waxaan soo dirnay) Rusul aan kaaga warrannay ka hor, iyo Rusul aanaan kaaga warraminba, -oo Muuse Allaah wuxuu ula hadlay si toos ah hadlid<sup>(56)</sup>.

**165.** (Waxaan soo drinay) Rusul ah war san sidaaal iyo digayaal si aanay dadku ugu yeelan Allaah wax cudur daar ah (imaanshaha) Rususha ka dambow. Oo Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

**166.** Laakiinse Allaah wuxuu markhaati ka yahay waxa uu kuu soo waxyooday wuxuu ku soo waxyooday Cilmigiisa, malaa'igtuna<sup>(57)</sup> waa ka markhaati kacaan (sido kale). Oo Allaah ku Filan Markhaati uu ahaado.

**167.** Hubaal, ma xagga kuwa rumeysan diida oo ka hor istaaga (dadka) Jidka Ilahay, waxay xaqiq habaabeen habow aad u fog.

**168.** Hubaal, (ma xagga) kuwa rumeysan diida ee u dhaqma si gardarro ah, ma aha Allaah Mid u dambi dhaafi doona oo ma aha Mid ku hanuunin doonaa jidna.

**169.** Jidka Naarta mooyee, iyagoo ku dhix waaraaya weligood, oo arrinkaa Allaah waa u fudud yahay.

**170.** Dadoow! Hubaal Rasuulku Wuxuu idiinla yimid xaq ka yimid Rabbigiin, ee rumeeya waa wax idiin roon idinka'e. Haddiise aad rumeyn diiddaan, haddaba hubaal Allaah baa iska leh waxa jira samooyinka iyo arlada. Oo Allaah waa wax kasta Ogsoone, Xakiim ah.

\* إِنَّا أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ كَمَا أَوْحَيْنَا إِلَى نُوحٍ وَالْيَسْعَى مِنْ بَعْدِهِ  
وَأَوْحَيْنَا إِلَى إِبْرَاهِيمَ وَسَمَاعِيلَ وَسَاحِقَ وَيَعْقُوبَ  
وَالْأَسْتَابَاطَ وَعِيسَى وَإِبْرَهِيمَ وَلُوكَسَ وَهَدْرُونَ وَسُلَيْمَانَ  
وَإِتَّيْنَادَ وَدَرْزُورَا<sup>(58)</sup> وَرَسُلًا كَذَافَصَ صَسَّهُمْ عَلَيْكَ  
مِنْ قَبْلِ وَرَسُلًا لَمْ يَقُصُّهُمْ عَلَيْكَ وَكَلَمُ اللَّهِ مُؤْمِنٌ  
تَكَلِّيمًا<sup>(59)</sup> رُسُلًا مُبَشِّرِينَ وَمُنذِّرِينَ لِتَلَاهُ كُوَنَ  
لِلنَّاسِ عَلَى اللَّهِ حُجَّةً بَعْدَ الرُّسُلِ وَكَانَ اللَّهُ عَزِيزًا حَكِيمًا  
لَكُنَ اللَّهُ يَشَهِّدُ بِمَا أَنْزَلَ إِلَيْكَ أَنْزَلَهُ بِعِلْمِهِ وَالْمَلَائِكَةُ  
يَشَهِّدُونَ وَكَفَى بِاللَّهِ شَهِيدًا<sup>(60)</sup> إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا  
وَصَدَّ وَأَعْنَ سَبِيلَ اللَّهِ قَدْ صَلَوْا ضَلَالًا بِعِدَّا<sup>(61)</sup> إِنَّ الَّذِينَ  
كَفَرُوا وَظَلَمُوا لَوْلَيْكُنَ اللَّهُ لَيَعْقِرَ لَهُمْ وَلَا يَهِيَّئُهُمْ  
طَرِيقًا<sup>(62)</sup> إِلَّا طَرِيقٌ جَهَنَّمُ خَالِدُونَ فِيهَا أَبَدٌ وَكَانَ  
ذَلِكَ عَلَى اللَّهِ بِسِيرًا<sup>(63)</sup> يَأْتِيَهَا النَّاسُ قَدْ جَاءُهُ الرَّسُولُ بِالْحَقِّ  
مِنْ رَبِّهِمْ فَنَامُوا خَيْرًا لَكُمْ وَإِنْ تَكُفُّرُو فَإِنَّ اللَّهَ  
مَالِكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَكَانَ اللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا

١٠٤

<sup>56.</sup> Wuxuu Allaah la hadlay Muuse toos dhexyeeyaa la'an, waxayna ka mid yihiin tilmaamahiisa, sidaa awgeed baa loo yiraahdaa katiimul Laah, halka Rususha kale waxyiga la soo marsiyye Jibril, wuxuuna Allaah la hadlay Nabi Muxammad s.c.w. toos habeenkii Micraajka.

<sup>57.</sup> Malaa'igtga Carshiga hareerahiisa ah sida Jabrili, Miikaa'il iyo Israafil.

بِتَأْهِلِ الْكِتَابِ لَا تَقُولُوا فِي دِينِكُمْ وَلَا تَقُولُوا عَلَى  
 اللَّهِ إِلَّا الْحَقُّ إِنَّمَا الْمُسِيحُ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ رَسُولُ اللَّهِ  
 وَكَلِمَتُهُ الَّتِي هَمَّا إِلَيْهِ مِنْ يَوْمٍ وَرُوحٌ مِنْهُ فَعَامَنُوا بِاللَّهِ  
 وَرَسُولِهِ وَلَا تَقُولُوا ثَلَاثَةٌ أَنَّهُمْ أَخْبَرُ الْكُمَمَ إِنَّمَا اللَّهُ  
 إِلَهٌ وَحْدَهُ سُبْحَانَهُ وَإِنْ يَكُونُ لَهُ وَلِلَّهِ دُوافِقُ الْأَسْمَاتِ  
 وَمَا فِي الْأَرْضِ وَكُفَى بِاللَّهِ وَكَيْلًا <sup>وَكَيْلًا</sup> لَمْ يَسْتَكِفْ  
 الْمُسِيحُ أَنْ يَكُونَ عَبْدَ اللَّهِ وَلَا الْمَلَائِكَةُ الْمُقْرَبُونَ  
 وَمَنْ يَسْتَكِفْ عَنْ عَبْدِ اللَّهِ وَيَسْتَكِفْ قَسِيَحْشُورُ  
 إِلَيْهِ جَمِيعًا <sup>وَلَمَّا</sup> الَّذِينَ أَمْنَوْا وَعَمِلُوا أَصْلَاحًا  
 فِي وَهُمْ أَجُوَهُرُهُمْ وَبِزِيَّهُمْ مِنْ فَضْلِهِ <sup>وَلَمَّا</sup> الَّذِينَ  
 أَسْتَكِنُوا وَأَسْتَكَرُوا فَيَعْدُهُمْ عَدَابًا لِيَمَا وَلَا  
 يَجِدُونَ لَهُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلَا يَنْصِرُهُمْ <sup>يَا</sup> لَهَا النَّاسُ  
 قَدْ جَاءَهُمْ بُرْهَنٌ مِنْ رَبِّهِمْ وَأَنْزَلَنَا إِلَيْهِمْ <sup>وَرَأَمِينًا</sup>  
 قَدْمَاءَ الَّذِينَ أَمْنَوْا بِاللَّهِ وَأَعْتَصَمُوا بِهِ فَسَيُدْخَلُنَّهُمْ فِي <sup>وَ</sup>  
 رَحْمَةِ مَنْهُ وَفَضْلِهِ وَبِهِدْرِهِمْ إِلَيْهِ صَرَطًا مُسْتَقِيمًا <sup>وَ</sup>

١٠٥

Caabudidda (Ilaahay) oo is kibriya, Wuxuu cadaabi doonaa cadaab aad u xanuun badan. Oo ma u heli doonaan nafahooda Allaah sokadi gacal xafida iyo gargaare midna.

**174.** Dadow! hubaal waxaa halkaa idiinka yimid Xujo Cad xagga Rabbigiin, oo Waxaan idhiin soo dirnay Nuur cad.

**175.** Ee ma xagga kuwa rumysan Allaah oo isaga cuskada wuxuu gelin doonaa Naxariis xaggiisa ah iyo fadli, oo wuxuu ku hanuunin doonaa xaggiisa Jid Toosan.

**171.** Ehlul-Kitaabow! Ha ka bixina xuduudda diintiinna, oo ha ka sheegina (been) Allaah, ee runta sheega. Masiixa Ciisa ibnu Maryam waa oo keliya Rasuul Ilaahay soo diray iyo Kelmeddiisa uu u diray Maryam iyo ruux Isaga Xaggiisa ah uu abuur; ee rumeyya Allaah iyo Rusushiisa. oo ha orannina: Waa saddex (ilaah) Ka hara waa wax idiin roon'e. Allaah waa uun ilaa Keliya, wuu ka hufan yahay inuu yeesho wiil. Wuxuuba leeyahay waxa jira samooyinka iyo arlada. Oo ku Filan Allaah ka taliye ahaan arrimaha.

**172.** Masiixa sinnaba isagama fogeeyo inuu ahaado addoon Ilaahay, iyo sidoo kale malaa'igta la dhoweeyay. Oo qofkii iska fogeeya Caabudidda oo islaweyn, Wuxuu u soo kulmin doonaa xaggiisa dhammaantood.

**173.** Ee ma xagga kuwa rumeysan oo sama fala, wuxuu siin doonaa ajarradooda ay muteen oo dhan, oo u ziyaadin wax badan oo ka mid ah Fadligiisa. Kuwase ka fogaada

**176.** Waxay ku weydiyaan inaad wax uga sheegto xukun sharci ah. Dheh: Allaah baa idinka siinaya xukun arrinka qofaan lahayn aabbayaal iyo ubad midna. Haddii uu dhinto nin aan ilmo lahayn, oo leh walaaley, waxay leedahay bar waxa uu ka tago, isaguna wuu dhaxli doonaa haddii aanay lahayn ilmo. Haddiise ay yihiin labo (gabdhood oo walaalo ah), waxay leeyihii seddex meeloodoo labo meel waxa uu ka tago; oo hadday yihiin walaalo rag iyo dumarba leh, labku wuxuu leeyahay wax la mid ah saamiga labo dheddig. Allaah Wuxuu idiinka dhigaa caddaan (Xeerarkiisa) si aydaan u lumin. Oo Allaah wax walba wuu Ogsoon yahay.

\*\*\*

### Suuradda 5 Al-Maa'idadh

Waa 120 Aayadood: Madaniyyah  
Bismillaahir Raxmaanir Raxiim

**1.** Mu'miniintow! Oofiya ballamada<sup>(1)</sup> aad gashaan. Waxaa la idiin xalaaleeyey xoolaha nicmooleyda ah marka laga reebo waxa la idiinku yeerin doono (halkan), idinkoo aan banneysaneyn xurmadda ugaarsiga marka aad xirataan (Xajka ama Cumrada). hubaal, Allaah wuxuu xukumaa wuxuu doono.

**2.** Mu'miniintow! Ha banneysannina xurmadda calaamooyinka uu dhigay Allaah iyo bisha xurmadda leh midna, hana ( fara gelina) hadyiga, iyo xoolaha la luqan xiray (ee qurbaanka ah) iyo dadka u socda Baydka Xurmadda leh (Kacbadha), iyagoo doonaya fadliga Rabbigood iyo raalli gelintisa. Oo markaad bogtaan howlaha (Xajka ama Cumrada), markaa ugaarsada (haddaad doontaan), oo yeysan naceybka dad idinka hor istaagay Masjidka xurmadda gaarka ahi leh idinku xambaarin inaad xad gudubtaan. Oo isugu kaalmeeya samaha iyo ka dhowrsiga (xumaha), oo ha isu kaalmeynina dambiga iyo duullaanka (gardarrada ah). Oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah. hubaal, Allaah ciqaabiisu wuu Daran yahay.

**1.** Ballamaha, waxaa halkan loola jeeda ballanta laga qaado Allaah, iyo ballamaha dadka dhexdooda ah, cahdiyada la galo, heshiisada la kala saxiixdo, dhaaraaha la maro, xilalka la qaado, iwm waa inaad loo dhowro.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
يَسْتَغْفِرُونَكَ قُلْ أَلَّا يَقْتِيسُكُمْ فِي الْكَلَّةِ إِنْ أَمْرٌ إِلَّا هَلَكَ  
لَيْسَ لَهُ وَلَدٌ وَلَهُ أَخْتٌ فَإِمَّا يَصْفُ مَاتَرَكَ وَهُوَ بِهَا إِنَّ  
لَمْ يَكُنْ لَهَا وَلَدٌ فَإِنْ كَانَتَا اثْنَتَيْنِ فَإِنَّمَا الْمُتَنَاهَنُ مَمَّا رَكَ  
وَإِنْ كَانَ كَافُورًا حَوْلَ رَجَالًا وَسَاءَ فَلِلَّهِ كُمْرَلْ حَوْلَ الْأَشْيَنِ  
بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ تَصْلُوا إِلَيْهِ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلَيْهِ  
سُورَةُ الْمَائِدَةِ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
يَأَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا وَفُؤُلُوا بِالْعَقْوَدِ أَجْلَتْ لَكُمْ بِهِمْمَةُ الْأَغْنِيَةِ  
إِلَّا مَا يَنْتَلِعُ عَنْكُمْ غَيْرُ مُحْلِي أَصْبَيدَ وَأَنْتُمْ حُرُمٌ إِنَّ اللَّهَ  
يَحْكُمُ مَا بَيْدَ يٰأَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَحْلُوا شَعِيرَ اللَّهِ  
وَلَا الشَّهْرُ الْحَرَمُ وَلَا أَهْدَى وَلَا أَقْلَدَ وَلَا إِقْبَانَ الْبَيْتِ  
الْحَرَمِ يَبْتَغُونَ قَضَائِنَ رَبِّهِمْ وَرَضِّوْنَا فَإِذَا حَلَّتُمُ الْأَصْطَادُ  
وَلَا يَجِدُ مِنْكُمْ شَيْئًا قَوْمٌ أَنْ صَدُوكُمْ عَنِ الْمَسْجِدِ لَحَرَمٌ أَنْ  
تَعْتَدُوا وَتَعَاوِنُوا عَلَى الْبَرِّ وَالْتَّقْوَى وَلَا تَعَاوِنُوا عَلَى الْإِشْرِ  
وَلَا عَذَّرْ وَلَا تَقْوِيَ اللَّهُ أَنْ شَدِّيَ الْعِقَابِ

حِمَتْ عَلَيْكُمُ الْمِيَةَ وَالدَّمْ وَلَحْمُ الْخِنْزِيرِ وَمَا هُنَّ بِغَيْرِ اللَّهِ بِهِ  
وَالْمُنْتَحِقَةِ وَالْمَوْقُوذَةِ وَالْمُتَرَدِّيَةِ وَالْنَّطِيحَةِ وَمَا أَكَلَ  
الْسَّبُعُ الْأَمَادَكَيْتُ وَمَا دَبَحَ عَلَى النُّصُبِ وَنَسْتَقْسِمُوا  
بِالْأَرْزَاقِ ذَلِكُمْ فِي الْيَمِينِ بِئْسَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ دِينِكُمْ فَلَا  
نَحْسُونُهُمْ وَلَا خُسُونَ الْيَوْمَ أَكْمَلَ لَهُمْ دِيْنُكُمْ وَلَمْ يَنْتَهِ عَلَيْكُمْ  
بِعَمَّيْنِ وَرَضِيَتُ لِكُمُ الْإِسْلَامُ دِيْنَنِيْنِ أَضْطَرَ فِي مَحَمَّةٍ  
عَيْرَ مُتَجَافِلٍ لِأَنَّمِّ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَّحِيمٌ ۝ يَسْأَلُونَكَ مَاذَا  
أَحْلَ لَهُمْ قَأْلَ لَكُمُ الظَّلِيْكَتُ وَمَا عَلَمْنَمُ مِنْ الْجَوَاحِ  
مُكْلِيْنَ تَعْمَلُوهُنَّ مِمَّا عَلَمْكُمُ اللَّهُ كَفُولَمَّا آتَيْنَكُمْ  
وَأَذْكَرْنَا أَسْمَ اللَّهِ عَيْنَهُ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ سَرِيعُ الْحِسَابِ ۝  
الْيَوْمَ أَحْلَ لَكُمُ الظَّيْنَتُ وَطَعَامُ الَّذِينَ أَوْلَوَا الْكِتَبَ حُلَّ لَكُمْ  
وَطَعَامُ كُلِّ الْهَمَّ وَالْمُحَسَّنَتُ مِنْ الْمُؤْمِنَتِ وَالْمُحَسَّنَتِ  
مِنَ الَّذِينَ أَوْلَوَا الْكِتَبَ مِنْ قَبْلِكُمْ إِذَا آتَيْتُمُوهُنَّ أَجُورَهُنَّ  
مُحَسِّنَيْنَ عَيْرَ مُسْفِحَيْنَ وَلَا مُتَخَذِيْنَ أَخْدَانَ وَمَنْ يَكْفُرُ  
بِالْإِيمَنِ فَقَدْ حَرَطَ عَمَلَهُ وَهُوَ فِي الْآخِرَةِ مِنَ الْخَسِيرَيْنَ ۝

3. Wawa la idinka xaaraameeyay waa waxaa (xoolaha) u dhinta iskood (gowrac la'aan), iyo dhiig, iyo hilib doofaar, iyo waxa lagu xuso magac kale aan ahayn Allaah, iyo xoolaha lagu dilo ceego, iyo tan u dhimata jug, iyo tan u dhimata meel ka soo dhac, iyo tan u dhimata hirdin-iyoo waxa uu cuno dugaag<sup>(2)</sup> -waxa aad (awood u yeelataan inaad) gowracdaan mooyee (dhimashadooda ka hor), iyo waxa lagu hadiyeeyo (gowraco) sanammada korkooda, (waxaa kaloo reebban) inaad wax ku qaybsataan faal iyo qori tuur, kaasi waa caasiyoobid. Maalintan bay gaaladu ka quusteen diintiinna, ee ha ka baqina, ee Aniga iga baqa. Maalintan<sup>(3)</sup> baan idii dhammeystiray diintiinna, oo idin taam yeelay Nicmaddeyda korkiinna, oo idii doortay Islaamka hab dhaqan ahaan. Qofkii se ay ku dirqido gaajo daran (inuu cuno wixii laga xaraameeyey), isagoo aan u dan laheyn u iilasho dambi, markaa hubaal, Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis badan.

4. Waxay ku weydiyaan waxa loo xalaaleeyey. Dheh: Waxaa la idii

xalaaleeyey waxyaalaha wanaagsan iyo waxaad bartaan dugaagga iyo shimbiraha wax dhaawaca idinkoo u laylinaya ugaarsiga - aad bartaan waxa uu idin baray Ilaahay-; ee cuna waxa ay idii soor qabtaan, oo ku xusa Magaca Allaah korkooda, oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah. hubaal, Allaah waa ku Dhakhsii Badan yahay xisaabta.

5. Maalintan (dhammaan) waxyaalaha wanaagsan waa la idii xalaaleeyey; oo cuntada kuwa la siiyey Kitaabka (Yuhuudda iyo Kirishtaanka) waa idii xalaal, oo cuntadiinuu waa u xalaal iyaga. (oo waa idii xalaal) dhowrsanooyinka ka mid ah mu'minaadka iyo dhowrsanooyinka ka mid ah kuwa la siiyey Kitaabka idinka hortiin, markaa siisaan meherradooda idinkoo ku qaadanaya (guur) aan gaabsi ka dooneyn oo aan ka yeelanay saaxiibbooyin qarsoodi ah. Oo qofkii beeniya Limaanka, waxaa xaqiiq buraa camalkiisa, oo Aakhirada wuxuu ka mid ahaan doonaa kuwa ku sugan khasaara.

2. Wixii ay idii soor qabtaan dugaagga oo uusan dugaaggoo wax ka cunin.

3. Waxaa loola jeedaa maanta Xajki Sagootinta uu Nabigu s.c.w. gutay xajka, wax yar kaddibna uu dhintay markii uu u soo laabtay Madiina.

6. Mu'miniintow! Markaad u kacdaan salaadda meyra wajiyaddiinna iyo gacmiihinna ilaa xusullada, oo masaxa madaxyadiinna (oo meyra) lugahiinna ilaa canqawyada. Oo haddaad qasli (janaaba) qabtaan, markaa meyrtaa oo haddaad bugtaan ama safar tiihin ama midkiin ka yimaado kortag ama aad taabateen haweenka oo aydaan heli karin biyo, doonta carro daahir ah oo ku masaxa wajiyadiinna iyo gacmiihinna. Ma rabo Allaah inuu idin kor dhigo wax dhib ah, laakiinse wuxuu rabaa inuu idin daahiriyo, iyo inuu idiin dhammeystiro Nicmaddisa dushiinna; si aad u mahad naqdaan.

7. Oo xusuusta Nicmadda Ilaahey dushiinna iyo axdigiisa uu idiin ku guntay si adag, markaad tiraahdeen: Waanu maqallay oo waanu adeecaynaa, oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah. hubaal, Allaah wuu Ogsoon yahay waxa ku jira laabaha.

8. Mu'miniintow! Ahaada kuwo toosan Ilaahey Darti, markhaatiyo caadil ah oo yeysan naceybka dad kale idinku xambaarin inaydaan caddaalad sameyn. Caddaalad sameeyaa: sidaas baa u dhow dhowsanaanta, oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah. hubaal, Allaah waa u Xog Ogaal waxa aad fashaan.

9. Allaah wuxuu u ballan qaaday kuwa rumeysan oo sama fala, inay mudan doonaan dambi dhaaf iyo ajar aad u weyn.

بِيَدِهِ الَّذِينَ أَمْنَوْا إِذَا قُمْتُمْ إِلَى الْصَّلَاةِ فَأَغْسِلُوا  
وُجُوهَكُمْ وَأَيْدِيَكُمْ إِلَى الْمَرَافِقِ وَامْسَحُوا بُرُءَةً وَسُكُونًا  
وَأَرْجُلَكُمْ إِلَى الْكَعْبَيْنِ وَإِنْ كُنْتُمْ جُنْبًا فَاطْهُرُوهُ وَ  
وَإِنْ كُنْتُمْ مَرْضَى أَوْ عَلَى سَفَرٍ أَوْ حَاجَةٍ أَحَدٌ مِنْكُمْ فَمَنْ  
الْعَابِطُ أَوْ لِعَسْمٍ لِلْمَسَاءِ فَلَمْ يَجِدُوا مَاهَةً فَتَبَيَّنُوا صَعِيدًا  
طَيْبًا فَأَسْحَبُوهُ جُوْهَرَكُمْ وَأَيْدِيَكُمْ مِنْهُ مَا يَرِيدُ اللَّهُ  
لِيَجْعَلَ عَيْنَكُمْ مِنْ حَرَجٍ وَلِكُنْ يُرِيدُ لِيُطْهِرُكُمْ  
وَلِيُتَسْعِمَهُ عَلَيْكُمْ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ۖ  
وَأَذْكُرُ وَأَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْكُمْ وَمِيقَةَ الَّذِي وَاثْقَلَ  
بِهِ إِذْ قَلَّمَ سَعْنَاتٍ وَأَطْعَنَ أَتَقْعُدُوا اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ  
بِذَاتِ الصُّدُورِ ۖ بِيَدِهِ الَّذِينَ أَمْنَوْا كُنُوفَهُمْ  
لِلَّهِ شَهَادَةٌ بِالْقُسْطِ وَلَا يَبْرِئُ مِنْ كُمْشَنَاتٍ فَوْقَ عَلَيَّ  
الْأَعْقَدِ لَوْلَا أَعْلَمُ لَوْلَا هُوَ أَقْرَبُ لِلثَّقَوَىٰ ۖ وَأَتَقْعُدُ اللَّهُ إِنَّ  
الَّهَ خَيْرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ ۖ وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ أَمْنَوْا  
وَعَمِلُوا أَصْنَابًا حَتَّىٰ لَهُمْ مَغْفِرَةٌ وَأَجْرٌ عَظِيمٌ ۝

وَالَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِعِيَاتِنَا أَفْلَتُكُمْ أَصْحَابُ  
 الْجَحْيِمِ ١٠ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذْ كُرُوا يَعْمَلُ  
 اللَّهُ عَلَيْكُمْ إِذْ هَمَ قَوْمٌ أَن يَسْطُو الْأَيْمَنُ كُمْ لِيَهُمْ  
 فَكَفَ أَيْدِيهِمْ عَنْهُمْ وَأَنْقُوا اللَّهَ وَعَلَى اللَّهِ فَلَيَسْوَكُلْ  
 الْمُؤْمِنُونَ ١١ \* وَلَقَدْ أَخْدَلَ اللَّهُ مِيقَاتِنِيَّتِي إِسْرَائِيلَ  
 وَعَشَنَا مِنْهُمْ أُثْرَقَ عَشَرَ تَقِيَّاً وَأَوْقَلَ اللَّهُ إِنْفَ  
 مَعَكُمْ لَيْلَتِنِي أَقْمَشُ الصَّلَوةَ وَأَتَيْشُ الْرَّكْوَةَ  
 وَأَمْتُمْ بِرُسْلِي وَعَزَّزْ شُمُوهُمْ وَأَفْرَضْتُمُ اللَّهَ قَرْضاً  
 حَسَنَا لَا كَفَرْنَ عَنْكُمْ سَيْنَاتِكُمْ وَلَا دَخَلْتُكُمْ  
 جَنَّاتَ بَحْرِي مِنْ تَحْتِهَا أَلْأَنْهَرُ فَمَنْ كَفَرَ بِعَدَ ذَلِكَ  
 مِنْكُمْ فَقَدْ ضَلَّ سَوَاءُ السَّبِيلِ ١٢ فَإِنَّمَا نَقْضِيهِمْ  
 مِيقَاتِهِمْ لَعَنْهُمْ وَجَعَلْنَا لُؤْلُؤَهُمْ قِيسِيَّةً يُحَرَّفُونَ  
 الْكَلَمَّ إِنْ مَوَاضِعِهِ وَسُوَاحَظَ مِمَّا دَكَرُوا  
 بِهِ وَلَا تَرَأَلْ قَلْعَةً عَلَى حَيَاةِ مِنْهُمْ إِلَّا قَلَّ مِنْهُمْ  
 فَأَعْفُ عَنْهُمْ وَأَصْفَحَ إِنْ اللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ ١٣

10. Kuwase rumeyn diida oo beeniya Aayadahayaga, waa kuwan ehl Naarka.

11. Mu'miniintow! Xusuusta Nicmadda Ilaahey dushiiinna, markay qolo (Yuhuud ah) goosteen inay idii soodidhaan gacmahooda xaggiinna (idin dilaan), wuuse idinka qabtay gacmahooda oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah. oo Allaah ha isku halleyaan mu'miniintu.

12. Oo xaqiqi Allaah wuxuu la galay axdi Ilmahii Israa'iil, oo waxaan ka soo saarnay dhexdooda labo iyo tobantod. Oo wuxuu Allaah yiri: Hubaal Anigu waa idin la jiraa: haddaad oogtaan salaadda, oo bixisaan Zakada oo aad rumeyasan Rusushayda; oo u gargaartaan, oo amaahisaan Allaah amaah wanaagsan. Wuxaan hubaal idin asturi doonaa xumaatooyinkiina oo waxaan hubaal idin gelin doonaa Beero ay hoostoodu webiyo qulqlaan. Qofkii se aan rumeyn intas kaddib oo idinka mid ah, wuxuu xaqiqi ka lumaa Jidka Toosan.

13. Hase yeeshii ka bixiddooda axdigoodii awgii waan nacladnay, oo aan ka dhignay guluubtooda adeyg; waxay ka duwaan ereyada meelhooda, oo waxay dayaceen qayb waxa lagu waaniyey ah; oo waxaad ka arki doontaa mar walba khiyaano ku jirta xaggooda in yar oo ka mid ah maahee. ee iska cafi, oo iskaga jeeso. hubaal, Allaah wuxuu jecel yahay sama falayaasha.

**14.** Oo kuwa yiraahda waxaanu nahay Kirishtaan, Wuxuu la galnay axdi, wayse dayaceen qayb waxa lagu waaniyey ah. Markaas baan ku tallaalnay cadaawad iyo isnac dheddooda ilaa Maalinta Qiyaamaha, oo wuxuu Allaah u sheegi doonaa waxa ay samayeen.

**15.** Ehlu Kitaabkow! Xaqiiq waxaa idii yimid Rasuulkayaga oo idii caddeynaya wax badan oo ka mid ah waxa aad qariseen ee Kitaabka ka midka ah, oo iska dul maraya in badan. Xaqiiq waxaa haatan idiinka yimid xagga Ilaahey Nuur iyo Kitaab caddaan ah.

**16.** Oo uu Allaah kula hanuuniyo kan raaca Raalli ahaanshahiisa jihadka nabadda, oo kaga saaro mugdiyada xagga Nuurka Idankii, oo ku hanuunsha Jidka Toosan.

**17.** Xaqiiq waa gaalo kuwa yiraahda: Hubaal Allaah waa Masiixa ina Maryam. Dheh: Yaa haddaba wax ka tari kara Allaah hadduu doono inuu halaago Masiixa ina Maryam iyo hooyadi, iyo waxa ku sugan arlada oo dhan? oo Allaah baa iska leh boqortooyada (runta ah ee) samooyinka iyo arlada iyo waxa u dhexeyaba, Wuxuu abuuraax waxa uu doono. Oo Allaah wax walba wuu Karaa.

وَمِنَ الَّذِينَ قَالُوا إِنَّا نَصَرَنَا أَخْدَنَا مِنْ شَفَاعَةِهِمْ فَقَسَوْا  
حَظًّا مَمَادٌ كَرُوا إِلَيْهِ فَأَغْرَيْنَا بِأَنَّهُمْ أَعْدَاؤَهُ  
وَالْبَيْضَاءَ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ وَسَوْفَ يُدْتَهَّمُونَ ١٥ يَأَهِلُ الْكِتَابَ قَدْ  
جَاءَهُ كُمْرَسُولُنَا يَبْيَّنُ لَكُمْ كَيْثِيرًا مِمَّا  
كُنْتُمْ تُخْفِونَ مِنَ الْكِتَابِ وَيَعْفُوا عَنْ كَيْثِيرًا  
قَدْ جَاءَهُ كُمْرَسُولُنَا يَبْيَّنُ لَكُمْ كَيْثِيرًا مِمَّا  
يَهْدِي بِهِ اللَّهُ مَنْ أَتَّبَعَ رِضْوَانَهُ وَسُبْلَ اللَّهِ  
وَيُخْرِجُهُمْ مِنَ الظُّلْمَاتِ إِلَى النُّورِ يَإِذْنِهِ  
وَيَهْدِيهِمْ إِلَى صِرَاطِ مُسْتَقِيمٍ ١٦ لَقَدْ كَفَرَ  
الَّذِينَ قَالُوا إِنَّ اللَّهَ هُوَ الْمَسِيحُ ابْنُ مَرِيَمَ  
قُلْ فَمَنْ يَعْلَمُ كُمْرَسُولُنَا يَبْيَّنُ إِنَّ أَرَادَ أَنْ يُهْلِكَ  
الْمَسِيحَ ابْنَ مَرِيَمَ وَآمَّةَ وَمَنْ فِي الْأَرْضِ  
جَمِيعًا وَلِلَّهِ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا  
يَخْلُقُ مَا يَشَاءُ وَاللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ١٧

وَقَالَتِ الْيَهُودُ وَالصَّرَبِيَّ تَخْنَى أَبْنَوْا اللَّهَ وَأَجْبَوْهُ فَلَمْ يَعْدُ بِكُمْ بِدُلُوكٍ تِلْ أَنْتُمْ شَرٌّ مِنْ خَاقَ يَعْفُرُ لَمَنْ يَشَاءُ وَيَعْدُ بِمَنْ يَشَاءُ وَلَهُ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا يَنْهَا مَا وَأَنْتُمْ مُصِيرٌ<sup>١٨</sup> يَا هَلَّ الْكِتَبُ قَدْ جَاءَكُمْ رَسُولُنَا بَيْنَ لَمْحَى عَلَى فَتْرَةٍ مِنْ أَرْسَلِنَا أَنْ تَقُولُوا مَا جَاءَنَا مِنْ بَشِيرٍ وَلَا نَذِيرٍ قَدْ جَاءَكُمْ بِشِيرٍ وَنَذِيرٍ وَلَهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَبِيرٌ<sup>١٩</sup> وَلَدَقَالَ مُوسَى لِفَوْمِهِ يَقُولُهُ أَدْكُرُوا نَعْمَةَ اللَّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ جَعَلْنَاهُ فِي كُمْ أَنْتُمْ وَجَعَلَ كُمْ مُلُوكًا وَإِنَّكُمْ مَا لَمْ يُؤْتُ أَحَدًا مِنَ الْعَالَمِينَ<sup>٢٠</sup> يَقُولُهُ أَدْخُلُوا الْأَرْضَ الْمُقَدَّسَةَ الَّتِي كَتَبَ اللَّهُ لَكُمْ وَلَا تَرْدُو عَلَى أَدْبَارِكُمْ فَنَقِبُوا أَخْسِرُونَ<sup>٢١</sup> قَالُوا يَمْسُوَى إِنَّ فِيهَا فَمَا جَاتَنِينَ وَإِنَّا نَدْخُلُهَا حَتَّى يَخْرُجُ مِنْهَا قَافِنَ يَخْرُجُ مِنْهَا قَافِنَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمَا أَدْخُلُوْعَلَيْهِمْ أَلْبَابٍ فَلَدَقَدْ حَلَمُوهُ فَلَمَّا كَانُوا يُلْبِيُونَ وَعَلَى اللَّهِ فَتَوَكَّلُوا إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ<sup>٢٢</sup>

١١١

**18.** Oo Yuhuudda iyo Kirishtaanku waxay yiraahdaan: Waxaanu nahay ilmahii Ilaahey iyo kuwa uu jecel yahay. Dheh: Muxuu haddaba idinku cadaabaa dambiyadiinna awgeed?. Mayee, waxaad tiihin dad ka mid ah waxa uu abuuray. Wuxuu u dambi dhaafaa qofkuu doono, oo cadaabaa qofkuu doono. Oo Allaah baa iska leh boqortooyada (runta ah ee) samooyinka iyo arlada iyo waxa u dhxeeyaba, oo waa xaggiisa meel noqodka dambe.

**19.** Ehlu-Kitaabkow! Xaqiq Rasuulkayaga baa idii yimid isagoo idii caddeynaya (xaqa) hakasho kaddib (soo diristii) Rususha, si ayaadaan u oran, Nooma imaan war san side iyo dige midna. Ee xaqiq waxaa haatan idii yimid war san side iyo digeba. Oo Allaah wax walba wuu Karaa.

**20.** Oo (xus) markuu Muuse ku yiri dadkiisii: Dadkaygiiyow! Xusuusta Nicmadda Ilaahey dushiinna, markuu idinka soo dhex saaray Nabiyo dhediinna, oo idinka dhigay boqorro, oo idin siiyey waxaan la siin cid ka mid ah caalamka (waqtigiiinni).

**21.** Dadkaygiiyow! Gala arladaan daahirka ah ee Allaah idii qoray, oo ha jeedinnina dhabbaradiinna idinkoo dib u noqonaya, waayo markaas waxaad soo laaban idinkoo ku sugan khasaaro dhab ah.

**22.** Waxay yiraahdeen: Muusow! Hubaal waxaa jooga dad xoog badan, oo ma gali doonno marnaba jeer ay ka baxaan; ee hadday ka baxaan markaas baanu hubaal gali doonnaa.

**23.** Labo nin oo ka mid ah kuwa cabsada oo uu Allaah u nicmeeyey waxay yiraahdeen: Uga gala alaabka, oo markaad gashaanba idinkaa hubaal lib heli doona, oo Allaah isku halleeya, haddaad tiihin mu'miniin.

**24.** Waxay yiraahdeen: Muusow! Marnaba ma gali doonno weligayo inta ay ku jiraan. Ee taga adiga iyo Rabbigaa oo dagaal gala labadiinnu, hubaal innagu halkan baan iska fariisan doonnaa.

**25.** Wuxuu yiri: Rabbiyow! Hubaal Anigu ma hanto waxaan ahayn nafteyda iyo walaalkay, ee na kala saar innaga iyo dadka caasiyiinta ah.

**26.** Wuxuu yiri: Haddaba iyadu (dhulkaan daahirka ah) hubaal waxay ka xaaraansan tahay iyaga afartan sannadood, ay ku jaha wareeri doonaan dhulka. Ee ha u murugoon dadka caasiyiinta ah.

**27.** Oo uga warran qisada labadii wiil ee Adam oo xaq ah; markay labaduba bixiyeen qurbaan ee laga aqbalay midkood (Haabil) oo aan laga aqbalin kii kale (Qaabil). (Qaabil) wuxuu (ku) yiri (Haabil): hubaal wallee Waan ku dilayaa. (Haabil) wuxuu yiri: Sideedaba wuxuu Allaah wax ka aqbalaa kuwa iska jira (xumaha).

**28.** Haddaad iigu soo fidiso gacantaada xaggeyga inaad I disho, Anigu kuugu soo fidin maayo gacantayda xaggaaga inaan ku dilo, hubaal waxaan anigu ka cabsadaa Allaah, Rabbiga caalamka.

**29.** Hubaal anigu waxaan rabaa inaad la gaddonto dambiga aad iga gasho iyo dambigaagaba, markaas waxaad ka mid noqon doontaa ehl Naarka, oo kani waa abaalka gardarroolyaasha.

**30.** Markaas bay u sahashay naftiisiidilka walaalki; oo uu dilay<sup>(4)</sup>, oo wuxuu ka mid noqday kuwa ku jira khasaarahaa cad.

**31.** Markaasuu Allaah soo diray tuke fagaya dhulka si uu u tuso sidii uu u aasi lahaa maydka walaalki. Wuxuu yiri: Hoogaye! Miyaan kari waayey inaan noqdo tukahaan oo kale oo aaso maydka walaalkay? Oo wuxuu ka mid noqday kuwa qoomammeeyaa.

**4.** Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Ma jirto naf lagu dilo xaq darro uusan wiilkii Adam ee hore (Qaabil) qayb ku lahayn dambigaa.” W.W.Al-Bukhaari

مِنْ أَجْلِ ذَلِكَ كَتَبْنَا عَلَيْهِ إِسْرَئِيلَ أَنَّهُ مَنْ قَتَّلَ فَقْسَاتٍ يُعَذِّبُهُنَّ أَوْ فَسَادٍ فِي الْأَرْضِ فَكَانُوا فَقَلَّ  
الْأَنْاسُ جَمِيعًا وَمَنْ أَحْيَاهَا فَكَانَمَا أَحْيَا النَّاسَ  
جَيْعًا وَلَقَدْ جَاءَهُمْ رُسُلٌ مِّنْ بَيْنِ أَنفُسِهِمْ إِنَّ كَثِيرًا  
مِّنْهُمْ بَعْدَ ذَلِكَ فِي الْأَرْضِ لَمْ يَسْرُفُوا <sup>۲۲</sup> إِنَّمَا  
جَرَأُوا لِلَّذِينَ يُحَارِبُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَسْعَوْنَ فِي  
الْأَرْضِ فَسَادًا أَنْ يُقْتَلُوا أَوْ يُصْلَبُوا أَوْ يُقْطَعَ أَيْدِيهِمْ  
اللَّهُ لَجَمِعَهُمْ عَلَى أَهْدَى فَلَا تَكُونُنَّ مِنَ الْجَاهِلِيَّةِ <sup>٤٧</sup>

١٣١

28. Mayee, waxay hore u qarsadeen baa u muuqan doono, oo haddii dib loo celin lahaa, waxay hubaal ku noqon lahaayeen wixii laga reebay. Oo hubaal waa beenalayaal xaqiqidii.

29. Oo waxay yiraahdaan: Ma jirto (nolol kale) aan ahayn noloshayada (tan) adduunkan, oo nalama soo saari doono.

30. Oo haddaad arki lahayd marka la hor joojiyo Rabbigood. Wuxuu oran doona: Soo ma aha kani xaq? Waxay oran doona: Haah, Rabbiyow. Wuxuu oran doona: Haddaba dhadhamiya cadaabka gaalnimadiinnii darteed.

31. Waa khasaare u joog xaqiq kuwa beeniya la kulanka Ilaahey, jeer markay Saacaddu ugu timaado si kedis ah, waxay oran doonaan: Shallaytadannow ku gaboodfalkayaga darteed waxakani oo waxay ku xambaari doonaan culeysyadooda (dambiyadooda) dhabarra-dooda, haddaba hubaal wuxaa xumaan badan wuxa ay xambaari doonaan.

32. Oo ma aha noloshan adduunka waxaan ahayn cayaar iyo madaddaalo.

Oo xaqiq Daarta Aakhilo baa u khayr badan kuwa iska jira (xumaha), ee miyaydan haddaba garowsaneyn?

33. Wuxaan ognahay xaqiq inay waxa ay sheegaan runtii ku murugo geliso: Mase aha hubaal adiga waxa ay beeninayaan, laakiinse gar ma qaatayaashu waa Aayadaha Ilaahey waxay dafirayaan.

34. Oo xaqiq Rusul kaa horreeyey adiga baa la beeniyey, wayse ku samreen beenintaa iyo dhibkii loo geysanayey ilaa uu u yimid Gargaarkayaga, oo ma jiraan wax beddeli kelmedaha Ilaahey. Oo xaqiq waxaa haatan ku soo gaaray in ka mid ah xaaladdii Rususha.

35. Oo hadday kugu cuslaatay jeedsigoodu, haddaba haddaad dalbi karto dalool aad hoos ugu baxdo arlada gudaheeda, ama sallaan (aad ku fuusho) samada si aad ugu keento calaamo (haddaba sidaa yeel). Oo hadduu Allaah dooni lahaa wuxuu hubaal isugu soo kulmin lahaa iyagoo dhan hanuunka, ee ha ka mid noqon jaahiliinta.

**36.** Kuwaas wax maqla uun baa ajiiba (baaqa), oo (ma xagga) meytida, Allaah baa soo bixin doona, markaas xaggiisa baa loo soo celin doonaa.

**37.** Oo waxay yiraahdaan: Oo maxaa looga soo dejin waayey calaamo xagga Rabbigi ah? Dheh: Hubaal Allaah wuu Karaa inuu soo dejijo calaamo, laakiinse intooda badan wax ma oga.

**38.** Oo ma jiro noole ku socda arlada, ama shimbir ku duusha labadeeda baal, aan aheyn ummado idinla mid ah. Waxba kama aanaan dhaafin Kitaabka<sup>(1)</sup>, markaas xagga Rabbigood baa la isugu soo kulmin doonaa.

**39.** Oo kuwa beeniya Aayadahayaga waa kuwo dhega la' oo af la' oo ku jira mugdiyo daran. Qofkuu doono Allaah waa habaabiyyaa, oo qofkuu doono wuxuu yeelaa Jidka Toosan.

**40.** Dheh: Bal ii sheega haddii Cadaabka Ilahay uu idii yimaado ama Saacaddu idii timaaddo, ma cid kale aan Allaah ahayn ayaad baryi doontaan haddaad tiihin run sheegayaal?

**41.** Mayee' Isaga keligii ayaad baridaan, oo idinka dul qaada (dhibta) aad uga gargaar weydiisataan hadduu doono, oo waxaad illowdaan waqtigaa waxaad la wadaajineyseen cibaadada.

**42.** Oo xaqiq Wuxaan u dirnay (Rusul) ummado kaa horreeyay (wayse ku caasiyeen). Markaas baan ku qabannay dhibaato iyo dhakafaar bal inay soo dabcaan.

**43.** Oo maxay markuu u yimid Ciqaabkayaga, u soo dabci waayeen? Laakiinse quluubtoodaa qallashay, oo Shaydaan wuxuu u qurxiyey waxay faleen.

**44.** Markiise ay dan u gali waayeen wuxuu u qurxiyey, waxaa u furnay albaabbada wax kasta, ilaa markay ku farxeen wuxuu u qurxiyey, waan qabannay si kedis ah, mise markaas bay waxay noqdeen kuwo ku sugar quus daran.

<sup>1</sup>. Mufasiriinta qaarkood waxay yiraahdeen: Kitaabka waxaa loola jeedaa Looxa Maxfuudka, taasina waa in arrimaha uunka oo idil ay ku qoran yihiin Looxa Maxfuudka, qaarna waxay ku fasireen Qur'aanka oo sheegien inay ku yaalliiin aasaasyada diinta iyo suluugga iyo axkaanta iyo xikmaadaha, iyo jidka lagu liibaano labada daaroodba adduunka iyo aakhirada.

فَقْطَعَ دَابِرُ الْقَوْمِ الَّذِينَ ظَلَمُوا وَلَخَدَ اللَّهَ رَبِّ الْعَالَمِينَ<sup>٤٥</sup>  
 قُلْ أَرَأَيْتَ مِنْ أَنَّ أَخَذَ اللَّهُ سَمْعَكُمْ وَأَبْصَرَكُمْ وَخَتَمَ عَلَى قُلُوبِكُمْ  
 مَّنْ إِلَّا اللَّهُ عِزِيزٌ لَّهُ يَاتِيكُمْ بِهِ أَظْرَارٍ كَيْفَ ضَرَبَ الْآيَتِ  
 ثُمَّ هُمْ يَصْدِرُونَ<sup>٤٦</sup> قُلْ أَرَأَيْتَ مِنْ كُمْ أَنْ تَنْكِحُمُ عَذَابَ اللَّهِ  
 بِغَثَّةً أَوْ جَهَرَةً كُلُّ يَهْكِلُ إِلَّا الْقَوْمُ الظَّلَمُونَ<sup>٤٧</sup> وَمَا  
 تُرِسْلُ الْمُرْسَلِينَ إِلَّا مُشَرِّينَ وَمُنْذَرِينَ فَمَنْ أَمْنَ وَأَصْلَحَ  
 فَلَأَخْوَفُ عَنْهُمْ وَلَا هُمْ يَخْوَفُونَ<sup>٤٨</sup> وَالَّذِينَ كَذَّبُوا يَاتِيتَنَا  
 يَمْسُهُمُ الْعَذَابُ بِمَا كَانُوا يَفْسُدُونَ<sup>٤٩</sup> قُلْ لَا أَقُولُ لَكُمْ  
 عَنِّي خَزَّنَنِ اللَّهُ وَلَا أَعْلَمُ الْغَيْبَ وَلَا أَقُولُ لَكُمْ إِنِّي مَلَكٌ  
 إِنِّي أَتَعْلَمُ الْأَمَانُوْحَى إِنَّ قَلْهُنَّ هُلْ يَسْتَوِي الْأَعْمَى وَالْبَصِيرُ  
 أَفَلَا تَتَفَكَّرُونَ<sup>٥٠</sup> وَأَنِذْرُهُمُ الَّذِينَ يَخَافُونَ أَنْ يُحْسَنَ وَإِنَّ  
 رَبَّهُمْ لَيْسَ لَهُمْ مِنْ دُونِهِ وَلَيْسَ شَفِيعًا لَعَلَّهُمْ يَقْرُونَ<sup>٥١</sup>  
 وَلَا أَظْرَدُهُمُ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْعَدْوَفَ وَالْعَشِيشِ يُرِيدُونَ<sup>٥٢</sup>  
 وَجْهَهُمْ مَاعَلَيْكَ مِنْ حَسَابِهِمْ مَنْ شَئْتُ وَمَا مِنْ حَسَابِكَ  
 عَلَيْهِمْ مَنْ شَئْتُ وَفَتَرَدَهُمْ فَتَكُونُونَ مِنَ الظَّالِمِينَ<sup>٥٣</sup>

45. Markaasaa dadkii geystey gefafka la ciribtitay. Oo ammaan idilkeed waxaa leh Allaah, Rabbiga uunanka oo idil.

46. Dheh: Bal ii sheega hadduu Allaah qaado maqalkiinna iyo araggiinna, oo daboolo quluubtiinna; waa kuma ilaaха aan aheyn Allaah oo idiin keeni kara? Eeg sida Aan ugu celcelinno Ayadaha, markaas ay uga sii jeestaan?

47. Dheh: Bal ii sheega, hadduu idiinku yimaado cadaabka Ilahay kedo ama caddaan; Miyaa la halligaa waxaan ahayn dadka gar ma qaatayaasha ah?

48. Oo uma soo dirno Rususha waxaan ahayn inay ahaadaan war san sidayaal iyo digayaal, ee qofkii rumeeya oo sama fala, kuwaas ma qabi doonaan cabsi, mana murugoon doonaan.

49. Kuwase beeniya Aayadahayaga, cadaab baa taaban doonta caasintooda darteed.

50. Dheh: Idinkuma dhaho waxaan hayaah khasnadaha Ilahay, oo ma ogi waxa aan muuqan ee qarsoon oo idinkuma dhaho waxaan anigu ahay malag. Ma raaco waxaan ahayn waxa

la ii waxyoodo. Dheh: Kan idhaha la' iyo kan wax arka miyey siman yihiin? Miyeydaan haddaba fakaray?

51. Oo ugu dig kuwa cabsada in loo soo kulmin doono xagga Rabbigood-ma laha gargaare iyo garab siye midna aan Isaga ahayn, bal inay iska jiraan (xumaha).

52. Oo ha ceyrin kuwa barya Rabbigood subax iyo galabba, waxay rabaan oo keliya Wajijiisa. Waxba kaama saarna (xil) Xisaabtooda, iyagana xisaabtaada waxba kama saarna<sup>(2)</sup>, (ee iska jir) inaad ceyriso, oo sidaas uga mid ahaato geflowyada.

2. Qofna lama weydiinayo camallada iyo niyooyinka qof kale, Aayadaha 52-54 waxay ka hadlayaan fuqurada muslimiinta. markii uu Rasuulka s.c.w. la fariistay mu'miniintaa qaarkood, kuwaasoo ay Quraysh u arkeen inay yihiin kuwo liita oo dacif ah iyo masaakin, waxay madaxdii Quraysh u yimaadeeene Nabiga s.c.w. laakiinse way diideen oo iska weyneeyeen inay la fariistaan mu'miniintaa, oo uu sood jeediyeen inuu ero si ay ula hadlaan, waxay ku yiraahdaan haddii aad iska kala eriso, markaa waan ku raacaynnaa. markaasaa waxaa soo degay Aayaddan.

**53.** Sidaas baan isugu jarribnaa (dadka) qaarkoodba qaar kale inay yiraahdaan: Ma kuwaan baa kuwa Allaah uu ku mannaystay (fadliga) dhexdeenna? Miyaanu Allaah ahayn Kan Ogsoon kuwa mahad naqa?

**54.** Oo markay kuwaan rumeysan Aayadahayaga kuu yimaadaan, dheh: Nabadi korkiinma ha ahaato, Rabbigii wuxuu ku waajibiyey Naftiisa Naxariis, sidaa awgeed, hadduu midkiin u falaa xumaan jahli darti, markaas kaddibna soo laabto oo wanaagsanaado, hubaal, Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**55.** Oo sidaas baan u kala dhigdhignaa Aayadaha si ay u caddaato waddada Dambiliyaaasha.

**56.** Dheh: Waxaa la iga reebay inaan caabudo kuwa aad baridaan Allaah sokadi. Dheh: Ma raaco rabitaannadiinna liita, waayo (haddii aan sidaas yeylo), xaqiqiit waan lumi lahaa markaas, oo kama mid ahaadeen kuwa hanuunsan.

**57.** Dheh: Hubaal Anigu waxaan ka heystaa Xujo Cad xagga Rabbigay, waadse beenisaan, ma hayo waxa aad degdegsaneysaan. Go'aanka waxaa iska leh Allaah, wuxuu soo tebiyya xaqa, oo waa Isaga Kan u wanaagsan inta wax kala xukunta.

**58.** Dheh: Haddaan hayn lahaa waxa aad dooneysaan in la soo dedejiyo, arrinka wuxuu hubaal ahaan lahaa mid la gooyey aniga iyo idinka dhexdeenna, Oo Allaah aad buu u ogsoon yahay geflowyada.

**59.** Oo Wuxuu hayaa furayaasha khaznadaha qarsoon, ma jiro axad ogsoon aan Isaga ahayn. oo Wuxuu Ogsoon yahay wax kasta oo jira barriga iyo baddaba; oo ma jirto caleen soo dhacda uusan ogeyn; oo ma jirto inii taal mugdiyada dhulka iyo wax qoyan ama qallalan midna, bal (waxay dhaammaan) ku yaalliiin Kitaab Cad.

وَهُوَ الَّذِي يَتَوَقَّعُ كُلُّ أَيَّلٍ وَيَعْلَمُ مَا جَرَحْتُمْ بِالنَّهَارِ ثُمَّ  
يَعْشُكُمْ فِيهِ لِيُقْضَى أَجْلُ مُسْئِلَةِ شَمَاءِ إِلَيْهِ مَرْجِعُكُمْ ثُمَّ  
يُبَيِّنُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ۝ وَهُوَ أَقْاہُرُ قَوْقَعَ عَبَادَوْ  
وَرُسُلُ عَلِيِّكُمْ حَفَظَةً حَقَّنَ إِذَا جَاءَ أَحَدُكُمْ مَوْتُ تَوْقِتُهُ  
رُسُلُنَا وَهُمْ لَا يُغَرِّرُونَ ۝ شَمَ رَدُوا إِلَى اللَّهِ مَوْلَاهُمُ الْحَقِّ  
أَلَا لِلَّهِ الْحِكْمَةُ وَهُوَ أَعْلَمُ الْحَسَنَيْنَ ۝ قُلْ مَنْ يُبَيِّنُكُمْ مِنْ  
طُلُمَتِ الْأَيْرَ وَالْأَبْحَرِ تَبَعُوهُ وَتَصْرَعُوا وَحْقِيَّةً لِمَنْ أَجْهَنَتْنَا  
هَذِهِ لَنْ تَكُونَنَّ مِنَ الشَّاكِرِينَ ۝ فِي اللَّهِ يُبَيِّنُكُمْ مِنْهَا وَمِنْ كُلِّ دُرُّ  
ثَرَاثَنَا شَرِكُونَ ۝ قُلْ هُوَ الْقَادُرُ عَلَىٰ أَنْ يَبْعَثَ عَلَيْكُمْ عَذَابًا مِنْ  
فَوْقِكُمْ أَوْ مِنْ خَلْقِكُمْ أَوْ يَسِّرُكُمْ شَيْعًا وَيُدِيقُ عَضْكُمْ  
بَأَنْسٍ بَعْضٍ أَنْظُرْ كِيفَ نُصْرِفُ الْأَيْكَاتِ لِعَاهَمِيْقَهُونَ ۝ وَذَذَبَ  
يَهُوَ قَوْمَكَ وَهُوَ الْحَقُّ قُلْ لَسْتُ عَلَيْكُمْ بِوَكِيلٍ ۝ لِكُلِّ بَيْتٍ  
مُسْقَرٍ وَسَوْقٍ تَعْلَمُونَ ۝ وَإِذَا رَأَيْتَ الَّذِينَ مُخْرُضُونَ فِيَهُ اِتَّبَعَنَا  
فَأَغْرِضْ عَنْهُمْ حَقَّيْتُهُمْ ضُوْفًا حَرَبِيَّتُهُمْ وَلَمَّا يُنْسِيَنَا  
الشَّيْطَنَ فَلَا تَقْعُدُ بَعْدَ الدَّكَرِيَّ مَعَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ ۝

TA

١٣٥

60. Oo Isaga weeye Kan oofsada nafahiinna habeenka (hurdada gudaheeda), oo wuxuu Ogsoon yahay waxa aad kasabtaan maalinnimada, haddana idinka soo kiciya mar kale si loo oofiiyo muddo magacaaban, markaas Xaggiisa baa la idiin soo celin doonaa, markaasuu idiin sheegi doonaa wixii aad fasheen (oo dhan).

61. Oo Waa Isaga Sarreeyaha awoodda badan, ka korreyya addoomahiisa, oo wuxuu idiin soo diraa ilaalo (malaa'ig) korkiinna ah, jeer markuu mowd u yimaado midkiin, waxaa oofsada Rusushayada (Malaa'igta ah), oo iyagu ma aha kuwa gabood fala.

62. Markaas baa waxaa loo celiyya Allaah, Mudanahooda Xaqa ah. Haddaba hubaal Isaga ayaa leh go'aanka, oo waa Kan u dhaqso badan inta wax xisaabisa.

63. Dheh: Waa kuma kaa idinka badbaadiya halisaha barriga iyo badda (marka) aad baridaan (si caddaan ah) idinkoo u hoganaya iyo qarsoodiba (oo leh): Hadduu naga badbaadiyo (halis) tan, waxaanu hubaal ka mid noqon doonaa kuwa mahad naqa.

64. Dheh: Allaah baa idinka badbaadiya iyada iyo dhibaato kastaba, markaas ayaad haddana u sharii yeeshaan.

65. Dheh: Wuxuu Karaa inuu idiinka soo diro cadaab korkiinna ama lughiinna hoostooda<sup>(3)</sup> ama idin geliyo jahawareer (isagoo idinka dhigaya) kooxo kala duwan, oo ka yeelo qaarkiin inay dhadhamiyaan dhibka qaarka kale. Eeg sida aan ugu soo celcelinno Aayadaha, bal inay fahmaan.

66. Oo dadkaagu way beeniyaan isagoo xaq ah. Dheh: Anigu dusha idinkama saarni ilaaliye ahaan.

67. War walbaa wuxuu leeyahay muddo, oo waad ogaan doontaan.

68. Oo markaad aragto kuwaa gala warar been ah ay ka sheegaan Aayadahayaga iyagoo ku jeesjeesaya, ka dheerow, jeer ay u galaan war kale. Oo hadduu shaydaan ku hilmaansiiyo, haddaba ha la fariisan xusuus ka dambow dadkaa geflowyada ah.

<sup>3</sup>. “Cadaab korkiinna ah” waa sida roob dhagax ah iyo biriqda iyo danabka, iwm, iyo “lughiinna hoostooda” sida dhul garriiradda iyo daadadka, iwm

**69.** Oo kuwa dhowrsoon xisaabtooda waxba kama saarna, laakiinse waxay ku leeyihii waano, waa intaasoo ay iska jiraan (xumaha'e).

**70.** Oo iskaga tag kuwa ka dhigta diintooda cayaar iyo madaddaallo, oo ay hoddai nolosha adduunkan, oo ku waaniya (Qur'aanka) si aan nafi loogu halligin waxay kasabtay, ma lahaan doonto Allaah sokadi wax sokeeye ah iyo garab midna, oo hadday isku furato madax furasho kasta aan laga aqbali doonin. Waa kuwan kuwa loo halaagi doono waxa ay kasbadeen awgeed, waxaa lagu abaal marin doonaa sharaab biyo kulul oo karaya iyo cadaab xanuun badan gaalnimadooda darteed.

**71.** Dheh: Oo ma waxaan barinnaa Allaah sokadi wax aan noo hanan karin dhib iyo dheef midna, oo ma waxaa dib naloogu celin doonaa cirbahayaga kaddib markuu Allaah na hanuuniyey?-(markaas waxaan ahaaneynaa) sida kan ay ka yeeleen shayaamadu inuu ku luufluufo dhulka dhexdiisa isagoo jaha wareersan? (halka) uu leeyahay saaxiibbo ugu yeera hanuunka (oo ku dhahaya): Noo kaalay. Dheh: Hubaal, Hanuunka Ilaahey baa ah oo keliya hanuunka toosan, oo waxaa nala amray inaan isu dhiibno Rabbiga uunanka oo idil.

**72.** Oo hagaajiya salaadda, oo dhowra (xilka uu idin saaray), oo Isaga weeye Kan xaggiisa la idiin soo kulmin doono.

**73.** Oo Isaga weeye Kan ku abuuray samooyinka iyo arlada xaq, oo maalinta uu yiraahdo: Ahow, way ahaan. Qawlkiisu waa Xaq. Oo Isaga leh boqortooyada (runta ah) Maalinta marka la afuufi doono Buunka. Waa Ogsoonaha waxa aan muuqan iyo waxa muuqdaba Oo waa Isaga Xakiimka, Xog Ogaalka ah.

\* وَإِذْ قَالَ إِنْرَهِيمُ لِأَيْهَٰءَ إِذْ أَتَتْخُذُ أَصْنَامَةَ الْهَمَّةِ<sup>(٤)</sup>  
أَرْبَكَ وَقَوْمَكَ فِي ضَلَالٍ شُيُّبٍ<sup>(٥)</sup> وَكَذَّلِكَ نُرِي إِنْرَهِيمَ  
مَلْكُوتَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَلَيَكُونُ مِنَ الْمُوْقِنِينَ<sup>(٦)</sup>  
فَلَمَّا جَاءَ عَلَيْهِ الْيَوْمَ رَأَيْتَ كَبَّاقَالَ هَذَا رِبِّ فَلَمَّا أَفَلَ  
قَالَ لَآجُوْلُ الْأَفْلِينَ<sup>(٧)</sup> قَلْمَارَ الْقَمَرِ بَارِغَافَالَ هَذَا  
رِبِّ فَلَمَّا أَفَلَ قَالَ لَيْنَ لَمْ يَهْدِ فِي رِبِّ لَآكُونَ مِنَ الْقَوْمِ  
أَصْنَاعِيْنَ<sup>(٨)</sup> قَلْمَارَ الْقَمَرِ بَازْغَهَ قَالَ هَذَا رَبِّي هَذَا  
أَكَبَّرُ قَلْمَارَ الْأَكْثَرَ قَالَ يَقُولُ إِنِّي بَرِيءٌ وَمَمَّا شَرِكْتُ  
إِنِّي وَجَهْتُ وَجَهْتِي لِلَّهِي فَطَرَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ  
حَنِيفًا وَمَا تَأْمُلُ مِنَ الشَّرِيكِينَ<sup>(٩)</sup> وَحَاجَةٌ قَوْمَهُ، قَالَ  
الْحَجُورُ فِي اللَّهِ وَقَدْ هَدَنِي وَلَا أَخَافُ مَا شَرِكْتُ  
إِلَّا أَنْ يَسَّأَهُ رَبِّي شَيْئًا وَسِعَ رِبِّي كُلَّ شَيْئٍ عَلَمَ أَنَّ الْأَلا  
تَذَكَّرُونَ<sup>(١٠)</sup> وَكَيْفَ أَخَافُ مَا أَشَرَكْتُهُ وَلَا مُخَاهَفُونَ  
أَنَّكُمْ أَشَرَكْتُمْ بِاللَّهِ مَا لَمْ يُنَزِّلْ بِهِ عَلَيْكُمْ سُلطَانًا  
فَإِنَّ الْفَرِيقَيْنِ أَحَقُّ بِالْأَمْنِ إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ<sup>(١١)</sup>

١٣٧

74. Oo (xus) markuu Ibraahiim ku yiri aabbihii Aazar<sup>(4)</sup>: Ma waxaad ka dhigataa asnaam ilaahyo? Hubaal waxaan anigu kugu arkaa adiga iyo dadkaagaba habow caddaan ah.

75. Sidaas baan u tusinnay Ibraahim boqortooyada samooyinka iyo arlada si uu uga mid ahaado kuwa Xaqa yaqjinsan.

76. Markaasuu kolkii uu ku madoobaaday habeenku wuxuu arkay xiddig. Wuxuu yiri: Ma kan baa Rabbigay? Markiise uu dhacay, wuxuu yiri: Ma jecli waxa dhaca.

77. Oo markuu arkay dayaxa oo soo baxaya, wuxuu yiri: Ma kan baa Rabbigay? Markiise uu dhacay, wuxuu yiri: Haddii uusan I hanuunin Rabbigay, waxaan hubaal ka mid noqon doonaa dadka lunsan.

78. Oo markuu arkay qorraxda oo soo baxaysa, wuxuu yiri: Ma kan baa Rabbigay? Ma kan baa ugu weyn?. Markiise ay dhacday, wuxuu yiri: Dadkaygiyow! Anigu waxaan barrii ka ahay waxa aad Allaah u shariig yeeshaan.

79. Hubaal waxaan anigu u jeediyey wejigayga anigoo toosan xagga Kan abuuray samooyinka iyo arlada, oo anigu ka mid ma ahi mushrikiinta.

80. Oo dadkiisii baa la dooday; oo wuxuu yiri: Ma waxaad igala doodeysaan arrinka Ilaahey? isagooy xaqiqi I hanuuniyey; oo anigu ma ka cabsi qabo sinnaba waxa aad la wadaajisaan cibaadada Isaga (ma jiraan wax ay i yeeli karaan) wuuxu Rabbigay doono ma'ahee. Rabbigay wuxuu ku koobaa wax walba Cilmigiisa. Ma waydaan haddaba waansamayn?

81. Oo sidee baan uga cabsadaa waxa aad la wadaajisaan cibaadada (iyagoo aan hanan karin dhib iyo dheef midna), halka aydaan idinku ka cabsi qabin inaad la wadaajiseen Allaah cibaadada cid kale uusan idiinku soo dejinin wax xujo ah. Ee kee baa haddaba labada qolo isku huba inay ku sugnaan amni, haddii aad ogtiihin?

4. *Mufasirunta qaar waxay yiraahdeen aabbihu ee lagu xusay Aayadda waxaa loola jeedaa adeerki, waayo adeerku waa aabbe oo kale.*

**82.** Kuwa rumeysan oo aan ku labin Iimaankooda gef (shirki), waa kuwaas kuwa uu u sugnaan doono amnigu, oo waa iyaga kuwa hanuunsan.

**83.** Oo tani waxay aheyd xujadayadaan ka siinnay Ibraahiiim dadkiisii. Waxaan kor u qaadnaa darajooyin ciddaan doonno. Hubaal, Rabbigaa waa Xakiim, wax kasta Osgoon.

**84.** Oo Wuxaan ku galladeysannay Isxaaq iyo Yacquub, mid walbaana Waanu hanuuninnay, oo Nuux waanu hanuuninnay kal hore, oo waxaa ka mid ah ubadkiisa; Daawuud iyo Sulaymaan iyo Ayyuub iyo Yuusuf iyo Muuse iyo Haaruun. Oo sidaas baan u abaal marinnaa sama falayaasha.

**85.** Iyo Zakariya iyo Yaxyaa iyo Ciise iyo Ilyas, mid walbaa wuxuu ka mid hayah kuwa wanaagsan.

**86.** Iyo Ismaaciil iyo Al-Yasac iyo Yuunus iyo Luud, mid walbaa oo ka mid ahi waan ka kor marinnaa uunanka (waqtigoodii).

**87.** Iyo sidoo kale qaar ka mid ah aabbayaashood iyo ubadkooda iyo walaalhood, oo waan doorannay iyaga, oo ku hanuuninnay Jidka Toosan.

**88.** Kani waa hanuunka Ilaahay uu ku hanuuniyo qofkuu doono oo ka mid ah addoomahiisa. Oo hadday la wadaajin lahaayeen cibaadada cid kale, waxaa hubaal ka buri lahaa wixii ay camal san faleen.

**89.** Kuwaanu waa kuwa aan siinnay Kitaabka, iyo Xikmadda iyo Nabinnimada. Marka hadday kuwani rumeysan waayaan, waxaan xaqiqi u xil saarnay dad aan xaqaa diidin.

**90.** Kuwani weeye kuwa uu Allaah hanuuniyey, ee raac hanuuunkooda. Dheh: Idinkuma weydiisto kani (Qur'aanka) wax abaalgud ah. Wax kalena ma aha ee waa waano ku socota uunanka (jinka iyo dadka).

الَّذِينَ أَمْتُنَا وَلَهُ يَسُوَّلُ إِيمَانَهُمْ بِظُلْمٍ أُولَئِكَ لَهُمُ الْأَمْنُ  
وَهُمْ مُهْتَدُونَ <sup>٨٤</sup> وَتِلْكَ حُجَّتُنَا إِذْ يَنَّهَا إِبْرَاهِيمَ عَلَىٰ  
قَوْمِهِ تَرْفَعُ دُرْجَاتٍ مَّنْ نَشَاءُ إِنَّ رَبَّكَ حَكِيمٌ عَلِيمٌ <sup>٨٥</sup>  
وَوَهَبَنَا اللَّهُ أَسْحَقَ وَعَقْوَبَ لَكَ لَهَدِيَّا وَفُؤَادَهَدِيَّا  
مِنْ قَبْلٍ وَمِنْ دُرْيَتِهِ دَأْوَدَ وَسُلَيْمَانَ وَأَيُوبَ وَوُسْفَ  
وَمُوسَى وَهَرُورَتَ وَكَذَلِكَ بَخْرِيَ الْمُحْسِنِينَ <sup>٨٦</sup>  
وَرَسَّكَرَيَا وَيَحِيَّ وَعِيسَى وَالْأَنْسَى كُلُّ مِنَ الْأَصْلَاحِينَ  
وَإِسْمَاعِيلَ وَأَلْيَسَعَ وَبُوئُسْ وَلُوطًا وَكَلَّا فَضَّلَنَا عَلَىٰ  
الْأَعْلَمِينَ <sup>٨٧</sup> وَمِنْ أَبَآئِهِمْ وَدُرْيَتِهِ وَأَحْرَنَهُ وَأَجْنِيَّتِهِ  
وَهَدَيَنَّهُمْ إِلَى صَرْطُ مُسْتَقِيرٍ <sup>٨٨</sup> ذَلِكَ هُدَى اللَّهِ يَهْدِي  
يَهُهُ مِنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادَهُ وَلَوْ أَشْرَكُوا الْحِيطَ عَنْهُمْ مَا كَانُوا  
يَعْمَلُونَ <sup>٨٩</sup> أُولَئِكَ الَّذِينَ أَتَيْنَاهُمُ الْكِتَابَ وَالْحُكْمَ  
وَالْأُنْوَافُ إِنَّ يَكْفِرُهُمْ بِهَا هَلُولَهُ فَقَدْ وَكَلَّا بِهَا قَوْمًا لَيْسُوا  
بِهَا يَكْفُرُونَ <sup>٩٠</sup> أُولَئِكَ الَّذِينَ هَدَى اللَّهُ فِيهِنَّهُمْ أَقْدَرُهُ  
فُلَّا أَسْلَمُوكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِنَّ هُوَ الْأَذْكَرُ لِلْعَالَمِينَ <sup>٩١</sup>

وَمَاقَدَرُوا لِلَّهَ حَقًّا فَقَرَرُوا إِذَا قَالُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ عَلَىٰ بَشَرٍ مِّنْ شَيْءٍ  
 قُلْ مَنْ أَنْزَلَ الْكِتَابَ الَّذِي جَاءَ بِهِ مُوسَى نُورًا وَهُدًى  
 لِلنَّاسِ يَجْعَلُونَهُ قَرَاطِيسًا تُدُونُهَا وَتُخْفُونَ كَشِيشًا وَعَمَّامَهُ  
 مَا لَمْ يَعْمَلُوا أَنْتُمْ لَهُ أَبْأَبًا وَكُمْ فِي اللَّهِ عَزَّ ذَرَهُمْ فِي حَوْضِهِمْ  
 يَأْتِيُونَ ۝ وَهَذَا كِتَابٌ أَنزَلْنَاهُ مَبَارِكٌ مُصَدِّقٌ لِّذِي بَيْنَ  
 يَدِيهِ وَلَتَنْذِرَ أَرْقَمَ الْقُرْآنِ وَمِنْ حَوْلَهَا وَالَّذِينَ يُؤْمِنُونَ يَأْتِيُونَ يَالْجَنَّةَ  
 يُؤْمِنُونَ بِهِ وَهُوَ عَلَىٰ صَلَاتِهِمْ يُحَاجِظُونَ ۝ وَمَنْ ظَلَمَ وَمَنْ  
 افْتَرَىٰ عَلَىٰ اللَّهِ كَذِبًا أَوْ قَالَ أُوحِيَ إِلَيَّ وَلَمْ يُوحِي إِلَيْهِ شَيْئًا  
 وَمَنْ قَالَ سَأَنْزِلُ مِثْلَ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَوْ تَرَىٰ إِذَا الظَّالِمُونَ فِي  
 عَمَرَتِ الْمُوتَ وَالْمَلَكِيَّةِ كَمَا سَطَّلُوا إِيَّاهُمْ لَهُ حِلْوَانِ  
 الْيَوْمِ يُخْرَجُونَ عَذَابَ الْهُنُونِ بِمَا كُنْتُمْ تَنْقُولُونَ عَلَى اللَّهِ عَزَّ  
 لَقِيَ وَكَسُنْتُمْ عَنِ اِتْكَيْهِ تَسْتَكِيْرُونَ ۝ وَلَقَدْ جَعَلْنَا  
 فُرْدَىٰ كَمَا خَلَقْنَاكُمْ أَوْ مَرْقَةٍ وَرَكَّسْتُمْ مَا حَوَلَتُمْ وَرَأَيْتُمْ  
 ظُهُورَكُمْ وَمَا نَرَىٰ مَعَكُمْ شُفَعَاءَ مِنَ الَّذِينَ رَعَمْتُمْ نَهَمَّ فِي كُمْ  
 شُرُكَكُمْ وَلَقَدْ قَطَعَ بَيْنَكُمْ وَضَلَّ عَنْكُمْ مَا كُنْتُمْ تَرْغَمُونَ ۝

١٣٩

91. Oo ma ay ku tilmaamin Allaah tilmaamaha uu mudan yahay marka ay leeyihiin: Waxba Allaah uma soo waxyoond qof Aadmi ah. Dheh: Yaa soo waxyooday Kitaabkii uu la yimid Muuse, oo u ahaa nuur iyo hanuu dadka, oo aad idinku (Yuhuudda ah) ka dhigteen qoraallo (kala gaar ah) aad muujisaan (qaar ka mid ah) oo qarisaan wax badan? Oo waxaa la idin baray wax aydaan aqoon jirin idinka iyo aabbayaashiin midna. Dheh: Allaah (baa soo waxyooday). Markaas iskaga tag iyagoo baadilkooda ku madadaalan.

92. Oo kanu waa Kitaab aan soo waxyoonnay oo barakaysan oo xaqiijinaya (kutubtii) ka horreeyey, si aad ugu digto hooyada magaaloo yinka iyo waxa hareeraheeda ah. Oo kuwa rumeysan aakhirada baa rumeysan, oo waxay u dhowraan salaadahooda si joogto ah.

93. Oo yaa ka gef badan mid ka been sheega Allaah, ama yiraahda: Waa la ii waxyooday isagoo aan loo waxyoon waxba, iyo kan yiraahda: Waxaan soo waxyoon karaa wax la mid ah waxa

uu Allaah soo waxyooday? Oo haddaad arki lahayd marka ay geflowyada ku sugar yihiin sakaraadka mowdkaa, iyagoo malaa'igtu ay soo fidinayaan markaa gacmaahooda (iyagoo ku leh): Soo saara nafahiinna! Maanta waxaa la idinku abaal marin doonaa cadaabka dulleynta wixii aad Allaah ka sheegi jirteen darteed oo hadal xaq darro ah. Oo waxaad aheydeen kuwo Aayadahiisa iska weyneeyaa.

94. Oo xaqiq waxaad noogu timaaddeen idinkoo keli ah sidii aan idii abuurnay awal horeba. Oo waxaad uga timaaddeen dhabbaradiinna gadaashood waxaan idinku galladeysannay. Oo ma aragno la jirkiin shafeecayaashiinnii aad ku sheegi jirteen inay xaggiinna shuruko Allaah la yihii. Xaqiq dhammaan xiriirkii dhediinna ahaa haatan waa kala go'an yihii, oo waxaad sheegeyseen waad weydeen.

**95.** Hubaal Waa Allaah Kan biqliya iniinta iyo lafta. Wuxuu ka soo saaraa noole wax meyd ah, oo ka soo saaraa wax meyd ah wax nool. Kaas ayaa ah Allaah, ee sidee baa haddaba la idiinka jeediyey?

**96.** Waa Kan waaga bariya, oo ka dhigay habeenka nasasho, iyo in qorraxda iyo dayaxa wax lagu xisaabsado, (arrin) kani waa abaa-bulka Adkaadaha aan laga adkaan, wax kasta ogsoonaha ah.

**97.** oo waa Isaga Kan idiin yeelay xiddiga-ha, si aad ugu toostaan dhabbaa marka uu jira gudcurka barriga iyo badda. Xaqiq Waxaan u faahfaahinnay Aayadaha dad aqoon leh.

**98.** Oo Isaga weeye Kan idinka abuuray naf keliya, oo idin yeelay rug aad degtaan iyo rug kaydin ah<sup>(5)</sup>, xaqiq waxaan u faahfaahinnay Aayadaha dad faham leh.

**99.** Oo Isaga weeye Kan ka soo shuba biyo daruurga, oo aan ku soo saarno dhir nooc kasta leh, markaasaan waxaan ka soo saarnaa cagaar, kaasoo aan ka soo saarno sabuul ku karooran (dhegtiisa). Oo waxaan ka soo saarnaa geed timireedka iyo khaylkeeda cobollo timir ah oo hoos u soo lusha, dhowna oo aan fogeyn iyo beero ah canab, iyo saytuun iyo rummaan, oo (nooc ahaan) isu eg, ha yeeshee kala duwan (midab iyo dhadhan ahaan). U fiirsada mirihiisa markuu miro dhalo iyo bisaylkiisa. Hubaal waxaa (arrin) kani ugu jira xaqiq calaamooyin dad iimaan leh.

**100.** Oo waxay ka yeelaan jinka shariigyo ay la wadaajiyaa Allaah cibaadada, Isagoo abuuray iyaga, oo waxay baadil ugu nasbeeyaan wiilal iyo gabdho cilmi la'aantooda awgii. Xurmo oo dhan Isagaa leh oo hufan, oo wuu ka sarreeyaa waxay ku tilmaamaan.

**101.** Waa Farxashaxa cirarka iyo dhulka. Sidee buu u yeelan karaa wiil Isaga oo aan lahayn afo? Oo Isagu yahay Kan abuuray wax kasta, oo Isaga baa wax walba Og.

<sup>5</sup>. Waxay mufasiriinta qaar ku fasireen mustaqir dhabarca aabbaha ay ilmahiisa ku jiraan, mustowdicna ilma galeenka hooyada. Waxaana jira qaar ku fasriyit mustaqir dhulka korkiisa uu aadmiga ku nool yahay, mustowdicna dhulka hoostiisa macnaha qabriga marka uu qofku dhinto.

ذَلِكُمُ اللَّهُ رَبُّكُمْ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْحَوْحِيقُ كُلُّ شَيْءٍ فَاعْبُدُوهُ  
وَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ بِوَكْيِلٍ لَا تَدْرِكُهُ الْأَبْصَرُ وَهُوَ  
يُدْرِكُ الْأَبْصَرَ وَهُوَ الْطَّفِيفُ الْخَيْرُ قَدْ جَاءَكُمْ  
بَصَارُكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ فَمَنْ أَبْصَرَ فَلِنَفْسِهِ وَمَنْ عَمِّلَهَا  
وَمَا آتَيْتُكُمْ بِحَقِيقَيْطٍ وَكَذَلِكَ نُصْرِفُ الْأَيْتَ  
وَلَيَشْوُلُوا دَرَسَتْ وَلَيَتَسْهِيَّ لَقَومٌ يَعْلَمُونَ أَتَتْ  
مَا أُوحِيَ إِلَيْكُمْ مِنْ رَبِّكُمْ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ أَعْرِضُ عَنِ الْمُشْرِكِينَ  
وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا أَشْرَكُوا وَمَا جَعَنْتُكُمْ عَلَيْهِ حَقِيقَيْطًا  
وَمَا أَتَتْ عَلَيْهِمْ بُوَكَيْلٍ وَلَا سُبُّوا الَّذِيْنَ يَدْعُونَ  
مِنْ دُونِ اللَّهِ قَيْسَبُوَالله عَوْنَوْ بِغَيْرِ عَلِمٍ كَذَلِكَ رَيْتَ الْكُلُّ أُمَّةً  
عَمَّاهُمْ ثُمَّ إِلَيْهِمْ مَرَجَعُهُمْ فَيَنْتَهُمْ بِمَا كَفَرُوا يَعْمَلُونَ  
وَقَسَمُوا بِاللَّهِ جَهَنَّمَ لِيْنَ جَاهَنَّمَ يَوْمَئِنْ  
بِهَا قَلْ إِنَّمَا الْأَيْتُ عَنْدَ اللَّهِ وَمَا يُشَعِّرُكُمْ أَنَّهَا إِذَا جَاءَتْ  
لَا يُؤْمِنُونَ وَنَقْلَبُ أَفْيَدُهُمْ وَابْصَرُهُمْ كَمَا لَمْ  
يُؤْمِنُوا بِهِ أَوْلَ مَرَّةً وَنَدِرُهُمْ فِي طُعْنَتِهِمْ بِعَمَّهُونَ

١٤١

**102.** Kaas waa Allaah, Rabbigiiin, Ma jiro Ilah aan Isaga ahayn. Abuuraha wax kasta, ee caabuda Keligii, oo Isaga baa wax kasta xilkood haya.

**103.** Ma koobi karaan Aragga indhuuhu, Isaguse wuu koobaa arag walba oo jira. Oo waa Isaga Roonaan Badanaha, Xog ogaalka ah.

**104.** Xaqiq waxaa idiinka yimid tusmooyin xagga Rabbigii, ee qofkii arkaa, naftisay dan u tahay, oo qofkii ka indho la'aada isagay u daran tahay, oo anigu ma ahi mid korkiinna ilaaliye ka ah.

**105.** Oo sidaas baan ugu celcelinnaa Aayadaha iyo si ay u yiraahdaan: Waad soo baratay, iyo si aan ugu caddeyno arrinka dad garasho leh.

**106.** Raac waxa lagaaga soo waxyooday xagga Rabbigaa, ma jiro ilah aan Isaga ahayn, oo iskaga jeeso mushrikiinta.

**107.** Oo hadduu doono Allaah, uma ay shariig yeeleen cidna oo kaaga ma aanaan dhigin korkooda ilaaliye, oo kama tihid adig u wakiil.

**108.** Oo ha caayina kuwaa ay u dhawaaqdaan Allaah sokadi, si aysan iyagoo xadgudbaya markaa u caayin Allaah jahli darti. Sidaas baan ugu qurxinnay ummad walba camalkeeda; markaas waa xagga Rabbigood meel noqdkoodu, markaas wuxuu u sheegi doonaa waxa ay faleen.

**109.** Oo waxay ku dhaartaan Allaah tan ugu culus dhaarahooda, in hadday u timaaddo calaamo ay hubaal rumaynayaan<sup>(6)</sup>. Dheh: Calaamooyinka sideedaba waxay uun la jiraan oo haya Allaah, oo maxaa idin ogeysiinaya markay (calaamo) u timaaddo inayan rumayn doonin?

**110.** Oo waxaanu rogi doonaa quluubtooda iyo aragyadooda, sida ay iyaguba aanay u rumeyn kolki hore, oo waxaanu ugu tegi doonaa xad gudubkooda, ay ku jaha wareersanaan indha la'aan.

**6.** *Mushrikiinta waxay ku dhaarteen in haddii ay arkaan mucjiso ka yimid xagga Illaahay ay rumeyn doonaaan, markaasay waxay mu'miniinta jecleysteen oo ka dalbeen Nabiga s.c.w. inuu soo dejiyo mucjisdaas, wuxuu Allaah uga jawaabay Aayaddan.*

## J U S K A (8)

## Suuradda 6 Al-Ancaam

**111.** Oo waliba haddaan u soo diri laheyn malaa'ig (u sidda dhambaalkan), oo meytidu ay (ka)la hadli lahaayeen (arrinkani), oo aan ku soo kulmin laheyn wax walba oo dhan hortooda, ma ay rumeyn lahayn, in maahee Allaah doono, laakiinse badankoodu waa jaahiliin.

**112.** Oo sidaas baan waxaan ugu yeelney Nabi walbaa cadow-shayaadiinta ku jira dadka iyo jinkaba, oo qaarkoodba u waxyoonayo qaar kale hadal (been ah oo) la qurxiyey ay (ku) hodaan. Oo Rabbigaa hadduu doono, ma ay fali lahayn, ee iskaga tag iyaga iyo waxa ay been abuuranba.

**113.** Oo waa si ay laabaha kuwa aan rumeysanayn Aakhirada ugu iilato oo ugu raalli noqdaan, iyo si ay u kasbadaan waxa ay kasban doonaan (oo dembiyo ah).

**114.** Ma waxaan haddaba ka doonaa xukun cidaan ahayn Allaah, isagoo ah Kan idiin soo waxyooday Kitaabka ee la caddeeyey. Oo kuwa aan (horay u) siinnay Kitaabka waxay ogsoon yihii in looga soo waxyooday xagga Rabbigaa si xaq ah. Sidaas darteed ha ka mid noqon kuwa ka shakiya.

**115.** Oo Kelmadda Rabbigaa waxay ku taam noqotay run iyo caddaalad. Ma jiro wax beddeli karaa Kelmedihiisa. Oo Waa Maqlaha (wax kasta), wax kasta ogsoonaha.

**116.** Oo haddaad adeecdo intooda badan waxa dhulka jooga, waxay kaa lumin doonaan Jidka Ilahay. Ma raacaan waxaan ahayn male, oo been uun bay sheegaan.

**117.** Hubaal, Rabbigaa baa dhab u Ogsoon midka ka luma Jidkiisa, oo Wuxuu dhab u Ogsoon yahay kuwa hanuunsan.

**118.** Ee cuna waxaa (hilibka) lagu xusay Magaca Allaah (markii la gowracayey), haddaad tiihiin kuwa Aayadihiisa rumeysan.

وَمَا لَكُمْ أَلَا تَكُونُوا مَمَادُكَ رَأْسُمُ اللَّهِ عَلَيْهِ وَقَدْ فَصَلَ  
 لِكُمْ حَرَمَ عَائِدَ كُمْ لِلْأَمَامَاضْطَرَرْتُمْ إِلَيْهِ وَإِنَّ كَثِيرًا  
 يَضْلُلُونَ بِاهْوَاهِهِمْ بَغِيرِ عِلْمٍ إِنْ رَبِّكُ هُوَ أَعْلَمُ بِالْعَعْدَيْنَ  
 وَدَرَوْأَظْلَمُهُمْ أَلِئْمَ وَبِاطْلَهُ وَإِنَّ الَّذِينَ يَكْسِبُونَ أَلِئْمَ  
 سَيْجِزُونَ بِمَا كَانُوا يُفْتَنُونَ فَوْتَ وَلَا تَكُونُوا مَمَادُكَ  
 يُذَكِّرَ أَسْمَمُ اللَّهِ عَلَيْهِ وَإِنَّهُ لِفَسْقٌ وَإِنَّ الشَّيْطَنَ لَيَمْوَنَ  
 إِنْ أَفْلَى لَهُمْ لِيَكْدُلُوكُمْ وَلَنْ أَطْعَمُنُهُمْ إِنَّكُمْ لَمَسْرُوكُونَ  
 أَوْمَنَ كَانَ مَيْتَانَ فَأَحْيَيْتُهُ وَجَعَنَّا لَهُ وُرَأْيَمَشِي بِهِ  
 فِي الْأَنْاسِ كُنْ مَشَلُهُ وَفِي الظَّاهِرَتِ لَيْسَ بِخَارِجٍ مِنْهَا كَذَلِكَ  
 رُؤْنَ لِلْكُفَّارِنَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ وَكَذَلِكَ جَعَنَّا  
 فِي كُلِّ قَرِيبٍ أَكَبِرُ مُجْرِمِهِ الْمَكْرُوْرُ وَفِيهَا وَمَا  
 يَمْكُرُونَ إِلَيْأَنْفُسِهِمْ وَمَا يَشْعُرُونَ وَإِذَا جَاءَهُمْ  
 عَيْتَهُ قَالُوا إِنْ نُؤْمِنُ بِهِ حَقَّنَ وَقَ مِثْلَ مَا أَوْقَتْ رُسُلُ اللَّهِ  
 أَعْمَرُ حَيْثُ يَجْعَلُ رِسَاتَهُ سَيْصِبُ الَّذِينَ أَجْرَمُوا صَغَارِ  
 عَنَّهُ اللَّهُ وَعَدَابٌ شَدِيدٌ يُبَاكِي لَوْيَمَعُكُرُونَ

١٤٣

ku sugar mugdiyo uusan ka soo bixi karin? Sidaas baa loogu qurxiyey gaalada waxay falayeen.

**123.** Oo sidaas baan u yeelney magaalo walba gudaheed kuwooda waaweyn (madaxda iyo maalqabeennadeeda) inay ahaadaan dambiliayaasheeda si ay ugu dhax maleegaan qorshe (xun), umase maleegaan qorshe (xun) waxaan ahay nafahooda, mase dareensana.

**124.** Oo markay calaamo u timaaddo, waxay yiraahdaan: Ma rumeyn doonno jeer nala siiyo wax la mid ah waxa la siiyey Rususha Ilahay. Allaah baa dhab u ogsoon meesha uu dhigo Dhambaalkiisa. Waxaa ku dhici doona dambiliayaasha dulli xag Ilahay ah iyo cadaab daran waxay qorshe xun maleegi jireen awgeed.

**119.** Oo maxaad la cuni weydeen waxaa (hibka) lagu xusay Magaca Allaah (markii la gowracayey neefka), oo wuxuu horay idinku caddeeyey waxa uu idinka xaraanshay-waxa ay dani idinku qabato ma'ahee. Oo hubaal kuwo badan baa xaqiq ku lumiya (dadka) rabitaannadooda liita aqoon la'aan darteed. Hubaal, Rabbigaa wuu Ogsoon yahay kuwa xad-gudba.

**120.** Ee ka taga dambiga muuqda iyo kan qarsoonba. hubaal, kuwa kasbada dambiga waxaa laga goyn doonaa waxay kasbadeen.

**121.** Oo ha cunina waxaa (hibka) aan lagu xusin Magaca Allaah (markii la gowracayey neefka), oo hubaal waa caasiyoobid. Oo hubaal shaydaammadu waxay xaqiq u soo jeediyaan saaxiibaddoo inay idin la doodaan<sup>7</sup>, oo haddaad adeecdaan, markaa hubaal waxaad xaqiq idinkuna tiihiin mushrikiin.

**122.** Ma mid ahaa meyd markaas aan noolaynay, oo aan u yeelney Nur oo uu ku dhex socdo dadka, baa la mid ah mid

7. *Taasina waxay ahayd in mushrikiinta yiraahdeen: Muxammadow bal waxaad nooga warrantaa ri'da? Haddii ay dhimato yaa dilay? Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Allaah baa dilay. Waxay yiraahdeen: Haddaba ma waxaad ku andacooneysaa waxa aad dishaan adiga iyo asxaabtaadaa inay yihiin xalaal, oo waxa ay dilaan eyga iyo galleyrka iyo haramcadka ay yihiin xalaal, waxase uu Alle dila ay xaaraan tahay in la cuno. Markaasuu wuxuu Allaah soodjeiyey Aayaddan.*

**125.** Ee qofkii uu Allaah rabo inuu hanuuniyo, wuxuu u waasiciyaa laabtiisa Islaamka, oo (ma) qofkii uu rabo inuu lumiyo wuxuu ka dhigaa laabtiisa ciriiri dhibboon sida isagoo kor ugu baxaya xagga samada. Sidaas buu Allaah dusha uga saaraa fadarada kuwa aan rumaysneyn.

**126.** Oo kani waa Jidka Rabbigaa ee toosan. Xaqiq Waxaan uga yeelnay Aayadaha caddaan dad maan leh.

**127.** Waxay mudan Daarta Nabadda oo Rabbigood agtiis ah oo Isagaa ah Gacalkood waxay camal faleen darteed.

**128.** Oo Maalinta uu soo kulmin doono (dhammaantood) iyagoo wada jira (oo oran doono): Kulanka jinkow! Wuxaad badsateen (luminta) in badan oo dadka ah. Oo saaxiibbadoodii ka mid ahaa dadka waxay oran doonaan: Rabbiyow! Wuxuu ku dan gaaray qaarkayoba qaarka kale, oo waxaan gaarnay muddadayada aad noo goysay. Wuxuu oran doonaan: Naarta ayaa hoygiinna ah oo aad ku dhex waarsaanaan, wuxuu Allaah doono mooyee. Xaqiq, Rabbigaa waa Xakiim, wax kasta Ogsoon.

**129.** Oo sidaas baan uga saaxiib dhignaa gar ma qaatayaasha qaarkoodbaa qaarka kale, waxa ay kasbadeen awgeed.

**130.** Kulanka jinka iyo dadkow! Miyaanay idiin imaan Rusul idinka mid ah, oo idiin soo tebinaya Aayadahayga oo idiinka digaya la kulanka maalinkinnaan kani? Waxay oran doonaan: Wuxaan ku marag furaynaa nafahayaga. Oo waxaa hodday noloshan adduunka. Oo waxay ku marag furi doonaan nafahooda inay gaalo ahaayeen.

فَمَنْ يُرِدُ اللَّهُ أَنْ يَهْدِيهِ فَيَشْرِكُ صَدَرَهُ بِالْإِسْلَامِ وَمَنْ  
يُرِدُ أَنْ يُضْلِلَهُ فَيَجْعَلُ صَدَرَهُ ضِيقًا حَرَجًا كَانَمَا  
يَصْعَدُ فِي السَّمَاءِ كَذَلِكَ يَجْعَلُ اللَّهُ الْرَّحْمَنُ عَلَى الَّذِينَ  
لَا يُؤْمِنُونَ ۝ وَهَذَا أَصْرَطُ رَبِّكَ مُسْتَقِيمًا فَضَلَّنَا  
الْأَيْكَتِ لِقَوْمٍ يَدْكُرُونَ ۝ لَهُمْ دَارُ الْإِسْلَامِ عَنْهُ  
رَبَّهُمْ وَهُوَ لِيُهُمْ بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ۝ وَوَمَّا يَخْسِرُهُمْ  
جَمِيعًا إِنَّمَّا يَعْسِرُ الْجِنَّنَ قَدْ أَسْتَكَرْتُمْ مِنَ الْأَنْوَافِ ۝ وَقَالَ  
أَوْلَى أَوْهُمْ مِنَ الَّذِينَ رَأَيْتَنَا أَسْتَمْعِنُ بِعَصْنَاهِ بَعْضِهِ وَبِعَنَتِ  
أَجَنَّنَ الَّذِي أَجَّلَتْ لَنَا قَالَ أَنَّا زُمُرْدُكُمْ خَلِيلُنَا فِيهَا  
إِلَّا مَاشَةَ اللَّهِ إِنْ رَبَّكَ حَكِيمٌ عَلَيْهِ ۝ وَكَذَلِكَ قُوْلِي  
عَصْ الظَّلَمِيْنَ بِعَصْنَاهِ بَعْضِهِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ ۝  
يَنَعْشَرُ الْجِنَّ وَالْأَنْوَافُ الَّتِي يَأْتِيُكُمْ رُسُلٌ مِنْ كُمْ  
يَفْصُوتُ عَلَيْكُمْ أَيْقَنِي وَيُنَذِّرُونَكُمْ لِقَاءَ يَوْمَكُمْ  
هَذَا قَالَ الْوَالِشَّهِدَنَا عَلَى نَفْسِنَا وَغَرَّهُمُ الْحَيَاةُ الدُّنْيَا  
وَشَهِدُوا عَلَى نَفْسِهِمْ أَنَّهُمْ كَانُوا كَفِيرِينَ ۝

ذَلِكَ أَنَّ لَمْ يَكُنْ رَبُّكَ مُهْلِكَ الْقُرْبَىٰ بِطُمَّٰ وَاهْلَهَا  
عَنْفُوتٌ ۝ وَلَكُلٌّ دَرَجَتٌ مِمَّا عَمِلُواٰ وَمَا زَرُوكَ  
يَعْنِلٌ عَمَّا يَعْمَلُونَ ۝ وَرَبُّكَ الْغَنِيُّ دُوَالَّرَحْمَةَ  
إِنْ يَشَاءُ يُدْهِمُهُمْ وَيَسْتَحْلِفُ مِنْ بَعْدِ كُمْرَمًا  
يَشَاءُ كَمَّا أَنْشَأَكُمْ وَمِنْ ذُرْبَتَةٍ قَوْمٌ أَخَرِينَ ۝  
إِنْ مَا تُوَعَّدُونَ لَا تَكُونُ وَمَا أَنْتُمْ بِمُعْجِزِينَ ۝ قُلْ يَنْقُومُ  
أَعْمَلُوا عَلَىٰ مَكَانَتِكُمْ فِي عَامِلٍ فَسُوقٍ تَعْلَمُونَ  
مَنْ تَكُونُ لَهُ وَعِيقَةٌ الْدَّارِيُّ إِنَّهُ لَا يُفْلِحُ الظَّالِمُونَ ۝  
وَجَعَلُوا لِلَّهِ مَمَادِرًا مِنَ الْحَرْثِ وَالْأَعْسَمِ نَصِيبًا  
فَقَالَ الْوَهَّابُ اللَّهُ بِنِعِيمِهِمْ هُمْ هَذَا لِشَرِكَاتِ إِنَّا فَمَا كَانَ  
لِشَرِكَاتِ إِيمَنٍ فَلَا يَصِلُ إِلَى اللَّهِ وَمَا كَانَ لِلَّهِ فَهُوَ  
يَصِلُ إِلَى شُرِكَاتِ إِيمَنٍ سَاءَ مَا يَحْكُمُونَ ۝ وَكَذَلِكَ  
رَبَّنَ لَكَثِيرٍ مِنْ الْمُشْرِكِينَ قَتْلَ أَوْ لَدُهُمْ  
شُرِكَاتُهُمْ لَيْرُدُوهُمْ وَلَيُلِسُوْعُ عَلَيْهِمْ دِينُهُمْ  
وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا فَعَلَوْهُ فَدَرَهُمْ وَمَا يَفِرُّوْنَ ۝

١٤٥

yo xoolo ah, oo yiraahdaan: Kan waxaa iska leh Allaah - sidaas bay ku andacoodaan-, oo kan waxaa iska leh sanamayadayaada la wadaaga cibaadada. Marka waxa ay leeyihiiin sanamayadooda ma gaaraan Allaah, waxase (qayb ahaan loo dhigay) Allaah wuxuu gaaraa sanamayadooda! Alla Xumaa waxa ay xukumaan.

**137.** Oo sidaas bay (ilaahyadooda beenta ah) ay la wadaajiyaaan cibaadada (ilaahay) ugu qurxiyeen in badan oo mushrikiinta ah dilka carruurtooda, si ay u halligaan oo uga khaldaan diintooda. Oo hadduu Allaah doono, ma ay fali lahayn, ee isu dhaaf iyaga iyo waxa ay been abuurraanba.

**131.** (Arrin) kani waa inaan Rabbigaa ku halligeyn magaaloooyinka gar darro iyagoo dadkooda war la' yihiiin (aan loo digin).

**132.** Oo dhammaan waxay leeyihiiin derejooyin (heerar) waafaqsan waxay camal falaan. Oo Rabbigaa ma mooga waxay camal falaan.

**133.** Oo Rabbigaa waa Hodan (ka deeqtoon wax waliba) Naxariis leh, hadduu doono waa idin qaadi karaa, oo idinku beddeli karaa idinka kaddib cidduu doono. Sidii uu awalba idiinka soo saaray firka dad kale.

**134.** Hubaal, waxa la idiinka gooddiyo waa imaanayaan, oo kama fakan kartaan.

**135.** Dheh: Dadkaygiow! Camal fala intii karaankiinna ah, Aniguna sidoo kale waan camal falanayaa, waadse ogaan doontaan dhowaan keennee lahaan doonaa ciribta (wanaagsan) daarta (Aakhiro). Hubaal gar ma qaatayaasha ma gulyesan doonaan.

**136.** Oo waxay qayb u dhigaan Allaah<sup>(8)</sup>, ka mid ah waxa uu abuuray ee beero

8. *Qaybta uu Allaah leeyahay waxay siinayeen fuqurada iyo masaakiinta oo ku bixiyeen howlaha sama falqa, waxayse ay ugu talo galeen sanammada waxay siinayeen kuwa ilaaliya sanammada, oo ma siineyn fuqurada iyo masaakiinta. Caadadan wuu nacladay Ilaahay.*

**138.** Oo waxay yiraahdaan: Kuwani waa xoolo iyo beer reebban, aysan wax ka cuni doonin ciddaan doonno maahee-sidaas bay ku andacoodaan- iyo xoolo la xarriimay dhabarradooda iyo xoolo aan lagu xusin Magaca Ilahay - iyagoo ku been abuuranaya. Waa uu ka abaal marin doonaa waxa ay been abuurteen darteed.

**139.** Oo waxay yiraahdaan: Waxa ku jiruurarkaxoolahan (caano amailmo) waxaa gaar u leh labkayaga keliya, oo waa ka xaaraan xaasaskayaga, oo hadduu baqtii yahay, markaa way wadaagaan dhammaantood. Wuxuu ka abaal marin doonaa waxay been ugu nisbeeyeen (Allaah). Xaqiiq, Waa Xakiim, wax kasta Ogsoon.

**140.** Waxaa khasaara dhab ah ku sugan run ahaan kuwa u dila carruurtooda caqli xumo aqoon la'aan<sup>(9)</sup>, oo xaaraameeya waxa Allaah uu siiyey, iyagoo ku been abuuranaya Allaah. Xaqiiq way lumeen, oo ma aha kuwo hanuunsan.

**141.** Oo Isaga weeye Kan soo saara beero (canab ah) dhis leh iyo kuwo aan dhis lahaynba, iyo geedo timir, iyo sarac leh miro muuqaal ahaan iyo dhadhan kala duwan, iyo saytuun, iyo rummaan, isu eg (nooc ahaan) kuna kala duwan (dhadhan ahaan), Wax ka cuna mirahiisa markay soo saaraan miro, oo bixiya xaqa lagu leeyahay maalinta goyntiisa. Oo ha xad dhaafina, xaqiiq Isagu ma jecla kuwa xad dhaafa.

**142.** Oo waxaa ka mid ah xoolaha (uu abuuray qaar) xummuul qaada iyo kuwo u suubbada in la qasho oo keliya. Wax ka cuna waxa Allaah idin siiyey, oo ha raacina tallaaboo yinka Shaydaanka. Hubaal wuxuu isagu idiin yahay cadow iska cad.

وَقَالُوا هَذِهِ آنَعَمٌ وَحَرَثٌ جِرْلًا يَطْعَمُهُ إِلَّا مَنْ شَاءَ  
يَرَغِبُهُمْ وَأَنْعَمٌ حِرْمَتٌ طَهُورُهُمْ وَأَنْعَمٌ لَا يَدْكُرُونَ  
أَسْمَ اللَّهِ عَلَيْهَا أَفْتَرَاءَ عَلَيْهِ سَيَجِزُهُمْ بِمَا كَانُوا فَرَأُوا  
يَقْتُرُونَ<sup>(١)</sup> وَقَاتِلَ مَنْ فُطِنَ هَذِهِ الْأَنْعَمَ خَالِصَةٌ  
لَدُكُورِنَا وَمُحَرَّمٌ عَلَى أَرْقَاجِنَاتٍ وَإِنْ يَكُنْ مَيْتَةٌ  
فَهُمْ فِيهِ شُرَكَاءُ سَيَجِزُهُمْ وَصَفَقُهُمْ إِلَّا حَكِيمٌ  
عَلَيْهِمْ<sup>(٢)</sup> قَدْ خَسِرَ الَّذِينَ قَاتَلُوا أَوْلَادَهُمْ سَفَهَهُمْ أَعْيَّرُ  
عَلِمٌ وَحَرَمُوا مَارِزَقَهُمُ اللَّهُ أَفْتَرَأَهُمْ عَلَى اللَّهِ قَدْ ضَلَّوْ  
وَمَا كَانُوا مُهَمَّتِينَ<sup>(٣)</sup> \* وَهُوَ الَّذِي أَنْشَأَ جَنَّاتٍ  
مَعْرُوشَاتٍ وَعَدَدٌ مَعْرُوشَاتٍ وَالنَّلَّعَ مُخْلِفَاتٍ  
أُكْلُهُ وَالرَّبِيُوتُ وَالرُّمَانُ مُشَكَّلَهَا وَعَيْرٌ مُنْشَكَلٌ  
كَلُولًا مِنْ شَمْرَوْنَ إِذَا أَشْمَرَهُ وَأَنْوَحَهُ يَوْمَ حَصَادِهِ  
وَلَا تُسْرِفُ إِلَيْهِ وَلَا يُجْبِي الْمُسْرِفِينَ<sup>(٤)</sup> وَمِنْ الْأَنْعَمِ  
حَمُولَةً وَفَرِشَاتٍ كُلُومَارَزَقُهُمُ اللَّهُ وَلَا تَسْعِ  
خُطُواتِ الشَّيْطَنِ إِنَّهُ وَكُمْ عَدُوٌّ مُّبِينٌ<sup>(٥)</sup>

١٤٦

**9.** Waxaa ka mid ahaa Carabta qaar ku sugnaa diintii Ibraahiiim. Wuxuu Allaah amray Ibraahiiim inuu gowraco wiilkiisa Ismaaciil, kaddib waxay ka dhigeen madaxdii hoggaamineysey diintooda arrinka gowraca waxaan caddeyn sababta keentay, ilaa ay la wanaagsanaatay raaceenhoodii inay gowracaan ilmahoooda Alle u dhowaansho darteed inkastoo sababta runta ay ahayd inay ka cararaayeen faqri iyo ceydh.

ثَمَنِيَةَ أَرْوَحَ مِنَ الْصَّانِينَ وَمِنَ الْمَعْزَلَتَيْنَ  
 قُلْ إِذَا الدَّكَرَتِ حَرَمٌ أَمْ الْأَنْتَيْنِ أَمَا اسْتَمَّتَ عَلَيْهِ  
 أَرْحَامَ الْأَنْتَيْنِ نَبَغُونِ بِعِلْمٍ إِنْ كَنْتُمْ صَدِيقِنْ  
 وَمِنَ الْأَبِيلَتَيْنِ وَمِنَ الْبَقَرِ أَشْتَنِينَ قُلْ إِذَا الدَّكَرَتِ  
 حَرَمٌ أَمْ الْأَنْتَيْنِ أَمَا اسْتَمَّتَ عَلَيْهِ أَرْحَامَ الْأَنْتَيْنِ  
 أَمْ كَنْشَرَ شَهَادَةً إِذْ وَصَدَّكُمُ اللَّهُ يَهْدِ أَفَمَنْ  
 أَطْلَمُ مِنْ أَفْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا يُضْلِلُ النَّاسَ بِعَيْنِ  
 عِلْمٍ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّلَمِيْنَ  
 فِي مَا أَوْحَى إِلَيْهِ مُحَمَّداً عَلَى طَاعِيمَ يَطْعَمُهُ إِلَّا أَنْ يَكُونَ  
 مَيْسَةً أَوْ دَمَّا مَسْفُوحًا أَوْ لَحْمَ خَنْزِيرًا فَإِنَّهُ وَرِجْسٌ أَوْ  
 فَسْقًا أَهْلَ لَعْنَةِ اللَّهِ يَعْلَمُ فَمَنْ أَصْطَرَ عَيْرَ بَاغَ وَلَا عَادَ  
 فَإِنَّ رَبَّكَ عَفُورٌ رَّاجِمٌ وَعَلَى الَّذِينَ هَادُوا حَرَمَتِ  
 كُلُّ ذِي طَفْرٍ وَمِنَ الْبَقَرِ وَالْعَنَمِ حَرَمَ مَنْ أَعْلَمَهُ  
 شُحُومَهُمْ إِلَّا مَاحْمَتْ طَهُورُهُمْ أَوْ الْحَوَى أَوْ مَا أَخْتَطَ  
 بِعَطْرٍ ذَلِكَ جَزِيَّهُمْ بِعِيْهِمْ وَلَا أَصْدِرُ فُرْتَ

١٤٧

143. Siddeed lammaane ah; labo ido ah iyo labo riyah ah. Dheh: Ma labada labka ah buu xaaraameeyey mise labada dheddig, mise (ilmaha) ku jira uurarka labada dheddig? Ii sheega si cilmi ah haddaad tiihin run sheegayaal.

144. Iyo labo geel ah iyo labo lo' ah. Dheh: Ma wuxuu xaaraameeyey labada labka ah mise labada dheddig; mise (ilmaha) ku jira uurarka labada dheddig? Mise goob joog baad ahaydeen marka uu Allaah idin amray kani? Ee yaa ka gef badan mid ka been sheega Allaah, si uu dadka u lumiyoo cilmi la'aan? Hubaal Allaah ma hanuuniyo dadka gar ma qaatayaasha ah.

145. Dheh: Kuma hayo waxa la ii waxyooday wax ka xaaraan ah cunaa inuu cuno inuu yahay maahee neef iski u dhintay (gowrac la'aan) ama dhiig horay u soo butaacay (gowrac darti iyo wax la mid ah), ama hilib doofaar waayo xaqiqiit waa najiz, ama kaasi ah caasiyoobid, wax kale aan aheyn (Magaca) Allaah lagu xusay dushiisa, qofkiise ay dani ku qabato

(inuu cuno waxaa laga xaraameeyey) isagoo aanay rabitaan ka aheyn, oo aan xad gudbeyn, haddaba hubaal, Rabbigaa waa Dambe Dhaafid Badane, Naxariis Badan.

146. Oo kuwaa ahaa Yuhuudda waxaan ka xarrimnay (neef) kasta oo ciddi leh<sup>(10)</sup>, xagga lo'da iyo ariga waxaan ka xarrimnay buruurtooda wax Maahee ku dhegay dhabarradooda ama xiidmahooda ama ku dheehmay laf. (Arrin) kani wuxuu ahaa ciqaab aan ku abaal marinnaa gefkoodii dartiis, oo Waxaan hubaal nahay run sheegayaal.

<sup>10.</sup> Xoolihii ciddi leh: Waxaa loola jeedaa xoolaha aanay ciddayhooda kala tagsaneyn sida geela, iwm qaar kale waxay yiraahdeen: waxaa loola jeedaa xoolaha leh hal ciddi oo keliya, sida faraska iyo dameerka, iwm.

**147.** Haddiise ay ku beeniyaan markaa dheh: Rabbigii waa Rabbiga Naxariista Ballaaran, oo Ciqaabkiisa lagama celiyo dadka dambiilayaasha ah.

**148.** Kuwaah ah mushrikiinta waxay oran doonaan: Hadduu Allaah doono, ma aanu u shariig yeelneyn (waxba Isaga) innaga iyo aabbayaasheenba, oo ma aan ka xarrimneen (nafahayaga) waxba (uu Allaah banneeyey). Sidaas oo kale bay u beeniyeen kuwii ka horreeyay jeer ay ka dhadhamiyeen Ciqaabkayaga. Dheh: Ma heysaan wax cilmi ah oo aad noo soo saareysaan? Wuxaad uun raacdaan wax iska male awaal ah, oo wuxaad uun sheegtaan beeno.

**149.** Dheh: Marka Allaah baa iska leh Xujada Xeesha Dheer. Oo hadduu doono. Hubaal Wuu idin hanuunin laaha dhammaantiin.

**150.** Dheh: Keena markhaatiyadiinna ka marag kacaya in Allaah xaaraameeyey kani. Ee hadday ka marag kacaan, ha la marag kicin. Oo ha raacin rabitaannada liita kuwaah beeniya Aayadahayaga, iyo kuwaah aan rumeysaneyn Aakhirada, oo iyagu Rabbigood wax la sima oo dhig u yeela.

**151.** Dheh: Kaalaya, Wuxaan akhriyi doonaa waxa uu Rabbigii idinka xaaraameeyey: (xusuusnaada) inaydaan (cibaadada) la wadaajin waxba Isaga; oo u muujiya naxariis waalidiintiin, oo ha u dilina carruurtiinna (ka cabsi) faqri darteed\_ Annagaa idin arsaaqayna idinka iyo iyagaba; oo ha u dhowaannina wixii anshax xumo ah oo dhan kuwooda ka mid ah ee muuqda iyo kuwo qarsoonba, oo ha ku dilina nafta uu Allaah xaaraameeyey arrin xaq ah<sup>(11)</sup> maahee, (Arrin) kan buu idinku farad yeelay, bal inaad fahantaan.

فَإِنْ كَذَّبُوكُمْ فَقُلْ رَبُّكُمْ دُوَرَ حَمَةٌ وَاسْعَةٌ وَلَا يُرَدُ  
بِأَسْهَمِهِ عَنِ الْقَوْمِ الْمُجْرِمِينَ ﴿١١﴾ سَيَقُولُ الَّذِينَ أَشْرَكُوا  
لَوْ شَاءَ اللَّهُ مَا أَشْرَكْنَا وَلَا إِلَهَ أَبْأُونَا وَلَا حَمَدَنَا عِنْ شَيْءٍ  
كَذَّبَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ حَتَّىٰ دَأَقُوا بِأَسْأَثَٰ  
قُلْ هَلْ عِنْكُمْ مِنْ عِلْمٍ فَتُخْرِجُوهُ لَنَا إِنْ تَعْلَمُونَ إِلَّا  
أَظَلَنَ وَإِنْ أَنْتُمْ إِلَّا خَرَصُونَ ﴿١٢﴾ قُلْ فِيلَهُ الْحَجَةُ الْبَالِغَةُ  
فَلَوْ شَاءَ لَهُدَمْكُمْ أَجَعِينَ ﴿١٣﴾ قُلْ هَلْمَ شَهَادَةُكُمْ  
الَّذِينَ يَشَهَّدُونَ أَنَّ اللَّهَ حَرَمَ هَذَا إِنْ شَهِدُوا فَلَا شَهَدَ  
مَعْهُمْ وَلَا تَنْعِيْ أَهْوَاءَ الَّذِينَ كَذَّبُوا بِعَيْنِتَنَا وَالَّذِينَ  
لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ وَهُمْ بِرَبِّهِمْ يَعْدُلُونَ ﴿١٤﴾  
عَالَوْ أَتْلُ مَا حَرَمَ رَبُّكُمْ عَلَيْكُمُ الْأَشْرِكُوا  
بِهِ شَيْئًا وَبِالْأَلْهَمِينَ احْسَنُنَا وَلَا نَقْتُلُنَا وَلَدَكُمْ  
مِنْ إِمْلَاقِنَا مَنْ تَرْزُقُكُمْ وَلَا يَأْتِهِمْ وَلَا تَقْرُبُوا الْفَوْحَشَ  
مَا ظَهَرَ مِنْهَا وَمَا بَطَنَ وَلَا تَقْتُلُوا النَّفَسَاتِ الَّتِي حَرَمَ اللَّهُ  
إِلَّا بِالْحَقِّ ذَلِكُمْ وَصَدَّقُكُمْ بِهِ لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿١٥﴾

<sup>11.</sup> Uu sharciga qiray sida qisaaska, dilka murtaddiinta, dhagax ku dilidda zaaniga horay u guursaday ama guursatay haddii lagu caddeeyo zinada ama iyagu qirtaan.

وَلَا تَقْرُبُوا مَالَ الْيَتَمِّ إِلَيْهِ أَنْ يَهْوَىٰ هِيَ أَحْسَنُ حَيَّاً يَسْلُغُ الشَّدَّادَ  
وَأَوْهُوا الْكَيْلَ وَالْيَرَانَ بِالْقُسْطِ لَأَنَّكُلْ فَنَسَّالِ  
وَسَعَهَا وَإِذَا قُلْتُمْ فَاعْدُلُوا وَلَوْكَاتْ دَاقْرِي وَعَهْدَ  
اللَّهِ أَوْفُوا ذَلِكُمْ وَصَسْكُمْ بِهِ لَعَلَّكُمْ نَدَّكُرُونَ  
وَإِنْ هَذَا صَرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ فَاتَّبِعُوهُ وَلَا تَنْتَعِلُوا إِلَيْهِ  
فَقَرَرَ كُلُّكُمْ عَنْ سَبِيلِهِ ذَلِكُمْ وَصَسْكُمْ بِهِ لَعَلَّكُمْ  
تَتَّقُونَ  
شَمَاءَتِيَّا مُوسَى الْكِتَابَ تَسْمَعَ أَعْلَى الْرَّى  
أَحْسَنَ وَقْصِيلَكَ لِكُلِّ شَيْءٍ وَهُدَى وَرَحْمَةً لِعَلَّهُمْ يَلْقَأُونَ  
رَبِّهِمْ بُوْقُونُونَ  
وَهَذَا كِتَابٌ ازْنَنَهُ مُبَارِكٌ فَاتَّبِعُوهُ  
وَاتَّقُوا عَلَدَكُمْ تَرْحُمُونَ  
أَنْ تَقُولُوا إِنَّمَا أُنْزِلَ الْكِتَابُ  
عَلَى طَالِيفَتِينَ مِنْ قَبْلِنَا وَإِنْ كُنَّا عَنْ دِرَاسَتِهِمْ لَغَافِلِينَ  
أَوْ تَقُولُوا لَوْلَا أَنْزَلَ اللَّهُ الْكِتَابَ لَكُنَّا أَهْدَى  
مِنْهُمْ فَقَدْ جَاءَكُمْ بَيْنَهُمْ مِنْ رَبِّكُمْ وَهُدَى وَرَحْمَةً  
فَنَّ أَظَلَّمُ مَنْ كَذَّبَ بِآيَاتِ اللَّهِ وَصَدَّفَ عَنْهَا سَنْجَرِي الَّذِينَ  
يَصْدِفُونَ عَنْهُمْ آيَاتِنَا سُوءُ الْعَذَابِ بِمَا كَانُوا يَصْدِفُونَ

١٤٩

152. Oo ha u dhowaannina maalka agoonta sida u fican maahee, jeer uu gaaro da'diisa tabar galka iyo xoogga; oo u oofiya si dhan beeggidda iyo miisaanka oo caddaalad ah - Ma saarno nafna waxaan ahayn karaankeeda; oo markaad hadleysaan haddaba ahaada caadil haba ahaatee qaraabo dhow (lidkeed), oo oofiya Axdiqa Ilahay; (arrin)kani buu idinku farad yeelay, bal inaad xusuusataan.

153. Oo (ogow) in kani yahay Jidkaya midka toosan ee raaca, oo ha raacina jidadka kale, oo idinku duwi doona Jidkiisa. (arrin)kani buu idinku faral yeelay si aad uga dhowsataan (xumaha).

154. Misna, Waxaan siinnay Muuse kitaabka (Towraadda), si aan ugu iltirno (Galladayada) korkiisa kan sama falay, oo ka yeelaya caddaan wax waliba oo hanuun iyo Naxariis ah, si ay la kulanka Rabbigood u rumeyyaan.

155. Oo kani waa Kitaab aan soo waxyoonnay, barakeysan ee raaca oo iska jira (xumaha), si la idiinku naxariisto.

156. Si aydaan u oran: Waxaa uun Kitaab loo soo waxyooday labo qolo oo naga horreeyay, oo innagu waxaan aheyn run ahaan kuwo moog waxa ay akhristeen.

157. Ama aydaan u oran: Haddii Kitaab naloo soo waxyoodo, waxaan hubaal ahaan lahayn kuwo ka hanuunsan iyaga. Haatan xaqiq waxaa idiinka yimid Xujo Cad xagga Rabbigii, iyo hanuun iyo naxariis. Ee yaa ka gef badan mid beeniya Aayadaha Ilahay oo ka jeesada xaggooda? Waxaan ku abaal marin doonaa kuwa ka jeesta Aayadahayaga cadaab xun, ka jeesigooda (Aayadaha) darteed.

**158.** Ma waxay haddaba sugaan waxaan ahayn inay u timaaddo malaa'igtu, ama Rabbigaa yimaado, ama qaar ka mid ah calaamooyinka Rabbigaa yimaadaan. Maalinta ay qaar ka mid ah Calaamooyinka Rabbigaa yimaadaan, wax uma tarto naf iimaankeedu iyadoo aan horay u rumeyn, ama aan ku kasban iiamaakeeda khayr. Dheh: Suga idinku, innaguna (sidoo kale) waan sugaynaa.

**159.** Hubaal, kuwa u qaybshay diintooda firqooyin oo noqday dariqooyin, waxba isuma kiin gelin. Arrinkoodu wuxuu uun la jiraa Allaah, markaasuu wuxuu u sheegi doonaa waxay faleen.

**160.** Qofkii la yimaada camal san, wuxuu mudan doonaa tobantaa laabkeed wax la mid ah, oo qofkii la yimaada camal xun, waxaa lagu abaal marin doonaa mid la mid ah, iyagoo aan lagu gardarroon doonin.

**161.** Dheh: Hubaal, aniga Rabbigay wuxuu igu hanuuniyey Jid(ka) Toosan, (xagga) diin aad u sugar, diintii Ibraahiim, toosnihii. oo kama mid aheyn mushrikiinta.

**162.** Dheh: Hubaal salaaddayda, gowracayga, hannaanka noolaanshaheyga, iyo geeridaydaba waxaa (dhammaan) iska leh Allaah, Rabbiga uunaka oo idil.

**163.** Ma leh wax shariik ah. Oo (arrin)kan baa la I amray, oo Waxaan ahay anigu kan ugu horreeya kuwa (u) hoggaansan (Allaah).

**164.** Dheh: Ma waxaan doontaa Rabbi aan aheyn Allaah? Isagoo ah Rabbiga wax walba; oo naf walba waxa ay kasbato (oo dembi ah) waa dusheeda, oo qof culaabi saaran tahay ma qaadi doono culaabta qof kale. misna waa xagga Rabbigiin meel noqodiinnu, markaasuu wuxuu idiin sheegi doonaa waxaad isku khilaafteen.

**157.** Kuwa raaca Rasuulka-Nabiga Ummiga ah oo ay ka helayaan isagoo ku qoran agtooda Tawraadda iyo Injiilka-kaasoo amra wanaagga oo ka reeba xumaanta, oo u xalaaleeya waxyaalaha wanaagsan oo ka xaaraameeya Waxyaalahaa xun oo ka dejiya culayskooda iyo xargihii korkooda ahaa<sup>(5)</sup> Ee (ma) kuwa rumeeya ee sharfa, ee u gargaara ee raaca Nuurka lala soo diray, waa kuwaa liibaanayaasha.

**158.** Dheh: Dadow! Hubaal anigu waxaan ahay Rasuul Ilaahay ee loo soo diray idinka oo dhan, Kaasoo iska leh boqortooyada (runta ah ee) samooyinka iyo arlada. Ma jiro Ilaah Isaga Maahee; Waa Isaga Kan bixiya nolosha oo sababa geerida. Ee rumeeya Allaah iyo Rusuulkiisa, Nabiga Ummiga ah ee rumeysan Allaah iyo Kelmadihiisa, oo raaca si aad u hanuuntaan.

**159.** Oo dadkii Muuse waxaa ka mid ahaa qayb ku hanuunineysey (dadka) si xaq ah oo ku oogayey caddaaladda.

وَكَسْتَ لَنَا فِي هَذِهِ الدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِي الْآخِرَةِ  
إِنَّا هَدَنَا إِلَيْكَ قَالَ عَدَانِي أُصِيبُ بِهِ مَنْ أَشَاءَ وَرَحْمَتِي  
وَسَعَتْ كُلُّ شَيْءٍ وَفَسَكَتْهُمَا لِلَّذِينَ يَتَّقُونَ  
الرَّحْمَةُ وَالَّذِينَ هُمْ بِعَاتِكَنَا يُؤْفَوْنُ<sup>(5)</sup> الَّذِينَ يَسْعَوْنَ  
الرَّسُولُ أَنْتَيْ أَلْأَمِنِي الَّذِي يَجِدُ وَهُوَ مَكْتُوبٌ عَادِهُ  
فِي الْأَقْوَرَةِ وَلَا إِنْجِيلٌ يَا مُرْهُومٌ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَا هُوَ  
عَنِ الْمُنْكَرِ وَيَجْعَلُ لَهُمُ الظَّبَابَتَ وَيَنْهَا عَنْهُمْ  
الْحَيَاةِ وَضَعْنَعُ عَنْهُمْ إِصْرَهُمْ وَالْأَغْلَالُ الَّتِي كَانَتْ  
عَلَيْهِمْ فَأَلَّا يَرَوْهُ وَعَزَّزَهُ وَصَرَّهُ وَأَنْبَعُوا  
النُّورَ الَّذِي أَنْزَلْنَا مَعَهُ وَأَوْلَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ<sup>(5)</sup>  
قُلْ يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّ رَسُولَ اللَّهِ أَيَّمُكُمْ جَمِيعًا الَّذِي  
لَهُ مُمْلَكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْأَعْلَمُ  
فَإِنَّمَا يُأْمُرُ اللَّهُ وَرَسُولُهُ الَّذِي أَلْمَنِي الَّذِي يُؤْمِنُ بِاللَّهِ  
وَكَلِمَتِهِ وَلَا يَعْمُودُ لَعَلَّكُمْ تَهَتَّدُونَ<sup>(5)</sup> وَمِنْ  
قَوْمٍ مُّسَاجِّنِي أُمَّةٌ يَهْدُونَ بِالْحَقِّ وَبِهِ يَعْدُلُونَ

5. Shareecada Nabi Muxammad ma leh iskallifaad culus oo adag sida xilka adag ee la saaray ilmihi Israa'iil. Haddii aynu tusaale ka bixinno taa waxaa sharcigooda ka mid ahaa in la dilo qofka si ay u ansaxdo toobadiisa, iyo in la dilo qofkii qof dila ha u dilo kas iyo ula kac am ula kac la'aan, iyo in la gooyo xubinta uu ka sameeyo xumaanta, in la gooyo marada meeshii ay najaaso gaarto.

وَقَطَعَتْهُمْ أَنَّتِي عَشَرَةَ سَبَاطًا أَمَّا وَفَحِينَا إِلَى  
مُوْتَحِّي إِذَا أَسْتَسْقِمْهُ قَوْمٌ أَنْ أَضْرِبَ بِعَصَابَ الْجَبَرِ  
فَأَنْجَسَتْ مِنْهُ أَثْنَتَعَشَرَةَ عَيْنًا قَدْ عَلَمَ كُلُّ أَنَّانِ  
مَسْرَبَهُمْ وَظَلَّلَنَا عَلَيْهِمُ الْعَمَمْ وَأَنْزَلْنَا عَلَيْهِمُ  
الْمَنْ وَالسَّلَوَى كُلُّ أَمْنٍ طَبِّيَّتْ مَارَرَقَتْ كُمْ وَمَا  
ظَلَمُونَا وَلَكِنْ كَانُوا نَفْسَهُمْ يَظْلِمُونَ<sup>(١)</sup>  
وَإِذْ قِيلَ لَهُمْ أَسْكُنُوهُنَّهُ الْقُرْبَةَ وَكَلُّ أَمْنَهَا  
حَيْثُ شِئْتُمْ وَقُولُوا حَظَّةً وَادْخُلُوا الْبَابَ سُجَّدًا  
نَغْرِرَكُمْ خَطِيْعَتْ كُمْ سَزِيدَ الْمُحْسِنِينَ  
فَيَكَدَ الْبَرِّ ظَلَمُوا مِنْهُمْ فَلَا عَيْرَ لِلَّذِي قِيلَ<sup>(٢)</sup>  
لَهُمْ فَأَنْسَلْتَهُمْ رِجَارِيَّتْ السَّمَاءِ بِمَا كَانُوا  
يَظْلِمُونَ<sup>(٣)</sup> وَسَعَاهُمْ عَنِ الْقُرْبَةِ أَلَّا كَانَتْ  
حَاضِرَةً الْبَحْرِ إِذْ يَعْدُونَ فِي الْسَّبَّتِ إِذَا تَأْتِيهِمْ  
حِيَانَهُمْ بَوْرَسَيْهِمْ شَرْعًا وَقَمْ لَا يَسْتَوْنَ لَأَنَّتِيهِمْ  
كَذَلِكَ بَتُوْهُمْ بِمَا كَانُوا يَفْسُدُونَ<sup>(٤)</sup>

١٧١

hadal ka duwan midkii lagu yiri<sup>(7)</sup>. Markaas baan kaga soo dejinnay cirka cadaab gefefkii ay galeen awgeed.

**163.** Oo wax ka weydi magaaladii ku ag tiil badda, markay ku xad-gudbeen arrinkii (Maalinta) Sabtida, iyadoo uu yimaado kalluunkoodu maalinta Sabtidooda isagoo muuqda, oo maalinta aanay Sabti ahayn uma yimaado. Sidaas baan ugu imtixaannay caasintoodii awgii.

**160.** Oo Wuxaan u qaybinnay labo iyo tobani qabiilood oo ummado ah. Oo Wuxaan u Waxyoonaay Muuse markay dadkiisii weydiisteen biyo (wuxaan ku niri): Ku dhufo dhagaxa ushaada, markaasaa waxaa kolkiiba ka soo burqaday labo iyo tobani illood: qolo walba waxay ogaatay meeshay biyaha ka cabbi laheyd. Oo Wuxaan ka yeelney daruuraha inay harsiyaan dushooda, oo ku soo dejinnay Manna (wax macaan oo malab sidi ah) iyo Salwaa (hilib shimbir wanaagsan-Samaan): Wax ka cuna waxyalaaha wanaagsan ee aan idin siinnay. Oo waxba nooma dhimin, laakiinse waxay u gafeen nafahooda.

**161.** Oo markii lagu yiri: Dega magaaladan (Qudus)<sup>(6)</sup> oo wax ka cuna meeshaad doontaan, oo dhahaya, 'Allow naga' rid culayska na saaran'; oo gala alaabka idinkoo hoggaansan, Waa idiin dhaafi doonnaa gefefkiina: Waa aan u ziyaadin doonnaa (abaalgudka) sama falayaasha.

**162.** Waxayse kuwoodii ka midka ahaa ee gefka falay ku beddeleen

6. Magaalada Eliyah (Qudus) ee ku taal gacanka badda cad ee u dhexeysha magaalada Madyan iyo buurta Siinaay.

7. Waxaa la amaray inay yiraahdaan xiddah Allow noo dambi dhaf, waxayse u beddeleen jeesjees ahaan inay yiraahdaan xindah gallay tin ku jirta,

**164.** Oo markay qolo ka mid ahi tiri: Maxaad u waanineysaan dad uu Allaah halligi doono, ama ku cadaabi doono cadaab daran? Waxay yiraahdeen: Waa si aan eed naloogu raacan Rabbigii horti, iyo bal inay ka joogaan (xumaha).

**165.** Haddaba markii ayan dan u gelin waxa lagu waaniyey, Waxaan badbaadinnay kuwii reebayey xumaanta, oo waxaan ku dhignay kuwii gefka galay cadaab daran caasinta ay faleen awgi.

**166.** Sidaas awgeed markay ku madax adeygeen waxa laga reebayey, waxaan ku niri: Noqda (sida) daayerro, dulleysan oo dayra ah.

**167.** Oo (xus) markuu Rabbigaa ogeysiyyey inuu hubaal ku soo dirayo ilaa Maalinka Qiyaamaha kuwo dhadhanssiinaya cadaabka ugu xun. hubaal Rabbigaa xaqiq waa ku Dhakhsii Badan yahay Ciqaabka, oo hubaal Isagu xaqiq waa Dambi Dhaaf iyo Naxarii Badan yahay.

**168.** Oo waxaan ugu kala googaynay arlada iyagoo qaybo ah, waxaa ka mid ah kuwo wanaagsan iyo kuwo (kale) oo ka mid ah aan sidaas ahayn. Oo waxaanu ku imtixaannay (waqtio) wanaagsan iyo (waqtio) xun bal inay soo laabtaan.

**169.** Markaa baa waxaa yimid iyaga kaddib dad (xun) oo dhaxlay Kitaabka oo qaadanaya waxyaalaha (aan bannaaneyn ee) nolosha tani soke (ee adduunyada), iyagoo leh: waa naloo dambi dhaafi doonaa. oo misna haddii uu u yimaado (mar kale) alaaboo (raaxo adduunyo aan bannaaneyn) oo la mid ahi, way qaadanayaan (sidoo kale). Miyaan lagaga qaadin ballan Kitaabka in aanay ka sheegin Allaah waxaan ahayn xaq, iyagoo akhristay waxa ku yaalla (Kitaabka), oo Daarta Aakhire baa u khayr badan kuwa iska ilaasha (xumaha). Ee miyeydaan haddaba wax fahmeyn?

**170.** Oo kuwa qabsada Kitaabka oo ooga salaadda, hubaal Annagu Marnaba ma dayacno abaalgudka kuwa camalkooda hagaajiyaa.

فَإِذْ قَاتَ أَمَّةٌ مِّنْهُمْ لَهُمْ يَعْظُونَ قَوْمًا أَلَّا مُهَلِّكُهُمْ أَوْ عَدُوٌّ لَّهُمْ  
عَذَابًا سَيِّدَ الْأَوْمَعَدَرَةَ إِلَى رَبِّكَ وَلَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿١٦٦﴾  
فَلَمَّا سَوَّمَا مَادًّ كَرُوا بِهِ أَجْبَحَنَا الَّذِينَ يَهُوَتْ عَنِ السُّوءِ  
وَأَخْذَنَا الَّذِينَ ظَلَمُوا بَعْدَ أَبْيَسْ يَمَاكِثُوا فَيَقُولُونَ ﴿١٦٧﴾  
فَلَمَّا تَقْتُلُوا نَفَاهُو عَنْهُ فَقْتَلَهُمْ كُوْنُو فَقْرَدَهُ حَسَيْنَ  
وَإِذْ تَأْذَنَ رَبِّكَ لِيَجْعَلَنَّ عَلَيْهِمْ إِلَى تَوْهِ أَقْيَمَةً مِّنْ سُوْمُهُمْ  
سُوْءَةَ الْعَذَابِ إِنَّ رَبَّكَ لَسَرِيعُ الْعِقَابِ وَإِنَّهُ لَغَفُورٌ رَّحِيمٌ  
وَقَطَعْتُهُمْ فِي الْأَرْضِ أَمْمَانَهُمْ أَصْلَاحُونَ وَمَنْهُمْ  
دُورُتْ ذَلِكَ وَبَأْتُهُمْ بِالْحَسْنَاتِ وَالْسَّيِّئَاتِ لَعَلَّهُمْ  
يَرْجِعُونَ ﴿١٦٨﴾ فَلَمَّا كَلَّ مِنْ بَعْدِ هُمْ خَافُوا وَرَفِوْا الْكِتَابَ  
يَأْخُذُونَ عَرَضَ هَذَا الْأَذْنَى وَيَقُولُونَ سَمِعْرَلَانَوْنَ  
يَأْتِيهِمْ عَرَضٌ مُّثْلُهُ، يَأْخُذُوهُ الْوَرْقَدَ عَلَيْهِمْ مِّيشَ الْكِتَابَ  
أَنْ لَا يَعْلُوْعَلَى اللَّهِ إِلَّا الْحَقُّ وَرَسُوْلُهُ مَفِيفٌ وَالدَّارُ الْآخِرَةُ  
خَيْرٌ لِّلَّذِينَ يَسْتَقُرُونَ ﴿١٦٩﴾ أَفَلَا تَعْقِلُونَ وَالَّذِينَ يُمْسِكُونَ  
بِالْكِتَابِ وَقَامُوا الصَّالُوْلَةَ إِلَى لَأْنْصِيمُ أَجْرُ الْمُصْلِيْمِ ﴿١٧٠﴾

\*وَإِذْ نَسَقْنَا لِجْلَقَ قَوْفَهُمْ كَانَهُ طَلْهَ وَطَنْرُوا أَنَّهُ رَاقِعٌ بِهِمْ  
 خُدْوَأَمَاءَ اتَّيْتُكُمْ بِقُوَّةً وَإِذْ كُنْتُمْ أَمَافِيَهُ لَعَدَكُمْ تَقْرُونَ  
 وَإِذْ أَخْذَرْتُكُمْ مِنْ بَنِي إِعَادَمْ مِنْ طُلْهُرْهُو دُرْبَرِيَّهُمْ وَأَشَدَهُمْ  
 عَلَىَنَفْسِهِمْ أَسْتَبَرْتُكُمْ كَأَلْوَبِي شَهَدْنَا أَنْ تَقْرُلُوا بَوْمَ  
 الْقِيمَةِ إِنَّا كَنْتَنَا عَنْ هَذَا عَقِيلَيْنَ (v) أَوْ تَقْرُلُوا إِنَّا شَرَكَ  
 ءَابَأَوْ أَمَنْ قَبْلَ وَكُنْتَدِرِيَّةَ مِنْ بَعْدَهُمْ أَفْتَهَلَكُنْا  
 يَمْفَاعِلُ الْمُبْطَلُونَ (v) وَكَذَلِكَ تَعْصِلُ الْأَيْتَ وَلَعَاهُمْ  
 يَرْجِعُونَ (v) وَأَنْلَ عَلَيْهِمْ بَأْلَدِيَّهُ اتَّيْنَهُ إِلَيْتَنَا فَأَسْلَحَ  
 مِنْهَا فَأَتَبَعَهُ الشَّيْطَلَنْ فَكَانَ مِنَ الْغَاوِينَ (v) وَلَوْسِنَّا  
 لَرْفَعَهُ بِهَا وَلَكِنَّهُ أَخْلَدَ إِلَى الْأَرْضَ وَلَسَعَهُو نَهَيَهُ مَقْتَلَهُ  
 كَمَلَ الْكَلْبُ إِنْ تَحْمِلُ عَلَيْهِ يَاهَثَتْ أَوْتَرْكَهُ  
 يَاهَثَ دَلَّاكَ مَثْلُ الْقَوْمِ الْلَّذِينَ كَذَلِو بِيَاهَتَنَا فَأَقْصَصَ  
 الْقَصَصَ لَعَاهُمْ يَتَفَكَّرُونَ (v) سَاءَ مَثَلًا الْقَوْمِ الْلَّذِينَ  
 كَذَلِو بِيَاهَتَنَا وَلَنْسُهُمْ كَأَوْأَظْلَلُونَ (v) مَنْ يَمْهَدُ اللَّهَ  
 فَهُوَ أَمْهَتَدٌ وَمَنْ يُضْلِلُ فَأَوْلَئِكَ هُمُ الْخَاسِرُونَ (v)

WA

١٧٣

siibtay iyagii oo sheydaan duufsaday, ee ka mid noqday kuwa habowsan.

**176.** Oo haddaan doonno kor ayaan hubaal ugu soo qaadi laheyn, laakiinse dhulka buu isku dhajiye oo uu raacay wawa (liita) ay naftu rabto. Marka waxaa uu ka dhigan yahay sida Eeyga, haddaad eryato carrabka laalaadsha; haddaad iska deysana laalaadsha carrabkiisa; (arrin) kani waa mataalka dadka beeniya Aayadahayaga. Ee uga sheekhee sheekooyinka bal inay fakaraan.

**177.** Xumaa mataalka dadka beeniya Aayadahayaga, oo ah kuwa gef ka gala nafahooda.

**178.** Qofkii Allaah hanuuniyo uun baa ah kan hanuunsan, oo qofkii uu sababo inuu habaabo, waa kuwan ku sugar khasaarada weyni.

8. Si aanay u oran mushrikiinta in aabbayaashhood ay yihiin kuwa la wadaajiyey cid kale (cibaadada) Allaah. Mana ay garaneyn inuu shirkigu yahay dambi iyo gef weyn iyo gardarro, ma garanayn dariiq kale aan ahayn inay raacaan aabbayaashhood, sida awgeed waxay iyagu qabaan inaysan mudneyn cadaab sbabta gefka aabbayaashhood.

**179.** Oo Waxaan xaqiq u abuurnay Naarta in badan oo ka mid ah jinka iyo dadka. Waxay leeyihii quluub aysan wax ku fahmin, oo waxay leeyihii indho aysan wax ku arag, oo waxay leeyihii dhego aysan wax ku maqal. Waa sida xoolo oo kale, mayee waa bay ka sii habow daran yihiin; kuwan waa kuwa dhoohan.

**180.** Oo Allaah baa iska leh Magacyada wanaagga badan. Ee ku barya, oo iskaga taga kuwa leexsha ee ku xadguba xurmadda Magacyadiisa<sup>(9)</sup>. Waa laga abaal marin doonaa, waxay faleen.

**181.** Oo waxaa ka mid ah waxa aan abuurnay ummad wax ku hanuunisa xaqa, oo ku ooga caddaaladda.

**182.** Oo kuwa beeniya Aayadahayaga, waxaan ugu soo dhoweyn (baabba'a) si heerar ah (oo ka qaban doonnaa) meel aanay ogeyn.

**183.** Oo Waxaan siinaya a fursad, hubaal Tabteydu waa sooh adag tahay.

**184.** Ma waysan ka fekereyn inaan saaxiibkood qabin wax waalli ah. Wax kalena maahee waa dige iska cad.

**185.** Miyaanay u fiiran boqortooyada samooyinka iyo arlada iyo wax kastoo uu Allaah abuuray, iyo in laga yaabo in muddadoodu soo dhowaatay, ee hadalkee bay haddaba rumaynayaan kani kaddib?

**186.** Qofkii Allaah lumiyoo ma leh hanuuniye; oo wuxuu ku daayaa xad-gudubkooda ay ku jaha wareersan yihiin indha' la' aan.

**187.** Waxay ku weydiyaan Saacadda goorma ayey dhici doontaa? Dheh: Cilmigeedu Rabbigay keliya bay la jirtaa. Ma jiro waxaan Isaga ahayn oo muujin doona iyada waqtigeeda loo qabtay. Waxay ahaan doontaa wax ku culus cirarka iyo dhulka (arrinkeedu). Idiinkuma imaan doonto waxaan aheyn kedis. Waxay kuu weydiyaan sidiyyoo aad adigu cilmi dheer u leedahay. Dheh: Cilmigeedu waxaa uu la jiraa oo keliya Allaah, laakiinse badankooda dadku ma ogsoona.

<sup>9</sup>. *Ha siin wax tixgelin ah iyo mudnaan oo isaga tag kuwa ku caabuday Allaah xusid magacyo aan ku haabboneyn sida Kiristhaanka oo ugu yeera : aabbe” iyo mushrikiinta Carbeed ee ugu yeera Laat, Cuzzaa, iyo Manaat, iwm magacyadaasoo aan ku haabbooneyn Allaah ama magacyada wanaagsan ee Ilaahay inay beddelaan macnahooda ama sisafoodaa oo ku fasiraan waxaalo kale sida inay Gacanta Ilaahay ku fasiraan nicmad, Imaanashaha Ilaahayna, ku fasiraan imaanshaha Amarkiisa, iwm, taasoo aan bannaaseeyn.*

قُلْ لَا أَمْلِكُ لِنَفْسِي نَفْعًا وَلَا ضَرًّا إِلَّا مَا شَاءَ اللَّهُ وَلَوْكُنْتُ  
 أَعْلَمُ عَيْبَ لَا سَتَكْرُتُ مِنَ الْخَيْرِ وَمَا مَسَنِيَ السُّوءُ  
 إِنَّمَا إِلَّا اِنْتِرِ وَبَشِّرْ لِقَوْمٍ مُّؤْمِنِينَ ﴿١﴾ هُوَ الَّذِي خَلَقَكُمْ  
 مِّنْ قَرْبَسٍ وَجَدَوْهُ وَجَعَلَ مِنْهَا وَجْهًا لِسُكُنٍ إِنَّمَا قَلَمَّا  
 تَعْشَشُهَا حَمَّاتٌ حَمَّالَخَيْرٍ فَأَمْرَتُ بِهِ فَلَمَّا أَنْفَقْتُ دَعَوْا  
 اللَّهَ رَبَّهُمَا إِلَيْنِي أَتَيْتُنَا صَلِيلًا حَنَّكُونَ مِنَ الشَّلَكِينَ ﴿٢﴾  
 فَلَمَّا آتَيْتُهُمَا صَلِيلًا حَاجَعَلَهُ وَشَرَكَاهُ فِيمَا آتَيْتُهُمَا فَتَعَلَّلَ  
 اللَّهُ عَمَّا يُشَرِّكُونَ ﴿٣﴾ إِنَّمَا كُونُ مَا لَا يَخْنُقُ سَيِّئًا وَهُمْ يَخْلُقُونَ  
 ﴿٤﴾ وَلَا يَسْتَطِعُونَ لَهُمْ نَصْرٌ وَلَا نُفْسُرُهُمْ يَنْصُرُونَ  
 وَإِنْ تَدْعُهُمْ إِلَى الْهُدَى لَا يَتَبَعُونَ سُوءَ عَلَيْكُمْ كُلُّ دُعَوْهُمْ  
 أَمَّرَأَنْتُمْ صَمِيْتُونَ ﴿٥﴾ إِنَّ الَّذِينَ نَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ عَيْدَادٌ  
 أَمَّا الْكُمْ فَأَدْعُوهُمْ فَلَيَسْتَجِبُوا لَكُمْ إِنْ كَنْتُمْ  
 صَدِيقِينَ ﴿٦﴾ أَلَهُمْ أَرْجُلٌ يَمْشُونَ بِهَا أَلَهُمْ أَيْدٍ يَطْشُونَ  
 بِهَا أَلَهُمْ أَعْنُونَ بَصَرُوتَ بِهَا أَلَهُمْ إِذَا نَتَسْعَونَ  
 فَلَا قِلْ أَدْعُو سُرَكَاءَ كُثُمَ كَيْدُونَ فَلَا تَنْظُرُونَ

**188.** Dheh: Ma lihi awood aan wax ku taro ama ku waxyeelleeyo naftayda wawa Allaah doono ma'ahee. Oo haddaan ogaan lahaa cimi Ghaybka, waxaan badsan lahaa khayrka, oo wax xume ah ima taabteen. Anigu waxaan ahay oo keliya u dige iyo mid war san u sida dad rumeysan.

**189.** Isaga weeye Kan idinka abuuray naf keliya oo isla (caynkaa) ka yeelay lammaanahiisa, si uu u weheshado. Oo markuu ku hagoogto bay qaaddaa uur yar, oo halkaas ka sii waddo, markase ay cuslaato, waxay labaduba baryaan Allaah, Rabbigood, (oo ay yiraahdaan): Haddii aad na siiso (dhal) wanaagsan, waxaanu hubaal ka mid noqon doonaa kuwa mahad naqa.

**190.** Markase uu siyyo dhal hagaagsan, waxay ugu yeelaan shariigyo waxa uu siiyey<sup>(10)</sup>. wuuse ka sarreeyaa Allaah waxa ay u shariig yeelaan.

**191.** Ma waxay uga dhigayaan shariig waxaan waxna abuurin, oo iyagu naf ahaantooda la abuuray?

**192.** Oo aan u gargaari kareyn, bal aan nafahooda u gargaari karin.

**193.** Oo haddaad ugu yeerto hanuun aan idin raaci doonin. Waa isugu kiin mid haddaad u yeertaan ama aad ka amustaan.

**194.** Hubaal kuwa aad baridaan Allaah sokadi waa addoomo idin la mid ah. Ee bal barya ha idiin ajiibaane haddaad tiihiin run sheegayaal.

**195.** Ma waxay leeyihii cago ay ku socdaan? Mise waxay leeyihii gacmo ay wax ku qabsadaan? Mise waxay leeyihii indho ay wax ku arkaan? Mise waxay leeyihii dhego ay wax ku maqlaan? Dheh, U yeerta shurakadiinna oo ii tab dhigta, oo ha i siinnina wax nafis ah.

**10.** *Mushrikiinta waxay ka yeeleen ilmahooda uu abuuray Allaah addoomo ay leeyihii asnaamta, sida awgeed bay waxay u bixiyeen magacyo aan bannaaneyn sida Cabdul Cuzzaa iyo Cabdiul Manaat iyo Cabdus-Shams, iwm*

**196.** Hubaal, Gargaaraheyga i lib siinayaawaa waa Allaah ee ah Kan soox waxyooday Kitaabka, oo Isagaax xafida kuwa hagaagsan.

**197.** Oo kuwa aad u yeerataan sokadi, ma karaan gargaarkiinna, nafahoodana uma gargaari karaan.

**198.** Oo Haddaad ugu yeertaan hanuun, ma maqlaan, oo waxaad aragtaa iyagoo ku soo eegaya, oo haddana aan waxba arkayn.

**199.** Qaado saamaxaadda. Oo amar samaanta, oo ka jeeso jaahiliinta.

**200.** Oo Hadduu fikrad xun kugu waswaas geliyo shaydaan, ka magan gal Allaah. Isaga baa ah wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

**201.** Hubaal, kuwa ka cabsada Ilaahey, markay taabato meerto Shaydaan, way ku baraarugaan oo kolkiiba (xaqa) arkaan.

**202.** Walaalahood se (dadka xun), waxay (shaydaammadu) u kordhiyaan habow, markaa innaba kama gaabiyaan.

**203.** Oo haddaad ula iman weydo calaamo waxay yiraahdaan: Maxaad u been abuuran weydey? Dheeh: Wuxaan anigu sideedaba raacaax waxa uun la iiga waxyoodo xaggaa Rabbigay. Kuwakani waa caddeymo ka yimid Rabbigii, oo u ah hanuun iyo naxariis dad rumaysan.

**204.** Oo marka Qur'aanka la akhriyo markaa dhegastyaa oo aamusaa, si la idiinku naxariisto.

**205.** Oo xus Rabbigaa naftaada gudaheeda si haybaysi iyo cabsi leh adigoon kor ugu qaadeyn codka aroor iyo galabba oo ha ka mid noqon kuwa dhoohan.

**206.** Hubaal, kuwa ah Rabbigaa agti marnaba iskama weyneeyaan cibaadadiisa, oo way nazahaan oo xurmo weyneeyaan, oo Isaga bay u sujuudaan<sup>(11)</sup>.

<sup>(11)</sup> Tani waa mid ka mid ah Aayadaha la sujuudo marka la akhriyo, waa sida wanaagsan ee door roon in la sujuudo marka la akhriyo Aayad sajda leh, laakiinse ma aha waajib in la sujuudo marka la akhriyo ama la maglo ha ahaato salaad gudaheed ama debbedeed, waxaana sujuuddan la yiraahdaa sujuud at-tilaawah.

## شُورَةُ الْأَنْفَالِ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
يَسْتَأْنُونَكُمْ عَنِ الْأَنْفَالِ قُلْ أَلَا أَنْفَالُ اللَّهِ وَالرَّسُولُ فَأَنْفَالُ اللَّهِ  
وَأَصْبَحُوا دَاتَ بَيْنَكُمْ وَأَطْبَعُوا اللَّهُ وَرَسُولَهُ إِنْ كُنْتُمْ  
مُؤْمِنِينَ ۝ إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ أَذْدَادُكُمْ اللَّهُ وَرَحْمَتُ  
قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلْيَتُ عَلَيْهِمْ آيَتِنَا زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَى رَبِّهِمْ  
يَوْكَلُونَ ۝ الَّذِينَ يُقْسِمُونَ الصَّلَاةَ وَمَا زَرَقُوهُمْ  
يُنْفِقُونَ ۝ أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقًا لَهُمْ دَرَجَتُ  
رَبِّهِمْ وَمَغْفِرَةً وَرَزْقًا ۝ كَمَا أَخْرَجَكُمْ  
مِنْ بَيْنَكُمْ بِالْحَقِيقَةِ وَإِنْ فَرِيقًا مِنَ الْمُؤْمِنِينَ لَكَرْهُونَ ۝  
يُجَدِّلُونَكُمْ فِي الْحَقِيقَةِ بَعْدَ مَا تَبَيَّنَ ۝ كَمَا نَسَاقُونَ إِلَى الْمَوْتِ  
وَهُمْ يَنظُرُونَ ۝ وَإِذَا يَعْدُكُمُ اللَّهُ إِحْكَمَ الظَّاهِرَاتِ  
لَكُمْ وَتَوَدُّونَ أَنْ يُغَيِّرُوا دَارَتَ الشَّوْكَةِ تَذَكُّرٌ لَكُمْ وَرِيدٌ  
اللَّهُ أَنْ يُحِقَّ الْحَقَّ وَيُبَطِّلَ الْبَطْلَ وَلَوْكَةَ الْمُجْمُونَ ۝  
لِيُحْكِمَ الْحَقَّ وَيُبَطِّلَ الْبَطْلَ وَلَوْكَةَ الْمُجْمُونَ ۝

١٧٧

## Suuradda 8 Al-Anfaal

Waa 75 Aayoodood: Madaniyyah  
Bismillaahir Raxmaanir Raxiim

1. Waxay wax kaa su'aalaan (xukunka qaniimooyinka (dagaalka). Dheh, (go'aanka ku saabsan qaybinta) Qaniimooyinka waxaa iska leh Allaah iyo Rasulka. Ee dhowna (xiila uu idin saaray) Allaah oo hagaajiyaa (xalleeya) waxa idhiin dhexeeyaa oo khilaafaadkiinna ah, oo adeeca Allaah iyo Rasuulkiisa, haddaad tiihiin mu'miniin.

2. Sideedaba mu'miniintu waa uun kuwa ay baqo ka buuxsanto quluubtoodu marka la xuso Allaah, oo marka Aayadahiisa loo akhriyo ay u kordhiyaan iimaan; oo Rabbigood (Keliya) isku halleya.

3. Kuwa hagaajiyaa salaadda oo waxa aan siinnay wax (fican) ka bixiya.

4. Kuwaasi waa mu'miniinta runta ah. Waxay ku mudan darajooin sharaf iyo maamuus ah Rabbigood agtiis, iyo dambi dhaaf iyo risiq aad u wanaagsan.

5. Weliba sida uu Rabbigaa kaaga bixiyey gurigaaga si xaq ah, inkastoo qaar ka mid ah mu'miniinta ay hubaal kahanayeen.

6. Waxay kaala doodeen<sup>(1)</sup> xaga kaddib markuu u caddaaday, ( oo waxay baxeen) sidii iyagoo loo wado dhimasho iyagoo eegaya.

7. Oo (xusuusta) markuu Allaah idhiin ballan qaaday mid ka mid ah labada kooxood inaad heli doontaan, oo waxaad jecleydeen tan aan hubeysnayn inaad heshaan<sup>(2)</sup>, oo Allaah wuxuu doonayey inuu ku sugo xaga kelmedihiisa, oo cirib tiro gaalada.

8. Si uu u sugo Xaqa, oo u buriyo baadilka haba nacbeystaan dambiliayaasha'e.

1. Waxay tilmaameysaa dooddi dhex martay muslimiinta xagga qaybinta qaniimada dagaalka. Allaah wuxuu u qaybshay qaniimooyinka si xaq ah sida uu u amrabya Nabiga s.c.w. inuu kaga baxo guriga oo u aado dagaalka Badar si xaq ah. Ad-Dabari waxaa ku qoran inay ka baxeen guriga iyagoo u socda dagaalka.

2. Abuu Sufyaan wuxuu ka yimid safar Suuriya ah isagoo badeecad aad u tiro badan ka keenay. Qolo hubeynsanna waxay ka yimaadeen xaga Makkah, waxaana hoggaaminayey Cutba bin Rabiicah, iyo Abuu Jahl.

**9.** (xusuusta) markaad gargaar weydiisateen Rabbigin ee uu idinka aqbalay (ee yiri): Waxaan idinku xoojin kun malaa'igta ka mid ah oo is daba joogta.

**10.** Oo Allaah kama yeelin waxaan ahayn war san aad ku faraxdaan, iyo inay ku degaan quluubtiinnu, oo ma jirto guul aan ka imaan xagga Ilaahey. Hubaal, Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

**11.** (xusuusta) markuu sababay inay degganaanasho idinku soo degto, nabaadiino ahaan idiinka timid xaggiisa, oo idinkaga soo dejiyey biyo xagga daruurta, si uu idiinkugu daahiriyo oo idiinkaga bi'iyo waswaaska Shaydaanka, iyo si uu u xoojiyo quluubtiinna, oo idiinku sugo cagaha.

**12.** (xusuusta) markuu Rabbigaa u waxyooday malaa'igta: Anigu waa idin la jiraaye ee qalbi sua kuwa rumeysan. Waxaan ku tuuri doonaa argagax quluuba kuwa gaalada ah, ee ku dhufta luqumaha korkooda, oo ku dhufta xubnaha far kasta oo ay leeyihiin<sup>(3)</sup>.

**13.** Kani waxaa u sabab ah waxay khilaafeen Allaah iyo Rasuulkiisa. Oo qofkii khilaafa Allaah iyo Rasuulkiisa, hubaal, Allaah ciqaabkiisu aad buu u daran yahay.

**14.** (Arrin) kan-bal dhadhamiya, oo (ogow) in gaaladu leeyihiin cadaab dab ah.

**15.** Mu'miniintow! Marka aad la kulantaan gaalada oo duullaan ah dagaal dooni. Markaa ha u jeedininna dhabarrada.

**16.** Oo qofkii u jeediya dhabarkiisa maalintaa-inay tahay maahee xeel dagaal, ama inuu ku biirayo ciidan (uu ka tirsan yahay), -wuxuu xaqiq ku mudan taasi Caro ah xagga Ilaahey, oo hoygiisu waa Naar, oo iyadaa u xun meel la ahaado.

<sup>3.</sup> Tani waxay ka dhacday dagaalka, ujeeddadanu waa gooya qoorta, laakiin haddii u cadowga xирто canbuur bireedyo oo ay adkaato in qoorta la gooya, markaa waxaa la goyn gacanta si uu u qaadi kari waayo hubka, sida seefta, waranka, qoriga, iwm. Sido kale dacallada waxaa loola jeedaa xubnaha gacmahaada tyo cagahooda.

فَلَمَّا هَنَّوْهُمْ وَلَكِنَّ اللَّهَ قَاتَلَهُمْ وَمَا رَمَيْتَ إِذْ رَمَيْتَ  
وَلَكِنَّ اللَّهَ رَمَى وَيَسِّرِي الْمُؤْمِنِينَ مِنْهُ بَلَاءً حَسَنًا  
إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ عَلَيْهِ ذَلِكُمْ وَإِنَّ اللَّهَ مُوْهِنٌ كُلَّ  
الْكَفَّارِينَ إِنَّ اللَّهَ تَسْتَغْفِرُهُ فَقَدْ جَاءَ كُلُّ أَفْسَحٍ وَإِنَّ  
تَنْهَى هُوَ فَهُوَ يَرْجِعُ كُلَّمَا وَإِنْ تَعُودُوا نَعْدُ وَإِنْ تَعْنِيْ تَنْهَى  
فَتَنْهَى كُلُّ شَيْءٍ وَلَوْكَرْتُ وَإِنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُؤْمِنِينَ  
يَتَأْيَاهَا الظَّنِينَ إِمَّا مُؤْمِنٌ أَطْبَعَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَلَا تَنْلُوْعَانَهُ  
وَإِنْ شَرَّ تَسْعَهُونَ وَلَاتَكُونُوا كَالَّذِينَ قَالُوا سَمِعْنَا وَهُوَ  
لَا يَسْمَعُونَ \* إِنَّ شَرَّ الدُّوَّارِيَ عنَّدَ اللَّهِ الْأَصْمَاءَ الْأَبْكَمُ  
الَّذِينَ لَا يَعْقِلُونَ \* وَلَوْعَمَ اللَّهُ فِيهِمْ خَيْرٌ لَا سَمْعَهُمْ  
وَلَوْ أَسْمَعْهُمْ لَتَوَلَّوْهُمْ مَعْرِضُونَ \* يَتَأْيَاهَا الظَّنِينَ  
إِمَّا مُؤْمِنٌ سَجِيْبُ الْيَوْمِ وَلَرَسُولٌ إِذَا دَعَاهُ كُلُّ مَلَائِكَةٍ  
وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَمْوُلُ بَيْتَ الْمَرْءِ وَقَبْلِهِ وَإِنَّهُ وَالْبَشَرُ  
تُخْسِرُونَ \* وَإِنَّهُ فَوْنَانَةٌ لَا تُصِيبُنَ الظَّنِينَ طَلَمُوا  
مِنْ كُلِّ خَاصَّةٍ وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ

١٧٩

17. Haddaba ma aydaan layn idinkuye, laakiinse Allaah baa laayey. Oo adigu ma aad tuurin<sup>(4)</sup> markaad tuurtay (cadowga), laakiinse wuxuu ahhaa Allaah Kan tuuray, oo waa si uu xaggiisa uga jarribo mu'miniinta jarribaad wanaagsan; hubaal Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Og.

18. Arrinkan (waa fal Ilaahey) oo weliba Allaah waa liciifiyaha halganka gaalada.

19. Haddaad dalabteen xukun lagu kala baxo, haatan xukunka xaqiqi waa idiin yimid oo haddaad joojisaaan (colaadda), waa sida idiin khayr badan, oo haddaad ku noqotaan (dagaalka) annagana sidoo kale waan soo rogaal celin doonaa. Oo ciidamadiinnu waxba idiin ma tari doonaan si kastaba hu u tiro badnaadaane, oo (ogaada) in Allaah uu la jiro mu'miniinta.

20. Mu'miniintow! Adeeca Allaah iyo Rasuulkiisa, oo ha ka jeesannina xaggiisa idinkoo maqlaya.

21. Oo ha noqonnina sida kuwii yiri: Waan maqlaynaa, oo aan waxba maqlin.

22. Hubaal, noole waxaa ugu liita Allaah agtii kuwa (ka) dhega la'(xaqa), ee aan (xaq ku) hadlin ee aan waxba garanayn.

23. Oo haddii Allaah uu ku og yahay wax khayr ah, wuxuu ka yeeli lahaa inay maqlaan, oo hadduu ka yeeli lahaa inay wax maqlaan, waa uun sii jeesan lahaayeen iyagoo sii siibanya.

24. Mu'miniintow! Ajiiba (baaqa) Ilaahey iyo Rasuul (kiisa) marka uu idiinku yeero wax idin nooleeya<sup>(5)</sup>, oo ogaada inuu Allaah kala dhex galoo qofka iyo qalbigiisa, iyo in Xaggiisa la idin soo kulmin doono.

25. Oo iska jira fidmo aan ugu dhaceyn si gaar ah kuwiinna idinka mid ah ee xumaha fala<sup>(6)</sup>; oo ogaada in Allaah Ciqaabkiisu uu Daran yahay.

4. *Markii uu Nabigu s.c.w. ku tuuray gacan mugheed oo carro ah wejiyada gaalada, Allaah wuxuu sababay inay buuxiso indhaha iyo sanka askari kasta oo ka mid ah gaalada, taasoo u diiday inay horay u soo dhaqaqaan.*

5. *Wuxuu idiinku yeerayaa jihaadka iyo dagaal galka si ay kor u ahaato Kelmedda Alle oo u cisoobaan muslimiinta, sidoo kale macnaha waxaa weeye wuxuu idiinku yeerayaa iimaanka iyo hanuunka iyo jihaadka, iyo arrin kasta oo lagu liibaano adduun iyo aakhiraba.*

6. *Tani waa digniin in ciqaabta ay mar walba sababteed tahay ku caasinta Ilaahey iyo Rasushiisa.*

**26.** Oo Xusuusta markaad aheydeen kuwo tiro yar oo lagu dacuufsado dhulka, cabsanaya si aan dadku idii kala boobin, markaa suu idin siiyey hoy aamin ah oo idinku xoojiyey Gargaarkiisa, oo idin siiyey wax ka mid ah waxyaalaha wanaagsan, bal inaad mahad naqdaan.

**27.** Mu'miniintow! Ha khayaamina Allaah iyo Rasuulka, oo ha khayaamina ammaanooyinkiinna idinkoo ogsoon.

**28.** Oo Ogaada in maalkiinna iyo carruurtiinu ay yihiin fidmo (imtixaan) iyo in Allaah agtiisa yahay Abaalgud aad u Weyn.

**29.** Mu'miniintow! Haddaad dhwortaan (xilka uu idin saaray) Allaah, Wuxuu idin siin doonaa kala saare (aad ku kala saartaan samaanta iyo xumaanta), oo idinka tirtiri doonaa xumaatooyinkiinna, oo idii dambi dhaafi doonaa, oo Allaah waa Rabbiga iska leh Fadliga aad u Weyn.

**30.** Oo (xusuuso) markay galaadu kuu tab dhigeeen si ay kuu xiraan, ama kuu dilaan ama kuu saaraan debedda; oo way tab dhigeeen, oo Allaah sidoo kale wuu tab dhigay, oo Allaah waa kan ugu wanaagsan inta wax tabeysa.

**31.** Oo Marka Aayadahayaga loo akhriyo, waxay yiraahdaan: Xaqiq waanu maqallay; oo haddaan doonno waxaan oran karnaa waxa uu yiri oo kale. (Waxa)kanina ma aha waxaan ahay sheeko - xariirtii dadkii hore.

**32.** Oo (xusuuso) markay yiraahdeen: Allahayow! Hadduu kani xaq yahay Adiga kaa yimid, haddaba nagaga soo daadi dhagaxyo roob oo kale ah xagga cirka ama noo keen cadaab aad u xanuun badan.

**33.** Ma ahase Allaah mid cadaabaya-adigoo dhex jooga, oo ma aha mid cadaabaya iyagoo weli dambi dhaaf dalbaya<sup>(7)</sup>.

7. Ibnu Cabbaas a.k.r. wuxuu yiri: Waxaa jiray labo ammaan, Nabigii iyo dambi dhaaf dalab, Nabigii waa tagay oo Allaah baa oofsaday, marka waxaa haray dambi dhaaf dalab.

وَمَا أَهْمَرَ الْأَيْدِيْبَهْمُ اللَّهُ وَهُمْ يَصْدُوْتُ عَنِ الْمَسْجِدِ  
الْحَرَامِ وَمَا كَانُواْ أَوْلَىٰ مَهْدَهُ إِنْ قَوْلَيْأَوْهُ إِلَّا الْمُمْكُنُونَ  
وَلَكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُوْتَ <sup>(٢)</sup> وَمَا كَانَ صَلَاتُهُمْ  
عِنْدَ الْبَيْتِ إِلَّا مُكَاهَةً وَنَصْدِيَّةً فَذُوْهُ الْمَذَابَ  
يَمَا كَسْتُمْ كَفَرُوْتَ <sup>(٣)</sup> إِنَّ الَّذِينَ كَسْفُرُواْ يَقْنُونَ  
أَمْوَاهُمْ يَصْدُوْتُ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ فَسَيْنِيفُوهُمْ تَكُونُ  
عَلَيْهِمْ حَسَرَةٌ ثُمَّ يَعْلَمُوْنَ <sup>(٤)</sup> وَالَّذِينَ كَفَرُواْ إِلَى جَهَنَّمَ  
يُحْشَرُوْتَ <sup>(٥)</sup> لِيَسِيرَ اللَّهُ الْخَيْثَ مِنَ الطَّيْبِ وَيَمْجَدُ  
الْخَيْثَ بَعْضَهُ وَعَلَى بَعْضِ فِرَّكَمَهُ وَجَمِيعًا فِي جَمِيعِهِ  
فِي جَهَنَّمَ أَوْلَيْكُ هُمُ الْخَتِيرُوْتَ <sup>(٦)</sup> قُلْ لِلَّذِينَ  
كَفَرُواْ إِنْ يَنْتَهُواْ يَعْفُرُهُمْ مَاقْدَ سَلَافَ وَإِنْ يَعُودُواْ  
فَقَدْ مَضَتْ سُتُّ الْأَوْلَيْتَ <sup>(٧)</sup> وَقَاتَلُوْهُمْ حَقَّ  
لَا تَكُونُ فَتَّاهَ وَيَكُونُ الَّذِينُ كُلُّهُمْ لِلَّهِ فِي اٰنَّ  
أَنْتَ هُوَ إِنَّ اللَّهَ يَمَا يَعْلَمُوْتَ بِصَيْرَ <sup>(٨)</sup> وَلَمْ تَوْلَوْاْ  
فَاعْلَمُوْاْ إِنَّ اللَّهَ مُوَلَّكُ كُلِّ فَسَدِ الْمُوَلَّ وَيَقْتُلُهُمْ أَنْتَ

**34.** Maxay se (cudur daar) leeyihii si uusan Allaah u cadaabin iyagoo ka hor istaaga (dadka) Masjidka Xurmadda gaarka ahi leh, oo uma suubbadaan inay ahaadaan elhelkiisa? Oo elhelkiisu ma aha waxaan aheyn kuwa iska jira (shirkiga iyo macaasida), laakiinse badankoodu ma'ogsoona.

**35.** Oo salaaddoda Beytka (Kacbadha) agteeda ma ahayn waxaan aheyn foori iyo sacabbo tun. Ee haddaba dhadhamiya cadaabka gaalnimadiinna darteed.

**36.** Hubaal, gaalada waxay ku bixiyaan maalkooda si ay uga hor istaagaan (dadka) Jidka Ilaahay, sidaas bayna wax ugu bixin doonaa; misna waxay ku noqon doontaa qoomamo daran, misna waa laga adkaan doonaa. Oo gaalada xagga Naarta baa loo taxaabi doonaa.

**37.** Waa si uu Allaah uga sooco kuwa xun, kuwa wanaagsan, oo kuwa xun is dul saaro qaarkoodba qaarka kale, oo uu isku raseeyo dhammaantood, markaas ugu tuuro Naar. kuwan weeye kuwa ku sugar khasaara ha weyni.

**38.** Ku dheh kuwa rumeysan diida,

haddii ay ka haraan (xaq diiddada) waxaa loo dhaafi doonaa wixii horay uga dhacay<sup>(8)</sup>. Hadday se u noqdaan, waxaa xaqiq sugaya jidka kuwii hore.

**39.** Oo la dagaallama jeer la waayo wax gardarro ah, oo diinta (cibaadada) waa inuu yeesho Allaah Keliya. Haddiise ay joojiyaan (gefka iyo gaboodfalka), markaas hubaal, Allaah waa arkaa waxa ay falaan.

**40.** Oo hadday jeestaan, ogaada in Allaah yahay Gacalka idin xafida, Wanaag badanaa Gacalku, oo wanaag badanaa gargaarahu.

<sup>8.</sup> *Ibnu Masiud a.k.r. waxaa laga soo weriyey inuu yiri: Nin baa wuxuu yiri: Rasuul Allow, Miyyaa naloo raakanayaa wixii aynu falnay waagii jaahiliyadda (gaalnimida)? Nabigu s.c.w wuxuu yiri: Qofkii ay fiicnaato islaamnimadiisu oo u dhaqma Islaamka gudahiisa si suubbadaan ah, looma raakanayoo wixii uu falay waagii jaahiliyadda. Qofkiina kula yimaada shirki iyo waxyaalo xun oo macaasi ah Islaamka gudahi waxaa loo raacinaya kii hore iyo kii dambeba. (Al-Bukhaari)*

## J U S K A (10)

## Suuradda Al-Anfaal

## (Qaniimooyinka Dagaalka) 8

41. Oo ogaada in wax kastoo aad faa'iddaan, markaa Allaah wuxuu leeyahay shan meelood oo meel<sup>(9)</sup>, iyo Rasuulka iyo qaraabada dhow (ee Rasuulka) iyo agoomaha iyo masaakiinta iyo musaafirka (go'doonsan), haddaad rumeysan tiihiin Allaah iyo waxa aan u soo waxyoonnay addoonkayaga (Nabi Muxammad) maalintii kala baxa<sup>(10)</sup>, maalintay kulmeen labadii ciidan, oo Allaah wax walba inuu falo wuu Karaa.

42. Oo (xusuusta) markaad idinku joogteen docda soke (ee togga)<sup>(11)</sup>, oo iyagu ay joogeen docda shishe, halka safarkii badeecadda siday idinka hooseeyay. Oo haddaad goosan laheydeen waqtii aad dhexdiinna ku ballantaan, waxaa hubaal ah inaad seegi laheydeen ballankaas, laakiinse (waad is hesheen) si Allaah u fuliyo arrin horey uu u qaddaray; si ciddii halaagsami si cad ugu halaagsanto, oo ciddii noolaato si cad ugu noolaato. Oo hubaal, Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

43. Oo (xusuuso) markuu Allaah idinku tusay riyadada inay tiro yar yihiin, oo hadduu idiin tusi lahaa iyagoo tiro badan, hubaal waad qalbi jabi laheydeen, oo aad isku qabsan lahaydeen arrinka. Laakiinse Allaah baa (idinka) badbaadshay. Hubaal waa Ogsoonaha waxa ku jira laabaha.

44. Oo wuxuu idiin tusay markaad kulanteen wax tiro yar oo kale indhihiinna, oo wuxuu idinka yeelay inaad ugu muuqataan wax tiro yar indhahooda, si uu Allaah u fuliyo arrin horay uu u qaddaray, oo Allaah baa loo celiyaan umuuraha oo dhan.

45. Mu'miintow! Haddaad la kulantaan ciidan (cadow ah) markaa sugnaada, oo xusa Allaah in badan si aad u guuleysataan.

9. Qaniimo waa maalka lagaga helo gaalada dagaal jihada ah Jidka Ilaahay, maalkase laga helo gaalada dagaal la'aan waxaa la yiraahdhaa fay, qaybinta Aayaddan waxay ka hadleysa oo keliya qaniimada dagaalka: Shan meel marka loo dhigo, meel waxaa leh oo la siinayaay: 1- Allaah iyo Rasuulkiisa (waxaa lagu bixin arrinka ilaahey iyo xoojinta diinta). 2. Agoomaha 3. Musaafirka go'doonsan 4. Qaraabada Rasuulka (Banuu haashim iyo Banuu Muddalib) 5. Masaakiinta. Afarta meeleeedo kale waxaa loo qaybin dagaal yahnhada ka soo qayb galay dagaalka.

10. Maalinta kulanka labo kooxtood ay ku kulmeen dagaalkii Badar waxay ahayd maalin Junca ah bisha Ramadaan tahay 17 sannadikii labaad ee Hijrada, mufasirinta qaarkood waxay qabaan in Aayaddan ay tilmaameyso markii u horreysey uu soo degoo Qur'aanka oo ahayd 17 bishii Ramadaan.

11. Muslimiinta waxay ku sugnaayeen waqtigaa dhinaca togga u dhow Madina, halka gaalada joogeen dhinaca kale ee togga ee ka fog Madina, safarkiise badeecadda siday ee Abuu Sufyaan wuxuu soo marayey zeebta badda oo 5 mayl u jirta Badar.

وَاطَّبِيعُوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ، وَلَا تَتَرَوَّعُوا فَتَقْسِمُوا وَتَذَهَّبَ  
رِيْحُكُمْ وَاصْبِرُوا إِنَّ اللَّهَ مَعَ أَصْلَابِكُمْ وَلَا تَنْكُونُوا  
كَالَّذِينَ حَرَجُوا مِنْ دِينِهِمْ بَطْرًا وَرِثَاءَ النَّاسِ وَصَدْنَوْنَ  
عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ وَاللَّهُ يَمْأَلُكُمُوتُ مُجْهِظٌ<sup>١١</sup> وَإِذْ نَزَّنَ  
لَهُمْ أَشْيَاطِنَ أَعْمَلَهُمْ وَقَالَ لَأَعْلَمَ لَكُمُ الْيَوْمَ مِنَ  
النَّاسِ وَإِنِّي جَازِلُكُمْ فَلَمَّا تَرَاهُتِ الْفَتَنَانَ رَكَضَ  
عَلَى عَقْبَيْهِ وَقَالَ إِنِّي بَرِيٌّ<sup>١٢</sup> مِنْكُمْ إِنِّي أَرِي مَالَا  
تَرَوْتُ إِنِّي أَخَافُ اللَّهَ وَاللَّهُ شَدِيدُ الْعِقَابِ<sup>١٣</sup> إِذْ يَقُولُ  
الْمُنْتَفِقُونَ وَالَّذِينَ فِي قُوَّبِهِمْ مَرْضٌ عَرَهُوا وَيَنْهَمُ  
وَمَنْ يَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ فَإِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ<sup>١٤</sup> وَلَوْ  
تَرَى إِذْ يَتَوَفَّ الَّذِينَ كَفَرُوا الْمَلَائِكَةُ يُضَرِّبُونَ  
وُجُوهَهُمْ وَأَدْنَهُمْ وَوُقُوفُ أَعْدَابِ الْحَرَبِ<sup>١٥</sup> ذَلِكَ  
يَمَافَدَمْتُ أَيْدِيَكُمْ وَأَنَّ اللَّهَ لَيْسَ بِظَلَّمٍ لِلْعَيْدِ<sup>١٦</sup>  
كَذَابٌ إِلَى فِرْعَوْنَ وَالَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ كَفَرُوا يَا أَيُّ اللَّهُ  
فَأَحَدُهُمُ اللَّهُ يَدْعُو لَهُمْ إِنَّ اللَّهَ قَوِيٌّ شَدِيدُ الْعِقَابِ<sup>١٧</sup>

١٨٣

46. Oo adeeca Allaah iyo Rasuulkiisa, oo ha isqabannina, yeysaa niyad jabine oo xooggiinu tegin, oo samir yeeshaa. Hubaal Allaah wuxuu la jiraan kuwa samir yeeshaa.

47. Oo ha noqonnina sidii kuwaan uga soo baxay guryahooda kibir iyo istuska dadka, oo ka hor istaaga (dadka) jidka Ilahaay<sup>(12)</sup>. Oo Allaah wuu koobaa waxay falaan.

48. Oo (xusuuso) markuu shayaanku u qurxiyey acmaashooda oo yiri: Ma jiro maanta cid ka mid ah dadka oo idinka adkaan karta, oo hubaal aniga baa ah ilaaliyahiienna. Markayse isarkeen labadii kooxood ayuu u gurtay cirbahiisa oo yiri, hubaal Anigu barii baan idinka ahay. Hubaal waxaan anigu arkaa wax aydaan arag. Hubaal waxaan anigu ka cabsadaa Allaah, oo Allaah Ciqaabkiisu wuu daran yahay.

49. (xusuuso) markay munaafiqiintu iyo kuwa uu ku jiro cudur (shaki, nifaaq, kibir, iwm) quluubtooda yiraahdeen: kuwaani diintooda baa hodday. Oo qofkii isku halleeya Allaah, haddaba hubaal, Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

50. Oo haddaad arki lahayd marka ay malaa'igtu nafta ka qaadeeyso gaalada iyagoo ka garaacaya wajiyadooda iyo dhabarradooda (oo ku leh): Dhadhamiya cadaabka gubashada<sup>(13)</sup>.

51. (Arrin) kan waa waxay gacmihiiinnu hormarsadeen awgii, iyo in Allaah aanu u ahayn mid ku gardarrooda addoomahiisa.

52. Waa sida caadadii reer Fircoo iyo kuwii ka horreeyay: waxay rumeyn diideen Aayadaha Ilahaay, markaasuu Allaah u halaagay dambiyadoodii awgood. Hubaal Allaah waa Xoog Badane, Ciqaab Adag.

<sup>12</sup> Dagaalkooda Muslimiinta wuxuu ahaa si ay u difaacaan diinta iyo qaadasho Amarka Ilahaay, halka gaalada ay u dagaalamayeen kibir iyo qooq iyo qabyaalad iyo arrimo jaahiliyyad iyo ujeeddo addunyo iyo faan.

<sup>13</sup> Weedha waxaa laga tagay iyadoo aan la dhammeystiran waana si loo fahmo inta ka harsan iyadoo aan la xusin. Gunaanadkeeda waxaa looga tagay inay suureystaan akhristaha ama dhageystaha, waxaynaa u dhaceysaa: waxaad arkeysa muuqaal naxdin leh.”

53. (Arrin) kan wa inaan Allaah marnaba beddelin niemad uu siiyey dad jeer ay beddelaan iyaga xaalkooda; iyo waa inuu Allaah yahay wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

54. Waa sida caadadii reer Fircoo iyo kuwii ka horreeyay: Waxay beeniyeen Aayadahii Rabbigood, markaas baan ku halaagnay dambiyadoodii awgood, oo waxaan qarqinnay qolodii Fircoo, oo waxay kulligood ahaayeen gar ma qaataayaal.

55. Kuwa u sharka badan noolayaasha dhulka ku socda Allaah agtii waa gaalada, marka ma ay rumeynayaan.

56. Kuwa aad la gasho axdiga, haddana jebiya axdigooda mar waliba, oo aan ka dhowrsan (cqaabka Ilahay).

57. Ee haddaad ku hesho dagaal kala firdhi (adigoo tusaale uga dhigaya) kuwa ka dambeeya<sup>(14)</sup>, bal inay waantooaan.

58. Oo haddaad ka cabsato khiyaano xagga dad (axdi idinka dhexeyey)<sup>(15)</sup>, u tuur (axdigooda), oo u sheeg si aad uga sinnaataan wargelinta (in axdi idin dhex yaalla jirin). Hubaal Allaah ma jecla khaa'imiinta.

59. Oo yeysan moodin gaalada inay fakan doonaan. hubaal, kama fakan doonaan (Allaah).

60. Oo u diyaarsada waxaad kartaanba oo xoog ah iyo fardo u heegan ah (dagaal) si aad ugu cabsi gelisaan cadowga Ilahay iyo cadowgiinna iyo kuwo kale oo ka sokeeya oo aydaan idinku ogeyn, Allaah baase ogsoon. Oo wax kastoo aad ku bixisaan Jidka Ilahay waa la idiin gudi doonaa si dhan, idinkoo aan waxba la idinku gardarroon doonin.

61. Oo hadday u iishaan xagga nabadda, markaa adiguna u illo, oo isku hallee Allaah. hubaal, waa wax Kasta Maqlaha, wax kasta Ogsoonaha ah.

<sup>14</sup>. Waa dila oo laaya oo tusaale ka dhiga lagu cibrad qaatoo si aad u niyad jebiso kuwa soo raaca.

<sup>15</sup>. Markii aad ka aragto calaamado muujinaysa khiyaano kuwaas aad la gashay heshiiska , ogeysi inaad ka baxday ballantii idin dhexeysey si ay u ogadaan halka ay istaagayaan.

فَإِنْ تُرِيدُوا أَنْ يَخْدُعُوكُمْ فَإِنَّ حَسْبَكُ اللَّهُ هُوَ الَّذِي أَيَّدَكَ  
بِتَصْرِيفِهِ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ١٣ وَلَفَّ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ لَوْلَا نَفَقَتْ  
مِنَ الْأَرْضِ جَمِيعًا مَا لَفَّتِ بَيْنَ قُلُوبِهِمْ وَلَكِنَّ اللَّهَ  
أَلَّفَ بَيْنَهُمْ إِنَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ١٤ يَأْتِيهَا الَّتِي حَسْبُكَ  
اللَّهُ وَمَنْ أَتَسْعَكَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ ١٥ يَأْتِيهَا الَّتِي حَرَضَ  
الْمُؤْمِنِينَ عَلَى الْفِتْنَةِ إِنْ يَكُنْ مِنْ كُمُّ عَشْرَوْنَ صَدِرُونَ  
يَغْبُلُو أَمْاثِلَنَّ وَإِنْ يَكُنْ مِنْ كُمُّ مَائَةٍ يَغْبُلُو أَلْفَانَ  
الَّذِينَ كَفَرُوا يَا نَاهُمْ قَوْمٌ لَا يَفْقَهُونَ ١٦ الَّذِينَ حَفَّ  
اللَّهُ عَنْكُمْ وَعَلِمُ أَنَّ فِي كُمُّ صَعْدَافًا فَإِنْ يَكُنْ مِنْ كُمُّ مَائَةٍ  
صَابِرَةٌ يَغْلِبُوا مَائِتَيْنَ وَإِنْ يَكُنْ مِنْ كُمُّ أَلْفٍ يَغْلِبُوا  
الْفَئِنَّ يَأْذِنُ اللَّهُ وَاللَّهُ مَعَ الصَّابِرِينَ ١٧ مَا كَانَ لِنَبِيٍّ  
أَنْ يَكُونَ لَهُ وَآتَسَى حَقًّا يُتَبَخِّنُ فِي الْأَرْضِ رُبِيدُونَ عَرَضٌ  
الَّذِينَ أَوْلَاهُمْ بِرِيدُ الْآخِرَةِ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ١٨ لَوْلَا كَتَبَ  
مِنَ اللَّوْسَبَقِ لَسَكُونًا خَذَلَ عَذَابَ عَظِيمٍ ١٩ فَكَلَّوْا  
مِنَ الْمَاغِنَمُ تَحْلَكَلَتِيَّةً وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَّحِيمٌ ٢٠

١٨٥

jiraan kun idinka mid ah (oo samir iyo adkeysi leh), waxay ka adkaan doonaan labo kun Ilahay Idankii. Oo Allaah wuxuu la jiraa kuwa ah samrayaasha.

**67.** Kuma habboona Nabi inuu soo qaato qafaal (dagaal) ilaa uu horta ku laayo (cadowyada Ilahady) arlada oo ka jilciyo. Waxaad rabtaan (waa muslimiinta qaar) alaabta dhammaaneyesa ee nolosha adduunyadan, wuxuuse Allaah (idinla) rabaa Aakhirada. Oo Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

**68.** Haddaanu jiri lahayn xukun xagga Allaah ah ee hore uu u gooyey<sup>(16)</sup>, hubaal waxaa idinku soo gaari lahaa waxa aad qaadateen cadaab aad u weyn.

**69.** Ee cuna waxa xalaasha ah wanaagsan aad heshaan ee qaniimo dagaal ah, oo dhowra (xilka uu idin saaray) Allaah. Hubaal, Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**16.** Seddex siyaalood baa loo fasiray weedha xukun oo aan halkan ku xuseyno: 1.kaasoo lagu cafiyey asxaabti Badar,2. in gefafka aan ula kaca ahayn loo ciqaabin, 3. in la idin banneeyey qaniimooyinka dagaalka.

**70.** Nabiyow! Ku dheh kuwaa aad soo qafaalateen ee ku jira gacmahiinna: haddii Allaah ku og yahay wax khayr ah quluubtiinna, wuxuu idin siin doonaa wax ka khayr badan waxa la idinka qaaday, oo idiin dambi dhaafi doonaa, oo Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**71.** Haddiise ay doonaan inay ku khiyaameeyaan waxay horeba u khiyaameeyeen Allaah. Markaas buu Wuxuu idin siiyey awood uu idinka kormarshay. Oo Allaah waa wax kasta Ogsoone, Xakiim ah.

**72.** Hubaal, kuwa rumeeeyay ee soo haajiray ee ugu halgamay si adag maalkooda iyo nafahoodaba jidka Ilahay iyo kuwa soo hoygeshay ee taageeray, -kuwan ayaa qaarkoodba xulupo u yahay qaarka kale. (ma) kuwase rumeeey ee aanse soo haajirin idinkama saarna xil xigaaleysigooda jeer ay soo haajiraan, hadday se idinku hiishadaan Diinta, waa idinku waajib inaad u soo hiillisaan, marka laga reebo dad uu dhexdiinna idinka iyo iyaga axdi yaal, oo Allaah wuu arkaa waxa aad fashaan.

**73.** Oo kuwaa gaalada ah qaaroodba xulupo buuu yahay qaarka kale, haddii aydaan sameyn sidaa oo kale, waxaa jiri doona dhulka fasahaad aad u weyn<sup>(17)</sup>.

**74.** Oo kuwa rumeeeyay ee soo haajiray ee ku halgamay Jidka Ilahay, iyo kuwa soo hoygeshay ee taageeray, kuwan waa mu'miniinta dhabta ah, waxay mudan doonaan dambi dhaaf iyo risiq wanaagsan.

**75.** Oo kuwa rumeeeyay waa' dambe, oo soo hijrooday oo jihaad galay la jirkiin, kuwaani waa idinka mid. Oo qaraabadaa qaarkoodba isaga sokeeya qaarka kale sida Kitaabka Ilahay qoray<sup>(18)</sup>. Hubaal, Allaah wax kasta wuu Og yahay.

<sup>17</sup>. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Haddii la doorto oo la magaacadbo labo madaxweyne dila labada midkoodii dambeeyey". W.w. Muslim

<sup>18</sup>. Tani waxay ku gaar tahay oo keliya qaraabada muslimiinta ah. Kuwa aan muslimka ahayn waxaa wax lagu siin karaa in loo dardaarmo.

## سورة التوبة

بِرَأْءَةٌ مِّنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ إِلَى الَّذِينَ عَاهَدُوكُمْ مِّنَ الْمُسْرِكِينَ  
 فَبِيَحْوِيْ فِي الْأَرْضِ أَزْعَةً أَشَهُرًا وَاعْلَمُوا أَنَّهُمْ عَبْرُ مُعْجِزِي  
 اللَّهِ وَإِنَّ اللَّهَ مُحْزِي الْكَافِرِينَ وَلَذِنْ مِنَ اللَّهِ وَرَسُولِهِ  
 إِلَى الْأَنَاسِ يَوْمَ الْحِجَّةِ الْأَكْثَرُ أَنَّ اللَّهَ تَرَى مِنَ الْمُسْرِكِينَ  
 وَرَسُولُهُ وَقَدْ يَبْشِّرُهُمْ بِخَيْرٍ وَإِنَّ رَبَّهُمْ فَاعْلَمُوا  
 أَنَّكُمْ عَبْرُ مُعْجِزِي اللَّهِ وَبِشَّرَ الَّذِينَ كَفَرُوا بِعَدَابِ الْمُرْ  
 إِلَّا الَّذِينَ عَاهَدُوكُمْ مِّنَ الْمُسْرِكِينَ ثُمَّ لَمْ يَقْصُصُوكُمْ شَيْئًا  
 وَلَمْ يُظْهِرُوْ أَعْلَمُكُمْ أَعْدَمُكُمْ أَيْمَانُهُمْ عَاهَدُهُمْ إِلَى مُدْتَهُمْ  
 إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ فَإِذَا أَنْسَلْتَ الْأَشْهُرَ الْحُرُمَ  
 فَاقْتُلُ الْمُسْرِكِينَ كَمَا يُحِبُّ اللَّهُ أَنْ يُحِبَّكُمْ وَحَدُّهُمْ وَاحْصُرُوهُمْ  
 وَاعْدُوْ الْمُهَاجِرَ كُلَّ مَصْوِلٍ قَنْ تَابُوا وَقَامُوا أَصْلَوْهُ وَأَتَوْا  
 الْرَّكْوَةَ فَخَلُّوا سِيَّهُمْ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ لِرَحْمَمٍ وَإِنْ أَحَدٌ  
 مِّنَ الْمُسْرِكِينَ أَسْتَجَارَكَ فَاجْرُهُ حَتَّى يَتَسَعَ كَلَمَ  
 اللَّهُ تُبَرِّغُهُ مَامَنْهُ وَذَلِكَ يَأْنِهُمْ قَوْمٌ لَا يَعْلَمُونَ

١٨٧

## Suuradda 9 At-Tawba

Waa 129 Aayadood: Madaniyyah

1. (Tani waa ogeysiin) in Allaah iyo Rasuulkiisu ay barii ka yihii<sup>(1)</sup> kuwaan ka midka ah Mushrikiinta, ee aad la gasheen heshiiska.

2. Ee (ku) mara (gaaloy) dhulka (nabad) muddo afar bilood ah (meeshaad doontaanba), ogaadase inaydaan caajis gelin kareyn Allaah, iyo in Allaah uu dulleyn doono gaalada.

3. Oo waa ogeysiis ka soo baxay Allaah iyo Rasuulkiisa oo ku socda dadka maalinta iidweynta Xajka<sup>(2)</sup> inuu Allaah barii ka yahay (dhammaan) heshiisyadii lala lahaa Mushrikiinta, Rasuulkiisuna (sidoo kale ka yahay barii). Ee haddaad idinku toobad keentaan, waa sida idin khayr badan, haddaad se jeesataan, ogaada inaydaan caajis galin kareyn Allaah. Oo ogeysiis cadaab aad u xanuun badan kuwaa gaalada ahi.

4. Wuxaan ahayn kuwaa mushrikiinta ka mid ah ee aad la gasheen axdiga, oo aan markaas waxba idin dhimin, cidnana idiinlloo soo safan lidkiin. Ee u iska ilaasha (xumaha).

oo fiya axdigooda inta ay muddadu dhammaaneyso. Hubaal Allaah waa jecel yahay kuwa iska ilaasha (xumaha).

5. Markase ay Bilaha Kurmadda leh baxaan<sup>(3)</sup>, ku dila mushrikiinta meeshaad ka heshaanba, oo qafaasha oo go'doomiya, oo u fariista suryo walba. Markaas hadday toobad keenaan oo oogaan salaadda, oo bixiyaan Zakada, u banneeya jidkooda. hubaal, Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

6. Oo hadduu qof ka mid ahi mushrikiinta idin weydiisto magan galyo magan geliya inta uu ka maqlo hadalka Ilaahay, kaddibna gaarsiiya halka uu ku nabad helayo, (arrin) kan waxaa ku wacan waa dad aan garasho lahayn.

<sup>1</sup>. Tawbah, u soo laabashada Ilaahay, suuradda sidoo kale waxaa la yiraahdaa Baraa'ah, oo macnaheedu yahay iska barii yeelid, ka xor ahaansho, ama ka bixitaan. Bisinka laguma xusin billowga Suuraddan.

<sup>2</sup>. Waxay isku khilaafeen mufasirinta macnaha iidweynta xajka, qaarkood waxay yiraahdeen waxaa loola jeedaa Maalinta Gowraca - Adxada, qaar kalena waxay yiraahdeen: waa maalinta Carafa, waxaana loola jeedaa halkan xajka weyn wixii dhacay sannadki 10aad ee hijrada.

<sup>3</sup>. Waxaa loola jeedaa bilaha xurmadda leh afarta bilood ee kala ah: Dul-Qacadah, Dul Xijjah, Muxarram, iyo Rajab. Bilaha fursadda la siinayo mushrikiintaan waxaa weeye laga billaabo 10ka Dulxijjah ilaa 10ka Rabiicul Aakhir.

7. Sidee bay ugu lahaan karaan mushrikiintu axdi Allaah agtii iyo Rasuulkiisa agtii aan aheyn kuwa aad kula gasheen axdiga Masjidka xurmadda leh? Ee intay idiin toosnaadaan, idinkuna u toosnaada. Hubaal, Allaah waa jecel yahay kuwa dhowra (xilka uu saaray).

8. Sidee (ku ahaan kartaa) halka marka ay idinka awood bataan, aysan dhowrin wax xiriir ah ha ahaado mid wada dhalasho ama axdi aad leedihiin midna? Waxay idinku raalli galiyaan afakkooda, halka quluubtoodu ayan oggolaan (inay oofiyaan), oo intooda badani waa caasiyaal.

9. Waxay siisteen qiimo yar Aayadaha Ilahay, markaas bay ka duwaan (dadka) Jidkiisa. Hubaal, waa xumaan waxa ay falaan.

10. Uma dhowraan mu'min dhalasho ama axdi midna. Oo waa kuwan kuwa ahi xad gudbayaasha.

11. Hadday se toobad keenaan oo oogaan salaadda oo bixiyaan Sakada waa walaalihiinna diinta. Waxaan uga dhignaa Aayadaha caddaan dad garasho leh.

12. Oo hadday jabiyaan dhaarhooda axdigooda kaddib, oo (si cad) u caayaan diintiinna, markaa la dagaallama hoggaamiyaaasha kufriga-hubaal waa kuwo aan dhaaro tixgeline bal inay ka joogaan (colaadda ay wadaan).

13. Miyeydaan la dagaallamayn dad ka baxay dhaarhooda oo ku hammiyey saaridda Rasuulka, oo iyagu idinku billaabay weerarka marka hore? Miyaad ka baqeysaan? Allaah baase u xaq leh inaad ka baqdaan haddaad tiihin mu'miniin.

كَيْفَ يَكُونُ لِلشَّرِّ كِنْ عَهْدُ اللَّهِ وَعِنْدَ رَسُولِهِ  
إِلَّا الَّذِينَ عَاهَدُوكُمْ عِنْدَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ فَتَأْسِمُوا  
لَكُمْ فَأَسْتَقِيمُ لَهُمْ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُتَقِيرِينَ  
كَيْفَ وَإِنْ يَظْهِرُ وَاعِيَّ كُمْ لَيَرْقُبُوْ فِي كُمْ إِلَّا  
ذَمَّةٌ يَرْضُوْكُمْ بِإِقْوَاهُمْ وَتَأْذِنُ قُلُوبُهُمْ وَأَكْتَبْهُمْ  
فَتَسْقُونَ ﴿٨﴾ أَشْرَكُوا بِعِيَاتِ اللَّهِ مَا نَأَنَا قَلِيلًا فَصَدُّوا عَنْ  
سَبِيلِهِ إِنَّهُمْ سَاءَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٩﴾ لَا يَرْقُبُونَ  
فِي مُؤْمِنٍ إِلَّا لَذَّةٌ وَأَوْلَى كَهُمُ الْمُعَذَّبُونَ ﴿١٠﴾ فَإِنْ  
تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَأَتَوْ أَنْزَكَوْهُ فَإِخْرَجُوكُمْ  
إِلَيْنَا تَرْتَبِّلُ أَلْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿١١﴾ وَإِنْ  
نَكَثُوا إِنَّهُمْ مِنْ بَعْدِ عَهْدِهِمْ وَطَعَنُوا فِي دِيْنِكُمْ  
فَقَاتُلُوا أَئِمَّةَ الْكُفَّارِ إِنَّهُمْ لَا يَأْتِنَ لَهُمْ عَلَيْهِمْ  
يَتَهْمُونَ ﴿١٢﴾ أَلَا أَنْقَتُنَا فَوْمًا كَثُرًا إِنَّهُمْ  
وَهُمُؤْلَى بِخَرْجِ الرَّسُولِ وَهُمْ بَدَأُوهُ كُمْ أَوْلَ مَرَّةٍ  
أَتَسْتَوْنُهُمْ ﴿١٣﴾ فَاللَّهُ أَعْلَمُ أَنْ تَخْشُوْهُ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ

فَتَلِيلُهُمْ بَعْدَ بَعْثَمُ اللَّهُ يَا يَادِيْكُمْ وَيَخْرُجُهُمْ وَيَصْرُطُهُمْ  
عَلَيْهِمْ وَيَشْفِي صُدُورَ قَوْمٍ مُّؤْمِنِينَ ۖ ۱۵ وَيُدْهِبُ عَيْنَهُمْ  
فَلَوْلَاهُمْ وَيَتُوبُ اللَّهُ عَلَىٰ مَن يَشَاءُ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ۖ ۱۶  
أَفَحَسِبُهُمْ أَنْ تُتَرَكُوا وَلَمَّا يَعْلَمُ اللَّهُ الَّذِينَ كَهْدُوا مِنْكُمْ  
وَلَعَلَّهُمْ يَتَجَدَّدُ فِي أَعْمَالِهِمْ وَلَا الْمُؤْمِنُونَ وَلَعَلَّهُمْ  
وَاللَّهُ حَيْثُ يَمَا عَمَلُوكُمْ ۖ ۱۷ مَا كَانَ لِلنَّاسِ كَيْنَ أَنْ يَعْمَرُو مَسَاجِدَ  
اللَّهِ شَهِيدُوكُمْ عَلَىٰ أَنفُسِهِمْ بِالْكُفْرِ أَوْ لِيْكَ حَيْطَتْ  
أَعْمَالُهُمْ وَفِي الْأَنْتَارِهِمُ خَلِيلُوكُمْ ۖ ۱۸ إِنَّمَا يَعْمَلُ مَسَاجِدَ  
اللَّهِ مِنْ أَنَّ يَأْمُلَ اللَّهُ وَالْأُوْلَئِكُ الْآخِرُ وَقَمَ الْأَصْلَوَةَ وَإِنَّ  
الرَّكْوَةَ وَلَرِبِّشَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ تَعَالَى أَوْ لِيْكَ أَنْ يَكُونُوكُمْ  
الْمَهْتَدِينَ ۖ ۱۹ \* أَجَعَلْتُمْ سَقَايَةَ الْمَحَاجَ وَعَمَارَةَ الْمَسَاجِدَ  
الْحَرَامَ كَمَنَّ أَمَنَ يَأْمُلَ اللَّهُ وَلَأَيُّوْمَ الْآخِرِ وَجَهَدَ فِي سَبِيلِ  
اللَّهِ لَا يَسْتَوْنَ عِنْدَ اللَّهِ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ  
الَّذِينَ أَمَنُوكُمْ وَهَا جُرُوا وَكَهْدُوكُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ يَا قَوْلَاهُمْ ۖ ۲۰  
وَأَنْفِسُهُمْ أَعْظَمُ دَرَجَةً عِنْدَ اللَّهِ وَأَوْلَيْكَ هُوَ الْمَأْتِيُونَ ۖ ۲۱

14. La dagaallama, Allaah wuxuu ku cadaabi doonaa gacmihiinna oo uu ku dulli gelin doonaa, oo idiin gargaari oo bogsiin laabaha dad mu'miniin ah.

15. Oo wuxuu ka saari doonaa ciilkii hayey quluubtooda. Oo Allaah wuxuu ugu soo laabtaa (si naxariis leh) qofkuu doono, oo Allaah waa wax kasta Ogsonee, Xakiim ah.

16. Ma waxaad mooddaan in la idiinkaga tegi doono sidiinna isagoo uusan Allaah muujin kuwiinna idinka mid ah ee jihaaday oo aan ka dhigan cid aan ahayn Allaah iyo Rasulkiisa iyo mu'miniinta gacallo. oo Allaah waa u Xog ogaal waxa aad fashaan.

17. Ma laha mushrikiinta inay camiraan masaajidda Ilaahey iyagooy ku qiraya nafahooda gaalnimo. Waayo kuwani acmaashooda waxba kama jiraan, oo Naarta bay ku dhex waari doonaan.

18. Waxaa uun camira Masaajidda Ilaahey kuwa rumeysan Allaah iyo Maalinta dambeysa, oo ooga salaadda oo bixiya Zakada oo aan ka baqin axadna Allaah maahee. haddaba kuwan baa laga yaabaa inay ka mid noqdaan kuwa hanuunsan.

19. Ma waxaad la mid dhigtaan (kan u xil quma) waraabinta xujeyda iyo daryeelka Masjidka xurmadda leh sida kan isagu rumeysan Allaah iyo Maalinta dambeysa oo aad ugu dadaala Jidka Ilaahey? Ma aha kuwo siman Allaah agtiis. Oo Allaah ma hanuuniyo dadkaa gar ma qaatayaasha ah.

20. Kuwa rumeyey oo ka soo hijrooday (guryahooda) oo aad ugula dadaalay Jidka Ilaahey maalkooda iyo nafahooda baa ku darajo weyn Allaah agtiis. Oo waa kuwaas kuwa ah guuleystayaasha.

**21.** Rabbigood wuxuu ugu bishaareeyaa Naxariis xaggiisa ah, iyo Raallii ahaansho iyo beero ay ku dhix leeyihiin barwaqooyin ma guuraan ah.

**22.** Iyagoo ku dhix waaraya waligood. hubaal, Allaah agtiis waxaa yaal abaal gud aad u Weyn.

**23.** Mu'miniintow! Ha ka dhigannina aabbayaashiin ama walaalihiin gacallo hadday jeclaadaan gaalnimo halkii Iimaanka. Oo qofkii sidaa yeela oo idinka mid ah, kuwaas weeye kuwa iyagu ah geflowyada.

**24.** Dheh: Haddii aad aabbayaashiin, wiilashiienna, walaalihiin, xaasaskiinna, xigtadiinna; maalka aad tabcateen, ganac aad uga baqeysaan baaris (iibsi la'aan), iyo guryo aad ka raalli tiihiin... ay idinkala weyn yihiin oo ka jeceshihiin Allaah iyo Rasuulkiisa, iyo u halgamidda Jidkiisa, marka suga inta Allaah ka fuliyo Amarkiisa. Oo Allaah ma hanuuniyo dadka caasiyaasha ah<sup>(4)</sup>.

**25.** Xaqiq Allaah Wuxuu idinku gargaaray goobo dagaal oo badan, oo Maalintii Xunayn markay idin cajabisey tiro badnaantiinna hase ahaatee wax idii tarjey, ee dhulku intuu ballaar le'egyahay idinku soo koobmay, markaas aad carar dhabarka jeediseen.

**26.** Markaas Allaah wuxuu ku soo dejiyey xasilkiisii Rasuulkiisa iyo mu'miniintaba, oo u soo diray ciidammo (malaa'ig ah) aydaan arkayn, oo ciqaabay kuwii (xaqa) rumeyn diiday. Oo waa sidaas abaal marinta gaaladu.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
رَبِّ الْعَالَمِينَ  
يَعِيهُ مُقْبِرٌ<sup>١</sup> خَلِدِينَ فِيهَا أَبْدًا إِنَّ اللَّهَ عِنْدُهُ أَجْرٌ  
عَظِيمٌ<sup>٢</sup> يَتَأْلِمُ الَّذِينَ أَمْنَوْا لَا يَتَخَذُوا إِبَاهَةً كُمْ  
وَأَخْوَانَ كُمْ أَوْلَاهُ إِنْ أَسْتَحْمَوْا الْكُفَّارَ عَلَى الْأَيْمَنِ  
وَمَنْ يَوْلِهُمْ فَنَمْ كُمْ فَأَوْلَاهُكُمْ هُمُ الظَّالِمُونَ<sup>٣</sup> قُلْ إِنْ  
كَانَ إِبَاهَةً كُمْ وَأَبْنَاؤُكُمْ وَأَخْوَانُكُمْ وَأَرْجُوكُمْ  
وَعَشِيرَتُكُمْ وَأَمْوَالُ أَفْتَرْ قَتُولُهَا وَتِجَرَّهُ تَخْسَوْتَ  
كَسَادَهَا وَمَسِكُنُ تَرْضُونَهَا أَحَبَّ إِيَّاكُمْ مِنَ اللَّهِ  
وَرَسُولِهِ وَجِهَادِ فِي سَبِيلِهِ فَتَرْضُوْهُ أَحَبَّ إِيَّاكُمْ  
يَا أَمْرُهُ وَاللَّهُ لَا يَهِدِي الْقَوْمَ الْفَاسِقِينَ<sup>٤</sup> لَقَدْ نَصَرَ  
اللَّهُ فِي مَوَاطِنِ كَثِيرَةٍ وَيَوْمَ حُسْنِينَ إِذْ أَنْجَبَتِ  
كَثِيرَةً فَلَمْ يَغْنِ عَنْكُمْ شَيْئًا وَاضْفَأَتْ عَلَيْكُمْ  
الْأَرْضُ بِمَا رَحِبَتْ ثُمَّ لَيَّنَمْ مُدْرِبِتَ<sup>٥</sup> ثُمَّ أَنْزَلَ اللَّهُ  
سَكِينَتَهُ عَلَى رَسُولِهِ وَعَلَى الْمُؤْمِنِينَ وَأَنْزَلَ جُنُودًا  
لَهُمْ تَرْقُهَا وَعَذَابُ الَّذِينَ لَهُوا وَلَذِلِّي جَرَاءُ الْكُفَّارِ<sup>٦</sup>

١٩٠

<sup>4.</sup> Abuu Hurayra a.k.r. waxaa laga soo weriyey in Nabigu s.c.w. yiri: "Qofkii dhinta isaga oo aan u duulin Dar Ilaahay, oo aan u hanqal taagin ( macnaha aysan ku jirin ) inuu duulo oo ka qayb qaato jihaadka Jidka Ilaahay ah, wuxuu dhintaa isaga oo ay ku jirto qayb munaafiqinimo ah. »

شَمَيْثُوْبُ اللَّهُ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ عَلَىٰ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ  
عَفُورٌ حَمْرٌ<sup>(١)</sup> يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّمَا الْمُسْرِكُونَ  
نَجْسٌ فَلَا يَقْرِبُوا الْمَسْجِدَ الْحَرَامَ بَعْدَ عَامِهِ هَذَا  
وَإِنْ خَفْتُمْ عَيْلَةً فَسَوْفَ يُغْنِيَكُمُ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ  
إِنْ شَاءَ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ حَكِيمٌ<sup>(٢)</sup> قَاتِلُوا الْمُبَرِّكَ  
لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَلَا يُأْتِيُونَ الْآخِرَةَ وَلَا يُحِرِّمُونَ  
مَا حَرَمَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ وَلَا يَدِيُونَ دِينَ الْحَقِّ مِنَ  
الَّذِينَ أَوْتُوا الْكِتَابَ حَقٌّ يُعْطُوا الْجِزْيَةَ عَنْ يَدِ  
وَهُمْ صَفَّرُونَ<sup>(٣)</sup> وَقَالَتِ الْأَيْمَهُودُ عُزْبَرْتُ اللَّهَ  
وَقَالَتِ النَّصَارَى الْمُسِيْحُ أَتَنْ أَنْ أَنْهَا ذَلِكَ فَوْلُهُمْ  
يَا فَوْهَمْ بِعْضُهُونَ قَوْلُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَبْلِ  
قَاتَلُهُمُ اللَّهُ أَنْ يُؤْفَكُونَ<sup>(٤)</sup> أَخْذُوا أَخْبَارَهُمْ  
وَرَهْبَكُهُمْ أَرْبَابًا نِدْرَنَ اللَّهُ وَالْمُسِيْحُ أَبْنَ  
مَرِيمَ وَمَا أُمْرَوْا إِلَّا يُعْبُدُوا لِنَهَا وَاحِدًا  
لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ سُبْحَانَهُ وَعَمَّا يُشَرِّكُونَ<sup>(٥)</sup>

١٩١

27. Markaas Wuxuu Allaah kani kaddib ugu soo noqon (si naxariis leh) cidduu doono. Oo Allaah waa Dambi daaf Badane, Naxariis Badan.

28. Mu'miniintow! Mushrikiintu sidooduba waa Nijaas ee yeysan u soo dhowaan Masjidka xurmadda leh sannadkan kaddib<sup>(6)</sup>, oo haddaad ka baqdaan faqri, Allaah baa idinka hodanshi doona Deeqdiisa hadduu doono. Hubaal, Allaah waa wax kasta Ogsone, Xakiim ah.

29. La dagaallama kuwa aan rumeynay Allaah, iyo Maalinta dambeysa, aan xaaraameyn waxa ay xaaraameeyeen Allaah iyo Rasuulkisu, ee aan ka diin dhigan oo raacin diinta xaqa ah ee ka mid ah ehl Kitaabka, ilaa ay ka dhiibaan Jisyo<sup>(6)</sup> si raalli leh iyagoo hoggaansan.

30. Oo Yuhuuddu waxay yiraahdaan: Cuzayr waa wiilkii Ilaahey, oo Kiristhaanku waxay yiraahdaan: Masiixu waa wiilkii Ilaahey. Kuwakani waa hadalkooda ay afakooda ka yiraahdaan. Waxay ku hadal dayanayaan kuwii hore u gaaloobay. Allaha halaagee, maxaa (xaqa) ka duway.

31. Waxay ka dhigteen gar yaqaannadoodii iyo suufiyadoodii rabbiyo Allaah sokadi, iyo (sidoo kale) Masiixa ina Maryam, iyagoo la amray inaanay caabudin cid aan ahayn Allaah Keliya. Ma jiro ilaaheen Isaga ahayn. Kurmo oo dhan Isaga leh, wuu ka sarreeyaa oo nazahan yahay wax la wadaajiyaa<sup>(7)</sup>.

5. Looma oggola inay soo xajjiyan ama soo cumreytaan maadaama ay mushrikiin yihii. Mufasirinta qaar waxay qabaan in mushrikiinta an loo oggoleyn soo gelitaanka Xaramaka hadday Xaj rabaan ama Cumro ama leeyihiin dan kale kaddib sannadkii sagaaloona ee Hijrada.

6. Jizy waa canshuur laga qaado dadka aan muslimka ahayn iyagoo laga cafiyo shaqada millateriga, oo waxay ku mutaan sidaas ilaalintan iyo difaaca dawladda islaamka. Dhinaca kale sako lagama qaado iyaga gaalada, oo waxay saaran tahay inay sako bixiyaan musliminta oo keliya.

7. Waxay ku talax tageen adeecidda culimada iyo suufiyintu oo xadka kaga baxeen, way adeecayeen xitaah haddii ay amraan macsi ama xalaal uga dhigaan wax xaraan ah, waana taasi midda uu Alle kii tilmaamay inay tahay caabudaaqay caabudeen, waxaana la yiraahdaa arrinikan shirki xaggaa adeecidda ah, waana shirki weyn oo diinta looga baxo, qofku waa inuu uun adeecaa Allaah iyo Rasuulkusa, oo waa inuuusniciidna ku adeecet wax khilaafan sharqiga Ilaahey.

Cadiy bin Xaatim a.k.r. waxaa laga soo weriyeey inuu yiri: Waxaan u imid Nabiga s.c.w. iyadoo ay qoorta iigu xiran tahay macatab ka samaysan dahab. Markaasuu wuxuu yiri: "Cadiyow, iski tuur samankan". Dabeeto waxaan maqlay isagoo Nabigu s.c.w. akhriiyaya Aayadda ku soo aortay suraadda Al-Baraa'a: "Waxay ka yeeshen culimadoloodii iyo suufiyadoodii rabbiyo ay Allaah sokadi caabudaa." Waxaan iri: Ma ayuu caabudi jirin. Wuxuu yiri: Waa jirta inayan caabudi jirin si toos ah, laakiinse haddii ay wax u xalaaleeyaa xaraan ah waa ay xalaalsan jireen, haddina ay ka xaraantimeeyaa wax xalaal ah waxay ka dhigi jireen xaraan. Waa sidaas caabudaadda haalkan loo jeedo." W.W. At-Tirmidi

**32.** Waxay rabaan inay ku damiyaan Nuurka Ilahay afakooda, ha yeesh ee Allaah ma oggolaan doono waxaan ahayn inuu dhammeystiro Nuurkiis, gaaladu haba necbaystaane.

**33.** Isaga weeye Kan la soo diray Rasuulkiisa hanuunka iyo diinta xaqa ah, si uu uga kor mariyo diimaha oo dhan, Mushrikiintu haba necbaystaane.<sup>(8)</sup>

**34.** Mu'miniintow! hubaal, in badan oo ka mid ah gar yaqaannada iyo suufiyadu waxay ku cunaan maalka dadka been, oo ka jeediyaa Jidka Ilahay. Oo (ma xagga) kuwa iyagu kaydsada dahabka iyo qalinka<sup>(9)</sup> ee aan wax ku bixin Jidka Ilahay, ugu bishaaree cadaab aad u xanuun badan.

**35.** Maalinta lagu soo kululeyn doono dabka Naarta oo wajiyadooda, dhinacyadooda, iyo dhabarradooda lagu summadeyn doono; (oo lagu oran): Kani waa waxaad u kaydiseen nafahiinna ee dhadhamiya waxaad idinku kaydsateen.

**36.** Hubaal, tirada bilahu Ilahay agtiis waa labo iyo tobant bilood xagga Qaddarka Ilahay tan iyo malintii uu abuuray samooyinka iyo arlada, waxaa ka mid ah afar xurmadi gaar ah leh. (Arrin) kaa baa ah dowga toosan, ee ha ku gardaroonina nafahiinna dhixdooda, oo la dagaallama Mushrikiinta wadajir sida ay idiinla dagaallamaan wadajir. Oo ogaada in Allaah uu la jiro kuwa iska ilasha xumaha.

بُرِيَدُوكَتْ أَن يُظْفَوُ لُورَ اللَّهِ بِأَوْهَمَهُ وَيَأْلِيَ اللَّهَ إِلَيْهِ  
يُتَمَّ نُورَهُ وَلَوْكَرَهُ الْكُفَّارُونَ ٢٣ هُوَ الَّذِي أَرْسَلَ  
رَسُولَهُ وَبِالْهُدَىٰ وَدِينَ الْحَقِّ لِيُظْهِرَهُ وَعَلَى الْمُجْرِمِينَ  
كُلَّهُمْ وَلَوْكَرَهُ الْمُشْرِكُونَ ٢٤ \* يَأْلِيَهَا الَّذِينَ  
أَمْتَوْلَانَ كَثِيرًا مِنَ الْأَخْبَارِ وَالْهَمَانَ كَثِيرًا كُلُّهُمْ  
أَمْتَوْلَ الْأَسِسِ يَأْلِيَهُمْ وَيَصْدُونَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ وَالَّذِينَ  
يَكْتَبُونَ الْدَّهَبَ وَالْأَفْضَلَةَ وَلَا يُنْفِقُونَهَا فِي  
سَبِيلِ اللَّهِ فَبَيْتَرُهُمْ بِعَدَابِ الْيَوْمِ ٢٥ يَوْمَ يُحْكَمُ عَلَيْهَا  
فِي تَارِيَحِهِنَّ قَتْكُوَىٰ يَهَا جَاهُهُمْ وَجُنُونُهُمْ  
وَطُهُورُهُمْ هَذَا مَا كَزَّتْ لِأَنْفُسِكُمْ فَذَوْقُمَاكُلُّهُمْ  
تَكْتَبُونَهُمْ ٢٦ إِنْ عَدَةَ الشَّهُورِ عِنْدَ اللَّهِ أَنْتُمْ عَشَرَ  
شَهْرًا فِي كِتَبِ اللَّهِ يَوْمَ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ مِنْهَا  
أَرْبَعَةَ حُرُوفٍ ذَلِكَ الْيَسِيرُ فَلَا تَنْظِلُمُوا فِيهِنَّ  
أَنْفُسَكُمْ وَقَاتِلُوا الْسُّرَكَيْنَ كَافَةً كَمَا  
يُقَاتِلُونَكُمْ كَافَةً وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُتَّقِينَ ٢٧

8. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Diintu waxay gaari doontaa meeshay habeen iyo maalin jiraan, waxayna gali doontaa guri kasta".

9. Dahabka iyo fiddada la kaydiyey waxaa loola jeedaa kuwa aan sakada laga bixin.

إِنَّمَا الَّذِي زَيَّادَهُ فِي الْكُفْرِ يُضْلِلُ بِهِ الَّذِينَ  
كَفَرُوا فَيُحْلِوُنَّهُ، عَامًا وَيَحْرُمُونَهُ، عَامًا لَيُوَاطِّعُو  
عَدَّةً مَا حَرَمَ اللَّهُ فَيَحْلُوا مَا حَرَمَ اللَّهُ رُبِّ الْهُمَّا  
سُوءَ أَعْنَاهُمْ وَاللَّهُ لَا يَهِيدُ الْقَوْمَ الظَّافِرِينَ  
يَتَأَبَّلُ الَّذِينَ لَا يُمْنَأُوا تَلَكُمْ إِذَا قِيلَ لَكُمْ  
أَنْفَرُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَثَاقَلُمْ إِلَى الْأَرْضِ أَرْضِيَتُمْ  
بِالْحَيَاةِ الدُّنْيَا مِنَ الْآخِرَةِ فَمَا مَاتَنَّ الْحَيَاةَ  
الَّذِي نَيَّرَ فِي الْآخِرَةِ إِلَّا قَلِيلٌ<sup>١٠</sup> إِلَيْهِنَّ أَنْتُرُ وَأَعْبَدُكُمْ  
عَذَابَ الْيَسَارِ وَسَبَدِلَ فَوْمًا غَيْرَكُمْ وَلَا تَصْرُوهُ  
شَيْئًا كَوَّلَهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ وَقَدِيرٌ<sup>١١</sup> إِلَيْهِ تَصُرُوهُ  
فَقَدْ نَصَرَهُ اللَّهُ إِذَا خَرَجَهُ الَّذِينَ كَفَرُوا وَأَتَيْنَاهُ  
إِذْ هُمَّا فِي الْغَارِ إِذَا يَقُولُ لِصَاحِبِهِ لَا تَخْرُنْ إِنَّ اللَّهَ  
مَعَنَّا فَأَنْزَلَ اللَّهُ سَكِينَتَهُ عَلَيْهِ وَأَيَّدَهُ بِجُنُودٍ  
لَمْ تَرُهُ وَأَجْعَلَ كَلِمَةَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَسْقُلَى  
وَكَلِمَةُ اللَّهِ هُنَّ الْعَلِيُّونَ وَاللَّهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ<sup>١٢</sup>

١٩٣

**37.** Dib dhigidda (bil caaggan oo xurmo gaar ah leh) waa uun gaalnimoo dheeraad ah<sup>(10)</sup>: ee lagu habaabiyey gaalada, waxay ka dhigaan waxaan caagganeyn oo bannaan sannad oo caagaan sannad kale si ay isugu toosiyaan tirada bilaha uu caagay, oo ka dhigtaan kuwa caaggan ee xurmadda gaar ah leh wax bannaan. Acmaashooda xun baa loo qurxiyey. Oo Allaah ma hanuuniyo dadka gaalada ah.

**38.** Mu'miniintow! Maxaa idiinku wacan, in marka la idinku yirahdo: U soo baxa arrinka Ilaahey aad isagu dhajisaan dhulka si culus? Ma waxaad ku raalli noqoteen nolosha adduunkan oo aad ka door biddeen Aakhirada? Oo ma aha sahayda nolosha adduunku marka la barbar dhigo Aakhirada waxaan ahayn wax yar<sup>(11)</sup>.

**39.** Haddayaan bixin, Wuxuu idinku cadaabi doonaa cadaab aad u xanuu badan oo idinku beddelli doonaa dad kale, waxbana kama dhimi doontaan marnaba, oo Allaah wax walba wuu Karaa.

**40.** Haddayaan taageerin (Nabiga), Allaah baa xaqiq taageeray, markay debedda u soo saareen gaalada, isagoo labo midkood ah<sup>(12)</sup> markay labaduba ku jireen hogga, markuu ku lahaa saaxiibki: Ha murugoon, hubaal Allaah baa na la jira. Kolkaas buu Allaah ku soo dejiyey xasillooni dushiisa, oo uu ku xoojiyey ciidammo (malaa'ig) aydaan arkin, oo ka dhigay mid hooseysa kelmedda gaalada, oo Kelmedda Ilaahey<sup>(13)</sup>, waa taa sarreysa, Oo Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

**10.** Haddii ay arkaan inay u faa'iido badan tahay inay buriyaan bil caaggan, way sameynayeen, iyagoo yeelayet bil kale halkeeda ay ku dhowraan caagganaanta dagaal gelidda.

**11.** Anas bin Maalik a.k.r waxaa laga soo weriyeey in Nabigu s.c.w. yiri: "Ma jiro addoona dhinta ayna u taalla Alle agti kheyr oo jecel inuu u soo laabto adduunka iyadoo lagu siinayo adduunka iyo waxa yaal oo dhan marka laga reebu shahiidka, waxa uu arkayo darteed oo fadliga shahaadada ah, wuxuu jecleysanayaa inuu u soo laabto adduunka si loogu dilo mar kale Dar Ilaahey. (Al-Bukhaari)

**12.** Kan labbeeya wuxuu aaha saaxiibki Abuu Bakar.

**13.** Kelmedda waa Laa ilaaha illal laah (ma jiro ilaahe xaq ah aan ahayn Allaah)

**41.** Baxa idinkoo fudud iyo idinkoo culusba<sup>(14)</sup>, oo kula jihaada maalkiinna iyo nafahiinnaba Jidka Ilaahay. (Arrin) kan baa idiin khayr badan, haddaad og tiihiin.

**42.** Hadday ahaan lahayd dheef dhow iyo safar fudud, xaqiq way ku raaci lahaayeen, laakiinse tubtii baa ku dheeraatay, oo waxay ku dhaaran doonaan Allaah (iyagoo leh): haddaanu kareyno hubaal waa idin la bixi lahayn; waxay halaagayaan nafahooda, Oo Allaah wuu Og yahay inay xaqiq yihii beenalayaal.

**43.** Allaha ku cafiyee! Maxaad u siisay idanka, ilaa ay kuu caaddato kuwa runta sheegay, oo aad ogaato kuwa beenalayaasha ah?

**44.** Kaama idan qaataan kuwa rumeysan Allaah iyo Maalinta dambeysa, si looga dhaafo inay ku dadaal muujiyaan maalkooda iyo nafahooda, Oo Allaah waa og yahay kuwa iska jira (xumaha).

**45.** Wuxaase kaa idan qaataa uun kuwa aan rumeysnayn Allaah iyo Maalinta dambeysa ee uu shaki ku jira quluubtooda ee iyagu shakigooda ku jaha wareersan.

**46.** Oo hadday doonayaan inay baxaan, xaqiq way u qalab diyaarsan lahaayeen, laakiinse Allaah wuxuu nacay bixiddoda, markaas buu wahsi galiyey oo lagu yiri: La fariista fadhiidyada (guryaha).

**47.** Hadday idinla bixi lahaayeen, idiinma kordhiyeen waxaan ahayn qas, oo waxay xaqiq u degedegi lahaayeen fasahaadintiinna iyagoo raba (inay abuuraan) fidmo dhexdiinna, oo waxaa idinku jira kuwo maqalka raariciya iyaga dartood. Oo Allaah wuu yaqaan daalimiinta.

أَنْفَرُوا إِخْفَافًا وَثِقَالًا وَحَمِيدُوا بِأَمْوَالِكُمْ وَأَنْفَسُكُمْ  
فِي سَبِيلِ اللَّهِ ذَلِكُمْ حَيْزٌ لَكُمْ إِنْ كَانَتْ تَعْلَمُونَ  
لَوْكَانَ عَرَضًا قَرِيبًا وَسَفَرًا قَاصِدًا الْآتَى بِعُوكَ  
وَلَكِنْ بَعْدَتْ عَلَيْهِمُ الشُّفَةُ وَسَيَخْلُوُونَ بِاللَّهِ  
لَا يَسْطَعُونَ الْخَرْجَةَ مَعَكُمْ بِإِلَيْكُمْ أَنْفَسُهُمْ وَاللَّهُ  
يَعْلَمُ إِنَّهُمْ لَكَارِبُونَ ۝ عَفَا اللَّهُ عَنْكُمْ لَمْ يَأْذِنْ لَهُمْ  
حَقَّ يَبْيَسَنَ لَكَ الَّذِينَ صَدَقُوا وَتَعَمَّلَ الْكَذَبُونَ  
لَا يَسْتَدِنُنَّكَ الَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمَ الْآخِرَ  
بِمَهْدِهِ وَبِأَمْوَالِهِ وَأَنْفَسِهِ وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِالْمُتَقْبِرِينَ ۝  
لَا يَسْتَقْبِلُنَّكَ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمَ الْآخِرِ  
وَأَرْنَاتَ قُلُوبُهُمْ فِيهِمْ فِي رَيْبٍ مِّنْ يَرَدِدُونَ ۝ وَلَوْ  
أَرَادُوا الْخَرْجَةَ لَا عَدُولَهُ وَعَدَهُ وَلَكِنْ كَرَهَ اللَّهُ أَيُّعَا لَهُمْ  
فَشَطَطُهُمْ وَرَقِيلٌ أَعْدُوا مَعَ الْقَعْدِينَ ۝ لَوْخَرُوْفِيكَ  
مَا زَادُوكُمْ إِلَّا خَبَابًا وَلَا ضَعْوًا خَلَالَكُمْ بَعْنَوْنَ ۝  
الْقَسْنَةَ وَفِي كُمْ سَمَعُونَ لَهُمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ بِالظَّالِمِينَ ۝

١٩٤

<sup>14.</sup> Waa da' yar iyo duqow, idinkoo gaadiid fuushan, ama lugneyaya, ladnaan iyo lurnaanba - duruuf iyo xaalado kasta oo aad ku jirtaan waa inaad u baxdaan jihaadka.

لَقَدْ أَبْتَغَوُ الْفَتْنَةَ مِنْ قَبْلٍ وَقَلْبُهُمُ الْأَمْرُ حَقًّا  
 جَاءَ الْحَقُّ وَظَهَرَ أَمْرُ اللَّهِ وَهُمْ كَإِهْوَنَ<sup>١٥</sup> وَمِنْهُمْ  
 مَنْ يَقُولُ أَنَّنِي لَيْلَةُ الْفَتْنَةِ مَسْقُطًا وَأَنَّ  
 جَهَنَّمْ لِمُجِيْطَةِ الْكُفَّارِ<sup>١٦</sup> إِنْ تُصْبِّتُكَ  
 حَسَنَةً نَسُوهُمْ وَإِنْ تُصْبِّتُكَ مُصِيْبَةً يَمْعُلُوْنَ قَدْ  
 أَخْذَنَ أَمْرَنَا مِنْ قَبْلٍ وَيَسْتَوْلُوْنَ وَهُمْ فَرِحُونَ<sup>١٧</sup> قُلْ  
 لَنْ يُصِيبَنَا إِلَّا مَا كَتَبَ اللَّهُ لَنَا هُوَ مُوْلَانَا وَعَلَىَّ  
 اللَّهِ فَلَيْسَ كَيْلَ الْمُؤْمِنُونَ<sup>١٨</sup> قُلْ هَلْ تَرَصُّونَ بِإِلَّا  
 إِحْدَى الْحَسَنَيْنِ وَخَنْ تَرَضُّ يَكُونَ أَنْ يُصِيبَ كُمُّ اللَّهِ  
 يُعَذَّبَ إِنْ عِنْدَهُ أَوْ يَأْتِي إِنْ تَرَصُّوا إِنَّا مَعَكُمْ  
 مُرَبِّصُونَ<sup>١٩</sup> قُلْ أَنْفَقُوا طَوْعًا أَوْ كَرْهًا إِنْ يُتَبَّلَّ  
 مِنْكُمْ إِنَّكُمْ كُنْتُمْ قَوْمًا فَاسِقِينَ<sup>٢٠</sup> وَمَا  
 مَنَعَهُمْ أَنْ تُقْبَلَ مِنْهُمْ فَقَتُّهُمْ إِلَّا أَنَّهُمْ كَفَرُوا  
 بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَلَا يَأْتُونَ الْأَصْلَوةَ إِلَّا وَهُمْ  
 كُسَالَى وَلَا يُنْفِقُونَ إِلَّا وَهُمْ كَإِهْوَنَ<sup>٢١</sup>

١٩٥

48. Hubaal waxay idinla dooneen fidmo kal hore, oo ay kuu rogeen umuuraha<sup>15</sup>, -jeer xagu yimid oo Amarka Ilaahey (guusha) noqotay mid cad oo muuqata iyagoo nacaya an raalli ka ahayn.

49. Oo waxaa ka mid ah mid yiraahda: Ii fasax (inaan guriga joogo) oo ha i fidmayn<sup>16</sup>. Hubaal waxayba ku dhaceen fidmo. Oo hubaal Naar baa koobi doonta Gaalada.

50. Haddii samaani ay ku hesho, waa murugo gelisaa, oo haddii musiibo kugu dhacdo, waxay yiraahdaan: Waxaan runtii qaadannay digtoonidayada kal hore, oo waxay sii jeestaan iyagoo faraxsan.

51. Dheh: Waxba naguma dhici doonaan wuxuu Allaah noo qoray maahee. Isagaah ah Gargaarayahaga. Oo Allaah ha isku halleyaan mu'miniintu.

52. Dheh: Ma waad nala sugtaan waxaan ahayn labada wanaagsan middood (guul ama geeri)? halka aan innagu idinla sugno inuu Allaah idinku rido cizaab Xaggiisa ah ama gacmahayaga ah. Ee suga, xaqiij innaguna la jirkiin waa sugeynaa.

53. Dheh: Ku bixiya wax Jidka Ilaahey idinkoo ku raalli ah ama idinkoo karhsan, la idinkama aqbali doono. waxaad hubaal idinku tiihiin dad caasiyaal ah.

54. Oo waxna uma diidin in laga aqbalo wax bixintooda aan ahayn inay rumeyn diideen Allaah iyo Rasuulkiisa; oo ma yimaadaan salaadda iyagoo wahsanaya maahee<sup>17</sup>; oo waxna ma bixiyaan iyagoo kahanaya maahee.

<sup>15</sup>. Waxay kuu geddiyeen arrimahii adiga kula xiriiray (maankooda, iyagoo ka fakarayey sida ay kuu fashilan lahaayeen), sidaas awgeed bay ku halaagsameen.

<sup>16</sup>. Munaafiqinta waxay qabeen inay naftooda ku badbaadsdeen ku hariddooda gadaa.

<sup>17</sup>. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Ma jirtu salaad uga culus munaafiqinta salaadda Subax iyo Cishe, haddiina ay ogaan lahaayeen waxa ku jira oo ajar ah, waa ay imaan lahaayeen kolay u soo guurguurgaan". W.w. Al-Bukhaari

**55.** Ee yaanay maalkooda iyo carruurtooda ku cajab gelin; Allaah wuxuu uun doonayaa inuu ku cadaabo nolosha adduukan, iyo in nafahu ka baxaan iyagoo gaalo ah.

**56.** Oo waxay ku dhaartaan Allaah inay xaqiq idinka mid yihiin, oo ma idinka mid aha, laakiinse iyagu waa dad idinka cabsan.

**57.** Hadday heli lahaayeen magan ama hog, ama meel ay galaan, hubaal way u jeesan lahaayeen iyagoo u kala dheereynaya.

**58.** Oo waxaa ka mid ah qaar kugu eedeeya arrin la xiriirta (qaybinta) sadaqooyinka. Oo haddii wax laga siiyo ku raalli ahaada, haddiise aan wax laga siin, mise way caroodaan.

**59.** Oo hadday raalli ku noqon lahaayeen waxa ay Allaah iyo Rasuulkiisu siiyeen oo ay oran lahaayeen: Allaah baa nagu Filan. Allaah baa dhaqso na siin doono wax (badan) oo ka mid ah Fadlgiisa, iyo (sidoo kale) Rasuulkiisa. Hubaal innagu Allaah uun baan rabnaa oo wax ka dooneynaa<sup>(18)</sup>.

**60.** Sadaqooyinka (Zakada)<sup>(19)</sup> waxaa sideedaba iska leh oo keliya Fuqarada iyo Masaakiinta iyo kuwaa looga howl galiyey inay soo ururiyaan; iyo kuwa ay u soo wehel sameen quluubtooda (Islaamka); iyo in lagu xoreeyo addoomaha; oo waxaa leh deymesanayaasha; iyo in lagu bixiyo Jidka Ilaahey, iyo musaafirka (go'doonsan), waa faral Allaah uu gooyay. Oo Allaah waa wax kasta Oge, Xakiim ah.

**61.** Oo waxaa ka mid ah kuwa dhiba Nabiga oo dhaha: Waa mid rumeysta (war kasta) uu maqlo<sup>(20)</sup>. Dheh: Waa khayr idiin maqlihiinna (ee) rumeysan Allaah; oo aamin ku qaba mu'miniinta; oo waa u naxariis kuwiinna idinka mid ah ee rumeysan. Oo (ma xagga) kuwa dhiba Rasuulka Ilaahey waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuun badan.

<sup>18.</sup> Waxaa loola jeedaa waxaan rabnaa Allaah iyo fadligiisa iyo aqbalkiisa, ama waxaan rabnaa wax kasta uu rabo Allaah inuu naga siyo fadligiisa.

<sup>19.</sup> Sakada waxay ka daahirsa qofka bakheylnimada iyo maal jaceylka zaa'idka ah. Waxay kobcisaa tilmaamaha wanaagsan ee la ammaano, oo sidoo kale waxay u kordhisaa maalkooda.

<sup>20.</sup> Waxaa loola jeedaa waa qof rumeysta wax kasta uu maqlo.

فَلَا تَعْجِزْكَ أَمْوَالُهُمْ وَلَا أَوْدُهُرٌ إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِعَذَابَهُمْ  
يَهَا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَتَرَهُقُ أَنْفُسُهُمْ وَهُمْ كَافِرُونَ  
رَجَحُلُوْنَ يَأْتِيَ اللَّهُ أَمَّا مَنْ كُوْنُوكَوْ لِكَافِرُونَ  
قَوْمٌ يَفْرُوْنَ اُولَئِكَ دُورُوتَ مَلْجَعًا أَوْ مَغْرَبَيْنَ أَوْ مَدَحَلَّا  
لَوْلَاهُ أَيْتَهُ وَهُمْ يَتَجَمَّعُونَ وَمَنْ هُمْ مِنْ يَلْمِزُكَ فِي  
الْأَصْدَقَاتِ إِنَّمَا أَعْطُوا مِنْهَا رَضْوًا وَإِنْ لَمْ يَمْطُلُوا مِنْهَا إِذَا  
هُمْ سَتَّخْلُونَ وَلَوْلَاهُ رَضْوًا مِنْهُمْ اللَّهُ وَرَسُولُهُ  
وَقَالُوا حَسِبْنَا اللَّهُ سَيِّدِنَا اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ وَرَسُولُهُ  
إِنَّا إِلَى اللَّهِ رَغْبُونَ إِنَّمَا أَصْدَقَتُ لِلْفَقَرَاءِ وَالْمَسْكِينِ  
وَالْعَدِيلِينَ عَلَيْهَا وَالْمُؤْلَفَةَ فُلُوْبُهُمْ وَفِي أَرْقَابِ  
وَالْقَرْبَادِينَ وَفِي سَبِيلِ اللَّهِ وَأَبْنَى السَّبِيلَ فِي رِصَدَةَ  
مِنْ اللَّهِ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ وَمَنْ هُمْ الَّذِينَ يُؤْدُونَ  
الَّذِي وَيَقُولُونَ هُوَ أَدْنَى فُلُذُ حَيْرَانَ كُوْنُوكَوْ  
بِاللَّهِ وَتَوْهِمُ لِلْمُؤْمِنِينَ وَرَحْمَةُ اللَّهِ بِلِلَّذِينَ ءَامَنُوا  
مِنْكُمْ وَالَّذِينَ يُؤْدُونَ رَسُولُ اللَّهِ لَهُ عَذَابٌ أَلِيمٌ<sup>(21)</sup>

يَخْلِفُونَ بِاللَّهِ لَكُمْ لِيُرْضُوكُمْ وَلَهُ وَرَسُولُهُ أَحَقُّ  
أَنْ يُرْضُوهُ إِنْ كَانُوا مُؤْمِنِينَ ٦٣ أَلَمْ يَعْمَلُ أَنَّهُ مِنْ  
يُخَاهِدُ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَإِنَّهُ دُنَارَ جَهَنَّمَ خَلِيلًا فِيهَا  
ذَلِكَ الْخَرْجُ الْعَظِيمُ ٦٤ يَخَذِّرُ الْمُنَافِقُونَ أَنَّ  
تُنَزَّلَ عَلَيْهِمْ سُورَةٌ تُنَزِّلُهُمْ بِمَا فِي قُلُوبِهِمْ فَلَمَّا سَمَّهُ عَوْنَا  
إِنَّ اللَّهَ مُخْرِجٌ مَا تَحْذِرُونَ ٦٥ وَلَيْسَ سَالَتْهُمْ  
لِيَقُولُوا إِنَّمَا كُنَّا نَخْوَصُ وَنَاعَبُ قُلْ أَبِي اللَّهِ وَأَيْتَنِيهِ  
وَرَسُولِهِ كُنَّتْ سَتَّهُونَ ٦٦ لَا تَعْذِرُوا قَدْ كَفَرُوا  
بَعْدَ إِيمَانِكُمْ إِنْ تَفْعَلُ عَنْ طَالِبَةِ مِنْكُمْ نُعَذِّبُ طَالِبَةَ  
يَا أَهْمَمُهُمْ كَانُوا مُجْرِمِينَ ٦٧ الْمُنَافِقُونَ وَالْمُنَافِقَاتُ  
بَعْضُهُمْ مِنْ بَعْضٍ يَا أَمْرُونَ بِالْمُنْكَرِ وَيَنْهَوْنَ  
عَنِ الْمَعْرُوفِ وَيَعْصِيُونَ أَيْدِيهِمْ سَوْا اللَّهَ فَقَسَرُوهُمْ  
إِنَّ الْمُنَافِقِينَ هُمُ الْفَدَسُوقُونَ ٦٨ وَعَدَ اللَّهُ الْمُنَافِقِينَ  
وَالْمُنَافِقَاتِ وَالْكُفَّارَ نَارَ جَهَنَّمَ خَلِيلَيْنِ فِيهَا هِيَ  
حَسْبُهُمْ وَلَعَنْهُمُ اللَّهُ وَلَهُمْ عَذَابٌ مُّقِيمٌ ٦٩

١٩٢

Waxaan ciqaabi doonaa koox, maxaa yeelay waa dambiiilayaal.

**67.** Munaafiqiinta iyo munaafiqooyinka waa ay is leeyihii, waxay amraan xumaanta oo reebaan samaanta, oo laabaan gaamahooda<sup>(21)</sup>. Waxay illoobeen Allaah, markaas buu Isaguna iska illoobay. Munaafiqiintu hubaal waa iyaga kuwa caasiyaasha ah.

**68.** Allaah wuxuu u ballan qaaday munaafiqiinta iyo munaafiqooyinka iyo gaaladaba dabka Naarta iyagoo ku dhix waaraaya, iyada baa ku filan. Oo Allaah wuu nacladay, oo waxay mudan doonaan cadaab ma guuraan ah.

**62.** Waxay idinku dhaartaan Allaah si ay idiin raalli geliyaan, Allaah iyo sidoo kale Rasuulkiisa baase mudan inay raalli geliyaan haddii ay yihiin mu'miniin.

**63.** Miyaanay ogayn in qofkii khilaafa Allaah iyo Rasuulkiisa hubaal isagu mudan doono Naarta Dabka ah uu ku dhix waaray gudaheeda. (Arrin) kaa waa dufowga aad u weyn.

**64.** Munaafiqiintu waxay ka baqaan in lagu soo dejijo Suurad ugu sheegeysa si cad waxa ku jira quluubtooda. Dheh: Iska jees jeesa! Hubaal Allaah Wuxuu soo bixin doonaa waxa aad ka baqdaan.

**65.** Oo haddaad weydiiso waxay hubaal oranayaan: Wax kale ma ahayne waanu iska kaftameynay, oo aan iska cayaaraynay. Waxaad tiraahdaa: Oo ma Allaah iyo Aayaadkiisa iyo Rasuulkiisa ayaad idinku aad ku jeesjeeseyseen?

**66.** Ha cudurdaarrannina; xaqiil waad gaaloowdeen rumeytiinnii kaddib. Haddaan cafinno koox idinka mid ah,

<sup>21.</sup> Diidaan inay wax ku bixiyaan jidka Ilaahay.

69. Sidii kuwii idinka horreeyay, waxay ahaayeen kuwo idinka xoog badan awood ahaan, oo idinka badan maal iyo carruurba. Marka waxay ku raaxysteen calafkoodii, sidaas baad idinkuna uguraaxaysateen calafkiinnii sidii ay kuwii idinka horreeyey ugu raaxysteen calafkoodii; oo waxaad ku tiinbateen (xumaanta) sidii ay iyaguba ugu tiinbadeen. Kuwani waa kuwa camallaadooda ay buraan adduunkan iyo Aakhiradaba. Waana kuwan kuwa ku sugar khasaarada dhabt ah.

70. Oo miyaanu ku soo gaarin warka kuwii ka horreeyay, ee lahaa qolooyinkii Nuux iyo Caad iyo Thamuud iyo qolodii Ibraahiim, iyo reer Madyan iyo kuwii korkooda hoos loo rogay<sup>(22)</sup>, Rusushoodii waxay ula yimaadeen xijoojin cad. Oo ma aheyn Allaah mid u gefa, laakiinse iyaga baa nafahooda gef ka galay.

71. Oo Mu'miniintu iyo mu'mindahu, waa isu xulufo midba kan kale<sup>(23)</sup>, waxay amraan samaanta, oo reebaan xumaanta; oo oogaan salaadda, oo bixiyaan Zakada, oo adeecaan Allaah iyo Rasuulkiisa. Kuwani, Allaah wuu u naxariisan doonaa; hubaal Allaah waa Adkaade, Xakiim ah.

72. Allaah wuxuu u ballan qaaday mu'miniinta iyo mu'minooyinka beero ay hoostoodu webiyo qul-qulayaan ay ku dhex waarayaan, iyo guryo san oo ku yaal Beeraha negaadiga; iyo tu inaataba ka sii wanaagsan waa Raalli ahaanshaha Ilaahey. Oo (Arrin) kaa baa ah Liibaanta Weyn.

<sup>22</sup>. Waa kuwaas loo diray Luud oo u soo jiiday nafahooda cadaabta Ilaahey. Eeg Q 11: 82-83.

<sup>23</sup>. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Mu'minku wuxuu u yahay mu'minka sida dhista qaarkeed qaarka kale uu xoojiyo. Xadiis kalena wuxuu sheegay inay fir keliya yihiin isu xanuunsan.

كَالَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ كَانُوا أَشَدَّ مِنْكُمْ فُورَةً وَأَتَتْهُمْ أَمْوَالًا  
وَأَوْلَدَ أَفَاسِنَتْهُمْ بِخَلْقِهِمْ فَأُسْتَمْتَعُونَ بِخَلْقِكُمْ  
كَمَا أَسْتَمَعَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ بِخَلْقِهِمْ وَحْضُورُ  
كَالَّذِي خَاطَرَ أَوْلَادَكَ حِيطَنَ أَعْنَابُهُمْ فِي الدُّنْيَا  
وَالآخِرَةِ وَأَوْلَادَكَ هُدُولُ الْخَيْرُوْر<sup>(١)</sup> الْغَرَبَاتِيْمُ  
بَنَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ قَرْمَلُوحَ وَعَادَ وَسُمُودَ وَقَوْرَمْ  
إِبْرَاهِيمَ وَأَصْحَبِيْمَ مَدِيْنَ وَالْمُؤْنَقِكَاتِ أَنْتَهُمْ رُسُلُهُمْ  
يَا أَبْيَتِكَ فَعَمَّا كَانَ اللَّهُ لِيُظْلِمَهُمْ وَلَكِنْ كَانُوا  
أَفْسَهُمْ يَظْلِمُوْر<sup>(٢)</sup> وَالْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ عَصْمَهُمْ  
أَوْلَادَهُمْ يَعْصِيْنَ يَأْمُرُوْرَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَاوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ  
وَيُقْيِمُوْرَ الصَّلَاةَ وَيَقُولُوْنَ الْرَّكْوَةَ وَيَطْبِعُوْرَ اللَّهَ  
وَرَسُولَهُ وَأَوْلَادَكَ سَيِّرَجُهُمْ أَهُلُّ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ<sup>(٣)</sup>  
وَعَدَ اللَّهُ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ جَنَّتِيْمَ تَجْمِيْمِيْمِ مِنْ خَيْرِهِمَا  
الْأَنْهَرِ خَلَالِيْمِ فِيهَا وَمَسَكِنَ طَبِيْبَهُ فِي جَنَّتِيْمِ عَدَدِيْمِ  
وَرِضْوَانِيْمِ مِنَ اللَّهِ أَكْتَبَرْدَالَكَ هُوَ الْقَوْزُ الْعَظِيْمُ<sup>(٤)</sup>

يَتَابُهَا الَّتِيْ جَهَدَ الْكُفَّارَ وَالْمُنَافِقِينَ وَأَغْلَظَ عَلَيْهِمْ  
وَمَا أَوْلَاهُمْ جَهَهَ لَمْ وَيَسَّرَ الْمَصِيرُ<sup>(٢٤)</sup> يَحْلِمُونَ بِإِلَهٍ مَا قَالُوا  
وَلَقَدْ قَالُوا كُلَّمَا الْكُفَّارُ وَكَفَرُوا بِعَدِيلِ اللَّهِ وَهُمْ  
يُمَالَمُونَ يَا أَوْلَى مَنْ قَسَمُوا إِلَيْهِ أَنْ أَغْنِهُمْ اللَّهُ وَرَسُولُهُ  
مِنْ فَضْلِهِ قَلْبَنِيْ تَبَوَّلُكَ حِلْمَنِيْ وَلَنْ يَتَوَلَّنِيْ يَعْبُدُهُمْ  
اللَّهُ عَذَابَ الْيَمَنِ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَمَا هُمْ فِي الْأَرْضِ  
مِنْ وَلِيٍّ وَلَا صَاحِبٍ<sup>(٢٥)</sup> وَمَنْ هُمْ مَنْ عَلِمَ اللَّهُ لِئِنْ أَتَنَا  
مِنْ فَضْلِهِ لَصَدَقَتْ وَلَكَوْنَنَ مِنْ الْصَّالِحِينَ  
فَلَمَّا آتَاهُمْ مِنْ فَضْلِهِ يَخْلُوْنَ يَهُ وَلَوْا وَهُمْ  
مُعْجِزُونَ<sup>(٢٦)</sup> فَاعْجَبُكُمْ رِفَاقُكُمْ فِي قُلُوبِهِمْ إِلَى عَوْمَ بَلْقَوْنِيْ  
يَمَا أَخْلَفُ اللَّهُ مَارِعَدُوهُ وَيَسَّاكُلُوا يَكْذِبُونَ<sup>(٢٧)</sup>  
أَلَّا يَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ سَهْمَهُمْ وَأَنَّ اللَّهَ  
عَلِمَ الْغُيُوبِ<sup>(٢٨)</sup> الَّذِينَ يَلْمِزُونَ الْمُطَوَّعِينَ مِنَ  
الْمُؤْمِنِينَ فِي الْأَصْدَقَاتِ وَالَّذِينَ لَا يَهِدُونَ إِلَيْهِمْ  
فَيَسْهُرُونَ مِنْهُمْ سَخَرَ اللَّهُ مِنْهُمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ<sup>(٢٩)</sup>

199

73. Nabiyyow! La halgama gaalada iyo munaafiqiinta, oo ha u nuglaanina, oo hoygoodu waa Naar, -oo xumaa aayo ahaan.

74. Waxay ku dhaartaan Allaah inaanay oran (wax xun), waxayse xaqiqiig yiraahdeen erey gaalnimo ah, oo waxay gaaloobeen kaddib markay islaameen, oo waxay goosteent wax ay gaari kari waayeen<sup>(24)</sup>, oo kama ayan helin gef waxaan ahayn inay hodan ka noqdeen Fadliga Ilaahey iyo Rasuulkiisa. Oo hadday soo laabtaan iyagay u roon tahay, haddiise ay jeesadaan, Allaah wuxuu cadaabi doonaa cadaab xanuu badan adduunyadan iyo Aakhiradaba. Oo kuma leh dhulka gacal xafida iyo gargaare midna.

75. Oo waxaa ka mid ah kuwo axdi la galay Allaah<sup>(25)</sup>: Hadduu wax naga siiyo Deeqdiisa, waxaan hubaal bixin doonnaa Sadaqooyin, oo waxaan hubaal ka mid ahaan doonnaa kuwa wanaagsan.

76. Markase uu wax ka siiyey Deeqdiisa way ku bakhayleen, oo waxay jeediyeen dhabarka oo durba siibteen.

77. Markaas buu ka yeelay munaafaqinimo inay gasho taasi darteed quluubtooda ilaa Maalinta marka ay la kulmi doonaan, ballan kay kaga baxeen Allaah iyo beenaha ay sheegeen awgood.

78. Ma waysan ogayn inuu Allaah Ogsoon yahay sirtooda iyo faqoodaba iyo in Allaah yahay kan Ogsoon waxa qarsoon aan muuqan.

79. Kuwa ku ceebeeya kuwaada daacadda ah ee ka mid ah mu'miniinta sadaqada ay dar Ilaahey ula baxaan iyo kuwa aan heli karin inay baxshaan waxaan aheyn xoogsigooda oo ku jeesjeesa, Allaah baa ku jeesi doona, oo waxay mudan doonaan cadaab xanuu badan.

24. Waa dilka Nabiga s.c.w.

25. Waxaa loo halaagayaa sababta dhaartaas tiimbisada ah.

**80.** U dalab dambi dhaaf iyaga ama ha u dalbin dambi dhaaf, xitaa haddaad u dambi dhaaf dalabto toddobaatan jeer, Allaah uma dambi dhaafi doono, (Arrin) kan waxaa ugu wacan waxay rumeyn diideen Allaah iyo Rasuulkiisa. Oo Allaah ma hanuuniyo dadka caasiyaasha ah (ee madaxa adag).

**81.** Kuwii dib u haray waxay ku farxeen fadhligooda ay kaga hareen Rasuulkii Ilahay; oo waxay naceen inay kula jihaa galaaan maalkooda iyo Nafahooda Jidka Ilahay, oo yiraahdeen: Ha gurmad bixina kulaylaho. Dheh: Dabka Naarta ayaa ka kuleyl daran, haddii in uun ay garaadsan lahaayeen.

**82.** Ee ha qoslaan wax yar, oo (misna) ooyi doonaan wax badan abaal gud ahaan waxay galabsadeen.

**83.** Ee hadduu kuu soo celiyo Allaah qaar iyaga ka mid ah, oo markaa ay kaa idan qaataan inay kula baxaan, dheh: marnaba waligay ilama bixi doontaan, iilamana dagaal geli doontaan cadow; hubaal waxaaad raalli ku noqtoone inaad fariisataan markii horeba, ee la fadhiya (hadda) inta dib u hadhay.

**84.** Oo ha ku tukan (salaad janaazo) weligaa mid ka mid ah oo dhinta, oo ha is dul taagin qabrigiisa. Waxay hubaal iyagu rumeyn diideen Allaah iyo Rasuulkiisa, oo waxay dhinteen iyagoo caasiyaal ah.

**85.** Oo yeysan maalkooda iyo carruurtoodu ku cajab gelin. Allaah wuxuu uun rabaa inuu ku cadaabo adduunkan iyo inay nafaha ka baxaan iyagoo gaalo ah.

**86.** Oo haddii la soo waxyoodo Suurad amreysa: Rumeeya Allaah oo gala jihaad la jirka Rasuulkiisa, kuwooda hodonka ah aaya kaa idan qaata, oo yiraahda: Na daa aan ka mid noqnonno kuwa dib u hara ee fadhiya (guryaha).

رَضُوا بِأَن يَكُونُوا مَعَ الظُّولَفِ وَطَبِيعَ عَلَى قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَفْقَهُونَ <sup>(٨)</sup> لَكِنَ الرَّسُولُ وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُ جَهَدُوا بِأَمْوَالِهِمْ وَأَنفُسِهِمْ وَأَوْلَئِكَ لِهُمُ الْحَيْرَاتُ وَأَوْلَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ <sup>(٩)</sup> أَعَدَ اللَّهُ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَحْرِي مِنْ تَحْمِلِهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا ذَلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ <sup>(١٠)</sup> وَجَاءَ الْمَعْدُرُونَ مِنَ الْأَخْرَابِ لِيُؤْذَنَ لَهُمْ وَقَدَّ الَّذِينَ كَذَبُوا إِلَهُ وَرَسُولُهُ وَسِيَّصِيبُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ <sup>(١١)</sup> لَيْسَ عَلَى الصُّعْدَاءِ وَلَا عَلَى الْمَرْضَى وَلَا عَلَى الَّذِينَ لَا يَحِدُّونَ مَا يُنْفِقُونَ حَرَجٌ إِذَا نَصَحُوا لِلَّهِ وَرَسُولِهِ <sup>(١٢)</sup> مَا عَلَى الْمُحْسِنِينَ مِنْ سَيِّلٍ وَاللَّهُ عَغُورٌ رَّحِيمٌ <sup>(١٣)</sup> وَلَا عَلَى الَّذِينَ إِذَا مَا أَتَوْكَ لِتَحْمِلَهُمْ قُلْتَ لَا أَجِدُ مَا أَحِيلُ كُمْ عَلَيْهِ تَوَلُّ وَرَاغِبُهُمْ تَفَضُّلُ مِنَ الْمَعْ حَرَنَا أَلَا يَحِدُّونَ مَا يُنْفِقُونَ <sup>(١٤)</sup>\* إِنَّمَا أَسَيِّلُ عَلَى الَّذِينَ يَسْتَذَدُونَكَ وَهُمْ أَغْيَانٌ رَضُوا بِأَن يَكُونُوا مَعَ الظُّولَفِ وَطَبِيعَ اللَّهَ عَلَى قُلُوبِهِمْ فَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ <sup>(١٥)</sup>

87. Waxay ku Raalli noqdeen inay ahaadaan la jirka kuwaan ku hara (gadaal guryaha). Oo waxaa la daboolay quluubtooda, marka waxba ma fahmaan.

88. Laakiin Rasuulka iyo ku rumeysan ee la jira waxay ku jihaad galaan maalkooda iyo nafahooda. Oo kuwan weeye kuwa mudan doona khayraadka, oo waa kuwan kuwa ah liibaanayaasha.

89. Allaah wuxuu u diyaarshay beero ay hoostoodu webiyo qul-qulaan iyagoo ku dhex waaraya. (Arrin) kaa baa ah Liibaanta Weyn.

90. Oo cudurdaartayaashii ka mid ahaa reer miyiga baa yimid iyagoo ku weydiisanaya Idan si looga dhaafo (ka qayb galka jihaadka), oo waxaa haray oo fariistay (guryaha) kuwii u sheegay beenta Allaah iyo Rasuulkiisa; waxaa ku dhici doona kuwa xaqa diiday ee ka mid ah cadaab aad u xanuun badan.

91. Wax eed ah ma saarna korkooda kuwa tabarta yar<sup>(26)</sup> ama bukaanka ah, ama kuwa aan heli karin wax ay bixiyaan hadday daacad u yihiin Allaah iyo Rasuulkiisa<sup>(27)</sup>. Ma jiro jid lagu eed saari karo sama falayaasha. Oo Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

92. Oo ma (saarna eed) kuwaan markay kuu yimaadeen si aad u qaaddo, aad ku tiri: Idiinma heli karo wax (gaadiid ah) aan idinku qaado, markaasay dib u laabteen iyagoo ay ka qubaneyso indhahooda ilmo, murugo darteed ay ka qabaan in aanay helin wax ay bixiyaan.

93. Ee waxaa uun jid (eedeyn ah) lagu leeyahay kuwa idan kaa qaata iyagoo maal qabeen ah, Waxay ku raalli noqdeen inay la joogaan kuwa dib u haray. Oo wuxuu Allaah daboolay quluubtooda, marka ma ay oga (waxa ay waayayaan).

<sup>26</sup> Haweenka iyo carruuta, iyo ducafada, iyo bukaanka iyo dadka da'da weyn.

<sup>27</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Diintu waa daacad ahaansho. Waaanu niri : Yaa loo ahaan? Wuxuu yiri: Allaah, Kitaabkiisa, Rasuulkiisa, madaxda Musliminta, iyo dadweynaha guud ahaan". W.w. Muslim

## JUSKA (11)

**94.** Way idiin cudur daaran doonaan markaad u laabataan xaggooda. Dheh: Ha cudur daaran nina, marnaba idinma rumaysan doonno. Allaah baa horey noogu sheegay arrimo ku saabsan wararkiinna. Oo Allaah wuu arki doonaa camalladiinna (oo sidaasi buu yeeli) Rasuulkiisu. Markaas waxaa dib la idiinku soo celin doonaa xagga Ogsoonaha waxa aan muuqan iyo waxa muuqdaba, markaas buu idiin sheegi doonaa waxa aad fali jirteen (oo dhan).

**95.** Waxay idiinku dhaaran doonaan Allaah markaad u laabataan si aad uga jeesataan. Ee isaga jeesta; waa qurune, oo hoygoodu waa Naar, abaal marin ah waxay kasbadeen awgeed.

**96.** Way idiin dhaaranayaan si aad uga raalli noqotaan, haddiise aad ka raalli noqotaan, hubaal Allaah kama raalli noqdo dadka caasiyaasha ah.

**97.** Reer miyiga aaya ugu gaalnimo daran iyo munaafaqnimo, oo ay aad ugu dhowdahay in aanay waxba ka ogeyn soohidmaha waxa uu Allaah u soo waxyooday Rasuulkiisa; Oo Allaah waa walba Ogsoone, Xakiim ah.

**98.** Oo reer miyiga waxaa ka mid ah kuwo u arka waxa ay bixiyaan inuu yahay ganaax, oo idinla suga balaayo (idinku dhacda), dushooda (bay ahaan doontaa) balaayada wareegta. Oo Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

**99.** Oo reer miyiga waxaa ka mid ah kuwo rumeysan Allaah iyo Maalinta dambeysa, oo u arka waxa ay bixiyaan u dhowaansho Allaah iyo (helitaanka) ducooyinka Rasuulka. Hubaal waxay u ahaan doontaa dhowaansho. Allaah wuxuu gelin doonaa Naxariistiisa. Hubaal Allaah waa Dambe Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

يَعْتَذِرُونَ إِلَيْكُمْ لِذَادِ حَقْشُمُ الْيَمَهِ قُلْ لَا تَعْتَذِرُوا  
لَنْ تُؤْمِنَ لَكُمْ قَدْ نَبَأَنَا اللَّهُ مِنْ أَخْبَارِكُمْ وَسَيَرِي  
اللَّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَمُنْذِرُوْنَ إِلَى عَلِيِّ الْغَنِيِّ وَالشَّهِدَةِ  
فَيَعْلَمُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ ١١ سَيَخْلُفُونَ بِاللَّهِ  
لَكُمْ إِذَا أَنْقَلَيْتُمْ إِلَيْهِمْ لِتَرْضُوْنَعَنْهُمْ فَإِنْ قَرَصُوا  
عَنْهُمْ إِنَّهُمْ يَرْجُونَ وَمَا وَلَهُمْ جَهَنَّمَ إِنَّهُمْ بِمَا كَانُوا  
يَكْسِبُونَ ١٢ يَخْلُفُونَ لَكُمْ لِتَرْضُوْنَعَنْهُمْ فَإِنْ  
تَرْضُوْنَعَنْهُمْ فَإِنَّ اللَّهَ لَا يَرْضِي عَنِ الْقَوْمِ الظَّفَرِينَ  
الْأَغْرِيَابُ أَشَدُ كُفْرًا وَنِفَاقًا وَلَجَدُرًا لَا يَعْلَمُونَ حُدُودَ  
مَا أَنْزَلَ اللَّهُ عَلَى رَسُولِهِ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ١٣ وَمِنَ  
الْأَغْرِيَابِ مَنْ يَتَّخِذُ مَا يُنْفِقُ مَعْرِمًا وَيَرْبَضُ بِكُمْ  
الْدَّوَابَرَ عَلَيْهِمْ دَاهِرَةُ السُّوءِ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ ١٤ وَمِنَ  
الْأَغْرِيَابِ مَنْ تُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَتَسْخُذُ مَا يُنْفِقُ  
فَرُوكِتٍ عِنْدَ اللَّهِ وَصَلَوَاتُ الرَّسُولِ إِلَيْهَا قُرْبَةٌ ١٥ يَهُمْ  
سَيِّدُ خَلْقِهِمُ اللَّهُ فِي رَحْمَتِهِ إِنَّ اللَّهَ عَفُورٌ رَّحِيمٌ ١٦

وَالسَّيِّقُونَ الْأَقْتُورُونَ مِنَ الْمَهْجِرِينَ وَالْأَنصَارِ وَالنَّانِينَ  
 أَتَبْعُوهُمْ يَا حَسِنَ رَضُوفُ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ وَأَعْدَّ  
 لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي تَحْتَهَا الْأَنْهَرُ خَلِيلِنَّ فِيهَا أَبْدَأَ  
 ذَلِكَ الْفَوْرُ الْعَظِيمُ<sup>٢٨</sup> وَمَنْ حَوَلَ كُمْ قَبْنَ الْأَغْرَابِ  
 مُنْقَفِلُونَ وَمِنْ أَهْلِ الْمَدِينَةِ مَرْدُوا عَلَى الْتَّفَاقِ لَا يَعْلَمُهُمْ  
 تَحْنَ تَعْلَمُهُمْ سَعْدَ بْنُ هَمَرَتَيْنِ نَمِيرُ دُونَ إِلَى عَذَابِ  
 عَظِيمٍ<sup>٢٩</sup> وَآخَرُونَ أَعْتَرُوْفُ بِدُنُوْمَهُ خَاطُوْعَمَلَاصِلَاحًا  
 وَآخَرَ سَيِّئًا عَسَى اللَّهُ أَنْ يَنْبُوْبَ عَلَيْهِمْ إِنَّ اللَّهَ غَنُوْرُ رَحْمَمْ  
 حُدُّونَ مِنْ أَهْلِهِمْ صَدَقَةً قَطْهُرَهُ وَرَدَّهُمْ بِمَا وَصَلَ عَلَيْهِمْ<sup>٣٠</sup>  
 إِنَّ صَلَوَاتَكُوكْنَ لَهُمْ وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلَيْهِمْ<sup>٣١</sup> أَلَمْ يَعْلَمُوا أَنَّ  
 اللَّهَ هُوَ يَقْبِلُ التَّوْبَةَ عَنْ عَبْرَادِهِ وَيَأْخُذُ الصَّدَقَاتِ وَأَنَّ  
 اللَّهُ هُوَ الْقَوْبَابُ الرَّجِيمَ<sup>٣٢</sup> وَقُلْ أَعْمَلُوا فَسِيرِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ  
 وَرَسُولُهُ وَآلِهِمْ مُؤْمِنُونَ وَسَرِّدُونَ إِلَى عَلِيِّ الْعَيْبِ وَالشَّهَدَةِ  
 فَيَنْتَهِيُّكُمْ بِمَا كُنْتُمْ تَعْمَلُونَ<sup>٣٣</sup> وَآخَرُونَ مُرْجُونَ لِأَمْرِ اللَّهِ  
 إِمَّا يَعْدُهُمْ وَمَمَا يَنْبُوْبَ عَلَيْهِمْ وَاللَّهُ عَلِيِّمٌ حَكِيمٌ<sup>٣٤</sup>

100. Oo (ma) kuwa u hormaray (iimaanka), ee horreeyey oo ka mid ah Muhaajiriinta<sup>(28)</sup> iyo Ansaarta<sup>(29)</sup> iyo kuwa ku raacay dhaqan wanaagga. Allaah raalli buu ka yahay, iyaguna raalli bay ka yihiin. Oo Wuxuu u diyaariyey beero ay hoostoodu wabiyo qul-qulaan, ay ku dhex waari doonaan weligood. (Arrin) kaa baa ah Liibaanta Weyn.

101. Oo waxaa ka mid ah kuwaa hareerihinna ah ee ka mid ah reer miyiga munaafiqiin, oo (sidoo kale) dadka Madiinah (munaafiqiin baa ka mid ah), ku xeel dheeraaday munaafiqnimada, adigu (Nabi Muxammadow) ma ogid iyaga, Annaga baa (se) Ogsoon. Waxaanu ku cadaabi doonaa labo jeer (adduunkan), haddana waxaa loo celin doonaa xagga Cadaab aad u Weyn.

102. Oo (waxaa ka mid ah reer Madiina) kuwo kale oo qirtay dambiyadooda, waxay isku dareen camal wanaagsan iyo mid kale oo xun<sup>(30)</sup>. Waa intasoo Allaah ka toobad aqbalo. Hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

103. Ka qaad (Nabi Allow) maalkooda

Sadaqo (sako) aad ku daahirineyso oo aad ku barakeynyeys (xoolahooda), oo ugu ducee (barako). Hubaal ducadaadu waa u xasilooni iyaga, oo Allaah waa wax kasta Maqle, wax kasta Ogsoon.

104. Mawaysan ogayn in Allaah ka aqbalo toobada addoomahiisa oo qaato sadaqooyinka iyo in Allaah yahay Kan toobada aqbala, ee Naxariista Badan.

105. Dheh: Camal Fala; marka Allaah wuu arki doonaa camalkiinna (sidaas bayna yeeli doonaa) Rasulkiisa iyo mu'miniintuba. Oo waxaa dib la idiinku soo celin doonaa xagga Ogsoonaha waxa aan muuqan iyo waxa muuqdaba. markaasuu wuxuu idiin sheegi doonaa waxa aad fali jirteen (oo dhan).

106. Oo (waxaa jira) kuwo kale dib loogu dhigay inay sugaan Amarka Ilahay, hadduu cadaabayno ama hadduu ka aqbalayo towbada. Oo Allaah waa wax kasta Ogsonee, Xakiim ah.

28. Muhaajiriin waxaa loola jeedaa halkan asxaabitii Nabiga s.c.w. ee ka soo haajiray Makkah oo degay Madiinah arrinka islaamka darteed.

29. Ansaarta waa kuwii degganaa Madiina ee aqbalay islaamka oo u gargaaray Nabiga s.c.w.

30. Waxay Aayaddan tilmaameysaa inay horay uga qayb qaateen Jihaadka ha yeeshee ay ka hareen duullaankii Tabuuk, oo ay leeyihiin camallo fican iyo mid xunba.

**107.** (Oo waxaa jira) kuwaa (munaafiqiinta ah) ee sameystay masjid ay dhibaato ku geystaan iyo gaalnimo awheed iyo kala geyn mu'miniinta iyo inuu u ahaado gabbaad kan isagu horay ula dagaal galay<sup>(31)</sup> Allaah iyo Rasuulkiisa, oo waxay xaqiq ku dhaaran doonaan waxaan rabbay oo keliya sida wanaagga badan. Oo Allaah wuxuu markhaati ka yahay inay hubaal yihiin iyagu beenalayaal.

**108.** Ha u is taagin (salaad) halkaa waligaa. Xaqiq Masjid<sup>(32)</sup> aasaaskiisa lagu dhisay taqwo maalintii ugu horreysayba baa uga xaq leh inaad dhex joogsat (si aad ugu tukato). Waxaa jooga rag jecel inay isdaahiriyaa. Oo Allaah wuu jecel yahay kuwa is-daahiriyaa.

**109.** Ee ma mid aasaas uga dhigay dhismihiisa cabsida Ilaahey iyo Raalli gelintiisa baa khayr badan, mise mid ka dhigay aasaaska dhismihiisa qarka god dumaya dushiis, oo markaas kula soo dhacay dabka Naarta? Oo Allaah ma hanuuniyo dadka gefka badan.

**110.** Dhismahii ay dhiseen kama suuli doono marnaba inuu ahaado sabab keenta shaki ku jira quluubtooda<sup>(33)</sup> intay quluubtooda ka googga'an (joogsadaan)<sup>(34)</sup>. Oo Allaah waa wax kasta Oge, Xakiim ah.

**111.** Hubaal Allaah wuxuu kaga gayat mu'miniinta nafahooda iyo maalkoodaba inay mudan doonaan Janno, waxay u dagaallamaan Jidka Ilaahey<sup>(35)</sup>, markaasay wax dilaan oo la dilaa. Waa ballan (Ilaahey) saaran oo xaq ah oo ku sugar Tawraadda iyo Injilka iyo Qur'aanka. Oo yaa ka oofin og ballan uu qaaday Allaah? ee ku farxa beeciinna ee aad heshiiska ku gasheen; oo arrinkaa weeye Liibaanta Weyn.

<sup>31.</sup> Waxaa loola jeeda kii la dagaalay Allaah iyo Rasuulkiisa : Abuu Caamir, waxayna sugayeen inuu ka yimaado Suuriya oo kula tukado masjikooda, isagoo ay la socdaan ciidammo Ruumaan ah oo u yimaada la dagaallanka muslimiinta, laakinse Abuu Caamir ma imanoow wuxuu ku diintay Suuriya, masjidkii ay dhiseen munaafiqiinta waxaa lagu dumiyey amarka Rasuulka s.c.w. waxigii ku soo degay darti kaddib markii uu ka soo laabtay dagaalkii Tabuuk.

<sup>32.</sup> Masjidka halkan lagu tilmaamayo waa masjidka Quba.

<sup>33.</sup> Walbaaarka hayet darti.

<sup>34.</sup> Ilaa ay ka dhintaa. Sidaas awgeed ma toobad keenanyaan.

<sup>35.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Arrinka qofka u jihaada Ilaahey darti, Allaahna baana ogsoon qofka u jihaada darti, wuxuu la mid yahay qof u sooma oo u salaada si aan hakad lahayn. Allaah kor ahaaye wuxuu u ballan qaaday qofkii u jihaada Jidkiisa inuu gelin doono Janno haddii la dilo, haddii kale wuxuu u soon celin doonaa gurgiisa isagoo nababd qaba oo ajar helay iyo qaniimo (maal)". Bukhaari.

الْتَّقِيبُونَ الْعَقِيدُونَ الْحَمِيدُونَ السَّاهِرُونَ  
 الْأَكْعُوبُونَ السَّاجِدُونَ الْأَمْرُورُونَ بِالْمَعْرُوفِ  
 وَالشَّاهُورُونَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَالْخَفْطُورُونَ لِحُدُودِ اللَّهِ  
 وَشَرِّ الْمُؤْمِنِينَ ۖ مَا كَانَ لِلشَّيْءٍ وَاللَّذِينَ أَمْوَالُ  
 أَن يَسْتَغْفِرُوا لِلْمُسْكِيَّتِ وَلَوْكَاتُ اُولَئِكُنْ قُبَّرَ  
 مِنْ بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُمْ أَصْحَابُ الْجَنَاحِ ۗ وَمَا  
 كَانَ أَسْتَغْفِرًا لِإِبْرَاهِيمَ لِأَيِّهِ إِلَّا عَنْ مَوْعِدَةٍ وَعَدَهَا  
 إِيَّاهُ فَلَمَّا تَبَيَّنَ لَهُ أَنَّهُ عَدُوُّ اللَّهِ تَعَالَى مِنْ إِنْ إِبْرَاهِيمَ  
 لَأَوَّلَهُ حَلِيمٌ ۖ وَمَا كَانَ اللَّهُ لِيُضِلِّ قَوْمًا بَعْدَ إِذْ  
 هَدَاهُمْ حَتَّىٰ يَبْيَثُ لَهُمْ مَا يَقُولُونَ إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ  
 عَلِيمٌ ۖ إِنَّ اللَّهَ لَهُ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ يُحِبُّ  
 وَيُحِبُّ وَمَا لَكُمْ مِنْ دُونِ اللَّهِ مِنْ وَلِيٍّ وَلَا نَصِيرٍ ۖ  
 ۚ

٢٠٠

112. (Mu'miniintaa waa kuwa ah) toobad keenayaasha, caabudayaasha, kuwa (Alle) ammaana, u socdaala (Arrinkiisa), rukuuca oo sujuuda, amra waxa san ee reeba waxa xun, ee ah kuwaa ilaaliya xuduudaha (uu dhigay) Allaah(36) oo u bishaaree mu'miniinta,

113. Kuma (habboona) Nabiga iyo kuwa rumeysan inay u dambi dhaaf dalbaan mushrikiinta qaraababa ha ahaadaane, kaddib kolk yu caddaatay inay yihiin ehlhu Naar(37).

114. Oo Ibraahiim u dambi dhaaf dalabiisii aabbiihiis waxay ahayd oo keliya ballan uu ka qaaday darteed. Markiise ay u caddaatay inuu ahaa cadow Ilahaay, bannaankuu ka maray; hubaal Ibraahiim wuxuu ahaa kal same, dulqaad badan.

115. Oo Allaah ma lumiyo dad kaddib markuu hanuuniyey jeer uu uga caddeeyo waxa ay iska jirayaan(38). Hubaal Allaah waa Ogsoonaha wax walba.

116. Hubaal Allaah baa iska leh boqortooyada (runta ah ee) samooyinka iyo aralda, wuxuu bixiyaa nolol oo sababaa dhimasho. oo ma lihidin Allaah ka sokow gacal idin xafida ama gargaare midna.

117. Allaah wuu u dambi dhaafay Nabiga iyo Muhaajiriinta iyo Ansaartii raacdya waqtigii adkaa, kaddib markii quluubtaa qaar ka mid ah u dhowaatay u iilasho (inay shakiyaan), markaasuu u dambi dhaafay. Hubaal Allaah waa mid u Turid iyo Naxariis Badan.

36. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Yaa ii ballan qaadaya (dhowrista) waxa labadiisa daan dhexdooda ah (carrabkiisa) iyo waxa labadiisa lugood dhexdooda ah (farjagiisa) waxaan aniguna u ballan qaadaya Janno". W.W. Al-Bukhaari

37. Qofka looma weydiin karo dambi dhaaf Ilahaay oo lama oran karo Allaah u naxariisto, marba hadduu ku dhinto gaalnimo, ama isagoo ku jira shirkii.

38. Qofka looma cadaabo habowgiisa darti haddii aan loo caddeyn waxaa inay dambi yihiin, oo uusan ku xadgudbin amarro loo caddeeyey.

**118.** Oo (sidoo kale wuu u dambi dhaafay) seddexdii la dib dhigay (oo ka qoomameeyey khaladkoodii)<sup>(39)</sup>, heer arladu ku ciriiryootay waxay ballaar laheyd, oo nafahooda sidoo kale ku ciriiryoomen, oo waxay hubeen in aanay jirin meel laga magan galaa Allaah aan ahayn xaggiisa. Markaasuu u soo laabtay, si ay u toobad keenaan. Hubaal Allaah waa toobad aqbalaha, Naxariista badan.

**119.** Mu'miniintow! Alle ka cabsada (oo dhowra xilkii uu idin saaray), oo ahaada la jirka kuwa runlowyada ah.

**120.** Kuma habboona reer Madiina iyo kuwa hareerahooda ah ee ka mid ah reer miyiga inay ku haraan gadaal kaddib (tagitaanka) Rasuulka Ilaahay<sup>(40)</sup>, iyo inay ka jecleystaan nafahooda naftiisa. Maxaa yeelay ma jiro harraad iyo daal ama gaajo ku soo gaara Jidka Ilaahay, oo ma jiro goob ay cagaha dhigaan oo ay ku caro gashaan gaalada, oo ma jiro lib ay ka helaan cadowga oo aan loogu qoreyn camal san ahaan. Hubaal Allaah ma dayaco ajarka sama falayaasha.

**121.** Oo ma jiro wax yar iyo wax weyn oo ay bixiyaan oo ma jiro tog ay ka tillaabaaan oo aan loogu qoray ajar ahaan, si uu Allaah ugu abaal mariyo si waafaqsan kan ugu fiicnaa camalladii ay falayeen.

**122.** Oo ma aha mu'miniinta inay u soo wada baxaan (duullaanka) dhammaantood mar keliya. Ee waa inay iska soo saaraan qayb walba oo iyaga ka mid ah koox (u hareysa) inay fahmaan diinta si ay ugu digaan dadkooda markay u soo laabtaan, si ay u digtonaadaan.

وَعَلَى الْقَلَّةِ الَّذِينَ حُلِّقُوا حَتَّىٰ إِذَا أَضَاقَتْ عَنْهُمُ الْأَرْضُ  
بِمَا رَحِبَّ وَضَاقَتْ عَلَيْهِمْ أَنفُسُهُمْ وَظَنُوا أَنَّ لَمْ يَجِدُ  
مِنَ اللَّهِ إِلَّا إِلَيْهِ تُرْتَبَ عَلَيْهِمْ لِئَلَّا شَوَّلَوْا إِنَّ اللَّهُ هُوَ التَّوَابُ  
الْأَرْجِيمُ ﴿١٦﴾ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا إِذْ قَوْلَهُ وَكَوْنُوا مَعَ  
الصَّدِيقِينَ ﴿١٧﴾ مَا كَانَ لِأَهْلِ الْمَدِيْنَةِ وَمَنْ حَوْلَهُمْ  
مِنَ الْأَغْرِيْبِ أَنْ يَتَخَلَّفُوْعَنْ رَسُولِ اللَّهِ وَلَا يَرْجِعُوْا  
يَا أَنْفُسِهِمْ عَنْ نَفْسِهِمْ ذَلِكَ يَأْتِهِمْ لَا يُصِيبُهُمْ ذَلِكُمْ  
وَلَا يَضَبُّ وَلَا مَحْمَصَةٌ فِي سَيِّلِ اللَّهِ وَلَا يَطْلُوْنَ مَوْلَهُمَا  
يَغْيِطُ الْكُفَّارَ وَلَا يَنْتَلُوْنَ مِنْ عَدْوٍ يَتَلَّا إِلَّا كُتُبٌ  
لَهُمْ بِهِ عَمَلٌ صَالِحٌ إِنَّ اللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُحْسِنِينَ  
وَلَا يُنْفِقُوْتَ نَفَقَةً صَغِيرَةً وَلَا كَيْرَةً وَلَا يَقْطَعُونَ  
وَإِذَا إِلَّا كُتُبٌ لَهُمْ لِيَجِرِيْهُمُ اللَّهُ أَحَسَنُ مَا كَانُوا  
يَعْمَلُوْنَ ﴿١٨﴾ وَمَا كَانَ الْمُؤْمِنُوْنَ لَيَنْفِرُوْا كَافَةً  
فَلَوْلَا نَفَرَ مِنْ كُلِّ فِرْقَةٍ مَتَهْمَ طَائِفَةٌ لَيَنْفِقُوْهُ فِي الَّذِينَ  
وَلَيُنَذِّرُوْهُمْ إِذَا رَجَعُوْا إِلَيْهِمْ لَعَلَّهُمْ يَذَرُوْنَ  
٢٠٦

<sup>39.</sup> Aayadahani waxay ku soo dageen duullaankii Tabuuk, wuxuuna ahaa waqtii aad u kulul, iyo socdaal dheer, waayo Madiina iyo Tabuuk waa kala dheer yihiin marka lug lagu socdo. Seddexdaas nin ee dib ku haray waxay ahaayeen: Kacab bin Maalik, Hilaal bin Umayah, iyo Muraarah bin Rabiee, waxaana lagu eedeyey inay ka hareen dagalkii Tabuuk oo ayan ka soo qayb gelin.

<sup>40.</sup> Waqtiyada shiddada, waxay aheyd inay la sabraan oo la dul qaataan Nabiga s.c.w. oo qabtaan wax kastoo islamka u baahan yahay.

بِتَائِهَا الَّذِينَ أَمْنَوْا فَيَتَلَوُ الَّذِينَ يَلْوَنُ كُمْ مِنَ الْكُفَّارِ  
وَيَجِدُوا فِي كُمْ غَلَظَةً وَأَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُتَّقِينَ  
وَإِذَا مَا أَنْزَلْتَ سُورَةً فِيهِمْ مَنْ يَقُولُ إِنَّكُمْ رَازَدُهُمْ  
هَذِهِ إِيمَانُكُمْ أَلَّا يَرَوْنَهُمْ إِيمَانُنَا وَهُمْ  
يَسْتَبِشُرُونَ وَإِنَّ الْأَلْيَرَتِ فِي قُلُوبِهِمْ مَرْضٌ فَإِذَا هُمْ  
رِجَسًا إِلَى رِجْسِهِمْ وَمَأْوَاهُمْ كَفَرُونَ أَوْ لَا  
يَرَوْنَ أَنَّهُمْ يُقْتَلُونَ فِي كُلِّ عَامٍ مَرَّةً أَوْ مَرَّتَيْنَ  
لَا يَأْتِيُونَ وَلَا هُمْ يَدْكُرُونَ وَإِذَا مَا  
أَنْزَلْتَ سُورَةً نَظَرَ عَصْمُهُمْ إِلَى بَعْضِ هَكُلِ يَرَكُمْ  
فَيَقُولُونَ حَمْدُ اللَّهِ الَّذِي فَلَوْلَاهُمْ يَأْتُهُمْ قَوْرُ  
لَا يَقْتَهُرُونَ لَقَدْ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مِنْ أَنْفُسِكُمْ  
عَزِيزٌ عَلَيْهِ مَا عَنِتُمْ حَرِيصٌ عَلَيْكُمْ بِالْمُؤْمِنِينَ  
رَءُوفٌ رَّحِيمٌ فَإِنَّ تَوْلُوا فَقْلَ حَسِينٌ اللَّهُ لَا إِلَهَ  
إِلَّا هُوَ عَلَيْهِ تَوْكِيدٌ وَهُوَ رَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ

سُورَةُ الْقُوَّةِ

٢٠٧

**128.** Xaqiiq waxaa idin yimid Rasuul idinka mid ah, ay murugo geliso waxa idin dhiba, idiin roon oo dadaal badan, mu'miniinta u turid iyo naxariis badan.

**129.** Haddiise ay jeesadaan, dheh Nabi Muxammadow): Waxaa igu Filan Allaah. Ma jiro ilaha Isaga maahee. Isaga ayaan tala saartay, oo waa Isaga Rabbiga Carshiga Weyn.

**123.** Mu'miniintow! La dagaallama kuwa idiin soo xiga ee ka mid ah gaalada oo ha idinkala kulmeyn adadayg, oo ogaada inuu Allaah la jiro kuwa iska ilaasha (xumaha).

**124.** Oo mar kastoo Suurad la soo waxyoodo, waxaa ka mid ah (munaafiqiinta) kuwo yiraahda: Kiinnee bay tani u kordhisay Iimaan?. Marka ma kuwa rumeeey waxay u kordhisay iimaan, iyagoo ku faraxsan.

**125.** Ma kuwase uu quluubtoodu ku jiro cudur<sup>(41)</sup>, waxay uun u kordhisay xumaan<sup>(42)</sup> (ka badan) xumaantoodii, oo waxay dhintaan iyagoo gaalo ah.

**126.** Mawaysan arag (munaafiqiintaa) in la jarribo sannad waliba mar ama labo jeer? Sidaa oy tahay ma toobad keenaan, mana waansamaan.

**127.** Oo mar kastoo Suurad la soo waxyoodo, wuxuu eegaa qaarkoodba qaarka kale (oo isweydiyyaan): Cid ma idin aragtaa? markaasay jeesadaan oo tagaan. Allaah baa ka jeediye quluubtooda (hanuunka), waayo waa dad aan garasho lahayn.

<sup>41.</sup> Cudurka galbiga waxaa halkan loola jeedaa gaalnimada, nifaaqa, shakiga, kibirka, iwm

<sup>42.</sup> Rijz lugad ahaan waa xumaan, fadaro, najaaso waxxaana loola jeedaa gaalnimo iyo munaafiqinimo.

## Suuradda 10 Yuunus

Waa 109 Aayadood: Makkiyyah

Bismillaahir Raxmaanir Raxiim.

1. Alif Laam Raa<sup>(1)</sup>. Kuwakani waa Aayadaha Kitaabka Xakiimka ah<sup>(2)</sup>.

2. Ma waxaa la yaab dadka ku noqday inaan u soo waxyoonnay (waxyi) nin ka mid ah (Annagoo leh): U dig dadka oo ugu bishaaree kuwa rumeysan inay leeyihiin u hormar (sugan) oo khayr ah Rabbigood agtiisa. Gaaladu se waxay yiraahdaan: Hubaal kanu waa saaxir iska cad.

3. Hubaal Rabbigiin waa Allaah ee ku abuuray samooyinka iyo arlada lix maalmod, markaas ka kor noqday Carshigiisa isagoo maamula arrinka (uunkiisa oo idil). Ma jiro shafeece Idankiisa kaddib ma'ahee; Kaasi waa Allaah, Rabbigiin, ee caabuda Isagoo keliya. Ee miyaydaan waansamayn?

4. Waa Xagga (Allaah) noqodkiinna dhammaantiin. Waa Ballan qaad Ilahay oo xaq ah, hubaal Wuxuu billaabaa (abuurista) uunka, oo haddana soo celin, si uu ugu abaal mariyo kuwa rumeeyey oo falay acmaasha wanaagsan si caddaalad ah. Kuwase rumeyn diiday waxay mudan doonaan cabbitaan biyo aad u kulul iyo cadaab xanuun badan, xaqay diidi jireen darteed.

5. Waa Isaga Kan ka dhigay qorraxda mid iftiin bixisa, dayaxana mid Nuur (ka qaata qorraxda oo soo iftiin celiya), oo u qaddaray rugo uu maro si aad u garataan tirada sanooyinka iyo xisaabta. Allaah uma uusan abuurin kani waxaan ahayn Xaq; Wuxuu u caddeeyaa calaamooyinka dad garasho leh.

6. Hubaal is beddelka habeenka iyo maalinta iyo waxa Allaah ku abuuray samooyinka iyo arlada, waxaa ugu sugar xaqiq calaamooyin dad iska jira xumaha.

بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيْمِ

الرَّٰتِلَكَءَ اِيْكَتُ الْكِتَابِ الْكَيْمِ ۝ اَكَانَ لِلنَّاسِ بِعِبَادَتِهِنَّ اَنْ اَوْهِيَتَاهُ إِلَى رَجُلٍ مِّنْهُمْ اَنْ تَذَرُّ اَنَّاسٌ وَيَشِّرُّ اَذْيَنَ اَمْنَوْا اَنْ لَهُمْ قَدَمَ صَدَقٌ عِنْدَهُمْ ۝ قَالَ الْكَفَرُوْنَ اِنَّ هَذَا سَاحِرٌ ۝ اِنَّ رَبَّكُمْ اَلَّذِي خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْاَرْضَ فِي سِتَّةِ اِيَّامٍ ثُمَّ اَسْوَى عَلَى الْعَرْشِ يُدِيرُ الْاَمْرَ مَمَّا مِنْ شَيْءٍ اِلَّا مِنْ اِذْنِهِ ۝ دَلِيلُكُمْ اَلَّهُ رَبُّكُمْ فَاعْبُدُوهُ اَفَلَا تَذَكَّرُوْنَ ۝ اِلَيْهِ مُرْجِعُكُمْ جَمِيعًا وَعَنْهُ حَقَّا اِلَيْهِ ۝ يَسِّدُ الْحَلَقَ شَرِيعَدُهُ لِيَجْرِي اَلَّذِينَ اَمْنَوْا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ بِالْغَسْطِيلِ وَالَّذِينَ كَفَرُوا لَهُمْ شَرِبٌ مِّنْ حَمِيمٍ وَعَذَابُ اِلَيْمٌ يُمِّا كَمَا كَوَافِيْكَفَرُوْنَ ۝ هُوَ الَّذِي جَعَلَ اَشْمَسَ ضِيَاءً وَالْقَمَرَ رُوْكًا وَقَدْرَهُ وَمَنَازِلَ اِتَّعْلَمُوا عَدَدَ اَلَّيْسِينَ وَلِلْحَسَابِ مَا حَلَقَ اللَّهُ ذَلِكَ اِلَّا يَحْقِيقُ بِفَحْصِ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُوْنَ ۝ اِنَّ فِي اَخْتِلَافِ اِلَيْلٍ وَالنَّهَارِ وَمَا حَلَقَ اللَّهُ فِي السَّمَوَاتِ وَالْاَرْضِ لَآيَتٍ لِقَوْمٍ يَتَفَوَّتُكَ ۝

٢٠٨

1. Eeg sharaxa Suuradda 2 Al-Baqara: Aayadda I.

2. Xakiim waa tilmaanta qofka warkiisa iyo ficiiliisa salsa ku hayaan garasho iyo aragti dheer. waxaa loola jeedaa tilmaamaha doonista, hadaf yeelashada, war samida, falsamada, wax kala saaridda iyo xog ogaanta, aragti dheerida.

إِنَّ الَّذِينَ لَا يَرْجُونَ لِقَاءَنَا وَرَصَوْا بِالْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَأَطْمَلُوا  
بِهَا وَالَّذِينَ هُمْ عَنْ إِيمَانِنَا غَافِلُونَ ١٧ أَوْ لَدُكَ مَا وَنَعَمُ  
النَّارَ يُمَاكِنُكُمْ كَمَا أُمَاكِنُكُمْ ١٨ إِنَّ الَّذِينَ إِمَانُوا وَعَمِلُوا  
الصَّالِحَاتِ يَهْدِيهِمْ رَبُّهُمْ بِإِيمَانِهِمْ جَنَّةٌ مِّنْ تَحْتِهِمْ  
الْأَنْهَرُ فِي جَنَّاتِ الْعِزِيزِ ١٩ دَعَوْلُهُمْ فِيهَا سُبْحَنَكَ  
اللَّهُمَّ وَحْيَتُهُمْ فِيهَا سَلَامٌ وَآخِرُ دَعْوَاهُمْ أَنَّ الْحَمْدَ  
لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ٢٠ وَلَوْ يُعَجِّلُ اللَّهُ لِلشَّاسِ الشَّرَّ  
أَسْتَعِنُكَ اللَّهُمَّ بِالْخَيْرِ لَقَضَى إِنْتَ هُمْ جَاهَلُهُمْ فَنَذَرَ الَّذِينَ  
لَا يَرْجُونَ لِقَاءَنَا فِي طُغْيَانِهِمْ بَعْدَ هُوَ ٢١ وَإِنَّا مَسَّ الْإِسْرَئِيلَ  
الظُّرُورَ دَعَاهَا لِجَنَاحِهِ أَوْ قَاعِدًا أَوْ قَائِمًا فَلَمَّا كَشَفْنَا  
عَنْهُ صُرُورَهُ وَرَكَانَ لَمْ يَدْعُنَا إِلَى ضُرُورَتِهِ ٢٢ كَذَلِكَ زُرْنَا  
لِلْمُسْرِفِينَ مَا كَانُوا لَوْعَمَلُونَ ٢٣ وَلَقَدْ أَهْلَكَ الْقُرُونَ  
مِنْ قَبْلُكُمْ لَمَّا ظَلَمُوا وَجَاءَنَّهُمْ رُسُلُهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ وَمَا كَانُوا  
لِيُؤْمِنُوا كَذَلِكَ بَخْرِيَ الْقَوْمُ الْمُجْرِمُونَ ٢٤ فَرَجَعْنَا لَكُمْ  
خَاتِفٍ فِي الْأَرْضِ مِنْ بَعْدِ هُرْمَلْتُنُوكَ كَيْفَ تَعْمَلُونَ ٢٥

٢٠٩

7. Hubaal kuwa aan rajayn la kulankayaga, oo ku raalli noqday nolosha adduunkan oo ku qalbi degay, iyo kuwa ka dhoohan Aayadahayaga.
8. Kuwaas, hoygoodu waa Naarta, waxay kasban jireen darteed.

9. Hubaal kuwa rumeyey ee fala acmaasha wanaagsan, Rabbigood wuxuu ku hanuun doonaa iimaankooda darti; hoostooda webiyo baa qulquli doona ku yaal Beeraha Barwaqaada ah.

10. Yeeriddooda dhexdeeda waa Subxaanakal Laahumma (Sarreeye ma nuqsaamow adigaan nazahan oo xurmmo dhan leh), oo salaantooda dhexdeeda waa, ‘Salaam’, (nabadgelyo). Oo waxaa ugu dambayn yeeriddooda, ‘Al-Xamdullilaahi Rabbil Caalamiiin (ammaan idilkeed waxaa mudan Allaah, Rabbiga uunanka oo idil)<sup>(3)</sup>.

11. Oo hadduu Allaah u soo dedejin lahaa dadka sharka (ay ka baryaan) sida uu ugu soo dedejijo Khayrka, muddadooda hubaal waa u dhimmaan Lahayd<sup>(4)</sup>. Waxaanse ku dhaafnaa kuwaa aan rajayn la kulankayaga xad gudubkooda iyagoo ku jaha wareersan indha la’aan.

12. Oo marka waxyello gaadho admiga, wuxuu na baryaa, isagoo dhinac u jiifa, ama fadhiya ama sara jooga, kolkiise aan ka feyndoo waxyeellada, wuxuu ku sii socdaa (caasiyoobiddiisa) sidiyyoo anuu marnaba noogu gargaarsan (inaan ka qaadno) waxyello soo gaaray. Sidaas baa loogu qurxiyey xadgudbayaasha waxay falayeen.

13. Oo Waxaan horeyba u halaagnay facyo idinka horreeyey, markay gef galeen, oo Rusushoodii waxay ula yimaadeen Xujoooyin Cad, mase ahayn kuwo rumeynaya. Sidaas baan u abaal marinnaa dadka dambiliyaa sha ah.

14. Markaas baan idinka dhignay kuwa u hara dhulka iyaga kaddib, si aan u eegno sidaaad u dhaqanataan.

3. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: “Ehlu Jannadu waxay wax ka cuni iyo cabbi doonaan Jannada gudaheeda. Ma candhuufan doonaan, oo ma kaadidh doonaan, oo ma saxaroon doonaan, oo ma duufsan doonaan”. Waxaa la weydiiyey: “Ka warran cuntada sidee uga soo baxeyssaa?” Wuxuu yiri: “Daaco ahaan iyo dhidid dhibco sida miskiga oo kale ah”. Waxaan la solan siin doonaa tasbiixda iyo Alla ammaanka sida neefsiga oo kale” (W.W. Muslim)

4. Qaddarka Ilaahay waa inuu waqtii ku siyyo unkuusa arlada, ama inuuusan ciqaabin ka hor inta aan loo soo dirin xujo cad oo ah Rasuul iyo Kitaab.

15. Oo marka Aayadahayaga loo akhriyo xujoojin cad ahaan, kuwa aan rajeyn la kulankayaga, waxay yiraahdaan: Noo keen Qur'aan aan aheyn kan, ama beddel. Dheh (Nabi Muxmmadow): Igama suurowdo inaan iskay u beddolo; Wuxaan uun anigu raacaa waxa la ii waxyoodo. Hubaal wuxaan ka cabsan haddaan caasiyo Rabbigay, cadaab Maalin aad u daran.

16. Dheh: Hadduu Allaah doono, idiinma akhriyeen oo idinma ogeysiyeen. Wuxaan joogay dhexdiinna cimri kan ka hor<sup>(5)</sup>. Ee ma waydaan haddaba garasho lahayn?

17. Ee yaa ka gef badan mid ka been sheega Allaah ama beeniya Aayadihiisa, Hubaal dambii layasha ma liibaanaan.

18. Oo waxay caabudaan Allaah sokadi wuxaan waxyeli karin waxhanaan u tari karin, oo waxay yiraahdaan: Kuwakanu waa kuwa garab na siin Allaah agti<sup>(6)</sup>. Dheh: Ma waxaad u sheegaysaan Allaah wax aanu ogeyn ee ka jira samooyinka iyo arlada gudahooda? Wuu ka nazahan yahay oo ka Sarreeyaa wuxa ay la wadaajiyaa.

19. Oo dadku ma ahayn wuxaan ahayn ummad keliya (wada heysata diin keliya: Islaamka)<sup>(7)</sup>, markaas bay iskhilaafeen (waa' dambe), oo haddii aysan jirteen Kelmed horay uga dhacday Rabbigaa<sup>(8)</sup>, hubaal waa lagu kala xukumi lahaa dhexdooda wuxa ay isku khilaafsan yihiin.

20. Oo waxay yiraahdaan: Maxaa calaamo loogu soo dejin waayey xaggaa Rabbigi? Dheh: Ghaybka (Waxa aan Muuqan ee qarsoon) waxaa ogsoon Allaah Keliya, ee sua, hubaal aniguna waa idinla sugiye.

وَإِذَا شَتَلَ عَلَيْهِمْ إِيمَانُهُنَّ بِهِنَّ قَالَ اللَّهُرَبُ لَا يَرْجُونَ  
لِقَاءَنَا أَنْتَ بِفُرْرَةٍ إِنْ عَيْرَهُنَّ أَنَّ أَبْدَلَهُمْ قُلْ مَا يَكُونُ  
لِي أَنْ أَبْدَلَهُمْ وَمِنْ تِلْقَائِي نَفِيَ إِنْ أَتَيْعُ الْأَمَابِحَوْحَ إِنْ  
إِنْ أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّي عَذَابِ يَوْمِ عَظِيمٍ قُلْ  
لَوْسَاهَ اللَّهُ مَاتَتْ وُجُوهُهُ عَلَيْكُمْ وَلَا أَذْرَكُمْ بِهِ  
فَقَدْ لَيْتُ فِي كُمْ عُمُراً مِنْ قِبَلِهِ أَفَلَا تَعْقِلُونَ  
فَمَنْ أَظَلَمُ مَمَّنْ أَفْرَغَ إِلَى اللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَبَ بِعَيْنِهِ  
إِنَّهُ لَا يُفْلِحُ الْمُجْرُمُونَ وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ  
مَا لَا يَضْرُبُهُمْ وَلَا يَفْعَمُهُمْ وَيَقُولُونَ هَؤُلَاءُ شَفَعُوْنَ  
عِنْدَ اللَّهِ قُلْ أَتَيْتُهُنَّ اللَّهَ بِمَا لَا يَعْلَمُ فِي أَسْمَوَاتِ وَلَا  
فِي الْأَرْضِ سُبْحَانَهُ وَرَبِّنَّا عَمَّا يُشَرِّكُونَ وَمَا  
كَانَ أَكْثَرُ أَهْمَّةَ وَيَحْدَهُ فَخَلَقُوا وَلَوْلَكَ لَمْ  
سَبَقَتْ مِنْ رَبِّكَ لَقْنُونِي بِنِعَمِهِ فِيمَا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ  
وَيَقُولُونَ لَوْلَا أَنْزَلَ عَلَيْهِ مَا يَعْلَمُ مِنْ رَبِّهِ فَقُلْ إِنَّمَا  
الْقَرِيبُ لِلَّهِ فَأَنْتَظِرُهُ وَإِنِّي مَعَكُمْ مِنَ الْمُنَظَّرِينَ

٢١٠

5. Nabigu s.c.w. wuxuu la noolaa afartan sano ka hor inta aan loo waxyoon oo ay ku yiqliiniin ammaano, run badni, dabci samaan, wanqaag iyo khayr oo dhan.

6. Weedhani waxay muujiineysaa caqli xumada dadka asnaamta caabuda ee mooda inay asnaamta uga shafeecayaan oo garab siinaayaan Allaah Kor ahayne agti.

7. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Ilmo kasta waxay ku dhashaan Islaamnimo (oo ah in la caabudo Allaah Keliya aan waxna lala wadaajin cibaadada) laakiinse waalidkiisa baa ka yeela Yuuhood ama Nasaaro (Kirishtaan) ama Majuuus dab caabud ah, sidaba ay xooluhu u dhalaan neef aan iin laheyen. Ma waad ku aragtaan wax dhieg go'an?" (Al-Bukhaari)

8. In loo ooftyoo muddadooda ama inaanaa la ciqaabin cidna iyadoo an xujo cad u iman)

وَإِذَا أَذْقَنَ النَّاسَ رَحْمَةً قَنْ بَعْدَ صَرَّاءَ سَسْتَهُ إِذَا لَهُمْ مَكْرُ  
فِي هَـٰيَاتٍ قُلِّ اللَّهُ أَسْعَ مَكْرُلَ إِنْ رُوسَنَا يَكْتُونَ مَا تَكْرُونَ  
هُوَ اللَّهُ يُسْرِعُكُمْ فِي الْأَبْرَوْ وَالْأَبْحَرِ حَقَّ إِذَا لَكْتُونَ فِي الْفَلَكِ  
وَجَرَنَّ بِهِمْ بِرِيحٍ طَبِّقُوهُ وَقَرْحَوْ بِهَا جَاهَتْهَا رِيحٌ عَاصِفٌ  
وَجَاهَهُمْ الْأَمْوَعُ مِنْ كُلِّ مَكَانٍ رَغْنُوا إِنَّهُمْ أَجِطَّ يَهُمْ  
دَعَوْ اللَّهَ مُحَلِّصِينَ لَهُ الَّذِينَ لَمْ يَنْجُونَ مِنْ هَذِهِ لِنَكُونَ  
مِنَ الشَّاكِرِينَ فَلَمَّا أَجَجَهُمْ إِذَا هُمْ يَبْغُونَ فِي الْأَرْضِ يَغْيِرُ  
الْحَقَّ يَتَابِهَا النَّاسُ إِنَّمَا يَغِيَّرُكُمْ عَلَى أَنْفُسِكُمْ مَمْتَعَ الْحَيَاةِ  
الَّذِينَ آتَيْتَمِ اسْتَمْرَاجَكُمْ فَنَتَّكُمْ بِمَا كَنْتُمْ تَعْمَلُونَ  
إِنَّمَا تَنْعَلَ الْحَيَاةُ الدُّنْيَا كَمَاءَ أَنْزَلَهُ مِنَ السَّمَاءِ فَأَخْتَطَ  
يَهُ بَنَاتِ الْأَرْضِ مَمَّا يَأْكُلُ النَّاسُ وَالْأَنْعَمُ حَتَّى إِذَا  
أَخْدَى الْأَرْضُ نُحْرُقُهَا وَأَرْبَيْتُ وَظَنَّ أَهْلَهَا أَنَّهُمْ قَدْرُونَ  
عَلَيْهَا أَتَهَا أَمْرُنَا يَأْلَا وَهَـٰهَارَا فَجَعَنَهَا حَصِيدًا كَانَ لَمْ يَقْنَ  
يَا لَمْ يَمْسِ كَذَلِكَ فَنَصْلُ الْأَيْتَ لِقَوْمٍ يَنْكَرُونَ وَاللَّهُ يَدْعُونَ  
إِلَى دَارِ الرَّسُولِ وَيَهُدِي مَنْ يَشَاءُ إِلَى صَرَاطٍ شَسْتَقِيمٍ

٢١١

21. Oo markaan dhadhansiinno dadka Naxariis kaddib dhibaato soo gaadhyay, mise! Waxay kolkaas u tab dhigaan Aayadahayaga. Dheh: Allaah baa ku Dhaqsi Badan qorshe deggidda. Hubaal Rusushayada (malaa'igta ah) waxay qoraan wawaad shirqool dhigtaan.

22. Waa Isaga Kan idinka yeela inaad ku safartaan barriga iyo baddaba, jeer marka aad ku jirtaan doonyaha oo ay ku mushaaxaan kuwa saaran (gaalada) dabayl wanaagsan oo ay ku farax san yihiin, ay u timaaddo dabayl kaacsan, oo uga yimaadaan mawjaduhu dhinac kasta, oo ay yaqiinsadaan in la hareereeyay, waxay baryaan Allaah iyagoo u keli yeelaya cibaadada, oo leh: Haddaad naga badbaadiso tani, waxaan hubaal ka mid ahaan doonaa kuwa mahad naqa.

23. Markase uu badbaadiyo, mise! Waxay isla markaa ku qooqaan dhulka xaq darro. Dadow! Qooqiinnu wuxuu u duran yahay nafahiinna, (waa uun) raaxada nolosha adduunkan, kaddibna waa xaggayaga noqodkiinnu, oo waxaan idhi sheegi doonaa waxa aad camal fali jirteen.

24. Mataalka noloshan adduunku<sup>(9)</sup> waa uun sida roob aan ka soo shubno daruurga, markaas dhirta dhulka ka soo baxaan iyagoo isku dheehan, (kaasoo ka mid ah kuwa) ay dadka iyo duunyaduba wax ka cunaan, ilaa marka uu dhulku qaato bilicdiisa kaamilka ah<sup>(10)</sup> oo isqurxiyo oo dadkiisu moodaan inuu gacanta ugu jiro, uu markaas u yimaado Amarkayaga habeen ama maalin, markaas aan ka dhigno gabaahirig (wax la jirrid gooyey) sidii isagoo aan jirinba shalay! Sidaas baan ugu faah-faahinnaa Aayadaha dad fekera.

25. Oo Allaah wuxuu ku baaqaa Daarta Nabadda (Jannada) oo ku hanuuniyyaa qofkuu doono Jid Toosan (Islaamka).

9. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Adduunyadu waa macaan, doog ah, Allaah baa idin dhiibay inaad ka talisaan oo isaga dambeysaan si uu eego waxa add fashaan ee iska jira adduunyada iyo (fidmada) haweenka."

10. Bilicda dhulka waxaa loola jeedaa badaha, buuraha, togagga, dooggga, dhirta iyo geedaha.

**26.** Waxay leeyihiin kuwa fala wanaagga (abaalgud) kan u wanaagsan (Janno) iyo wax ka zaa'id ah<sup>(11)</sup>. Boor iyo dulli midna ma gaari doono wejiyadooda. Waa kuwaa ehl Jannada, oo way ku dhix waari doonaan.

**27.** Kuwase kasbaday xumaha, abaalka xume fal keliyihi waa mid la mid ah, oo dulli baa dabooli doona (wejiyadooda). Ma heli doonaan wax Allaah ka celiya. Waxay ahaan doontaa sida in wajiyadooda lagu daboolay goosanno habeen gudcur madow ah, waa Kuwaa ehl Naarka, oo way ku dhix waari doonaan.

**28.** Oo (xus Nabi Muxammadow) Maalinta aan soo wada kulmin doonno iyaga oo dhan, markaas waxaan ku oran doonaa kuwii la wadaajiyey cid kale (Allaah cibaadada): Halkiinna jooga, idinka iyo shurakadiinnuba; markaas waan ka sooci doonaa (iyaga mu'miniinta), oo shurakadoodii (sannamadoodii) waxay oran doonaan: Ma aydaan na caabudi jirin.

**29.** Ee Allaah baa ku filan markhaati dheddeenna innaga iyo idinkaba, in aanu innagu ahayn kuwo moog cibaadadiinna.

**30.** Halkaa, (Maalintaas) naf walbaa waa la baari waxay horay u fashay, oo waxaa dib loogu celin doonaa Mudanahooda Xaqa ah, oo waxay waayi doonaan waxay been abuuran jireen.

**31.** Dheh: Waa kuma kan idinka siiya risiq samada iyo arlada? ama waa kuma kan haya maqalka iyo aragyada? Oo waa kuma kan noole ka soo saara mayd, oo ka soo saara mayd noolaha? Oo waa kuma kan qorsheeya oo iskuddubarida arrimaha (uunka)? Markaas waxay oran doonaan: Allaah. Dheh: Miyeydaan haddaba ka joogeyn (shirkiga iyo xumaha)?

**32.** Waa Kaa haddaba Allaah, Rabbigii runta ah; ee maxaa xaqa ka xag jira aan habow ahayn? Ee sidee baa marka la idiinka jeedihey?

**33.** Sidaas bay Kelmadda Rabbigaa ugu rumowday kuwa (shirkiga iyo) xumaha ku adkeysta in aanay rumayn doonin.

<sup>11</sup>. Inay arkaan Rabbigood, oo waxa ugu sarreya ah ay ku helaayaan Jannada.

قُلْ هَلْ مِنْ شُرَكَاهُمْ مَنْ يَتَدَبَّرُ الْحَقَّ ثُمَّ يُعِدُّهُ قُلْ اللَّهُ يَعِدُّهُ  
 الْحَقَّ ثُمَّ يُعِدُّهُ فَإِنَّ تُوْفِكُونَ ٢١ قُلْ هَلْ مِنْ شُرَكَاهُمْ مَنْ يَهْدِي  
 إِلَى الْحُقْقَى فِي الْأَنْهَى يَهْدِي إِلَى الْحُقْقَى أَفَمَنْ يَهْدِي إِلَى الْحُقْقَى أَحَدٌ  
 بَعْدَ أَنْ لَا يَهْدِي إِلَّا أَنْ يُهْدَى فَإِنَّ الْكَوْكِبَيْنِ تَحْكُمُونَ  
 وَمَا يَنْتَعِي أَكْثَرُهُمُ الْأَنْذَانَ الظَّلَّ لَا يُعْلَمُ مِنَ الْحَقِّ شَيْئًا  
 إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ بِمَا يَعْمَلُونَ ٢٢ وَمَا كَانَ هَذَا الْقُرْآنُ أَنْ يُفْرَتَى  
 مِنْ دُونِ اللَّهِ وَلَكِنْ تَصْبِيقُ الْأَذْيَارِ بَيْنَ يَدَيْهِ وَتَفْصِيلُ الْكِتَابِ  
 لَا رِبَّ فِيهِ مِنْ زَيْنِ الْعَالَمِينَ ٢٣ إِنَّمَا يُقَولُونَ افْتَرَاهُ قُلْ فَأَنْوَ  
 يُسُورُ قَمَشَاهَهُ وَإِذَا عَمِّنْ أَسْتَطَعْمُرُ مِنْ دُونِ اللَّهِ إِنْ كُنْتُ صَدَقَنِ  
 بِكُلِّ ذَنْبِهِ إِنَّمَا يُحْكُمُ لِعِلْمِهِ وَلَمْ يَأْتِهِمْ قَاتِلُهُ كَذَلِكَ  
 كَذَبَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَأَنْظُرْ كِيفَ كَانَ عَيْنَهُ أَظْلَامِينَ  
 وَمِنْهُمْ مَنْ يُؤْمِنُ بِهِ وَمِنْهُمْ مَنْ لَا يُؤْمِنُ بِهِ وَرَبُّكَ أَعْلَمُ  
 بِالْمُفْسِدِينَ ٢٤ وَإِنْ كَذَبُوكَ فَقُلْ لِي عَمَلِي وَلَكُمْ عَمَلُكُمْ أَنْتُمْ  
 بِرَبِّكُمْ مَمَّا أَعْمَلُ وَأَنَا بَرِّيٌّ مَمَّا تَعْمَلُونَ ٢٥ وَمِنْهُمْ مَنْ  
 يَسْتَعِمُونَ إِلَيْكَ أَفَإِنَّ شُعْعَ أَصْمَمْ لَوْكَاهُوا لَا يَعْقُلُونَ  
 ٢٦

٢١٣

34. Dheh: Ma jiraan wax ka mid ah shurakadiinna ee billaaba (abuurista) uunka haddana soo celin mar kale? Dheh: Allaah baa billaaba uunka haddana soo celin mar kale. Ee sidee baa marka la idiinka iilay?

35. Dheh: Ma jiraan wax ka mid ah shurakadiinna oo wax ku hanuuniya Xaqa? Dheh: Allaah baa wax ku hanuuniya Xaqa. Ee haddaba ma Kan wax ku hanuuniya Xaqa baa mudan in la raaco, mise mid aan isaguba hanuunsanayn in la hanuuniyo ma'ahee? Ee muxuu haddaba arrinkiinnu yahay? Sidee baad wax u xukuntaan?

36. Oo badankoodu ma raacaan waxaan ahayn malo; hubaal malahu waxba kama taro Xaqa. Hubaal, Allaah wuu Ogsoon yahay waxa ay falaan.

37. Oo ma aha (suura gal) in Qu'raankani<sup>(12)</sup> uu keeni karo axad kale aan ahayn Allaah, laakiinse waa xaqiijin wixii ka horreeyey iyo faahfaahin cad ee Kitaabkii (hore), oo kuma jiro shaki inuu ka yimid xagga Rabbiga uunanka oo dhan.

38. Mise waxay ka yiraahdaan (Nabiga): Wuu been abuurtay? Dheh:

haddaba keena Suurad la mid ah (Qur'aan)kani, oo u yeedha (kaalmo ahaan) waxaad awooddan Allaah sokadi, haddaad tiihiin run sheegayaal.

39. Bal, waxay beeniyaan kaa ayan ku koobin cilmi, oo aan fasirkisu weli u imaan. Sidaas oo kale bay waliba u beeniyeen kuwii ka horreeyay. Ee eeg haddaba sida ay aheyd ciribta geflowyada.

40. Oo waxaa ka mid ah kuwo rumeysan, oo waxaa ka mid ah kuwo aan rumeynsneyn, oo Rabbigaa waa Ogsoon yahay kuwa wax halleya.

41. Oo hadday ku beeniyaan (Nabi Muxammad), Dheh: camalkayga anigaa leh, oo camalkiinnuna idinkaa iska leh. Idinku waad ka eed tiran tiihiin waxa aan falo, oo anigu waan ka eed tirnahay waxa aad fashaan.

42. Oo waxaa ka mid ah kuwo ku dhagaysta<sup>(13)</sup>, ma adiga baase dhagoolaha wax maqalsiin kara iyagoon wax garanayn?

<sup>12.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Ma jiro Nabi ka mid ah Anbiyad an la siin mucjisado si ay dadka u rumeystaan. Waxase aniga la I siyyey waa waxiyi uu il waxyooday Allaah Kor ahaaye, sidaas daraadeed waxaana rajeynaya inaan anigu ahaado midka loogu raciad badan yahay Maalinta Qiyaamaha". Bukhaari

<sup>13.</sup> Waa sida inay dhageysanayaan waxa uu akhriyo Rasulka iyo waxa uu baro, laakiinse quluubtooda ma aqbalan xaga.

43. Oo waxaa ka mid ah kuwo ku soo eega<sup>(14)</sup>, ma adigaase ku toosin kara waddada indhoolaha iyagoon wax arkayn?

44. Hubaal Allaah kuma sameeyo wax gardarro ah dadka; laakiinse dadku iyaga baa nafahooda u gefa oo ku gardarrooda.

45. Oo Maalinta uu soo kulmin doono iyagoo dhan, (waxay ahaan doontaa) sida inaysan ku nagaanba (adduunka) waxaan aheyn saacad maalin ka mid ah. oo way is garan doonaan dheddooda. Waxaa khasaaray kuwa beeniyey la kulanka Allaah, oo ma ay ahayn kuwo hanuunsan.

46. Oo haddaan ku tusinno (intaad nooshahay) qaar ka mid ah waxa aan ugu goodinnay (Nabi Muxammad), ama aan ku oofsannoba, waa uun xaggayaq noqdkooda, markaas (labada siyoodba) Allaah baa u jeeda waxa ay falaan.

47. Ummad walbaa waxay leedahay Rasuul; ee markuu yimaado Rasuulkoodu, waxaa lagu kala xukumi doonaan dheddooda si caddaalad ah iyagoon aan lagu gardaroon doonin.

48. Oo waxay oranayaan: Waa goorma ballan qaadkani, haddaad run sheegaysaan?

49. Dheh: Anigu uma hayo naftayda wax dhib ama dheef ah waxa uu Allaah doono ma'hee. Oo ummad kasta waxay leedahay muddo loo qabtay; markuu yimaado waqtigoodu, ma dib dhigi karaan saacad, kamana soo hormari karaan.

50. Dheh: Bal ii sheega hadduu cadaabkiisu idhi yimaado habeen ama maalin cad, \_ maxay haddaba ka degdegsanayaan dambiliyaashu<sup>(15)</sup>?

51. Mise markuu dhaco ayaad rumayn doontaan? Imminka? Oo waxaad ahaydeen (mar) kuwo sugi la'.

52. Markaas baa lagu oran doonaan kuwa gefka (shirkiga iyo macaasida) galay: Dhadhamiya cadaabka waarista. La idinku abaal marin maayo wax aan aheyn waxaad kasbateen.

53. Oo waxay kaa wareystaan (Nabi Muxammad): Ma run baa? Dheh: Haa, Waa igu Rabbigaye! Hubaal waa xaq dhab ah. Oo ma ka baxsan doontaan (Cadaabka Ilahay).

<sup>14</sup>. Macnaha waxaa weeye way arkaan calaamadaha Nabinnimada Rasuulka s.c.w. laakiinse ma ay raacaan oo wax kuma qaataan.

<sup>15</sup>. Maxay ka degdegsanayaan, waxay tilmaameysaa ku jeesjeeska gaalada ay ku jeesjeesayen Nabiga s.c.w. iyagoog ku laaha: Noo keeno ciqaabta Ilahay caddeyn ahaan inuu run sheegayo.

وَلَوْ أَنْ لِكُلِّ نَفْسٍ ظِلْمَتْ مَا فِي الْأَرْضِ لَأَفْتَدَتْهُ ۖ وَأَسْرَوْا  
 الْنَّدَامَةَ لِمَارِأَوْ الْعَذَابَ وَقُضِيَ بَيْنَهُمْ بِالْقُسْطِ وَهُمْ  
 لَا يُظْلَمُونَ ۝ إِنَّ اللَّهَ مَوْلَى الْمُسْكُوتِ وَالْأَرْضُ أَلَّا إِنَّ  
 وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ وَلَكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ۝ هُوَ يُحْكِمُ  
 وَإِنَّمَا تُرْعَى رُكْنَاتِ ۝ يَتَبَاهَ النَّاسُ قَدْ جَاءَتْكُمْ مَوْعِدَةً  
 مِنْ رَبِّكُمْ وَيَسْقَمُ لِمَا فِي الصُّدُورِ وَهُدُّى وَرَحْمَةً لِلْمُؤْمِنِينَ  
 ۝ قُلْ يَعْصِي اللَّهَ وَرَبَّهُ مَنْ هُوَ فِي دِرَاكَ فَلَيَقْرُبُوا هُوَ خَيْرٌ مِمَّا  
 يَحْمَلُونَ ۝ قُلْ أَرَأَيْتُمْ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ لَكُمْ مِنْ رِزْقٍ  
 فَجَعَلَ لَمِنْهُ حَرَاماً وَكَلَّا لِمَنْ أَذِنَ لَكُمْ أَمْعَالَ  
 اللَّهُ تَقْرَبُونَ ۝ وَمَا تَنْهَى إِنَّمَا يَنْهَا رُكْنَاتِ  
 يَوْمَ الْقِيَمَةِ إِنَّ اللَّهَ لَذُو وَضْعِيلٍ عَلَى النَّاسِ وَلَكِنَّ أَكْثَرَهُمْ  
 لَا يَشْكُرُونَ ۝ وَمَا تَكُونُ فِي شَأنٍ وَمَا تَسْأَلُونَ مِنْ فُرُّقَانٍ  
 وَلَا عَلَمُونَ مِنْ عَمَلٍ إِلَّا كُنَّا عَلَيْكُمْ شَهِودٍ إِذْ تُفْسِدُونَ  
 فِيهِ وَمَا يَعْرِفُ عَنْ رَبِّكَ مِنْ مِثْقَالٍ ذَرْقَفِ الْأَرْضِ وَلَا فِي  
 السَّمَاءِ وَلَا أَصْغَرَ مِنْ ذَلِكَ وَلَا أَكْبَرَ إِلَّا فِي كِتَبِنَا

٢١٥

54. Oo hadday naf walba oo gef (shirki) gashay ay lahaan lahayd waxaa dhulka yaalla oo idil, way isku furan lahayd, oo waxay dareemaan qoomammo markay arkaan cadaabka, oo arrinka waa la kala xukumi doonaa dhexdooda si caddaalad ah iyagoo aan lagu gardaroon doonin.

55. Haddaba hubaal waxaa iska leh Allaah waxa jira samooyinka iyo arlada. Hubaal Ballan qaadka Ilaahay waa xaq. Laakiinse badankoodu ma'ogsoona.

56. Isaga baa wax nooleeya, oo sababa dhimasho, oo Xaggiisa baa dib la idiin celin doonaa.

57. Dadow! Waxaa idiinka yimid waano xagga Rabbigiin iyo reysasho lagaga bogsado waxa ku jira laabaha iyo hanuuun iyo naxariis ay leeyiihin mu'miniinta.

58. Dheh: Fadliga Ilaahay iyo Naxariistiisa-arrinkaas ha ku farxaan, isaga baa uga khayr badan waxa ay isu keenaan.

59. Dheh: Bal ii sheega waxa Allaah iduin soo dejiyey oo rizaq ah oo aad ka yeeshaan qaar ka mid ah xaaraan (qaarna) xalaal. Dheh: Ma Allaah baa iduin idmay (inaad sidaasi yeeshaan), mise Allaah baad ka been sheegaysaan?

60. Oo maxay filan kuwa ka been sheega Allaah Maalinta Qiyaamaha? hubaal Allaah waa Kan fadli ku leh dadka, dadkuse badankiisu ma mahad naqaan.

61. Oo (Nabi Muxammadow) ma jirto wax aad ku sugaran tahay oo arrin ah, iyo qayb aad ka akhrido Qur'aanka, \_ oo idinka (dadow) ma fashaan wax camal ah, bal waan idin la joognaa markaad dhex galeysaan. Oo kagama Qarsoona Rabbigaa (haba ahaadaane) wax saxar le'eg dhulka gudahiisa ama cirka, ama wax ka yar ama wax ka weyn bal waxay ku qoran yihiin (dhammaan) Kitaab Cad.

**62.** Haddaba hubaal xulufada Ilaahey ma ahaan doonto cabsi korkooda oo ma murugoon doonaan.

**63.** (Waa) kuwa rumeyey ee iska ilaasha (xumaha).

**64.** Waxay leeyihiin bishaaro<sup>(16)</sup> nolosha adduunkan iyo aakhiradaba. Ma jiro wax beddelaad ah Kelmadaha (amarrada) Ilaahey. Oo taasi waa Liibaanta Weyn.

**65.** Oo yuuna hadalkoodu ku murugo gelin, hubaal Awood oo dhan waxaa iska leh Allaah. Waa Isaga wax kasta Maqlaha, wax kasta Ogsoon.

**66.** Haddaba hubaal, Allaah baa iska leh waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada. Oo kuwa barya cid kale Allaah sokadi ma raacaan (run ahaan) wax shuruko ah uu leeyahay, ma raacaan (waxna) aan ahayn malo, oo been uun bay sheegaan.

**67.** Waa Isaga Kan idiinka dhigay habeeka inaad ku xasishaan, maalintana iftiin Aad wax ku aragtaan. Hubaal waxaa tani ugu jira calaamooyin dad wax maqla.

**68.** Waxay yiraahdaan: Allaah wuxuu leeyahay wiil<sup>(17)</sup>, ka nazahan, Xurmo oo dhan Isaga leh. waa Hodanka Deeqtoon. Wuxuu leeyahay waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada. Wax Xujo ahna uma ay haysataan (arrin)kani. Ma waxaad ka sheegaysaan Allaah wax aydaan ogeyn?

**69.** Dheh: Hubaal kuwa Allaah ka been sheega ma liibaani doonaan.

**70.** Waa uun raaxo (yar) adduunkan gudahi, markaas waa xaggayaga noqodkoodu, markaas baan dhadhanshiin doonaa cadaab daran, gaalnimadooda awgeed.

16. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Riyada wanaagsan (ee dhabowda) uu ku riyooda nin wanaagsan ee Allaah ka cabsada waa qayb ka mid ah afartan iyo lixdanka qaybood ee Nabinnimada. W.w.Al-Bukhaari

17. Waa sida ay yiraahdaan Yuhuudda, Kirishtaanka iyo qolooyin kaleba.

\* وَأَتَلَ عَيْهِمْ بَنَانُجْ إِذْ قَالَ لَقَوْمِهِ يَقْرَئُونَ إِنْ كَانَ كَبَرْ  
عَلَيْكُمْ مَقَابِي وَتَذَكِّرِي بِقَاتِبِ اللَّهِ فَقَلَ اللَّهُ تَوَكَّلْتُ  
فَاجْمَعُوا أَنْرَكْ وَسَرَكَدْ كُلْ لَيْكَنْ أَمْرُرْ عَلَيْكَمْ غَمَةً فَرَ  
أَقْضَوْ إِلَيْكُمْ وَلَا تُنْظَرُونَ<sup>١٨</sup> فَإِنْ تَوَلَّنَ فَمَا سَأَلْتُكُمْ مِمَّا فَرَّ  
إِنْ أَخْرَى إِلَى الْأَعْلَى اللَّهُ وَلَرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ الْمُسْلِمِينَ<sup>١٩</sup>  
فَكَذَبُوهُ فَنَجَّيْهُ وَمَنْ مَعَهُ فِي الْفُلَكِ وَجَعَلَنَهُ خَلِيفَ  
وَأَغْرَقَ الَّذِينَ كَذَبُوا بِعَيْتَنَاتِنَ فَأَنْظَرَ كَيْفَ كَانَ تَقْبَةُ الْمُنْذَرِينَ<sup>٢٠</sup>  
شَمْ بَعْتَنَامْ بَعْدِهِ رُسْلَانْ إِلَى قَوْمِهِمْ فَجَاهُهُمْ بِأَيْتَنَتِ<sup>٢١</sup>  
فَمَا كَانُوا يُؤْمِنُوا مِمَّا كَذَبُوا بِهِ مِنْ قَلْ كَذَلِكَ تَضَعِّفُ عَلَى قُلُوبِ  
الْمُعْتَدِينَ<sup>٢٢</sup> ثُمَّ بَعْتَنَامْ بَعْدِهِ مُوسَى وَهَرُونَ إِلَى فِرْعَوْنَ  
وَمَلَائِيمِ بِعَيْتَنَاتِنَ فَاسْتَحْبَرَ وَأَوْكَأَنُوْقَمَا مُجْرِمِينَ<sup>٢٣</sup>  
فَلَمَّا جَاءَهُمُ الْحُقُوقُ مِنْ عِنْدِنَا قَالُوا إِنَّ هَذَا لِسْخَرُمُّينَ<sup>٢٤</sup>  
قَالَ مُوسَى أَتَقُولُونَ لِلْحُقُوقِ لَمَّا جَاءَكُمْ أَسْحَرُهُدَنَا لَا يُقْلِعُ  
الْمَسْجُرُونَ<sup>٢٥</sup> قَالُوا أَجْهَنَتَنَا لِفَتَنَنَا عَمَّا وَجَدْنَا عَيْهِهِ إِبَانَنا  
وَتَكُونُ لَكُمَا الْكَبِيرَيَاءِ فِي الْأَرْضِ وَمَا لَنْخَ لَكُمَا مُؤْمِمِينَ<sup>٢٦</sup>

٢١٧

71. Oo u Akhri qisadii Nuux. Markuu ku yiri dadkiisi: Dadkaygiyow! hadday joogiddeyya (la jirkiin), iyo (idinku) waaninteyda Aayadaha Ilaahey ay idinku cuslatay - haddaba Allaah baan tala saartay - ee tala goosta arrankiinna oo (soo kulmiya) shurakadiinna, markaas yuusan ahaan arrinkiinnu mid uu ku jiro mugdi<sup>(18)</sup>, markaas igu fuliya xukunkiinna oo ha i siininnaba wax nafis ah.

72. Haddiise aad ka jeesataan (waanadeyda), idinma weydiisan idinka wax abaalgud ah, abaalgudkeyga wuxuu saaran yahay Allaah Keliya, oo waxaa la i amray inaan ka mid ahaado Muslimiinta.

73. Wayse beeniyeen, markaas baan badbaadinay isaga iyo intii ku wehlisy Doonnida, oo Wuxaan ka dhignay kuwa u hara dhulka oo ka taliya, oo waanu qarqinnay kuwii beeniyey Aayadahayaga. Ee bal fiiri sida uu ahaa aayaha kuwii loo digay.

74. Markaas baan u soo bixinnay isaga kaddib Rusul dadkoodii, markaas bay ula yimaadeen Xujooyin Cad, mase rumeyn lahayn waxay horayba u beeniyeen<sup>(19)</sup>. Sidaas baan u daboolnaa quluubta xadgudbayaasha.

75. Markaas baan u soo dirnay iyaga kaddib Muuse iyo Haaruun xagga Fircoon iyo mudanayaashii iyagoo u sida Aayadahayaga, wayse is kibriyeen (dadkii Fircoon) oo waxay ahaayeen dad dambiliayaal ah.

76. Haddaba markuu uga yimid Xaqq Xaggayaga, waxay yiraahdeen: Kanu waa sixir iska cad.

77. Muuse wuxuu yiri: Ma waxaad ka leediihiin (sixir) Xaqa markuu idin yimid? Ma sixir baa kani? Sixiroolaayaashu se ma liibaanaan.

78. Waxay yiraahdeen: Ma waxaad noogu timid inaad naga jeediso waxa aan ka hellay aabbayaashayo, iyo (inaad) ku surreynta arlada markaas Aad idinku yeelataan? Oo innagu ma nihin kuwo marnaba idin rumeysanaya.

18. Ha ka yeelina wax uu ku jiro shaki ama walaac, ee ha ahaato wax idhiin cad, muuqda, oo aan mugdi ku jirin.

19. Facyadii ku xigay waxay ahaayeen kuwo ku adkeysta gaalnimada.

79. Oo Fuircoo wuxuu yiri: Ii keena saaxir kasta oo xeel dheer.

80. Oo markay sixiroolyaashii yimaadeen, Muuse wuxuu ku yiri: Tuurta waxa aad dooneysaan inaad tuurataan.

81. Markaasay markay tuurteen, Muuse wuxuu yiri: Waxa aad la timaaddeen waa sixir (uun), hubaal Allaah baa burin doona. Hubaal Allaah ma hagaajiyo camalka Mufsiidiinta.

82. Oo Allaah wuxuu ku sugi doonaa Xaqa Kelmedihiisa, haba nacaane taa dambiliyayaashu.

83. Cidise ma rumeyn Muuse aan ahayn durriyat (dhallinyaro) ka mid ah qolodiisi cabsi ay ka qabeen darteed Fircoo iyo mudanayaashii inay dhibaato u geystaan; oo hubaal Fircoo wuxuu ahaa mid isku sare yeela arlada, oo hubaal wuxuu ka mid ahaa xadgudbayaasha.

84. Oo Muuse wuxuu yiri: Dadkaygiow! Haddaad rumeysan tiihin Allaah Isaga isku halleya, haddaad tiihin Muslimiin.

85. Markaasay waxay yiraahdeen: Allaah baan ku kalsoonnayah. Rabbiyow! Ha nagu salladin dadkaa gar ma qaatayaasha ah.

86. Oo nooga badbaadi Naxariistaada dadka gaalada ah.

87. Oo waxaan u waxyoonnay Muuse iyo walaalki, (Annagoo leh) Uga yeela dadkiinna guryo ay degaan Masar gudaheeda, oo ka yeela guryihiinna (kuwo u jeeda) qiblada<sup>(20)</sup>, oo ooga salaadda oo u bishaaree mu'miniinta.

88. Oo Muuse wuxuu yiri: Rabbiyow! Hubaal waxaad adigu ku siisey Fircoo iyo mudanayaashii qurux iyo maal nolosha adduunkan, Rabbiyow! Si ay (dadka) uga lumiyaan Jidkaaga. Rabbiyow! Baabbi'i maalkooda, oo adkee quluubtooda, si ayan u rumeyn jeer ay arkaan Cadaabka Xanuunka Badan.

وَقَالَ فَرْعَوْنٌ أَتُؤْنِي بِكُلِّ سَحِيرٍ عَلَيْهِ فَلَمَّا جَاءَهُ السَّحَرَةُ قَالَ لَهُمْ مُوسَى اللَّهُمَّ إِنَّمَا أَنْشَأْتُمْ مُلْفُوقِينَ فَلَمَّا أَقْرَأَهُ مُوسَى مَا حِصْمَتْ بِهِ الْمُسَحِّرُ إِنَّ اللَّهَ سَيِّطِلُهُ إِنَّ اللَّهَ لَا يُصْلِحُ عَمَلَ الْمُفْسِدِينَ وَيَحِقُّ اللَّهُ لِلْحَقِّ بِكُلِّهِ وَلَوْكَةً الْمُشْجِرِ مُؤْنَثٌ فَلَمَّا آتَاهُمْ مُوسَى الْأَذْرِيَّةَ مِنْ فَوْجِهِ عَلَى حَوْقَفٍ مِنْ فَرْعَوْنَ وَمَلَائِكَهُ أَنْ يَقْتَلُهُمْ وَإِنَّ فَرْعَوْنَ لَعَلِيٌّ فِي الْأَرْضِ وَلَهُ وَلِمَنْ أَمْسَرَ فِيهِ وَقَالَ مُوسَى يَقُولُ إِنِّي كُنْتُمْ أَمْنَثُمْ بِاللَّهِ فَعَلَيْهِ تَوَكِّلُونَ كُنْتُمْ مُسْلِمِينَ فَقَالَ الْأَوْاعِيُّ إِنَّ اللَّهَ تَوَكَّلَ إِلَيْنَا لَا يَجْعَلُنَا فَاتَّهَةً لِلْقَوْمِ الظَّالِمِينَ وَنَخْتَارُ حِمَّتِكَ مِنَ الْقَوْمِ الْكُفَّارِ وَأَوْحَيْنَا إِلَيْنَا مُوسَى وَأَخِيهِ أَنْ تَبْوَأَ الْقَوْمَ كُمَامَ بِمِضْرِبِ يَوْمَئِنَّ وَاجْعَلُوْيَوْتُكُمْ قِنَّةً وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَبَشِّرُ الْمُؤْمِنِينَ وَقَالَ مُوسَى رَبِّنَا إِنَّكَ مَا أَتَيْتَ فَرْعَوْنَ وَمَلَائِكَهِ وَرِزْنَاهُ وَأَوْلَاهُ فِي الْحَيَاةِ الْآدُنِيَّاتِ رَبِّنَا إِنَّكَ مَا يَصْلُوْعُنَّ سَيِّلَاتِ رَبِّنَا طَوْسَ عَلَى أَمْوَالِهِمْ وَأَشَدَّ عَلَى قُلُوبِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُوا حَقَّ يَرْوَى الْعَدَابُ أَلَيْهِمْ

<sup>20</sup>. Si ay ugu tukadaan halkaa iyagoo uusan arkayn cadowgooda.

قَالَ فَلَمْ يَجِدْ بَيْتَ دَعَوْنَى كُمَا فَأَسْتَقِمَ إِلَّا تَبَعَّأَنْ سَيِّلَ  
 الَّذِينَ لَا يَعْمَلُونَ <sup>(٢١)</sup>\* وَجَوَرْ نَابِيَّ إِسْرَائِيلَ الْبَحْرَ فَاتَّبَعَهُمْ  
 فِي عَوْنَ وَحْنُودُهُ بَعْيَادَ وَاحْتَى إِذَا أَدْرَكَهُ الْعَرْقُ  
 قَالَ إِمْنَتْ آتَهُ إِلَّا إِلَهٌ إِلَّا إِلَهُ إِنَّمَتْ يَهُ بَنُوا إِسْرَائِيلَ  
 وَلَنَأْمِنَ الْمُسْلِمِينَ <sup>(٢٢)</sup> مَا لَنَقَ وَقَدْ عَصَيَتْ قَبْلَ وَكُنَتْ  
 مِنَ الْمُفْسِدِينَ <sup>(٢٣)</sup> فَلَيْوَمَ نُتْجِيَّكَ بِيَدِنَكَ لَتَكُونَ لَمَنْ  
 خَلَفَكَ إِيَّاهُ وَلَنَ كَيْرَكَ مِنَ الْتَّابِسِ عَنْ إِيَّاتِنَا لَغَفِلُونَ  
 وَلَقَدْ يَوْنَابِيَ إِسْرَائِيلَ مُبَوْأَصْدِقَ وَرَزَقَنَهُمْ مِنْ  
 الظَّبَيْتَ فَمَا أَخْلَقُوا حَتَّى جَاءَهُمُ الْعِلْمُ إِنَّ رَبَّكَ يَقْضِي  
 بِيَهْمُرْرَوْمَ الْعِلْمَةَ فِيمَا كَانُوا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ <sup>(٢٤)</sup> فَإِنْ كُنْتَ فِي شَكٍ  
 مَمَّا أَنْزَلَنَا إِنَّكَ فَسَعَلَ الْلَّهِيَّبَ يَقْرَءُونَ الْكِتَابَ مِنْ  
 قَبْلِكَ لَقَدْ جَاءَكَ الْحَقُّ مِنْ رَبِّكَ فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ الْمُمْتَرِينَ <sup>(٢٥)</sup>  
 وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ الَّذِينَ كَذَّبُوْبَيَّكَ اللَّهُ فَتَكُونُ مِنَ الْخَسِيرِينَ  
 إِنَّ الَّذِينَ حَفَّتْ عَلَيْهِمْ كَلِمَتَ رَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ <sup>(٢٦)</sup>  
 وَلَوْجَاهَنَمَ كُلُّ إِيَّاهُ حَتَّى يَرْفُوْعَ الْعَدَابَ الْأَلِيمَ <sup>(٢٧)</sup>

٢١٩

89. (Allaah) Wuxuu yiri: Baryadiinna waa la idinka aqbalay <sup>(21)</sup>. Ee idinku haya jidka toosan oo ha raacina jidka kuwa aan waxba ogeyn.

90. Oo waxaan ka tillaabinnay Ilmahii Israa'iil badda, oo Fircoona iyo ciidamadiisii baa raacdeystey qooq iyo cadaawad darteed; jeer markuu qaraqu haleelay wuxuu yiri: Waxaan rumeyasanahay inuusan jirin ilaaan ahayn Kan ay rumeysan yihii Ilmahii Israa'iil, oo anigu waxaan ka mid ahay Muslimiinta.

91. Ma imminka? Adigoo hore ugu caasiyey, oo ka mid ahayd kuwa wax fasahaadiya.

92. Marka maanta waxaanu badbaidineynaa jirkaaga <sup>(22)</sup> si aad ugu noqoto kuwa kaa dambeeya calaamo. Oo hubaal intooda badan dadku Aayadahayaga way ka dhoohan yihii.

93. Oo waxaan dejinnay Ilmahii Israa'iil deegaan khayr oo waxaan ku irsaqaqnay waxyaalo wanaagsan, ismana ay khilaafin jeer uu climigu u yimid; hubaal Rabbigaa wuxuu ku kala xukumi doonaa dhexdooda maalinta Qiyaamaha waxa ay isku khilaafi jireen.

94. Haddiise aad ka shakisan tahay (Nabi Muxammadow) waxa aan kuu soo waxyoonnay <sup>(23)</sup>, haddaba weydii kuwa akhrinayey Kitaabka adiga hortaa. Xaqqi wuxuu runtii kaaga yimid xagga Rabbigaa. Ee ha ka mid noqon shaki qabeenka.

95. Oo marnaba ha ka mid noqon kuwa beeniya Aayadaha Ilaahey, waayo markaas waxaad ka mid ahaaneysaa kuwa ku sugar khasaarahaa dhabta ah.

96. Hubaal kuwa ay ku rumowday Kelmadda (xukunka) Rabbigaa, ma rumayn doonaan.

97. Xataa hadday calaamo kasta u timaaddo jeer ay arkaan Cadaabka Xanuunka Badan.

21. Macnaha ducada labadoodaba, waxaa loola jeedaa tii Muuse iyo Haaruun, oo ku biiray isagoo laahaa Aamiin. (Allow naga aqbal).

22. Wuxuu Allaah badbaadiiyey jirkii. Taariikhayannada waxay yiraadhaan: Markuu Allaah qarqiyeey Fircoona, waxaa laga helay jirkiiisa xeebta badaa, waxaa helay masriyintii wayna xafidaan ilaa hadda, oo wuxuu yaal matraf ku yaal Masar. Eeg suuradda Al-Baqara (Q2: 50)

23. Waxaa ka mid ah tafsirka labada Aayadood ee dambe, in loola jeedo inay qiiro kiciyaan Nabiga s.c.w. inuu caddeeyo oo muujiyo suggaantiisa, taas uu falay, tafsir kale waa in inkastoo ereyadaa ay ku socdaan Nabiga s.c.w., waxay haddana dhab ahaan ku socdaan oo ku wajahan yihiin dadka oo dhan.

98. Oo maxay haddaba u jiri weydey (hal) magaalo ee rumaysey oo uu iimaankeedu wax u taray dadkii Yuunus maahee? Markay rumeeyeen waxaan ka feydnay cadaabkii dullowga ee nolosha adduunkan, oo u raaxaynay ilaa iyo muddo.

99. Oo hadduu doono Rabbigaa, way rumayn lahaayeen waxa dhulka jooga oo dhan kulligood. Ee ma waxaad haddaba adigu (Nabi Muxammaodw) khasabtaa dadka si ay u noqdaan mu'miniin.

100. Oo uma aha nafna (suura gal) inay rumeyso Idanka Ilaahay la'aantii, oo Wuxuu yeelaa qurunka<sup>(24)</sup> kuwalla dushooda aan caqligooda wax ku garan.

101. Dheh: Fiiriya waxa jira cirarka iyo dhulka; maxayse wax u tarayaan calaamadaha iyo digniinuuhu dad aan rumeyneyn.

102. Ee ma waxay sugaan (wax kale) aan aheyn wax la mid ah (wixii dhacay) maalmihii dadkii tegey hortood? Dheh: Suga, hubala amiguna (sidoon kale) la jirkiin waxaan ka mid ahay inta wax sugaye.

103. Markaas waxaan badbaadin doonnaa Rusushayada iyo kuwa rumeeyey. Sidaas bayna xaq noogu tahay inaan badbaadinno mu'miniinta.

104. Dheh (Nabi Muxammad): Dadow! Haddaad shaki ka qabtaan diintayada, (ogaada inaan) Anigu caabudin kuwalla aad caabuddaan Allaah sokadi<sup>(25)</sup>. Laakiinse waxaan anigu caabudaa Allaah ee idin oofsada, oo waxaa la amray inaan ka mid ahaado mu'miniinta.

105. Oo (waxaa la i amray), ‘U jeedi wajigaaga xagga diinta adigoo u iilan xaqa, oo marnaba ha ka mid noqonin mushrikiinta.

106. Oo ha baryin Allaah sokadi waxaan waxba ku tareyn, oo waxna aan ku yeeleyn, waayo haddaad sidaa yeesho, hubala waxaad ka mid noqoneysaa geflowyada.

24. Waxaa ka mid ah macnooyinkeeda wasakh, caro, cigaab, gaalnimo, qas, fowdo, iyo habow.

25. Dadka caabuda sanamyada xagiidu waxaa weeye inaysan caabudin sanammo ee waxay caabudaan hawadooda, hawadoodaasi baa amreysa inay caabudaa sanamyadooda. Waa la caabudona waa labo: asnaam aan ka war heyn in la caabudo, waxaynaa oran doonnaan Qiyaamaha innagu war kama heyn cibaadadiinna, iyo cid ogsoon in la caabudo, kuwaasina Qiyaamaha waa ku dafiri doonnaan kuwii caabudi jirey.

وَإِنْ يَمْسِسْكَ اللَّهُ بِضُرٍ فَلَا كَاشِفَ لَهُ إِلَّا هُوَ وَإِنْ يُرِكْ  
بِحَتْرِي فَلَا رَأْدَ لِفَضْلِهِ يُصِيبُ بِهِ مَنْ يَشَاءُ مِنْ عَبْدَاهُ  
وَهُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ ﴿١٧﴾ قُلْ يَتَابُ إِلَيْهَا النَّاسُ قَدْ جَاءُهُ الْحَقُّ  
مِنْ زَيْكَرْ قَمْنَ أَهْتَدَى فَلَا تَبْاهِي مَهْدِيَ لِنَفْسِهِ وَمَنْ ضَلَّ  
فَإِنَّمَا يَضْلِلُ عَلَيْهَا وَمَا أَنَا عَلَيْكُمْ بَوَّكِيلٌ ﴿١٨﴾ وَاتَّبِعْ مَا يُوحَى  
إِلَيْكُمْ وَاصْبِرْ حَتَّى يَحْكُمَ اللَّهُ وَهُوَ خَيْرُ الْحَكَمِينَ ﴿١٩﴾

سُورَةُ هُوَ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
الرَّبُّ كَتَبَ لِحُكْمَتِ إِلَيْتُهُ وَتُرْفَعْتَ مِنْ لَدُنْ حَكَمِ حَيْرٍ  
الْأَعْبُدُ وَاللَّهُ لَنِي لِرَمْنَهُ دَنِيرُ وَبَشِيرٌ ﴿٢٠﴾ وَلَنْ أَسْتَغْفِرُوا  
رَبَّكَمْ نُوَّبُ إِلَيْهِ بِمُسْعِمَ مَعَا حَسَنَاهُ إِلَى أَجْلِ مُسْمَى وَبُوتَ  
كُلَّ ذِي فَضْلَهُ وَلَنْ تَوَلَّ إِلَيْيَ أَخَافُ عَلَيْكُوكُ عَذَابَ قَوْمٍ  
كَبِيرٍ ﴿٢١﴾ إِلَى اللَّهِ مَرْجِعُهُ وَمَوْعِلُ كُلِّ شَيْءٍ وَقَبِيرٌ الْأَلَّاهُمَّ  
يَسْنُونَ صُدُورُهُ لِسْتَ حَفْوَأَمْنَةَ الْأَجِنَّ يَسْتَتَسُونَ شَيْبَهُمْ  
يَعْلَمُ مَا يُبَرُّونَ وَمَا يَعْلَمُونَ لِهِ عَلِيمٌ بِذَاتِ الصُّدُورِ ﴿٢٢﴾

۲۲۱

**107.** Oo haddii Allaah ku taabsiyo waxyeello, ma jiro cid kaa feydi karaa aan Isaga ahayn; oo hadduu kula doono khayr ma jiro cid celin kara Fadlgiisa uu siiyo midkuu doono oo ka mid ah addoomahiisa, oo waa Isaga Dambe Haaf Badanaha, Naxariista Badan.

**108.** Dheh: Dadow! Xaqqo wuxuu idiinka yimid xagga Rabbigii. Ee qofkii hanuunaa, waxay dan u tahay oo u hanuunaa uun naftiisa, oo qofkii lumaa, waxay u daran tahay oo u lumaa uun naftiisa, oo aniga layma saarin inaan idinka noqdo wakiil.

**109.** Oo raac waxa laguu waxyoodo (Nabi Muxammadow), oo samir inta uu Allaah uu ka xukumo. Oo Isaga ayaa u wanaagsan inta wax xukunta.

## Suuradda 11 Huud

Waa 123 Aayadood: Makkiyyah

Bismillaahir Raxmaanir Raxium

**1.** Alif Laam Raa<sup>(1)</sup>. (Kani waa) Kitaab, Aayadihiisa la sugay, markaas laga soo caddeeyey<sup>(2)</sup>, xagga (mid ah) Xakiim iyo Xog Ogaal.

**2.** (Loo soo mariyey iyaga xagga Rasuul, leh) Ha caabudina axad aan ahayn Allaah. Hubaal anigu waxaan idhiin ahay dige ka socda xaggiisa iyo mid idhiin sida warsan aad ku faraxdaan.

**3.** Oo (dhahaya) weydiista dambi dhaaf Rabbigii, oo u toobad keena, wuxuu idiinku raaxeyn sahay wanaagsan oo ku eg muddo la gooyey, oo ku galladeysan mid kastoo fala wanaag wanaaggiisa (ajarkiisa). Haddiise aad jeesataan, markaa hubaal waxaan anigu idiinka cabsi qabaa cadaabka Maalin aad u daran.

**4.** Waa xagga Allaah noqodiinnu, oo Isagu waa Kan wax walba Kara.

**5.** Haddaba hubaal waxay iyagu (gaaladu) jeediyaa laabahooda, si ay isaga qariyaan<sup>(3)</sup>. Haddaba hubaal (xitaa) marka ay isku dadaan maryahooda, Wuxuu (Allaah) Ogsoon yahay waxa ay qariyaan iyo waxa ay muujiyaanba. Hubaal, wuu Ogsoon yahay waxa ku jira laabaha.

1. Eeg sharaxa Suuradda 2: Aayadda.

2. Wuxuu u kala dhigdigaa noocyoo leh: towxiid, axkaan, qisooyin, anshaxa iyo asluubta wanaagsan, dabeeccadda san, cilmi, yabooh, gooddin, iwm oo wuxuu isugu xijjiya Suurad Suurad, iyo Aayad Aayad.

3. Waxay qarsadaan cadaawad iyo nifaqaq iyo naceyb ay u hayaan Rasuulka Ilahayh s.c.w.

## J U S K A (12)

6. Oo ma jiro noole ku sugaran dhulka korkiisa oo aysan Allaah irsaqaddiisu saarnayn. Oo Wuxuu Ogsoon yahay rugtiisa degaanka u ah iyo halka uu ku kaydsan yahay<sup>(4)</sup>. (WaxaaSoo) dhammi waxay ku yaallin Kitaab cad.

7. Oo waa Isaga Kan ku abuuray samooyinka iyo arlada lix Maal mood, oo Wuxuu CarshigiiSu ahaa biyo korkood<sup>(5)</sup>, si uu idiin imtixaamo kiinna idiinku camal wanaagsan. Haddiise aad tiraahdo: Hubaal waa la idin soo bixin dhimasho kaddib, kuwa rumeyn diida waxay hubaal oran doonaan: kani ma aha waxaan aheyn sixir caddaan ah.

8. Oo haddaan dib uga dhigno cadaabka ilaa muddo tirsan, waxay hubaal oran doonaan: Maxaa hayska oo celinaya? Haddaba hubaal maalinta ay u iman doonko (cadaabku), ma aha wax laga weecin doono, oo waxaa ku dhici doona waxay ku jeesayeen.

9. Oo haddaan ka dhadhsiinno aadmiga Naxariis xaggayaga, oo markaas aan ka qaadno, hubaal wuxuu noqdaa mid quusta, oo abaal dhac badan.

10. Oo haddaan dhadhsiinno khayr, kaddib dhib soo gaaray, wuxuu hubaal oran doonaa: Waqtiyadii xumaa way iga tageen, hubaal wuxuu noqdaa mid farxa oo faan badan.

11. Kuwa samra maahee oo sama fala, kuwaas waxay leeyihiin dambi dhaaf iyo abaalgud aad u weyn.

12. Ee waa intaasoo aad ka tagto qaar ka mid ah waxa laguu waxyoodo<sup>(6)</sup>, ama ay ku cirriyoonto laabtaadu inay yiraahdaan darteed: Maxaa khaznad loogu soo dejin waayey, ama uu u soo raaci waayey Malag? Waxaad se adigu tahay oo keliya dige. Oo Allaah baa wax walba ilaaliye ka ah oo kor ka dhowraya.

4. *Mufasirinta qaarkood waxay ku fасireen mustaqirrahaa adduunka, mustowdicna aakhirada, qaarkoodna waxay yiraahdeen: mustaqirrahaa waxaa loola jeeda dhabaraka ninka, mustowdicna riximka haweenta (ilmga galeenka), waxaa kaloo lagu fasiray inta wusan dhalan ka hor, iyo kaddib dhimashadiisa.*

5. *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Allaah Kor ahaaye wuxuu leeyahay: "Wax la bax (ina aadonow) si aan wax kuugu bixiyo oo kuu siyo. (ogaada) Gacanta Ilahaay waa buuxadaa, mana saameyso wax bixinta joogtada ah habeen iyo maalibin. Soo ma aragidt in wixuu uu bixiyay tan iyo intii uu abuuray samooyinka iyo arlada, waxba ayaa kan dhimin waxa ku jira Gacantiisa, CarshigiiSuuna wuxuu ahaa biyo korkiisa, waxaana gacantiisa ah miisaanka uu ku kor yeelo ama hoos yeelo (meeqaanka qofkii uu doono). W.w. Al-Bukhaari.*

6. *Tixgelin dhibaatooyinka la soo gudboonaada Nabiga s.c.w., Allaah subxaanahu wataacaalaa wuxuu ku gubaabiyeey inuu samir yeesho, yaqiuun, sugnaan, si uusan u gabin gaarsiinta dhamaalka.*

أَمْ قُولُوتْ أَفْرَهْ قُلْ فَأَقْوِيْشِرْ سُورَقِشِدْ مُفْتَرَكِتْ  
 وَأَذْعُوْمِنْ أَسْتَطْعُمْ مِنْ دُونَ اللَّهِ إِنْ كُنْمُ صَدِيقِينَ<sup>١٧</sup>  
 فِإِلَّا يَسْتَجِبُوْكُمْ فَأَكْلَمُوْأَنْتَ اَنْزَلْ بِعِلْمِ اللَّهِ وَأَنَّ  
 لَّا إِلَهَ إِلَّا هُوَ فَهُلْ أَنْتُمْ مُسْلِمُوْنَ<sup>١٨</sup> مِنْ كَانْ بِرِيدْ الْحَيَاةَ  
 الَّذِي أَنْزَلْتَهَا لَوْلَى إِنْتَهُمْ أَعْمَلُهُمْ فِيهَا وَهُمْ فِيهَا  
 لَا يَحْسُوْنَ<sup>١٩</sup> أُولَئِكَ الَّذِينَ لَيْسُ لَهُمْ فِي الْآخِرَةِ إِلَّا  
 النَّارُ وَحِيطَ مَاصِنَعُوْفِيهَا وَكَطْلُ مَا كَانُوْيَعْمَلُوْتْ<sup>٢٠</sup>  
 أَفَمَ كَانَ عَلَى بَيْتِكَ مِنْ رَبِّكَ وَرَتْلُوهُ شَاهِدُهُنَّهُ وَفِنْ قَبْلَهُ  
 كَتْبُ مُوسَى إِمَامًا وَرَحْمَةً أُولَئِكَ يُؤْمِنُوْنَ بِهِ وَمَنْ يَكْفُرُ  
 بِهِ مِنْ الْأَخْرَابِ فَالنَّارُ مَوْعِدُهُ فَلَا تَكُنْ فِي مُرْبَةٍ فِيْهُ إِنَّهُ  
 الْحَقُّ مِنْ رَبِّكَ وَلَكُنَّ أَكْثَرُ النَّاسِ لَا يُؤْمِنُوْتْ<sup>٢١</sup> وَمَنْ  
 أَطْلَمَ مِنْ أَفْرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا أُولَئِكَ يُعْصِمُونَ عَلَى  
 رَبَّهُمْ وَيَقُولُ الْأَشْهَدُ هَؤُلَاءِ الَّذِينَ كَذَبُوا عَلَى رَبِّهِمْ  
 الْأَقْتَنَةُ اللَّهُ عَلَى الظَّالِمِيْتْ<sup>٢٢</sup> الَّذِينَ يَصْدُونَ عَنْ سَيِّلِ  
 اللَّهِ وَيَسْعُونَهَا عَوْجَاهُمْ بِالْآخِرَةِ هُمْ كَفِرُونَ<sup>٢٣</sup>

13. Mise ma waxay leeyihin: Wuu been abuurtay. Dheh: Haddaba Keena toban Suuradood la mid ah ee la been abuurtay, oo u yeerta (inay idinku caawiyaan) ciddaad kartaan Allaah ka sokow, haddii aad tiihin run sheegayaal.

14. Haddiise aysan idin ajiibin, haddaba ogaada in lagu soo waxyooday (Qur'aanka) Cilmiga Ilaahay<sup>7</sup> iyo inuusan jirin Ilaah Isaga maahee. Ee haddaba idinku ma (u) hoggaansameysaan muslimiini ahaan?

15. Qofkii raba noloshan adduunka iyo quruxdeeda, waxaan ugu oofin doonaa si dhan abaal gudka camalkooda gudaheeda, iyagoon waxba laga dhimi doonin.

16. Kuwaasi weeye kuwa aan ku laheyin Aakhirada waxaan ahayn Naar; oo waxaa buraa waxaa ay ku faleen gudaheeda (noloshii adduunkii) oo camallo san ah, oo qiimo ma leh waxa ay falayeen.

17. Ee haddaba ma qof Xujo Cad ka heysta Rabbigii (baa la mid ah kuwaa la soo xusay), oo markhaati Xaggiisa ah uu raaco<sup>8</sup>; hortina isaga waxaa ahaa Kitaabkii Muuse ee ahaa Hanuun iyo Naxariis? Kuwa (rumeysan kutubtii hore ee la soo waxyooday) baa rumeysan waxa ku soo arooray (Qur'aanka), Qofkise rumeyn diida oo ka mid ah axzaabta (kooxaha kala duwan), waa Naarta madashiisu: Ee shaki yuu kaa galin arrinkaa. hubaal waa xaq ka yimid xagga Rabbigaa, laakiinse intooda badan dadku ma rumeynsna.

18. Oo yaa ka gef badan mid ka been sheega Allaah. Kuwan waxaa la hor keeni doonaa Rabbigood, oo markhaatiyadu<sup>9</sup> waxay oran doonaan: Kuwan weeye kuwii ka been sheegay Rabbigood. Hubaal Lacnadda Ilaahay baa dushooda ah geflowyada

19. Kuwa ka jeediya (dadka) Jidka Ilaahay oo doona inay ka yeelaan (inuu u muuqdo) mid qalloocan, halka iyagu, arrinka Aakhirada ay aaminsanayn.

7. Waa cilmigaas aanu jirin cid leh Isaga (Allaah) maahee subxaanahu wa tacaalaat.

8. Waa tilmaan Nabi Muhammad s.c.w. ama malag jabriil c.s.o ka marag kacaya inuu xaq yahay, intaa waxaa dheer waxaa loola jeedi karaa waxa uu akhriyo inuu yahay Qur'aanka.

9. Waxaa loola jeedaa markhaatiyada: Malaa'igta ama Anbiyada, ama dadka dubakooda, aragyadooda iyo maqalladooda.

**20.** Kuwani ma aha kuwo kaga baxsan kara (Allaah) arlada, oo uma sugna wax gargaarayaal ah Allaah sokadi. Iyaga cadaabka Waa loo labalaabi doonaa. Ma karaan inay (Xaqa) maqlaan ama arkaan.

**21.** Kuwaas weeye kuwa ay khasaaraha ku dhici doonto nafahooda, oo waxay waayi doonaan waxay been abuurteen.

**22.** Hubaal Aakhirada waa iyaga kuwa ugu khasaaraha badan.

**23.** Hubaal, kuwa rumeyey oo fala acmaasha wanaagsan oo u khushuuca Rabbigood, \_ waa kuwaa ehl Jannadu iyagoo ku dhex waari doona .

**24.** Mataalka labada kooxood waa sida indhoolaha iyo dhegoolaha, iyo wax arkaha iyo wax maqlaha, Miyey siman yihiin mataal ahaan? Miyeydaan haddaba waansameyn?

**25.** Oo Waxaan xaqiq u dirnay Nuux dadkiisii (isagoo leh): Hubaal waxaan anigu idii ahay dige iska cad.

**26.** In aydaan caabudin waxaan ahayn Allaah, waxaan anigu idinka cabsi qabaa cadaab Maalin aad u xanuun badan.

**27.** Waxayse mudankii ka mid ahaa kuwa rumeyn diiday ee ka mid ahaa dadkiisii yiraahdeen: Kuuma aragno waxaan ahayn qof nala mid ah, oo ma aragno wax ku raacay aan ahayn kuwa noogu liita (kuwaasoo ku raacay) isla durba markaad u soo jeedisay. Oo idinkuma aragno wax aad na dheer tiihin oo fadli ah, bal, waxaan idii aragnaa beenalayaal.

**28.** Wuxuu yiri: Dadkaygiow! Bal ii sheega, haddaan ka haysto Xujo Cad xagga Rabbigay, isagoo i siiyey Naxariis Xaggiisa ah, la idinkase indha tiray. Miyaan idinku khasabnaa (inaad aqbaschaan towxiidka) idinkoo naceyb u qaba?

أُولَئِكَ لَمْ يَكُنُوا مُعْجِزِينَ فِي الْأَرْضِ وَمَا كَانَ لَهُمْ مِنْ دُونَ  
اللَّهِ مِنْ أُولَئِكَ يُصْنَعُ لَهُمُ الْعَذَابُ مَا كَانُوا يَسْتَطِعُونَ  
أَسْمَعَ وَمَا كَانُوا يُبَصِّرُونَ ﴿١﴾ أُولَئِكَ الَّذِينَ حَسِرُوا  
أَنفُسُهُمْ وَضَلَّ عَنْهُمْ مَا كَانُوا يَقْرَءُونَ ﴿٢﴾ لَأَجْرَمَ اللَّهُمَّ  
فِي الْآخِرَةِ هُمُ الْأَخْسَرُونَ ﴿٣﴾ إِنَّ الَّذِينَ آتَيْنَا رِحْلَاتِ  
أَصْرِيفَاتٍ وَلَأَجْبَرُوا إِلَى رَبِّهِمْ أُولَئِكَ أَصْحَبُ الْجَنَّةَ  
هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴿٤﴾ مَثْلُ الْفَرِيقَيْنِ كَمَا لَعْنَى وَالْأَصْمَرَ  
وَالْبَصِيرَ وَالسَّمِيعَ هُلْ يَسْتَوِيَانِ مُثْلًا أَفَلَا تَدَرَّجُونَ  
﴿٥﴾ وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا لَوْحًا إِلَى قَوْمٍ إِذَا نَهَيْنَاهُمْ مُنِيبِينَ  
أَنَّ لَا يَعْبُدُوا إِلَّا اللَّهُ إِنِّي أَخَافُ عَيْنَكُمْ عَذَابَ يَوْمِ الْحِسْرِ  
فَقَالَ الْمُلَائِكَةُ إِنَّكَ هُرُولٌ مِنْ قَوْمٍ مَأْنَرَنِكَ الْأَشْرَقَ مُثْلَتَنَا  
وَمَأْنَرَنِكَ أَتَعْلَمُ بِإِلَّا الَّذِينَ هُمْ لَأَذْلَلُنَا بِأَدْلَى الْرَّأْيِ  
وَمَأْنَرَنِي لَكُمْ عَيْنَاتِنَا مِنْ فَضْلِي لَكُمْ نُظُمُكُمْ كَذِيرَتِ  
قَالَ يَقُولُ أَرْعَيْتَ إِنِّي كُنْتُ عَلَى بَيْنَتِهِ مِنْ رَبِّي وَأَتَنْتِي رَحْمَةَ مِنْ  
عِنْدِهِ فَوْسِيَتْ عَيْنَكُمْ أَنْلَأْتُ مُكْوَهًا وَأَنْشَلَهَا كَهُونَ ﴿٦﴾

وَيَقُولُ لَا أَسْكُنُكُمْ عَيْنَ مَالَإِنْ أَخْرَى إِلَّا عَلَى اللَّهِ وَمَا أَنْتَ  
يَطْلُبِ الَّذِينَ إِمَّا مُؤْمِنُوْنَ مُلْقُوا رَبَّهُمْ وَاللَّكُفَّارُ كُمْ قَوْمًا  
تَجْهَلُونَ ۖ وَيَقُولُ مَنْ يَصْرُفُ فِي مِنْ أَنَّ اللَّهَ إِنْ طَرَدَهُمْ أَفَلَا  
تَذَكَّرُونَ ۚ وَلَا أَقُولُ لَكُمْ عِنْدِي خَرَابٌ لِّلَّهِ وَلَا  
أَغْمَلُ الْعَيْنَ وَلَا أَقُولُ إِنِّي مَلَكٌ وَلَا أَقُولُ لِلْمُبَرِّئِ تَزَرَّى  
أَعْيُنُكُمْ لَنْ يُؤْيِّدُهُمُ اللَّهُ حَبَّاً إِنَّ اللَّهَ أَعْلَمُ بِمَا فِي أَنفُسِهِمْ فَإِنِّي  
إِذَا لَمْ يَأْتِ الظَّالِمِينَ ۖ قَاتِلُوْنُهُمْ فَقَاتَلَنَا فَأَكْرَتَ جِدَانَا  
فَاتَّتِنَا بِمَا تَقْدِيْنَ إِنْ كُنْتَ مِنَ الصَّادِقِينَ ۖ قَالَ إِنَّمَا  
يَأْتِيُكُمْ بِمِنْ أَنَّ اللَّهَ إِنْ شَاءَ وَمَا أَنْشَمْ بِمُعْجِزِيْنَ ۖ وَلَا يَنْعَكِّرُ  
صُصْحِيْ إِنْ أَرْدَثُ أَنْ أَصْبَحَ لَكُمْ إِنْ كَانَ اللَّهُ يُرِيدُ أَنْ  
يُعَيِّنَكُمْ هُوَ بَعْدَكُمْ وَإِنَّهُ تُرْجِعُونَ ۖ أَمْ يَقُولُونَ أَفَرَنْهُ  
قُلْ إِنْ أَفْتَرَتُهُ فَعَلَى إِجْرَائِي وَإِنْ أَبْرَىءُهُ فَمَمَّا يَخْرُجُونَ  
وَأَوْحَى إِلَى نُوحَ أَنَّهُ لَنْ يُؤْمِنَ مِنْ قَوْمَكَ إِلَّا مَنْ قَدَّمَ أَمْنَ  
فَلَا تَبْتَسِّسْ بِمَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ۖ وَاصْبَحَ الْفَلَكُ يَأْعِيْنَا  
وَوَجَّهْنَا وَلَا تُخْطِلْنَا فِي الَّذِينَ ظَلَمُوا إِنَّهُمْ مُّغَرَّبُونَ ۖ

TV

۲۲۵

29. Oo dadkaygiyow! Idinku weydiisan maayo inaad igu siisaan wax maal ah, abaalgudkeyga waxaa ii haya oo keliya Allaah. Oo anigu ma ahi mid debedda u saaraya kuwa rumeeyey. Hubaal waxay la kulmi doonaan Rabbigood, laakiinse Waaan arkaa inaad tiihin dad jaahiliin ah.

30. Oo dadkaygiyow! Yaa iiga gargaari Allaah, haddaan iyaga debedda u saaro? Ee miyeydaan haddaba waansameyn?

31. Oo idinkuma oranayo waxaan hayaa Khasnadaha (ay ka buuxaan risiqa) Ilaahay, ama inaan ogahay waxa aan muuqan ee qarsoon; mana idinku oranayo waxaan ahay Malag, oo kama oranayo kuwa ay quursadaan indhihiinnu (inuuusan) Allaah marnaba siin doonin wax khayr ah. Allaah baa dhab u ogsoon waxa ku sugar nafahooda, haddii kale hubaal waxaan anigu ka mid noqon geflowyada.

32. Waxay yiraahdeen: Nuuxow! Waad nala doodday oo aad dheereysay la doodistayada, ee haddaba noo keen waxa aad noogu gooddiso, haddaad ka mid tahay runlowyada.

33. Wuxuu yiri: Waxaa uun idiin keeni doona Allaah, hadduu doono, oo ma ka baxsan doontaan.

34. Oo waxna idiinma tari doonto waanadeyda, haddaan doono inaan idin waaniyo, hadduu Allaah rabo inuu idin lumiyo. Waa Isaga Rabiigiiin! Oo xaggiisa baa la idiin soo celin doonaa.

35. Mise waxay leeyihiiin (Nabi Muxammad) wuu been abuurtay? Dheh: Haddaan been abuurtay, aniga buu i saaran yahay dambigayga, oo anigu waan ka eed tirnahay waxaas aad ku dambaabtaan.

36. Oo waxaa loo waxyooday Nuux, cidna kuma rumeyn doonaan dadkaaga wixii horay u rumeeyay maahee. Ee ha ka xumaan waxa ay falaan.

37. Oo ku samee Doonnida indhahayaga hortooda iyo (si waafaqsan) waxyigayaga, oo ha igala hadlin arrinka kuwaa gefka (shirkiga) galay; hubaal waa la qarqin doonaa.

**38.** Oo wuxuu billaabay inuu sameeyo Doonnida, oo mar kasta ay soo ag maraan koox ka mid ah dadkiisa, way ku jeesjeesaan. Wuxuu yiri: Haddaad nagu jeesjeestaan, hubaal innaguna sidoo kale waa idinku jeesjeesi doonnaa sida aad noogu jeesjeestaanba.

**39.** Ee waad ogaan doontaan waa kee kan ay ku dhici doonto cadaab dulleysa (arlada) oo ay ku degi doonto cadaab ma guuraan ah (Aakhirada).

**40.** (Sidaas bay ahayd) Jeer markuu Amarkayaga yimid oo tinnaarka<sup>(10)</sup> biyo ka soo burqadeen, Wawaanu niri: Ku qaad (doonnida nafly) kasta labo nooc (lab iyo dheddig) iyo ehelkaaga, kuwa uu qowlka (qaddarka) horey ugu maray maahee, oo (ku qaad) qof kastoo rumeeey. Oo ma ay la rumeyn wax yar ma'ahee.

**41.** Oo (Nuux) wuxuu yiri: Ku fuula Bismillaah (Magaca Ilaahey), ay ku soconeyso kuna joogsaneyso. Hubaal, Rabbigay waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**42.** Oo way la socotay (doonnidii) hirar dhedhood buuro oo kale ah, oo wuxuu Nuux u dhawaaqay wiilkiisi<sup>(11)</sup>, oo wuxuu joogay meel ka baxsan: Wiilkaygowl! Nala soo fuul oo ha noqon la jirka gaalada.

**43.** Wuxuu (se) yiri: Waaan fuuli doonaa buur iga badbaadin doonta biyaha. (Nuux) wuxuu yiri: Ma jiro wax ka badbaadi karaa maanta Amarka Ilaahey cid uu u Naxariisto maahee. Oo hirkii baa kala dhix galay, marka wuxuu ka mid ahaa kuwii la qarqiyeey.

**44.** Oo waxaa la yiri: Dhulkoow, liq biyahaaga, oo daruurtay qaad. biyihiiна waxaa laga yeelay inay guraan, amarkii (Ilaahyna) wuu hirgalay<sup>(12)</sup>. (Doonnidiina) waxay dul degtay Al-Juudi<sup>(13)</sup>, oo waxaa la yiri: Ha fogaadaan dadka geflowyada ah.

**45.** Oo Nuux wuxuu u dhawaaqday Rabbigii oo yiri: Rabbiyow! Hubaal wiilkaygu wuxuu ka mid yahay ehelkayga, oo hubaal ballan qaadkaagu waa Xaq, oo Wawaad Adigu tahay Kan ugu caadilsan inta wax xukunta.

**10.** Calaamad ahaan ku socoto Nuux oo wargelin ah soo dhowaanshaha daadka. Tannuur waa tiinnaar ballaaran, foorno afar gees ah. Keltmedda tannuur waxaaa loola jeedi karaa sidoo kale dhulka meelahiisa toggagga ah hoose.

**11.** Magaca wiilkay Nuux ee gaalka ahaa was Kancan, wiilashisa mu'miniita ahse waxaa kala ahaayeen: Saam, Xaam, iyo Jabiith.

**12.** Allaah wuu oofiyey gooddigiisa inuu halligi doona gaalada, kuwaasoo diiday dhambaalkii Nuux c.s., oo ku adkeystey shirkiga, oo wuxuu Allaah xafiday oo badbaadshay mu'miniita.

**13.** Buurta Juudi ee ku taal Armiiniya oo Koonfur ka xigta Turkiya xuduudda Mesopatmia.

قَالَ يَتُوْلُّ إِنَّهُ لَيْسَ مِنْ أَهْلَكَ إِنَّهُ عَمَلَ عَبْرَ صَلَحَ فَلَاتَسْتَنِ  
مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ إِنِّي أَعْطُكَ أَنْ تَكُونَ مِنَ الْجَاهِلِينَ  
قَالَ رَبِّي إِنِّي أَعُوذُ بِكَ أَنْ أَشْتَأْكَ مَا لَيْسَ لِي بِهِ عِلْمٌ وَلَا  
تَغْفِرُ لِوَرَحْمَتِي أَكُنْ مِّنَ الظَّالِمِينَ ٤١ قَيْلَ يَنْوُحُ  
أَهْمِيَظْ يَسَّلَمْ مَنْ أَوْرَكَتِ عَلَيْكَ وَعَلَى أَمْمِي مَنْ مَعَكَ  
وَأَمْمَ سَمْمَتْهُمْ تُرْسِمُهُمْ قَنَاعَدَابِ لَيْسَ ٤٢ تَلَكَ  
مِنْ أَنْبَاءِ الْعَيْنِ تُوْجِيهِمَا إِلَيْكَ مَا كُنْتَ تَعْلَمُهَا أَنَّ  
وَلَا قَوْمَكَ مِنْ قَبْلِهِ هَذِهِ فَاصْرِفْ إِنَّ الْعِقْبَةَ لِلْمُمْكِنِينَ ٤٣  
وَإِلَيْكَ عَادَ لَخَافِرُهُوَدَا قَالَ يَنْقُومُ أَعْبُدُهُ أَللَّهُمَّ مَنْ مِنْ  
إِلَّهٍ غَيْرُهُ إِنَّ شَمَ إِلَّا مُفْتَرُوكَ ٤٤ يَنْقُومُ لَا أَسْكُمُكُمْ عَلَيْهِ  
أَجْرًا إِنَّ أَجْرِي إِلَّا عَلَى الَّذِي فَطَرَنِي إِنَّا لَعَقْلُونَ ٤٥  
وَيَنْقُومُ أَسْتَغْفِرُ وَأَرِبَّ كُمْثَمَ تُوبُوا إِلَيْهِ يَرْسِلُ السَّمَاءَ  
عَلَيْكُمْ مَذَرَارًا وَيَزِدُ كُمْ قُوَّةً إِلَى قُوَّتِكُمْ وَلَا تَنْتَلُوا ٤٦  
مُجْرِمِينَ ٤٧ قَالَ الْأَيْهُودُ مَا جِئْنَا بِنِيَّةً وَمَا نَحْنُ  
يَتَارِكُنِي إِلَيْهِنَا عَنْ قَوْلِكَ وَمَا نَحْنُ لَكَ بِمُؤْمِنِينَ ٤٨

waxaa iska leh kuwa iska jira (shirkiga iyo macaasida).

**50.** Oo xagga Caad (waxaan u dirnay) walaalkood Huud. Wuxuu yiri: Dadkeygiow! Caabuda Allaah! Ma lihidin Ilaah kale aan Isaga ahayn, idinku ma ahidin waxna aan ahayn been abuurtayaal.

**51.** Dadkaygiow! idinkuma weydiisanayo (waanadeyda) wax abaalgud ah, abaal gudkeyga wuxuu saaran yahay oo keliya Kan i abuuray. Ee ma waydaan haddaba caqliyesanay?

**52.** Oo Dadkaygiow! Weydiista dembi dhaaf Rabbigii oo u laabta Isaga, Wuxuu idhiin soo dirayaan daruuro shubaya (roob) badan oo joogto ah, oo idiinku darayaa xoog xooggiinna, oo ha jeesannina idinkoo dambiliyaa ah.

**53.** Waxay yiraahdeen: Huuudow! Noolama aadan imaan wax Xujo Cad ah, oo kagama tagayno ilaahyadayada hadalkaaga (darti), oo mana nihin kuwo adiga ku rumayn.

**46.** Wuxuu yiri: Nuuxow! Hubaal ka mid ma aha ehelkaaga; hubaal waa (mid fala) wax kaloo aan ahayn camal wanaagsan, ee ha i weydiisan wax aanad u lahayn cilmi. Hubaal Waan ku waaniyaa si aanad uga mid noqon jaahiliinta.

**47.** Wuxuu yiri: Rabbiyow! waxaan kaa magan galayaa inaan ku weydiisto wax aanan u lahayn cilmi. Oo haddeadan ii dambi dhaafin oo i naxariisan, waxaan ka mid noqonayaa kuwa ku sugan khasaaraah.

**48.** Waxaa la yiri Nuuxow! Ku deg Nabad galyo xaggayaga ah iyo barakooyin korkaaga iyo korkooda dadkaa ka (beermaya) kuwa kula jira. Ummado kale se (oo ka mid ah iyaga) waanu u raaxeyn doonaa (in xooga muddo ah), kaddib waxaa ka taaban doona xaggayaga cadaab aad u xanuun badan.

**49.** Kuwani waa warka la xiriira waxa aan muuqan ee aan kuu waxyoonno (Nabi Muxammad), aanad ogeyn adiga iyo dadkaaguba kani ka hor. Ee samir. Hubaal, cirbita (wanaagsan)

**54.** Ma oran karno waxna aan ahayn in qaar ka mid ah ilaahyadaya ay ku gaarsiiyey waxyeello (waalli). Wuxuu yiri: Waxaan hubaal marag gashanaya Allaaah, oo idinkuna ka ahaada marag sidoo kale inaan Anigu barii ka ahay waxa aad la wadaajisaan.

**55.** Ee Isaga ka soo haray. Ee ii tab dhigta idinkoo isu dhan, oo ha i siinninaba wax nafis ah.

**56.** Hubaal anigu waxaan ku Kalsoonahay Allaaah, Rabbigay iyo Rabbigiin, ma jiro (noole) jooga (dhuulka) oo uusan heyn foodda. Hubaal, Rabbigay wuxuu ku sugar yahay Jid Toosan.

**57.** Haddiise ay jeestaan, (dheh) waxaan horeyba idii soox gaarsiiyey wixii laygu soo diray xaggiina. Oo Rabbigay (wuu idin halaagi oo) keeni doonaa dad kale halkiinna idin xigsada, oo waxna kama dhimeysaan haba yaraatee. Hubaal, Rabbigay wax walba kor buu ka ilaliyya.

**58.** Oo markuu Amarkayaga u yimid inuu fulo, Waxaan ku badbaadinny Huud iyo intii la rumeysey, Naxariis ka ahaatay Xaggayaga, oo waxaan ka badbaadinny Cadaab aad u Adag.

**59.** Oo taasi bay ahayd Caad, waxay diideen Aayadihi Rabbigood, oo ku caasiyeen Rusushiisa, oo raaceen amarka isla weyne kasta oo madax adag.

**60.** Oo waxaa la raaciyeen Nacalad adduunyadan iyo Maalinta Qiyaamaha. Hubaal Caad waxay beeniyeen Rabbigood. Haddaba ha fogaadaan Caad, dadkii Huud.

**61.** Oo xagga Thammud (waxaan u dirnay) walaalkood Saalix. Wuxuu yiri. Dadkaygiow! Caabuda Allaah, ma lihidin Ilah kale aan Isaga aheyn. Wuxuu idinka aburay dhulka oo idin dejiyey dhexdiisa si aad u camirtaan<sup>(14)</sup>, ee weydiista dambi dhaaf Isaga, oo u laabta Xaggiisa. Hubaal Rabbigay wuu dhowyahay ajiibaa(baryada)

**62.** Waxay yiraahdeen: Saalixow! Waxaad aheyd dhexdayada nin wanaagsan lagu rajo weyn yahay oo ballan leh kani ka hor. Ee ma waxaad naga reebaysaa inaan caabudno waxay aabbayaashayo caabudayeey? Xaggase waxa aad noogu yeerto, hubaal waxaanu innagu ka qabnaa shaki yaab leh.

<sup>14.</sup> *Aadmiga waxaa loo dejiyey adduunka inuu camiro arlada oo ku caabuda Allaah keligi.*

قَالَ يَقُومُ أَيُّهُمْ إِنْ كَنْتُ عَلَىٰ بَيِّنَةٍ مِّنْ نَّبِيٍّ وَأَسْلَمَ  
مِنْهُ رَحْمَةً فَإِنْ يَصْرُفُنِي مِنَ اللَّهِ إِنَّمَا عَصَمِيْهُ وَمَا تَرَبَّدُنِي  
عَنِّيْخَسِيرٍ ٦٣ وَيَنْقُوهُ هَذِهِ نَاقَةُ اللَّهِ لَكُمْ إِيمَانَهُ  
فَذَرُوهَا تَأْكُلُ فِي أَرْضِ اللَّهِ وَلَا تَنْسُوهَا إِسْرُؤُلُ فِي أَخْدُونَهُ  
عَذَابٌ قَرِيبٌ ٦٤ فَعَقْرُوْهَا فَقَالَ تَمَتَّعُوا فِي دَارِكُمْ  
ثُلَّةٌ إِيمَانُهُ ذَلِكَ وَعْدٌ عَيْدَ مَكَّةَ دُوبٍ ٦٥ فَمَاجَاهَ أَمْرَنَا  
نَجَّيْتُنَا صَلَحاً وَالْبَرِّ إِمَامُهُمْ بِرَحْمَةِ مَنْا وَمَنْ  
خَرِيْتُ بِوَمِيدٍ إِنْ يَرَكَ هُوَ الْقَوْيُ الْعَزِيزُ ٦٦ وَلَخَدَ الَّذِينَ  
ظَلَّمُوْهُمْ الصِّيَحَّةُ فَاصْبَحُوْفَ دِيْرَهُمْ حَمِيمَتٍ ٦٧  
كَأَنَّمَا يَعْتَوِفُ فِيهَا إِلَّا إِنَّ شَمُودًا كَفَرُوا رَبَّهُمُ الْأَكَّ  
بَعْدَ الْحُمُودَ ٦٨ وَلَقَدْ جَاءَتْ رُسُلًا إِبْرَاهِيمَ بِالْبُشْرَى قَالُوا  
سَلَّمًا فَقَالَ سَلَّمٌ فَمَا أَيْمَتَ أَنْ جَاءَ بِعِجْلٍ حَبِيبٍ ٦٩ فَلَمَّا رَأَ  
أَيْمَهُمْ لَا تَصِلُّ إِلَيْهِنَّ كَهْرُمٌ وَأَوْجَسَ مِنْهُ خِفَّةٌ  
قَالُوا لَا تَخْفَى إِنَّا أَرْسَلْنَا إِلَيْكُمْ لُوطٌ ٧٠ وَأَقْرَأْنَاهُ قَائِمًا  
فَضَحِّكَتْ فَبَشَّرَنَّهُ بِإِسْحَاقَ وَمِنْ وَرَاءِ إِسْحَاقَ يَعْقُوبَ ٧١

63. Wuxuu yiri: Dadkaygiyow! Bal ii sheega haddaan ka heysto Xujo Cad xagga Rabbigay, oo uu i siiyey Naxariis Xaggiisa ah, Bal yaa haddaba iiga gargaari doona Allaah, Haddaan ku caasiyo? Ee iima kordhineysaan waxaan ahney khasaaro.

64. Oo Dadkaygiyow! Tani waa Hashii Ilaahay, oo idii ah Calaamo, ee iska daafoo ha daaqdo'e arlada Ilaaahay, oo ha u gaysannina wax dhibaato ah, si aanay idiinku dhicin Cadaab aad u dhow(15).

65. Wayse boqno gooyeen (dileen) Hashii. Markaasuu wuxuu yiri: Ku raaxeysta guryihiinna saddex maalmod. Kaasi waa ballan run ah aan la beenin doonin.

66. Markaasaa markuu Amarkayaga u yimid inuu fulo, waxaan ku badbaadinnay Saalix iyo intii rumeysey naxariis ka ahaatay xaggayaga oo (Waxaan ka badbaadinnay) dulligii Maalintaas. Hubaal, Rabbigaa, waa Xoog Badanaha, Adkaadaha ah.

67. Oo Qeylo weyn (qarax daran) baa qabtay(16) kuwii ku dhacay gefka (shirkiga iyo gaalnimada), markaasay noqdeen kuwo kuudkuudada baqtii ah daadsan guryahooda.

68. Sidii inaysan weligoodba ku dhix negaan daarahooda. Hubaal, Thamuud waxay beeniyeen Rabbigood. Ee ha fogaadaan Thamuud.

69. Oo xaqiq Rusushayadii (malaa'igta ahayd) waxay ula yimaadeen Ibraahiim bishaaro. Waxay yiraadeen: Salaam (nabadgelyo). Wuxuu ku jawaabay, Salaam (nabad) oo wuxuu si degdeg ah sooryo ugu keenay weyl shiilan.

70. Markiise uu arkay in aanay gacmahooda u soo fidin xaggeeda(17), wuu qoonsaday oo ka gashay cabsi xaggooda. Waxay ku yirahdeen: Ha cabsan, hubaal waxaa naloo soo diray reer Luud.

71. Xaaskiisuna waxay taagnayd (halkaa), markaasay qososhay(18), markaas waxaan ugu bishaareynay Isxaaq, gadaashina (wiil wiilki) Yacquub.

15. Dilkoold hasha wuxuu ahaa xadgudub weyn iyo ku dhiirrasho wixa uu ka reebay Nabigoodii Saalix, sidaas awgeed buu Allaah u xukumay inuu cadaabo isagoo ku xaddiday cumrigooda oo keliya seddex maalmod, wuxuuna amray inay sahay qaataan oo raaxeystaan seddex maalmod ku digasho ahaan.

16. Waxaa durba lagu cigaabay qarax ad weyn ee ka yimid xagga samada oo mar gilgilay oo cirib tiray sida inaysanba horay u jirin.

17. Caado ahaan, haddi u qofka martida ah diido in la sooro oo wax cuno, macnaheedu waxaa weeye wuxuu damacsan yahay xummaan xagga martigelyaasi ama la doonayaa dhibaato.

18. Ku farxid warka san ee ku imaanshaha cigaab dadka xun ee beeniyey Nabi Luud ayna u dheer yihii falal kale oo aad u xun.

**72.** Waxay tiri: Alla hoogayeey ma waxaan wiil dhali doonaa anigoo habar duqowday ah, oo kani ninkaygu yahay oday aad u gabooabay? Hubaal Arrinkani waa wax la yaab leh.

**73.** Waxay yiraahdeen: Ma waxaad la yaabeysaa Amarka Ilaahey? Naxariista Ilaahey iyo Barakoooyinkiisa korkiinna ha ahaadaan reer (Ibraahimow) Hubaal, Allaah Waa Ammaanle, aad u Sharaf Badan.

**74.** Ee Markay baqdintii ka tagtay Ibraahim, oo war san oo faxyad leh u yimid, wuxuu billaabay inoo nagala dodo (shafeeco) arrinka dadkii Luud.

**75.** Hubaal Ibraahim waa dulbadane, qalbi jilicsan<sup>(19)</sup>, u noqosho badan (Allaah).

**76.** (Malaa'igtii waxay yiraahdeen) Ibraahimow! Jooji kani (shafeecdan). Hubaal Amarka Rabbigaa baa yimid inuu fulo. Oo hubaal iyaga waa inuu u yimaado cadaab aan dib loo celin karin.

**77.** Oo markay Rusushayadii (malaa'igtii) u yimaadeen Luud. Wuu ka walbahaaray oo ka walwalay<sup>(20)</sup> oo yiri: Kani waa Maalin daran.

**78.** Oo dadkiisii baa u yimid iyagoo u soo degdegaya xaggiisa, iyagoo horeyba u sameyn jirey falal xun<sup>(21)</sup>. wuxuu yiri: Dadkaygiyow! Kuwani waa gabdhahaygii<sup>(22)</sup>, iyagaa idinka daahirsan ee Alle ka cabsada oo ha igu dulleynina martiday. Miyaanu idinku jirin nin garasho leh?

**79.** Waxay yiraahdeen: Horey baad u ogeyd inaanaan ka laheyn wax dan ah gabdhahaaga, oo hubaal adigu waad ogsoon tahay waxa anuu rabno.

**80.** Wuxuu yiri: Allow! Ma aan lahaado xoog aan idinku caabbiyo, ama meel aan u ciirsadoo tiir adag leh.

**81.** Waxay (malaa'igtii) yiraahdeen: Luudoow! Waxaan innagu nahay Rususha Rabbigaa! Marnaba kuma soo gaari doonaan, ee la guuree ethelkaaga qayb ka mid ah habeenka, oo yuusan midkiinna dib soo eegin xaaskaaga maahee, hubaal wax kastoo ku dhaca iyaga, baa iyadana ku dhici doona, hubaal ballankoodu waa subaxa hore, miyuusan subaxu dhoweyn?

<sup>19.</sup> Taah iyo oohin badan marka uu Allaah baryaya, u murugood badan dadka, aad uga cabsada Ilaahey.

<sup>20.</sup> Wuxuu dareemay Nabigii Ilaahey ee Luud welwel iyo walbahaar markii ay yimaadeen Rusushaa Ilaahey, waayo waxay ku yimadeen qaab iyo muuqaal niiman dhallinyaro oo aad u gurux badan, waxayna jeclayeen goonkii Luud dhallinyarada sidaa u qurxoon oo ku sameyn jireen falxumo. Markaasuu Luud ka welwelay taasi oo dareemay inuus anwoodin inuu difaaco haddii ay ku soo xadgudbaan goonkiisa nimankaa dhallinyarada ah..Nabi Luud wuxuu u cabsaday bed qabidda iyo sharafka martidiisa.

<sup>21.</sup> Waa tilmaam dhaqankooda xumaa ee ahaa khanisnimada iyo fuulidda ragga.

<sup>22.</sup> Wuxuu ula jeedaa dumarka goonkiisa ee guur doonka ah.

قَالَتْ يَوْمَئِنَى إِلَهٌ وَأَنَا عَجُورٌ وَهَذَا بَعْلِيٌ شَيْخًا إِنَّ هَذَا  
لَشَيْءٌ عَجِيبٌ ﴿٦٧﴾ قَاتُوا أَعْجَجَيْنِ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ رَحْمَتُ اللَّهِ  
وَرَبِّكُتُهُ عَيْتَكُ أَهْلَ الْبَيْتِ إِنَّهُ حَمِيدٌ مَجِيدٌ ﴿٦٨﴾ فَقَاتَاهُ  
عَنْ إِنَّهَ يَهُدِ الرُّوعَ وَجَاءَتِهُ الْمُسْرِىٰ يُجْدِلُنَافِ فَوَرَ لُوطٍ  
إِنَّ إِبْرَاهِيمَ حَلِيمٌ أَوْ مُسِيبٌ ﴿٦٩﴾ بَيْتَنِيهِمْ أَغْرِضَ عَنْ هَذَا إِلَيْهِ  
قَدْ جَاءَهُ أَمْرُ رَبِّكَ وَلَاهُمْ عَذَابٌ عَبِيرٌ مَرْدُورٌ ﴿٧٠﴾ وَلَمَّا  
جَاءَتْ رُسُلُنَا الْوَطَاسِيَّةَ بِهِمْ وَصَافَّبِهِمْ دُرْعًا وَقَالَ هَذَا  
يَوْمٌ عَصِيبٌ ﴿٧١﴾ وَجَاءَهُ دُرْقُمٌ وَهُرُونٌ إِلَيْهِ وَمِنْ قَبْلِ كَافُوا  
يَعْلَمُونَ الْأَسْتِيَّاتِ قَالَ يَقُولُهُنَّا بَنَانِي هُنَّ أَهْلُرَ لَكُمْ  
فَأَنْتُوَانَ اللَّهُ وَلَا خَرْزُونَ فِي صَيْفَنِ الْيَسِ مِنْكُو رَجُلٌ رَشِيدٌ  
قَالَ لَمَّا لَقَدْ عَلِمْتَ مَا نَأْتَكَ مِنْ حَقٍّ وَإِنَّكَ تَعْلَمُ مَا تُرِيدُ  
﴿٧٢﴾ قَالَ لَوْلَانِي لَيْكُوْفَةً أَوْ إِلَيْهِ إِلَى رُكْنِ شَدِيدٍ ﴿٧٣﴾ قَاتُوا  
يَلْوُظٍ إِنَّا رُسْلَيْكَ لَنْ يَصْلُو إِلَيْكَ فَأَنْسَرَ بِاهْلَكَ يَقْطِعُ  
مِنْ أَيْلَ وَلَا يَنْتَقِتُ مِنْكُمْ أَحَدٌ إِلَّا أَمْرَتَكَ إِنَّهُ مُصِيبُهَا  
مَا أَصَابَهُمْ إِنَّ مَوْعِدُهُمُ الْأَصْبَحُ لَيْلَسْ أَلْصَبْحُ يَقِيرِبٌ  
﴿٧٤﴾

فَلَمَّا جَاءَهُمْ أَمْرُنَا جَعَلْنَا عَلَيْهَا سَافَهًا وَأَطْلَرْنَا عَلَيْهَا  
حِجَارَةً مِنْ سِجِيلٍ مَنْصُوبٍ <sup>(٢٣)</sup> مُسَوَّمَةً عِنْدَ رِيَافِ  
وَمَا هِيَ إِلَّا ظَلَمَنِينَ يَبْعَدُهُ <sup>(٢٤)</sup>\* وَإِلَى مَدِينَتِ أَخَاهُمْ  
شُعَيْبًا قَالَ يَقُولُمْ أَعْدُوا لِلَّهِ مَا لَكُمْ قُنْ إِلَّا عَبْرُهُ  
وَلَا تَقْسُمُوا الْمِكَالَ وَالْمِيزَانَ إِلَيْ أَرْبَعٍ  
وَلَيْنَ أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابٌ يَوْمَ مُحِيطٍ <sup>(٢٥)</sup> وَلَا تَقْوِمُ  
أَوْفُ الْمِكَالَ وَالْمِيزَانَ يَا لِقْسَطٍ وَلَا تَبْخُسُ الْأَنَاسَ  
أَشْيَاءَهُمْ وَلَا تَعْنَوْفُ فِي الْأَرْضِ مُفْسِدِينَ <sup>(٢٦)</sup> بَقِيَتْ  
اللَّهُ حِيرَةً كُمُّكُمْ إِنْ كُنْتُمْ مُؤْمِنِينَ وَمَا أَنَا عَيْكُمْ  
يَحْفِظُ <sup>(٢٧)</sup> قَالُوا يَدْشُعَبُ أَصْلُونُكَ تَأْمُرُكَ أَنْ تَرْكَ  
مَا يَعْبُدُءَ أَبَأْوَنَا أَوْنَ نَقْعَلُ فِي أَمْوَالِنَا مَا شَتَّوْنَا إِنَّكَ  
لَأَنْتَ الْخَلِيمُ الرَّشِيدُ <sup>(٢٨)</sup> قَالَ يَقُولُمْ أَرْعَيْتَ إِنْ كُنْتُ  
عَلَيْنَتِهِ مِنْ رَبِّي وَرَزْقِي مِنْهُ زِرْفًا حَسَنَا وَمَا أَرِيدُ أَنْ  
أَخْلَفَكُمْ إِلَى مَا أَنْهَكُمْ عَنْهُ إِنْ أَرِيدُ إِلَّا إِلْاضْلَاحَ  
مَا سَطَعَتْ وَمَا تَوَفَّقُ <sup>(٢٩)</sup> إِلَّا يَالَّهُ عَيْنُهُ فَوْكَلْتُ وَلَيْهِ أَنْبِيبُ

٢٣١

82. Haddaba markuu Amarkayagi yimid, Wawaan u rognay (magaaladoodii) af gambi oo korkeedii hoos marinney, oo Wawaanu roob kaga dhignay dhagxayo dhoobo adag ah oo is daba jooga.

83. Laga soo calaamadeeyey Rabbigaa xaggi, oo ma aha wax ka fog geflowyada.

84. Oo xagga Madyan (Wawaan u dirnay) walaalkood Shucayb. Wuxuu yiri: Dadkaygiow! Caabuda Allaah, ma lihidin Ilaah kale aan ahayn Isaga, oo ha dhimina beegga iyo miisaanka, hubaal wawaan anigu idinku arkaa barwaqo badan; oo hubaal wawaan idiinka cabsi qabaa Cadaabka Maalin wax koobeysa.

85. Oo dadkaygiow! Oofiya beegga iyo miisaanka si caddaad ah, oo ha ka duudsinnina dadka waxyaalhooda, oo ha ku bi'innina dhulka fasaadkaad faleysaan.

86. Baaqiga (xalaasha) ah ee Allaah idin siiyey ayaa idin roon haddaad tiihin mu'miniin, oo anigu ma ahi ilaaliye dushiinna.

87. Waxay yiraahdeen: Shucaybow! Ma waxay salaaddaado (diintaadu) ku amartaa inaan ka tagno waxay caabudaan aabbayaashayo, ama inaan ku falin maalkayaga wawaan doonno? Hubaal adigu wawaad tahay dul badanaha wax garadka ah<sup>(23)</sup>.

88. Wuxuu yiri: Dadkaygiow! Bal ii sheega, haddaan ka heysto Xujo Cad xagga Rabbigay, oo I siiyey risiq wanaagsan oo Xaggiisa ah. Oo anigu ma rabo inaan idin daba maro falidda waxa aan idinka reebo. Ma rabo waxna aan ahayn wax wanaajin intaan karo oo awooddeyya ah. Oo ma jiro axad aan ahayn Allaah oo I waafajin kara talada toosan. Isaga baan ku kalsoonahay oo xaggiisa ayaan goor waliba u laabtaa.

<sup>23.</sup> Qowloolaasi waa ku digasho iyo ku jeesjees Nabigii Ilaahay Shucayb c.s  
Waana sifad loola jeeda si taasi ka duwan oo caksigeeda ah.

**89.** Oo Dadkaygiow! Yuusan khilaafkiinna (aad I khilaafaan) idin keenin inuu idinku dhaco wax la mid ah wixii ku dhacay dadkii Nuux ama dadkii Huud ama dadkii Saalix, oo dadkii Luud ma aha wax idinka fog.

**90.** Oo weydiista dambi dhaaf Rabbigii markaas u soo laabta Isaga. hubaal, Rabbigay waa Naxariis Badane, jeelaan badan.

**91.** Waxay yiraahdeen: Shucaybow! Fahmi mayno in badan oo waxa aad leedahay ah, oo hubaal waxaanu kuu aragnaa mid dacif ah dhexdayada. Oo haddii aanaan kugu xaq dhowreyn tolkaa dhagax baan kugu shiidi lahayn, oo ma tihid mid ciso nagu leh.

**92.** Wuxuu yiri: Dadkaygiow! Ma reerka aan ka dhashay baa idin kala weyn Allaah? Waxaadse dhigtaan (xaqa) dhabarkiinna gadaashii (oo dayacdaan); hubaal se Rabbigay waa koobaa waxa aad fashaan.

**93.** Oo Dadkaygiow! Ku camal fasha halkiinnaas (sida dowga idinla ah), Anigu sidoo kale waan camal falayaa. Waadse ogaan doontaan waa kee kan uu ku iman doono cadaab dulleeya, oo waa kee kaasi ah beenaale, Ee dhugta, aniguna sidoo kale waan idinla dhugane (sugayaan natijada).

**94.** Oo markuu Amarkayagii yimid inuu fulo, Waaan ku badbaadinay Shucayb iyo intii la rumeysey Naxariis ka ahaatay Xaggayaga. oo qeylo weyn baa qabtay kuwii galay gefka (shirkiga iyo macaasida), markaasay noqdeen kuwa kudkuduudada baati ah dhex daadsan daarahooda.

**95.** Sidii inayan weligoodba ku noolaan halkaa. Ee ha fogaadaan Madyan sidii ay u fogaadeenba Thamuud.

**96.** Oo Waaan xaqiqi ula soo dirnay Muuse Aayadahayagii iyo Xujo Cad.

**97.** Xagga Fircoo iyo mudanayaashii, waxayse raaceen amarkii Fircoo, oo amarka Fircoo ma aheyn mid toosan.

يَقْدُمُ قَوْمٌ يَوْمَ الْقِيمَةِ فَأَوْرَدُهُمُ الْتَّارِ وَيَسُ الْوَرْدُ  
 الْمُوْرُودُ<sup>٢٤</sup> وَأَشْعُوْفُ هَذِهِ لَعْنَةَ وَيَوْمَ الْقِيمَةِ يَسَّ  
 الْرَّفِدُ الْمُرْفُودُ<sup>٢٥</sup> ذَلِكَ مِنْ أَبْنَاءَ الْقُرَىٰ نَصْصَهُ وَعَيْنَكَ  
 مِنْهَا قَائِمٌ حَوْصِيدٌ<sup>٢٦</sup> وَمَا ظَلَمْتَهُمْ وَلَكِنْ ظَلَمُوا  
 أَنْفُسَهُمْ فَمَا أَغْنَتْ عَنْهُمْ الْهَتْهُمُ الَّتِي يَكْبَغُونَ مِنْ دُونِ  
 الْلَّهِ مِنْ شَيْءٍ وَلَمَّا جَاءَهُمْ أَمْرِ رَبِّكَ وَمَا زَادُهُمْ غَيْرُ تَنَبِّيْبٍ  
 وَكَذَلِكَ أَخْذَ رَبِّكَ إِذَا أَخْذَ الْقُرَىٰ وَهِيَ طَلَمَةٌ إِنَّ أَخْذَهُ  
 الْمُسْرِدُ<sup>٢٧</sup> إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً لِمَنْ خَافَ عَذَابَ الْآخِرَةِ  
 ذَلِكَ يَوْمٌ مَجْمُوعٌ لَهُ النَّاسُ وَذَلِكَ يَوْمٌ مَشْهُودٌ<sup>٢٨</sup>  
 وَمَا تُؤْخَرُ وَإِلَّا لِجِلٍ مَعْدُودٌ<sup>٢٩</sup> يَوْمٌ يَأْتِي لَاتَّكَلْقَنْسُ  
 إِلَيَّ أَذْنِي نَهْنَمَ شَقِّيٌّ وَسَعِيدٌ<sup>٣٠</sup> فَمَا أَلِّيَّ بِنَ شَقْوَافِيَّ  
 الْتَّارِ لَعْنَمُ فِيهَا زَفَرٌ وَشَهِيقٌ<sup>٣١</sup> خَلِيلُ فِيهَا مَادَمَتُ السَّمَوَاتُ  
 وَالْأَرْضُ إِلَامَا شَاءَ رَبِّكَ إِنْ رَبِّكَ فَعَالٌ لَمَاءِرِيدُ<sup>٣٢</sup>  
 وَأَمَّا الَّذِينَ سَعِدُوا فَقِيْلُ لَجْنَةَ تَلْدِينَ فِيهَا مَادَمَتُ  
 السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ إِلَامَا شَاءَ رَبِّكَ عَطَلَةَ عَيْرَ كَجْنُودٌ<sup>٣٣</sup>

٢٣٣

98. Wuxuu hor kici doonaa dadkiisa Maalinta Qiyaamaha, oo keeni doonaa hoos xagga Naarta, oo xumaa halka iyaga la keenayo.

99. Oo waxaa lagu raacshay Nacalad (dunida) tani gudaheed<sup>(24)</sup>, oo Maalinta Qiyaamaha, xumaa deeqda la siin doono.

100. Kani waa wararkii magaaloooyinka aan ku soo tebinno; waxaa ka mid ah kuwo taagan iyo kuwo (kale) oo la tirtiray.

101. Oo ma aanu ku gardaroon, laakiinse iyaga isku gardarrooday. Markaa waxna uma tarin ilaahyadoodii Allaah sokadi ay baryi jireen, markuu yimid Amarka Rabbigaa inuu fulo, oo uma ay kordhin waxaan aheyn baabba'.

102. Oo waa sidaas oo kale qabashada Rabbigaa markuu qabto magaaloooyinka iyagoo gar diid ah, hubaal, Qabashadiisu waa mid xanuun badan oo daran.

103. Hubaal waxaa arrinkan ugu jira calaamo ciddii ka cabsata Cadaabka Aakhirada, kaasi waa Maalin dadka la soo kulmin doono iyagoo dhan, oo kaasi waa Maalin goob joog la ahaan.

104. Oo uma dib dhigno waxaan ahayn muddo tirsan oo hore loo gooyey.

105. Maalinka uu iman doono nafina ma hadli doonto Idankiisa la'aanti, oo waxaa ka mid ah mid hooge ah iyo liibaane.

106. Ma kuwaa (loo qoray inay ahaadaan) kuwa hooga, waxay ku sugnaan doonaan Naarta; waxay ku leeyihiin dhexdeeda hiinbax iyo hiinraag<sup>(25)</sup>.

107. Iyagoo ku waari doona dhexdeeda inta ay jiraan samooyinka iyo arladu, waxa uu Rabbigaa doono maahee<sup>(26)</sup>. hubaal, Rabbigaa waa falaha wuxuu doono.

108. Ma kuwa se (loo qoray inay ahaadaan) kuwa liibaana, waxay ku sugnaan doonaan Jannada gudaheeda, iyagoo ku dhex waaraaya inta ay jiraan samooyinka iyo arlada, waxa uu Rabbigaa doono ma'ahee, deeq aan go'i doonin oo daa'in ah.

<sup>24</sup> Waa lacnad ku raaceysa adduun iyo aakhiero labada daaroodeba.

<sup>25</sup> Hiinbax iyo hiinraaggooda oo u eg cida dameerka.

<sup>26</sup> Macnahu wuxuu u dhacayaa inay gaaladu ku waari doonaan Naarta abadkood, halka muslmiinta caasiyaasha ah laga soo saari doono Naarta marka laga gooyo waxay dambi galeen. aakhirana waxaa jira samo iyo arlo ku gaar ah oo ka duwan samooyinka iyo arlada adduunkan.

**109.** Ee ha ka Shaki qabin waxa ay kuwaanu caabudaan, ma caabudaan waxaan aheyn waxay caabudeen abbayaashood mar hore, oo hubaal waxaanu dib ugu oofin doonaa si dhan saamigooda oo aan waxba laga dhimeyn.

**110.** Oo Wuxaanu xaqiq siinnay Muuse Kitaabka, waase la isku khilaafay, oo haddii aysan jirteen Kelmed horay uga dhacday Rabbigaa, arrinku hubaal wuxuu ahaan lahaa mid la gooyay dhexdooda; oo hubaal iyagu waxaa kaga jira shaki badan.

**111.** Oo Rabbigaa wuxuu dhammaan ugu oofin doonaa camalladooda si dhan. Hubaal, waxay camal falaan Waa u Xog Ogaal.

**112.** Ee hay dhabbaha toosan sida lagu amrayba, (adiga) iyo sidoo kale kuwa la jirkaa u soo laabtay (xaggaa Allaah), oo ha xadgudbina. Hubaal, Wuuarkaa Wuxaa aad camal fashaan.

**113.** Oo ha u liicina kuwa gar daran, si ayan Naari idin taaban, oo ma lihidin Allaah sokadi wax ilaaliyayaal ah, markaas la idiinma gargaari doono.

**114.** Oo oog salaadda, labada dacal ee maalinta iyo saacadaha hore ee habeenka. Hubaal, camallada wanaagsan waxay tiraan camallada xun<sup>(27)</sup>, kani waa u waano kuwa waana qaata<sup>(28)</sup>.

**115.** Oo samir; hubaal, Allaah ma dayaco ajarka sama falayaasha.

**116.** Maxaase looga dhex waayey qaaruumihiid idinka horreyyay, dad leh garasho, oo ka reeba Fasahaadka dhulka dhexdiisa, \_ wax yar mooyee oo ka mid ahaa kuwii aan ka badbaaddinnay dhexdooda? Oo kuwii ahaa gar ma qaatayaasha waxay daba galeen wixii loogu raaxeyey, oo waxay ahaayeen dambiilayaal.

**117.** Oo kama suuwondo Rabbigaa inuu u halaago magaalooyinka gardarro iyagoo ay dadkoodu wanaag is faraan oo ku dhaqmaan.

<sup>27.</sup> *Mar baa nin wuxuu dhunkaday haweeney ajanabi ka ah. Markaasuu u yimid Nabiga s.c.w. oo u sheegay. Markaasuu Allaah soodjeiy Aayadden: «Oo oog salaadda labada dacal ee maalinta, iyo saacadoo ka mid ah habeenka, xaqiq, xasanaadka (camallada wanaagsan halkan waxaa loola jeddaa shanta saladood ee faralka ah) waxay tirtiraan oo meesha ka saaraan falaka xun (dambiyada yar yar)». (Q 11:114) Ninkii wuxuu weydiye Rasulukii Alle s.c.w.: Ma aniga oo keliya baa tani iska leh? Nabigu s.c.w wuxuu yiri: Waxaa leh ummadedya intii I raadday oo idil. (W.W. Al-Bukhaari)*

<sup>28.</sup> *Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: «Ka cabso Allaah meal kasta oo Aad joogtiid, oo raaci xumaanta samaan kaa tirtirta, oo kula soco dadka dabeecad wanaagsan. W.W. At-Tirmidhi*

وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ لَجَعَلَ النَّاسَ أُمَّةً وَحْدَةً وَلَا يَرَوْلُونَ مُخْتَلِفِينَ  
 إِلَّا مَنْ رَّجُمَ رَبُّكَ وَلَدَلِكَ حَلَقَهُ وَتَمَّ كَمَّهُ رَبُّكَ  
 لِأَمْلَانَ جَهَنَّمَ مِنَ الْجَنَّةِ وَالنَّاسُ أَجْمَعِيْتُ<sup>(١)</sup> وَلَا نَقْصٌ  
 عَلَيْكَ مِنْ أَنْشَاءِ الرَّسُولِ مَا نُشِّيْتُ بِهِ فَوَادَكَ وَجَاءَكَ فِي هَذِهِ  
 الْحَقِّ وَمَوْضِعَهُ وَذِكْرِي الْمُؤْمِنِينَ<sup>(٢)</sup> وَقُلْ لِلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ  
 أَعْمَلُوا عَلَىٰ مِكَاتِبِكُمْ كُمَا عَمِلُوْنَ<sup>(٣)</sup> وَأَنْتَرُوا إِنَّا مُنْتَظِرُوْنَ  
 وَلِلَّهِ غَيْرُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَإِلَيْهِ يَرْجُعُ الْأَمْرُ كُلُّهُ  
 فَأَعْبُدُهُ وَتَوَكَّلْ عَلَيْهِ وَمَا بِكَ يَعْغِلُ عَمَّا عَمِلُوْنَ<sup>(٤)</sup>

سُورَةُ هُوَدٌ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

الرَّبُّ تَلَكَ مَائِتَ الْكِتَابِ الْمَبِينِ<sup>(٥)</sup> إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ قُرْءَانًا  
 عَرَبِيًّا لِلْعَالَمِ تَعَقُّلُوْنَ<sup>(٦)</sup> مَنْ نُنْصُ عَلَيْكَ أَخْسَانَ  
 الْعَصَيْنِ بِمَا أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ هَذَا الْقُرْءَانُ وَكَانَ كُتُّ مِنْ قِيلَوْهِ  
 لِمَنِ الْعَقْلَيْنِ<sup>(٧)</sup> إِذْ قَالَ بُوْسُفُ لِأَيْهِيَتَابِيْتَ إِنِّي رَأَيْتُ  
 أَحَدَعَشَرَ كُوكَباً وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ زَيْتَهُمْ لِي سَجَيْنِ<sup>(٨)</sup>

٢٣٥

**118.** Oo hadduu doono Rabbigaa, wuxuu hubaal ka dhigi lahaa dadka ummad keliya, mase dayn doonan inay iskhilaafaan.

**119.** Mid uu Rabbigaa u Naxariisto maahhee, oo arrinkan (towxiidka) awgi buu u abuuray iyaga. Oo Kelmedda Rabbigaa waa mid la oofiyo ee ah: Hubaal, Wawaan ka wada buixin doonaa Naar jinka iyo dadka iyagoo dhammi (kuwooda i caasiya).

**120.** Oo dhammaan waxaan ku soo tebinno oo ku saabsan wararka Rususha waa si aan ugu xoojinno qalbigaaga. Oo waxaa kuugu yimid (Suuradda) tani dhexdeeda Xaq, iyo wacdi iyo waanada mu'miniinta.

**121.** Oo ku dheh kuwa aan rumeysnayn: Ku camal fasha halkiinnaas sida dowga idinla ah, hubaal innaguna sidoo kale waanu camal falaneynaa.

**122.** oo suga, innaguna (sidoo kale) waanu sugaynaa.

**123.** Oo Allaah baa iska leh ghaybka (waxaa aan Muuqan) ee jira samooyinka iyo arlada, oo Xaggiisa baa loo celiyya arrinka oo dhan. Ee caabud Isagoo (Keliya) oo ku kalsoonow. Oo Rabbigaa ma aha mid moog waxa aad fashaan.

## Suuradda 12 Yuusuf

Waa 111 Aayadood: Makkiyyah

Bismillaahir Raxmaanir Raxiim

1. Alif Laam Raa<sup>(1)</sup>. Kuwakani waa Aayaadka Kitaabka cad.
2. Hubaal Annaga baa soo Waxyoonnay Qur'aan Carabi ah1 si aad u fahantaan<sup>(2)</sup>.
3. Annaga ayaa kaaga sheekeyneyna (Nabi Muxammad) sheekooyinka midda u fiican, ee aanu kuugu waxyoonno Qur'aankan, inkastoo kan ka hor, aad ahayd hubaal mid ka mid ah kuwa an waxba ogeyn.
4. (Qisooyinkan ka xus) markuu Yuusuf ku yiri aabbihii: Aabbow! Hubaal waxaan (ku) arkay (riyo) kow iyo tobann xiddigood iyo qorraxda iyo dayaxa, waxaan arkay iyagoo ii sujuudaya.

1. Eeg sharax Suuradda 2 Al-Baqara: Aayadda 1.

2. Allaah Qur'aanka wuxuu ku soo dejiyey afka u sharaf badan afafka, af Carabi, Nabiga ugu sharaf badan anbiyada, Nabi Muxammad, waxaa ka soo gaarsiyeey xaggaa Allaah Malagga ugu sharaf badan malaa'igla, malag Jabriil, meesha ugu sharaf badan meelaha waa lagu soo dejiyey (Makkah), bisha ugu sharaf badan bilahana (bisha Ramadaan) waa la soo dejiyey, waanaa Kitaabka u sharaf badan Kutubta uu soo dejiyey Allaah. Sidaas buu dhan walba kaamil uga noqday Qur'aanku.

5. Wuxuu yiri: Wiilkaygiyow! Ha uga sheekeyn riyadaada walaalaha, si aanay kuugu dhigin shirqool kaa dhan ah: hubaal Shaydaanku wuxuu u yahay aadmiiga cadow iska cad.

6. Oo sidaas buu kuu dooran doonaa Rabbigaa oo uu ku bari doonaa fasirka werinnada (dhacdooyinka ama riyooyinka) oo uu kuu dhammeystiri doonaa Nicmaddiisa adiga iyo reer Yacquub, sidii uu ugu dhammeystirayba horey aabbaayaashaa Ibraahiim iyo Isxaaq. Hubaal Rabbigaa waa wax kasta Oge, Xakiim ah.

7. Xaqiiq Yuusuf iyo walaalihii, waxaa ugu sugar calaamooyin warsadaayaasha.

8. Markay yiraahdeen: Yuusuf iyo walaalki<sup>(3)</sup> buu aad nooga sii jecel yahay aabbaheen innaga, halka aan innagu nahay koox (xoog leh). hubaal aabbaheen wuxuu ku sugar yahay habow caddaan ah.

9. Dila Yuusuf ama ku tuura alro (uun), si uu idinku gaar noqdo Wejiga Aabbahiin, oo taasi ka dambow aad noqtaan dad wanaagsan.

10. Hadlaa ka mid ah baa wuxuu yiri: Ha dilina Yusuuf ee ku tuura ceel salkiis, hadday tahay inaad fashaan, si ay qaar ka mid ah socotoda safar dheer ku jirta u soo qaataan.

11. Waxay yiraahdeen: Aabbow! Maxaa kuugu wacan oo aad noogu aamini weydey Yusuuf? Oo hubaal waxaanu innagu u nahay daacad wanaag la doona.

12. Nala dir isaga berri si uu u soo miro mireysto oo dheelo, oo hubaal innagu waan ilaalin dooncaa.

13. Wuxuu yiri: Hubaal Waa i murugo gelisaa inaad la tagtaan. Oo waxaan ka cabsi qabaa inay yey unto idinkoo mooggan.

14. Waxay yiraahdeen: Hubaal hadday yeey unto innagoo waliba ah koox (xoog leh), markaa hubaal, waxaanu ka mid nahay kuwa wax ma tarayaasha ah.

<sup>3</sup>. Binyaamiin, oo ay isku hooyo ahaayeen Yuusuf c.s.

فَلَمْ يَتَبَعَّدْ لَا تَقْصُصْ رُؤْيَاكَ عَلَى إِنْجُونِكَ فَكَيْكُدْ وَالْكَيْكَدَا  
إِنَّ أَشَيْطَنَ لِلإِنْسَنِ عَدُوُّ مُؤْمِنٍ ۝ وَكَذَلِكَ يَجْتَبِيَكَ  
رَبُّكَ وَيَعْلَمُكَ مِنْ تَأْوِيلِ الْأَحَادِيثِ وَيُسْتَمِعُ بِعَمَّتَهُ عَلَيْكَ  
وَعَلَىٰ إِلَيْكَ بَعْقُوبَ كَمَا اتَّمَمَهَا عَلَىٰ أَبْوَيْكَ مِنْ قُلْبٍ إِنْرَاهِيمَ  
وَإِسْحَاقَ إِنَّ رَبَّكَ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ۝ لَقَدْ كَانَ فِي يُوسُفَ  
وَإِخْرَجَهُ إِنَّهُ أَيْتَ لِإِسْلَامِيَّيْنَ ۝ إِذْ قَالُوا يُوسُفُ وَأَخْوَهُ أَحَبُّ  
إِلَيَّ أَبِيَّنَا مَأْنَأَ وَخَنْ عَصَبَةً إِنَّ أَبَانَا لَقَىٰ ضَلَالَ مُؤْيِّنَ ۝  
أَقْتُلُوْيُوسُفَ أَوْ أَطْرُحُوهُ أَرْضًا خَنْ لَكُمْ وَجْهَ أَيْسَكُ  
وَتَكُوْنُوا مِنْ بَعْدِهِ قَوْمًا صَلَاحِيَّاتٍ ۝ قَالَ قَابِلٌ مُهْمَرٌ  
لَا أَقْتُلُوْيُوسُفَ وَلَا قُوْهُ فِي عِيَّبَتِ الْجَحِيْمِ يَلْتَقِطُهُ بَعْضُ  
السَّيَّارَةِ إِنْ كُسْتُمْ قَعْلِيَّنَ ۝ قَالَ أَيْتَ أَبَانَا مَالَكَ لَا تَأْتِنَا عَلَىٰ  
يُوسُفَ وَإِنَّا لَهُ لَتَصْبُحُونَ ۝ أَرْسِلْهُ مَعَنَادَأَيْرَقَعَ وَيَعْتَ  
وَإِنَّا لَهُ لَحَفِظُونَ ۝ قَالَ إِنِّي لَيَسْعُرُنِي أَنْ تَذَهَّبُوا بِهِ وَلَا خَافُ  
أَنْ يَأْكُلَهُ الْذَّيْنُ وَأَنْتُمْ عَنْهُ غَافِلُونَ ۝ قَالَ الْوَيْنَ  
أَكَلَهُ الْذَّيْنُ وَتَخَنْ عَصَبَةً إِنَّا إِذَا لَخَسِرُونَ ۝

فَلَمَّا دَهَبُوا إِلَيْهِ وَاجْمَعُوا أَنَّ يَجْعَلُوهُ فِي غَيْبَتِ الْجَنِّ وَلَوْجِنَّا  
إِلَيْهِ أَتَسْتَشِهُمْ بِأَمْرِهِنَّ هَذَا وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ١٥  
أَبَاهُمْ عَشَاءَ يَبْكُونَ ١٦ قَالُوا إِنَّا بَأَنَا إِنَّا ذَهَبْنَا شَيْئًا  
وَتَرَكْنَا نُوسُفَ عِنْدَ مَتَعْنَافَكَهُ الْدُّرْبُ ١٧ وَمَا أَتَ  
يُمْؤِنُ لَنَا لَوْكُنَّا صَدِيقَنَ ١٨ وَجَاءَهُ وَعَلَى قَمِصِهِ  
يَدِهِ كَذِيبٌ قَالَ بْلَ سَوْتَ لَكُمْ نَفْسُكُمْ أَمْرًا فَصَبَرْ جَهِيلٌ  
وَاللَّهُ الْمُسْتَعَانُ عَلَىٰ مَا تَصْفُوتَ ١٩ رَجَأَتْ سَيَّارَةٍ  
فَأَرْسَلُوا وَارِدَهُمْ فَأَذْلَى دُوْدُوقَالَ يَبْسُرِي هَذَا لَعْنُ وَسَرُوهُ  
يَضْنَعُهُ وَاللَّهُ عَلَيْمٌ بِمَا يَعْمَلُونَ ٢٠ وَشَرَوْهُ بَثَنَ مَخْسِنٍ  
دَرَّهُمْ مَعْدُودَةٍ وَكَانُوا فِيهِ مِنْ أَزَاهِيرَتَ ٢١ وَقَالَ  
الَّذِي أَشْتَرَهُمْ مِنْ مَصْرَ لِمَرْأَتِهِ أَكَيْهِ مَشْوِهَهُ عَسَىٰ  
أَنْ يَنْفَعَنَا أَوْ سَخَّدَهُ وَلَدَأَ وَكَذَلِكَ مَكَّتَلَهُ مُسَفَّهَ في  
الْأَرْضِ وَلَعْنَمُهُ مِنْ تَأْوِيلِ الْأَحَادِيثِ وَاللَّهُ عَالِيٌّ عَلَىٰ  
أَمْرِهِ وَلَكِنَّ أَكْتَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ٢٢ وَلَمَابَعَ شَدَّهُ  
عَاتَتِهِ حُكْمًا وَعِلْمًا وَكَذَلِكَ بَخْرِي الْمُحْسِنِينَ ٢٣

15. Haddaba markay la tageen oo ay ku heeshiiyen iyagoo dhammi inay dhigaan gunta ceel salki. Oo Waxaan u waxyoonnay: Waxaad hubaal (maalin uun) u sheegi doontaa arrinkani iyagoo aan dareensaneyn.

16. Oo waxay u yimaadeen aabbahood habeen goor fiid ah iyagoo ooyaya.

17. Waxay yiraahdeen: Aabbow! Hubaal Waanu baxnay innagoo tartamayna, oo kaga tagney Yuusuf Alaabtayada agteed, markaas bay yeey cuntay oo adigu nama rumaysan doontid walow aan run sheegayo.

18. Oo waxay keeneen shaarkiisii oo leh dhiig been ah<sup>(4)</sup>. Wuxuu yiri: Mayee, nafahiinna baa idiinka yeeshay arrinkan wax sahlan oo yar. Sabarkaase wanaagsan. Oo Allaah waa Kan laga kaalmeysto waxa aad tilmaameysaan.

19. Oo halkaa waxaa yimid socoto, oo waxay direen biyo dhaamiyahoodii, oo wuxuu hoos ugu sii daaheyey wadaantiisii. Wuxuu yiri: Waa bishaaroy! kani waa wiil yar; oo way qarsadeen badeeco ahaan Oo Allaah wuu Ogaan waxa ay faleen.

20. Oo waxay siisteen qiimo yar, dhown qadaadiic oo fiddo ah, oo waxay muujiyeen inaysan rabitaan u heyn isaga.

21. Oo kii reer Masar ahaa<sup>(5)</sup> ee gayat isaga wuxuu ku yiri xaaskiisi: Sii hoy sharaf leh, waa intaasoo uu na anfaco ama aan ka dhiganno wiil. Oo sidaasaan, Waxaan ugu awood siinnay Yuusuf arlada, iyo inaan barno fasirka dhadooyinka (riyooyinka). Oo Allaah waa ku guuleystaa arrinkiisa, laakiinse dadku badankiisu ma oga.

22. Oo markuu tabar galay oo gaaray xoogsigiisa, waxaan siinnay Xikmad iyo aqoon, oo sidaas baan ku abaal marinnaa sama falayaasha.

4. Waxay ku bi'iyeen shaarkii Yuusuf dhiiggii ri'da ay qasheen, waxayse hilmaameen inay jeexjeexaan shaarka, sidaas oo ay ku shaki geliyeen aabbahood.

5. Nin reer Masar ah oo wasiirka koowaad ah ayaa iibsaday Yuusuf addoon ahaan, magaca wasiirkaa sida caanka waa Qadfiir, oo loogu yeero darajo ahaan Al-Caziz. Kutubta tafsirka qaarkood waxay ku sheegaan magaca xaaskiisa "Raayil" qaar kalena Zuleekha, ama zuleyka laakiin waa werinno aan sugneyn.

**23.** Oo haweenii uu gurigeedii joogay baa doontay inay xumo geliso, oo waxay soo xidhay albaabadii oo tiri: Ii imow, Wuxuu yiri: Allaan Magan galay. Hubaal Rabbigay wuxuu wanaajiyey hoygeyga. Hubaal geflowyadu ma guuleystaan.

**24.** Oo way ku hammiday, isaguna wuu u liici lahaa<sup>(6)</sup>, haddii uusan arki lahayn Xujada cad ee Rabbigi. Sidaas (waxay ahayd) si aan uga duwno xumaanta iyo anshax darrada. Hubaal wuxuu ka mid ahaa addoomahayaga daacadda ah.

**25.** Oo waxay labaduba u degdegeen albaabka, oo waxay kajeexday shaarkiisa xagga dambe, oo waxay kula kulmeen ninkeedii albaabka. Waxay tiri: Muxuu yahay ciqaabka kan la doona xumaan xaaskaaga, aan aheyn in la xabbiso ama la marsiyyo cadaab xanuun badan?

**26.** Wuxuu yiri: Iyada baa iga dalabtay nafteyda (aniguna waa ka diiday); oo markhaati ka mid ah elhelkeeda baa ka marag kacay: Haddii shaarkiisa laga jeexay dhinaca hore, run bay sheegeysaa, oo isagu wuxuu ka mid yahay beenalayaasha.

**27.** Haddiise shaarkiisa laga jeexay dhinaca dambe, been bay sheegeysaa, oo isagu wuxuu ka mid yahay runlowyada.

**28.** Markaasuu markuu arkay shaarkiisa oo ka jeexan gadaal, wuxuu yiri: Hubaal, waa tabtiinna idinka haweenka ah, hubaal tabtiinnu waa ay weyn tahay.

**29.** Yuusufow! Iskaga jeedso waxakan<sup>(7)</sup>; oo (xaaskaygaay) u weydiiso cafis danbigaaga. Hubaal waxaad ka mid tahay geflowyada.

**30.** Oo haween ku sugar magaalada waxay yiraahdeen: Xaaskii wasiirka waxay dooneysaa wiilka yar ee addoonkeeda ah, jaceylkiisaa qalbiga ka galay, hubaal waxaanu aragnaa inay ku jirto gef muuqda.

<sup>6</sup>. Ayaddani ma muujineyo oo lagama qaadanayo in Yuusuf c.s. ku hammiyey inuu xume la falo haween, laakiinse waxaan shakku ku jirin in haddii uusan Allaah ka xafidin fidnadan weyn, uu ku dhici lahaa macsidaa.

<sup>7</sup>. Waa qari arrinkan oo ka soo qaad waxaan dhicin.

فَلَمَّا سَمِعَتْ بِمَا كَرِهَتْ هِنَّ أَرْسَلَتْ إِلَيْهِنَّ وَأَعْنَدَتْ لَهُنَّ مُنْكَرًا  
وَأَتَتْ كُلَّ وَجْهٍ مِّنْهُنَّ سِكِّينًا وَقَاتَتْ أَحْجُجَ عَلَيْهِنَّ فَلَمَّا رَأَيْتُهُنَّ  
أَجْزَرُهُ، وَقَطَعْنَ أَيْدِيهِنَّ وَقُلْنَ حَشَّ لِلَّهِ مَا هَذَا بَشَرٌ إِنْ هَذَا  
إِلَّا مَلَكٌ كَرِيمٌ<sup>١٧</sup> قَاتَلَ فَذَلِكُنَّ الَّذِي لَمْتُنَّ فِيهِ وَلَقَدْ رَوَدَهُ  
عَنْ قَسْبَهِ فَأَسْعَصَمْ وَلَئِنْ تَرَكْتَ مَا فِي مَاءِ امْرُرٍ لَّيَسْجُنَّ  
وَلَيَكُنَّ أَمْنَ الصَّاغِرِينَ<sup>١٨</sup> قَالَ رَبِّ أَسْجِنْ أَحَبْ إِلَيْكَ مَا يَدْعُونِي  
إِلَيْهِ وَالْأَنْصَرِيفُ عَنِّي كَيْدُهُنَّ أَصْبَحْ إِلَيْهِنَّ وَأَنْ مِنْ الْجَاهِلِينَ<sup>١٩</sup>  
فَأَسْتَجَابَ لَهُ رَبُّهُ وَفَصَرَّفَ عَنْهُ كَيْدُهُنَّ إِنَّهُ هُوَ الْأَسْمَى  
الْعَلِيُّ<sup>٢٠</sup> ثُمَّ بَدَأَ الْهُمُّ مِنْ تَعْدِيَ مَارِقًا وَالْأَكْيَتْ لِيَسْجُنَهُ  
حَتَّى جِنِينَ<sup>٢١</sup> وَدَخَلَ مَعَهُ الْمُسِيْحُ فَيَنِانَ قَالَ أَحَدُهُمَا إِنِّي  
أَرَيْتُ أَعْصَرَ حَرْمَرًا وَقَالَ الْأَخْرَى إِنِّي أَحْمِلُ فَوْقَ رَأْسِي  
خُبْرًا تُكْلُ الظَّرِيرُ مِنْهُ نَيْشَنَاتْ أَوْيَلَهُ إِنَّا نَرَكَ مِنْ  
الْمُحْسِنِينَ<sup>٢٢</sup> قَالَ لَآيَتِي كَمَا طَعَامٌ تُرْزَقَ لِهِ إِلَيْهِ أَبْتَأْكُمَا  
يَتَأْوِيلُهُ قَبْلَ أَنْ يَأْتِي كَمَا ذَلِكُمَا مَاعَلْمَنِي رَبِّي إِنِّي تَرَكْتُ  
مَلَةَ قَوْمٍ لَّا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَهُمْ بِالْآخِرَةِ هُمْ كَافِرُونَ<sup>٢٣</sup>

٢٣١

31. Markaasay markay maqashay hadalkooda xanta ah u cid dirtay oo u diyaarisay marti qaad wanaagsan; oo siisay mid walba oo ka mid ah middi, oo (ku) tiri (Yuusuf): U soo bax. Markaasay markay arkeen aad ugu dhaygaggeen, oo iska gooyeen gacmaahoodii (iyagoog la cajabsan). oo yiraahdeen; Allaah baa ka hufan (nuqsaan)<sup>(8)</sup> Kani ma aha qof caadi ah! Kani ma aha waxaan aheyn malag sharaf leh.

32. Waxay tiri: Kani waa midkaad igu eedayseen, oo xaqiqi aniga baa doonay, wuuse is dhowray, oo haddii uusan falin wawa aan amrayo, waxaa hubaal la dhigii doonaa xabsiga, oo wuxuu ka mid noqon doonaa kuwa la liido.

33. Wuxuu yiri: Rabbiyow! xabbiska baan ka jeclahay wawa ay iigu yeerayaan. Oo haddeadan Adigu iga weecin tabtooda, waan u janjeersan doonaa oo (sidaas) uga mid noqon jaahiliinta.

34. Markaas buu Rabbigi ka aqbalay baryadiisa oo ka weeciye khiyaandooda, hubaal waa Isaga Wax kasta Maqlaha, Wax kasta Ogsoon.

35. Markaas baa waxaa u muuqday kaddib markay arkeen caddeymaha<sup>(9)</sup> inay xiraan ilaa muddo<sup>(10)</sup>.

36. Oo waxaa la galay xabsiga labo nin oo dhallinyaro ah, midkood baa wuxuu yiri: Waaan isku arkay (riyo) anigoo miiraya khamro. Oo midkii kale wuxuu yiri: Aniguna waxaan is arkay anigoo ku sida madaxeyaga korkiisa kibis ay shimbiruhu wax ka cunayeen. Noo sheeg fasirkeeda. Hubaal waxaan kuu aragnaa inaad ka mid tahay sama falayaasha.

37. Wuxuu yiri: Ma jiro raashin idii yimaada oo la idinku irsaaqo, oo aanan idii sheegi doonin fasirkiiisa ka hor inta uusan idii imaan. (arrin)kani waa wax ka mid ah waxa Rabbigay i baray. Hubaal waxaan anigu iskaga tagay diinta dad aan rumaysnayn Allaah oo iyagu ah kuwa beeniya Aakhirada.

8. Allaah ee awood u leh inuu abuuuro quruxdan oo kale.

9. Caddeymaha muujinaya inuusan ed lahayn.

10. Ilaa fadexadaa la illaabo.

**38.** Oo waxaan raacay diinta Aabbayaashay Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub; naguma habboona inaan waxbana u shariig yeelno Allaah waxay ahaadaanba. Arrinkaa waa Fadliga Ilahay noo galay innaga iyo dadkaba, laakiinse dadka badankiisu ma mahad naqaan.

**39.** Labada saaxiib ee xabsigow! Ma rabiyo kala duwan baa fiican mise Allaah Waaxidka , Awoodda sare leh.

**40.** Ma aad caabuddaan Sokadi waxaan aheyn magacyo aad bixiseen idinka iyo aabbayaashiin oo uusan Allaah u soo dejin wax Xujo ah<sup>(11)</sup>. Xukunka ma leh axad aan aheyn Allaah. Wuxuu amray inaydaan caabudin axadna aan aheyn Isaga Keligii. Arrinkaa baa ah diinta toosan, laakiinse dadka badankiisu ma oga.

**41.** Labada Saaxiib ee xabsigow<sup>(12)</sup>! Ma midkiin, wuxuu u shubi doonaa mudanahiisa khamri uu cabbo, ma midka kale, waa la deldeli doonaa, markaas shimbiruhu waxay wax ka cuni doonaan madaxiisa. Arrinka waa la xukumay la xiriira waxa aad iga wareysateen.

**42.** Oo wuxuu ku yiri midkoodii uu ogaaday inuu badbaadayo: Igu xus rabbigaa agtiisa; ha yeeshee Shaydaan baa halmaanshiyey inuu u xuso rabbigiis, markaas buu ku sii jiray xabsiga dhowr sannadood.

**43.** Oo (dabeeto) boqorkii wuxuu yiri: Hubaal waxaan ku arkay (riyo) toddoba sac oo buur-buur, oo ay toddobo caato ah cuneen, iyo toddobo sabuul oo cagaar ah qoyan, iyo (toddobo) kale oo qallalan. ee mudanayaalow! Ii caddeeya fasirka riyadayda, haddaad fasiri kartaan riyooyinka.

وَأَبْعَثْتُ مَلَكًا إِبْرَاهِيمَ وَإِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ مَا كَانَ لَنَا أَنْ شُرِكَ بِاللَّهِ مِنْ شَيْءٍ وَذَلِكَ مِنْ فَضْلِ اللَّهِ عَلَيْنَا وَكُلُّ الْمَلَائِكَةِ وَلِكُنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٢٤﴾ يَصَحِّي هُنَّ الْمُسْجِنُونَ أَرْبَابُ مُغْفِرَةِ حَيْثُ أَمَّا اللَّهُ أَلْوَحْدُ الْقَهَّارُ ﴿٢٥﴾ مَا عَبَدُواْ مِنْ دُوَيْنِ الْأَسْمَاءِ سَمَّيْتُهُنَّا نَسْرًا وَآبَاؤُكُمْ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ بِهَا مِنْ سُلْطَنٍ إِنَّ الْحَكْمَ إِلَيْهِ أَمْرُ الْأَنْعَمْ وَإِلَى إِبْرَاهِيمَ ذَلِكَ الَّذِينَ أَقْسَمُواْ وَلِكُنَّ أَكْثَرَ الْمَلَائِكَةِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٢٦﴾ يَصَحِّي الْمُسْجِنُونَ أَمَا أَخْدُوكُمَا فَيَسْقِي رَبَّهُ رَحْمَةً وَأَمَّا الْأَخْرُ فَيُصْبِبُ قَاتِلُ الطَّيْرِ مِنْ رَأْسِهِ قُضْيَةً الْأَمْرُ الَّذِي فِيهِ تَسْقِيَاتٍ ﴿٢٧﴾ وَقَالَ لِلَّهِيْ طَلَّ أَنَّهُ رَاجِ مِنْهُمَا أَذْكُرُ فِي عَنْدَ رَبِّكَ فَأَسْنَهُ الشَّيْطَانُ ذَكَرَ رَبِّهِ فَلَيَثُ فِي الْمُسْجِنِ يَضْعِفُ سَيِّنَتْ وَقَالَ الْمَلِكُ إِنِّي أَرَى سَيِّعَ بَقَرَتِ سِمَانٍ يَأْكُلُهُنَّ سَيِّعَ عَجَافٌ وَسَيِّعَ سُبْلَتٌ حُضْرٌ وَأَخْرَ يَأْسِنَتْ يَأْيَهَا الْمَلَأُ أَفَتُوْنِي فِي رُؤْيَتِي إِنْ كُنْتُ لِلرُّؤْيَا يَأْتِيُونَ ﴿٢٨﴾

٢٤٠

<sup>11.</sup> Waxyaalaha baadilka ah ee la caabudo aad ku magacowdeen ilahay.

<sup>12.</sup> Waxaa la sheegay inay dhallinyaradaa ahaayeen labo khaadum oo u shaqeeyaa bogorka, midkood wuxuu u qaddimi jirey sharaab bogorka, kan kalena wuxuu u sameyn jirey roodhiga.

قَالُوا أَضَعْتُ حَلْمِي وَمَا لَهُنْ بِأَوْبِلِ الْأَحَلَمَ بِعِلْمِي  
 وَقَالَ الَّذِي بَخَاهُنَّهُمَا وَدَكَرَ عَدَمَتْهُ أَنَّا لَنْ نَعْلَمُكُمْ بِأَوْبِلِهِ  
 فَأَرْسَلُونَ <sup>(١)</sup> يُوسُفَ إِلَيْهِ الْصَّدِيقِ أَفْتَنَافِ سَيْعَ بَقْرِتِ  
 يَسْمَانَ يَأْكُلُهُنَّ سَيْعَ عَجَافَ وَسَيْعَ سُبْلَاتِ حُضْبِرِ  
 وَلَحْرَ يَأْكُلُتْ لَعْنَى أَرْجِعَ إِلَى النَّاسِ لَعْنَهُمْ يَعْلَمُونَ <sup>(٢)</sup> قَالَ  
 تَرْزَعُونَ سَيْعَ سَيْنَ دَابَا فَأَهَادَهُ قَدْرُوهُ فِي سُبْلَيْهِ إِلَّا  
 قَلِيلًا مَمَّا تَأْكُلُونَ <sup>(٣)</sup> نُمَّ يَأْتِي مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ سَيْعَ شَدَادِيَا كُلَّنَّ  
 مَاقَمَشْ لَهُنَّ لَا قَلِيلًا مَمَّا تَخْصُنَونَ <sup>(٤)</sup> نُمَّ يَأْتِي مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ  
 عَامَفِيْهِ نُغَاثُ النَّاسَ وَفِيهِ يَبْصُرُونَ <sup>(٥)</sup> وَقَالَ الْعَلَكُ أَتُؤْنِي  
 يَهِيَّهُ قَلْمَاجَاهُ الرَّسُولُ قَالَ أَرْجِعَ إِلَى رَيْلَكَ فَسَعَاهُ مَابَالُ  
 النِّسْوَةِ الَّتِي قَطَعْنَ أَيْدِيهِنَّ إِنَّ رَيْنَ يَكِيدِهِنَ عَلِيمٌ <sup>(٦)</sup>  
 قَالَ مَا خَطَبَكُنَّ إِذْ رَوَدْتُنَ يُوسُفَ عَنْ قَسْبِهِ قُلْ حَشَّ  
 لِلَّهِ مَا عَلِمْتُنَاعِلَيْهِ مِنْ سُوءٍ قَالَتْ أَمْرَاتُ الْعَرَبِ إِنَّنَ حَصَصَ  
 الْحَقَّ أَنَّا رَوَدْتُهُ وَعَنْ قَسْبِهِ وَإِنَّهُ لَيْسَ الصَّدِيقَنَ <sup>(٧)</sup> ذَلِكَ  
 لِيَعْلَمَ إِنَّهُ لَرَأَهُ بِالْغَيْبِ وَإِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي كَيْدَ الْمُلْكَيْنَ <sup>(٨)</sup>

44. Waxay yiraahdeen: Waa riyoojin qarow isku qasan ah, oo innagu ma naqaanno fasirka riyooinka.

45. Oo mid ka mid ah labadii (maxbuus) kii isagu badbaaday oo xusuustay muddo dheer kaddib baa yiri: Aniga baa idiin sheegi doona fasirkiisa ee i dira.

46. Yuusuf, run badanow! Noo caddee fasirka toddoba sac oo buur-buuran oo ay toddobo caato ahi cuneen, iyo toddobo sabuul oo cagaar ah qoyan iyo (toddobo) kale oo qallalan si aan ugu laabto dadka si ay u ogaadaan.

47. Wuxuu yiri: Waxaad wax beeran doontaan toddobo sano oo xiriir ah ee waxaad goosataan u daaya sabuulkiisa wax yar maahee oo ka mid ah kaad cuni doontaan.

48. Markaas waxaa imaan doona intaas kaddib toddobo (sannadood) oo dardaran, oo aad cuni doontaan waxa aad horay u dhigateen wax yar maahee oo ka mid ah wixii aad dhownrateen.

49. Markaas waxaa imaan doona intaas kaddib sano ay dadku heli doonaan roob oo ay dhexdi miiran doonaan (cinabyo).

50. Oo boqorkii wuxuu yiri: Ii keena isaga. Markaasuu markuu farriin sidihi u yimid, wuxuu yiri: U noqo rabbigaa oo weydii waa maxay xaalka haweenkii iska gooyey gacmahooda? Hubaal, Rabbigay waa Ogsoon yahay khiyaanadooda.

51. Wuxuu yiri: Muxuu ahaa arrinkiinnu markaad doonteen inaad xumaan gelisaan Yuusuf? Waxay yiraahdeen: Allaah baa ka hufan (nuqsaan)! Kuma aanu ogin wax xumaan ah xaggiisa<sup>(13)</sup>. Oo xaaskii wasiirka waxay tiri: Hataan xagu wuu cad yahay, aniga baa doonay oo damcay, oo hubaal isagu wuxuu ka mid yahay run sheegayaasha.

52. (Arrin) kani waa inuu ogaado inaan ku khiyaanin maqnaashihii iyo inuusan Allaah toosinin tabta khaa'iniinta.

13. Waxaa la weydiiyey ra'yiga ay ka qabaan Yuusuf inay saameysay fidnadii iyo in kale oo doonistoodii ka yeelay, waxayna u sheegeen inuu ka fog yahay xumaan. Waxayna ammaaneen Allaah Ee awood u leh inuu abuuro dabeeecaddaas sare ee daahirka ah.

## J U S K A (13)

**53.** Oo ma eed tirayo nafteyda<sup>(14)</sup>, hubaal naftu waa xume amarto, mid uu Rabbigay u naxariisto maahee. hubaal Rabbigay waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**54.** Oo boqorkii wuxuu yiri: Ii keena, waxaan u magacaabi doonaa inuu gaar u ahaado nafteyda keliya. Markaasuu markuu la hadlay, wuxuu yiri: hubaal waxaad ku tahay agtayada mid meeqaan weyn leh, la aamino.

**55.** (Yuusuf) wuxuu yiri: Iiga dhig (mas'ul) bakhaarrada arlada. Hubaal waxaan ahay xafide wax dhowra,aqoon leh

**56.** Oo sidaas baan ugu siinnay Yuusuf awood dhan arlada, si uu uga dega meesha uu doono. Waxaan ku taabannaa Naxariistayada ciddaan doonno, oo ma dayacno abaalka sama falayaasha.

**57.** Oo abaalka Aakhirada baa u khayr badan kuwa rumeysan ee ka dhowrsada (shirkiga iyo macaasida).

**58.** Oo Yuusuf walaalihiis baa yimid<sup>(15)</sup> (iyagoo doonaya raashin), oo way u soo galeen, markaasuu gartay iyagoon garan<sup>(16)</sup>.

**59.** Oo markuu qalabeeeyey oo siiyey sahaydoodii, wuxuu yiri: Ii keena walaal aad leedihiin oo xagga aabbihii ah. Miyeydaan arkayn inaan bixiyo beeg dhan, iyo inaan Anigu u wanaagsanahay inta wax marti gelisa?

**60.** Haddiise aydaan ii keenin, ma lahaan doontaan wax beeg ah xaggeyga (intaa kaddib), mana ii soo dhowaan doontaan.

**61.** Waxay yiraahdeen: Waa isku dayeynaa inaan ka qancinno aabbihii heysashadiisa (oo nagu daro), oo waanu faleynaa.

**62.** Oo (Yuusuf) wuxuu ku yiri shaqaalahiisi: U dhex geliya badeecaddoodii rarkooda<sup>(17)</sup>, si ay u gartaan markay u noqdaan reerkooda, si ay u soo laabtaan.

**63.** Markaasay markay u laabteen aabbahood, waxay yiraahdeen: aabbow! Waa naloo diiday wax beeg ah (hadda kaddib). Ee nagu dar walaalkayo<sup>(18)</sup>, hana la siyyee beeg dhan, hubaal innagaal ilaalim.

**14.** *Inkastoo ibnu Kathiir uu nisbeeyo ereyada aayadaha 52-53 xaaskii Al-Caziz. Mufasiriin kale waxay qabeen inuu ku hadlay ereyadaa Yuusuf, isagoo dalbayey In la baaro arrinta, oo giraya naxariista uu Haahay u galay.*

**15.** *Taariikhyaanhada waxay sheeggen inay ka dhacay abaar aad u daran Masar iyo nawaaxigeeda. Wuxuu Nabi Yacquub u tilmaamay Yuusuf walaaladi inay aadaan Madyan oo la kulmaan ragga Masar u haya xilkha si ay uga dalbaan raashin.*

**16.** *Iyagu ma garan isbeddelka ku dhacay muqaaalkisa darteed ee sannado soo mareaan.*

**17.** *Badi mufasirinta waxay sheegaan in badeecaddii Yuusuf walaalihi ay u keeneen inay ku beddeshaan raashinka ay aheyd harag, xargo, iyo sandal, iwm.*

**18.** *Waa Binyamaatiin ee la joogay aabbihii Yacquub guriga.*

وَمَا أَتَرْبِي نَفْسِي إِنَّ النَّفْسَ لَمَّا رَأَهَا بِالسُّوءِ إِلَّا مَارَهَ رَبِّي  
إِنَّ رَبِّي عَنْوَرٌ تَحِيمٌ ۝ وَقَالَ الْمَلِكُ أَتَنْوَنِيهِ أَسْتَخَاصُهُ  
لِنَفْسِي فَلَمَّا كَمَّهُ وَقَالَ إِنَّكَ أَلْيَوْمَ لَدِينَا مُكِنٌ أَمِينٌ ۝  
قَالَ أَجْعَلْنِي عَلَىٰ حَرَانَيْنِ الْأَرْضِ إِنِّي حَفِظَ عَلَيْهِ ۝ وَكَذَلِكَ  
مَكَانًا يُوسُفَ فِي الْأَرْضِ بَدَأَ مِنْهَا حَيْثُ يَشَاءُ تُصْبِيْ  
بِرَحْمَتِنَا مِنْ شَاءَ وَلَا نُضِيعُ أَجْرَ الْمُحْسِنِينَ ۝ وَلَأَجْرُ  
الْآخِرَةِ خَيْرٌ لِلَّذِينَ آمَنُوا وَكَانُوا يَتَّقُونَ ۝ وَجَاءَ  
إِلَيْهِ يُوسُفُ فَدَخَلَوْا عَلَيْهِ فَعَرَفَهُمْ وَهُمْ مُمْكُرُونَ  
وَلَمَّا جَاءَهُمْ يَهْمَجُرُوهُنَّ قَالَ أَتُنَوْنِيهِ يَا لَكُمْ مَنْ أَبِيكُمُ الْأَهْلَ  
تَرَوْنَ إِنِّي أَوْفَىٰ بِالْكِيلَ وَلَأَنْهِيَرُ الْمُنْزَلَيْنَ ۝ قَدْ أَنْهَىٰ تَرَوْنِي  
بِهِ فَلَا كَيْلٌ لَكُمْ عِنْدِي وَلَا تَقْرُبُونِ ۝ قَدْ أَلْوَسْتُ دُودُعَةً أَبَاهُ  
وَأَتَأَلَّفْعُلُونِ ۝ وَقَالَ لِيَتَّيْنِي أَجْعَلُو يَضْعَفُهُ فِي رِعَايَتِهِ  
لَعَلَّهُمْ يَعْرِفُونَهَا إِذَا انْقَبَوْا إِلَيْهِ لَعَلَّهُمْ يَتَجَعَّرُونَ  
فَلَمَّا رَجَعُوا إِلَيْهِمْ قَالُوا يَا إِنَّا مُنْعَنِّيْنَ مِنَ الْكَيْلِ  
فَأَنْسَلَ مَعَنَّا أَخَانَا كَسْتَلَ وَإِنَّا لَهُ لَحَفِظُونَ ۝

قَالَ هَلْ إِمْكُونُكُمْ عَيْنَاهُ إِلَّا كَمَا أَمْكُنْتُكُمْ عَلَىٰ أَخْيَهِ مِنْ  
قَبْلُ فَاللَّهُ خَيْرٌ حَمَّلَهُ وَهُوَ رَحْمَنُ الرَّحْمَنِينَ <sup>١٨</sup> وَلَمَّا فَسَحُوا  
مَتَعَهُمْ وَجَدُوا عِصْنَعَتَهُمْ رُدَّتِ الْيَهُمَّةُ قَالُوا يَا بَانَا  
مَا يَأْتِيُ هَذِهِنَّوْ يَصِدِّعُتَنَارَدَتِ الْإِشْتَانَا وَنَبِرَاهَنَّتَا وَنَغْفَظُ  
أَخَانَا وَنَزَادُهُ كَيْلَ بَعْدِرِ ذَلِكَ كَيْلَ بَيْسِرُ <sup>١٩</sup> قَالَ  
لَنْ أُرِسِلَهُ مَعَكُمْ كَعَنْ تُوْنُونْ مَوْتَقَامَنَ اللَّوْ لَتَأْتِنِي  
بِهِ إِلَّا أَنْ يَحْاطِبِكُمْ فَلَمَّا آتَهُمْ مَوْتَقَاهُمْ قَالَ اللَّهُ عَلَىٰ مَا  
نَقُولُ وَكَيْلُ <sup>٢٠</sup> وَقَالَ يَسِيرَى لَأَتَدْخُلُوْمَنْ بَابِ وَجْدِ  
وَأَدْخُلُوْمَنْ أَتَوْبِ مُتَفَرِّقَةً وَمَا أَغْنِي عَنْكُمْ مِنَ اللَّوْ مِنْ  
سَعَىٰ إِنَّ الْحَكْمَ إِلَّا لِلَّهِ عَلَيْهِ تَوْكِلْتُ وَعَلَيْهِ فَيُسْتَوْكِلُ  
الْمُسْتَوْكِلُونَ <sup>٢١</sup> وَلَمَّا دَخَلُوْمَنْ حَيْثُ أَمْرَهُ أَوْهُ مَا كَانَ  
يُغْنِي عَنْهُمْ قَرَنَ اللَّهُ مِنْ شَيْءٍ وَالْأَحَاجَةُ فِي نَفْسِ يَعْقُوبَ  
قَضَاهَا وَأَنَّهُ لَذُو عَلْمٍ لَمَّا عَلَمْتُهُ وَلَكِنْ كَثُرَ الْأَنَاسِ  
لَا يَعْلَمُونَ <sup>٢٢</sup> وَلَمَّا دَخَلُوْمَنْ عَلَى يُوسُفَ أَوْيَ إِلَيْهِ أَحَادِ  
قَالَ إِنِّي أَنْ أُخْرُكُ فَلَا تَبْتَسِسْ يِمَاكَأَوْيَعْمَلُونَ <sup>٢٣</sup>

٤٤٣

64. Wuxuu yiri: Miyaan idinku aamini karaa waxaan ahayn (inaad iigu qasabtaan) sidiiba aan idiinku aaminay walaalki awal hore. Allaah baase ah Kan u Wanaagsan ilaaliye, oo Isaga baa u Naxaris Badan inta naxariisata.

65. Oo markay fureen alaabtoodii waxay heleen badeecaddoodii oo loo soo ceshay. Waxay yiraahdeen: Aabbow! Maxaan (kaloo) rabi karnaa? Tani waa badeecaddayadii oo naloof soo ceshay <sup>(19)</sup>, oo waxaan u keeni doonaa raashin (hor leh) reerkayaga oo waan ilaalih doonaa walaalkayo oo soo kororsan doonaa awr muggiis oo beeg siyaado ah. Kaasi waa beeg sahlan <sup>(20)</sup>.

66. Wuxuu yiri: Idinkuma dari doono sinnaba jeer aad i siisaan ballan adag aad ku dhaarataan Magaca Ilahay, inaad hubaal dib iigu keeni doontaan, iyadoo la idiin hareereeyo si dhan maahee (cadow idin qabsado), oo markay siiyeen ballankooda, wuxuu yiri: Allaah baa waxa anuu leennahay markaati ka ah.

67. Oo wuxuu yiri: Wilashaydow! Ha ka wada gelina (idinkoo dhan) albaab keliya ee ka gala albaabbo kala duwan, waxnana idiinkama tari karo xagga Allaah. Xukunka waxaa iska leh Allaah Keliya. Isaga baan tala saartay ee dhammaan kuwa wax isku halleyaa, Allaah ha isku halleyaan.

68. Oo markay uga galeen sidii uu amray aabbahood, waxba ugama tarin innaba ha ahaatee (Qaddarkii) Ilahay, waxayse aheyd oo keliya xaajo (dan) ku jirtay nafta Yacquub oo uu gutay. Oo hubaal wuxuu laaha cilmi, ee waxa anuu barnay ah, laakiinse dadka badankiisu ma oga.

69. Oo markay u galeen Yuusuf, wuxuu la soo galay qol walaalki oo ku yiri: Wuxaan anigu ahay walaalkaa, ee ha ka murugoon waxay falayeen.

19. Waxay u sameeyeen taa siyaasad ahaan inay u celiyaan alaabaddoodii oo ugu aksaan falaan, iyo si ay ugu soo laabtaan Masar iyagooy u la socdo walaalkood Binyaamiin. Binyaamiin waxay isku hooya iyo abbe yihiin Yuusuf, hooyadood Raashil waxay la dhalatay oo ka yareyd liya oo aheyd xaska weyn ee Yacquub, shareecadooda waxaa ku bannaanaa in la isla guursan karo labo gabdhood oo walaalo ah. Marka Yuusuf iyo walaalki Binyaamiin waxaa dhashay Raashil, halka liyana ay dhashay tobanka ilmood ee kale ee Yacquub, waxayna ahayd habar yartood.

20. Waa iyaga u fidud ama mid aan ku heli karno si sahlan.

70. Oo markuu qalabeeeyey oo siiyey raashinkoodii, (qof) baa dhex galiyey koobkii (dahabka ee wax lagu beegayey) boorsadii walaalki. Markaasaa waxaa dhawaqaqy dhawaqaqe (leh): Safaryahow! Hubaal waxaad idinku tiihiin tuugo.

71. Intay ku soo jeesadeen, bay waxay yiraahdeen: waa maxay waxaa aad weydeen?

72. Waxay yiraahdeen: Wuxaan weynay koobkii<sup>(21)</sup> wax lagu beegayey ee boqorka, qofkii isagu keenaana wuxuu leeyayah (abaal gud ah) awr muggiis (oo raashin ah); oo Aniga baa ka damiin ah.

73. Waxay yiraahdeen: Wallaahi! Waad og tiihiin inaanaan innagu u imaan inaan ku falno fasahaad arlada, oo ma ahin tuugo.

74. Waxay (kuwii tuhunka u jeediyej) yiraahdeen: Waa maxay haddaba jazaha arrinkani<sup>(22)</sup>, haddaad been sheegeysaan?

75. Waxay yiraahdeen: Jazaha arrinkani waa in qofkii boorsadiisa laga dhex helo, loo heysto isaga naf ahaantiisa (addoon ahaan)<sup>(23)</sup>. Sidaas baan ku jaazynaa dambiliayaasha.

76. Markaasuu wuxuu ka billaabey (baarista) boorsooyinkoodii, ka hor boorsadii walaalki, markaasuu ka soo bixiyey boorsadii walaalki. Sidaas baan wax ugu qorshaynay Yuusuf. Ma ahayn mid ku qaadan kara walaalki xeerkii boqorka, inuu Allaah doono maahee: Wuxaan u qaadnaa kor derejooyin ciddaan doonno, waxaa se ka sarreya mid kasta oo cilmi leh, mid ka sii cilmi badan.

77. Waxay yiraahdeen: Hadduu xaday, mid la walaal ah baa sameeyey runtii xatooyo waa' hore: Wuxuu Yuusuf ku qarsaday naftiisa waxyaalaha uu og yahay<sup>(24)</sup>, oo uma uu muujin. Wuxuu yiri: Idinkaa galay shar kan ka daran, oo Allaah baa dhab u ogsoon waxa aad sheegeysaan.

78. Waxay yiraahdeen: Casiisow<sup>(25)</sup>! Wuxuu leeyahay aabbe, oday aad u weyn ah, ee midkayo u qaado meeshiisa. Hubaal waxaan kuu aragnaa inaad ka mid tahay sama falayaasha.

21. Weel ka sameysan dahab oo wax lagu beego.

22. Cigaabta u dhigan tuugada: Shareecada Yacquub c.s. qofkii wax xada cigaabiisu waxay ahayd inuu noqdo addoon lagu adeegto muddo sannad ah.

23. Xeerkooda wuxuu dhigayey in tuuggii la qabto uu addoon u noqdonoy cidda uu wax ka xaday.

24. Uguma uusan jawaabin in isagu qudhisa ay ka soo xadeen aabbibi.

25. Iyagooy la hadlaya Yuusuf, oo markaas ahaa Cazizka (wasirka koowaad ee) Masar.

قَالَ مَعَادَ اللَّهُ أَنْ تَأْخُذَ إِلَّا مَنْ وَجَدَنَا مَتَعَنِّا عِنْدَهُ فَوْإِنَّ  
إِذَا الظَّلَمُوتْ <sup>۱۷</sup> فَلَمَّا أَسْتَيْسُو مِنْهُ حَلَصُوا تِجْنَبًا  
قَالَ كَيْرِيْهُمْ أَمْرَرْتُمُوا أَنْ أَبَا كُمْرَقَةَ أَخْدَعْتُكُمْ  
مَوْرِثَقَامِنَ اللَّهِ وَمِنْ فَقْلُ مَا فَرَطْتُمْ فِي يُوسُفَ فَلَنْ أَبْرَحَ  
الْأَرْضَ حَتَّى يَأْذِنَ لِي إِنِّي أَوْلَى بِكُمُ اللَّهُ لِي وَهُوَ خَيْرُ الْحَكَمِينَ  
أَرْجُوْعُ الْأَيْكَمْ قَفْلُوا إِنَّا بَنَاهُ ابْنَكَ سَرَقَ  
وَمَا شَهَدْنَا إِلَّا يَمْعَلْمَنَا وَمَا كُنَّا لِيْغَيْبَ حَفَظِينَ  
وَسَعَلَ الْقَرِيْبَةَ الَّتِي كُنَّا فِيهَا وَالْعَدَلَيَّ أَقْتَلَنَا فِيهَا  
وَلَمَّا أَصْدِقُونَ <sup>۱۸</sup> قَالَ لِيْلَ سَوْلَتْ لَكُمْ أَنْفَسُكُمْ أَمْرًا  
فَصَبَرْ جَمِيلَ عَسَى اللَّهُ أَنْ يَأْتِيَنِي بِهِ حِجَيْمًا إِنَّهُ هُوَ  
الْعَلِيُّ الْحَكِيمُ <sup>۱۹</sup> وَتَوَلَّ عَنْهُمْ وَقَالَ يَتَأْسَفُ عَلَى  
يُوسُفَ وَيَبْصُرُ عَيْنَاهُ مِنَ الْحَرْزِ فَهُوَ كَظِيمٌ  
قَالُوا تَالَّهُو قَنْتُوْأَنْدَكُرُوْسَقَ حَتَّى تَكُونَ حَرَضًا  
أَوْ تَكُونَ مِنَ الْمَهْلَكِينَ <sup>۲۰</sup> قَالَ إِنَّمَا أَشْكُوْبَيْتِي  
وَحَرْقَنِي إِلَى اللَّهِ وَأَعْلَمُ مِنَ اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ

**79.** Wuxuu yiri: Allaah baan ka magan galay, inaan qaadanno qof aan aheyn midkaan alaabtayada ka hellay agtiisa. (haddaan sidaas yeollo), waxaan markaas nahay kuwo gar daran.

**80.** Markaasay markay ka quusteen isula baxeen faq gaar ah. Koodii u weynaa baa wuxuu yiri: Ma waydaan ogeyn in aabbahiin ballan adag idinka qaaday Magaca Ilaahay, iyo sida aad horeyba uga gabood fasheen arrinkii Yuusuf? Sidaa awgeed anigu sinnaba kama tegi doono arladan jeer aabbahay ii idmo, ama Allaah xukumo arrinkayga<sup>(26)</sup>, oo Isaga baa u wanaagsan inta wax Xukunta.

**81.** U laabta aabbahiin oo dhaha, Aabbow! Hubaal wiilkaagii wax buu xaday, oo ma marag fureyno waxaan aheyn waxa aan ogaannay oo kuma koobi kareyn ogaal waxa qarsoon ee aan muuqan<sup>(27)</sup>.

**82.** Oo ka wareyo (dadka) magaaladii aan joognay iyo safarradii aan la soo noqonnay, oo hubaal run baan sheegeynaa.

**83.** (Yacquub) wuxuu yiri: Mayee, nafahiinna baa idiin fududeysay arrin. Ee samir fiican (baa ila gudboon). Waa intaasoo Allaah (dib) iigu keeni doono iyagoo dhan. Hubaal Waa Wax kasta Ogsoonaha, Xakiimka ah.

**84.** Oo wuu ka jeesaday xaggoodii oo yiri: u walbhaarkaygow Yuusuf! Oo indhahiisu waxay la caddaadeen murugo darteed<sup>(28)</sup> oo ahaa mid aad u tiiraanyeysan.

**85.** Waxay yiraahdeen: Wallaahi! ma dayn doontid weligaa hadal haynta Yuusuf jeer aad bukaan jiif noqoto ama (jeer) aad ka mid ahaato kuwa halaagsama.

**86.** Wuxuu yiri: Wuxaan oo keliya u sheeganayaa murugadayda iyo walbhaarkeyga Allaah<sup>(29)</sup>, oo wuxaan ka ogahay xagga Allaah wax aydaan ogayn.

<sup>26</sup>.Xukun aniga ii dan ah oo la xiriira soo deynta Binyaamiin.

<sup>27</sup>.Macnaha waa ma aanan ogeyn markii aan wacad kula galnay, inuu wax xadayo oo la qabanayo.

<sup>28</sup>.Wuxuu beelay araggiisa.

<sup>29</sup>.Uma uusan muujin inta ay gaarsiisan tahay ka xumaantiisa ama caradiisa waxa uu ku shakiyey ilmahiisa inay faleen, bal wuu iska sabrạyey, isago isku halleynaya Allaah oo ka doonaya kaalmo.

**87.** Wiilashaydow! Taga oo soo wareysta arrinka Yuusuf iyo walaalki, oo ha ka quusannina Naxariista Ilaahey. Hubaal cidina kama quusato Naxariista Ilaahey aan aheyn dadka gaalada ah.

**88.** Markaasay markay u soo galeen (Yuusuf), waxay yiraahdeen: Casiisow! Dhib baa na taabtay innaga iyo ehelkayagaba, oo waxaanu la nimid badeecad liidata, ee na sii beeg dhan oo noo axsaan fal. Hubaal, Allaah baa u abaal guda axsaan falayaasha.

**89.** Wuxuu yiri: Ma ogtiihiin sidaad u gasheen Yuusuf iyo walaalkiis idinkoo markaas ahaa jaahiliin?

**90.** Waxay yiraahdeen: Ma waxaad adigu dhabitii tahay Yuusuf? Wuxuu yiri: Waa aniga Yuusuf, oo kani waa walaalkay. Allaah baa runtii noo nicmeyey. hubaal, qofkii isagu iska dhowra (xume), oo samir yeesha (waa loo abaal gudaa), oo hubaal Allaah ma dayaco abaalka sama falayaasha.

**91.** Waxay yiraahdeen: Wallaahi! Waxaa runtii naga kaa doortay Allaah, oo waxaanu innagu hubaal aheyn kuwo gefsan.

**92.** Wuxuu yiri: Ma ahaan doonto korkiinna canaan maanta, Allaah ha idiin dembi dhaafo, oo Isaga baa u Naxariis Badan inta naxariisata.

**93.** Qaata shaarkaygaan, oo ku tuura wajiga aabbahay, waxaa u soo noqon doona aragga, oo ii i imaada idinkoo ay idin wehliyaan ehelediinna oo dhan.

**94.** Oo markii safarkii ka soo tegay (Masar), aabbahood wuxuu yiri: Wuxaan anigu helayaa caratii Yuusuf (oo idiin sheegayaan inuu nool yahay), haddii aydaan igu dhaliileyn inaan isku darsamay<sup>(30)</sup>.

**95.** Waxay yiraahdeen: Wallaahi! Wuxaad xaqiiq ku sugaran tahay gefkaagji hore.

يَكْبَحِيَ أَذْهَبُوا فَتَحَسَّسُوا مِنْ يُوسُفَ وَأَخِيهِ وَلَا تَأْتِسُوا  
مِنْ رَوْحِ اللَّهِ إِلَهُ وَلَا يَأْتِي شُعْسُ مِنْ رَوْحِ اللَّهِ إِلَّا الْقَوْمُ  
**الْكَفَرُونَ** <sup>٤٧</sup> فَلَمَّا دَحَلُوا عَلَيْهِ قَالُوا إِنَّهَا الْعَزِيزُ  
مَسَنَّا وَلَهُنَا الْأَصْرُ وَجَشَنَا بِإِصْنَاعَةٍ مُنْجَلَّةٍ فَلَوْلَمْ  
الْكَيْلَ وَتَصَدَّقَ عَلَيْنَا إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ الْمُتَصَدِّقِينَ  
قَالَ هَلْ عِلْمُكُمْ مَا فَعَلْتُمْ يُوسُفَ وَأَخِيهِ إِذَا نَسِيْرُ  
جَاهِلُونَ <sup>٤٨</sup> قَالُوا إِنَّكَ لَأَنْتَ يُوسُفَ قَالَ أَنَا يُوسُفُ  
وَهَذَا أَنْجَى قَدْمَتِ اللَّهِ عَلَيْنَا إِنَّهُ مَنْ يَتَّقَ وَيَصْبِرُ فَإِنَّ  
الَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُحْسِنِينَ <sup>٤٩</sup> قَالَ الْأَنْجَى اللَّهُ لَقَدْ  
عَانِكَ اللَّهُ عَلَيْنَا وَإِنْ كُنَّا لَخَطَّافِينَ <sup>٥٠</sup> قَالَ لَأَنْجَى  
عَيَّكُمْ أَيْمَوْمَ يَعْفُرُ اللَّهُ لَكُمْ وَهُوَ أَحْمَمُ الرَّحِيمِينَ  
أَذْهَبُوا فَيَمْبَصِي هَذَا فَالْفُوهُ عَلَى وَجْهِي أَبِي يَاتِ  
بَصِيرًا وَأَلْوَفْ بِأَهْلِكَ مُجَمِعَتِ <sup>٥١</sup> وَلَمَّا أَصْلَتِ  
الْأَمْرَ قَالَ أَبُوهُمَّ إِنِّي لَأَجِدُ رِيحَ يُوسُفَ لَوْلَا أَنْ  
نَفَرْتُمْ <sup>٥٢</sup> قَالَ الْأَنْجَى اللَّهُ إِنَّكَ لَفِي ضَلَالٍ كَمَا قَدِيمُكِ <sup>٥٣</sup>

٢٤٦

<sup>30</sup> Intii la joogtay, oo ahaa qaar ka mid ah ilmahiisa ama qaraabadiisa kale.

فَلَمَّا آتَيْنَا جَاءَ الْبَشِيرُ لِقَدْنَاهُ عَلَى وَجْهِهِ فَأَزَّرَهُ بِصَرِّ قَالَ  
إِنَّمَا أَقْلَعَ لَكُمْ إِنِّي أَعْلَمُ مِنَ اللَّهِ مَا لَا نَعْلَمُونَ ۝ قَالُوا  
يَا أَبَانَ اسْتَغْفِرْنَا ذُو سَبَّابَةِ إِنَّا كَانَ حَطَّعِينَ ۝ قَالَ سَوْفَ  
أَسْتَغْفِرْ لَكُمْ رَبِّي إِنَّهُ دُهْوَ الْغَفُورُ الْجَيْمُ ۝ فَلَمَّا  
دَخَلُوا عَلَى يُوسُفَ ءاَوَى إِلَيْهِ أَبُوهُهُ وَقَالَ أَدْخُلُوا مَصْرَ  
إِنْ شَاءَ اللَّهُ مَا مِنْيَنِ ۝ وَرَفَعَ أَبُوهُهُ عَلَى الْعَرْشِ وَخَرَأَ  
لَهُ سُجْدَةً وَقَالَ يَا أَبَتْ هَذَا تَأْوِيلُ رُؤْيَايِّيْنِ مِنْ قَبْلِ قَدْ جَعَلَهَا  
رَبِّيْ طَهْوَةً لِمَا يَشَاءُ إِنَّهُ دُهْوَ الْعَلِيمُ الْحَكِيمُ ۝ \* رَبِّ  
قَدْءَاتِيْتَنِي مِنَ الدُّكَّانِ وَعَلَمْتَنِي مِنْ تَأْوِيلِ الْأَحَادِيثِ  
فَاطَّرَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ أَنَّ وَلِيَ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ  
تَوْفَّنِي مُسْلِمًا وَالْحَقْنِي بِالصَّلَاحِ حِينَ ۝ ذَلِكَ مِنْ أَنْبَاءِ  
الْغَيْبِ تُوحِيهِ إِلَيْكَ وَمَا كُنْتَ لَدِيْهِمْ إِذَا جَمَعُوا أَمْرَهُمْ  
وَهُنْ يَمْكُرُونَ ۝ وَمَا كَسَرَ لَنَا سِنْ وَلَحَّصَتْ بِمُؤْمِنِينَ ۝

٢٤٧

**96.** Markaasuu markuu yimid war san sidihi(31), wuxuu uga tuuray (shaarkii) wajjigiisa, markaasuu u soo noqday araggi; Wuxuu yiri: Sow idinkuma aan oran: Waxaan anigu xaqiqi ka ogahay xagga Allaah wax aydaan idinku ogayn.

**97.** Waxay yiraahdeen: Aabbow! Noo dambi dhaaf dalab, hubaal waxaanu innagu ahayn kuwo gefsan.

**98.** Wuxuu yiri: Waxaan idiin weydiin doonaa Rabbigay dambi dhaaf, waa Isaga Dambi Dhaaf Badanaha, Naxariista Badan.

**99.** Markaasay markay u soo galeen Yuusuf, wuxuu u soo qaaday waalidki xaggiisa (salaamay oo si diirran u soo dheweeyey) oo yiri: Ku gala Masar, haddii Allaah idmo, nabdoonaan.

**100.** Oo wuxuu kor u fuuliyey labadiisa waalid Carshiga oo waxay hortiisa kula soo rogteen madax sujuud (salaan ahaan)(32), oo wuxuu yiri: Aabbow! Arrinkan waa fasirkii riyadadil hore! Rabbigay wuxuu ka yeelay xaq. Oo runtii wuu i wanaajiyey markuu iga soo saaray xabbiska, oo idinka keenay miyiga, kaddib markuu Shaydaan ku abuuray kala fogaansho dhexdeenna aniga iyo walaalahay. Hubaal, Rabbigay waa u Roonaan iyo daryeel Badan yahay cidduu doono. hubaal waa Isaga wax kasta Ogsoonaha, Xakiimka ah.

**101.** Rabbiyow! Wuxaad i siisay wax ka mid ah boqortooyada, oo i bartay fasirkka riyooinka; Kan (Keliya) ee Abuurayow samooyinka iyo arlada! Adigaa ah Gargaaraheyya adduunkan geduhii iyo Aakhiradaba ee i oofso anigoo Muslim ah, oo i haleeshii kuwa wanaagsan.

**102.** Tani waa wax ka mid ah wararka la xiriira waxa qarsoon aan muuqan oo aan kuu waxyoonto (Nabi Muxammad). Oo ma aanad ahayn mid la jooga iyaga markay go'aansadeen arrinkoodii, iyagoo abaabulayey shirqollo.

**103.** Oo dadka badankiisu ma rumeyn doonaan si kastoo Aad ugu dadaasho.

31.Kii soo qaaday shaarkii Yuusuf ee ka mid ah walaaliihs.

32.Taasi waa salaan xurmo iyo ciseyn ah, ee bannaaneyd ka hor soo diristii Nabi Muxammad s.c.w. U sujuuididda qof ama shey ama cid aan ahayn Allaah markaa kaddib waa la mamniucay.

- 104.** Oo kuma weydiisatid iyaga wax abaalgud ah arrinkani darti; wax kale ma aha aan aheyn waanada Caalamka.

- 105.** Oo badanaa waxa calaamo ku sugar samooyinka iyo arlada ay soo maraan ee haddana ay ka jeedsadaan.

- 106.** Oo badankoodu ma rumeyyaan Allaah iyagoo wax la wadaajinaya maahee.

- 107.** Ee ma waxay ka yihii aamin inay u timaaddo Cadaab daran oo xagga Ilaahay ah, mise inay ugu timaaddo Saacaddu keto iyagoo aan dareensaneyn?

- 108.** Dheh: Kani waa jidkayga; Waxaan ugu baaqaa dadka xagga Allaah si aragti dheeri leh, Aniga iyo cid kastoo i raacdha. Oo Xurmo oo dhan waxaa iska leh oo hufan Allaah, oo anigu ka mid ma ahi mushrikiinta.

- 109.** Oo uma aanu soo dirin hortaa (Rusul ahaan) waxaan ahayn rag aan u waxyoonno ka tirsan dadka magaaloo yinka Ee miyaanay<sup>(33)</sup> ku socdaalin dhulka oo fiirinin sida uu ahaa aayaha kuwii ka horreeyey? Oo Daarta Aakhira baa u khayr badan kuwa ka dhowrsada (xumaha). Ee ma v

- 110.** Jeer markay Rusushu quusteen oo yaqiinsadeen in la beeniyey, markaas ayaa waxaa u yimaada gargaarkayaga, oo aan badbaadinnay ciddaan doonno, oo lagama celiyo Ciqaabkayaga dadka dambiliyaaasha ah.

- 111.** Waxaa xaqiil ugu sugan qisooyinkooda cashar ay ku cibrad qaataan wax garadka. Ma aha (Qur'aankan) xadiis la been abuuray, laakiinse waa xaqijin wixii ka horreeyey, iyo caddeynya wax kasta oo hanuun iyo naxariis u ah dad rumaysan.

وَمَا تَسْأَلُهُمْ عَنِيهِ مِنْ أَجْرٍ إِنَّهُ لِلْعَالَمِينَ  
وَكَيْنَانِ مِنْ آيَةٍ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ يَمْرُونَ عَلَيْهَا  
وَهُمْ عَنْهَا مُغْرَصُونَ <sup>١٤</sup> وَمَا يُؤْمِنُ كَتُورُهُمْ بِاللَّهِ إِلَّا  
وَهُمْ مُسْرِكُونَ <sup>١٥</sup> أَفَلَمْ يُؤْمِنُوا نَتَّائِهِمْ غَلِيشَةٌ مِنْ دَدَابِ  
اللَّهُ أَوْ نَتَّائِهِمُ الْسَّاعَةُ بُغْتَةٌ وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ <sup>١٦</sup> قُلْ  
هَذِهِ سَبِيلِي أَذْعُوا إِلَى اللَّهِ عَلَى بَصِيرَةٍ أَنَا وَمَنْ أَتَبَعَنِي  
وَسُبْحَنَ اللَّهُ وَمَا أَنَا مِنَ الْمُسْكِنِ <sup>١٧</sup> وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ  
قِيلَكَ إِلَّا رِجَالًا لَوْجِيَ إِلَيْهِمْ مِنْ أَهْلِ الْقُرْبَى أَفَلَمْ يَسِيرُوا  
فِي الْأَرْضِ فَيَظْرُوا كَيْفَ كَانَ عَيْنَكُمْ الَّذِينَ مِنْ  
قِبَلِهِمْ وَلَدَارُ الْآخِرَةِ خَيْرٌ لِلَّذِينَ اتَّقُوا أَفَلَا يَعْقِلُونَ <sup>١٨</sup>  
حَقِّي إِذَا أَسْدَيْغَسِ الرُّسْلُ وَطَبَوَ الْأَهْمَمُ قَدْ كَذَبُوا  
جَاءَهُمْ نَصْرٌ نَافِحٌ مِنْ شَمَاءٍ وَلَا يَرِدُ بِأَسْنَانِعِنَ الْقَوْمِ  
الْمُجْرِمِينَ <sup>١٩</sup> لَقَدْ كَانَ فِي قَصْصِهِمْ عَزَفٌ لِلْأَبْلَى  
مَا كَانَ حَدِيثًا فَتَرَى وَلَكِنْ تَصْدِيقَ الَّذِي بَيْنَ يَدَيْهِ  
وَنَفْصِيلَ كُلَّ شَيْءٍ وَهُدَى وَرَحْمَةٌ لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ <sup>٢٠</sup>



## Suuradda 13 Ar-Racad

Waa 43 Aayadood: Makkiyyah

Bismillaahir Raxmaanir Raxiim.

1. Alif Laam Miim Raa<sup>(1)</sup>.

Kuwakani waa Aayadaha Kitaabka, oo waxa lagaaga soo waxyoodo xagga Rabbigaa waa Xaq, laakiinse dadka badankiisu ma rumeeyaan.

2. Allaah waa Kan kor u qaaday samooyinka tiirar la'aan aad aragtaan, markaas dul ahaaday Carshiga oo Wuxuu (idiin) layliyey qorraxda iyo dayaxa; mid walbaa ku socdo (marriinkiisa) ilaa waqtii go'an, Wuxuu isku dubbiradaa arrin (walba), isagoo ka yeelaya caddaan calaamadaha si aad u yaqiinsataan la kulanka Rabbigiin.

3. Oo Waa Isaga Kan fidiyey arlada oo dhigay dhexdiisa buuro sugar iyo wabiyo, oo miro kasta ka dhigay dhexdiisa labo nooc, wuxuu ku daboolaa habeenka maaalinta. hubaal, waxaa arrinkaa ugu sugar calaamooyin dad fekera.

4. Oo waxaa dhulka ku yaal boosas isbar bar ah iyo beero canab ah iyo dhir iyo geedo timir hal jirid leh urursan iyo kuwo (kale) oo leh jirriyo kala tagsan<sup>(2)</sup>, laga waraabsho biyo isku mid ah, oo waxaan kaga sare marinnaa qaarkoodba qaar kale (tayada) miraha. hubaal waxaa arrinkan ugu sugar calaamooyin dad wax fahma.

5. Oo haddaad adigu la cajabeyso<sup>(3)</sup>, waxaa haddaba cajab ah weedhooda: Ma markaan carro noqnonno, ma waxaan markaa qaqqiil ahaan doonaa abuur cusub? Kuwaasi weeye kuwa aan rumeynsneyn Rabbigood, oo kuwaas waxaa ahaan doono silsilado bir ah luqmahooda korkood<sup>(4)</sup>, oo waa iyaga ehl u Naarka, iyagoo ku dhex waari doona.

1. Eeg sharaxa Suuradda 2 Al-Baqara: Aayadda 1.

2. Mid keliya uu ka soo baxo jirridkii, iyo kuwo halkii jirrid dhowr geed ka soo baxaan.

3. Aad la yaabban tahay kuwaa beeniya Qiyaamaha iyo iska soo bixinta ilka.

4. Silsilado bir ah oo gacamahooda lagu xirxiro iyo luqumahooda.

6. Oo waxay ku weydiistaan inaad u soo dedejiso xumaanta<sup>(5)</sup> ka hor (halkii) samaanta, oo waxaa hore u tagay tusaalooyin (cizaabeed) iyaga hortood. Oo hubaal Rabbigaa waa u dambi dhaaf badan Yahay dadka iyagoo gef ku jira. Oo hubaal Rabbigaa cizaabkiisu aad buu u Daran Yahay.

7. Oo kuwa rumeyn diiday waxay yiraahdaan: Maxaa loogu soo dejin waayey Calaamo xagga Rabbigi ah? Adigu waxaad tahay oo keliya dige, oo qolo walbaa waxay leeyihiin hanuuniye.

8. Allaah wuu Og Yahay waxay dheddig walbaa urka ku siddo<sup>(6)</sup>, iyo waxa ilmo galeennadu nusqaamiyaan iyo waxa ay kororsadaan<sup>(7)</sup>. Oo waxay wax walbaa Agtiisa leeyihiin qaddar go'an.

9. Waa Ogsoonaha waxa aan muuqan iyo waxa muuqda, Weynaha, aad u Sarreya.

10. Waa isugu mid kiienna idinka mid ah ee hadalk(iis)a qarsada iyo kan kor ugu dhawaaqa, iyo kan isku qariyo habeenka iyo (kan) socda dharaar cad.

11. Wuxuu leeyayah (qof walba) kuwo (malaa'ig) midkoodba uu xigsado mid kale<sup>(8)</sup>, hortiisa iyo gadaashiisa ah, kuwaasoo ku ilaaaliya Amarka Ilahay<sup>(9)</sup>; hubaal Allaah ma beddelo xaaladda dad, jeer ay iyagu nafahaantoodu beddelaan waxa ku jira nafahooda. Oo marka Allaah la doono dad xumaan (halaag dambiyadooda darteed), cidna ma baajin karto, oo ma leh Isaga sokadiis wax u soo gargaari kara.

12. Waa Isaga Kan idin tusa hillaaca cabsi iyo rajo gelin darteed, iyo (Kan) unka daruuro hogol ah oo biyo riman.

13. Oo onkodku wuxuu ku tasbixsadaa xamdigiiisa, iyo malaa'igta sidoo kale ka Heybeysigi darteed, oo Wuxuu soo diraa danabyada oo ku dhuftaa cidduu doono<sup>(10)</sup>, weliba sidaas oy tahay waxay ka doodaan arrinka Ilahay Isagoo Awood Badan oo Cizaabkiisu aad u Daran Yahay.

وَيَسْتَعْجِلُونَكَ بِإِلَيْسِنَةٍ قَبْلَ الْحَسَنَةِ وَقَدْ خَلَتْ مِنْ  
فِتْنَتِهِمُ الْمُشَلَّتُ وَإِنَّ رَبَّكَ لَذُو مَغْفِرَةٍ لِلنَّاسِ عَلَىٰ ظُلْمِهِمْ  
وَإِنَّ رَبَّكَ لَشَدِيدُ الْعِقَابِ ۚ وَيَقُولُ الَّذِينَ كَفَرُوا لَوْلَا  
أُنْزَلَ عَلَيْهِ آيَةٌ مِنْ رَبِّهِ إِنَّمَا أَنْتَ مُنْذِرٌ فَلِكُلِّ قَوْمٍ  
هَايَ ۗ اللَّهُ يَعْلَمُ مَا تَحْمِلُ كُلُّ نَّبِيٌّ وَمَا يَعْصِيُ الْأَرْضَامُ  
وَمَا تَرَدَّدَ وَكُلُّ شَيْءٍ عِنْدَهُ رِيمَقَدَارٌ ۖ عَذَابُ الْعَيْبِ  
وَالشَّهَدَةُ الْكَبِيرُ الْمُتَعَالُ ۖ سُوَاءٌ مِنْ كُمْكُمٍ  
أَسْرَرَ الْقَوْلُ وَمَنْ هُوَ مُسْتَحْفَفٌ بِأَيْلَىٰ وَسَارِبٍ  
بِإِلَيْهِمْ ۖ لَهُمْ مُعَقِّبُتُ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ وَمِنْ خَلْفِهِ  
يَحْكُمُظُونَهُ وَمَنْ أَنْزَلَ اللَّهُ إِنَّ اللَّهَ لَا يُغْنِي مَا يَبْقَى وَهُنَّ بَعِيرُوا  
مَا يَأْنَفُسُهُمْ ۖ وَإِذَا أَرَادَ اللَّهُ بِقُوَّةِ سُوءٍ فَلَا مَرَدَ لَهُ وَمَا  
لَهُمْ مِنْ دُونِهِ وَمَنْ وَالِ ۖ هُوَ الَّذِي يُرِيكُمُ الْأَبْرَقَ حَقْوًا  
وَطَعَمَ اَوْيَشِيَ السَّحَابَ اِلْقَالَ ۖ وَسُبْحَانَ الرَّاعِدِ حَمْدَهُ  
وَالْمَلَكِيَّهُ مِنْ حِيقَتِهِ وَبِرِسْلِ الصَّوَاعِقِ فَصِبَبَ بِهَا  
مَنْ يَسَأَهُ وَهُمْ يُجْدِلُونَ فِي اللَّهِ وَهُوَ شَدِيدُ الْمُحَالِ

٢٥٠

5. Waxay yiraahdeen iyagoo ka hor imaanaya Nabiga s.c.w. oo ku jeesjeesaya noo keen cizaab haddii aad run sheegeyo, halkii ay dalbi lahaayeen narraxista Ilahay iyo dambi dhaafaleysi.

6. Isagoo aqoon dhan u leh oo kaamil ah wax kasta oo ku saabsan ilmahaas uruka ku jira.

7. Dhaafsiisan waqtiga caadiga ee uruka oo ogsoon tirada ilmaha ku jira uruka.

8. Iyagoo isku beddela moogaaleysi.

9. Waxaa weedha loo qaadan karaa sidoo kale : kuwaasoo ka ilaaaliya wax kasta wixii Allaah u qoray oo qaddaray maahee.

10. Waa cizaab ama halaagid dambiyadooda dartood.

لَهُ دُعَوَةُ الْحَقِّ وَالَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِهِ لَا يَسْتَبِعُونَ هُمْ شَيْءٌ إِلَّا  
كَيْسِطَ لَهُنَّهُ إِلَى الْمَاءِ يَسْلُغُ فَاهُ وَمَا هُوَ بِلَغِهِ وَمَوَادِعَةُ الْكُفَّارِ  
إِلَّا فِي ضَلَالٍ ۖ وَلَهُ يَسْجُدُ مَنْ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ طَوعًا  
وَكَهْرَابَهُ وَظَلَالَهُمْ وَالْغَدُورُ وَالْأَصْبَابُ ۖ قُلْ مَنْ زَرَّ السَّمَوَاتِ  
وَالْأَرْضَ قُلْ اللَّهُ قُلْ أَقَاتَنْدَنْ تُوقَنْ دُونِهِ أَوْلَيْكَ لَا يَمْلِكُنَّ  
لَا فَنَسِيْهُنَّ قَعْدَهُنَّ وَأَصْرَفَهُنَّ هَلْ سَتَوَيَ الْأَعْمَنِ وَالْبَصِيرِ أَمْ هُنَّ  
سَتَوَيَ الْأَطْمَسَتِ وَالْأَنْزَامَ جَعَلُوا لِلَّهِ شَرَكَةَ عَلَوْأَخْنَقَهُ فَشَبَّهَهُ  
الْحَلْقَ عَلَيْهِمْ قُلْ اللَّهُ خَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ وَهُوَ الْوَاحِدُ الْمَهْرَ ۖ آنِزَلَ  
مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَكَلَّتْ أَوْيَدَهُ مُقْدَرَهَا فَأَحْتَمَلَ السَّيْلَ زَيْدَةَ كَلَّيَا  
وَمَمَّا يُؤْتُونَ عَلَيْهِ فِي الْأَنْارِ بِسَعَةٍ حَلِيلَةٍ أَوْ مَسْعَعَهُ زَيْدَهُ مَشَّهَهُ  
كَذَلِكَ يَضَرِّ اللَّهُ أَعْنَى وَأَبْطَلَ فَمَا ازْتَرَدَ فَيَكِيدَهُ جُفَاهَ  
وَلَمَّا مَا يَسْعَنَ النَّاسَ فَيَسْكُنُ فِي الْأَرْضِ كَذَلِكَ يَضَرِّ اللَّهُ  
الْأَمْثَالَ ۖ لِلَّذِينَ أَسْتَجَابُوا لِرَبِّهِمُ الْحَسْنَى وَلِلَّذِينَ لَوْسَتَجَيَّبُوا  
لَهُ لَوْلَآنَ كَهْمَمَ فِي الْأَرْضِ جَيْمَعًا وَمُشَكَّهَهُ لَا فَدْرَ وَلَيْهَ  
أُولَئِكَ لَهُمْ سُوءُ الْحِسَابِ وَمَوْهَمُهُمْ جَهَنَّمُ وَبَشَّسَ الْمَهَادُ ۖ ۱۸

٢٥١

14. Isagaan mudan in la baryo (cibaadada) Xaqa ah. Oo kuwaay baryaan Sokadiisa waxba uma ajiibaan, waxayse ka dhigan yihiin mid hore u soo fidsha gacmahiisa xagga biyo ka jira (meel fog isagoo u yeeranaya) si ay u soo gaaraan afkiisa, mase soo gaari doonaan (sidaas weeye)<sup>(11)</sup>, oo ma aha baryada gaaladu waxaan ahayn habaab.

15. Oo wax kasta oo jira samooyinka iyo arlada waxay u sujuudaan Allaah keliya iyagoo oggol ama qasban, iyo hoosaskooda sidoo kale gelin hore iyo gelin dambeba.

16. Dheh: Waa kuma Rabbiga samooyinka iyo arlada? Dheh: Allaah. Dheh: Ma waxaad haddaba yeelateen Sokadi gargaarayaal, kuwaasoo aan u hanan karin wax awood ah ay wax ugu taraan ama wax ku yeelaan nafahooda? Dheh: Miyey siman yihiin kan indhaha la' iyo kan wax arka? Ama ma sinnanan karaan Mugdiyada iyo Nuurka? Mise ma waxay la barbar dhigaan Allaah shariigyo abuuray wax la mid ah abuurkiisa<sup>(12)</sup>, sidaa awgeed uu abuurka (midkood walbaa) ay isku mid ugu muuqdeen? Dheh: Allaah waa

Abuuraha wax waliba. Oo Waa Waaxidka, Awoodda sare leh.

17. Wuxuu ka soo shubaa roob daruurta, markaas bay togaggii qiyastood (biyo la) durduraan, oo daadku qaadaa xumbada kor sabbaysa, iyo (sidoo kale macdanta) ay dadku dabka gashaan si ay uga sameystaan waxyaalo ay isku qurxiyaan, ama alaaboo (qashin ahoo) xumbada la mid ah, sidaas buu Allaah tusaale ugu kala dhigaa Xaqa iyo Baadilka. Marka ma xumbada iyadu way tagtaa sida waxa aan qimaha lahayn, waxase u leh nafaca dadka wuxuu ku haraa dhulka. Sidaas buu Allaah u dhigaa tusaalayooyinka.

18. Abaal gudka kuwa ajiibay Baaqa Rabbigood waa Wanaag. Ma kuwase aan ajiibin - hadday lahaaheyen waxa yaal dhulka oo dhan oo ay wehliso wax la mid ah waxay (isku dayi) lahaaheyen inay isku madax furtaan. Kuwaasi, xisaab daran buu ahaan doonaa mudankooda, oo hoygoodu waa Naar; oo xumaa gogol ahaan.

<sup>11</sup>. Macnaha waxaa weeye in ilaahyada beenta ah ayan marnaba ajiibi doonin.

<sup>12</sup>. Waxaa halkaas laga qaadanayaa in ilaahyadaa ay sheegeen, ayan awood u lahayn inay wax abuuraan, oo aan la barbar dhigaa karin Allaah sinnaba.

**19.** Ma mid haddaba og in waxa lagaaga soo waxyooday xagga Rabbigaa uu yahay Xaq baa la mid ah mid ka indha la? Waase oo keliya dadka wax garadka ah kuwa waansami doona.

**20.** Kuwa oofiya axdiga Ilaahay, oo aan ka bixin ballanka.

**21.** Iyo kuwa xiriiriya waxa uu Allaah amray in la xiriiryo<sup>(13)</sup>, oo ka baqa Rabbigood, oo ka cabsada Xisaabta Daran.

**22.** Iyo kuwa samra oo sugnaada, iyagoo doonaya Wajiga Rabbigood, oo ooga salaadda, oo u bixiya (si wanaagsan) wax ka mid ah waxa aanu siinnay qarsoodi iyo caddaanba, oo kala hortaga xumaanta samaan, kuwaasi waxay mudan doonaan cirib wanaagsan Daarta Aakhriro.

**23.** Beeraha negaadiga oo ay gali doonaan la jirka kuwa wanaagsan ee ka mid ah aabbayaashood iyo afooyinkood iyo ubadkoodaba: oo Malaa'igtu waxay uga soo geli doonaan albaab walba (iyagoo leh):

**24.** Nabad korkiinna ha ahaato samirka aad samirteen darteed. wanaagsan haddaba Daartaa dambe.

**25.** Kuwa se jebiya axdiga Ilaahay, kaddib adkayntiisa, oo gooya waxa uu Allaah amray in la xiriiryo, oo ku sameeya fasahaad arlada, kuwaas, dushooda waxaa ahaan doona Nacalad oo waxay mudan doonaan daarta aad u xun (Naar).

**26.** Allaah wuxuu u fidiyaa risiqa qofkuu doono oo ku ciriiriyya (qofkuu doono), oo waxay ku farxaan nolosha adduunkan, oo ma aha nolosha adduunka marka loo eego Aakhirada waxaan ahayn raaxo muddo gaaban ah oo dhammaaneysa.

**27.** Oo kuwa rumeyn diiday waxay yiraahdaan: Maxaa calaamo looga soo dejin waayey xagga Rabbigii? Dheh: hubaal Allaah wuxuu habaabiyaa qofkii uu doono oo u soo hanuuniyaa xaggiisa qofkii u soo laabta (Isaga).

**28.** Kuwa rumeeyey oo ay quluubtoodu ku xasisho xusidda Ilaahay.Haddaba hubaal xusidda Ilaahay bay ku xasishaa quluubtu.

<sup>13.</sup> Waa in aad loo ilaaliyo xiriirka qaraabada oo lagu dadaalo wanaajintooda.

Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Ma geli doono Jannada qof qaraabo goys ah".

الَّذِينَ أَمْتُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ طُوبَى لَهُمْ وَحُسْنُ مَقَابِ  
 كَذَلِكَ أَرْسَلْنَاكَ فِي أُمَّةٍ قَدْ خَاتَ مِنْ قَبْلِهَا أُمُّ اسْتَوْلَا  
 عَلَيْهِمُ الَّذِي أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ وَهُوَ كُفُّرٌ بِالْحِجْنِ قُلْ هُوَ رَبِّ  
 لَإِلَهٌ إِلَّا إِلَهُ عَائِدٌ تَوَكَّلْتُ إِلَيْهِ مَتَابٌ<sup>١٩</sup> وَلَوْلَئِنْ قُلْتَ أَنَّا  
 سُيَّرْتُ بِهِ لِجَانِلْ أَوْ قُطْعَتْ بِهِ الْأَرْضُ أَوْ كُسْمَتْ بِهِ الْمَوْقِيُّ  
 بِلَلَّهِ الْأَمْرُ حِجْمًا أَفَلَمْ يَأْيُنْ الَّذِينَ آمَنُوا أَنَّ لَوْيَشَاءَ  
 اللَّهُ أَهْدَى النَّاسَ جِيعًا وَلَا يَرَى الَّذِينَ كَفَرُوا تُصْبِيْهُمْ  
 بِمَا صَنَعُوا قَارِعَهُ أَوْ تَحْلُلْ قَيْبَامَنْ دَارِهِمْ حَقِّيَّتِيْلَى وَعَدْ  
 اللَّهُ أَنَّ اللَّهَ لَا يُخْلِفُ الْمِيعَادَ<sup>٢٠</sup> وَلَقَدْ أَسْتَهْرَى رَبُّسُلِّمِينَ  
 قَبْلَكَ فَأَمْلَيْتُ لِلَّذِينَ كَفَرُوا شَمَّأَخْدَهُمْ فَكِيفَ كَانَ  
 عَقَابٌ<sup>٢١</sup> أَفَمَنْ هُوَ قَابِعٌ عَلَى كُلِّ فَقَمِسِيْنِ يَمَا كَسْبَتْ وَجَعْلَوْنَ  
 لِلَّهِ شَرِكَاءَ قُلْ سَمُوْهُمْ أَمْ تَبْغُونَهُ بِمَا لَا يَعْلَمُ فِي الْأَرْضِ أَمْ  
 يَظْهِرُ مِنْ الْقَوْلِ بِلَرْبِنَلِلَّذِينَ كَفَرُوا مَكْرُهُمْ وَصَدُّوْعَنِ  
 اسْتَهْلِلَ وَمَنْ يُضْلِلَ اللَّهُ فَمَا أَنْهَا<sup>٢٢</sup> لَهُمْ عَدَابٌ فِي الْحَيَاةِ  
 الَّتِيْنَ أَوْلَادَهُ أَكْرَهَهُ أَشْقَى وَمَا الْهُمْ بِنَسْوَنَ اللَّهُ مِنْ وَاقِيٍّ

٢٥٣

29. Kuwa rumeyey oo sameeyey acmaasha wanaagsan aayatiin raaxo wanaagsan leh bay leeyihiin<sup>(14)</sup> iyo rug u laabasho fiican.

30. Sidaas baan kuugu soo dirnay ummad dhexdood ay horteed ummado (kale) tageen, si aad ugu akhrido waxa aan kuu waxyoonnay, oo (weliba) iyagu waxay beeniyaan Raxmaanka. Dheh: Waa Rabbigay! Ma jiro Ilahaan ahayn Isaga, Isaga baan ku kalsoonahay, oo waa xaggiisa noqodkeyga.

31. Oo xitaa hadduu jiri laaha Qur'aan buuraha lagala yeeli lahaa inay tagaan, ama dhulka lagu gooyo, ama lagaga hadal siyo meytida<sup>(15)</sup> (ma ahaadeyn waxaan aheyn Qur'aankan). Mayee! Allaah baa iska leh amarka oo idil. Ee miyaanay weli aqbalin kuwa rumeysan in haddii Allaah doono uu hubaal hanuunin lahaa dadka oo dhan? Oo kuwa rumeyn diida, kama joogsan doonto inay ku dhacdo xumaha ay falaan darteed balaayo garaacda, amase degta meel ku dhow guryahooda, ilaa inta Ballanka Ilahay ka yimaado. Hubaal, Allaah ma ka baxo Ballankiisa.

32. Oo waxaa horey lagu jeesjeesay Rusul (badan) adiga hortaa, markaas baan siiyey fursad kuwii rumeyn diday, kaddibna waan qabtay. Sidee haddaba mid daranuu u ahaa Ciqaabkeygii?.

33. Ee ma mid Isagu dhowra naf walba oo ogsoon waxa ay kasbato (baa la mid ah mid aan sidaasi ahayn)? oo weliba waxay u yeelaan shariigyo xagga Allaah. Dheh: Magacaaba! Mise waxaad u sheegeysaan wax (ilaahyo kale) uusan ku ogeyn dhulka mise wax iska hadal afka baarki ah<sup>(16)</sup>. Bal! Tabahooda xun baa loo qurxiyey kuwa rumeyn diiday, oo waxaa laga duway Jidka (Toosan), oo qofkii Allaah uu hababiyo<sup>(17)</sup>, ma heli doono wax hanuuniya.

34. Waxay ku mudan doonaan cadaab nolosha adduunkan, oo Cadaabka Aakhirada baa hubaal ka sii daran, oo ma heli doonaan wax ka celiya Allaah.

<sup>14</sup>. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Jannada waxaa ah geed uu u socdo hooskeeda kan rakuub saaran boqol sano oo uusan goyneyn. W.W. Al-Bukhaari.

<sup>15</sup>. Sida ay soo jeediyeen oo dalbeen gaalada.

<sup>16</sup>. Inaad ku sifeysaan ilaahnimo cidaan ahayn Allaah.

<sup>17</sup>. Ilahay wuxuu lumiyaa qofka xun ee lunsan diiddiisa xaga awgeed iyo inuusan doonin hanuunka.

**35.** Tilmaanta Jannada kuwa xumaha ka dhowrsada loo ballan qaaday, hoosteeda webiyya qulqula, miraheedu waa joogto aan kala go'ayn iyo harkeeduba, tani waa ciribta kuwa iska jira (shirkiga iyo macaasida), oo ciribta gaaladu waa Naar.

**36.** Oo kuwa aan (horey u) siinnay Kitaabka<sup>(18)</sup> waa ku farxaan waxa laguu soo waxyooday (Nabi Muxammadow), oo waxaa ka mid ah xisbiyada (Yuhuudda iyo mushrikiintaba) kuwa diida qaarki (Qur'aanka). Dheh, Waxaa sideedaba la i amray inaan caabudo Allaah oo aan waxba la wadaajin. Isaga baan (idiin) ku baaqaa, oo waa xaggiisa noqodkeyku.

**37.** Oo sidaas baan u soo waxyoonnay Xukun lagu kala baxo oo af Carabi ah. Oo haddaad raacdoo rabitaannadooda liita kaddib waxa kuu yimid oo cilmi ah, kama heli doontid xagga Allaah cid kuu gargaarta iyo ilaakiye ku dhowra midna.

**38.** Oo Waxaan horey u soo dirnay Rusul adiga hortaa oo waxaanu siinnay afooyin iyo ubadba<sup>(19)</sup>. Oo uma laha Rasuul (awood) inuu iski ula yimaado Muçjiso, Allaah oo idma ma ahee. Ajal walba wuxuu leeyahay muddo Ilaahay u gooyey oo qoran.

**39.** Allaah Wuxuu tiraax wuxuu doono oo uu sugaa, oo Agtiisa waxaa ah asalka Kitaabka (Looxa Maxfuudka)<sup>(20)</sup>.

**40.** Oo haddaan ku tusi doonno qaar ka mid ah waxa aan ugu gooddinno ama aan ku oofsnomba, waxaa uun adiga korkaaga ah Gaarsiinta (Risaalada), halka ay Annaga na saaran tahay xisaabintoodu.

**41.** Ma waysan arkayn inaan ku nimaanno arlada innagoo ka dhimeyna xudduuddeeda (furasho ama baabba' ku keenna)<sup>(21)</sup>? Oo Allaah baa xukun gooya ma jiro wax burin kara Xukunkiisa, oo wuu ku Dhaqso badan yahay Xisaabinta.

**42.** Oo kuwii ka horreeyey iyaga baa tabo degay, waxaase (tab) oo dhan iska leh Allaah. Wuxuu ogsoon yahay waxa ay naf waliba kasbato, oo gaaladu way ogaan doonaan cidda yeelan doonta Ciribta Wanaagsan ee daarta.

<sup>18.</sup> Yuhuuddi iyo Kirishtaankii soo galay islaamka.

<sup>19.</sup> Casri kasta wuxuu leeyahay axkaan uu Ilaahay u jideeyo addoomahiisa oo ku saleysan xikmaddiisa.

<sup>20.</sup> Waa Looxa Maxfuudka oo ay ku qoran yihiin asalka Kitaab kasta uu Allaah soo waxyooday iyo wax kasta oo Allaah qaddaray.

<sup>21.</sup> Waxay tilmaameysaa fiditaanka islaamka, iyo soo yaraanshaha dhulalka ay ka taliyaan mushrikiinta.

وَيَقُولُ الَّذِينَ كَفَرُوا إِنَّهُ مُرْسَلٌ قُلْ كَفَىٰ بِاللَّهِ شَهِيدًا  
بَيْنِي وَبَيْنَكُمْ وَمَنْ عَنْهُ دُعَاءُ الْكَيْتَبِ<sup>(17)</sup>

١٧

شُورَاهُ لِابْنِ اَهْمَرٍ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِنَّ رَبَّكَ يَعْلَمُ أَنَّكُمْ تُخْجَىٰ إِنَّكُمْ مِّنَ الظَّالِمِينَ  
إِلَى النُّورِ يُلَدَّنُ رَبِّهِمْ إِلَى صَرْطَ الْعَزِيزِ الْحَمِيدِ  
اللَّهُ الَّذِي لَهُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَوَيْلٌ  
لِلْكَافِرِينَ مِنْ عَذَابِ شَدِيدٍ<sup>(1)</sup> الَّذِينَ يَسْتَحْجُونَ  
الْحَيَاةَ الَّذِي نَعْلَمُ عَلَى الْآخِرَةِ وَيَصُدُّونَ عَنْ سَبِيلِ  
اللَّهِ وَيَسْعُونَهَا عَوْجًا أَوْ لَيْكَ فِي ضَلَالٍ بَعْدِهِ<sup>(2)</sup> وَمَا  
أَرْسَلْنَا مِنْ رَسُولٍ إِلَّا يُلَمِّسَانَ قَوْمَهُ لِيَتَبَيَّنَ لَهُمْ  
فَيُضَلِّلُ اللَّهُ مَنْ يَشَاءُ وَلَهُمْ دِيَنُهُمْ وَهُوَ الْعَزِيزُ  
الْمُكَيْرُ<sup>(3)</sup> وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُؤْسِىٰ يَعَلِّمِنَا آنَّ أَخْرِجَ  
قَوْمَكَ مِنَ الظُّلْمِ إِلَى النُّورِ وَذَكَرَهُمْ يَا يَسِيرٌ  
اللَّهُ أَنَّ فِي ذَلِكَ لَكَيْتَ لِكُلِّ صَبَارٍ شَكُورٌ<sup>(5)</sup>

٢٥٥

43. Oo waxay kuwa rumeyn diiday yiraahdaan: Adigu ma tihid Rasuul. Dheh: Allaah baa ku filan marag dhexdeenna aniga iyo idinka, iyo ku kastoo u leh cilmi Kitaabka<sup>(22)</sup>.

## Suuradda 14 Ibraahiim

Waa 52 Aayadood: Makkiyah

Bismillaahir Raxmaanir Raxiim.

1. Alif Laam Raa<sup>(1)</sup>. (Kani waa) kitaab aan kuu soo waxyoonnay (Nabi Muxammad) si aad uga saarto dadka mugdiyada xagga Nuurka si idanka Rabbigood ah – xagga Jidka Adkaadaha, la ammaano.
2. Allaah, ee iska leh waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada. Oo hoog waxaa leh gaalada kaga iman doono Cadaab Daran.
3. Kuwa jecel nolosha adduunkan in ka badan aakhirada, oo ka leexiya (dadka) Jidka Ilaahey oo doona inay ka yeelaan (inuu u muuqdo) mid qalloocan, kuwaanu waxay ku sugar yihiin habow aad u fog.

4. Oo kuma soo dirin Rasuulna waxaan aheyn afka dadkiisa si uu ugu faafhaa hiiyo si caddaan ah<sup>(2)</sup>; markaasuu Allaah qofkuu doono habaabiyya<sup>(3)</sup>, oo hanuuniyya qofkuu doono, oo Waa Isaga Adkaadaha, Xakiimka ah.

5. Oo Waxaan xaqiil la soo dirnay Muuse Aayadahayaga (Annagoo leh): Ka saar dadkaaga Mugdiyada xagga Nuurka, oo xusuusi Ayaamaha Ilaahey<sup>(4)</sup>. Hubaal waxaa (arrin) kani ugu sugar calaamooyin mid walba oo samir badan iyo mahad naq.

22. Culimadii ehl u kitaabka ee soo galay islaamka. Waa kuwa garta xaga iyago adeegsanaya cilmiga ay u lahaayeen kutubti hore.

\*\*\*\*

1. Eeg sharaxa Suuradda 2 Al-Baqara: Aayadda

2. Qur'aanka waxaa lagu soo waxyoodyaf of carabi faseex ah, taasina macnaheedu ma aha in Qur'aanku uu ku gaar yahay Carabta oo keliya, ee wuxuu Allaah u soo deejiyed dadka oo dhan.

3. Wuxuu habaabiyya kuwa diida hanuunkiisa oo ka dan la'aada oo doorta xumaha, oo wuu hanuuniyya qof kastoo doonaya hanuunka oo jecel.

4. Maalmihii loogu nicmeeyey ilmahii Israa'iil. Sidoo kale waxaa lagu fasiray, wixii ku dhacay ummadiihii hore hadday tahay nicmooyin ama cadaab.

## 6. Oo (xusuusta Ilmahii Israa'ilow)

markuu Muuse ku yiri dadkiisii: Xusuusta Nicmadda Ilaahay ku galladeystey dushiinna, markuu idinka badbaadshay dadkii Fircoo ee idin dhadhanshiinayey Cadaab Daran, oo gawracayey wiilashiiinna (dhashay), oo u deynayey haweenkiinna nolol, oo tani waxaa ku sugnaa imtixaan xagga Rabbigiin ah, aad u weyn.

## 7. Oo (xusuusta) markuu Rabbigiin ka yeelay wax la og yahay oo caddaan ah: Haddaad mahad naqdaan, hubaal waan idiin kordhinayaa (khayrka), haddiisee aad iga abaal dhacdaan, hubaal Cadaabkayagu waa mid aad u Daran.

## 8. Oo Muuse wuxuu yiri: Haddaad gaalowdaan idinka iyo kuwaa jooga arlada oo dhan, hubaal Allaah waa hodan deeqtoon, la Ammaano.

9. Oo miyaanay idin soo gaarin warka kuwii idinka horreeyay ee lahaa dadkii Nuux iyo Caad iyo Thamuud iyo kuwii ka dambeeyey? Cidi ma oga (tiradooda) aan ahayn Allaah. Rusushoodii waxay ula yimaadeen xujooyin cad, Waxayse ku celiyeen gacmahooda afakooda<sup>(5)</sup> oo yiraahdeen: Hubaal innagu ma aaminsanin waxaa la idinla soo diray, oo hubaal innagu waxaanu ka qabnaa shaki aad u weyn waxaad noogu baaqdaan.

## 10. Rusushoodii waxay yiraahdeen: Oo ma waxaa jira shaki ku saabsan Allaah, Abuuraha samooyinka iyo aralda? Wuxuu idiinku yeeraa inuu idinka dhaafo dambiyadiinna oo wuxuu dib idiin dhigaa (dhimashadiinna) ilaa muddo magacaaban. Waxay yiraahdeen: Ma tihidin waxaan aheyn dad nala mid ah! Waxaad rabtaan inaad naga duwdaan waxay caabudi jireen aabbayaashayo, Ee noo keena wuxuun awood muuqata ah (xujo cad).

وَإِذَا قَالَ مُوسَى لِقَوْمِهِ أَذْكُرُ رَأْنِيَّةَ اللَّهِ عَلَيْكُمْ  
إِذَا أَنْجَحْتُكُمْ مِنْ إِلَى فِرْعَوْنَ يَسُومُونَكُمْ سُوءَ الْعَذَابِ  
وَيُدْبِّرُهُونَ أَبْنَاءَكُمْ وَيَسْتَحْيُونَ نِسَاءَكُمْ كَرْفَةً وَفِي  
ذَلِكُمْ بَلَاءٌ مِنْ رَبِّكُمْ عَظِيمٌ ۝ وَلَذِكْرَنَّ رَبَّكُمْ  
لِئَنْ شَكَرْتُمْ لَرِبِّنَّكُمْ وَلَئِنْ كَفَرْتُمْ بِرَبِّنَّكُمْ  
لَشَدِيدٌ ۝ وَقَالَ مُوسَى إِنِّي تَكَفُّرُ أَنْشَمْ وَمَنْ فِي  
الْأَرْضِ جَمِيعًا إِنَّ اللَّهَ لَعِيْ حَمِيدٌ ۝ الَّذِي أَنْتُمْ تَبْوَأُونَ  
الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ قَوْمٌ لُؤْجٌ وَعَادٌ وَثَمُودٌ وَالَّذِينَ  
مِنْ بَعْدِهِمْ لَا يَعْلَمُهُمُ الَّلَّهُ جَاءَهُمْ رُسُلُهُمْ  
بِالْبَيِّنَاتِ فَرَدُوا إِيْرَبَهُمْ فِي أَفْوَاهِهِمْ وَقَالُوا إِنَّا كَفَرْنَا  
بِمَا أَرْسَلْنَا مِنْهُ ۝ وَقَالَ أَنَّى لَنِي شَلَّقَ مَقَاتَلَ دُعْنَاتَ إِلَيْهِ مَرِيبٌ ۝  
۝ قَالَتْ رُسُلُهُمْ أَنِّي لَلَّهُ شَكٌ فَلَاطِرُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ  
يَدْعُوكُمْ لِيَغْفِرَ لَكُمْ مِنْ ذُنُوبِكُمْ وَيُؤْخِرُكُمْ إِلَى أَجَلٍ  
مُسْمَىٰ ۝ قَالَوْا إِنَّ شَعْمَ الْأَبَشَرٌ مَقَاتَلُتُرِيدُونَ أَنْ تَصْدُوْنَا  
عَمَّا كَانَ يَعْدُءُ إِبْرَاهِيمَ وَنَافَلُتُرِيدُونَ مَيْزِنٍ

٢٥٦

5. Waxay u celiyeen gacmahooda afakooda waxaa laga bixiyey dhowr macnood. Iyadoo la tixgelinaya gunaanadka Aayadda, ibnu Kathiir wuxuu doortay inay tani ahayed tilmaan diido iyo gaaloobid.

قَالَ لَهُمْ إِنَّا نَحْنُ أَلَّا بَشَرٌ مَّا كُنَّا  
يَمْنُ عَلَى مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ وَمَا كَانَ أَنَّا أَنَا تَكُونُ  
بِسُلْطَنٍ إِلَّا بِإِذْنِ اللَّهِ وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ  
وَمَا كَانَ أَلَّا تَوَكَّلَ عَلَى اللَّهِ وَقَدْ هَدَنَا سَبِيلًا وَلَصِيرَنَ  
عَلَى مَآءِ ادِّيْمُونَ وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ  
وَقَالَ الَّذِينَ كَفَرُوا إِنَّ رَسُولَهُ مَنْخُرٌ جَنَّمَ مِنْ أَرْضِنَا  
أَوْ تَعُودُنَّ فِي مَا تَنْسَأُ فَأَوْحَى إِلَيْهِمْ رُوحٌ مِّنْ نَّفْسِكُنَّ  
الْقَلِيلِيْمِ <sup>١٣</sup> وَلَسْكَنَنَّكُمُ الْأَرْضَ مِنْ بَعْدِهِمْ  
ذَلِكَ لِمَنْ خَافَ مَقَامِي وَحَافَ عَيْدِ <sup>١٤</sup> وَاسْتَقْبَحُوا  
وَخَابَ كُلُّ جَبَارٍ عَيْدِ <sup>١٥</sup> مِنْ وَرَائِيهِ جَهَنَّمُ يُوْسَقُ  
مِنْ مَأْوَى صَدِيرٍ <sup>١٦</sup> يَتَجَرَّعُهُ وَلَا يَكَادُ يُسْيِغُهُ وَيَأْتِيهِ  
الْمَوْتُ مِنْ كُلِّ مَكَانٍ وَمَا هُوَ بِمُيْتٍ وَمِنْ وَرَائِيهِ  
عَدَابٌ غَلِظٌ <sup>١٧</sup> مَثْلُ الَّذِينَ كَفَرُوا بِرَبِّهِمْ أَعْمَلُهُمْ  
كَرَمًا إِذَا شَدَّتْ بِهِ الْأَرْضُ فِي يَوْمِ عَاصِفٍ لَا يَقْدِرُونَ  
وَمَا كَسْوَأْتُكُمْ شَعْرًا ذَلِكَ هُوَ أَصْلَنَ الْبَعِيدُ <sup>١٨</sup>

**11.** Rusushoodii waxay ku yiraahdeen:  
Ma nihin waxaan ahayn dad idinla mid ah, laakiinse Allaah wuxuu ku manneystaa (Fadligiisa) cidduu doono ee ka mid ah addoomahiisa. Oo ma aha wax noo yaal innaga inaan idin keenno awood inuu Allaah Idmo maahee. Oo Allaah uun waa inay mu'miniintu ku kalsoonaadaan.

**12.** Oo maxaa noogu wacan inaanaan ku kalsoonaan Allaah? Isagoo runtii nagu hanuuniyey jidadkayaga (wanaagsan), oo hubaal waan u samreynaa dhibta aad noo geysataan, Oo Allaah uun ha isku halleeya kuwa isku halleeya.

**13.** Oo kuwii rumeyn diiday waxay ku yiraahdeen Rusushoodii: Waxaynu hubaal idinka saari doonaa dhulkayaga, ama haddii kale waxaad ku soo noqon doontaan diintayada. Markaasuu Rabbigood u waxyooday: Waan halaagi doonaa geflowyada.

**14.** Oo hubaal Waxaan idin dejin doonaa Dhulka iyaga kaddib. Arrinkan waxaa leh kan ka cabsada in la i soo hor joojinayo oo ka cabsada Goeddigayga.

**15.** Oo waxay dalbeen gargaar, oo waxaa hoogay isla weyne kasta, macangag madax adag.

**16.** Naar baa ka horreysa, oo waxaa laga waraabin doonaa biyo carow ah<sup>(6)</sup>.

**17.** Wuxuu u cabbi doona in yar in yar oo ma kari doono inuu liqo oo ka degaan, oo dhimashadu waxay uga imaan doontaa meel walba, mase dhiman doono, oo waxaa horti ah Cadaab aad u Qallafsan.

**18.** Mataalka kuwa rumeyn diida Rabbigood camalladoodu waa sida dambas oo kale oo ay dabeyshu si daran u bitiso maalin dabayl xumi dhaceysyo, uma lahaan doonaan awood inay ka helaan waxba ka mid ah waxay kasbadeen. (arrin) kaa waa habowga fog.

<sup>6</sup> Waa dhacaanka ka yimaada nabarrada dadka ehl Nuarka ah.

**19.** Miyaadan arag inuu Allaah ku abuuray samooyinka iyo arlada Xaq? Hadduu doono wuu idin tegsiin karaa oo la iman uun cusub.

**20.** Oo (arrin) kaa kuma adka Allaah.

**21.** Oo waxay iyagoo dhammi iman doonaan Allaah horti, markaasay kuwii ducafada ahaa ku oran doonaan kuwii isla weynaa: hubaal waxaan ahayn raciyadiinna; ee wax ma nooga tari kartaan wax ka mid ah Cadaabka Ilaahey? Waxay oran doonaan: Hadduu Allaah na hanuunin lahaa, innaguna sidoo kale waan idin hanuunin lahayn. Waa isugu keen mid haddaan calaacalno (haatan) ama aan samirno, nooma sugnaan meel loo cararo.

**22.** Oo shayaanku wuxuu oran doonaa marka Arrinka la xukumo: hubaal Allaah wuxuu idii ballan qaaday ballan Xaq ah, oo Anigu sidoo kale waxaan idii qaaday ballamo (been ah), markaasaan idii ka baxay. Oo kuma laheyn awood dushiiinna, waase idii baaqay uun oo Aad i yeeshen. Marka ha i eedaynina ee eedeyya nafahiinna<sup>7</sup>. Anigu idiinma gargaari karo (haatan), idinkuna iima gargaari kartaan. Hubaal Anigu diiday wadaajintiinna cibaadada Aad ila wadaajiseen Allaah awal hore. hubaal waa geflowyada kuwa mudan doona Cadaab Aad u Xanuun Badan.

**23.** Oo kuwa rumeeyey oo sameeyey acmaasha wanaagsan Waxaa laga yeeli doonaa inay galaan Beero hostooda ay webiyo qulqlaan, - iyagoo dhexdeeda ku waaraya Idanka Rabbigood, Salaantooda dhexdeeda waa, Nabadeey.

**24.** Ma waadan ogaan sida Allaah ugu soo qaato mataal Kelmedda Wanaagsani inay la mid tahay geed wanaagsan oo asalkisu sugar yahay, oo laamiihiisu kor samada jiraan.

الَّتِي تَرَأَتِ اللَّهُ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ يَالْحَقِّ إِنْ يَشَاءُ  
يُدْهِبُ كُوْنَوْيَاتٍ بِخَلْقٍ حَدِيدٍ ۖ ۚ وَمَا ذَلِكَ عَلَىَ اللَّهِ بِعَرَبَرٍ  
وَرَزَّوْلِهِ جَيْمِعًا فَقَالَ أَضْعَفُكُو لِلَّذِينَ اسْتَكْبَرُوا  
إِنَّكُمْ تَعْبُدُونَ مُنْتَهَىً عَنَّا هُنَّ عَذَابُ اللَّهِ  
مِنْ سُجْنٍ ۖ قَالُوا أَتُوَهَّدُنَا اللَّهُ لَهُ عَذَابٌ كُمْ سُوَّلَ عَيْنَاهَا  
أَجَرِعْنَا أَمْ صَبَرْنَا مَا لَنَا مِنْ مَحِيصٍ ۖ ۚ وَقَالَ الشَّيْطَنُ لَمَّا  
قُضِيَ الْأَمْرُ إِنَّ اللَّهَ وَعَدَكُمْ وَعْدَ الْحَقِّ وَوَعَدْتُكُمْ  
فَأَخْلَقْتُكُمْ وَمَا كُنْتَ إِلَّا عَلَيْكُمْ مِنْ سُلْطَنٍ إِلَّا  
أَنْ دَعَوْتُكُمْ فَاسْتَجَبْتُ لِي فَلَأَتُؤْمِنُ وَلَمْ يَأْنُفْسُكُمْ  
مَا أَنَا يُمْصِرُ حُكْمُكُمْ وَمَا أَنْتُمْ يُمْصِرُونَ إِلَيْكُمْ كَفَرْتُ  
بِمَا أَشَرْتُكُمُونَ مِنْ قَبْلٍ إِنَّ الظَّالِمِينَ لَهُمْ عَذَابٌ  
الْأَلِيمُ ۖ ۚ وَلَدَخَلَ الَّذِينَ إِذَا نَوَّرْنَا عَمَّا أَصْبَلْنَا حَتَّىٰ  
يَتَبَرَّىٰ مِنْ تَحْتِهَا الْأَنْهَرُ خَلَبِينَ فِيهَا يَذِينَ بِرَهْمَةِ نَحْنِ  
فِيهَا سَلَمٌ ۖ ۚ الَّتِي تَرَكَفَ ضَرَبَ اللَّهُ مَنْلَأَ كَلْمَةً طَيْبَةً  
كَنْجَرَةً طَيْبَةً أَصْلَهَا ثَلَاثَةٌ وَقَرْعَهَا فِي السَّمَاءِ

7. Adeeciddii aad I adeecdeen aniga halkii Allaah intii aad dunida joogteen.

تُؤْكِنُ أَكْلَهَا كُلَّ حِينٍ بِإِذْنِ رَبِّهَا وَيُضَرِّبُ اللَّهُ الْأَمَالَ  
لِلْتَّائِسِ لَعَاهُمْ يَتَذَكَّرُونَ وَمَكَنْ كَلَمَةٍ حَيَّةٍ  
كَشَجَرَةٍ حَيَّةٍ أَحْتَنَتْ مِنْ فَوْقِ الْأَرْضِ مَا لَهَا  
فَرَأَيْتَ <sup>٦</sup> يُشَيَّعَ اللَّهُ الَّذِينَ أَمْنَوْا بِأَقْوَلِ الْأَنَابِتِ فِي الْحَيَاةِ  
الَّذِينَ أَتَوْا فِي الْآخِرَةِ وَيُضَلِّلُ اللَّهُ الظَّلَمِيْرُ وَيَغْلِلُ اللَّهُ  
مَا يَسِّأَهُ <sup>٧</sup> \* الْمُرْتَى إِلَى الَّذِينَ بَدَلُوا عِبَادَتَ اللَّهِ كُفَّارًا  
وَأَحَلُوا قَوْمَهُمْ دَارَ أَبُوَارَ <sup>٨</sup> جَهَنَّمَ يَصْلُوْهَا وَيُنَسَّ  
الْقَرْأَرُ <sup>٩</sup> وَجَعَلُوا لِيَهُ أَنْدَادَ يَضْلُّوْنَ سَيِّلَهُ قُلْ  
تَمَتَّعُوا فَإِنَّ مَحِيرَكُمْ إِلَى النَّارِ <sup>١٠</sup> قُلْ لِعَبَادِيَ الَّذِينَ  
أَمْنَوْا بِيَقِيْعُ الْمُصْلَوَةِ وَيُنْفِلُوْمَا زَرَقْهُمْ سِرَّ وَعَلَيْهِ  
مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَ يَوْمٌ لَا يَعْيَغُ فِيهِ وَلَا يَخْلُلُ <sup>١١</sup> اللَّهُ الَّذِي  
خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ وَأَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَاءً فَأَخْرَجَ  
بِهِ مِنَ الشَّمَرَتِ رِزْقَ الْكُمُّ وَسَحَرَ لِكُمُ الْفَلَكَ لِتَجْرِي  
فِي الْبَحْرِ يَأْمُرُهُ وَسَحَرَ لِكُمُ الْأَنْهَرَ <sup>١٢</sup> وَسَحَرَ لِكُمُ  
الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ دَيْبَيْنِ وَسَحَرَ لِكُمُ الْأَيْلَلَ وَالنَّهَارَ <sup>١٣</sup>

٢٥٩

mid ah waxaanu siinnay sir iyo caddaanba ka hor inta aysan imaan Maalin aysan jiri doonin ganacsii iyo saaxiibnimo midna.

**32.** Allaah waa Kan abuuray samooyinka iyo arlada oo ka soo shubay roob daruuraha, oo ku soo saaray miro risiq idii ah, oo Wuxuu idii sakhiray doonyaha inay ku maaxaan badda Amarkiisa, oo idii sakhiray webiyada.

**33.** Oo Wuxuu idii sakhiray qorraxda iyo dayaxa, labaduba joogto ugu socdaan rugahooda; oo wuxuu idii sakhiray habeenka iyo maalinta.

8. Waxaa soo galaya kelmedda xun: Gaalnimada, shirkiga, iyo qowl kasta oo xun, iyo xumo falka.

9. Qowlka sugan waa kelmedda wanaagsan ee ku soo aarroway Aayadda 24

Waxaa soo galaya kelmedda wanaagsan kelmedda towxiidka inuusan jirin ilaaq xaq lagu caabudo aan ahayn Allaah iyo in Muhammed s.c.w. yahay Rasuulkiil Haahay, iyo qowl kasta oo dadka ugu yeeraya khayr ooo ka reebaya munkarka, iyo sama falka, kelmedda towxiidkaan waxaa weeye laa ilaha illal Laah.

10. Marka ay malaa'igta wax ku su'aalayaan dadka quburahooda dhimashada kaddib, iyagoo weydiinaya seddex su'aalood: Waa kuma Rabbigaa? Maxay tahay diintaada? Waa kuma Nabiga la idii soo diray Rasuul ahaan?

11. Waxay ku qaabileen nicmooyinkii Alle beenin halkii xamdi naqa iyo shukrinta.

**25.** Ku soo saarta miraheeda goor walba Idanka Rabbigeed, Oo Allaah wuxuu u soo qaadaa mataallo dadka bal inay xusuustaan.

**26.** Oo mataalka Kelmedda xun<sup>(8)</sup> waa sida geed xun oo laga rujiyey dhulka korkiisa oo aan laheyn sugnaan.

**27.** Allaah Wuxuu ku waafajiyaa kuwa rumeysan kelmedda sugar<sup>(9)</sup> nolosha adduunkan iyo aakhiradaba<sup>(10)</sup>. Oo Allaah wuxuu lumiyaa geflowyada. Oo Allaah wuxuu falaa wuxuu doono.

**28.** Ma waadan arag kuwa ku qaabilay Nicmadda Ilaahey abaal dhac<sup>(11)</sup>, oo ka yeelay dadkoodii inay degaan daarta halaaggaa.

**29.** Naar bay gali doonaan. Oo iyada baa u xun meel laga sal yeesho.

**30.** Oo waxay u yeelaan shariigyo Allaah si ay uga lumiyaaan (dadka) Jidkiisa. Dheh: iska Raaxysta! Hubaal Aayihiinnu waa xaggaa Naarta.

**31.** (Nabi Muxammad) Ku dheh addoommahayga rumeysan, inay oogaan salaadda, oo bixiyaan wax ka

**34.** Oo Wuxuu idin siyyaa wax ka mid ah wax kastoo aad weydiisatan<sup>(12)</sup>, oo haddaad tirisaan Nicmooyinka Ilaahay, ma koobi kartaan. Hubaal Aadmigu (guud ahaan) waa gef badane, abaal dhac badan.

**35.** Oo (xus Nabi Muxammadow) markuu Ibraahiiy yiri: Rabbiyow! Ka yeel beleedkan (Makkah) aamin, oo iga dheeree aniga iyo awlaaddeyda binaan caabudno sanammo.

**36.** Rabbiyow! Hubaal waxay lumiyeen in badan oo ka mid ah dadka. Ee qofkii i raaca, aniga buu hubaal iga mid yahay; qofkiise igu caasiya, Adiga baa hubaal ah Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**37.** Rabbiyow! Waxaan dejiyey qaar ka mid ah durriyadeyda tog aan sarac lahayn, oo beydkaaga Xurmadda leh agtiis ah; Rabbiyow si ay u oogaan salaadda, ee ka yeel quluubta qaar dadka ka mid ah kuwo u soo iisha xaggooda oo ku irsaaq miro bal inay mahad naqaan.

**38.** Rabbiyow! Hubaal waxaad adigu ogtahay waxa aan qarinno iyo waxa aan muujinnaba. Oo kama qarsoomaan Allaah wax dhulka korkiisa ama cirka gudahiisa ah.

**39.** Ammaan idilkeed waxaa iska leh Allaah ee i siiyey anigoo weyn oo da' ah Ismaaciil iyo Isxaaq. Hubaal Rabbigay waa Maqlaha baryada.

**40.** Rabbiyow! Iga yeel mid ooga salaadda aniga iyo xagga durriyadeyda, Rabbiyow! Oo iiga aqbal baryada.

**41.** Rabbiyow! Ii dambi dhaaf aniga iyo labadeyda waalid iyo mu'miniintaba Maalinta ay dhici doonto Xisaabtu.

**42.** Oo ha moodin in Allaah moog yahay waxa ay falaan geflowyada, ee Wuxuu uun dib ugu dhigaa (xisaabintooda) Maalin ay indhuu taagmi doonaan.

<sup>12</sup>.Wax ka mid ah waxa aad weydiisateen iyo dhammaan wax ka mid ah waxa aad sida joogtada ah u dalabtaan si waafaqsan xikmaddiisa.

مُهْطِعِينَ مُقْبَعِينَ رُؤْسَهُمْ لَا يَرَى تَدْلِيْلَهُ طَرْفُهُمْ  
وَأَفْدَهُمْ هَوَاءٌ<sup>١٣</sup> وَأَنْذِرَ النَّاسَ نَوْمَ يَأْتِيهِمُ الْعَذَابُ  
فَيَقُولُ الَّذِينَ ظَلَمُوا رِبِّنَا إِلَّا أَجْلٌ قَرِيبٌ يُحْكَمُ  
دَعْوَاتُكَ وَتَسْبِيحُ الرَّسُولُ أَوْلَمْ تَكُونُو أَقْسَطُمُّ مِنْ قَبْلِ  
مَالَكُمْ مِنْ زَوَالٍ<sup>١٤</sup> وَسَكَنْتُمْ فِي مَسْكِنِ الَّذِينَ ظَلَمُوا  
أَنْفُسَهُمْ وَتَبَيَّنَ لَكُمْ كَيْفَ فَعَلَنَا بِهِمْ وَصَرَّبَنَا الْكُمْ  
الْأَمْشَالَ<sup>١٥</sup> وَقَدْ مَكْرُوْمَكَرُهُمْ وَعِنْدَ اللَّهِ مَكْرُهُ  
وَإِنْ كَانَ مَكَرُهُمْ لَتَزُولَ مِنْهُ الْجِبَالُ<sup>١٦</sup> فَلَا  
تَخْسِئَنَّ اللَّهُ مُخْلِفُ وَعْدِهِ رُسُلُهُ وَإِنَّ اللَّهَ عَنِّيْزٌ  
ذُو اِنْقَالَمٌ<sup>١٧</sup> يَوْمَ تَبَدَّلُ الْأَرْضُ عَيْنَ الْأَرْضِ وَالْأَسْمَوْنُ  
وَبَرَرُّ فِيلَهُ الْوَحِيدُ الْقَاهِرُ<sup>١٨</sup> وَتَرَى الْمُجْحِرِيْمَ يَوْمَئِذٍ  
مُقْرَنِيْنَ فِي الْأَضْفَادِ<sup>١٩</sup> سَرَابِيْلُهُمْ فِنْ قِطْرَانٍ وَتَعْشَى  
وَجُوْهُهُمُ الْأَنَارُ<sup>٢٠</sup> لِيَحْجِزَ اللَّهُ كُلَّ نَفْسٍ مَا كَسَبَتْ  
إِنَّ اللَّهَ سَرِيعُ الْحِسَابِ<sup>٢١</sup> هَذَا أَبْلَغُ لِلَّتَّا يَسِّرُونَ وَلِيُنْذِرُوا يَوْمَهُ  
وَلَيَعْلَمُوْا أَنَّمَا هُوَ اللَّهُ وَحْدَهُ وَلَيَدْكُرُوا فِي الْأَلْبَابِ

٢٦١

43. Iyagoo horay u degdegaya, madaxyadoodu kor u taagan yihii<sup>(13)</sup>, indhahoodu u soo noqoneyn xaggooda, oo quluubtoodu maran yihii.

44. Oo (Nabi Muxammadow) uga dig dadka Maalinka uu u iman doono cadaabku, markaas kuwaa gefka ka galay nafahooda waxay oran doonaan: Rabbiyow! In yar dib noodhig, (markaas) waxaan ajiibi doonaa baaqaaga oo raaci doonaa Rususha. (Waxaase lagu oran doonaa), “Miyeydaan ka hor ku dhaaran inaydaan adduunka ka tegi doonin?<sup>(14)</sup>.

45. Oo waxaad degteen guryihii kuwii gef ka galay nafahooda, oo waa idiin caddahay sidii aan u galnay. Oo Wuxaan idiin soo qaadannay tusaalooyin (badan).

46. Oo waxay qorsheeyeen qorshahooda, waxaa se (ka war)hayay Allaah qorshahooda, inkastoo qorshahooda aaha mid (daran) ay la baabba'aan buuruhu<sup>(15)</sup>.

47. Ee ha moodin inuu Allaah uga baxayo Ballankiisa Rusushiisa. hubaal Allaah waa Adkaade, Aar gudasho leh.

48. (Waxay ahaan doontaa) Maalinta marka arlada loo beddeli doono arlo kale iyo samooyinkaba, oo waxaa la keeni doonaa (uunka oo idil) Allaah horti, Waaxidka, Awoodda sare leh.

49. Oo waxaad arki doontaa Dambiliyasha Maalintaas oo iskula xir-xiran silsilado.

50. Dharkoodu ka sameysan yihii daamur, oo dabku daboolayo wajiyadoodu.

51. Si uu Allaah uga abayo mariyo naf walbaa waxa ay kasbatay. hubaal Allaah waa ku Dhaqso Badan yahay Xisaabta.

52. (Qur'aan)Kani ugu filan gaarsiin dadka, iyo in loogu digo, iyo inay ogaadaan inuu yahay Ilaaah Keliya, iyo inay ku waana qaataan waxgaradku.

<sup>13.</sup> Tani waa xaaladdooda marka laga soo saaro quburahooda. Madaxyadooda kor yihii iyagoo aan meelna jalleecyen argagax darteed, aan awooddin xitaa inay dib dhugtaan.

<sup>14.</sup> Inayan idinka guureyn nicmooyinka uu Allaah idinku galladeystey dushinna intii aad joogteen dhulka guudkiisa.

<sup>15.</sup> Tafsir kale waa qorshahooda xun kuma filneyn inay ka qaadaan buuraha meelahooda macna kale waa kuma lahayn wax saameys ah doonista Ilaahey.

# J U S K A (14)

## Suuradda 15aad Al-Xijir

Waa 99 Aayadood: Makkiyyah

*Bismillaahir Raxmaanir Raxuum.*

1. Alif Laam Raa<sup>(1)</sup>. Kuwakanii waa Aayadooda Kitaabka, iyo Qur'aan (akhriin) cad.

2. Wax badan bay kuwaa rumeyn diida jecleysan doonaan inay ahaayeen Muslimiin<sup>(2)</sup>.

3. Ee iska daa wax ha iska cunaane oo ha iska raaxaystaan iyo (in) rajo (been ah) maawiliso. Dhowaan bayse ogaan doonaan.

4. Oo ma jirto magaalo aan halaagnay oo aan lahayn waqtii la yaqaan oo qoran.

5. Ummadi kama soo hor mari karto muddadeeda, mana ka soo dib dhici karaan.

6. Oo waxay yiraahdaan: Adigaaganow ah kan Risaalada lagu soo dejiyey<sup>(3)</sup>! Hubaal adigu waxaad tahay nin waalan.

7. Maxaad noogu keeni weyday malaa'igta haddaad tahay mid ka mid ah runowlyada?

8. Uma soo dirno malaa'igta waxaan ahayn xaq<sup>(4)</sup>, oo markaas lama siiyeen wax nafis ah.

9. Hubaal Annaga baa soo waxyoonnay Dhambaalka (Qur'aanka) oo hubaal Annagaa ah ilaaliyayaashiisa<sup>(5)</sup>.

10. Oo Waaan xaqiiq soo dirnay Rusul hortaa (Nabi Muxammadow) ummadahii hore dhexdood.

11. Oo ma jirin Rasuul u yimaada oo aysan ku jees-jeesin.

12. Sidaas baan u gelinnaa (xaq diidista) quluubta dambiliyaaasha.

13. Ma rumeeyaan waxa ku soo arooray, oo waxaa hore maray tusaalihii kuwii hore ee tegey<sup>(6)</sup>.

14. Oo xitaa haddaan uga furno albaab samada oo ay kor ugu cir tagi lahaayeen;

15. Waxay hubaal oran lahaayeen: Waxaa uun la daraan daray Indhahayaga. Mayee, waxaanu nahay dad la sixray.

1. Eeg sharaxa Suuradda 2: Aayadood 1.

2. Waxay sidaas jecleysan doonaan Maalinta Qiyaamahama ama waqtiga dhimashadooda.

3. Waxay sidaas gaaladu ugu yiraahdeen Nabi Muxammad s,c,w, ku digasho iyo jeesjees ahaan.

4. Macnaha waxaan la soo dirnaa fartiin ama sida laga qaadanayo hal dhaca Aayadda cadaabta loogu goodiyey gaalada.

5. Aayaddan waxay muujineysa meeqaanka Qur'aanka iyo xifdintiisa.

6. Hannaaka iyo hab raaca Ilaahay waxaa halkan loolaajeedaa halaagidda dadka beeniya Rususha Ilaahay.

وَلَقَدْ جَعَلْنَا فِي السَّمَاءِ بُرُوجًا وَرَتَّبْنَاهُ لِلنَّظَارِ<sup>١٧</sup>  
 وَحَفَظْنَاهُ مِنْ كُلِّ شَيْطَنٍ رَّجِيمٍ<sup>١٨</sup> إِلَّا مَنْ أَسْرَقَ السَّمَعَ  
 فَاتَّبَعَهُ وَشَهَابٌ مُّبِينٌ<sup>١٩</sup> وَالْأَرْضَ مَدَّنَاهُ وَلَقَيْنَاهُ فِيهَا  
 رَوَسِيٌّ وَلَنَسْتَافِيهَا مِنْ كُلِّ شَيْءٍ وَمَوْزُونٌ<sup>٢٠</sup> وَجَعَلْنَا الْكُمَّ  
 فِيهَا مَعْيَشٌ وَمَنْ لَسْمَتْهُ لَهُ بِرْزَقٌ<sup>٢١</sup> وَلَنْ قَنْ شَفَّ<sup>٢٢</sup> إِلَّا  
 عَنْ دَنَّا خَرَّا إِلَيْهِ وَمَا نَذَرَ إِلَّا قَدَرَ مَعْلُومٌ<sup>٢٣</sup> وَأَرَسْنَا  
 الْرِّيحَ لَوْقَحَ فَأَنْزَلْنَا مِنَ السَّمَاءِ مَآمَةً فَأَسْقَيْنَاهُ كُمُودٌ وَمَا نَشَرَ  
 لَهُ بِخَرَّنِينَ<sup>٢٤</sup> وَإِنَّا تَحْنُنُ نُجُوبَ وَنُجِيبُ وَنَحْنُ أَنْوَرُونَ<sup>٢٥</sup>  
 وَلَقَدْ عَلِمْنَا الْمُسْقَدِيْمِ مِنْ كُلِّهِ وَلَقَدْ عَلِمْنَا الْمُسْتَخْرِيْنَ  
 وَلَنْ يَرَكَ هُوَ كُحْبُرٌ هُمْ إِنَّهُ حَكِيمٌ عَلَيْهِ<sup>٢٦</sup> وَلَقَدْ حَلَقْنَا  
 إِلَيْنَسَنَ مِنْ صَلَصَلٍ مِنْ حَمَامَسْنُونٍ<sup>٢٧</sup> وَلَجَانَ حَلَقَتْهُ مِنْ  
 قَبْلِ مِنْ نَارِ السُّمُومِ<sup>٢٨</sup> وَلَقَدْ رَأَيْكَ اللَّهُ تَعَالَى كَمَّةً إِنْ خَلَقْتَ شَرًا  
 مِنْ صَلَصَلٍ مِنْ حَمَامَسْنُونٍ<sup>٢٩</sup> فَإِذَا سُوَيْتَهُ وَنَفَخْتَ فِيهِ  
 مِنْ رُوحِ فَقَعُولَهُ وَسَجَدْنَ<sup>٣٠</sup> فَسَجَدَ اللَّهُ تَعَالَى كَمَّهُ  
 أَجْمَعُونَ<sup>٣١</sup> إِلَّا إِلَيْسَ أَبَّ أَنْ يَكُونَ مَعَ الْسَّاجِدِيْنَ<sup>٣٢</sup>

٢٦٣

16. Oo Wuxaan yeelnay xiddigo waaweyn samada, oo Wuxaan u qurxinay daawadaayaasha.
  17. Oo Wuxaan ka ilaalinnay Shaydaan kasta laga fogeeey (Naxariista Ilaahey).
  18. Mid maahee xada mar wax u maqlo, markaas la raaciyo isaga holac muuqda.
  19. Oo dhuulta-waanu fidinay, oo wuxaan ku sugnay buuro, oo sababnay inay ka soo baxaan gudaheeda wax kasta oo ku habboon.
  20. Oo Wuxaan idhiinka yeellay dhexdiisa asbaabta noolaanshaha idinka iyo midka kastoo aydaan idinku irsaaqin<sup>(7)</sup>.
  21. Oo ma jiro wax aanaan Annagu hayn khasnadaahiisa. Oo kuma aan soo dejinno wuxaan ahayn qaddar la yaqaan.
  22. Oo Wuxaan soo dirnaa dabaylaha tallaala (daruurta) markaas baan ka soo shubnaa roob daruurga, oo aan idinka waraabino, oo ma ahidin idinku kuwa kaydiya.
  23. Oo hubaal waa Annaga kuwa bixiya nolol, oo sababa inaad dhimataan<sup>(8)</sup>, oo Waa Annaga dhaxlayaasha<sup>(9)</sup>.
  24. Oo xaqiqiil Wuxaanu ognahay kuwiinnii hore ee tegey, oo xaqiqiil Wuxaanu ognahay kuwa dib ka iman doona.
  25. Oo hubaal Rabbigaa waa soo wada kulmin doonaa iyagoo dhan. Hubaal Waa Xakiim, wax kasta Ogsoon.
26. Oo Wuxaan xaqiqiil ka abuurnay dadka (Adam) dhoobo qallalan oo dhawaqaq leh, madow doorsoon ah oo suurad leh.
27. Oo Jinka, Wuxaan ka abuurnay mar ka horreysey dab aad u kulul oo ololaya.
28. Oo (xus Nabi Muxammadow) markuu Rabbigaa ku yiri malaa'igta: Wuxaan ka abuuraya qof (Adam) dhoobo qallalan oo dhawaqaq leh, madow doorsoon ah.
29. Ee, markaan sameeyo isagoo dhan oo aan ku afuufo ruuxkaya<sup>(10)</sup> (aan u abuuray) markaa ula dhaca sujuud.
30. Markaas bay malaa'igti sujuudeen kulligoodba iyagoo dhan.
31. Iblisi<sup>(11)</sup> maahee (ma yeelin): waa uu diiday inuu ka mid ahaado kuwa sujuuday<sup>(12)</sup>.

7. Macnaha waxaa weeye Allaah wuxuu idhiin sakhiray dad iyo duunyo kale uus isagu wax siyyo oo irsaago. Macno kale waxaa weeye Allaah wuxuu idhi siyyaa waxyaalo aad ku noolataan oo sidoo kale siyyaa dhammaan uunanka kale.

8. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Haddii uu qafka aadmiga ahi dhinto waxaa go'a camalkiisa marka laga reebo seddex arrimood: Sadqa joogto ah, cilmi lagu intifaaco, am ilmo wanagaans oo u dooseeya. (Muslim).

9. Allaah subxaanahu waa taacalaabaa baa hara marka ay unkaa oo dhan halagsaamaan.

10. Walaxda nolosha iyo nafaa uu Alaabah u abuuray jirkas, ma ahi rux laahinimo ah amay qab ka mid ah (sida uu yahayfa fahanka gurracan ee dadka qaarki).

11. Wuxuu ka mid ahaad jinka sida ku arroray Suuradda 18: Aayadda 50.

12. Sujudda halkan looma jeedo cibaado ee waxaa loola jeedaa salaan ka hebeysi iyo qaddarin iyo weynayn ah adigoo madaxa hoos u soo rogaya. Waana tii Mucaad markuu soor arkay dad sidaa salaan madaxa uila suo roganya hoos, uu damcay inuu sidaas oo kale u salaamo oo ugu sujuudo Nabi Mucaad s.c.w. waana uu ku diiday, waayo shareecade Nabi Mucaad s.c.w. kuma bannaanu in qofina too rukuuco oo madax hoos loogu dhigo, Rukuu sidaas ah sujuudna waa la yiraahdaa. Rukuu iyo sujuudda waa cibaado ciidna xaq uma leh an ahayn Allaah subxaanahu watacalaa.

**32.** (Allaah) Wuxuu yiri: Ibliisow! Maxaa kuugu wacan inaadan ahaan la jirka kuwaal sujuuda?

**33.** (Ibliis) wuxuu yiri: Anigu ma ahi mid u sujuudaya qof (Adam, kaasoo) aad ka abuuray dhoobo qallalan oo dhawaqaq leh, madow doorsoon ah oo suurad leh.

**34.** (Allaah) Wuxuu yiri: Haddaba ka bax xaggeeda, hubaal adigu waa lagu fogeeey.

**35.** Oo hubaal waxaa dushaada ah Nacaladda ilaa Maalinta Aabaal marinta.

**36.** (Ibliis) wuxuu yiri: Rabbiyow! Haddaba i sii fursad ilaa Maalinta la soo bixin doono.

**37.** (Allaah) Wuxuu yiri: Haddaba hubaal Waxaad ka mid tahay kuwa la siiyey fursadda.

**38.** Ilaa Maalinta waqtiga la yaqaan leh.

**39.** (Ibliis) wuxuu yiri: Rabbiyow! Inaad igu habaabisay nolosha darteed, Waxaan hubaal iyagana (dadka) u qurxin doonaa jidka habowga dhulka korkiisa, oo waxaan habaabin doonaa iyagoo dhan.

**40.** Waxaan ahayn addoomahaaga ku jira ee daacadda ah kuu keli yeela cibaadada.

**41.** (Allaah) Wuxuu yiri: Kani waa Jid (u soo laabasho) xaggeyga (ee) toosan.

**42.** Hubaal, addoomahayga, kuma lihid awood dushooda, kuwa maahee ku raaca ee habowsanayaasha ah.

**43.** Oo hubaal, Naarta waa halka loo ballan qaaday iyagoo dhan.

**44.** Waxay leedahay toddoba Albaabood, albaab walbaa halkaa waxaa ahaan doonaa qayb gaar ah oo ka mid ah (kuwa raaca shaydaanka).

**45.** Hubaal kuwa iska jira (xumaha) waxay dhex ahaan doonaan Beero iyo ilo.

**46.** (Iyagoo lagu oran): Ku gala nabad idinkoo aamin (iyo nabad) ah.

**47.** Oo Waxaan ka soo siibi dooncaa wixii xumaan kala tirsii oo ku jira laabahooda, (waxay ahaan doonaan) walaalo ku sugan sariiro boqoreed dushood is qaabilsan fool ka fool.

**48.** Kuma taaban doono gudaheeda daal, lagamana soo saari doono.

**49.** (Nabi Muxammadow) ogeysii addoomahayga inaan Anigu ahay Dambi Dhaaf Badanaha, Naxariista Badan.

**50.** Iyo in Cadaabkaygu uu yahay cadaabka xanuunka badan.

**51.** Oo u sheeg arrinka martidii Ibraahiim.

فَالْيَتَأْنِي لِمَالِكَ الْأَلَّا تُكُونَ مَعَ السَّاجِدِينَ ﴿٢٢﴾ قَالَ لَمَّا كَنَعَ  
لَا سَجَدَ لِيَسْرِ خَلَقَتْهُ وَمِنْ صَاصِلٍ مَّنْ حَمَاسِنُونَ ﴿٢٣﴾  
قَالَ فَأَخْرُجْ مِنْهَا فَإِنَّكَ رَجِيمٌ ﴿٢٤﴾ وَلَنْ عَيَّنَكَ الْعَنَةَ إِلَى يَوْمِ  
الَّذِينَ ﴿٢٥﴾ قَالَ رَبِّيْ فَأَظْرَيْنِي إِلَى يَوْمِ يُبَعَثُونَ ﴿٢٦﴾ قَالَ فَإِنَّكَ  
مِنَ الْمُنْظَرِينَ ﴿٢٧﴾ إِلَى يَوْمِ الْوَقْتِ الْمَعْلُومِ ﴿٢٨﴾ قَالَ رَبِّيْ بِمَا  
أَغْوَيْتَنِي لَأَزْرِيَنَ لَهُمْ فِي الْأَرْضِ وَلَا غُوَيْتَهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٢٩﴾  
إِلَّا عَبَادَكَ مِنْهُمْ الْمُحَاجِصِينَ ﴿٣٠﴾ قَالَ هَذَا صِرَاطُ عَلَى  
مُسْتَقِيمٍ ﴿٣١﴾ إِنَّ عَبَادِي لَيْسَ لَكَ عَلَيْهِمْ سُلْطَانٌ إِلَّا مَنْ  
أَتَيْتَكَ مِنَ الْعَاقِبَاتِ ﴿٣٢﴾ وَلَنْ جَهَّمَ لَمَوْهُ هُنْ أَجْمَعِينَ ﴿٣٣﴾  
لَهَا سَبْعَةُ أَوْبِرْ لِكُلِّ بَابٍ مِنْهُمْ جُنُزٌ مَّسْوُورٌ ﴿٣٤﴾ إِنَّ  
الْمُنْقَبِينَ فِي جَنَّتٍ وَعَيْنِينَ ﴿٣٥﴾ أَذْهَلُوهَا إِسْلَامٌ أَمْنِينَ ﴿٣٦﴾  
وَرَعَنَّا مَافِي صُدُورِهِمْ مَنْ غَلَبَ إِخْرَاجَهُمْ مُقْتَلِينَ ﴿٣٧﴾  
لَا يَمْسِهُمْ فِيهَا أَصَابٌ وَمَا هُمْ مِنْهَا بِمُحْرِجِينَ ﴿٣٨﴾  
نَبَّئَ عَبَادِي أَنِّي أَنَا الْغَفُورُ الْجِيمُ ﴿٣٩﴾ وَلَنْ عَدَافِ  
هُوَ الْعَذَابُ الْأَلِيمُ ﴿٤٠﴾ وَنَيْشَهُمْ عَنْ ضَيْفِ إِبْرَاهِيمَ ﴿٤١﴾

إِذْ دَخَلُوا عَلَيْهِ فَقَالُوا إِنَّا مِنْ كُوَفَّلُونَ<sup>٥١</sup> قَالَ الْوَلِيُّ  
 لَا تَوَحَّلْ إِنَّا نَبْشِرُكُمْ بِعَلِيمٍ عَلِيمٍ<sup>٥٢</sup> قَالَ إِنْتُمْ تُؤْمِنُونَ عَلَى أَنَّ  
 مَسَيْنِي الْكَبِيرُ فَمَبْشِرُونَ<sup>٥٣</sup> قَالُوا إِنَّا شَرِيكَنَا بِالْحَقِيقَةِ  
 فَلَا تَكُنْ مِنَ الْقَنْطَنِيْنِ<sup>٥٤</sup> قَالَ وَمَنْ يَقْطُنْ مِنْ رَحْمَةِ  
 رَبِّهِ إِلَّا أَصْلَانُونَ<sup>٥٥</sup> قَالَ فَمَا حَاطَبْكُمْ أَبْعَدُهُمُ الْمُرْسَلُونَ  
 قَالُوا إِنَّا أَنْتَمْ إِلَيْنَا إِلَى قَوْمٍ مُّجْرِمِينَ<sup>٥٦</sup> إِلَّا أَنَّ لُوطَ  
 إِنَّا مُجْهُومُهُمْ جَمْعِيْتَ<sup>٥٧</sup> إِلَّا أَمْرَتُهُ وَقَدَرْنَا إِنَّهَا لَمِنَ  
 الْغَنَّارِيْتَ<sup>٥٨</sup> فَلَمَّا جَاءَهُمْ أَلَّا لُوطُ الْمُرْسَلُونَ<sup>٥٩</sup> قَالَ  
 إِنَّكُمْ قَوْمٌ مُّنْكَرُونَ<sup>٦٠</sup> قَالُوا إِنَّا جَنَّاتُكُمْ بِمَا كَلَّا فِيهِ  
 يَمْرُرُونَ<sup>٦١</sup> وَأَنَّيْنَا بِالْحَقِيقَةِ وَإِنَّا صَدِيقُونَ<sup>٦٢</sup> قَاسِرٌ  
 يَأْهَلُكَ يَقْعِيْحَ مِنْ أَيْلَى وَأَتَيْعَ أَذْدِرْهُرَ وَلَا يَلْتَقِيْتُ مِنْكُمْ أَعْدَادَ  
 وَأَمْضُوا حَيْثُ تُمُرُّونَ<sup>٦٣</sup> وَقَصَيْنَا إِنَّا إِيْذَنَنَا لَكُمُ الْأَمْرَانَ  
 ذَاهِرَهُؤُلَاءِ مَقْطُوعٌ مُّصْبِحِيْتَ<sup>٦٤</sup> وَجَاهَ أَهْلُ الْمَدِيْنَةَ  
 يَسْتَبْشِرُونَ<sup>٦٥</sup> قَالَ إِنَّهُؤُلَاءِ صَيْفَيْنِ فَلَا قَضَصُونَ<sup>٦٦</sup>  
 وَاتَّقُوا اللَّهَ وَلَا أَخْزُنُونَ<sup>٦٧</sup> قَالُوا إِنَّمَا تَنْهَكُمْ عَنِ الْمَاهِيْنِ<sup>٦٨</sup>

52. Markay u soo galeen, waxay yiraahdeen: Nabad ahaada. (Ibraahiim) Wuxuu yiri: Hubaal innagu cabsi ayaan idinka qabnnaa.

53. (Malaa'igti) waxay yiraahdeen: Ha cabsan. Hubaal waxaan kuugu bishaareynynaa wiil aqoon leh.

54. Wuxuu yiri: Ma waxaad iigu bishaareynysaan (wiil) anigoo ay i soo taabatay da' weyni? Haddaba maxaad iigu bishaarayneysaan?

55. Waxay yiraahdeen: Waxaan kuugu bishaaraynynaa wax run ah. Ee ha ka mid noqon kuwa quasta.

56. Wuxuu yiri: Oo yaa ka quusta Naxariista Rabbigi aan ahayn kuwa lunsan?

57. (Ibraahiim) wuxuu yiri: Waa maxay howsha aad u socotaan halkaan, kuwaan la soo dirayow?

58. Waxay yiraahdeen: Hubaal waxaa naloo soo diray dad dambiilayaal ah.

59. Reer Luud ma'ahee. Hubaal waanu badbaadin doonaa iyagoo dhan.

60. Xaaskiisa ma'ahee, waxaan qaddarnay inay ka mid ahaato kuwa ku haraya gadaal (la cadaabayoo)<sup>(13)</sup>.

61. Markas markay Rusushii la soo diray u yimaadeen reer Luud.

62. Wuxuu yiri: Hubaal waxaad idinku tiihin dad aan la garanayn.

63. Waxay yiraahdeen: Bal, waxaanu kuula nimid waxa ay ka doodeyeen.

64. Oo waxaanu kuula nimid Xaq oo hubaal waxaanu nahay run sheegayaal.

65. Ee la guuree ethelkaaga qayb ka mid ah habeenka, oo soco gadaashooda, oo yaanu midkiinna dib soo dhugan oo aada halka la idin ku amray.

66. Oo Waxaanu u waxyoonnay arrinkan ah, in ciribta kuwaas (dambiilayasha ah) la goynayo subaxa horeba.

67. Oo dadkii magaaladu waxay yimaadeen iyagoo faraxsan<sup>(14)</sup>.

68. (Luud) wuxuu yiri: Kuwakanu waa martidaydi ee ha igu ceebeynina.

69. Oo Allaah ka cabsada oo ha i dulleynina.

70. Waxay yiraahdeen: Oo miyaanaan kaa reebin inaad (badbaadiso) dadka kale<sup>(15)</sup>?

<sup>13</sup>. Kaalmeyneteeda xuma falayaasha darteed.

<sup>14</sup>. Iyagoo ku faraxsan warka martida Luud ee yimid magaalada.

<sup>15</sup>. Waxay ku fali jireen xumaha fuulidda ragga ah martidooda, waxayna u handadeen Luud si uusan uga reebin ficolkaa xun.

**71.** Wuxuu yiri: Kuwaanu waa gabdhahaygii<sup>(16)</sup>, haddaad yeeleysaan (inaad guursataan si sharci ah).

**72.** Waa igu Cimrigaaga'e (Nabi Muxammad)<sup>(17)</sup>, waxay indho la'aan ku heehabayeen sakhraansanidoodii.

**73.** Markaas baa qeylo aad u weyn (qarax) qabtay qorrax soo bixiba;

**74.** Oo Waxaan ka yeellay korkoodii hoostooda, oo roob kaga dhignay dushooda dhagaxyo dhoobo adag ah.

**75.** Hubaal, arrin kani waxaa ugu sugan calaamooyin kuwa wax ka firsada.

**76.** Oohubaal Waxay (magaalooyinkaas)<sup>(18)</sup> ku yaalliiin waddo weli la deggan yahay.

**77.** Hubaal arrin kani waxaa ugu sugan calaamooyin mu'miniinta.

**78.** Oo qoladii hawdka<sup>(19)</sup> (dadkii Madyan) waxay sidoo kale ahaayeen geflowyo.

**79.** Markaas baan ka aargudannay. Oo waxay labada (magaalaba)<sup>(20)</sup> ku yaallaan waddo cad.

**80.** Oo dadkii degganaa Al-Xijr waxay beeniyeen Rususha.

**81.** Oo waxaanu siinnay Aayadahaygii, wayse ka jeesadeen xaggooda.

**82.** Oo waxay ka qodi jireen buuraha guryo, iyago aamin ah.

**83.** Markaas baa waxaa qabtay qeylo aad u weyn (qarax) waaberkiiba.

**84.** Oo waxba uma tarin waxay kasban jireen.

**85.** Oo uma aanu abuurin samooyinka iyo arlada iyo waxa u dhexxeyya waxaan aheyn Xaq, Oo hubaal Saacaddu way imanaysaa, ee isaga jeeso adigoo saamaxaya gefefkooda saamixaad qurxoon.

**86.** Hubaal Rabbigaa waa Abuuraha wax kasta ee jira, wax waliba Ogsoon.

**87.** Oo Waxaanu xaqiqi ku siinnay toddobo ah (Aayadaha in badan) lagu soo celceliyo<sup>(24)</sup> iyo Qur'aanka Weyn.

**88.** Ha u taagin indhaaga waxa aanu siinnay inay ku raaxeystaan qaybo ka mid ah iyaga (gaalada) oo ha u murugoon, oo hoos ugu dhig garabkaaga (u muuji naxariis) mu'miniinta.

**89.** Oo dhee: hubaal anigu waxaan ahay digaha cad.

**90.** Sidaanba ugu soo dejinnay kala qaybiyayaashii.

**16.** Gabdhaha qoonkiisa ee u bannaan inay guursadaan.

**17.** Waxaa caadde Carabta ka mid aheyd inay ku dhaartaan qofka cumrigiisa.. wuxuu halkan Allaah ku dhaartay cumriga Nabi Muxammad s.c.w. taasoo muuijineysa meeqaaniiska iyo meesha weyn uu Nabigu s.c.w. ka joogo Allaah kor ahaaye. Allaah wixii uu doono buu ku dhaartaan, dadkuse waa ka xaaraan inay ku dhaartaan waxaan ahayn Allaah.

**18.** Magaalaad Sodom ee u dhow badda meytan ee hadde loo yaqaan Al-Baxrul Mutawasid ama Midetereean.

**19.** Dadka Aykah ama reer hawdka ama keynta waa qoonki Shuacyb. Aykah waxay ahayd meal u dhow Madyan.

**20.** Waxaa loola feedaa magaalooyinkii qoonki Luud iyo Shuacyb.

الَّذِينَ جَعَلُوا الْقُرْبَةَ أَنْ عَصِيَتْ ١١ فَوَرَبَّا كَلَّتْ لِتَسْتَهِنَهُمْ  
 أَجْمَعِينَ ١٢ عَمَّا كَانُوا يُعْمَلُونَ ١٣ فَاصْدَعْ يَمَوْمَرْ وَأَعْرَضْ  
 عَنِ الْعَشَرِ كَيْنَ ١٤ إِنَّا كَفَيْنَاكَ الْمُسْتَهِنَّ بِنَ ١٥ الَّذِينَ  
 يَجْعَلُونَ مَعَ اللَّهِ إِلَيْهِ أَهْرَافَ سُوقَ بَعَلَمُونَ ١٦ وَلَقَدْ تَعَلَّمَ  
 أَنَّكَ يَضْيِيقُ صَدْرَكَ بِعِمَالِيُّولُونَ ١٧ فَسَيِّئْ يَحْمَدُ رَبِّكَ وَكُنْ  
 مِّنَ الْمُسْجِدِينَ ١٨ وَأَعْبُدْ رَبِّكَ حَقَّ يَأْتِيَكَ الْقِيَمُ ١٩

سُورَةُ النَّحْشُورِ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
 أَنْ أَمْرُ اللَّهِ فَلَا تَسْتَعْجِلُوهُ سُبْحَنَهُ وَعَلَى عَمَّا يُشَكُّونَ  
 ١ يُنْزِلُ الْمَلَائِكَةَ بِإِرْبُوحٍ مِّنْ أَمْرِهِ عَلَى مَنْ يَشَاءُ مِنْ  
 عَبَادَوْهُ أَنْ اذْرُوْأَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا أَنَّا فَاتَّقُوبُ ٢ حَلَقَ  
 السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ يَعْلَمُ عَمَّا سُرِّيَ كُونُ ٣ حَلَقَ  
 إِلَيْنَسَنَ مِنْ نُظْفَةٍ فَإِذَا هُوَ حَصِيمٌ مُّبِينٌ ٤ وَالْأَنْعَمَ  
 خَلَقَهَا لَكُمْ فِيهَا دَفَّ وَمَنْفَعٌ وَمِنْهَا تَأْكُولُونَ  
 ٥ وَلَكُمْ فِيهَا جَمَالٌ حِينَ تُرْمُوْتُ وَحِينَ تَشَرُّوْنَ

٢٦٧

91. Kuwaas ka dhigay Qur'aanka qaybo<sup>(21)</sup>.

92. Haddaba waa igu Rabbigaa hubaal waanu weydiin doonaa dhammaantood,

93. Xagga waxa ay fali jireen.

94. Ee daaha ka qaad wax lagugu amray<sup>(22)</sup>, oo iskagajeeso Mushrikiinta<sup>(23)</sup>.

95. Hubaal Annaga baa kaaga filnaan doonna jees-jeesayaasha.

96. Kuwa u yeela ilaah kale la jirka Allaah, dhowaan bayse ogaan doonaan.

97. Oo Waxaan ognahay inay ka ciriiryoonto laabtaadu waxa ay yiraahdaan.

98. Ee ku taasbiixso ammaanaha Rabbigaa oo ka mid ahow kuwa u sujuuda (Allaah).

99. Oo caabud Rabbigaa ilaa uu kuu yimaado kaasi la hubo (mowdka).

**Suuradda 16 An-Naxal**Waa 128 Aayadood: Makkiyyah  
*Bismillaahir Raxmaanir Raxxiim.*1. Amarka Ilaaahay waa imanaya<sup>(1)</sup> ee ha sugi waayina. Xurmo oo dhan Isagaa baa iska leh, oo waa ka Sarreeyaa waxa ay wax la wadaajiyaa.

2. Wuxuu la soo diraa malaa'iga Waxyiga Amarkiisa ah (uu u soo waxyoodo) cidduu doono oo addoomahiisa ka mid

ah (Isagoo leh): Bixi digniinta inuusan jirin Ilaaah aan ahayn Aniga oo dhowra xilka aan idin saaray.

3. Wuxuu ku abuuray samooyinka iyo arlada Xaq. Waa ka Sarreeyaa oo ka nazahan yahay shariig loo yeelo.

4. Wuxuu ka abuuray dadka dhibic mino ah, mise, waa dood badane col cad ah<sup>(2)</sup>.5. Oo xoolaha daaqa wuu idiin abuuray; waxaa idiinku sugar dugaal iyo manaafacaad badan oo kale<sup>(3)</sup>, oo iyaga ayaad wax ka cuntaan.

6. Oo waxaa idiinku sugar (ku raaxeysga ) quruxed markaad u soo celinaysaan galabnimada (guriga) iyo markaad u foofinaysaan daaqa subaxa.

21. Iyagoo qaadanaya Kitaabka qaarki, oo beeniya qaar kale iyagoo raacaya hawadooda.

22. Waa si loo kala saaro mu'mintuut iyo gaaladha.

23. Mid kastoo ku adkeysta inuu la wadaajiy cibaadada Allaah cid kale.

\*\*\*\*

1. Ataa Lugad ahaan macnaheedu waxaa weeye waa yimid waxaan loola jeedaa muujin in la hubo oo yaqin tahay oo ay aad u soo dhowdahay Saacadda Qiyaaame ama halqaagidda gaalidha iyo guusha ay heli doonaa Muslimiinta. Ataa Waa ficil maadi (fal tagey) laakiin loogala jeedo mudhaaric fal soocda oo imanyaan. Sieddeenda waxaa jira sagaal meelood oo falqa tagay loogala jeedo fal soocda ama markaa ah, waxaa ka mid ah hadalkii laga billaabo hadalka fal tagey, falqa tagay ee soo aroora kaddib mid ka mid ah xururfta sharadka sida idaa jaa'a, in makkaaannahum, ama kaddib mowsuul sidaa alladhiina aamanuu, iwm falalka tagay halkan waxaa loola jeedi karaa fal jooga ama soo socda.

2. Durba marka uu xoog yeesho oo madax bannaanaado.

3. Dhar ahaan loo xirto, teendhooyin, alaaboooyin, twm.

7. Oo waxay u qaadaan culeysyadiinna xagga magaalo aydaan gaari karteen nafahoo dhibtooda ma'ahee. Hubaal Rabbigii waa Turid Badane, Naxariis Badan.

8. (Oo Wuxuu idiin abuuray) fardo, baqallo iyo dameerro inaad fuushaan darteed iyo qurux ahaanba. Oo Wuxuu abuuraa waxaa aydaan ogeyn.

9. Oo Allaah waxaa saaran caddeynta Jidka Toosan, oo waxaa jira (jihad) qalloom ah. Oo hadduu doono hubaal waa uu idin wada hanuuin lahaa dhammaantiin.

10. Waa Isaga Kan idiinka soo shuba roob daruurga, xaggiisa laga cabbo, oo xaggiisa geeduhi ka ahaadaan Aad daaqsataan (xoolaha).

11. Wuxuu sababaa inuu idiinku soo bixiyo sarac, saytuun, geedaha timirta, canabyo iyo nooc walba oo miraha ah. Hubaal arrinkaa waxaa ugu sugan calaamooyin dad fekera.

12. Oo Wuxuu idiin sakhiray habeenka iyo maalinta iyo qorrxada iyo dayaxa; xiddighuhuna waxay ku sakhiran yihii Amarkiisa. Hubaal, arrinkaa waxaa ugu sugan calaamo dad garasho leh.

13. Oo (wuxuu idin sakhiray) wax kastoo uu idiinku fidshay dhulka korkiisa oo midabbo kala duwan leh. Hubaal arrinkan waxaa ugu sugan calaamo dad xusuus leh.

14. Oo Waa Isaga Kan idiin sakhiray badda si aad uga cuntaan hilib cusub iyo inaad kala soo baxdaan qurux aad xirataan. Oo waxaad aragtaa doonyaha oo dhex maaxaya badda gudaheeda, (oo wuu idiin sakhiray) si aad ugu raadsataan (sidaa) wax ka mid ah Deeqdiisa, oo waa intaasoo aad mahad naqdaan.

وَتَحْمِلُ أثْقَالَكُمْ إِلَى بَلَدٍ لَمْ تَكُنُ أَنْتُغْيِي إِلَيْهِ  
الْأَنْفُسُ إِنَّ رَبَّكَمْ لَعُوفٌ رَّحِيمٌ ٧ وَالْخَيْرَ وَالْيَعْلَمُ  
وَالْحَمْدُ لِرَبِّكُمْ بُهَا وَرَزِينَةٌ وَخَلَقَ مَا لَا تَعْلَمُونَ ٨  
وَعَلَى اللَّهِ قَصْدُ السَّبِيلِ وَمِنْهَا جَاءَ بِرٌّ وَلُوشَاءَ لَهَدَنَكُمْ  
أَجْمَعِينَ ٩ هُوَ الَّذِي أَنْزَلَ مِنَ السَّمَاءِ مَا لَمْ كُنْ  
مِّنْهُ شَرَابٌ وَمِنْهُ شَجَرٌ فِيهِ تُسْبِمُونَ ١٠ يُبَيِّنُ لَكُمْ  
يَهُ الْأَزْرَعَ وَالْأَرْبُورَتَ وَالْخَيْرَ وَالْأَعْنَبَ وَمِنْ كُلِّ  
الشَّرَبَاتِ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَذِيَّةً لَقُومٍ يَنْفَعُهُنَّ رَوْبَرٌ  
وَسَخَرَ لَكُمْ أَيْلَ وَالنَّهَارَ وَالسَّمَسَ وَالنَّمَرَ  
وَالنَّجُومُ مُسَخَّرٌ بِأَمْرِهِنَّ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَذِيَّةً لَقُومٍ  
يَعْقُلُونَ ١١ وَمَادَرَ الْكُمْمُ فِي الْأَرْضِ مُخْتَلِفًا  
الْأَوْنَوْهُنَّ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَذِيَّةً لَقُومٍ يَدَدَ كَرُورَتَ ١٢  
وَهُوَ الَّذِي سَخَرَ أَبْحَرَ لَكُمُ الْأَمْمَةَ لَحْمًا طَرِيًّا  
وَسَتَسْخَرُ حِلْمَمَةَ حَلْيَةَ تَبْسُونَهَا وَتَرَى الْفَلَكَ مَوْلَحَرَ  
فِيهِ وَلَتَبْتَغُوا مِنْ فَضْلِهِ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ١٣

وَالْقَنِي فِي الْأَرْضِ رَوَى يَأْنَى تَمِيدَ بِكُمْ وَنَهَرَ كَوْسِلَا  
لَعَلَّكُمْ تَهتَدُونَ ۖ وَعَلَمْتُمْ وَبِالْجَمِيعِ هُمْ بَهتَدُونَ  
ۖ أَفَمَنْ يَخْفِقُ كَمَنْ لَا يَخْلُقُ أَفَلَا تَرَكَ رُوتَ ۖ وَإِنْ  
تَعْذُوا بِعَمَّةَ اللَّهِ لَا تَحْصُوهُ إِنَّ اللَّهَ لِغَفُورٌ رَّحِيمٌ  
وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا تُسْرُوتُ وَمَا تُنْتَلُونَ ۖ وَالَّذِي يَدْعُونَ  
مِنْ دُونِ اللَّهِ لَا يَخْلُقُونَ شَيْئاً وَهُمْ يُخَافِرُونَ ۖ أَمْوَاتٍ  
غَيْرَ حَيٍّ لِوَمَا يَسْعُرُونَ إِنَّ يَعْنُونَ ۖ إِنَّهُمْ كُمَّ اللَّهِ  
وَجَدُّ فَالَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ قُلُوبُهُمْ مُنْكَرٌ وَهُوَ  
مُسْتَكْبِرُونَ ۖ لَأَجْرَمَ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا لِيْسُرُونَ وَمَا  
يُعْلَمُونَ إِنَّهُ لَا يُحِبُّ الْمُسْتَكْبِرِينَ ۖ وَلَا أَقِيلُ لَهُمْ  
مَا ذَرَّ أَنْزَلَ رَبُّكُمْ قَالُوا سَطِيرُ الْأَوْقَبِينَ ۖ لَيَحْمِلُوا  
أَوْرَارَهُمْ كَعَامِلَةَ يَوْمَ الْقِيَمَةِ وَمَنْ أَوْرَارَ الَّذِينَ يَضْلُلُونَهُمْ  
يُغَيِّرُ عَلَيْهِ الْأَسَاءَةَ مَا يَرِزُونَ ۖ قَدْ مَكَرَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ  
فَقَاتَ اللَّهُ بِنَيْتِهِمْ قَرْبَ الْقَوَاعِدِ فَخَرَعَ عَيْنَهُمْ السَّقْفُ  
مِنْ فَوْقِهِمْ وَلَأَنَّهُمُ الْعَذَابُ مِنْ حَيْثُ لَا يَشْعُرُونَ ۖ

15. Oo Wuxuu ku riday dhulka buuro waaweyn oo sugar, si uusan idiiinla ilan oo (wuxuu yeelay) webiyaal iyo waddoooyin si aad ugu hagaagtaan (danahiinna).

16. Iyo calaamooyin dhulka lagu garto, oo xiddigaha bay ku helaan dhabbaa toosan.

17. Ma mid haddaba wax abura baa la mid ah mid aan wax abuurin? Ma waydaan haddaba waansameyn?

18. Oo haddaad tirisaa Nicmooyinka Ilahay, ma koobi kartaan. Hubaal Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

19. Oo Allaah wuxuu Og yahay waxa aad qarisaan iyo waxa aad muujisaanba.

20. Oo kuwa ay baryaan Allaah sokadi waxba ma ay abuurin, ee iyaga baa nafahaantooda la abuuray.

21. (Waa) mayti (xaqiqidii) aan nolol ku jirin, oo ma ay oga goorta la soo bixin doono.

22. Ilahiinna waa Ilah Mid Keliya ah. Kuwase aan rumeynsney Aakhirada,

quluubtoodu way diidaan (Towxiidka), oo iyagu way isla weyn yihiin.

23. Shaki ma leh, in Allaah uu Ogsoon yahay waxa ay qariyaan iyo waxa ay muujiyaanba. Hubaal Allaah ma jecla kuwa isla weynayaasha ah.

24. Oo marka lagu yiraahdo iyaga: Waa maxay waxa uu soo waxyooday Rabbigiin? Waxay yiraahdaan: sheekooyinka kuwii hore.

25. Si ay u xambaartaan culeysyadooda (dambiyadooda) oo dhan Maalinta Qiyaamaha, iyo waliba culeysyada kuwaa ay ku lumiyaaan aqoon yari. Hubaal wax xun waa waxa ay xambaartaan.

26. Kuwii iyaga ka horreeyey baa horey wax u dhagray<sup>(4)</sup>, Allaah baase uga yimid (ka fujiyey) dhismayaashoodii xagga aasaasyada, markaas buu saqafkii ku soo dumay iyaga korkooda, oo cadaabku wuxuu uga yimid meel aysan ka fileyn.

4. Allaah wuxuu sababay qorshahoodu inuu fashilmo oo bannaanka keenay dhagartooda iyo shirqoolkooda xun.

27. Haddana Maalinta Qiyaamaha wuu dullayn doonaa<sup>(5)</sup>, oo wuxuu oran doonaa: Meeye shurakadii aad ila wadaajiseen (cibaadada) ee aad iyaga awgood u colaadin jirteen (mu'miniinta)? Kuwa cilmiga la siiyey waxay oran doonaan: Dulli iyo dar xumo waxay maanta haystaa gaalada.

28. Kuwa ay malaa'igtu oofsadaan<sup>(6)</sup> iyagoo gef ka gala nafahooda, oo (iyagu) waxay muujiyaan hoggaansamid (iyagoo leh): Ma aanu fali jirin wax xume ah. Haayoo, hubaal Allaah baa ogsoon waxa aad fali jirteen.

29. Ee gala albaabbada Naarta idinkoo ku waaraaya dhexdeeda. Oo xumaa hoyga isla weynayaasha.

30. Oo waxaa lagu oran doonaa kuwaa iska jiray (xumaha): Muxuu Rabbigiiin soo waxyooday? Waxay oran doonaan: Khayr. Waxay leeyihii kuwa sama ku fala adduunyadan samaan, oo Daarta Aakhirada baa khayr badan. Oo wanaagsanaa Daarta kuwa iska jira (shirkiga iyo macaasida).

31. Beeraha negaadiga, ay geli doonaan, ay hoostoodu webiyo qulqulaan, waxay ku heli doonaan gudaheeda waxay doonaan. Sidaas buu Allaah ku abaal mariyya kuwa iska jira (shirkiga iyo macaasida).

32. Kuwa ay malaa'igtu oofsadaan iyagoo ku sugar xaalad wanaagsan, (malaa'igtu waxay oran doonaan: Nabad korkiinna ha ahaato: Gala Jannada waxaad (samo) fali jirteen darteed.

33. Ma waxay (gaaladu) sugayaan waxaa ahayn inay malaa'igtu u timaaddo ama u yimaado Amarka Rabbigaa<sup>(7)</sup> inuu fulo? Sidaas oo kale bay faleen kuwii ka horreeyey. Oo Allaah ma ku gardarroonin, laakiinse iyaga baa nafahooda wax u dhimayey.

34. Markaas (cijaabka) xumihii ay faleen baa ku dhacay, oo waxaa haleelay waxay ku jeesjeesi jireen.

5. Macnaha waxaa weeye wuxuu ka yeeli doonaa inay mutaan cigaab dambiyadooda badan darteed.

6. Imaanshaha malaa'igta si ay u qaadaan nafahooda.

7. Ka imaanshaha cadaab xaggaa Ilaahay si uu ugu halaago.

وَقَالَ الَّذِينَ أَشْرَكُوا لِوْشَانَةَ اللَّهِ مَاعِبَدُوا مِنْ دُونِهِ مِنْ شَيْءٍ عِنْخَنٌ وَلَا إِبْرَأُوا لِأَحْرَمَ مِنْ دُونِهِ مِنْ شَيْءٍ كَذَلِكَ فَعَلَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ فَهَلْ عَلَى الرَّسُولِ إِلَّا بُلْعَلُ الْمُبِينِ  
 وَلَقَدْ بَعَثْنَا فِي كُلِّ أُمَّةٍ رَسُولًا أَنْ أَعْبُدُوا اللَّهَ وَلَأَجْتَبَنُوا إِلَيْنَا لَطْفَرُتْ فَمِنْهُمْ مَنْ هَدَى اللَّهُ وَمِنْهُمْ مَنْ حَفَّتْ عَلَيْهِ الصَّلَةُ فَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَانظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَيْقَةُ الْمُكَدَّبِيْرِ  
 فَإِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي مَنْ يُبْصِلُ وَمَا الْهُمْ مِنْ نَصِيرٍ  
 وَأَقْسَمُوا بِاللَّهِ جَهَنَّمَ أَيْمَنَهُ لَا يَبْعَثُ اللَّهُ مَنْ يَمْوَتُ بِكَانَ وَعْدَ اللَّهِ حَقًّا وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ  
 لَيَبْيَنَ لَهُمُ الَّذِي يَحْتَلِفُونَ فِيهِ وَلَيَعْلَمُ الَّذِينَ كَفَرُوا  
 أَنَّهُمْ كَافُرُوا كَذَلِكَ بِإِنْ تَمَّاقْتُلُ الشَّقِيقَ إِذَا أَرَدْنَاهُ أَنْ نَنْقُولَ  
 لَهُمْ كُنْ فَيَكُونُ وَالَّذِينَ هَاجَرُوا فِي اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مَا ظَلَمُوا  
 لَنْبُوَنَّهُمْ فِي الدُّنْيَا حَسَنَةٌ وَلَأَخْرُجَ الْآخِرَةَ أَكْبَرُ لَوْلَا كَلَوْ  
 يَعْلَمُونَ  
 الَّذِينَ صَرَبُوا وَعَلَى رِبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ

٢٧١

35. Oo kuwa u yeela shurukada Allaah waxay yiraahdaan: Hadduu Allaah doono ma aanaan caabudneen waxba Sokadi innaga iyo aabbayaashayo midna, oo ma xaaraamayneen waxbana (Amarkiisa) la'aanti. Sidaas oo kale bay faleen kuwii ka horreeyey: Ee Rususha ma waxaa la saaray wax kale aan ahayn gaarsiin cad?

36. Oo Waxaan xaqiqiil ka soo saarnay ummad walba Rasuul (leh): Caabuda Allaah, oo ka dheeraada Daaquud. Markaa baa waxaa ka mid noqday qaar Allaah uu hanuuniyey, oo waxaa ka mid noqday qaar uu habowga ku waajibay. Ee ku socdaala dhulka oo fiiriya sida uu ahaa aayaha beeniyayaasha.

37. (Xitaa) haddaad ku dadaasho hanuunkooda (Nabi Muxammad), hubaal Allaah ma hanuuniyo kuwaa uu lumiyo<sup>(8)</sup>, mana heli doonaan wax u soo gargaara.

38. Oo waxay ku dhartaan Allaah tan ugu culus dhaarhooda in Allaah soo bixin doonin mid isagu dhinta. balse, (haayoo), \_waa ballan saaran oo xaq ah, laakiinse dadka badankiisu ma oga.

39. (Waa) si uu ugu caddeeyo (xaqiqida) waxa ay isku khilaafsan yihiin, oo markaa kuwa rumeyn diiday u ogaadaan inay ahaayeen beenaalayaal.

40. Sideedaba Qowlkayagu marka aan wax doonno waa oo Keliya inaan ku niraahno: «Ahaw» oo Waa uu yayah.

41. Oo kuwa u soo haajiray Allaah Darti, kaddib markii la dulmay, Wuxaan hubaal ku dejin doonnaa adduunka meel wanaagsan, oo abaal gudka Aakhirada baa ka sii weyn, hadday ogaan lahaayeen.

42. (Waa) kuwa samray oo Rabbigood ku kalsoon.

<sup>8</sup>. Sababta dooarashadooda inay diidaan hanuunka.

43. Oo ma aanu soo dirin adiga hortaa waxaan ahayn rag aan u waxyoonno. Ee weydiya dadka Risaalada (kutubtii hore), haddaydaan ogeyn.

44. (Waxaan u soo dirnay) xujoojin cad iyo amarro qoran. Oo Waxaan kugu soo dejinnay Waanada (Qur'aanka), si aad ugu caddaysid dadka waga loo soo dejiyey, iyo inay u fiilo yeeshaan oo ay wax ku qaataan.

45. Ma waxay haddaba kuwa qoolay xumaha dareemaan aamin inuuusan Allaah sababi doonin inuu dhulka la go'o oo liqo, ama inuu cadaabka uga iman doonin dushooda meel aanay ka fileyn?

46. Ama inuuusan qaban doonin iyagoo ku jira howlahooda (caadiga ah), markaas ma ka baxsan doonaan (Allaah)?

47. Ama inuuusan ku qaban doonin si heerar ah (iyagoo ku sugar xaalad cabsi). hubaal Rabbiggiin waa Turid Badane, Naxariis Badan<sup>(9)</sup>.

48. Ma waysan arag waxa uu Allaah abuuray? Hararkoodu waxay u iishaan xagga midig iyo bidix, iyagoo u sujuudaya Allaah iyagoo khushuucsan.

49. Oo Allaah bay u sujuudaan waxa jira samooyinka iyo waxa jira arlada oo noole ah, iyo malaa'iga (sidoo kale) oo iyagu iskama weyneeyaan.

50. Waxay ka cabasadaan Rabbigood ka korreeya, oo falaan waxa la amro.

51. Oo Allaah wuxuu yiri: Ha yeelannina labo ilaah. (Allaah) Waa uun Ilaaah Mid Keliya ah 10. Ee Aniga oo Keliya iga cabsada.

52. Oo Isaga baa iska leh waxa jira samooyinka iyo arlada, oo Waxaa u sugnaaday Isaga diin (cibaado) joogta ah. Ee Ma cid aan ahayn Allaah baad ka cabsataan?

53. Oo wax kastooaad heysataan oo nicmo ah waa xagga Ilaahey, haddana marka dhibaato idin taabato, xaggiisa baad u calaacashaan idinkoo gargaar doon ah.

54. Haddana markuu idinka faydo dhibaatada, mise qaar idin ka mid ah durba waxay u shariig yeelaan kuwo kale Rabbigood.

9. Isago dib ugu dhiga ciqaabka ay mudan yihiin oo siyya fursad ay ku toobad keenaan.

10. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofki qiraa inuuusan jirin ilah Xaq ah aan ahayn Allaah Keliya iyo inuuusan laheyn wax shariik ah, iyo in Mu'mmad yahay addoon Ilaahey iyo Rasuulki, iyo in Ciise yahay addoon Ilaahey iyo Rasuulki, iyo Kelmeddiisi uu Jabriil ku afuufay Maryam iyo ruux uu abuuray Allaah, iyo in Jannada run tahay, Naartuna run tahay, Allaah wuxuu gelin doonaa Jannada si kastaba camalkiisa ha u yaraadee. W.W.Al-Bukhaari

لَيْكُفُرُوا بِمَا آتَيْنَاهُ فَتَمَتَّعُوا بِسَوْفَ تَعَامُونَ ٦٦ وَيَنْجَلُونَ  
لِمَا لَيَعْمَلُونَ نَصِيبًا مِّمَّا رَزَقْنَاهُ فَهُنَّ تَالِلَهُ لَتَسْكُنُ عَمَّا كُنُّتُمْ  
تَغْرِبُونَ ٦٧ وَيَنْجَلُونَ إِلَيْهِ الْبَيْتُ سُبْحَنَهُ وَهُمْ قَائِمُ شَهْوَنَ  
وَإِذَا يَشَرِّعُهُ رِيَالًا شَقَّ ظَلَّ وَجْهُهُ مُسْوَدٌ وَهُوَ كَظِيرٌ ٦٨  
يَتَوَرَّى مِنْ أَقْوَمَ مِنْ سُوْءَ مَا يُسِرَّ بِهِ ٦٩ يَمْسِكُهُ كُلُّ هُوْنَ  
أَمْ يُدْسُهُ فِي التَّرَابِ أَلَا إِسَاءَةً مَا يَحْكُمُونَ ٧٠ لِلَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ  
بِالْآخِرَةِ مُثْلُ السَّوْءَ وَلِلَّهِ الْمُثْلُ أَلَّا غَلِيْ وَهُوَ عَزِيزٌ الْحَكِيمُ  
وَلَوْنَوْلَادُ اللَّهُ أَنَّاسٌ يُظْلَمُونَ مَا تَرَكُ عَلَيْهَا مِنْ دَآبَقَ  
وَلِكُنْ يُوْخِرُهُمْ إِلَى أَجْلٍ مُّسْعَى فَإِذَا جَاءَهُمْ لَا يَسْتَحْرُونَ  
سَاعَةً وَلَا يَسْتَقْبِلُونَ ٧١ وَيَنْجَلُونَ إِلَيْهِ مَا يَكْرِهُونَ وَيَصْفُ  
الْيَسْتَهْمُ الْكَيْزَبُ أَنَّهُمُ الْحُسْنَى لِأَجْرِمَ أَنَّهُمُ التَّارِ  
وَأَنَّهُمْ مُفْضُلُونَ ٧٢ تَالِلَهُ لَقَدْ أَرْسَلْنَا إِلَيْكُمْ مِنْ قَبْلِكَ  
فَنَزَّلْنَا لَهُمُ الشَّيْطَانُ أَعْمَلَهُمْ فَهُوَ وَلِيَهُمْ أَيْمَنُ وَلَهُمْ  
عَذَابٌ أَلِيمٌ ٧٣ وَمَا أَنْزَلْنَا عَلَيْكُمُ الْكِتَابَ إِلَّا لِتَنْهَيْنَ لَهُمْ  
الَّذِي اخْتَلَفُوا فِيهِ وَهُدَى وَرَحْمَةً لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ٧٤

55. Marka waxay dafiraan waxa aan siinnay. Ee iska raaxeysta, dhowaan baadse ogaan doontaan.

56. Oo waxay u yeelaan waxaanay ogeyn<sup>(11)</sup> (Ilaahyo been ah) saami ka mid ah waxa aanu siinnay. Tallaahi, hubaal waa la idin weydiin doonaa waxa aad been abuurateen.

57. Oo waxay u yeelaan Allaah gabdho<sup>(12)</sup>. Xurmo oo dhan Isaga baa leh oo Nazahan, oo iyaguna waxay isa siiyene wuxuu ay rabaan.

58. Oo marka lagu war geliyo midkood (inay u dhalatay) gabadh, wejigiisa wuxuu noqdaa madow isagoo tiiraanyeyesan .

59. Wuxuu iska qariyaa dadka xumida waxa lagu soo war geliiyet darteed. Ma wuxuu ku heystaa dulli mise ku aaasaa (iyadoo nool) carrada? Shaki ma ma leh, waa wax xun wuxa ay xukumaan<sup>(13)</sup>.

60. Waxaa u sugnaaday kuwa aan rumeysneyn Aakhirada tusaalaaha (tilmaanta) xun<sup>(14)</sup>, oo Allaah baa iska leh tilmaanta sare, oo waa Isaga Adkaadaha, Xakiimka ah.

61. Oo hadduu Allaah u qaban laaha dadka gardarradooda, kagama tageen (dhulka) guudki naflye qudh ahi, laakiinse wuxuu ugu dib dhigaa waqtii go'an, markaa markuu yimaado ajalkoodu, ma dib dhigi karaan Saacad mana soo hor marin karaan.

62. Oo waxay u yeelaan Allaah waxa ay (iyaguba) nacaan (gabdhaha), oo carrabyadoodu waxay sheegaan beenta ah inay mudan doonaan xaaladda u wanaagsan (Xaggiisa); waa la hubaayoo waxay leeyihii Naarta, oo loo hormarin doono<sup>(15)</sup>.

63. Tallaahiye, Wuxaan xaqiqiil u soo dirnay (Rusullo) ummado kaa horreeyey, Shaydaanka baase uga yeelay camalladooda wax la qurxoon. Oo waa isaga Gacalkooda maanta, oo waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuun badan.

64. Oo kuuguma aanu soo waxyoon Kitaabka (Nabi Muxammadow) waxaan ahayn inaad u caddeysyo iyaga waxyaalahay ay isku khilaafeen, iyo hanuun ahaan iyo Naxariis dad rumaysan.

11. Waxaa loola jeedaa waxayn cilmi u heysan oo ah ilaahyadaa baadilka ay sameysteen, bal waxay wax ku dhisaan maloooyin iyo caadooyin ama raaciidhaad habowasan.

12. Waxay yiraahdeen Allaah wuxuu leeyahay gabdho, iyagoo ula jeeda malaa'igta, iyagoo naf ahaantooda neceb inay yeeshaan gabdho sida uu Allaah ku xusay Aayaddan iyo tan ka dambeysaba.

13. Nabigu s.c.w. wuu xaaraanshay ku caasiinta hooyoyinkii, nolol xabaalidda gabdha, diidista bixinta xuquuqda dadka, baryada, ku tirsi teenta iyo su'aasha badan, iyo luminta maalaka. W.w.Al-Bukhaari.

14. Sida waxa lagu xusay labadii Aayadood ee hore.

15. Macno kale waxaa weeyey waxaa laga yeeli doonaa inay halkaasi kaga horreeyaan inta kale oo dhan.

65. Oo Allaah waa Kan ka soo shuba roob daruurga, oo ku nooleeya arlada dhiimashadeeda kaddib. hubaal arrinkaa waxaa ugu sugan calaamo dad wax maqla.

66. Oo hubaal waxaa idinku sugan xoolaha daaqa cibrad. Waaan idinka waraabinnaa waxaa ku jira uurarkooda uus iyo dhiig dhedood, caano saafi ah, dhuun mar fiican leh u macaan kuwa cabba.

67. Oo xagga miraha geedaha timirta iyo canabyada waxaad ka samaysataan cabbitaan culus<sup>(16)</sup> iyo risiq wanaagsan. Hubaal arrinkaa waxaa ugu sugan calaamo dad fekera.

68. Oo Rabbigaa wuxuu u waxyooday shinnada: Ka sameyso buuraha guryo iyo geedaha iyo waxa ay dhisaanba.

69. Markaas wax ka cun miraha oo dhan, oo qaad jihadka Rabbigaa la (idiin) layliiy. Waxaa ka soo baxa uurarkeeda sharaab kala midab ah oo caafimaad ugu jiro dadka. hubaal arrinkaa waxaa ugu sugan calaamo dad fekera.

70. Oo Allaah baa idin abuuray, haddana wuu idin oofsan doonaa, oo waxaa idin ka mid ah mid loo celiyo cimriga u liita nolosha, si waxba aanu u ogaan kaddib waayo aqoonpii. Hubaal Allaah waa wax kasta Ogsonee, Awood Badan.

71. Oo Allaah wuxuu uga roonaaday qaarkiinba qaar kale xagga risiqa. Kuwa se loo roonaaday (la siiyey in badan) sinnaba uma mulki siiyaan risiqooda kuwa (addoomaha ah) oo ay midigtoodu hanato si ay isku mid ugu noqdaan<sup>(17)</sup>. Ee haddaba ma Nicmadda Allaah baa waxa ay diiddan yihii?

72. Oo Allaah wuxuu idiinka yeelay nafahiinna afooyin idinla nooc ah, oo wuxuu idinka siiyey afooyinkiinna ubad iyo ilmo ilmahood, oo wuxuu ku galladeysatay korkiinna wax ka mid ah waxyaalaha wanaagsan. Ee ma baadil baa waxay ay rumeysan yihii, halka ay Nicmadda Ilahay dafiraan?

<sup>16</sup> Ayaddan waxaa la soo dejiyey ka hor inta aan la xarrimin khamriga. Waxay muujineysaa xaqiqa in waxyaalaha qaarkood ay ku jiraan dhibaato iyo in sidoo kale lahaan karaan xoogaa wanaag ah.

<sup>17</sup> Xijada lagu xusay Ayaddan waxaa weeye: Haddii ay u arkin waxyaalaha ay leeyihiin wax la siman iyaga, haddaba sidee bay ula simi karaan Allaah uunkiisa.

وَيَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَمْلِكُ لَهُ رِزْقًا مِنَ السَّمَوَاتِ  
 وَالْأَرْضِ شَيْئًا وَلَا يَسْتَطِعُونَ ﴿٧﴾ فَلَا تَصْرِيبُ لِلَّهِ الْأَمْثَالُ  
 إِنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ وَإِنْ شَرِكُوا لَعَمَّوْنَ ﴿٨﴾ ضَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا عَبْدًا  
 مَّتَّهُوكًا لِيَقْدِرُ عَلَى شَيْءٍ وَمَنْ زَرَفْتَهُ مِنَارِ رِزْقًا حَسَنًا  
 فَهُوَ يُنْفِقُ مِنْهُ سِرًا وَجَهَ رَاهِلٌ يَسْتَوْرُ اللَّهُمَّ  
 بِلَ أَكْتَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٩﴾ وَضَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا رَجُلَيْنَ  
 أَحَدُهُمَا بَكْمُ لِيَقْدِرُ عَلَى شَيْءٍ وَهُوَ كُلُّ عَلَى مَوْلَاهُ  
 لِيَنْتَابُو جَهَهَ لَآيَاتِ يَخْيِرُهُ هُوَ مِنْ يَأْمُرُ  
 يَا عَدْلَ وَهُوَ عَلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ ﴿١٠﴾ وَلِلَّهِ عَنْبَ  
 السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا أَمْرَ السَّاعَةِ إِلَّا كَلَمْحٍ  
 الْبَصَرُ أَوْ أَقْرَبُ إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ وَقَرِيرٌ ﴿١١﴾  
 وَاللَّهُ أَخْرَجَكُمْ مِنْ بُطُونِ أُمَّهَتُكُمْ لَا تَعْلَمُونَ شَيْئًا  
 وَجَعَلَ لَكُمُ السَّمْعَ وَالْأَبْصَرَ وَالْأَفْدَادَ لَعَلَّكُمْ  
 تَشْكُرُونَ ﴿١٢﴾ الْوَيْرَقُ إِلَى الظَّيْرِ مُسْخَرٌ فِي حَوْلِ السَّمَاءِ  
 مَا يَمْسِكُهُنَّ إِلَّا اللَّهُ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَذَّاتٍ لَقُومٌ بُؤْمُونَ ﴿١٣﴾

٢٧٥

73. Oo waxay caabudaan Allaah sokadi, wax aan uga hanan karin wax risiq ah xagga samooyinka iyo arlada, oo (xaqiiqdii) aan wax awood ahi lahayn.

74. Ee ha u yeelina Allaah wax la mid ah<sup>(18)</sup>. Hubaal, Allaah wuu Og yahay, idinkuse ma ogidin.

75. Allaah wuxuu soo qaataa tusaale<sup>(19)</sup>: addoon la leeyahay aan waxba awoodi karin, iyo mid aanu ka siinnay xaggeenna risiq wanaagsan, oo isagu wax ka bixiya sir iyo caddaanba. Mihey labadaasi siman yihiin? Ammaan oo idil waxaa leh Allaah! Badankoodu se ma oga.

76. oo Allaah wuxuu (kaloo) soo qaataa tusaale labo nin, oo midkood hadli karin, kaasoo aan waxna karin inuu hagaajijo, oo isagu ku ah culeys abaankiisa, meeshuu u diraba aan ka keenin khayr. Miyaalala simi karaa mid amra caddaalad, oo isagu (nafahaantiisa) ku sugar Jid Toosan?

77. Oo Allaah baa iska leh waxa aan muuqan ee jira samooyinka iyo arlada. Oo Arrinka Saacaddu ma aha waxaan ahayn sida il biriqsi, ama ka dhowba. hubaal Allaah wax walba wuu Karaa.

78. Oo Allaah wuxuu idinka soo saaray uurarka hooyoyinkiin idinkoo aan waxba garanayn. Oo Wuxuu idin yeelay maqal iyo arag iyo quluub (maan) inaad mahad naqdaan.

79. Mawaynan arag shimbiraha loo sakhiray (oo ku duula) hawada samada? Cidina ma heysan aan ahayn Allaah. Hubaal, arrinkaa waxaa ugu sugan calaamooyin dad rumaysan.

18. Ma jiro wax loo dhigo.

19. Waxaa tusaalaahn jawaab ahaan loo siiyey mushrikiinta la mid dhiga Allaah ee arzaqa ee awoodda badan sanamyada aan xoog iyo xeelad midna lahayn.

80. Oo Allaah wuxuu idiinka yeelay guryihiinna deegaan aad ku xasishaan, oo wuxuu idinku galladeystey teendhooyin laga sameeyey hargaha xoolaha idiin fudud qaadistooda maalinta geeddigiienna iyo maalinta negaadigiinnaba. Oo wax ka mid ah (idaha) duftooda iyo (geela) dhogortooda iyo (riyaha) timahooda (wuu idinku galladeystay) alaaboo guri ahaan iyo sahay ilaa muddo ah.

81. Oo Allaah wuxuu idiinka yeelay waxa uu abuuray (geedaha) hoosas, oo idiinka yeelay buuraha gebiyo aad gashaan, oo idiin yeelay dhar idinka celiya kuleylka iyo dhar (jaakado bir ah) oo idinka celiya (dhibka) dirirtiinna. Sidaas buu idiinku dhammeystiraa Nicmaddiisa bal inaad u hoggaansantaan Muslimiin ahaan.

82. Haddiise ay jeesadaan (Nabi Muxammad), haddaba xilkaagu waa oo keliya Gaarsiinta cad (ee Risaalada).

83. Waxay gartaan Nicmadda Ilaahey, haddana way dafiraan, oo badankoodu waa gaalo.

84. Oo maalinta aan ka soo saari doonno ummad walba markhaati (Nabigooda), markaas aan loo oggolaan doonin gaalada (inay cudurdaartaan ama cudurdaarro keenaan), oo aan laga aqbaleyn raalli gelin.

85. Oo markay kuwa gefka galay (shirkiga iyo gaalnimada) arkaan cadaabka, lagama khafiifin doono, oo lama siin doono nafis.

86. Oo markay kuwa u shariig yeela (kuwo kale Allaah)<sup>(20)</sup> arkaan shurukadooda, waxay oran doonaan: Rabbiyow! Kuwaanu waa kuwa aan ka dhigannay shurakada ilaahey ee aan baryi jirnay adiga Sokadaa<sup>(21)</sup>. Waxayse dib ugu celin doonaan hadalka (iyagoo leh): Waaqaa tihii beenaalayaal.

87. Oo waxay ula imaan doonaan Allaah maalintaas hoggaansan dhan, oo waxay waayaan waxay been abuuran jireen.

20. Waxaa shirki loola jeedaa wixii lala barbar caabudo Allaah, sheydaankuna wuxuu amraa cibaadada asnaamta.

21. Waa rumeynsaanta inuu Allaah leeyahay shuruko lala wadaajiyoo cibaadada , shurkadaasina ay uga shafeeci doonaan Ilaahey agti.

الَّذِينَ كَفَرُوا وَصَدُّوْنَعَن سَبِيلِ اللَّهِ زَدَهُمْ عَذَابًا  
 فَوْقَ الْعَذَابِ بِمَا كَانُوا يُفْسِدُونَ ۝ وَيَوْمَ تَبَعَّثُ فِي  
 كُلِّ أُمَّةٍ شَهِيدًا عَلَيْهِم مِّنْ أَنفُسِهِمْ وَجِئُنَا بِكَ  
 شَهِيدًا عَلَى هُؤُلَاءِ وَزَرَّنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ تَبَيَّنَ إِلَيْكَ  
 شَيْءٌ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ وُشْرِي لِلْمُسْلِمِينَ ۝ إِنَّ اللَّهَ  
 يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَنِ وَإِيتَائِي ذِي الْقُرْبَى وَيَنْهَا عَنِ  
 الْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ وَالْبَغْيِ يَعْلَمُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ  
 وَأَوْفُوا بِعَهْدِ اللَّهِ إِذَا عَاهَدْتُمْ وَلَا تَنْقضُوا الْأَيْمَنَ  
 بَعْدَ تَوْكِيدِهَا وَقَدْ جَعَلْنَا اللَّهَ عَلَيْكُمْ كَفِيلًا إِنَّ  
 اللَّهَ يَعْلَمُ مَا تَفْعَلُوْنَ ۝ لَا تَكُونُوا مِنَ الظَّالِمِينَ  
 غَرَّهُمْ بِعَدْقُوْنَةٍ نَّكَاتَتْخِذُونَ أَيْمَانَكُمْ دَخَلًا  
 بَيْنَكُمْ أَنْ تَكُونَ أُمَّةٌ هِيَ أَرْبَى مِنْ أُمَّةٍ تَنْهَا يَلْتَمُوكُمُ اللَّهُ  
 يَهُ وَإِنَّمَّا يَنْهَا لِكُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ مَا كُنْتُمْ فِيهِ مُخْتَلِفُوْنَ  
 ۝ وَلَوْسَاءَ اللَّهِ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةٌ وَحْدَةٌ وَلَكُمْ بُصْلَةٌ مِّنْ  
 يَشَاءُ وَيَهْدِي مَنْ يَشَاءُ وَلَكُمْ عَمَّا كُنْتُمْ تَعْمَلُوْنَ ۝

۷۷۷

88. Kuwa rumeyn diiday oo ka jeediyey (dadka) Jidka Ilaahay, waxaan ugu dari doonaa cadaab cadaabkooda, waxay fasahaad fali jireen awgii.

89. Oo (xus) Maalinta aan ka soo saari doonno ummad walba markhaati ku marag fura oo iyaga ka mid ah (Nabigooda), oo aan kuu keenno adiga (Nabi Muxammadow) inaad ka ahaato markhaati kuwan (ummadaada) - oo Waxaan kuu soo waxyoonnay Kitaabka u faahfaahiya wax walba si cad , oo u ah Hanuun iyo Naxariis iyo bishaaro Muslimiinta<sup>(22)</sup>.

90. Hubaal Allaah wuxuu amraa caddaalad iyo dhaqan wanaagsan iyo wax siinta qaraabada, oo wuxuu reebaa anshax darrada iyo dhaqan xumida iyo gardarrada. Wuu idin waanin, bal inaad xusuusataan.

91. Oo oofiya Axdiqa Ilaahay markaad ballantaa gashaan (Mu'miniintow), oo ha burinnina dhaaraha kaddib markaad adkeyseen, oo waxaadba uga dhigteen Allaah damiin (markhaati). Hubaal Allaah wuu Ogsoon yahay waxa aad fashaan.

92. Oo ha la mid noqonnina sida tan furfuta xariggeeda ay soohday iyadoo u googooneysa gabal gabal kaddib markuu yeeshay xoog (idinkoo) ka dhiganaya dhaarahiinna siyalo aad isku khiyaantaan dhexdiinna, inay ummad ka badan tahay ummad kale (tiro iyo maalba) darteed<sup>(23)</sup>. Allaah waa uun idinku imtixaanaa arrinkaa. Oo hubaal Wuxuu idii caddeyn doonaa Maalinta Qiyaamaha waxaad isku khilaafsanaydeen.

93. Oo hadduu Allaah doono, wuxuu hubaal idinka dhigi lahaa ummad keliya (diin keliya heysta), Laakiinse wuxuu sababaa inuu lomo qofkuu doono oo hanuuniyya qofkuu doono. Oo hubaal Waa la idin su'aali doonaa waxaad camal fali jirteen.

22. Muslimiinta waa kuwa isu dhiiba Allaah.

23. Muslimiinta tiro ahaan way yaraayen, waxayna la galeen gaalada heshiis., Markii ay arkeen Quryash inay tiro badan yihii, oo ay muslimiinta dheer yihii xoog iyo xeeladba iyo waayo aragnimo, waxay door bideen inay uga baxaan heshiiska Nabiga s.c.w., ficiikan oo kalena Allaah wuu reebay.

Macnaha waa ha ugu dhaarannina been ama ha burinnina heshiis ama ka bixina ballan aad gasheen dano adduunyo darteed, si kastaba uga xoog badnaadee cadowgiinna.

94. Oo ha ka dhigannina dhaarahiinna siyalo aad isku khiyaantaan dhexdiinna, si aanay cagi u sidban kaddib sugnaashaheeda, oo waxaad dhadhaminayaan xumaan (cadaab adduunkan), waxa aad (dad) ka jeediseen Jidka Ilahay darteed, oo waxaad mudan doontaan (Aakhirada) Cadaab aad u weyn.

95. oo ha ku gadinnana Axdiga Ilahay. Qiimo yar (waxba). Hubaal waa Allaah agtiis ah baa idii khayr badan haddaad og tiihiin.

96. Waxa aad haysataan wuu dhammaan, waxa se Allaah agtiis ah baa baaqi ahaan. Oo waxaan hubaal siin doonaa kuwa samir yeeshay abaalgudkooda u qalma waxa ugu wanaagsan ay fali jireen.

97. Qofkii sama fala lab ama dheddig kuu ahaadaba isagoo mu'min ah waxaan hubaal ka yeeli doonaa inuu noolaado nolol fiican oo farxad leh, oo waxaanu hubaal siin doonaa abaalgudkooda u qalma waxa ugu wanaagsan ay fali jireen<sup>(24)</sup>.

98. Ee marka aad akhriyeyso Qur'aanka, (marka hore) ka magan gal Allaah shayaanka laga fogeyey (Naxariistiisa).

99. Hubaal kuma dul laha awood kuwaa rumeyey oo Rabbigood ku kalsoon.

100. Ee wuxuu awood ku dul leeyahay oo keliya kuwa ka dhigta saaxiib iyo kuwa la wadaajiyaa (Allaah) cibaadada cid kale.

101. Oo markaan ku beddelno Aayad meel Aayad kale, oo Allaah baa dhab u Ogsoon wuxuu soo waxyoodo, waxay yiraahdaan: Waaad adigu (Muxammad) uun tahay been abuurte. Badankoodu se wax ma oga.

102. Dheh (Nabi Muxammad): Ruuxa Daahirka ah (Jabriil) baa kaga keenay xaggaa Rabbigaa si xaq ah, si uu u sugo kuwa rumeysan, oo ugu ahaado hanuun iyo bishaaro Muslimiinta.

<sup>24</sup>. Aayadden waxay caddeysey inay ragga iyo dumarka ajar isku mid ah leeyiin Ilahay agtiisa marka ay la yimaadaan camal san oo iimaaan u wehliyo.

وَلَا تَتَخَذُوا أَيْمَكَنَكُمْ دَخَلًا بِيَتَكُمْ فَتَرَبَّلْ قَدَمْ بَعْدَ  
بُوْرَتِهَا وَتَدْوِقُوا أَسْوَءَ بِمَا صَدَدْتُمْ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ وَلَكُمْ  
عَدَابٌ عَظِيمٌ ﴿٤١﴾ وَلَا تَتَرَوْأُ يَعْهَدُ اللَّهُ تَعَالَى إِنَّمَا  
عِنْدَ اللَّهِ هُوَ خَيْرٌ لَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٤٢﴾ مَا عِنْدَكُمْ  
يَنْفَدُ وَمَا عِنْدَ اللَّهِ بِاقِٰ وَلَتَسْتَرِيَنَّ الَّذِينَ صَدَرُوا مِنْهُوْ  
يَأْلَحْسَنَ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾ مِنْ عَمَلٍ صَلِحٍ  
مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أَنْتَ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنْجِنَّهُنَّ حَيَاةً طَيِّبَةً  
وَلَنْجِنَّهُنَّ أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴿٤٤﴾  
فَإِذَا قَرَأْتَ الْقُرْآنَ فَاسْتَعْدِدْ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيْطَنِ الْأَشْجِيرِ  
إِنَّهُ لَيْسَ لَهُ سُلْطَنٌ عَلَى الْأَنْبِيَاءِ إِنَّمَا وَقَعَ عَلَيْهِ  
يَتَوَكَّلُونَ ﴿٤٥﴾ إِنَّمَا سَلْطَنُهُ عَلَى الَّذِينَ يَتَوَلَُّونَهُ وَالَّذِينَ  
هُمْ بِهِ مُشْرِكُونَ ﴿٤٦﴾ وَإِذَا بَدَأْتَ آيَةً مَكَانَةً آيَةً  
وَاللَّهُ أَعْلَمُ بِمَا يَنْزِلُ فَالْأَنَّمَا أَنْتَ مُفْتَرٌ بَلْ أَنْتَ شَرِّهُ  
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٤٧﴾ قُلْ تَرَاهُ رُوحُ الْقُدُّسِ مِنْ رَبِّكَ يَأْلَحُ  
لِيَتَبَتَّلَ الْأَنْبِيَاءُ إِنَّمَا وَهُدَىٰ وَشَرِّى لِلْمُسْلِمِينَ ﴿٤٨﴾

وَلَقَدْ تَعْلَمَ أَنَّهُمْ يَقُولُونَ إِنَّمَا يَعْلَمُهُ، بَشَّرَ لِسَانَ  
الَّذِي يُلْحِدُونَ إِلَيْهِ أَعْجَمٌ وَهَذَا لِسَانٌ عَرَفَ مُؤْمِنٍ  
إِنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ يَقَاتِلُونَ اللَّهَ لَا يَهْدِيهِمُ اللَّهُ  
وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ<sup>٤٤</sup> إِنَّمَا يَفْتَرِي الْكَذِبُ الَّذِينَ  
لَا يُؤْمِنُونَ يَقَاتِلُونَ اللَّهَ وَأَرْتَيْكَ هُمُ الْكَاذِبُونَ<sup>٤٥</sup>  
مَنْ كَفَرَ بِاللَّهِ مِنْ بَعْدِ إِيمَانِهِ إِلَّا مِنْ أَكْثَرِهِ وَقَبْلَهُ  
مُظْمِنٌ بِإِلَيْكُنَّ وَلَكِنَّ مَنْ شَرَحَ بِالْكُفَّارِ  
صَدَرَ أَفْتَاهُمْ غَضَبٌ قَرْنَالَهُ وَلَهُمْ عَذَابٌ عَظِيمٌ  
ذَلِكَ يَا أَنَّهُمْ أَسْتَحْوِيُ الْحَيَاةَ الَّذِي أَعْلَى<sup>٤٦</sup>  
الْآخِرَةَ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ  
أُولَئِكَ الَّذِينَ طَبَعَ اللَّهُ عَلَى قُلُوبِهِمْ وَسَعَاهُمْ<sup>٤٧</sup>  
وَأَنْصَرَهُمْ وَأُولَئِكَ هُمُ الْغَافِلُونَ<sup>٤٨</sup> لَأَجْرَمُ  
أَنَّهُمْ فِي الْآخِرَةِ هُمُ الْخَيْسُورُونَ<sup>٤٩</sup> ثُمَّ إِنَّ رَبَّكَ  
لِلَّذِينَ هَا جَرَأُوا مِنْ بَعْدِهِمْ أَفَمُنْتَنُو نُرْجِهِمُهُ دُوا  
وَصَرَرُوا إِنَّ رَبَّكَ مِنْ بَعْدِهِمْ أَفَقُورُ زَحِيمٌ<sup>٥٠</sup>

٢٧٩

103. Oo Waxaan xaqiiq ognahay inay yiraahdaan: Waxaa sideedaba wax bara (Nabiga s.c.w) qof aadmi ah. Carrabka midka ay tilmaamayaan waa af shisheeye<sup>(25)</sup>, oo kani (Qur'aanka) waa af Carabi faseex ah.

104. Hubaal kuwa aan rumeysnayn Aayadaha Ilaabahay, Allaah ma hanuunin doono, oo waxay leeyihii cadaab aad u xanuun badan.

105. Waxaa uun been abuurta sideedaba kuwa aan rumeysnayn Aayadaha Ilaabahay, oo waa kuwaas kuwa ah beenaalayaasha.

106. Qofkii isagu ku gaalooba Allaah kaddib rumaytiisa<sup>(26)</sup>, mid maahee lagu khasbay (inuu dhaleeceeyo diintiisa) isagoo qalbigisu ku xasilan yahay Iimaanka\_laakiinse midkii isagu u fura laabtiisa gaalnimmo-waxaa dushooda ah Carada Ilaabahay, oo waxay mudan doonaan Cadaab aad u Weyn.

107. Arrinkaa waxaa ugu wacan waxay doorteen nolosha adduunkan halkii Aakhirada, iyo inaan Allaah hanuunin dadka gaalada ah.

108. Kuwaasi waa kuwa uu Allaah daboolay quluubtooda iyo maqalkooda iyo araggooda. Oo waa kuwaa kuwa dhoohan.

109. Shaki ma leh, inay Aakhirada ahaan doonaan kuwa aad u khasaari doona.

110. Waliba hubaal Rabbigaa, xagga kuwa soo haajiray kaddib inta lagu qasbay (inay dhaleeceeyaa diintooda) oo markaas u dadaalay (Arrinka Ilaabahay) oo samir yeeshay, hubaal Rabbigaa intaa kaddib, waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

25. Af cajami ah waa af aan Carabi ahayn , sidoo kalena waxaa la yiraahdaa cajami afka carabiga ee la jajabiyo, waayo ninka ay ku tuhmayaan inuu baro Qur'aanka Rasuulka waa nimaan Carab ahayn, oo yaqaan xoogaa Carabi ah.

26. Gunaanadka Aayadda iyo waxa ka go'an ee ka magan ee la iska garan karo waxaa weeye wuxuu galabsaday Caradii Ilaabahay.

**111.** Maalinta ay naf walba imaan doonto iyadoo u doodaysa (u gargaar dalbeysa) nafteeda, oo naf walba loo oofin doono waxay fashay, iyagoo aan loola dhaqmi doonin si caddaalad darro ah.

**112.** Oo Allaah wuxuu u soo qaataa tusale: magaalo (Makkah) nabad ahayd xasilloon; oo uu risiqeedu uga yimaado oo barwaqa ah meel walba, ha yeeshaa ka abaa dhacday Nicmooyinkii Ilaahey. Sidaas darteed Allaah ka yeelay inay dhadhamiso gaajo daran iyo cabsi ku hagoogata waxay samaynayeen darteed<sup>(27)</sup>.

**113.** Oo waxaa xaqiiq u yimid Rasuul ka mid ah, wayse beeniyeen, markaas baa cadaab ku dhacday iyagoo ahaa kuwo gef badan.

**114.** Ee cuna waxa ka midka ah waxa Allaah idin siiyey ee ah xalaal oo fiican, oo ka mahad cessa Nicmadda Ilaahey, hadduu yahay (run ahaan) Isaga kan aad caabuddaan.

**115.** Wuxuu uun sideedaba idinka xaraameeyey xoolaha baqtiga ah, dhiig, hilib doofaar iyo waxa magac kale aan aheyn kan Allaah lagu xusay. Qofkii se ay dani ku qabato isagoo aan caasoo yobid u dan laheyn, oo xad gudbeyn, markaa hubaal, Allaah waa Dambi Dhaaf Badane, Naxariis Badan.

**116.** Oo ha dhihina waxa ay carrabyadiinnu tilmaamaan ee beenta ah (idinkoo leh): Kani waa xalaal oo kan waa xaraan, si aad uga been sheegtaan Allaah. Hubaal kuwa ka been sheega Allaah ma liibaani doonaan.

**117.** Waa (uun) raaxo yar oo waxay mudan doonaan cadaab aad u xanuun badan.

**118.** Oo kuwa ah Yuhuudda, Wixaanu ka xaraamaynay waxyaalaha aan horay kuugu soo sheegnay<sup>(28)</sup>. Oo ma aanu ku gardarroon, laakiinse iyaga baa nafahooda ka galay gef.

27. Gaajo iyo cabsi u hareereyso sida dharku ugu hareersan yahay jirka.

28. Waa waxa ku soo arooray Suuradda Al-Ancaam Ayadda 146.

ثُمَّ إِنَّ رَبَّكَ لِلَّذِينَ عَمَلُوا أَلْسُوَءَ بِهِمْ لَئِنْ تَأْتُوْ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَأَصْلِحُوا إِنَّ رَبَّكَ مِنْ بَعْدِهَا الْغَفُورُ رَحِيمٌ ۝ إِنَّ إِبْرَاهِيمَ كَانَ أَمَّةً فَلَيْسَاتِ اللَّهُ حِيقَا وَلَيْكَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ شَاكِرًا لِلْأَنْعُومَةِ أَجْبَنَهُ وَهَدَنَهُ إِلَى صِرَاطِ مُسْتَقِيمٍ وَلَيْتَهُ فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَلَيْتَهُ فِي الْآخِرَةِ لَمَنِ الظَّالِمُونَ شَرَّا وَحِيتَنَا إِنَّكَ أَنْ تَسْعِ مَلَكَ إِبْرَاهِيمَ حِيقَا وَمَا كَانَ مِنَ الْمُشْرِكِينَ إِنَّمَا جَعَلَ التَّبَتُّ عَلَى الَّذِينَ أَخْلَفُوا فِيهِ وَإِنَّ رَبَّكَ لَيَحْكُمُ بَيْنَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فِيمَا كَانُوا فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ۝ أَدْعُ إِلَى سَيِّلِ رَبِّكَ بِالْحَكْمَةِ وَالْمَوْعِظَةِ الْحَسَنَةِ وَجَدَرَ لَهُمْ بِالْأَنْجَى هُنَّ أَحْسَنُ إِنَّ رَبَّكَ هُوَ أَعْلَمُ بِمِنْ ضَلَّ عَنْ سَبِيلِهِ وَهُوَ أَعْلَمُ بِالْمَهْتَدِينَ وَإِنَّ عَاقِبَتِمْ فَعَاقِبَأُبِي شَمَالَ مَاعُوقِبُمْ بِهِ وَلَئِنْ صَرِّشَتْ هَمْوَخِيرٌ لِلصَّابِرِينَ ۝ وَأَصْبِرْ وَمَا صَرِّبَكَ إِلَّا إِنَّ اللَّهَ لَا يَخْرُنُ عَيْنَهُ وَلَا تَأْتِ فِي صِيقَ مَا يَمْكُرُونَ ۝ إِنَّ اللَّهَ مَعَ الَّذِينَ أَتَقْوَا وَالَّذِينَ هُمْ مُحْسِنُونَ ۝

۲۸۱

sida ugu fiican. Hubaal Rabbigaa wuu Ogsoon yahay kuwa ka lumay Jidkiisa, oo wuu Ogsoon yahay kuwa hanuunsan.

**126.** Oo haddaad cizaabeyaan (cadow, Mu'miniintow) ku cizaaba in la mid ah intii la idin geystey oo kale, haddiise aad samirtaan, hubaal sidaas baa u wanaagsan kuwa samra.

**127.** Oo samir (Nabi Muxammad), oo ma aha samirkaaga waxaan aheyn (wax lagu helo kaalmada) Ilaahey. Oo ha u murugoon, oo ha ka welwelin waxa ay xume qoolaan.

**128.** Hubaal Allaah wuxuu la jiraa kuwa iska jira (shirkiga iyo macaasida) ee iyagu (u) sama fala (dadka kale).

29. Waa leh dhammaan tilmaamaha wanaagsan ee ka yeeli karta qofka tusaale lagu daydo uu wax ku hoggaamiyo.

30. Waxaa loo yeelay maalinta Sabtida: waxaa loola jeedaa waxaa la faray inay la yimaadaan cibaado badan, iyo camallo wanaagsan oo iska daayaaan maalinta xoogsiga iyo maceeshad raadinta, laakinnee kama soo bixin, wayna isku khilaafeen, kaddibna waxaa lagu nasakhay xukunkii maalinta shareecadi Nabi Ciise c.s. ee ka dambeeyey Muuse c.s., ugu dambeyen wuxuu Allaah ku hanuunshay maalinta abbaarta ah muslimiinta oo waa maalinta Jumcaha. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Waxaan leennahay innaga Muslimiinta ah Jumcaha, Yuhuuddana maalintooda waa Sabtida, Kirishtaankuna Axadda, Annaga ayaa u horreyna, iyaguna waa naga dambeeyaa. Waxaannu nahay ummad tii u dambesey ummadaha, waxaaannuse ahaan doonnaa ummadda u horreysa ee gasha Jannada.

**119.** Haddana hubaal Rabbigaa, xagga kuwa u fala xumaan jahli darti markaas soo laabta intaas kaddib oo wanaagsanaada, hubaal Rabbigaa arrinkaa kaddib, waa Dambi Dhaaf Badane, Naxaariis Badan.

**120.** Hubaal Ibraahiim wuxuu aaha hoggaamiye isku dhan<sup>(29)</sup>, daacad ah, u hoggaansan Allaah, u iisha xaqa,, oo ma aheyn mid ka mid ah Mushrikiinta.

**121.** (Wuxuu aaha) mid ka mahad naqa Nicmooyinkiisa. (Allaah) baa doortay oo ku hanuuniyey Jid Toosan

**122.** Oo Waxaanu ku siinnay samaan adduunkan.Oo hubaal Aakhirada wuxuu ka mid ahaan doonaa kuwa wanaagsan.

**123.** Markaas Waxaanu kuu waxyoonnay (Nabi Muxammad): Raac diintii ibraahiim, u iisha xaqa;, oo kama mid aheyn Mushrikiinta.

**124.** Sabtida waxaa uun sideedaba loo waajib yeelay kuwii isku khilaafay arrinkeeda<sup>(30)</sup>, oo hubaal, Rabbigaa wuu ku kala xukumi doonaa dhexdooda Maalinta Qiyaamaha waxay isku khilaafsanaayeen.

**125.** Ugu baaq Jidka Rabbigaa si xikmad leh iyo waano wanaagsan, oo ula dood

## JUSKA 15

Suuradda 17 Al-Israa<sup>(1)</sup>

Waa 111 Aayadood: Makkiyyah

Bismillaahir Raxmaanir Raxiim

1. Waxaa xurmo oo dhan iska leh oo hufan Kan ka yeelay addoonkiisa (Muxammad s.c.w.) inuu ka guureeyo goor habeen ah Masjidka Xaramka xagga Masjidka shishe<sup>(2)</sup> ee aan barakaynay hareerahiisa, si aan wax uga tusno Calaamooyinkayaga. Hubaal, (Allaah) Waa wax kasta Maqlaha, wax kasta Arkaha ah.

2. Oo Waaan siinnay Muuse Kitaabka (Towraadda) oo aan uga dhignay hanuun Ilmahii Israa'iil (Annagoo leh): Ha ka dhigannina axadaan Aniga ahayn wakiil<sup>(3)</sup>.

3. Ubadka kuwa aan kula qaadnyow (doonmida) Nuux! Hubaal wuxuu (Nuux) ahaa addoon aad u mahad naq badan.

4. Oo Waaan ku ogeysiinnay Ilmahii Israa'iil Kitaabka (Towraadda)<sup>(4)</sup>: Hubaal Waaad fasahaadin doontaan arlada labo jeer, oo waxaad hubaal gaari doontaan (heer) iskibrin aad u weyn.

5. Ee markuu wacadka labada kii hore yimid<sup>(5)</sup>, waxaan idinku soo dirnay addoomo aan leennahay-kuwaasoo leh xoog millatari weyn. Oo waxay galeen (xitaa) guryihiiinii dhexdooda, oo wuxuu ahaa wacad la fuliyey.

6. Markaasaan Waaan dib idii siinnay guul idiin soo noqotay. Oo Waaan idinku taageernay maal iyo awlaad badan oo idinka dhignay kuwo tiro badan dad ahaan.

7. (oo niri) Haddaad samo fashaan, waxa aad u sama fashaan uun waa nafahiinna, oo haddaad xume fashaan (waxay ka go'an tahay) iyada (nafahiinna). Ee markuu wacadkii dambe (kii labaad) yimid (Waaan soo dirnay cadowyadiinna) si ay ugu dhigaan tiiraanyo ka muuqato wajiyadiinna, oo ay u galaan masjidka shishe (ee Qudus ku yaal) siday markii horeba u galeen, iyo inay baabbi'yaan wax kasta ay helaan baabba' muuqda.

1. Al-Israa: waa ku bixitaan guure goor habeennimo ah, Suuraddan sidoo kale waxaa la yiraahdaa Banuu Israa'iil (Ilmahii Israa'iil).

2. Masjidka Al-Aqsa ee ku yaal Qudus iyo degaannadaa hareerahiisa ah uu Allaah ku barakeey inuu ka soo bixiyey anbiyada badankood deggaannadaas oo ah dhul wanaagsan oo khayr badan.

3. Waa inaad ku kalsanoonaataan oo isku halleyaan Allaah oo tala saarataan idinkoo ogaanaya inuu Allaah subxaanahu wa tacaalaa yahay Kan haya wax iyo arrin walba xilkood.

4. Horay ugu sheegnay waxyi ahaan Kitaabka waxa ay falayaan.

5. Cadaabka loogu goodiyey tan hore labadoodii caasiyoobid, Iyagoo ku xadgudbaya xurmaddooda, inay wax dilaan oo baabbi'yaan.

عَسَى رَبُّكُمْ أَن تَرَكُوهُ كُوَافِئَ وَأَن عَذْرُهُمْ دُنْدَنَا وَجَعَلْنَا جَاهَمَ لِلْكُفَّارِ  
 حَصِيرًا<sup>١</sup> إِنَّ هَذَا الْقُرْءَانَ يَهْدِي لِلّٰتِي هُنَّ أَقْوَمُ وَيُنَهِّي  
 الْمُؤْمِنِينَ الَّذِينَ يَعْمَلُونَ الظَّلَمَاتِ إِنَّهُمْ أَجْرَكِيرَا<sup>٢</sup>  
 وَأَنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ أَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا<sup>٣</sup>  
 وَيَرَعِي إِلَيْهِمُ الْأَنْسُنُ يَا شَرِيكَهُ رَبِّ الْحَمْرَاءِ وَكَانَ الْأَنْسُنُ عَوْلًا<sup>٤</sup>  
 وَجَعَلَنَا أَيْمَانَهُ وَالنَّهَارَ أَيْمَانَهُ فَعَمَّوْنَا إِيَّاهُ أَيْمَانِيَّ وَجَعَلَنَا إِيَّاهُ  
 الْنَّهَارَ مُبْصِرَةً كَيْتَبْتُعُوا فَضْلَاقِنَ رَبِّكُمْ وَلَتَعْلَمُوا عَدَدَ  
 الْيَسِينَ وَالْحَسَابَ وَكُلَّ شَيْءٍ وَفَصَلَّتْهُ تَفْصِيلًا<sup>٥</sup> وَكُلَّ  
 إِنْسَنَ الْأَزْمَدَةَ طَلَبَهُ فِي عُنْقِهِ وَخَنْجَرَ لَهُ يَوْمَ الْقِيَمَةِ كَيْتَبَ  
 يَلْقَنَهُ مَسْوِيًّا<sup>٦</sup> أَقْرَبَتْكَ بَكَ كُنْتَ يَنْقَسِمُ الْيَوْمَ عَلَيْكَ حَسِيبًا  
 مَنْ أَهْتَدَى فَإِنَّمَا يَهْتَدِي لِنَفْسِهِ وَمَنْ ضَلَّ فَإِنَّمَا يَضُلُّ<sup>٧</sup>  
 عَلَيْهَا وَلَا تَرْرُ وَازِرَةٌ وَرَزْأَخْرِيٌّ وَمَا كَانَ مُعَذِّبِيْتَ حَتَّى تَبَعَثَ  
 رَسُولًا<sup>٨</sup> وَلَذَا أَرَدْتَ أَن تُهْلِكَ قَرِيَّةً أَمْ زَمَرًا فَيَهُمْ افْسَقُوْفِهِمَا  
 فَعَلَيْهَا الْقُولُ فَدَمَرْتَهَا تَامِيرًا<sup>٩</sup> وَكَمْ أَهْلَكَتْكَ مِنَ الْقُرُونِ  
 مِنْ كَعْدَنْجُوحَ وَغَنِيَ بِرِبِّكَ بِدُنْدُوبِ عَبَادِيْمِهِ حَمِيدًا<sup>١٠</sup> بِصِيرَكَ<sup>١١</sup>

8. (Markaa suu Allaah yiri) Waa intaasoo Rabbigii idii naxariisto (haddaad toobad keentaan), haddiise aad u noqotaan (xume falka), waxaanu u noqon doonaa (Ciqaabidda). Oo Waxaan u dhignay gaalada Naarta xabsi gogol u ah.

9. Hubaal Qur'aankani wuxuu ku hanuuniyaarrin kan u toosan, oo wuxuu siyyaa bishaaro mu'miniinta samaha fala inay heli doonaan Abaalqudud aad u Weyn. 10. Oo kuwa aan rumeynsnay Aakhirada, Waxaan u diyaarinnay Cadaab aad u Xanuun Badan.

11. Oo Aadmiyu wuxuu ku duceystaa sharka sida uu ugu duceystoba khayr. Oo aadmiyu mar walba waa degdeega<sup>(6)</sup>.

12. Oo Waxaan ka dhignay habeenka iyo maalinta labo calaamadood. Markaa san, Waxaan tirnay calaamadda habeenka, oo ka dhignay calaamadda maalinta mid muuqata, si aad u raadsataan deeqda Rabbigii, iyo si aad u ogaataan tirada sanooyinka iyo xisaabta. Oo Waxaan u caddaynay wax walba si faahfaahsan.

13. Oo qof walbaa Waxaan laasiminnay camalkiisa (loo qaddaray) luquntiisa, oo Waxaan u soo saari doonaa Maalinta Qiyaamaha Kitaab uu la kulmi doono isagoo fidsoo<sup>(7)</sup>.

14. (Waxaa lagu oran) Akhri Kitaabkaaga, adiga nafahaantaada baa isugu filan maanta xisaabiye ahaan.

15. Qofkii toosnaada, wuxuu u toosnaadaa naftiisa . Oo qofkii lumaa, xagga dhibkeeda buu uun isagu u lumaa<sup>(8)</sup>. Oo ma jiro qof sida culaabo oo qaadi doona culaabta (denbiyada) qof kale, oo marnaba ma cadaabno cidna jeer aan soo dirno Rasuul.

16. Oo markaan doonno inaan halaagno magaalo, Waxaan u dirnaa amarkayaga kuwaa ka mid ah dadkeeda ladan (inay adeecaan Allaah) Wayse ka hor yimaadaan oo diidaan, kolkaas baa xaq ugu dhaca Qowlka (xukunka) oo aan burburinnaa burburin dhan.

17. Oo badanaa intaan facyo halaagnay Nuux kaddib! Oo Rabbigaa baa ku filan inuu yahay Kan dambiyada addoomihi Ogsoon ee Arka.

6. Macnaha waxaa dhacda marmar inuu habaaro ilmahatiisama adaadakaa aad ugu dhow oo xigaaladiisa ah oo waa sida isaga oo naftiisa habaaraya, sidoo kale waxaa la yiri macnaha waa wuxuu Allaah ka baryaax wax uu moodoo inuu khayr u yahay, ha yeeshaa Allaah og yahay inuu shar u yahay sidoo awgeed uusan ka aqbiin ducoda oo ka aqbalin baryadaa. Aadmiigu waa degdeg badan yahay, macnaha waa sabar shar yahay, laab ka badan yahay, oo wax ku dhaqaqaqa ka firsii la'aan qof uu Haahay u naxariistay maahaa. Aadmiiga, si kasta uu isu kibriyo, welii waa dacif iyo abururane yar.

7. Mar nin bad weydiyey Nabiga s.c.w. : Camal kee bad u waanaqsan? Wuxuu yiri: Salaadda oo la tukado waqtigeeda hore. Wuxuu weydiyey: maxaa xiga? Wuxuu yiri: U sama falka waalidka. Wuxuu weydiyey: maxaa xiga? Wuxuu yiri: Jihadka Jidka Haahay. W.W. Al-Bukhaari

8. Kaddib markii aan kala tusnay labada dhabbood kan khayrka iyo kan sharka, waxaan uga dhignay mas'ul kan uu dooran iyo ka talinta aayahiisa.

18. Qofkii rabaa noloshatan soke, Waan ugu soo dedejinnaa dhexeeda waxa aan doonno midkaan doonno. Markaasaan, Waxaan u yeellay isaga Naar dab ah uu (geli doono si uu ugu) gubto, isagoo dulleysan oo dayro ah.

19. Qofkii se raba Aakhirada oo u dadaala dadaalkeeda lagu helaayo. isagoo mu'min ah, waa kuwaa, kuwa dadaalkooda uu tixgeliyo<sup>(9)</sup> (Allaah).

20. (Qolo) walbaa waanu siinnaa\_kuwaan iyo kuwaaba\_deeq ka mid ah deeqda Rabbigaa. Oo marnaba ma aha deeqda Rabbigaa mid reebban.

21. Fiiri, sida aan ugaga roonnaanay (risiqa) qaarkoodba qaar kale (adduunkan gudihi), oo xaqiq, Aakhirada baa lagu sii kala derejooyin weyn yahay oo lagu sii kala fadli badan yahay.

22. Ha la mid dhigin Allaah ilaa kale, si aadan u fariisan adigoo gun ah, garab la'.

23. Oo Rabbigaa wuxuu guddoonshay inayaadaan caabudin Axadna Isaga maahee. Iyo u sama fal waalidiintiin. Hadduu midkood ama labadoodaba ku soo gaaro agtaada da' weyni, ha ku oran erey xurmo darri ah haba ahaatee (wax ka sii yar) "uf",<sup>(10)</sup> oo ha ku qaylin, oo kula hadal, hadal wanaagsan.

24. Oo hoos ugu dhig garabka nuglaanta naxariis darteed, oo dheh: Rabbiyow! U Naxariiso sida ay ii soo koriyeenba anigoo yar.

25. Rabbigiin baa dhab u ogsoon waxa ku jira nafahiinna. Haddaad wanaagsan tiihin (niyad ahaan), markaa hubaal, Isagu abad kuwo u soo laabashada badan wuu u dambi dhaaf badan yahay.

26. Oo sii kan qaraabada ah xaqiisa iyo miskiinka iyo musaafirka (go'doonsan), oo ha ku bixinninga maalka wax xun oo dayac ah<sup>(11)</sup>.

27. Hubaal kuwa dayaca maalka ee wax xun ku bixiya waa walaalaha shayaadiinta, oo Shayaanku waa mid abad ka abaal dhaca Rabbigii.

9. Kuwa doonaya wanaaggaa, toosnaanta, u degdegidda ka toobid keenidda dambiyada iyo gefefka uu galay dacfiga aadmiga awgeed, Allaah subxaanhuhu watacaalaa wuxuu ballaan qaaday caafis tuya masaaam.

10. Waxaa la isu diiday in lagu yiraahdo waalidka : uf<sup>12</sup> marka wixii ka siy weyn oo qowl ama facil ah ka daran oo ka dambi weyn, mana bannaana. Bal wuxuu Ilaahay amray in la xurmeeyo oo la xaq dhowro oo si fican loo xiriiriyo oo la wanaajiyoo oo loogu adeego si farxad iyo laab furni leh. Uf waa muujin diido ama nac.

11. Adigoo ku dheelaya maalka oo ku tumanaya. Macnaha waa wax ha ku bixin wax xaaraan ah ama kuu caasiyoobid Ilaahay.

وَإِمَّا تَعْرِضَنَّ عَنْهُمْ أَتَيْغَاهَ رَحْمَةَ مِنْ رَبِّكَ تَرْجُوهَا فَقُلْ لَهُمْ قَالَ  
مَيْتُسُورًا ﴿١﴾ وَلَا يَجْعَلْ يَدَكَ مَعْلُولَةً إِلَى عُنْقِكَ وَلَا تَبْسُطْهَا  
كُلُّ أَبْسُطْ فَتَقْعُدُ مَأْلُومًا مَهْسُورًا ﴿٢﴾ إِنَّ رَبَّكَ يَبْسُطُ الرِّزْقَ  
لِمَنْ يَشَاءُ وَيَقْدِرُ إِلَهٌ وَكَانَ يَعْبُادُهُ خَيْرٌ أَصْبَرًا ﴿٣﴾ وَلَا تَنْتَلُوا  
أَوْلَادَكُمْ خَشْيَةً إِنْتَلَى خَنْ تَرْزُقُهُمْ وَلَيَكُونَ قَاتِلُهُمْ كَانَ  
خَطْفَكَ أَكْبَرًا ﴿٤﴾ وَلَا تَنْقُرُ بُرُّ الْأَنْتَلِي إِلَهٌ وَكَانَ فَرِحَّةَ وَسَاءَ  
سِيَلًا ﴿٥﴾ وَلَا تَنْتَلُوا النَّفْسَ أَلَيْ حَرَمَ اللَّهُ إِلَّا بِالْحِقِّ  
وَمَنْ قُتِلَ مُظْلُومًا فَقَدْ جَعَلْنَا لَوْلَيْهِ سُلْطَنًا فَلَا يُسْرِفُ فِي  
الْقَتْلِ إِنَّهُ وَكَانَ مَنْصُورًا ﴿٦﴾ وَلَا تَقْرُبُ أَمَالَ الْيَتَمِ إِلَّا بِالْقِيَ  
هِيَ أَحْسَنُ حَيَّ بَعْلَمَ أَشْدَهُ وَلَا فُرُولُ الْمَعْدَدِ إِنَّ الْمُهَدِّدَ كَانَ  
مَسْعُولًا ﴿٧﴾ وَأَوْفُوا الْكِيلَ إِذَا كَلَمْتُمْ وَرَزِّلْتُمْ بِالْفَسْطَلَانِ الْمُسْتَقْبِرِ  
ذَلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴿٨﴾ وَلَا تَقْتُفُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِ عِلْمٌ إِنَّ  
السَّمْعَ وَالْبَصَرَ وَالْفُؤَادَ كُلُّ أُوْلَئِكَ كَانَ عَنْهُ مَسْعُولًا  
وَلَا تَمْشِ في الْأَرْضِ مَرْحًا إِنَّكَ لَنْ تَخْرِقَ الْأَرْضَ وَلَنْ تَبْلُغَ  
الْجِبالَ طَلْوًا ﴿٩﴾ كُلُّ ذَلِكَ كَانَ سِيَّمُهُ عِنْدَ رَبِّكَ مَكْرُوهًا

28. Oo haddaad ka sii jeesato xaggooda (miskiinka wax la'aan darteed) adigoo sugaya Naxariis xagga Rabbigaa oo aad mar walba rajeys, haddaba kula hadal, hadal wanaagsan oo nugul<sup>(12)</sup>.

29. Oo ha ka dhigin gacantaada (sida) mid ku xiran luquntaada (si aanad wax u bixin), oo ha wada fidin fidsanaan dhan, si aad meel u fariisan hadhow dambe adigoo eedeysan tabar gab ah.

30. Hubaal Rabbigaa wuxuu u fidhiyaas risiqa qofkuu doono, oo ku ciiriiriyya. Hubaal waa Mid xagga addoomahiisa mar walba Xog Ogaal u ah oo Arka.

31. Oo ha dilina carruutiinna baqe aad ka qabtaan faqri darteed, Annaga baa irsaqaqyna iyaga iyo idinkaba. Hubaal, dilkoodu waa gef aad u Weyn.

32. Oo ha u dhowaannina Zinada<sup>(13)</sup>, waayo, waa anshax xumo iyo dhabbo aad u xun.

33. Oo ha ku dilina nafta (qofka) uu Allaah xaraameeyay, waxaan ahayn Xaq. Oo qofkii lagu dilo gardarro, Waxaan siinnay warasadiisa awood<sup>(14)</sup>. waase inuousan ku xad-gudbin (arrinka) dilka<sup>(15)</sup>. Hubaal waa loo gargaaraye.

34. Oo ha u dhowaannina maalka

agoonta sida u fiican maahee jeer uu qaan gaaro. Oo oofiya ballan (kasta oo aad gashaan). Hubaal ballan walbaa oo la galo waa la is weydiin doonaa.

35. Oo oofiya beegga markaad wax beegeysaan, oo wax ku miisaama miisaan xaq ah. Sidaas baa khayr badan oo cirib wanaagsan.

36. Oo ha raacraacina wax aydaan u laheyn cilmi. Hubaal Maqalka, Aragga iyo Laabta mid walbaa oo kuwaasi ka mid ah waa xil qaad lays weydiin doono.

37. Oo ha ku marin dhulka isqaad qaad iyo kibir. waayo ma kartid inaad jeexdid dhulka, kumana gaari kartid buuraha dherer.

38. Dhammaan waxaasi – xamaanteedu - Rabbigaa agti waa lagu neceb yahay.

<sup>12</sup>. Waxaa loola jeedaa haddii aadan hayсан was aad siiso markaa, ama aydaan fulin karin Amarka Ilaahay ee ku soo arooray Aayadda 26, haddada ku dhaa hadal wanaagsan aan murugo gelineyn inaad u fidin kaalmo darteed, idinkoo ka dalbayaa risiq xaggaa Rabbigii si aad u siisaan xuquqdooda.

<sup>13</sup>. Iska fira dhammaan arrimaha kuu horseedi kara inaad fasho wax xun oo faaxisho ah sida zino, gogol dhaaf.anshax xumo, xatooyo, iwm.

<sup>14</sup>. Suldaan halkan waxaa loola jeedaa warasada qofka la dilay , ama xaakimka si ay u dalbaan qisaas, ama u aqbaalaan diyo. Eeg Suuradda Al-Baqara Aayadda 178, iyo Suuradda An-Nisaas Aayadda: 92.

<sup>15</sup>. Waa inaan lagu dilin waxaan ahayn arrin sharci ah ama waqtiga jihaaadka qof ah cadow aad dagaal ku wada jirtaan.

39. (Arrin) kani waa (qaar) ka mid ah waxa uu Rabbigaa kuu waxyooday (Nabi Muxammadow) oo ka mid ah xikmadda, oo (dadow) ha la mi dhigina Allaah ilaah kale, si aan lagugu tuurin Naarta adigoo eedeysan, dayro ah.

40. Ma wuxuu Rabbigaa idii dooray wiilal, oo ka yeeshay gabdho malaa'iga dhexdooda? Hubaal waxaad idinku ku hadashaan hadal dambi ah weyn.

41. Oo waxaan xaqqiil ku soo celcelinnay (gooddimaha) Qur'aanka dhexdi, si ay (dadku) u xusuustaan, umase kordhisoo (gaalada) waxaan aheyn didmo.

42. Dheeh (Nabi Muxammadow): Hadday la jiri lahaayeen Isaga ilaahyo (kale) sida ay leeyihii, markaas waxay hubaal doondooni lahaayeen (mid walbaa oo ka mid ah) jid ay u maraan Rabbiga Carshiga leh.

43. Xurmo oo dhan Isaga baa iska leh oo Nazahan, wuu ka sarreeyaa waxa ay sheegayaan sarreyn aad u weyn.

44. Toddobada samo iyo arlada iyo waxaa ku dhix jira baa muuiya xurmaddiisa oo hufa, oo ma jiraan wax aan ku tasbiixsan (Allaah) Ammaanahiisa. Laakiinse waydaan garaneyn (habkooda) tasbiixda. Hubaal Isagu waa Dul qaad Badane, Dambi Dhaaf Badan.

45. Oo markaad akrhineyso Qur'aanka, waxaan dhignaa dhexdiinna adiga iyo kuwa aan rumeynsney aakhirada xijaab qarsoon<sup>(16)</sup>.

46. Oo Waxaan yeellay quluubtooda dushooda daboollo, si aanay u fahmin, oo dhegahooda waxaa ah culeys, oo markaad ku xusto Rabbigaa Keliya Qur'aanka waxay jeediyaan dhabarka iyagoo didsan.

47. Annaga baa aad u ogsoon waxa ay dhageystaan markay ku dhegaysanayaan iyo markay qabsadaan faq gaar ah, markay geflowyadu leeyihiiin: Wuxaan uun raacdaan nin sixran.

48. Fiiri sida ay kuugu yeelaan tusaalooyin kolba, way se lumeen, marka ma heli karaan Jidna.

49. Oo waxay yiraahdaan: Ma marka aan noqonno lafo iyo burbur, miyaa xaqqiil naloo soo bixin doonaa innagoo abuur cusub ah?

16. *Markii ay soo degtay Suuradda Tabbad Yadaa Abii Lahab. Waxay xaaqkiil Abuu Lahab u timid Nabiga s.c.w. uu la joogo Abuu Bakar. Markii uu arkay Abuu Bakar. Wuxuu yiri: Rasuul Allow! Tani waa naag xun, waxaana ka baqayaa inay kuu geysato waxyeello ee ka warran haddaadaa ka kacdo halkaan. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Ima arki doonto. Markaasay timid oo tiri: Abuu Bakarow, ninkii saaxiibkaa ahaa wuxuu igu caayay gabay. Abuu Bakar wuxuu yiri: mi gabyo. Waxay tiri: Adiga xaggaya waxaad tahay runlow, oo iska tagtagtay. Wuxaan iri: Rasuul Allow! Kuma ayan arag. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Malag baa iiiga asturayey labadiisa baal. W.W.Abuu Yaclaa*

\* قُلْ كُفُراً حِجَارَةً أَوْ حَدِيدًا \* أَوْ حَلَقَاتِ مَمَّا يَتَرَفَّفُ  
 صُدُورُكُمْ فَسِيقُولُونَ مَنْ بِعِيْدِ نَافِلِ الذِّي فَطَرُكُمْ أَوْ لَمْ يَرَهُ  
 فَسِينَضَطَّوْنَ إِلَيْكُمْ رُؤْسَهُمْ وَيَقُولُونَ مَنْ هُوَ فَلَعْنَانِ  
 يَكُونُ فِيْكُمْ \* يَوْمَ يَدْعُوكُمْ فَسَتَحِيْبُونَ بِحَمَادِهِ وَظَرْبَنِ  
 إِنَّ لَيْسَمُ الْأَقْيَلَكَ \* وَقُلْ لِعَكَادِي يَقُولُ لَعْنَقِيْهِ أَحَسْنُ  
 إِنَّ الشَّيْطَنَ يَرْعَى بَيْنَهُمْ إِنَّ الشَّيْطَنَ كَانَ لِإِلَيْسِنَ عَدُوًا  
 مُبِينًا \* رَبُّكُمْ أَعْلَمُ بِكُمْ إِنْ يَشَاءُ رَحْمَةً كَمَا أَنْ يَشَاءُ  
 يُعَذَّبُكُمْ وَمَا أَرْسَلْنَاكُمْ عَلَيْهِمْ وَكَيْلَا \* وَرَبُّكُمْ أَعْلَمُ  
 يَمْنَ فِي السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ فَلَمَّا فَضَلَّنَا بَعْضَ النَّيَّسِ عَلَى  
 بَعْضٍ وَأَنْيَادَ أَوْدَ زَبُورًا \* قُلْ أَذْخُوا الَّذِينَ رَعْمَشُ مِنْ  
 دُونِهِ فَلَا يَمْلِكُنَّ كَشْفَ الضُّرِّ عَنْكُمْ وَلَا تُخْلِيَّا \* أَوْلَئِكَ  
 الَّذِينَ يَدْعُونَ بِيَتَغُورَتِ إِلَى رَبِّهِمْ أَوْ سِلَةَ أَيْمَنْ أَقْرَبُ  
 وَيَرْجُونَ رَحْمَةَهُ وَيَخَافُونَ عَذَابَ رَبِّكَ كَانَ  
 مَحْدُورًا \* وَانْ مِنْ قَرِيبَةِ الْأَخْنَ مُهْلِكُوهَا قَبْلَ يَوْمِ الْقِيَمَةِ  
 أَوْ مَعْدُبُوهَا عَذَابَ شَدِيدًا كَانَ ذَلِكَ فِي الْكِتَابِ مَسْطُورًا \*

٧٨٧

50. Dheh: Noqda dhagxaan ama bir.

51. Ama abuur kale ka mid ah waxa ku weyn laabahiinna. Waxayse oran doonaan: Yaa na soo celin doona? Dheh: Kan idin aburay kal horeba! Markaa weli waxay ruxi doonaan madaxyadooda xaggaga iyagoo leh: Waa goorma taasi? dheh: Waa intaasoo uu dhow yahay.

52. Maalinta uu idin yeeri doono, markaa aad ku ajiibi doontaan xamdi naq, oo waxaad moodi doontaan inaydaan (ku) nagaan (adduunka) wax yar ma'ahee.

53. Oo ku dheh addoomahayga (inay) ku hadlaan hadal kan u wanaagsan. Hubaal, Shaydaanku wuxuu ka abuuraa kala fogaansho iyo is af garan waa' dxedooda. Hubaal, Shaydaanku aadmiga abad waa u cadow iska cad.

54. Rabbigaa baa aad idin yaqaan, hadduu doono, wuu idin naxariisan, ama hadduu doono, wuu idin cadaabi, oo kuuguma aanu soo dirin (Nabi Muxammad) inaad ilaaliye ka ahaato.

55. Oo Rabbigaa baa aad u ogsoon waxa jira samooyinka iyo arlada. Oo waxaan ka yeelnay qaar ka mid ah anbiyada (inay wax dheeraadaan) qaar kale (siyaalo kala duwan), oo Daawuud Waxaanu siinnay Kitaabka (Zabuurka).

56. Dheh: Bal u yeedha kuwa aad sheegtaan (inay yihiin ilaahyo) Sokadi<sup>(17)</sup>, ma laha (awood) ay idinka feydaan dhib ama idinka wareejyaan (cid kale).

57. Kuwaas ay baryaan, iyaga naf ahaantooda ayaa doona asbaabta u dhowaanshaha Rabbigood<sup>(18)</sup> – (ku dadaala) koodii ugu dhowaansho badnaan lahaa-, oo waxay rajeyyaan Naxariistiisa, oo ka cabasadaan Cadaabkiisa. Hubaal Cadaabka Rabbigaa waa wax laga digtoonaado.

58. Oo ma jirto magaalo aanaan halaagi doonin ka hor Maalinka Qiyaame ama aanaan cadasi doonin cadasi daran: kani wuxuu ku qoran yahay Kitaabka (Looxa Maxfuudka).

17. Waxay u nisbeynayaan Rabbigood inay shuruko la yihiin ee leh asnaam, malaa'ig, anbiyo, dad iyo jin, iwm

18. Waxay mushrikiinta caabudeen Nabigii Ilaahay ee Ciise c.s. iyo malaa'igta iyo Cuzayr, iyo geyrkoodba, oo ka yeeshen wax u dhoweeya oo ku xiriisha Ilaahay. Tafsir kale waa inay raalli gelyaan, iyagoo qiraya sarreyntiisa. tafsir kale waa : waxay dooni lahaayeen inay kala wareegaan Bogortooyaada subxaanahu wataacaalaa, oo qaataan Carshigisa.

**59.** Oo waxna nooma diidin inaan soo dirno calaamooyin (mucjisoooyin) aan ahayn inay dadkii hore beeniyeen. Oo Wuxaan siinnay Thamuud Hal - calaamo muuqata ah. wayse ku gardarroodeen. Oo uma aanu soo dirno calaamooyinka wuxaan ahayn cabsiin

**60.** Oo (xusuuso Nabi Muxammadow) markaan kugu niri: Hubaal Rabbigaa wuxuu koobay dadka; Oo kama aanaan dhigin riyadaan ku tusnay<sup>(19)</sup> wuxaan ahayn imtixaamid dadka, iyo geedka la lacnady (ee ku xusan) Qur'aanka, oo waan bajinnaa (u dignaa iyaga), umase kordhiso wuxaan ahayn xadgudub weyn.

**61.** Oo (xus) markaan ku niri malaa'igta: U sujuuda Aadam. markaasay u sujuudeen Iblisiis maahee (ma uu yeelin). Wuxuu yiri: Ma wuxaan u sujuuddaa mid aad ka abuurty dhoobo?

**62.** (Iblisiis) wuxuu yiri: Ma aragtaa midkan aad iga sharaftay? Haddaad dib ii dhigto (dhimashadeyda) ilaa Maalinta Qiyaamaha, hubaal wuxaan baabbi'in in doonaa ubadkiisa dhammaantood wax yar ma'ahee.

**63.** (Allah) Wuxuu yiri: (Duf) ku bax, oo qofkii ku raaca oo ka mid ah, hubaal waa Naar abaalkiinnu, abaal marin dhan.

**64.** Oo kula kici (hadallo doqon ma garato ah) waxooda aad kartoo ka mid ah codkaaga, oo kula duul oo keen fardahaaga iyo ciidammadaada lugta, oo la wadaag maalkooda iyo carruurtooda, oo ballamo u qaad, umase ballan qaado shayaanku wuxaan hagardaamo ahayn.

**65.** Hubaal Addoomahayga (mu'miniinta ah), kuma lihid awood korkooda. Oo waxaa ku filan Rabbigaa oo laaliye u ah.

**66.** Rabbigiin waa Kan idiinku socodsiiya doonyaha badda si aad u raadsataan Deeqdiisa. Hubaal Waa uu idiin Naxariis Badan yaay.

<sup>19.</sup> Riyada la tusay wuxaan loola jeedaa riyadii la tusay ee ku saabsanayd dagaalkii Badar inta uusan dagaalku billaab. Mufasirinta qaarkoodna waxay yiraahdaan riyadii la tusay habeenkii Micraajka.

وَإِذَا سَمِعُوكُمْ أَصْرُفُ فِي الْبَحْرِ حِضَلَ مَنْ تَدْعُونَ إِلَيْهِ فَإِنَّمَا  
تَجْهِيزُكُمْ إِلَى الْبَرِّ أَغْرِصُكُمْ وَكَانَ الْإِسْنُ كُفُورًا (٢٧) أَفَمِنْتُمْ  
أَنْ يَخْسِفَ بِكُمْ جَانِبَ الْبَرِّ أَوْ يُرِسِّلَ عَلَيْكُمْ حَاصِبَاتُهُ  
لَا يَنْدُولُ الْكُوْكُوكِيَّالًا (٢٨) أَمْ أَمْتُشُنَّ أَنْ يُعِيدَكُمْ فِي دَيْنَارَةً  
أُخْرَى فَيُرِسِّلَ عَلَيْكُمْ قَاصِفَاتُ الْرِّيحِ فَيُعِيَّقُوكُمْ بِمَا كَفَرْتُمْ  
ثُمَّ لَا يَجِدُوا لَكُمْ عَلَيْنَا يَهُ تَبِيعًا (٢٩) وَلَقَدْ كَرِمَنَا بَنِيَّ  
إِادَمَ وَحَمَلْنَا هُنُوفِ الْبَرِّ وَالْبَحْرِ وَرَزَقْنَاهُمْ مِنْ الظَّنِيمَةِ  
وَفَضَّلْنَا هُنُوفَ عَلَى كَثِيرٍ مِنْ خَلْقِنَا لِقَضِيلَا (٣٠) يَوْمَ نَدْعُوُا  
كُلَّ أَنْسَابٍ بِإِيمَانِهِمْ فَمَنْ أُوتِيَ كِتَابَهُ وَبِسَمِينَهُ فَأُولَئِكَ  
يَقْرَءُونَ كِتَابَهُمْ وَلَا يُطَلَّمُونَ فَقِيلَا (٣١) وَمَنْ كَانَ  
فِي هَذِهِ أَعْمَى فَهُوَ فِي الْآخِرَةِ أَعْمَى وَأَضَلُّ سَيِّلَا (٣٢) وَإِنْ  
كَادُوا لِيَتَسْنُونَكَ عَنِ الدِّيَنِ أَوْ يَسِّيَّا إِلَيْكَ لِتَفَرَّى  
عَيْنَيْنَا عِيَدَةٌ وَإِذَا لَأْتَهُمْ دُوكَ خَيْلًا (٣٣) وَلَوْلَا أَنْ يَتَبَشَّكَ  
لَقَدْ كَدَّ تَرَكَ إِلَيْهِمْ شَيْئًا قَلِيلًا (٣٤) إِنَّا لِلَّهِ فَكَمْ ضَعْفَ  
الْحَيَاةُ وَضَعْفُ الْمَعْنَى فَمُرْلَا يَجِدُكَ عَيْنَيْنَا أَنْصِرِكَ (٣٥)

٢٨٩

**67.** Oo marka dhibaato ay idinku taabato badda, waad weydaan (dhammaan) kuwa aad baridaan Isaga maahee. markase uu idinku keeno nabad barriga, waad (ka) jeedsataan. Oo Aadmiyu abad waa abaal dhac badan yahay.

**68.** Ee ma waxaad dareentaan aaminaad inuusan idinla goyn doonin dhinac dhulka ka mid ah, ama idiin soo diri doonin dabayl daran oo dhagxaan wadata? markaas uma heleysaan naftiinna wax idin difaaca.

**69.** Mise, ma waxaad dareentaan aaminaad inuusan dib idiinku soo celin doonin halkaa (badda) mar kale oo markaas idiin soo diro dabayl daran oo idin qarqyo gaalnimadiinna darteed, markaasna uma heli doontaan nafahiinna wax nooga kiin gargaara?

**70.** Oo Wuxaanu xaqiq sharafnay ilma Aadam, oo ku qaadnay barriga iyo badda, oo ku irsaqnay wax ka mid ah waxyaalaha wanaagsan, oo ka kormarinay in badan oo wuxaan leeburay ah kor marin muuqata.

**71.** (Xus Nabi Muxammad) Maalinta aan u yeeri doonno dad walbaa isagoo

imaamkooda (20) la jiro. Marka qofkii lagu siiyo Kitaabkiisa gacantiisa midig, kuwaas baa akhriyi doona Kitaabkooda (iyagoo faraxsan) oo laguma gardarroon doono (xitaa) wax le'eg xuub (laf timireed).

**72.** Oo qofkii ku indha la' (nolosha)tani, wuxuu ahaan doonaa (sidoo kale) mid indha la' Aakhirada, oo aad uga habowsan Jidka.

**73.** Oo hubaal waxay ku dhowaadeen (gaalada) inay kaa jeediyaan waxa aan kuu soo waxyoonnay si aad noogu been abuurato waxaan isaga ahayn, oo markaas waxay kaa dhigan lahaayeen saaxiib.

**74.** Oo haddii aanaan ku sugneen, waxaad u dhowaan lahayd inaad u iilato xaggooda wax yar.

**75.** Markaas (haddaad sidaa yeesho), Wuxaan kaa yeeli lahayn inaad ku dhadhamiso (cadaab) laban laab ah noloshan iyo (cadaab) labanlaab ah dhimashada kaddib, markaas uma aad hesheen naftaada wax nooga kaa gargaara.

**20.** Waxaa loola jeedaa kitaabka camalkooda ama hoggaamiyahooda ama midkay raaceen.

**76.** Oo hubaal waxay u dhowaadeen inay kugu argagx geliyaan arlada (Makkah) si ay kaaga saaraan. Oo markaas (markay sidaas yeelaan) ma negaan doonaan (halkaa) gadaashaa in year ma'ahee<sup>(21)</sup>.

**77.** (Kani waa) hab raacayaga xagga kuwaa aan soo dirnay hortaa oo ka mid ah Rusushayada, oo kama heli doontid hab raacayaga wax isbeddel ah.

**78.** Oog salaadda markay qorraxdu (ka) waareegto (bartanka) ilaa mugdiga habeenka, iyo (sidoo kale) Qur'aanka (akhrinta) subaxa hore; hubaal akhrinta subaxa hore waa mid la soo xaadiro<sup>(22)</sup>.

**79.** Oo qayb ka mid ah habeenka kula tuko (akhrin Qur'aanka), (cibaado) dherei kuu ah. Waa intaasoo Rabbigaa kuu soo bixiyo martabo sharaf iyo ammaan leh.

**80.** Oo dheh: Rabbiyow! Iga yeel inaan soo galo gelitaan wanaagsan, oo sabab inaan ka soo baxo bixitaan wanaagsan<sup>(23)</sup>. Oo iga sii agtaada awood gargaar ah<sup>(24)</sup>.

**81.** Oo dheh: Xaqu waa kan yimid, oo baadilku waa baabba'aa; Hubaal baadilku waa wax iska baabba'a.

**82.** Oo Wuxaan soo waxyoonnaa oo ka mid ah Qur'aanka wax Caafimaad iyo Naxariis u ah Mu'miniinta, uma se kordhiyo geflowyada waxaan ahayn khasaaro.

**83.** Oo markaan ku galladeysanno Nicmad aadmiga (kan gaalka ahi), wuu jeestaa oo dhinac u baxaa isagoo islaweyn. Oo markay dhibaato taabato, wuu quustaa.

**84.** Dheh: Mid walbaa wuxuu u camal falaa si waafaqsan dhaqankiisa, Rabbigiin baase aad u ogsoon kan isagu si fiican ugu hanuunsan jidka.

**85.** Oo waxay wax kaa weydiyyaan (Nabi Muxammadow) Ruuxda; Dheh: Ruuxda waa mid ka mid ah amarrada Rabbigay. Oo idinka (dadkow) la idin kama siin cilmiga wax yar ma'ahee.

**86.** Oo haddaan doonno waxaan hubaal la tegeynaa waxa aan kuu soo waxyoonnay. Markaas ma heleysid cid naga kaa celisa.

**21.** Haddii ay saari laahaayeen reer Makkah Nabi Muxammad s.c.w. ma kii negaadeen Makkah oo wax badan ma joogeent dunida, bal Allaah wuxuu halagi lahad dhambantood. Hijridii Nabiga s.c.w. ee Madina ma ahayn saarid ay saareen Quraysh laakiin waxay ahayd Amar Ilaahay uukii ku amray. Ummad kasta oo saarta Nabigeeda Allaah wuu halaaqaa, taasina waa jid soor jireen ah an marnaba is beddelin.

**22.** Aayaddan waxay caddeyneysaa waqtiyada shanta salaadood, cadceed wareegga kaddib waxaa la tukadaan Salaadaha Durhukar, iyo Casarka, marku uu habeenka soo galana Saladaad Maghrib iyo Cishaha iyo Subaxa.

**23.** Waa duco xagaan. Alлааh lagaga baryo inuu ku galoo cibaaadada kaganu baxo niyad san oo dar Ilahaah ah oo Allaah u barax tiran istus la'aan ama wax fasaaadiya ajarka. Aayaddani waxay muujineysaa hijraddi Nabiga s.c.w. ee Madina. Mufasirinta qaarkood waxay yiraahdeen; Waa duco Ilahaah lagu baryo in qofka qabriga la geeyo isagoo wanaagsan oo ka soo baxo sidoo kale isagoo wanaagsan Maaliinta Qiyaamaha. Wuxuu Nabigu s.c.w. ku duceystey ducadan markii uu ka soo baxayey Makkah isagoo u haqiqiraya Madina.

**24.** Oo keliya toban sano kaddib hirjaddi Nabiga s.c.w., waxaa Makkah laga sifeeyey sananmadii ku hareersanaa Kacbadha.

وَإِن كَانُوا إِلَيْهِ مُتَّقِرُونَ فَأَنْ أَرْضٌ لِيُخْرِجُوكُمْ مِنْهَا  
وَلَوْلَا أَيْكَبُونَ حَلَافَكَ إِلَّا قَيْلَالًا **٦٧** سُنَّةً مِنْ قَدَرِنَا  
فَتَلَكَ مِنْ رُسُلِنَا **٦٨** وَلَا يَجِدُ لِسْتِنَتِنَ الْحَمْوِيلًا **٦٩** أَقِيرَ  
الصَّلَوةَ لِدُلُوكِ الشَّمْسِ إِلَى عَسْقَ أَيْلَى وَقُرْعَةَ الْفَجْرِ  
إِنْ قُرْعَةَ الْفَجْرِ كَمَشْهُودًا **٧٠** وَمِنْ أَيْلَى فَتَهَجَّدَ  
يَهُ تَاهَلَّ أَكَعْسَيَ أَنْ يَبْعَثَكَ رَبُّكَ مَقَامًا مُحَمُّدًا **٧١**  
وَقُلْ رَبِّ أَذْخِلِي مُذْكَرَ صَدِيقَ وَأَخْرِجِي مُخْرِجَ صَدِيقَ  
وَأَجْعَلْ لِي مِنْ لَدُنْكَ سُلْطَانًا تَصْبِرًا **٧٢** وَقُلْ جَاءَ الْحَقُّ وَرَهْقَ  
الْبَطْلِ إِنَّ الْبَطْلَ كَانَ رَهْوَكَ **٧٣** وَنَزَلَ مِنَ الْقَرْآنِ مَاهُورًا  
شَفَاعَةً وَرَحْمَةً لِلْمُؤْمِنِينَ **٧٤** وَلَا يَزِدُ الظَّلَمُ مِنَ الْأَحْسَارِ  
وَلَوْلَا نَعْمَنَاعَلِيَ الْإِسْنَ أَغْرَصَ وَنَعَ بِحَاجَنِيهِ **٧٥** وَلَوْلَا مَسَهَ  
الشَّرَكَكَنَ يَوْسَعَا **٧٦** قُلْ كُلُّ يَعْمَلٌ عَلَى شَاكِلَيْهِ فَرِيقٌ أَعْلَمُ  
بِمَنْ هُوَ أَهْدَى سَبِيلًا **٧٧** وَيَسْلُوكُكَ عَنِ الرُّوحِ قُلْ أَرْوَحُكَ عَنِ  
أَمْرِكِي وَمَا أُوْتِيَتُ مِنَ الْعِلْمِ إِلَّا قَيْلَالًا **٧٨** وَلَمَنْ شَتَّلَنَدَهُنَّ  
بِالْأَدْيَ أَوْ حِينَنَا إِلَيْكَ ثُمَّ لَمَّا جَهَ عَلَيْنَا وَكَيْلَالًا **٧٩**

الْأَرْحَمَةُ مِنْ رَبِّكَ إِنَّ فَضْلَهُ كَانَ عَلَيْكَ كَثِيرًا <sup>٢٧</sup> قُلْ  
 لَّيْنَ أَجْتَمَعَتِ الْإِلَمُ وَالْجِنُ عَلَى أَنْ يَأْتُوا بِمِثْلِ هَذَا الْقُرْآنِ  
 لَا يَأْتُونَ بِمِثْلِهِ وَلَوْكَانَ عَصْمَهُ لِبَعْضِ طَلَبِهِ <sup>٢٨</sup>  
 وَلَقَدْ صَرَفْنَا لِلنَّاسِ فِي هَذَا الْقُرْآنِ مِنْ كُلِّ مُثْلٍ فَإِنَّ أَكْثَرَ  
 النَّاسِ إِلَّا كُفُورٌ <sup>٢٩</sup> وَقَالُوا لَنْ نُؤْمِنَ لَكُمْ حَتَّى تَفْجِرُ  
 لَنَّا مِنَ الْأَرْضِ بَيْنَوْعًا <sup>٣٠</sup> أَوْ تَكُونُ لَكُمْ جَهَنَّمُ مِنْ خَيْلِ  
 وَعَنِ فَتَحِّيَرِ الْأَنْهَرِ خَلَدَهَا نَفَّاجِيرًا <sup>٣١</sup> أَوْ سُقْطَ السَّمَاءَ  
 كَمَا رَعَتْ عَيْنَانِكَ سَعْيًا أَوْ تَأْتِي بِاللَّهِ وَالْمَلَائِكَةِ  
 قَبِيلًا <sup>٣٢</sup> أَوْ يَكُونُ لَكَ بَيْتٌ مِنْ رُخْرُفٍ أَوْ تَرَقَّ في السَّمَاءِ  
 وَلَنْ نُؤْمِنَ لِرَقِيَّاتِكَ حَتَّى تُنْزِلَ عَيْنَتَكَ كَتَبًا تَنْقُرُهُ دُفُلٌ  
 سُبْحَانَ رَبِّي هَلْ كُنْتُ إِلَّا بَشَرًا سُوْلًا <sup>٣٣</sup> وَمَا مَنَعَ النَّاسَ  
 أَنْ يُؤْمِنُوا إِذْ جَاءَهُمُ الْهُدَى إِلَّا أَنْ قَالُوا بَعْثَتَ اللَّهُ بَشَرًا  
 رَسُولًا <sup>٣٤</sup> قُلْ لَوْكَانَ فِي الْأَرْضِ مَلِكَكَ يَمْسُونَ مُطْمَئِنِينَ  
 لَنْزَانَا عَلَيْهِمْ مِنَ السَّمَاءِ مَلِكًا رَسُولًا <sup>٣٥</sup> قُلْ كَمَّيْ بِاللَّهِ  
 شَهِيدًا بَيْنِي وَبَيْتِكَ لَهُ كَانَ يَعْبَادُهُ خَيْرًا بَصِيرًا <sup>٣٦</sup>

87. Naxariis maahee xagga Rabbigga ah. Hubaal Fadligisu korkaaga waa mid weyn.

88. Dheh: Hadday dadku iyo jinku isugu tagaan inay la yimaadaan wax la mid ah Qur'aankan, ma la imaan karaan wax la mid ah, xataa hadduu qaarba qaarka kale caawiyo oo siiyo garab.

89. Oo Waxaan xaqiqi ugu faahfaahinnay dadka Qur'aankaan dhexdiisa nooc kasta oo mataal ah, wayse diideen dadka badankiisu waxaan ahayn gaalnimoo.

90. Oo waxay yiraahdeen: Sinnaba kuuma rumeyn doonno, jeer aad nooga burqiso dhulka ilo;

91. Ama (jeer) aad yeelato beero timir iyo canabyo ah, oo aad ka burqiso wabiyo durdur ah dheddooda burqin.

92. Ama aad nagu soo riddo cirka sida aad sheegatay isagoo goballo googga'an ah, ama aad keento Allaah iyo malaa'iga hortayada fool ka fool.

93. Ama aad yeelato guri ka sameysan qurux (dahab) ama aad korto cirka, oo (xitaa markaa) ma rumeyn doonno koriddaada jeer aad noogaga keento Kitaab aan akhrinno. Dheh: Xurmadi Rabbigay baa iska leh oo hufan. Oo ma waxaan ahay wax kale aan ahayn aadmi Rasuul ah?

94. Oo waxna uma diidin dadka rumeynta markuu hanuunku u yimid, aan ka ahayn inay yiraahdeen: Oo ma wuxuu Allaah soo diray aadmi Rasuul ah?

95. Dheh: Hadday jiraan dhulka, malaa'ig ku maraysa nabad oo deggan<sup>(25)</sup>, Waa xaan hubaal uga soo dejin laheyn cirka malag Rasuul ah.

96. Dheh: Allaah baa ku filan markhaati dhexdeenna aniga iyo idinka. Hubaal Waa uu ka war hayaa addoomahiisa oo arkaa.

<sup>25</sup>. Macnaha waa malaa'ig deggan oo ku sugan dhulka, sida dadku yihin.

97. Oo qofkii uu Allaah hanuuniyo baa hanuunsan; oo qofkii uu lumiyaa – uma heli doontid gargaarayaal sokadi, Oo Wuxaan soo kulmin doonnaa iyagoo dhan Maalinta Qiyaamaha iyagoo wejijada ku socda iyagoo aan wax arkayn, hadlayn, oo wax maqlayn; hoygooduna waa Naar; mar kastoo ay nuxustaba, wuxaan u kordhin doonnaa shidaal.

98. Arrinkaa waa abaalkooda, waayo waxay rumeyn diideen Aayadahayaga oo yiraahdeen: Ma marka aan noqanno lafo iyo burbur miyaa markaa hubaal nala soo bixin doonaa innagoo abuur cusub ah?

99. Mawaynan arag in Allaah, ee abuuray samooyinka iyo arlada uu awoodo inuu abuuro iyagoo kale? oo wuxuu u dhigay muddo aan shaki lahayn. Wayse diideen geflowyada wuxaan ahayn gaalnimo.

100. (Ku) dheh: Haddaad hayasaan khasnadaha Naxariista Rabbigay, markaa waad ceshan lahaydeen baqe aad ka qabtaan inaad bixisaan, oo aadmigu waa dhabcaal (masuug badan).

101. Oo xaqiq Wuxaanu siinnay Muuse sagaal calaamadood oo cad-cad<sup>(26)</sup>; ee weydiil Ilmiha Israa'iil (arrinka) markuu yimid oo Fircoona ku yiri: Hubaal wuxaan kuu malaynaya Muusow inaad tahay mid sixran.

102. (Muuse) wuxuu yiri: Waad ogtayah in aanay soo dirin kuwani (calamoyinkan) cid aan ahayn Rabbiga samooyinka iyo arlada xujooyin cad ahaan. Oo hubaal wuxaan qabaa inaad Fircoono tahay mid loo qoray hoog.

103. Markaasuu doonay inuu argagax geliyo oo ka saaro arlada. waase qarqinnay isaga iyo wixii la socday oo dhan.

104. Oo Wuxaanu Ilmihii Israa'iil -isaga (Fircoona) kadambow-, ku niri: Dega dhulka, markase uu yimaado yabooha nolosha dambe inuu fulo. Waa idin keeni doonnaa dhammaantiin idinkoo isku dhafan oo wada jira.

<sup>26</sup>. Sagaalka mucjisadood waxaa weeye: Usha, gacanta ifeysa, abaar lagu salliday, ayaxa, injirta, raha, duufaanta, badda, iyo dhiigga.

وَبِالْحَقِّ أَنْزَلْنَاهُ وَبِالْحَقِّ نَزَلَ وَمَا أَنْزَلْنَاكَ إِلَّا مِنْ شَرِّ كَاوَنَدِيرًا <sup>(٢٧)</sup>  
 وَقُرْءَانًا فَقَنَهُ لِتَقْرَأَهُ عَلَى مُكْثٍ وَتَرَنَّهُ تَرَنِيلًا <sup>(٢٨)</sup>  
 قُلْ إِنَّمَا نَهَا يَهُوا وَلَا تُؤْمِنُوا إِنَّ الَّذِينَ أَوْفُوا الْعِهْدَ فَقِيلَ لَهُمْ إِذَا أَبْتَلُ  
 عَلَيْهِمْ يَخْرُونَ لِلَّادْقَانِ سُجْدًا <sup>(٢٩)</sup> وَيَقُولُونَ سُبْحَانَ رَبِّنَا إِنْ كَانَ  
 وَعَدْنَا لَمْ يَفْعُلْ لَا <sup>(٣٠)</sup> يَخْرُونَ لِلَّادْقَانِ بَلْ كُونُ وَبِزِيدِهِمْ  
 حَشْوَعًا <sup>(٣١)</sup> قُلْ ادْعُوا اللَّهَ أَوْ أَدْعُوكَ الْجَنَّ أَيْمَانَ دَعْوَافَهُ  
 الْأَسْمَاءَ الْحَسَنَى وَلَا تَجْهَرْ بِصَلَاتِكَ وَلَا تَخْفَى بِهَا وَأَبْتَلْ  
 بَيْنَ ذَلِكَ سَيْلًا <sup>(٣٢)</sup> وَقُلْ الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي لَمْ يَتَخَذْ وَلَدًا وَلَمْ يَكُنْ  
 لَهُ شَرِيكٌ فِي الْمُلْكِ وَلَمْ يَكُنْ لَهُ وَلِيٌّ مِنَ الْذِلَّ وَكَرَّهَ تَكْبِيرًا <sup>(٣٣)</sup>

## سُورَةُ الْكَاهَفِ

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
 الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي أَنْزَلَ عَلَى عَبْدِهِ الْكِتَابَ وَلَمْ يَجْعَلْ لَهُ عِرْجَانًا  
 قَيْمَاتِ الْئِنْزَالِ بِأَسَاسِهِدِيَا مِنْ لَدُنْهُ وَبِيَسِيرِ الْمُؤْمِنِينَ <sup>(١)</sup>  
 الَّذِينَ يَعْمَلُونَ الصَّالِحَاتِ أَنَّ لَهُمْ أَجْرًا حَسَنًا <sup>(٢)</sup>  
 مَرْكِبِينَ فِيهِ أَبْدًا <sup>(٣)</sup> وَبِزِيدِرِ الَّذِينَ قَالُوا أَنَّهُنْ أَنْذَلُوا اللَّهَ وَلَدًا <sup>(٤)</sup>

٢٩٣

105. Oo xaq baan ku soo waxyoonnay (Qur'aanka) oo xaq buu ku yimid <sup>(27)</sup>. Oo kuuma aanu soo dirin (Nabi Muxammadow) waxaan ahayn inaad haato war san side iyo dige.

106. Oo Waa Qur'aan aan u soo waxyoonnay qayb qayb, si aad ugu akhriido dadka si heerar ah. Oo Waanu soo waxyoonnay, innagoo u soo waxyoonnay qayb qayb ahaan.

107. Dheh: Rumeeya amaha rumaynina. Hubaal kuwa la siiyey cilmiga isaga horti <sup>(28)</sup>, marka loo akhriyo, waxay ula dhacaan wejiyadooda sujuud.

108. Oo Waxay yiraahdaan: Waxaa xurmo oo dhan iska leh Rabbigeen oo hufan! Hubaal ballan qaadka Rabbigayo waa mid fula.

109. Oo waxay u dhacaan wejiyadooda iyagoo ooyaya, oo (Qur'aanku) wuxuu u kordhiyaa khushuuc.

110. Dheh: Ku barya Allaah ama ku barya Ar-Raxmaan, midka (magaca) aad ku baridaanba (waa isku mid), Isaga baa iska leh Magacyada aad u wanaagsan ee Qursoon. Oo kor ha ugu qaadin akhriskaaga (salaadda), ama (sido kale) hoos ha u dhigini si aad ah, ee raac labadaa jid u dhexeeyaa.

111. Oo dheh: Ammaan (oo idil) waxaaa leh Allaah, aan yeelan wiil, oo aan

lahayn wax shariig ah oo la wadaaga xukunka, oo aan yari darteed, oo Weynee xurmeyn aad u weyn.

Suuradda 18 Al-Kahaf<sup>(1)</sup>

Waa 110 Aayadood: Makkiyyah

Bismillaahir Raxmaanir Raxiim

1. Ammaan (oo idil) waxaaa leh Allaah ee u soo waxyooday addoonkiisa (Nabi Muxammad s.c.w.) Kitaabka oo aan u yeelin wax qallooc ah <sup>(2)</sup>.
2. (ka yeelay) mid toosan, si uu uga digo cadaab daran oo ka soo fuli doonta Xaggiisa, oo ugu bishaareeyo mu'miniinta fala camallo wanaagsan inay leeyiihiin Ajar aad u Wanaagsan (Janno).
3. Ay ku dhix negaadi doonaan weligood.
4. Iyo inuu u digo kuwalla yiraahda: Allaah Wuxuu yeeshay wiil.

27. Ma jiro Qur'aanka wax iska hor imaanaya, mana ku jiro wax ka weecasho ah xaga.

28. Dadka wanaagsan ee ku jira Ehlul Kitaabka ee garta xaga ku sugan Qur'aanka.

\*\*\*\*

1. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii xisdiya tobanka Aayadood ee hore ee Suuradda Al-Kahaf, waa laga dhowraa Masiix Ad-Dajjaal". W.w. Muslim

2. Waa kitaab toosan oo qofkii raacaan uusan lahaaneyn qallooc iyo leexleexasho.

5. Uma ay heystaan wax cilmi ah iyaga iyo aabbayaashood midna, fool xumo weynaa ereyga ka soo baxa afakooda; kuma hadlaan wawaan been ahayn.

6. Marka waa intaastoo aad ku disho naftaada murugo (Nabi Muxammadow), haddysan rumayn dhambaalkan adigoo ka xun ciribtooda.

7. Hubaal Wawaan ka dhignay wawa kor yaal arlada qurux lagu qurxiyey, si aanu u imtixaanno kee baa ugu camal wanaagsan.

8. Oo hubaal Wawaan ka yeeli doonnaa dhammaan wawa korkeeda ah ban gabii ah oo engagan.

9. Mise, ma waxaad mooddaa in (dhacdadii) qolodii Hogga iyo Looxa (ay ku qornaayeen magacayadoodu)<sup>(3)</sup> ay yihiin kuwa calaamooyinkayaga ugu yaabka badan<sup>(4)</sup>?

10. (Xus) markay dhallantu u hoydeen Hogga, oo yiraahdeen: Rabbiyow naga sii Xaggaaga Naxariis, oo nooga dhig arrinkayaga wax hagaagsan oo hanuun leh.

11. Markaas baan ka dhowrnay inay (shangar) maqlaan (oo ku sii deynay hurdo) hogga dhexdiisa tiro sanoooin ah.

12. Oo haddana waan ka soo kicinnay si aan u muujino kee baa labada kooxood dhab u garan kara inay tiro koobaan muddada ay ku negaadeen.

13. Annaga baa kuu soo tebineyna (Nabi Muxammadow) qisadooda oo xaq ah: Hubaal waxay ahaayeen dhallinyaro rumeyay Rabbigood oo aanu u kordhinnay hanuun.

14. Oo Wawaan xoojinnay (sugnay) quluubtooda<sup>(5)</sup>, markay kor u istaageen<sup>(6)</sup>, oo yiraahdeen: Rabbigayo waa Rabbiga samooyinka iyo arlada, weligayo ma baryeyno Ilaha kale aan Isaga ahayn, haddii kale wawaan xaqiiq markaas ku hadallay xadgudub weyn.

15. Kuwaanu qolodayada ah waxay yeesheen Isaga sokadi ilaahyo ay caabudaan. Maxay u keeni waaeyeen xujo cad oo u dalil ah? Ee yaa ka gef badan kan ka been sheega Allaah?

3. *Ar-Raqiim*: waa looxii ama indhalkii ay ku qornaayeen xikmadaha, iyo wararkii asxaabul kahaf. Waana mid ka mid ah waxyaalaha cajabta badan ee Allaah abuuray.

4. *Bal* waa mid keliya ka mid ah waxyaalaha cajaa ibta badan ee Allaah.

5. Waxay dhexdooda iskula ballameen inaysan caabudin axad aan ahayn Allaah, macbuudka xaga ah.

6. Inta kacay buu wuxuu abbaaray boqorkii Dikyanus ee daalim ahaa kibir badan.

وَإِذْ أَغْرَيْتَ شَمُوْهُرًا وَمَا يَعْبُدُونَ إِلَّا اللَّهُ قَائِمًا إِلَى الْكَهْفِ  
يَنْشِرُ لَكُمْ رَبُّكُمْ مِنْ رَحْمَتِهِ وَيُهَمِّي لَكُمْ مِنْ أَمْرِكُمْ مَرْفَقًا  
۱۵ وَتَرَى الشَّمْسَ إِذَا طَلَعَتْ تَزُورُ عَنْ كَهْفِهِمْ ذَاتَ  
الْيَمِينِ وَإِذَا غَرَبَتْ تَقْرَضُهُمْ ذَاتَ الْشَّمَاءِ الْيَمِينِ وَهُمْ فِي فَجَوْعٍ  
يَقْتَهُ ذَلِكَ مِنْ عَيْنِكَ مِنْ نَهَدِ اللَّهِ فِيهِمُ الْمَهْتَدُونَ وَمِنْ  
يُضَلِّلُ فَلَنْ يَجِدُهُ رَبُّكُمْ إِلَّا مُرْشِدًا ۱۶ وَتَخْسِبُهُمْ أَيْقَاطًا  
وَهُمْ رُؤُوفُونَ وَنُقْبَلُهُمْ ذَاتَ الْيَمِينِ وَذَاتَ الْشَّمَاءِ وَكَبَّهُمْ  
بَسِطْرُ ذِرَاعِيهِ بِالْوَصِيدَلِ وَأَطْلَقْتَ عَلَيْهِمْ لَوْلَيَّتْ مِنْهُمْ  
فِرَاوًا وَلَمْلَيَّتْ مِنْهُمْ رُعَبًا ۱۷ وَكَذَلِكَ عَنْتَهُمْ  
إِسَاءَةً لِوَيْلِهِمْ قَالَ قَابِيلٌ مِنْهُمْ كَمْ لِيَتَشَرَّعَ فَالْوَلَيَّتْ  
يَوْمًا أَوْ بَعْضَ يَوْمٍ قَالَ الْوَارِيْبُ كُمْ أَغْلَمْ بِمَا إِلَيْشَرَ  
أَحَدُكُمْ بُوْرَقْ كُمْ هَذِهِ إِلَى الْمَدِيْرَةِ فَإِنْ يُنْظَرَ إِلَيْهَا أَرْكَ  
طَعَامًا فَلَيَأْتِيَكُمْ بِرِزْقٍ مِنْهُ وَلَيَسْتَأْطُفَ وَلَا يُسْعَرَنَ  
يُكَوِّنُ أَحَدًا ۱۸ إِنَّهُمْ إِنْ يَظْهَرُوا عَلَيْهِمْ بِرِجْمُوكُمْ  
أَوْ يُعِيدُ وَكُمْ فِي مَلَيَّهِمْ وَلَنْ تُفْلِحُوا إِذَا أَبْدَأُوا

۲۹۰

buuxsami lahaa baqdin iyaga xaggooda.

**19.** Oo sidaasoo kale, waan soo kicinnay si ay isu weydiyaan dhexdooda. Midkood hadlay baa yiri: Immisa baad joogteen (halkan)? Waxay yiraahdeen: Waa xaan joognay maalin ama maalin galinkeed. (kuwo kale) waxay yiraahdeen: Rabbigii baa dhab u Ogsoon intaad joogteen. Ee haatan ula dira midkiin lacagtani fiddada ah aad leedihiin xagga magaalada, oo ha firiyo meesha ugu cunto wanaagsan, oo ha idinka keeno risiq ka mid ah, oo ha u dhaqmo si feejignaan leh, oo yey cidina idin ogaan.

**20.** Hubaal, hadday idin ogaadaan waa idin dhagaxyeynayaan ama idinku celinayaan diintooda, oo markaas marnaba ma liibaani doontaan.

7. Allaah wuxuu u soo diray hurdo asxaabul Kahaf ay la jiiyen 309 sannadood oo sannad bileedka ah. Eeg Aayadda 25 ee Suuradda Al-Kahaf. Xagga sannad qorraxeedka waa 300 oo sano, waxaa ku ziyyada sagaal sano xagga sannad bileedka. Marka haddii la tiriyo intay ku jireen hogga sannad qorraxeedka waa 300 sano, haddiise la tiriyo sannad bileedka waa 309, oo waxaa ziyyado ku noqon 9 sano.

**21.** Oo sidaasoo kale<sup>(8)</sup>, waxaan sababnay in la helo, si ay (kuwa helay iyaga) u ogaadaan in uu Ballanka Ilaahay run yahay iyo in Saacadda (Qiyaame) aan shaki ku jirin<sup>(9)</sup>. (Taasi waxay dhacday) markay (dadka magaalada) dhexdooda kaga murmeen xaalkooda, oo (markaa) yiraahdeen: Ka dul dhisa dhismo<sup>(10)</sup>; Rabbigood baa aad u Ogsoon xaalkooda. Kuwii ku lib helay arrinkaa waxay yiraahdeen: Waxaan hubaal ka sameysan doonaa halkooda masjid.

**22.** Waxay (dadku) oran doonaan (waxay ahaayeen) saddex oo waxaa afareeyey eygoodii, oo waxay oran doonaan (waxay ahaayeen) shan oo waxaa lixeeyey eygoodii; iyagoo iska mala awaalaya ghaybka (waxa qarsoon aan muuqan); oo waxay oran doonaan (waxay ahaayeen) toddobo oo waxaa siddeed kuu ahaa eygoodii. Dheh (Nabi Muxammadow): Rabbigay baa aad u Ogsoon tiradooda, cidina ma oga iyaga in yar maahe. Ee ha kala doodin (arrinkooda) inaad kula doodeysid xujo cad maahee<sup>(11)</sup>. Oo wax ha ka weydiin arrinkooda midkoodna ka mid ah (mala awaalayaasha).

**23.** Oo ha ka oran waxnana: hubaal waxaan fali doonaa berritoole.

**24.** (adigoo aan raacin) inshaa Allaah “Hadduu Alle idmo»<sup>(12)</sup>. Oo xus Rabbigaa markaad hilmaanto oo dheh: Waa intaasoo uu Rabbigay igu hanuuniyo mid uga dhow kani toosnaanta.

**25.** Oo waxay joogeen hoggoodii gudahiis saddex boqol oo sano, oo ay sagaal u dheer yihiin.

**26.** Dheh: Allaah baa aad u Ogsoon intay joogeen, isaga baa u (cilmii leh) wawaalaha aan muuqan ee jira samooyinka iyo arlada, arki ogaa oo maqli ogaa (wax walba). Ma ay laha gargaare aan Isaga ahayn, oo lama wadaajijo Xukunkiisa axadna.

**27.** Oo Akhri (Nabi Muxammadow) waxa laguu waxyooday oo ka mid ah Kitaabka Rabbigaa, ma jiro wax beddelli karaa Kelmedihiisa, oo ma heli doontid weligaa wax ka sokeeyaa Isaga aad magan gashid.

8. Doonista Ilaahay.

9. Waxay isku khilaafeen Maalinta Qiyaamaha inay dhaceyo iyo in kale? Ma waxaa la soo saari doona jirka iyo ruuxda oo isku dhan? Misce ruuxda keliya? Markaasuu Allaah ka yeelay inay la kulmaan dhallinyaradan lagu xusay qisadan oo u caddeeyey in Qiyaamahu iman doonto oo la soo bixin doona jirka iyo ruuxda oo isku dhan.

10. Waxaan ka dhigti doonaa goobtan meel cibadio.

11. Xaggaa Qur'anka ah, ee ah xujada keliya ee la hubo inuu xaq yahay.

12. Waxaa suo arooray inay qaar ka mid Yuhuudda ay su'aaleen Nabiga s.c.w. ruuxda iyo qisadiis asxabaal Kahaf iyo Dul Qarnayn. Markaasuu Nabigu s.c.w. ku yiri: Hi kaalaya berrito anigaa idin sheegaye, mana oran inshaa Allaah. Laakiinse waxyi kuma soo degin maalintii xigiy oo Nabigu s.c.w. uma uusan jawaabin? Kaddib waxaa suo degay Aayadaha 23-24 ee la xiriiraa arrinkaa waxaana halkaa darsin lagu siiyey Nabiga s.c.w. wuxuu Allaah kaga digay inuu ilaabo inuu yiraahdo Inshaa Allaah markaas oo kale, waana u dersin sidoo kale ummadiisa.

وَاصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدْوَةِ وَاللَّيْلِ  
 يُرِيدُونَ وَجْهَهُ وَلَا تَعْدُ عَيْنَكَ عَنْهُمْ تُرِيدُ زِيَّةَ الْحَيَاةِ  
 الَّذِينَ أَتَوْ لَكُمْ مِنْ مَنْ أَعْفَلْنَا لَهُمْ إِنَّ دِرْكَ رَبِّ الْعَالَمِينَ هُوَ الْمَكَانُ  
 أَمْرُهُ وَقُرْطَاهُ وَقُلْ الْحُقْقُ مِنْ رَبِّكَ مِنْ شَاءَ فَلَيَؤْمِنَ وَمَنْ  
 شَاءَ فَلَيَكُفُرْ إِنَّمَا أَخْتَدَكَ الظَّالِمِينَ تَارِكًا حَاطِلَ بِهِمْ سُرَادُهُمْ  
 وَإِنْ يَسْتَغْيِيْنُو إِيْغَاثَوْ يَمَأَوْ كَامُهُلَّتْسُويْ أَلْوَجُوهُ بِسَسْ  
 الْسَّرَّابُ وَسَاءَتْ مُرْتَفَقَاهُ إِنَّ الَّذِينَ إِمَّا مُنَوْأَ وَعَمِلُوا  
 الْصَّالِحَاتِ إِنَّا لَأَنْتَيْنِيْ أَجَرْ مِنْ أَخْسَنَ عَمَلَاهُ لَوْلَيْكَ  
 لَهُمْ جَنَّتُ عَدَنَ تَجَيْيَهُ مِنْ تَحْتِهِمْ الْأَنْهَارُ لَهُمْ لَوْنَ فِيهِمْ أَسَارَوْ  
 مِنْ دَهَبٍ وَكَبُوسُونَ شَيْلَأَلْحَسْرَاقِ مِنْ سُنْدُسٍ وَلَشَبَرِقَ مُتَرَكِيْنَ  
 فِيهَا عَلَى الْأَرَابِكِ يَعْمَلُ شَرَابُ وَحَسْنَتْ مُرْتَفَقَاهُ وَأَضَرَتْ  
 لَهُمْ مَثَلَّأَرْجَائِنَ جَعَلَنَا الْأَحَدَهُمْ بَاجِنَيْنِ مِنْ أَعْنَبَ وَحَقْنَهُمَا  
 يَنْتَخِلُ وَجَعَلَنَا بَيْنَهُمَا زَرَعَهُ كَلَّتْ الْجَنَّتَيْنِ إِنَّتْ أَكُلَّهُلَّوَهُ  
 تَظْلِمُهُنَّهُ سَيِّئَهُ وَجَرَّحَهُمْ بَاهِرَهُ وَكَانَ لَهُ شَرُّ فَقَالَ  
 لَصَحِيْهِ وَهُوَ حِيَا وَرُهُ وَأَنَا أَكُتْرُمْنَكَ مَا لَأَمَّا وَأَعْزِزْنَفَرَ

28. Oo ku samirsii naftaada inay la jirto kuwa barya Rabbigood subax iyo galabba iyagoo doonaya Wajijiisa, oo ha dhaafin xaggooda labadaada indhood adigoo doonaya qurxuda noloshan adduunka, oo ha adeecin mid aan qalbiisa ka dhoohnay xusiddayada oo raaca waxa liita ay naftiis jeceshayah oo arrinkisu yahay xad gudub.

29. Oo dheh: Xaqq wuxuu ka yimid Rabbigiin, ee qofkii doona ha rumeeyo, oo qofkii doonaa ha gaaloobo; Waxaan hubaal u diyaarinnay geflowyada Naar ay gidaarradeedu koobi doonaan iyaga, oo haday dalbadaan gargaar waxaa loogu gargaari doonaa biyo sida saliid gufar/haraa ah kareysa oo soli doonta wajiyadooda. Xumaa cabbitaankaa, oo u xumaa meel xusul la dhigo.

30. Hubaal kuwa rumeyey oo falay acmaal wanaagsan, hubaal Annagu ma dayacno abaalgudka qofkii fala camal wanaagsan.

31. Kuwaas waxay mudan beero negaya oo ay hoostoodu webiyo qul-qulaan, waxaa lagu qurxin doonaa jijimo dahab ah, oo xiran doonaan maryo cagaaran oo ka sameysan xariir jilicsan iyo xariir adag iyagoo ku jiqlaynaya sariiro heer sare ah dushood. Wanaagsanaa abaalgdukaa, oo u ficanaa meel lagu dego oo la xusul dhigo.

32. Oo ugu soo qaad tusaale labo nin oo aan midkood u yeellay labo beeroood oo canab ah oo aan ku hareereynay labadaba geedo timireed, oo aan ka soo saarnay dhexdooda sarac.

33. Mid walbaa labada beerooodba, ay soo saartay miraheeda iyadoo aan waxba ka dhimin, oo Waxaan sababnay inuu ka soo burqado dhexdooda webi.

34. Oo wuxuu lahaa maal tiro badan markaas buu ku yiri saaxibki isagoo ay is la doodayaan: Aniga baa kaa maal badan oo kaa tol iyo tabar roon.

**35.** Oo wuxuu galay beertiisii isagoo u gefaya naftiisa<sup>(13)</sup>. Wuxuu yiri: u malayn maayo inay tani baabba'ayso waligeed.

**36.** Oo u malayn maayo inay Saacaddu weligeed dhici doonto, oo xitaa haddii la ii celiyo Rabbigay waxaan xaqiiq heli doonaa meel tani ka rug doorsi fican.

**37.** Wuxuu yiri saaxiibkiis isagoo la hadlaya; Ma waxaad ku gaalowday kan isagu kaa abuuray carro, haddana dhibic mani ah, haddana kaa dhigay nin dhan.

**38.** Laakiinse aniga xaggeyga, waa Allaah, Rabbigay, oo marnaba la wadaajin maayo cidna Rabbigay (cibaadada).

**39.** Oo maxaad, markaad gashay beertaada u oran weydey: Maa shaa Allaah (waxa uu Allaah doono aaya ah) Ma jiro xoog aan ka imaan xagga Allaah? Haddaad I aragtay inaan kaa maal iyo carruur yarahay.

**40.** Waa intasoo uu Rabbigay i siiyo wax ka khayr badan beertaada, oo ku soo diro balaayo cir ka soo dhac ah, oo markaas noqoto dhul gabib ah oo aan dhir lahayn.

**41.** Ama noqdaan biyaheedu kuwa gura, oo aad markaas sinnaba u kari doonin inaad hesho.

**42.** Oo miriahiisii baa lagu koobay (halaag), markaas buu wuxuu billaabay inuu (kor iyo hoos u) geddiyo calaacalahiisa (ka xumaansho) wixii uu maal ku baxshay darteed, iyadoo cid la' ah oo isku soo hoos dhaceen saqafyadeedii, oo wuxuu yiri: Shallaytideydee! Jecliyaan inaanban la wadaajiyeen Rabbigay cibaadada cidna.

**43.** Oo uma sugnaan ciidan u soo fidya taageero Allaah sokadi, mana karo inuu naftiisa difaaco.

**44.** Halkaas<sup>(14)</sup>, awood oo dhan waxaa leh Allaah, Xaqa ah. Isaga baa u abaal marin fican oo u cirib wanaagsan.

**45.** Oo ugu soo qaad tusaale nolosha adduunkan inay la mid tahay roob aan ka soo shubno daruurga, markaa dhirta ka soo baxda dhulka noqoto mid isku darsanta taa darteed, oo (haddana) noqota xaabo engeg ah u burburta gaballo ay dabayshu firdhis, Oo Allaah wuxuu ku leeyayah awood wax walba dushood.

<sup>13.</sup> Isagoo isla weyn ka abaal dhacsan Ilahaay. Wuxuu khayrka iyo barwaqada uu heysto u nisbeeyey naftiisa halkii Allaah, wuxuu dafray inay jirto Aakhiro.

<sup>14.</sup> Waqtigaas ama Maalinta Qiyaamaha

وَدَخَلَ جَنَّتَهُ، وَهُوَ طَافُورٌ لِنَفْسِهِ قَالَ مَا أَطْلَنْتُ أَنْ يَبْدِهَنِي  
أَنْدَادًا وَمَا أَطْلَنَ الْسَّاعَةَ قَائِمَةً وَلَمْ رُودْتُ إِلَى رَيْلَ أَجَدَنَ  
خَيْرًا مِنْهَا مُنْقَبَلًا ﴿٣﴾ قَالَ اللَّهُ صَاحِحُهُ، وَهُوَ حَاوِرٌ وَأَكْفَرَتِ  
بِالَّذِي خَلَقَكَ مِنْ تُرْكَبٍ فَمِنْ تُظْفَرُهُ سُوَّانِكَ رَجُلًا  
لَكَتَنَكَ قُلْتَ مَا شَاءَ اللَّهُ لَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللَّهِ إِنْ تَرَنَ أَنَا أَقْلَ منَكَ  
مَالًا وَلَدًا ﴿٤﴾ فَعَسَى رَبِّي أَنْ يُؤْتِنِي خَيْرًا مِنْ جَنَّتِكَ وَيُرِسِّلَ  
عَلَيَّهَا حُسْنَابَاتًا مِنَ السَّمَاءِ فَتُصْبِحَ صَعِيدًا زَلْقاً ﴿٥﴾ أَوْ يُصْبِحَ  
مَاؤُهَا أَغْوَرًا فَإِنْ تَسْتَطِعَ لَهُ طَلْبًا ﴿٦﴾ وَلَحِيطَ بِشَرْمِهِ  
فَأَصْبَحَ يُقْلِبُ كَفِيرَهُ عَلَى مَا أَنْفَقَ فِيهَا وَهِيَ حَارِفَةٌ عَلَى  
عُرُوشَهَا وَيَقُولُ يَكِيَّتِنِي لَمْ أُشْرِكُ بِرِّيْنِيْ أَحَدًا ﴿٧﴾ وَلَوْكَنْ لَهُ  
فَعَةٌ يَضْرُبُونَهُ وَمِنْ دُونِ اللَّهِ وَمَا كَانَ مُنْتَصِرًا ﴿٨﴾ هُنَالِكَ الْوَلَيْهِ  
لِلَّهِ الْحَقِّ هُوَ خَيْرٌ لِوَابِا وَخَيْرٌ عَقْبَانِ ﴿٩﴾ رَاضِيَتِ لَهُمْ مَثَلُ الْحَيَاةِ  
الَّذِي نَاهَى أَنْزَلَنَاهُ مِنَ السَّمَاءِ فَأَخْتَاطَ بِهِ بَنَكُ الْأَرْضِ  
فَأَصْبَحَ هَشِيمًا ذَرْوَهُ الْأَرْضَ وَكَانَ اللَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ مُقْتَدِرًا ﴿١٠﴾

الْمَالُ وَالْبَيْنُ زَيْنَةُ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَالْبَقِيقَاتُ الصَّلِيْحَاتُ  
 خَيْرٌ عِنْدَ رَبِّكَ لَوْلَا وَحْيَ أَمَّا لَا ۝ وَقَوْمٌ سُنِّيْرُ لِجَالَ وَتَرَى  
 الْأَرْضَ بَارِزَةً وَحَسِّنُوهُمْ فَلَمْ يَعَاوِرُوهُمْ أَحَدٌ ۝ وَعَرَضُوا  
 عَلَىٰ رَبِّكَ صِفَاتٍ لَغَدَّ جِئْشُوكَ كَمَا غَلَقْتُمُهُمْ أَوْلَىٰ مَرْقَدٍ تَلَىٰ زَعْنَسُمْ  
 إِنَّمَا يَجْعَلُ لَهُمْ مَوْعِدًا ۝ وَوَضَعَ الْكِتَبُ فِتْنَىٰ الْمُجْرِمِينَ  
 مُسْفِقِينَ وَمَافِيَّهُ وَيَقُولُونَ نَوْلَتَنَا مَالِ هَذَا الْكِتَبِ  
 لَا يَعْدِرُ صَغِيرَةً وَلَا كِبِيرَةً إِلَّا أَخْصَهَا وَوَجَدُوا مَا عَمِلُوا  
 حَاضِرًا وَلَا يَظْلِمُ رَبُّكَ أَحَدًا ۝ وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةَ أَسْجُدُوا  
 لِلَّهِمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْرَاهِيمَ كَانَ مِنَ الْجِنِّ فَفَسَقَ عَنْ أَمْرِ رَبِّهِ  
 افْتَجَدُوا هُنَّ وَدَرِيْتَهُمْ أَوْلَيَّهُمْ مِنْ دُوْنِي وَهُمْ لَكُمْ عَدُوٌّ  
 يُسْنِنُ لِلظَّالِمِينَ بَدَلَّا ۝ مَآتَ شَهَدَهُنُّهُمْ خَلَقُ الْسَّمَوَاتِ  
 وَالْأَرْضَ وَلَا خَلَقُ أَنفُسَهُمْ وَمَا كُنْتُ مُتَخَذِّلُ الْمُضْلِلِينَ عَصْدًا  
 وَبَوْمَ يَقُولُ نَادُوا سُرْكَاءَ إِلَيَّ الَّذِينَ رَعَمْتُمْ فَلَدَعْوُهُمْ  
 فَلَمْ يَسْتَجِيْعُوهُمْ وَجَعَلْتَنِيَّهُمْ مَوْقِيْنَا ۝ وَرَءَةُ الْمُجْرِمِونَ  
 الْتَّارِفَظُوا إِنَّهُمْ مُوَاقِعُوهُ كَلَمْ يَمْدُو وَأَعْنَاهَا مَصْرِفًا ۝

٢٩٩

46. Maalka iyo carruurtu waa quruxda nolosha adduunkan, ha yeesh ee camallada wanaagsan ee weligood baaqiga ah baa xagga Rabbigaa khayr roon, oo rajo wanaagsan.

47. Oo (ka dig) Maalinta aan ka yeeli doonno buuraha inay tagaan oo waxaad arki doontaa dhulka oo ban muuqda ah oo siman, oo waxaan soo kulmin doonaa iyaga Annagoo aan uga soo tagin gadaal midkoodna.

48. Oo waxaa la keeni doonaa Rabbigaa horti iyagoo u taagan saf saf: (oo wuxuu oran doonaa) Waxaad xaqiqi noogu timaaddeen idinkoo ah sidii aan idiin abuurnay kal hore. Waxaad se mooddeen in aanaan idiin goyn waqtii aan ku oofinno ballanka.

49. Oo Kitaabka (camallada) baa la soo dhigi doonaa (isagoo furan), oo waxaad arki doontaa dambiliyaasha oo ka baqaya waxa ku yaal. Oo waxay oran doonaan: Alla hooggayaga'e! Muxuu yahay Kitaabkani aan dhaafeyn wax yar iyo wax weynba inuu ku koobo tiro ma'ahee? Oo waxay heli doonaan waxay camal faleen oo hortooda yaal oo Rabbigaa kuma gardarroodo axadna.

50. Oo (xus) markaan ku niri malaa'igta: U sujuuda Aadam, oo ay u sujuudeen Iblisi maahee (ma uu yeelin). Wuxuu ka mid ahaa jinka; oo wuxuu ka baxay (ku caasiyey) Amarka Rabbigi. Ee ma waxaad ka dhiganeysaan isaga iyo durrayaddiisa xulufo halkii aniga iyagoo cadow idiin ah? Xumaa waxa ay geflowyadu wax ku doorsadeen.

51. Ugama dhigan marag abuurista samooyinka iyo arlada ama abuurista nafahooda midna, mana Ahi mid ka dhigta kuwa wax dhumiya cudud.

52. Oo (ka dig) Maalinta markuu oran doono: U yeera kuwaa aad u qabteen inay yihiin shurukadeyda (aad ila barbar caabuddeen). Markaas bay u yeeri doonaan, uma ay se jawaabi doonaan, oo waxaanu yeeli doonaa dxedhoda (tog) hoog ah.

53. Oo dambiliyaashu waxay arki doonaan Naarta, oo yaqiinsan doonaan inay ku dhici doonaan, oo ma heli doonaan meel ay kaga weecdaan.

**54.** Oo Waxaan xaqqiil dadka ugu caddaynay Qur'aankan nooc kasta oo tusale ah, oo Aadmigoo waa kan badi wax walba ugu dood badan.

**55.** Oo waxna uma diidin dadka inay rumeyyaan markuu Hanuunku u yimid iyo inay weydiistaan dembi dhaaf Rabbigood, aan ahayn inay u timaaddo wixii ku dhacay dadkii hore<sup>(15)</sup>, ama ay ugu timaaddo cadaabtu si fool ka fool ah.

**56.** Oo uma soo dirno Rususha waxaan ahayn inay ahaadaan war san sidayaal iyo digayaal, oo kuwa rumeyn diida waxay ku doodaan baadil (iyagoo isku dayaya inay) ku buriyaan Xaqa. Oo waxay ka dhigteen Aayadahayga iyo wixa looga digo dheel.

**57.** Oo yaa ka gef badan mid lagu waaniyo Aayadaha Rabbigii, markaas ka sii jeesada oo hilmaama waxa ay labadiisa gacmood horay u faleen? Hubaal waxaanu yeellay daboollo quluubtooda dushood si aanay u fahmin, iyo culeys dhegahooda, oo haddaad ugu yeerto hanuunka, marnaba ma hanuuni doonaan hadda iyo weligoodba.

**58.** Oo Rabbigaa waa Dambi Dhaaf Badanaha, Naxariista Badan. Hadduu u qaban lahaa waxa ay kasbadeen, wuxuu hubaal u soo dedejin lahaa cadaabka. Waxayse leeyihii waqtii go'an oo aanay heli doonin meel ay kaga baxsadaan.

**59.** Oo magaaloo yinkaa, waanu halaagnay markay gefef galeen (la yimaadeen shirki iyo macaasi), oo waxaanu u qabannay halaaggoodii waqtii go'an.

**60.** Oo (xus) markuu Muuse ku yiri kuraygiisii (adeegahiisii) Ma joojin doono (safarka) jeer aan gaaro halkay ku kulmaan labada (badood) waxay hilmameen kalluunkoodii, oo wuxuu qaaday jidkiisa xagga badda, isagoo horay u sii siibanya.

وَلَقَدْ صَرَّفْتَنَا فِي هَذَا الْقُرْآنَ لِلنَّاسِ مِنْ كُلِّ مَثَلٍ وَكَانَ  
إِلَّا نَسْنُ أَكْتَسَرْتَنَا بِعِجَالًا ۝ وَمَا مَنَعَ النَّاسَ أَنْ يُؤْمِنُوا  
إِذْ جَاءَهُمُ الْهُدَىٰ وَيَسْتَغْفِرُوا رَبَّهُمْ لَا إِنْ تَأْتِهِمْ سُنَّةٌ  
الَّذِي لَمْ يَرْأُوا ۝ وَيَا أَيُّهُمُ الْعَذَابُ قُبْلًا ۝ وَمَا زَرَّ الْمُرْسَلِينَ  
إِلَّا مُبَشِّرِينَ وَمُنذِرِينَ وَيُحَدِّدُ اللَّهُرَبُّ كَفُوًّا لِلْجَنِيلِ  
إِلَيْهِ حُضُورُهِ الْحَقُّ وَخَدْرُوَاءِ اِيْقَ وَمَا انْدِرُوْهُ رُوْرَا ۝  
وَمَنْ أَظْلَمُ مِنَ ذُكْرِ يَا يَاتِيَتْ رَبِّهِ فَأَغْرَصَ عَنْهَا وَسَيِّ  
مَا قَمَّتْ بِيَدِهِ إِنَّا جَعَلْنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ أَكْتَنَةً أَنْ يَقْهُهُو  
وَقِنَّ إِذَا دَنَاهُمْ وَقَرَّ وَإِنْ تَدْعُهُمْ إِلَى الْهُدَىٰ فَلَنَ يَهْتَدُوْ إِذَا  
أَبْدَأَ ۝ وَرِبِّكَ الْغَفُورُ دُولَرَحْمَهُ وَلَوْرَاحْدُهُمْ يَمَا كَسْبُوا  
لَعَجَلَ لَهُمُ الْعَذَابُ بَلْ لَهُمْ مَوْعِدٌ إِنْ يَجِدُواْ مِنْ دُونِهِ  
مَوْبِلًا ۝ وَتَنَكَ الْقُرْآنِ أَهْلَكَتْهُمْ لَمَّا أَظْلَمُوهُ وَجَعَلُنَا  
لَمَّا هَلَكُوكُمْ مَوْعِدًا ۝ وَلَذَّقَ مُوسَى لِفَتْنَهُ لَا تَبْحَرْ حَقَّ  
أَبْلَغْ مَجْمَعَ الْبَحْرَيْنِ أَوْ أَمْضَنَ حُقْبًا ۝ فَلَمَّا بَلَغَ مَجْمَعَ  
بَيْتِنَهُمَا نَسِيَّا حُوتَهُمَا فَلَخَدَ سَيِّلَهُ وَفِي الْبَحْرِ سَرَّبَا ۝

٣٠٠

<sup>15</sup>. Ee beeniyey xaqii ay u keeneen Anbiyada Ilaahay.

فَلَمَّا جَاءَوْرَاقَ لَقِتَنَهُ إِذَا تَعَادَاهَا لَقَدْ لَقِيَتَا مِنْ سَقَرِّنَا  
هَذَا نَصَبًا ﴿٦﴾ قَالَ أَرْعَيْتِ إِذْ أَوْيَنَا إِلَى الصَّحْرَةِ فَإِنِّي نَسِيَتُ  
الْحَوْلَ وَمَا مَانَسِينِي إِلَّا اللَّهُ يَعْلَمُ أَنَّ ذَكْرَهُ وَلَخْدَسِيلَهُ  
فِي الْبَحْرِ عَجَبًا ﴿٧﴾ قَالَ ذَلِكَ مَا كَانَتْ يَعْنِي فَأَرْتَدَاهُ عَلَيَّ إِذَا رَهِمَهَا  
قَصَصًا ﴿٨﴾ فَوَجَدَ أَعْبَدَ أَمْنَ عَبَادَ كَمَا آتَيْتَهُ رَحْمَةً مَّنْ عِنْدِنَا  
وَعَلَمْنَهُ مِنْ لَدُنِنَا عِلْمًا ﴿٩﴾ قَالَ لَهُ مُوسَى هَلْ أَتَيْتُكَ عَلَيَّ أَنْ  
تُعْلِمَنِ مَمَاتُغُمْتُ رُشْدًا ﴿١٠﴾ قَالَ إِنَّكَ لَنْ تَسْتَطِعَ مَعِي  
صَبَرًا ﴿١١﴾ وَكَيْفَ تَصِيرُ عَلَى مَا لَمْ تُحْكِمْ بِهِ خُبْرًا ﴿١٢﴾ قَالَ  
سَتَسْجُدُنِي إِنْ شَاءَ اللَّهُ صَابِرًا وَلَا أَعْصِي لَكَ أَمْرًا ﴿١٣﴾ قَالَ  
فَإِنَّ أَتَبَعْتَنِي فَلَا تَسْتَنِي عَنْ شَيْءٍ حَتَّى أُحْدِثَ لَكَ مِنْهُ ذِكْرًا  
فَأَنْظَلَقَاحِي إِذَا رَأَيْكَ فِي السَّفِينَةِ حَرَقَهَا قَالَ أَحْرَقَهَا  
لَتَعْرِقَ أَهْلَهَا لَقَدْ جَنَّتْ شَيْئًا إِمْرًا ﴿١٤﴾ قَالَ أَرْفَلَ إِنَّكَ  
لَنْ تَسْتَطِعَ مَعِي صَبَرًا ﴿١٥﴾ قَالَ لَا تُؤْخِذْنِي بِمَا يَسِيَّتُ وَلَا  
تُرْهِقْنِي مِنْ أَمْرِي عُسْرًا ﴿١٦﴾ فَأَنْظَلَقَاحِي إِذَا لَقِيَ أَغْلَمَهَا فَقْتَلَهُ.  
قَالَ أَفَلَمْ تَسْأَرِكَهُ يَعْيِرْقِيسْ لَقَدْ جَنَّتْ شَيْئًا لِكَرًا ﴿١٧﴾

٣١

62. Oo markay in badan dhaafeen, (Muuse) wuxuu ku yiri adeeghiisii: Noo keen raashinkeenna subaxa; xaqiiq waxaan kala kulannay safarkeennani daal badan.

63. Wuxuu yiri: Ma aragtay markaan harsannay buurtii dhagaxa ahayd? markaa waxaan ku hilmaamay (halkaa) kalluunkii, oo ma jiro wax I hilmaansiyey aan ahayn shaydaan – inaan kuu sheego. Oo wuxuu qaaday jidkiisa xagga badda si la yaab leh!

64. (Muuse) wuxuu yiri: Arrinkaa waa waxaan doonaynay, Markaa bay dib u noqdeen iyago qaadaya raadakoodii.

65. Oo waxay heleen addoon ka mid ah addoommahayga (Al-Khidr)<sup>(16)</sup> oo aan ka siinnay Naxariis xaggayaga, kaasoo aan ka barnay Xaggayaga cilmi.

66. Muuse wuxuu ku yiri: Ma ku raacaa si aad ii barto waxa lagu baray oo cilmi ah lagu hanuuno?

67. Wuxuu yiri: Hubaal ma lahaan kartid la jirkay samir.

68. Oo sidee baad ugu samir yeelan kareysaa wax aanad cilmi ku koobin?

69. (Muuse) wuxuu yiri: Waxaad I heli doontaa Hadduu Allaah Idmo, mid kuu samra, oo kuguma caasiyi doono arrinna.

70. Wuxuu yiri: Haddaba haddaad i

raacdoo ha I weydiin waxba jeer aan anigu wax kaaga sheego.

71. Markaa bay tageen, ilaa, markay koreen doonni, (Al-Khidr) wuu dillaaciyyey (doonnidi); (Muuse) wuxuu yiri: Ma waxaad u dillaacsay inaad qarqido dadkeeda? Xaqiiq Waaqad fashay arrin aad u fool xun.

72. (Al-Khidr) wuxuu yiri: Miyaanan ku dhihin adigu ma karaysid la jirkay samir.

73. (Muuse) wuxuu yiri: Ha ii qaban wixii iiga dhaca hilmaan<sup>(17)</sup>, oo ha I galin wax adag aan dhibsado oo arrinkaya la xiriira.

74. Markaa bay tageen ilaa ay la kulmeen wiil, (Al-Khidr) wuxuu dilay (wiilkii). (Muuse) wuxuu yiri: Ma waxaad dishay naf daahir ah oo aan nafna dilin? Waaqad xaqiiq fashay munkar aan la qaadan karin.

16. Mufasirinta gaarkood waxay sheegeen iyago daliilsanaya xadiis laga soo weriyey Nabiga s.c.w. in addoona halkan loola jeedo Al-Khidr, naxariistana loola jeedo Waxiga iyo Nabimimada la siiyey, cilmitaga too jeedo cilmi Ghaybka sida ku iman doonto Aayadaha xiga. Caamada gaar aaya rumeysan inuu Khidr dhiman oo nool yahay, taasina ma aha sax, waayo waxuu soor aarooyt axaadiis muuyijiyaya inuuusn nooleyn. Haddii uu nool yahay wuxuu u iman lahaa Nabiga s.c.w. oo rumeyn lahaa oo u gargaari laha. Nabigu s.c.w. wuxuu mar xadiis ku sheegay in wixii ka billowdaa maalintaa haddiil ay ka soo wareeqto bogol sano axadha dhulka ku nool markaa uisan noolaan doonin bogol sano kaddib. Qisadaniina waxay dhex martay Al-Khidr iyo Nabi, wiilka la socday Nabi Muuse oo u adeegayeyna wuxuu ahaa Yuushac bin Nuun oo isna Nabi noqday ka mid ah anbiyadii ilmihii Israa' il waa' dambi kaddib Muuse c.s.

17. Abuu Hurayra a.k.r. waxaa lagu soo weriyey inuu yiri: Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: Allaah waa uuu dhaafaa ummadiyeeda (wixii ku soo dhaca) naftooda (oo camallo xun ah) marba haddii aysan ku dhaqmin ama ku dhawaaqin iyo wixii halmaan uga dhaca iyo wixii lagu sandulleeyo.».

## J U S K A (16)

**75.** (Al-Khidr) wuxuu yiri: Miyaanan kuu sheegin inaadan marnaba karayn inaad samir ila yeelato?

**76.** (Muuse) wuxuu yiri: Haddaan ku weydiyo wax ka dambeeya tani, markaa ha yeelinba inaan kula socdo, waxaa ka heshay xaggayga cudur daar.

**77.** Markaasay tageen, jeer markay ku yimaadeen dad magaalo deggan, waxay warsadeen cunno dadkeeda, wayse diideen inay marti sooraan<sup>(18)</sup>; oo waxay heleen gudaheeda gidaar soo dumi raba, markaasuu (Al-Khidr) toosiyey. (Muuse) Wuxuu yiri: Haddaad doonto, waxaad ku qaadan kartay ujro.

**78.** (Al-Khidr) wuxuu yiri: Kani waa kala tagga dhexdeenna aniga iyo adiga, ee waxaan kuu sheegi doonaa fasiraadda waxa aad u samir yeelan kari weyday.

**79.** Ma doonnida, iyada waxaa lahaa dad masaakiin ah ka xoogsada badda. Markaas waxaan doonay inaan ceeb u yeelo, waayo waxaa hortooda ahaa boqor ku qaata doonni walba (oo hagaagsan) xoog.

**80.** Oo ma xagga wiiika, waxay labadiisii waalid ahaayeen mu'miniin, oo waxaanu ka baqnay inuu ku dhib gasho caasiyoobid iyo abaal darro.

**81.** Marka waxaanu doonnay inuu ugu beddelo Rabbigood mid ka daahirsan oo naxariisasho dhow.

**82.** Oo ma xagga gidaarka, waxaa lahaa labo wiil oo agoomo ah oo magaalada deggan; oo waxaa hoostiisa yaallay khaznad ay iyagu leeyihiin; oo aabbahood wuxuu ahaa nin wanaagsan, marka Wuxuu Rabbigaa doonay inay qaan gaaraan oo la soo baxaan khasnaddooda, naxariis ka ahaatay xagga Rabbigaa; oo kuma aan samayn waxaan falay amarkayga. Kaasi waa tafsiirka (arrimihii) aad u samir yeelan kari weyday.

**83.** Oo waxay wax kaa weydiin (Nabi Muxammad) arrinkii Dul Qarnayn. Dheh: Waxaan idhiin akhrin doonaa wax ka mid ah warkiisa.

<sup>18.</sup> Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: "Qofkii rumeysan Allaah iyo Maalinta Aakhiro waa inuu wanaajijo martidiisa, oo qofkii rumeysan Allaah iyo Maalinta Aakhiro waa inuu ka ilaalto dhib oo dhan jaarkiis, oo qofkii rumeysan Allaah iyo Maalinta Aakhiro waa inuu ku hadlo hadal wanaagsan oo khayr ah ama iska aamuso. (W.W. Abuu Daawuud)

\* قَالَ الْرَّاقِلُ لَكَ إِنَّكَ لَنْ تَسْتَطِعَ مَعِي صِبَرًا وَلَا سَأَلْتُكَ عَنْ شَيْءٍ بَعْدَ هَذَا لَصِبَرٌ يُحِبُّ قَدْ بَلَغْتَ مِنْ لَدُنِي عُدُّكَ وَلَا فَاطِلَّا حَقِيقَى إِذَا آتَيْتَ أَهْلَ قَرْبَةَ أَسْتَطَعْنَا أَهْلَهَا فَأَبْرُوا وَلَا أَنْ يُضْيِغُوهُمَا فَوَجَدَ فِيهَا جَدَارًا يُرِيدُ أَنْ يَنْقُضَ فَأَقَامَهُ وَلَا قَالَ تُوْشِّتَ لَنْ تَحَدَّثَ عَلَيْهِ أَجْرًا وَلَا قَالَ هَذِهِ إِرْقَاقٌ يُخْيِي وَبِيَنِكَ سَانِيْشَكَ يُتَأْوِيلُ مَا لَمْ تَسْتَطِعْ عَلَيْهِ صِبَرًا وَلَا الْسَّفِينَةُ فَكَانَ لِسَدِّكِينَ يَعْمَلُونَ فِي الْبَحْرِ فَأَرْدَتُ أَنْ أَعْيَبَهَا وَكَانَ وَرَاءَهُمْ مَلِكٌ يَأْخُذُ كُلَّ سَفِينَةٍ عَصَبَا وَلَا الْعَالَمُ فَكَانَ أَبُوهُمْؤَمَّنُ فَخَشِّبَتَا أَنْ يُرْهِمَهُمَا طَعِينَتَا وَكَفَرَ كَمْ وَلَا فَأَرْدَنَا نَبِيًّا لَهُمَا حِيرَةً زَلَوَةً وَفَرِيَةً وَلَا رُحْمًا وَلَا الْجَدَارُ فَكَانَ لِغَلَدِمِينَ يَتَسَمَّئُونَ فِي الْمَدِينَةِ وَلَا وَكَانَ تَحْتَهُ دَكَرْهُمَا وَكَانَ أَبُوهُمَا صَلَحَ حَافَارَادَ رَيْدَكَ أَنْ يَتَبَعَا شَدَّهُمَا وَيَسْتَخْرِجَا كَنْزَهُمَا رَحْمَةً مِنْ رَيْنَكَ وَلَا وَمَاقَفْتُهُ دَعَنْ أَمْرِيْ ذَلِكَ تَأْوِيلُ مَا لَمْ تَسْتَطِعْ عَلَيْهِ صِبَرًا وَلَا وَيَسْتَكُونُوكَ عَنْ ذِي الْقَرْنَيْنِ قُلْ سَأَلْتُ أُولَئِكَ كُمْقَمَةً ذَكْرًا

إِنَّمَا مَكَنَّا لَهُ فِي الْأَرْضِ وَعَانِيَةً مِنْ كُلِّ شَيْءٍ وَسَبَبًا <sup>٤٥</sup> فَأَتَيْتُهُ سَبَبًا <sup>٤٦</sup>

حَتَّىٰ إِذَا بَعَثَ مَغْرِبَ السَّمَاءِ وَجَدَهَا تَغْرُبُ فِي عَيْنٍ حَمَقَةٍ <sup>٤٧</sup>

وَوَجَدَ عِنْدَهَا قَوْمًا فَلَمْ يَأْتِهِمْ إِنَّمَا أَنْ تُعَذِّبَ إِنَّمَا أَنْ تَسْخِدَ <sup>٤٨</sup>

فِيهِمْ حُسْنَةٌ <sup>٤٩</sup> قَالَ إِنَّمَا أَنْ طَلَقَ فَسَوْقَ تَعْدِيَةٍ وَتَغْيِيرِ دَلْلَ رَبِّهِ <sup>٥٠</sup>

فِي تَعْدِيَةٍ عَذَابَكَ <sup>٥١</sup> وَلَمَّا هُنَّ مِنْ عَمَلٍ صَلَحَاهُ فَلَمْ يَجِدْهُمْ <sup>٥٢</sup>

الْحَسْنَىٰ وَسَتَقُولُ لَهُمْ مِنْ أَمْرِكَ أَسْكِنْ <sup>٥٣</sup> لَكُمْ أَنْتُمْ سَبَبًا <sup>٥٤</sup> حَتَّىٰ

إِذَا بَعَثَ مَطْلَعَ الشَّمْسِ وَجَدَهَا تَاطَّلَعُ عَلَى قَوْمٍ لَمْ يَجْعَلْ لَهُمْ مِنْ <sup>٥٥</sup>

دُونَهَا سَبَرًا <sup>٥٦</sup> كَيْذَلِكَ وَقَدْ حَطَلَتِ الْمَالِيَةُ حُبْرًا <sup>٥٧</sup> ثُمَّ

أَتَيْتُهُمْ سَبَبًا <sup>٥٨</sup> حَتَّىٰ إِذَا بَعَثَ بَيْنَ السَّدَنَيْنِ وَجَدْهُمْ دُونِهِمَا قَوْمًا <sup>٥٩</sup>

لَا يَكُونُونَ يَقْتَهُونَ قَوْلًا <sup>٦٠</sup> قَالَ لَوْيَتَهُ التَّرَتِينَ إِنِّي أَبْخُوحُ <sup>٦١</sup>

وَمَا يَحْوِي مُقْسِدَوْنَ فِي الْأَرْضِ فَهُلْ يَجْعَلُ لَكَ حَرْجًا عَلَى أَنْ <sup>٦٢</sup>

يَجْعَلَ بَيْنَهُمْ سَدًا <sup>٦٣</sup> قَالَ مَا مَكَنَّنِي فِيهِ رَبِّي خَيْرٌ فَأَعْسِنُ <sup>٦٤</sup>

يَقْوِيَ أَجْلَلَ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُمْ رَدْمًا <sup>٦٥</sup> أَتُوفِي زُبُرَ الْحَمِيدِ حَتَّىٰ إِذَا سَلَوَى <sup>٦٦</sup>

بَيْنَ الصَّدَنَيْنِ قَالَ أَنْفُخْهُ أَحَىٰ إِذَا جَعَلَهُ دَارًا قَالَ أَتُوفِي أَعْنَاهُ <sup>٦٧</sup>

قِطْرًا <sup>٦٨</sup> قَمَا أَسْطَلْعُوا أَنْ يَظْهُرُوهُ وَمَا أَسْطَلْعُوا لَهُ وَنَقْبًا <sup>٦٩</sup>

٣٠٣

84. Hubaal Waxaan ku awood siinnay dhulka, oo waxaanu u siinnay wax walba waddo (uu u maro).

85. Markasuu qaaday jid.

86. Ilaa, markuu gaaray meeshay u dhacdo qorraxda (galbeedka), wuxuu helay (sida) iyadoo ku dhaceysa il dhoobo ah (muuqaalka)<sup>(19)</sup>, oo wuxuu ka helay agteeda dad. Waxaanu Annagu (Allaah ah) niri: Dul Qarnaynow! Ama waa inaad ciqaabto (iyaga) ama aad ka yeelato dhexdooda (waddo) wanaagsan.

87. Wuxuu yiri: Ma qofkii isagu gef<sup>(20)</sup> gala, waanu ciqaabi doonaa, haddana waxaa isaga loo celin doonaa xagga Rabbigii; oo wuxuu ku cadaabi doona cadaab daran (Naar).

88. Ma xagga se kan isagu rumeysan oo fala camallo wanaagsan, wuxuu mudan doonaa abaal gud wanaagsan (Janno). Oo waxaan innagu (Dul Qarnayn ah) kula hadli doonaa isaga ereyo nugul oo amarkayaga ah.

89. Markasuu qaaday waddo.

90. Ilaa markuu gaaray meeshay ka soo baxdo qorraxda (bariga) wuxuu helay iyadoo u soo baxayso dad aanaan siin wax ay isaga asturaan<sup>(21)</sup>.

91. Waa Sidaase! Oo Waxaan ku koobnay (dhammaan) waxa uu heystay ogaansho.

92. Markasuu qaaday waddo (kale).

93. Ilaa markuu gaaray (meel) labo buurood dhexdooda ah; wuxuu sokodooda ka helay dad dhib ku fahmaya hadalkiisa<sup>(22)</sup>.

94. Waxay yiraahdeen: Dul Qarnaynow! Hubaal Ya'juuj iyo Ma'juuj<sup>(23)</sup> waa kuwo ku fala fasahaad (badan) arlada. Ee ma kuu yeellaa kharash, inaad yeesho dhexdeenna innaga iyo iyaga moos-xir?.

95. Wuxuu yiri: Waxaa uu Rabbigay I siiyey awood baa iiga khayr badan (waxaad dooneysaan inaad igu siisaan), ee uun igu caawiya xoog (shaqaale) waxaan yeeli doonaa dhediinna idinka iyo iyaga moos xir.

96. Ii keena goosinno bir ah; jeer markuu simay labada buurood dhexdooda, wuxuu yiri: Buufiya, ilaa markuu ka dhigay dab (oo kale), wuxuu yiri: Ii keena si aan ugu shubo korkiisa maar la dhalaaliyey.

97. Markaa iyagu (Ya'juuj iyo Ma'juuj) way kari waayeen inay ka soo kor baxaan oo way kari waayeen inay u yeelaan wax duleel ah.

<sup>19</sup> Macno kale waa il biyo kulul.

<sup>20</sup> Ku adkeysta shirk, gaalnimoo, danbi, iwm oo aan dooneyn inuu hanuuno oo qaato Islaamka.

<sup>21</sup> Dad masaakiin ah aan waxba heysan.

<sup>22</sup> Waxay ahayeen dad aan garaneyn af ahan aqkooda, waayo aqkooda wuu ka duwanaa afaska qeyrkood, mana caddeyn karin muraadkooda aqoon yari darteed.

<sup>23</sup> Ya'juuj iyo Ma'juuj was labo qolo oo waxshi ah oo deggan qaybo ballaaran oo ka mid ah Aasiyada dhexe, kuwaaso fala nooc kasta oo fasahaad ah.

**98.** (Dul Qarnayn) wuxuu yiri: Kani waa Naxariis xagga Rabbigay ah, markase uu ballan qaadka Rabbigay (Qiyaamaha) yimaado (soo dhowaado), wuxuu la simi doonaa dhulka, Oo ballan qaadka Rabbigay abad waa mid xaq ah.

**99.** Oo Wuxaan u dayn doonaa Maalintaas inay is dhex galaaan qaarba qaar kale, oo Buunka baa la afuufi doonaa, markaasaan soo kulmin doonaa iyagoo dhan<sup>(24)</sup>.

**100.** Oo Wuxaan soo ban dhigi doonaa Maalintaas Naarta iyadoo ka muuqata gaalada hortood muuqasho cad.

**101.** Kuwaay indhaa hoo ka daboollaayeen Xuskeyga<sup>(25)</sup>, ee aan kari jirin inay maqlaanba.

**102.** Ee ma waxay kuwa rumeyn diida moodaan inay (anfaceeyso) inay ka dhigtaan addoomahaya xulufo halkii Aniga? Hubaal Wuxaan u diyaarinnaa Naar gaalada degaan ahaan.

**103.** Dheh (Nabi Muxammadow): Ma idiiin sheegaa kuwa ugu khasaaraah badan camallo ahaan?

**104.** (Waa) kuwaa camalkooda ku lumay noloshan adduunka iyagoo mooda inay wanaajin camalka?

**105.** Kuwaasu waa kuwa beeniya Aayadaha Rabbigood iyo la kulankiisa<sup>(26)</sup>. Marka camalladooda waxba kama jiraan. Ee sidaas awgeed uma yeeli doonno Maalinta Qiyaamaha wax miisaan (qiimo) ah.

**106.** Sidaas waa in abaalkoodu yahay Naar; gaalnimadooda darteed, iyo ka dhigashadooda Aayadahayga iyo Rusushayda dheel dheel.

**107.** Hubaal kuwa rumeeyey ee falay camallo wanaagsan waxay mudan doonaan beeraha Al-Firdows<sup>(27)</sup> degmo ahaan.

**108.** Iyagoo ku dhex waaraaya (weligood) oo ma rabi doonaan in looga rug dooriyo.

**109.** Dheh: Hadday baddu ahaan laheyd khad loogu tala galay (qoridda) Kelmedaha Rabbigay<sup>(28)</sup>, Hubaal, baddu way dhammaan lahayd inta aysan dhammaan Kelmedaha Rabbigay, xataa haddaan keenno (bad kale) oo la mid ah taakulo ahaan.

**110.** Dheh: Wuxaan anigu uun ahay qof idinkoo kale ah, waxaa la ii waxyooday inuu Ilaaхиinnu yahay Allaah Keliya, ee qofkii rajo ka qaba la Kulanka Rabbigii, ha fasho camallo san oo yuusan la wadaajin cibaadada Rabbigii cidna.

<sup>24</sup> Maalinta dhismaha weyn ee lagu xiray Ya'juu iyo Ma'juu la burburiyo.

<sup>25</sup> Waa Calaamooyinka Ilaahey, ama Qur'aanka.

<sup>26</sup> Waxay diiduan inay dhageystaan Qur'aanka ama fahmaan oo waxay beeniyaan Maalinta Dambeysa 'Aakhirada'.

<sup>27</sup> Al-Firdows waa halka ugu sarreysa uguna fican Jannah.

<sup>28</sup> Kelmedaha waa amarrada Ilaahey ee aan la soo koobi karin ama Kelmedaha sheegaya Tilmaamahiisa ama Amaanahiiisa.

قَالَ هَذَا رَحْمَةٌ مِّنْ رَبِّي فِي إِلَاجَاهَ وَعَدْرَى جَعَلَهُ دَكَّاهَ وَكَانَ وَعَدْرَى  
سَقَاهُ<sup>(29)</sup> وَرَتَكَاهُ بِعَصْبَهُمْ وَقَمَهُنْ يَمُوْجُ فِي بَعْضٍ وَفُخْجَهُ فِي الصُّورِ  
جَمِيعَهُمْ بِعَصَمَاهُ<sup>(30)</sup> وَعَرْضَاهُ جَهَمَهُ بِوَمَدِّ لِلْكَفَرِينَ عَرَصَاهُ  
الَّذِينَ كَانُوا أَعْيُّهُمْ فِي غُطَّاهَ عَنْ دَكَّاهِ وَكَانُوا لَا يَسْتَطِعُونَ سَعَاهُ  
أَفَسِبَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَنْ يَسْتَحِدُ وَعَبَادِي مِنْ دُونِهِ أَوْلَاهُنَّ إِنَّاهُ  
أَعْنَدَنَا جَهَمَهُ لِلْكَفَرِينَ نُزَّاهُ<sup>(31)</sup> قُلْ هَلْ شَنَّكَاهُ لِلْأَخْرَيْنَ أَعْمَلَاهُ  
الَّذِينَ ضَلَّلَ سَعْيَهُمْ فِي الْحَوْلَهُ الْلَّذِيَا وَهُنْ مَسْبُوْنَ أَهْمَلَهُنْ  
صُعَاهُ<sup>(32)</sup> أَوْلَاهُكَاهُ الَّذِينَ كَفَرُوا لِيَأْتِيَتْ رَبِّهِمْ وَلَقَاهُهُمْ فَحِيطَاهُ  
أَعْنَاهُمْ فَلَا تَقْيِيمَ لَهُمْ يَوْمَ الْقِيَمَةِ وَرَزَقَاهُ<sup>(33)</sup> لَكَ جَرَاهُهُ جَهَمَهُ  
إِنَّا كَفَرُوا وَأَنْذَنَدُوا إِنَّا يَنْتَيْرُ وَرَسُليْهُو هُوَ<sup>(34)</sup> إِنَّ الَّذِينَ أَمْتُوْهُمْ حَمْلُوا  
الصَّلَاحَاتِ كَانَتْ لَهُمْ حَتَّىَ الْفَرَوْنَيْنَ نُزَّاهُ<sup>(35)</sup> خَلَدِيْنَ فِيهَا  
لَا يَعْيُونَ عَنْهَا حَوْلَاهُ<sup>(36)</sup> قُلْ لَوْكَانَ أَبْحَرْمَدَادِ الْكَلْمَتِ رَبِّيَ الْقَدَّ  
الْبَحْرِ قُبَّلَ أَنْ شَفَدَ كَلْمَتَ رَبِّيَ وَلَوْجَهَتْ كَلْمَتَهُ مَدَّاهُ<sup>(37)</sup> قُلْ لَيْتَاهُ  
أَنْ أَبْشِرَ شَكَّلُهُ بِحَيَاةِ أَنْهَمَا إِلَهُكُوهُ إِلَهٌ وَجَدَ فَمَنْ كَانَ يَرْجُوا  
لِقَاءَ رَبِّيَهُ فَلَيَعْمَلْ عَمَلاً صَلِحًا وَلَا يُشَرِّكُ بِعِيَادَهُ رَبِّيَهُ حَدَّاهُ<sup>(38)</sup>

Suuradda 19 Maryam<sup>(1)</sup>

Waa 98 Aayadood: Makkiyyah  
Bismillaahir Raxmaanir Raxiim.

1. Kaaf. Haa. Yaa. Cayn. Saad<sup>(2)</sup>.
2. (Kani) waa xusid wax ka mid ah Naxariista Rabbigaa uu u galay addoonkiisa Zakariya.
3. Markuu u dhawaaqday Rabbigi dhawaaq qarsoodi ah (baryay).
4. Wuxuu yiri: Rabbiyow, xaqiqiil lafahaygii way laciifeen filweyni darteed, oo madaxeygu wuxuu la wada huray (caddaaday) cirro, oo marnaba ma ahi baryadayda aan ku baryo Rabbiyow mid ku qada (hungooba).
5. Oo xaqiqiil Waxaan ka cabsi qabaa qaraabada iga dambeysa(inay xumaadaan)<sup>(3)</sup> oo xaaskeygu waa ma dhasho. Ee iga sii xaggaaga walad.
6. I dhaxla<sup>(4)</sup>, oo ka dhaxla reer Yacquub (cilmiga diinta), oo ka dhig Rabbiyow mid aad kuu raalli geliya.
7. (Waxaa lagu yiri): Zakariyow! Xaqiqiil Waxaan kuugu bishaaraynaynaa wiil magaciisu yayah Yaxyaa, ma aanu u yeelin horey wax la magac ah.

8. Wuxuu yiri: Rabbiyow, sidee baan u yeelan wiil iyadoo haweenteydu tahay ma dhasho, oo anigu waxaan gaaray gabow aad u weyn.
9. (Malag) baa yiri: Sidaas (buu ahaan doonaa arrinku). Rabbigaa wuxuu leeyayah<sup>(5)</sup>: Wuu ii fudud yayah. Waayo, waxaan ku abuuray mar horeba adigoo aan waxba ahayn.
10. (Zakariya) wuxuu yiri: Rabbiyow ii yeel Calaamo. Wuxuu yiri: Calaamaddaodu waa inaanad la hadli doonin dadka saddex habeen adigoo fayow.
11. Markaas buu uga soo baxay dadkiisii qolkii salaadda, oo u tilmaamay inay (Allaah) xurmo weyneeyaan oo hufaan subax iyo galabba.

<sup>1</sup>. Maryam: Waa Nabi Ciise hooyadi.

<sup>2</sup>. Eeg sharaxa Suuradda 2 Al-Bagara: Aayadda 1.

<sup>3</sup>. Qaraabadaan dhinaca abbaheh ah si ay u dhaxlaan xilka diinta, cilmiga, iyo hoggaaminta ilmo Israa'iil.

<sup>4</sup>. Iga dhaxla cilmiga diinta iyo Nabinnimada ee loola ma jeedo maalka, waayo anbiyadu lagama dhaxlo maal adduunyo waxa ay ka tagaan oo maal ahaa wasa sadago.

<sup>5</sup>. Allaah Subxaanahu wataalaalaa uu u soo faray malaa'igta.